GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## CUTUBKA 4AAD: MATALAADDA SHACABKA

KULAMADA 24AAD, 25AAD, 26AAD, 27AAD,28AAD IYO 29AAD


**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)



MAARSO 2024

**Tusmo:**

**Gogoldhig**.......................................................................................................5

**Kulanka 24aad** .......................................................................................................6

**CUTUBKA 4AAD: MATALAADDA SHACABKA**...........................................................6

**Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" – Guddoomiyaha Golaha Shacabka**............6

**Xil. Hussien Qasim Yusuf Idow:** .......................................................................7

**Sen. Said Abdi Hussein:** ...................................................................................9

1) Sen. Deqa Hassan Hussein: ..........................................................................10
2) Xil. Mohamed Harun Abdullahi:.....................................................................11
3) Xil. Dahir Amin Jeesow:..............................................................................12
4) Sen. Farhan Ali Hussein:.............................................................................14
5) Xil. Zamzam Mohumed Omar: .....................................................................16
6) Xil. Mukhtar Ahmed Hassan:........................................................................17
7) Sen. Mohamed Ali Yusuf:.............................................................................19
8) Xil: Mahdi Mohammed Gulaid:.......................................................................20
9) Xil: Abdullahi Farah Mire: ...........................................................................24
10) Xil: Ilyas Sheikh Ahmed: ...........................................................................27
11) Xil. Mohamed Muhumed Mohamed:...............................................................29
12) Xil. Sacdia Yasin Haji Samatar – Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka ..........................................................................................................32
13) Xil. Abdi Ahmed Kooshin: ..........................................................................33
14) Xil. Ali Haji Dahir:....................................................................................35
15) Xil. Hassan Budul Ali: ...............................................................................37
16) Xil. Abdisalan Haji Ahmed Liban "Dhabancad": ..............................................39
17) Xil. Dr Abdirashiid Mohamed Nor Jilley:........................................................41
18) Xil. Mahad Abdalla Awad:...........................................................................42
19) Xil. Abdirisak Hassan Ahmed Dhookir: ..........................................................44
20) Sen. Muuse Suudi Yalaxow:........................................................................45
21) Xil. Roda Arab Sharif Abdi:.........................................................................46
22) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu...........................................................48
23) Xil. Mukhtar Mohamed Guled: .....................................................................50

**Kulanka 25aad**.....................................................................................................53

Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe: ...........................................................53

1) Sen. Abdihakim Moalim Ahmed: ....................................................................53
2) Xil. Sahro Abdullahi Igal:.............................................................................56
3) Xil. Mohamed Omar Aimoy:..........................................................................58
4) Xil. Abdiqani Ismail Said:.............................................................................61
5) Sen. Samsam Ibraahin Ali: ...........................................................................65
6) Xil. Hassan Hurre Ugaas: .............................................................................66
7) Xil. Sareda Mohamed Abdalla:.......................................................................67
8) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: .......................................................................69
9) Xil. Da'ud Abdikarim Omar:..........................................................................71

10) Sen. Abdiqani Gelle Mohamed: ........ 72
11) Xil. Abdinur Ali Adan ........ 74
12) Sen. Abdi Hassan Awale: ........ 75
13) Xil. Mohamed Abukar Abdi. ........ 76
14) Sen. Laila Nur Maax: ........ 79
15) Xil. Maxamed Abdi Mohamed: ........ 81
16) Xil. Rooda Arab Sharif: ........ 82
17) Sen. Zamzam Abdullah Ahmed: ........ 84
18) Xil. Ismacil Shire Jamac: ........ 85
19) Xil. Sharif Mohamed Abdalla: ........ 87
20) Xil. Said Ali Muse: ........ 89
21) Xil. Osman Mohamed Mohamud (Xaadoole): ........ 91
22) Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur: ........ 93
23) Xil. Dr Ahmed Aadan Ahmed: ........ 96
24) Xil. Axmednur Sh. Mohamed Lohos: ........ 97
25) Xil. Raysal Qorone Abshir: ........ 99
26) Xil. Omar Yusuf Galadid: ........ 103
27) Xil. Mohamud Abdirahman Omar: ........ 106
28) Xil. Salah Sharif Sayid Ali: ........ 109
29) Xil. Fawzia Yusuf H Adan: ........ 111

**Kulanka 26aad: ........ 114**

Xil. Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" ........ 114
1) Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed: ........ 114
2) Xil. Said Mohamed Ali: ........ 116
3) Xil. Abdullaahi Hassan Rooble: ........ 117
4) Xil. Dahir Amin Jesow: ........ 118
5) Xil. Bashir Abdi Mohamed Mohamud: ........ 120
6) Sen. Sareedo Mohamed Hassan: ........ 122
7) Xil. Rooda Carab Sharif Cabdi: ........ 123
8) Sen. Zamzam Dahir Mohamud: ........ 123
9) Xil. Omar Hanshi Ibrahim: ........ 123
10) Xil. Hassan Abdi Ismail: ........ 125
11) Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud: ........ 128
12) Xil. Omar Sharif Mohamed: ........ 130
13) Xil. Mohamed Sheekh Noor Osman: ........ 131
14) Xil. Abdirisak Abdullahi Moallim: ........ 133
15) Xil. Abdillahi Bidhaan Warsame: ........ 134
16) Xil. Dr. Mohamed Sh. Axmed Mohamed: ........ 136
17) Xil. Nur Ahmed Dirie: ........ 138
18) Xil. Abas Ali Ibrahim: ........ 140

**Kulanka 27aad: ........ 142**

1) Xil. Roodo Arab Shariif Abdi: ........ 142
2) Xil. Abdiqani Ismail Said: ........ 144
3) Xil. ZamZam Muhumed Omar: ........ 145

4) Xil: Daahir Amiin Jeesoow: ........ 147
5) Xil: Mahdi Mohamed Gulaid: ........ 148
6) Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur: ........ 152
7) Xil. Seynab Mohamed Amir: ........ 154
8) Xil. Mohamad Hussein Abukar (Gaaraxo): ........ 157
9) Xil. Sahra Abdullaahi Igal: ........ 159
10) Sen. Mohamed Abdi Osman: ........ 161
11) Xil. Mohamed Omar Aimoy: ........ 163
12) Xil. Omar Hanshi Ibrahim: ........ 165
13) Sen. Iftin Hassan Iman: ........ 167

**Kulanka 28aad: ........ 169**

1) Sen. Farhan Ali Hussein ........ 169
2) Xil. Omar Yusuf Galadid: ........ 171
3) Sen. Zamzam Abdullah Ahmed: ........ 173
4) Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane: ........ 174
5) Xil. Mohamud Abdirahman Omar: ........ 177
6) Xil. Mukhtar Mohamed Guled: ........ 180
7) Xil. Mohamed Abukar Abdi: ........ 182
8) Xil. Sharif Mohamed Abdalla: ........ 185
9) Sen: Abdihakim Moalim Ahmed ........ 186
10) Xil: Mohamed Abdi Mohamed ........ 189
11) Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud: ........ 190
12) Sen. Prof. Dr. Osman Mohamoud Mohamed: ........ 192

**Kulanka 29aad: ........ 195**

1) Xil. Salah Sharif Sayid Ali ........ 195
2) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: ........ 197
3) Xil. Xasan Cabdi Ismaaciil: ........ 198
4) Xil. Mohamud Abdulkadir Haji “Jeego”: ........ 200
5) Xil. Mohamed Abdulahi Buraale: ........ 201
6) Xil. Ilyas Shekh Axmed: ........ 202
7) Xil. Khadra Axmed Maxamed: ........ 206
8) Xil. Cadar Ali Mohamed: ........ 206
9) Xil. Baale Ibrahim Abdi: ........ 207

Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow ........ 209
Avv. Burhaan Adan Omar ........ 212
Xil. Hussien Qasim Yusuf idow ........ 215
Guddoomiyaha Golaha Shacabka: Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur “Madoobe” ........ 216

## Gogoldhig

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) waxa uu diyaariyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dasuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah. Kaddibna waxaa ansixiyey Guddiga La-socodka iyo Hirgelinta Dasuurka ee BFS. GMDHD markii uu diyaarinayey soojeedinta wax ka-beddelka waxa uu latashiyo ballaaran la sameeyey qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin culummada, ururrada bulshada rayidka, dhallinyarada, haweenka iyo wakiillada dawlad goboleedyada. Waxa kale oo guddigu aruuriyey ra'yiga dadweyne farabadan oo ku kala sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa iyada oo la isticmaalayo bogga guddigu ku leeyahay internetka. Guddigu waxa uu tixgeliyey fikradaha dhammaan dadkii ka qaybqaatay wadatashiyada. Wadatashiyadaas waxaa iska kaashaday hay'adaha u xilsaaran dastuurka sida GMDHD, Guddiga La-socodka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Cutubka 4aad oo cinwaankiisu yahay Matalaadda Shacabka waxa uu ka kooban yahay shan iyo toban qodob(15). Cutubku waxa uu xeerinayaa arrimo xasaasi ah oo muhiim u ah dawladnimada oo ay ka mid yihiin, awoodda shacabka; mabaadii'da guud ee doorashooyinka; nidaamka doorashooyinka; hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo dooranayo; muddada xilhaynta hay'adahaas; codbixiyaha; dowrka xisbiyada siyaasadeed iyo shuruudahooda iyo dhisidda Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka, waajibaadkiisa, xubnihiisa iyo shuruudaha xubnaha.

Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya ayaa loo soo gudbiyey Soojeedinta Wax Ka-beddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo warbixin faahfaahsan oo la socotay soojeedinta. Golayaasha Baarlamaanka ayaa billaabay ka doodista soojeedinta wax ka-beddelka dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah.

Maxdarqoraalka hortiinna yaalla waxaa laga diyaariyey doodaha xildhibaannada labada gole ay ka yeesheen Cutubka 4aad ee Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka. Xildhibaannadu lix kulan ayey ku soo jeediyeen fikirkooda oo ay ugu dul istaageen qodob qodob iyo faqrad faqrad iyaga oo sameeyey soojeedinno iskugu jira ku celin asalka dastuurka, siiqo toosin, soojeedin meesha ka saaris. Madxadqoraalka hoose waa hadalkii xildhibaannada oo sidoodii loo qoray iyada oo aan wax isbeddel ah lagu sameyn. Waxaa kale oo doodda xildhibaannada laga diyaariyey falanqeyn baaxad leh oo ku saabsan soojeedinnadoodii oo si gooni ah xubnaha labada gole loola wadaagayo. GMDHD waxa ay dib-u-eegis iyo isbeddel ku sameeyeen soojeedinta wax ka-beddelka qodobbada iyo faqrooyinka Cutubka 4aad iyaga oo tixgelin siiyey fikradihii xubnaha labada gole iyo latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada.

**Taariikh:** Maarso 11, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 24aad ee labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: 160 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: 32 Sanatar |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:23 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:40 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansaxinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 4aad. Matalaadda Shacabka, Doorashoyinka. Madaxa 1aad ilaa Madaxa 4aad (Qodobka 48aad ilaa 63aad).

## Kulanka 24aad

## CUTUBKA 4AAD: MATALAADDA SHACABKA

**Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" – Guddoomiyaha Golaha Shacabka**
Bismilaahi Raxmaani Raxeemi, xildhibaannada sharafta leh ee labada Aqal, Ramadaan kariim, Ilaahay soonka ajarkiisa ha inawada siiyo. Inta aan ajendaha lagudagalin warbixin yar ayaan ka horaysiinayaa, xildhiabaano, xildhibaanada ka tirsan ayaa soojeedin mooshin nookeenay oo ku saabsan ajendaha, waxay soojeediyeen in doodda cutubka 4aad shintiriska la waafajiyo.

Guddoonka labada Aqal ayaan meesha ku fadhinay, talo ahaan talada ay soojeediyeen ma xuma, laakiin marka xeer ahaan loo fiiriyo labada Aqal waxaa la rabaa, Aqalka Sare 10 qof inay soo qoraan ayaa la rabaa, taas dhinacaas dalool ayuu ka yeeshay, markaa sidaas daraadeed waxaan u aragnay ajendaha intaas inay ka dhimantahay, laakiin waxaan qaadanay talo soojeedintoodii runtii inay macno leedahay, markaa sidaas daraadeed waxaan isla qaadanay ka guddoon ahaan haddii aad idinku nagu raacdaan, sidii aan horayba ugu soconay in ajendaha la ansixiyo, laakiin si maaddaama cutubkii 4aad muhiimad gaar ah uu leeyahay, doodda aan anaga ka xakamayno oo marka hore laga doodo labo madax uun laga dooddo, madaxa koobaad oo hal qodob ka kooban iyo madax labaad oo shan ka kooban inaad doodda intaas ku xakamaysano, si xildhibaanku ama senatarku uu fursad ugu helo, mar labaad haddan uu labada kale ka dooddo si aan fursad ugu helno, sidaasna aan ku kala xakamayno, sidaasna ajendaha lagu ansixiyo ayaan soojeedinayna idinka oo aad u mahadsan. Kuli waan ka doodaynaa maaddaama cutubka 4aad muhiimad gaar ah leeyahay si xildhibaanku ama senatarku uu helo labo fursadood oo 10 daqiiqo ciriiri ku noqon.

Marka hore labo ayaan dhamaynaa guud ahaan waan ansixinaynaa cutubka oo sidii aan horay ugu soconay ayaan u soconaynaa. Cutubka waan ansixinaynaa guud ahaan, laakiin doodda

waxaan ku reebanaynaa labada hore, hadana labada kale ayaan bilaabaynaa, markaa idinkoo mahadsan inaad ajendaha sidaa ku ansixisaan xildhibaanada sharafta leh.
Guddigii dastuurka noo qaabilsanaa inay yimaadaan oo cutubkii 3aad siday doodiisii ku dhamaatay iyo nidaamkii inay maraan, kii 4aad furitaankisiina inay isagana ka bixiyaan warbixin, aad ayaad u mahadsantihiin ku soo dhawaada Guddiga.

**Xil. Hussien Qasim Yusuf Idow:**
Salaamu Calaykuma Waraxmatulaahi Wabarkaatuhu, rabadaan kariim mudanayaasha sharafta leh doodii cutubka 3aad oo runtii cutub muhiim ahaa oo la xidhiidhay Dhulka, Hantida iyo Deegaanka oo ka kooban 6qodob oo maalimihii arbacada iyo sabtida aan halkan ku galnay, doodiisu runtii waa iska gaabnayd, cutubkuna waa gaabnaa.
29mudane oo kaliya ayaa fikirkooda ka dhiibtay, waxaan rabaa inaan isla sabootino oo aan wax ka taataabano wixii ugu muhiimsanaa oo la sheegay oo aan isleeyahay Guddigu isha ayey u hayn doonaan.

- **Qodobka 42(1):** oo u dhigan Dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa faqradiisa 1aad. Faqradaas waxa la soojeediyey in lagu bilaabo oo lagu daro **Alle ka sokow** in loo dhigo **Alle ka sakow** dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **إن الأرض لله يورثها من يشاء من عباده** in sidoo kale waxaa xildhibaanada, mudanayaasha dodoodii saldhig u ahaa in la muujiyo oo faqradan lagu muujiyo shacabka cida uga wakiilka ah oo u maamulaysa hantidooda iyo milkiyadooda oo dhulka ah taas oo ay mudanayaashu soojeediyeen inay tahay dawladda oo markaas nuxurka faqradda lagu soo daro in shacabku milkiyada leeyihiin, laakiin dawladoodu u maamulayso. Waxaa la soo qaaday aragti ku aadan dhulka laftigiisu inkastoo shacabku leeyahay, hadana in la muujiyo inuu dhul danguud iyo dhul gaar inuu jiri karo oo xaqiiq waaqici ah oo wadanka ka jirta.

  Waxa kale oo la muujiyey oo la xusay inuu jiro dhul daaqsin ah oo dadyow gaar ah leeyihiin, taas oo lahaanshihiisa ay la xiriirto hadba deegaanka aad joogto iyo dadyowga ku nool oo arrintaasina, arrinta reer miyiga iyo dhulka daaqsinta ah oo isaguna uu dhul lahaansho gaar ah uu jiri karo.

- **Qodobka 42(3):** oo u dhigan Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah, waxaa la soojeediyey in loo dhigo Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa lahaansho sifo sharci ah. Xeerarka dhaqangalka ahoo su'aalo badan laga keenay waxa loola jeedo, waxaan filaa inay tibaaxayso xeerka dhulka, xeerka hantida iyo xeerarka hawlaha guud la xiriira.

- **Qodobka 42(5)**: erayga Dhawraarinta oo dooda baarlamaanka taabanaysay dhinacyadiisa badan, **waxaa la soojeediyey in eray bixin sahlan oo la fahmi karo lagu beddelo.**

- **Qodobka 42(5)(e):** In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro, haddiiba khilaafaadka ku saabsan dhulkaiyo milkiyadda**, waxaa la soojeediyey in dib loo siiqeeyo oo loo dhigo In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro, haddiiba ay dhacdo inuu yimaado khilaaf ku saabsan dhulkaiyo milkiyadda.**

- **Qodobka 42(7):** oo u dhigan Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer,**waxaa la soojeediyey in la soo celiyo sidii horay u qornayd asalka dastuurka oo ahayd Lama bixin karo ruqsad la xiriirta isticmaalka abadiga ah ee berriga, badda iyo hawada sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,waxa sidoo kale la soojeediyey in faqraddaa lagu kordhiyo wabiyada,jasiiradaha iyo kaymaha oo loo dhigo Baaxadda dhulka,wabiyadda, jasiiradaha iyo kaymaha muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu xeerinayaa,waxaa lagu soo saarayaa xeer**.

- **Qodobka 42(8):** oo u dhigan Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxikarta qof ama hay'ad shisheeye isticmaalcaariya ku haysasho ama heshiis kiro ah. Erayga caariya laftigiisa waa la isla garan waayey, markaa eray bixin taas kaga haboon in la raadiyo ayaa la isla soo qaaday. Qodobkaas waxa kale la soojeediyey in faqrado cusub lagu soo daro oo la xiriira ilaalinta goobaha taariikhiga ah, ilaalintooda iyo aqoonsigooga iyo ilaalintoodaba.

  Mamnuucida waxayaalaha goobaha taariikhiga ah in faqradda waxaas la xiriirta lagu soo daro. Waxa kaloo mudanayaasha qaar soojeediyeen **in xeerarka ku qoran ama qodobkan 42aad faqradihiisa ku qoran qofkii sameeya xadgudub la xidhiidha qodobka 42aad in la muujiyo danbiga heerka uu galay**, iyadoo mudanayaashu **qaar soojeediyeen inuu u dhiganyahay khaayinul wadan.**

  Qofkii ku xadgudba Geyiga iyo Jamhuuriyada qodobada nuxurka ku xusan xadgudub ku sameeyey inuu u dhigmo danbiga darajada uu galay inuu yahay khaayinul wadan.

- **Qodobka 43aad, 44aad iyo 45aad** dhamaantood oo ka hadlaya Guddiga Madaxbannaan ee dhulka, xubnaha Guddiga iyo shuruudaha xubinimada, **waxaa la soojeediyey in qodobadaas dhamaantood aan loo baahnayn** ayaa mudanayaasha qaarkood soojeediyeen.

  Hawlahaasna ay u igmantahay Wasaaradda Hawlaha Guuud, sidoo kale xildhibaanada qaar ayaa soojeediyey in qodobadani ay muhiim yihiin oo loo baahanyahay inuu dastuurku asaaso oo uu dhiso Guddi qaabilsan arrimaha dhulka.

- **Qodobka 43aad:** oo ciwaankiisu yahay **Guddiga Qaranka Madaxbannaan ee Dhulka, waxaa la soojeediyey in la saxo oo loo dhigo Guddiga Madaxbannaan ee Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Meesha laga saaro Qaranka si 'title-ku" u sahalanaado.** Waxa kale oo la soojeediyey in Guddigu awood maamul yeesho oo aan dowrkiisa laga badiyo dowr aan la qarin oo siyaasadda dhulka iyo la talin laga balaadhiyo oo awood maamul dhulka loo sameeyo aad baa looga hadlay.

- **Qodobka 44aad:** ee **Xubnaha Guddiga Qaranka Madaxabannaan ee Dhulka** waxaa su'aal laga keenay qaabka xubnaha Guddigu ay ku imaanayaan oo hada u dhigan Dawlad Goboleedyada ,Dawlada Federaalka ,Gobolka Banaadir ay ka imaanayaan xubno,waxaa dareen laga keenay sida xubnaha sidaas lagu qaybiyo ,nidaamka Dawlad Goboleedyada u noqon karaan Guddiyo loo dhanyahay oo waafaqsan hanaanka awood qaybsiga oo dalkani hada ku shaqeeyo,hadhii hanaanka Dawlad Goboleedyada ay xubnaha soo dirsanayaan la raaco siday u noqon karaan Guddi loo dhanyahay ayaa su'aalo badan laga keenay.

- Waxaa la soojeediyey oo soojeedimaha **ka mid ahaa in heer Federaal Guddi ah la dhiso oo dhulka ah, dawlad Goboleedyaduna ay yeeshaan Guddiyo heerkooda ah**. **Wasaaradda ku shaqada lehna ay soojeediso, xubnuhuna ay noqdaan 9 ama 10**.

- **Qodobka 45(1) (a,b,d,c):** waa shuruudaha xubinimada Guddiga oo hada ah inuu 40sano jiro qofka xubin ka noqonaya, waxaa la soojeediyey in hoos loo dhigo oo laga dhigo 30 sano ,khibrada oo 15sano ahna laga dhigo 5 ama 7 sano.

- **Qodobka 45(1)(e):** oo isaguna sheegaya In maxkamad ku xakumin danbi gaadhaya 3sano , taas kor loo qaado oo laga dhigo In maxkamad ku xakumin 5sano oo taas baarkeed kor loo qaado.

- **Qodobka 46aad:** oo la xidhiidha **Kheyraadka Dabiiciga, waxaa la soojeediyey in laga dhiga Kheyraadka Dabiiciga ah,sidoo kale xildhibaanada qaar ayaa soojeediyey in loo baahanyahay iyo inaan loo baahnayn iyo sidoo kale in loo baahanyahay** Hay'adda Macdanta; Hay'adda Biyaha; iyo Hay'adda Betrool,iyadoo sidoo kale la soojeediyey in la aasaaso, Hay'addaha la aasaasayo lagu daro Hay'add u qaabilsan arrimaha ugaarta iyo duurjoogta oo hay'ad muhiim ah.

- **Qodobka 46(3):** Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga, waxa aad loo soojeediyey in la tiro, hawshaasna wasaaradda maaliyadda ay qaabilsantahay, laakiin waxaa xusid mudan Guddigan inuu ku dhisanyahay heshiiskii madasha wadatashi qaranka ee beydhabo ee Federaalaynta hanaanka maaliyadda. Waxana uu Guddi ahaan uu ku dhismi doonaa halkan waa lagu xusay, waxa uu ku dhismi donaa cutubka 13aad oo la xiriira maamulka dhaqaalaha iyo maaliyadda wadanka.

- **Qodobka 47(3) (d):** Ilaaliyaan ugaarta, isirhayeenka iyo nafleyda kala nooca duwan, eray bixintiisa isirhayn in sidoo kale in loo helo eray ku haboon.

  Markaa erayada eray bixinada la xiriira sida dhowraarinta, caariyada iyo isirhaynta eray bixin ku haboon la isla garto qaamuuska saldhig u yahay in la helo.

  Mudane Gudoomiye hadii aad iga ogaalato, waxaan rabaa inaan Sen.Siciid Cowke u ogaalato inuu golgal dhiga cutubka 4aad inoo sameeyo. Waad mahadsanthiin.

**Sen. Said Abdi Hussein:**
Mudane Guddoomiye waad mahadsantahay, shirgudoonka, Baarlamaanka sharafta leh maanta waxaa idin horyaala soojeedimaha cutubka 4aad oo asalkii dastuurka ka koobnaa labo qodob oo kala ahaa:

- **Qodobka 46aad:** awooda shacabka oo soojeedimaha hada idin horyaala lagu sameeyey siiqayn iyo toosin, sidoo kalena hal faqradan lagu soo daray iyo ;

- **Qodobka 47aad**: oo dhigayey nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyada. Qodobka 47aad ee asalka dastuurka waxa uu dhignaa sida tan: Shuruucda ku saabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo

saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Wuxuu xamaarsanaa arrimo dhowr oo ay ka mid yihiin:

- **Xisbiyada iyo diiwangalintooda** oo hada lagu faahfaahiyey ama lagu qaabeeyey qodobada 54aad, 55aad iyo 56aad ee soojeedimaha hada idin horyaala, waxa kale oo uu xambaarsanaa waxaa ka mid ahaa doorashooyinka heerarka kala duwan oo hada iyagana lagu faahfaahiyey qodobka 51aad ee soojeedimaha idin horyaala.
- Waxa kale uu xamaarsanaa Guddiga Doorashooyinka oo hada lagu faahfaahiye qodobka **57aad ilaa 62aad**, sidoo kale qodobkii 47aad ee asalkii dastuurka wuxu farayey in xeerar ka farcamaan. Xeerarkaas oo noqon karayey xeer doorashooyinka, xeerka xisbiyada iyo xeerarka lagama maarmaanka u ah oo hada aan Meesha ka madhnayn in ay iyaguna ka farcami donaan cutubkan.

Asalka dastuurka Guddiga madaxbannaan waxaa lagu nidaaminayey cutub gaar ah ama Guddiyada madaxbanaan oo dhan cutub gaar ah ayaa lagu nidaaminayey, balse soojeedimaha hada idin horyaala Guddi walba waxaa lagu nidaaminayaa cutubka ay khusayso, sidaas darteed ayaa Guddiga madaxbannaan ee doorashooyinka iyo soohdimuhu u yimaadeen cutubka 4aad. Waxaa jirtay su'aal hada intaan Meesha joognay dhowr xildhibaan ama senator I waydiiyeen oo ah mudo xileedka qofka la doortay inta la jeer ee uu kuu soo laabanayo xilka loo doortay ama jagada loo doortay,taas oo looga hadli doono hadba cutubka ay khusayso,tusaale ahaan cutubka 7aad ee madaxwaynaha ayaa looga hadli doonaa mudada inta jeer ku soo laaban karo jagada loo doortay.

Mudanayaal sidaan ajendaha wax ugu bedelnay, waxaa idin horyaala 6qodob oo u kala qaybsan labo maddax. Maddax kobaad waxa ku jira hal qodob oo sheegaya awooda shacabka, maddax labaadna waxaa ku jira mabaadii'da guud ee doorashooyinka, nidaamka doorashooyinka, hay'addaha sida tooska loo doorto, mudada xilhaynta iyo codbixiyaha.

Waxaan filaynaan wax-ka-beddelka aynu ajendaha ku samaynay, doodeenu maanta waxay ku eekaan doontaa qodobka 53aad. Ku soo dhawaada oo ku biiriya aragtidiina, qof walba ha abaaro qodobka iyo faqradda uu ka hadlayo anoo idin xasuusinaya. Araarta badan iyo salaamaha waxay idinka halaynaan wakhtiga, sidaa daraadeed qofku toos ha u aado Meesha uu rabo inuu aragtiisa ku daro. Waad mahadsantihiin.

1) **Sen. Deqa Hassan Hussein:**
Guddoonka labada Aqal, senatarada, xildhibaannada, habdhowrka, xoghayaasha, meedhiyaha iyo dhammaan hawlwadeennada Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu. Maddax koobaad ee mabaadii'da guud ee matalaada shacabka.

- **Qodobka 48aad:** Awoodda shacabka, sidaan ognahay waxaa looga hadlayaa madaxan awoodda shacabka, markaa aniga waxaan soojeedinayaa oo aan toos u abaarayaa.

- **Qodobka 48(2):** “Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhanyahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato”. Aniga waxaan soojeedinayaa faqraddan in halkaas lagu eekeeyo, inta kale wax macno ah ma keenayso, waxay luminaysaa macnaha ay leedahay faqraddan.

- **Qodobka 48(4):** waxaa lagu qoray Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in dawlad goboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, anigu waxaan soojeedinlahaa maddaama laga hadlayo awoodda shacabka, meeshaasina ay tahay awoodda ay dowladdu u leedahay inay hirgaliso in qodobkeeda loo daayo, faqradeed iyo qodobka ay leedahay dib loogu celiyo qodobka ay leedahay, meeshana kaliya looga hadlo awoodda shacabka.

  Maddax labaad dastuurka ee doorashooyinka sida hadda noogu muuqata 4 *'chapter'* ee ay soo diyaariyeen Guddiga, waxaa muuqata in la tiray faqradii aasaaska u ahayd dastuurka oo ahayd faqradda koobaad ee qodobka 47aad nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyadda.

  Mudanayaal aniga waxay ila tahay oo aan soojeedinayaa in faqraddaa sideedii loo sooceliyo, maddaama waxa aan ka shaqayno uu yahay dastuurkii qaranka ayna ahayn sharcigii doorashooyinka uusan ahayn inaan loo baahnayn in la galiyo sharciga wixii lagu qori lahaa dastuurka in lagu dhex qoro aniga ma qabo, waxaan soojeedinayaa oo fikirkayga ah in la soo celiyo faqradii hore ee ahayd shuruucda ku saabsan xisbiyada, diiwaangelintooda, doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo guddiga qaranka ee madaxbanaan ee doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaraan labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

  Waxaan ku darayaa oo aan ku sii takiidinayaa qodobadan tirada badan ee la qoray waa qodobadii lagu qori lahaa sharciga doorashooyinka ee loo qori doono Inshaa Allaah doorashooyinka, haddii loo baahanyahay in lagu galiyo aniga waxaan qabaa inaan laga doodinba, maaddaama waxa meesha qoran ay tahay sharcigii doorashooyinka ay tahay, meeshana ay ku haboonayn shaqadiina dastuurkana ayna ahayn, aniga waxaan soojeedinayaa dood anaga inaan hoos u falaaqaynoo, maxaa intan loogu dari waayey? xilhayntu maxay noqonaysaa? waxay noqonaysaa sharciga doorashooyinka. Waan mahadsanthiin.

2) **Xil. Mohamed Harun Abdullahi:**
   Ramadaan Mubaarik. Mahadsanid Guddoomiye, waxaan aaminsanahay in cutubku iska koobanyahay, doodihiisu ayna sidaas u sii badnayn, markaa waan iska dhamaysanayaa 10daqiiqana ka bixi maayo. Waxaan ku bilaabi lahaa:

- **Qodobka 51aad**: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo, waxaan runtii Guddiga iyo cidwalba oo ka soo shaqaysayba ku ayidayaa oo aan ku taageersanahay inaan u guurayno nidaam 'presidential' oo toos dadwaynuhu u dooranayaan. Dalkeenu intaan ognahay 63sano oo aynu xornahay marna ma yeelan hoggaamiye isagu mas'uuliyada guud ee dalka qaata, marka laga reebo xiligii kalitalisnimada oo aan aamisanahay inay dawladda sharciya ahayn oo wixii khaldamay iyo wixii saxmayba aan iyadu xisaab ku jiran.

  Labo maamul oo is barbaryaacaya oo Raysal Wasaare iyo Madaxwayne ayaa dalkani ku soo dhaqmayey oo runtii mas'uuliyada cid gaar ayna qaadanayn haday eeddi timaado iyo haddii wanaag yimaadaba. Is qabqabsi badan ayaan kala soo kulanay markay waxaasi meesha ka baxaan iyo in laaluushkii madaxnimada lagu raadin jiray iyaduna ay meesha ka baxdoo, **ninka Madaxwayne dooranaya ay bulshawaynta Soomaaliyeed ee malaayiinta ah si toos ah cod ugu raadiyo taana runtii waan ku ayidayaa.**

Waxaase aamisanahay oo sidaas oo kale iyaduna ah in gole xukuumadoo iyaduna ma aragtay ay xildhibaano ku jiraan inay waxyaabah dalkan la hadhay ay mid ahayd, sida Madaxwayne iyo Madaxwayne Ku-xigeen ay u soo 'propose' gareeyeen, sidoo kale ay u soo 'proposal' gareeyaan in la kala reebo xukuumada iyo xildhibaanimada, iyadana waan soojeedinlaha. Waxa kale ee aan ku darsan lahaa.

- **Qodobka 51(1)(c):** sidaan ognahay dalkan federaal baynu qaadanay, waxyaalaha la federaaleeyey ee aynu rabnay inaan federaalayno 'resources-ka' ayaa ka mid ah, waxaa ka mid ah awood qaybsi, sidoo kale 'title-ka' ayaa ka mid ah, halka hoggaamiye iyo hoggaamiye ku-xigeen ay yidhaahdeen madaxda maamul goboleeyada, **waxaan guddiga u soojeedinlahaa inay xurmadoodii u soo celiyaan oo Madaxwayne iyo Madaxwayne ku xigeenkoodii daayaan. 'title' ayaa rabnaa in la federaaleeyo ay noqdaan kuwa xamar uun oolin oo meelkasta oo Soomaaliya yaalo.**

- **Qodobka 52(2):** waxay u dhigantahay Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka. Halkaa inay Guddigu ku eekeeyaan bay ahayd, laakiin waxay sii raaciyeen laga soo hormarinayaa golayaasha deegaanka iyo wax noocaas, markaa inay nidhaahno golayaasha la doorto ee Madaxweyne ama Madaxweyne maamul Goboleed ama xildhibaan dawlad goboleeed ama xildhibaano federaal ah hal mar baa la dooranayana, laakiin waxaa ka reeban golayaasha deegaanka oo xili ka duwan la qaban karo, laakiin siiqada inay wax ka yara beddelaan ayaan soojeedin lahaa.

- Waxaan iyadana ku darsan lahaa **Qodobka 55aad, faqradiisa 2aad** waxyaalaha ka reeban asxaabta siyaasadda, dalkeena sidaan ognahay boosas iyo xilal baynu ku tartanaa, afkaar siyaasadeed laguma tartamo, anigu Hargeysa ayaan ka imiday halkanaa joogaa midnimo ayaan u joogaa, wiilka Hargeysa jooga in la kala go'ay ayuu aamisanyahay, waxaan aamisanahay inaan la xadidin oo aynaan dabar u dhiginee aynu oggolaano afkaarta siyaasiga inay tartamaan oo xisbiyadu ay dadku diidaane inagu aan diidin.

  Waxaan aamisanahay, haddii uu aamisanyahay inuu kala go'o dalku inuu Muqdisho yimaado kaga ololeeyo inuu dalku kala go'o, aniguna Hargeysa tagi karo oo aan ku ololayn karo in midnimadu ay fiicantahay oo aynu afkaarta tartarsiino oo inaynu xagjir kuweena halkaa joogana xagjir ku noqone oo aynaanu odhan dalka lama midaynkaro ama lama soo hadal qaadi karo, qolada halkan joogtana sidoo kale ay odhan dalka baa la kala gownayaa lama soo hadal qaadi karo, markaa afkaaraha aynu tartarsiino, xagjirnimada wadaniyadeed.

3) **Xil. Dahir Amin Jeesow:**

Mahadsanid Guddoomiye. Ramadaan Kareem Xildhibaannada sharftaleh. Madaxa koowaad anigu waxaan qabaa meesha tan ay ku qorantahay,

- **Qodobka 48(1):** Allah SWT ka sokow awoodda waxaa iskaleh shacabka Soomaaliyeed waa sax, lakiin waxaad moodaa in ay ka reebeen u wakiilashadii Baarlamaanka Soomaaliyeed ay u wakiilan lahaayeen shacabkooda ay ka reebeen, awoodda oo dhan shacabka ayaa leh waxay la xisaabtamaayeen hay'adihi wixi oo dhan ayay leeyihiin, waxaa fiicneed in ay muujiyaan in shacabka soomaaliyeed ee aan wakiilka ka nahay ay u wakiilanayaan **Baarlamaan la soodoortay ee laba Aqal ah in u wakiilanayaan la xisaabtanka hay'adaha**

**in lagu muujiyo waa fiicnayd**, haddana waan kula dardaarmayaa in ay ku muujiyaan meeshaas.

- **Qodobkii hore ee 47aad** ee aad tirteen inaad soo celisiin ayaan idinkula talinayaa, waayo waxaad tiraahdeen cutubka 4aad ayaa lagu kala daray, qodob qodob lagu dari karo ma laha sidan ayuuna uqornaa: "shuruucda kusaabsan xisbiyada, diiwaangalintooda doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo Guddiga Qaranka ee Madaxabanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka", bes waxaa ka maqan in aad ku dartii Labada Aqal ayaa soo saaraya, marki dastuurkaan la qoraayay Golaha Shacabka un baa loo wakiishay haddii xitaa aad meelkale ka qoraalka sidaas u qoran qoraal fiican ayuu ahaa **in la sooceliyo qodobkaas 47aad** meeshuu galaayana la geliyo ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 49(i):** markaad ka hadlayseen waxyaabaha uu dastuurka dhiirigelinaayo mabadii'da doorashooyinka waxaa tiraahdeen, waxa kale oo dhan waxaad kasoo hadasheen damaanad qaad, lakiin qodobka xisbiyada markii la diwaangalinayo waxaad tiraahdeen wuxuu dhiirigelinaayaa, dhiirigelin iyo damaanadqaad na waa labo eray oo aad u kala adag, in aad ka dhigtiin meesha aad leedihiin xarafka E: wuxuu dhiirigelinayaa nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, "dhiirogelinayaa" waxaa kaga haboon "damaanadqaadaya"

- **Qodobka 51(c)**: waxaan qabaa meesha hoggaamiyayaasha la leeyahay, dalkeenu waxaa batay hoggaamiyayaashiisa anaga xitaa hoggaamiyayaal ayaan nahay, waxaa roonaan leheyd in inta badan hoos loo dhigo, sida hadda walaalkey xildhibaankii iga horeeyay uu sheegay in madaxweynayaal laga dhigo waxaa ay meesha ka saaraysaa awoodaha faraha badan leh ee lagu tartamaayo. Anigu waxaan qabaa in nidaamka ay Kenya qaadatay dowladda dariska aan nahay ee Kenya ay qaadatay ee 'Barasaab' in loo celiyo, barasaabka gobolkana meesha laga saaro, Guddoomiye degmo ilaa barasaabka meel hebel wax ka dhexeeya meesha laga saaro aanan laga dhigin, oo laga saaro Guddoomiyaha Gobolka oo meel dhexe ah, haddii aan dhahno hoggaamiye, hogaamiayaha wuxuu sameysanayaa 'matalan' gobolka aan ka soojeedo ayaan ku halqabsanayaa, guddoomiyaha gobolka Hiiraan meesha laga leeyahay in uu noqodo 'Barasaabka' guud uu noqdo Madaxweynaha, Degmada Beledweyne ay hoggaan yeelato oo guddoomiyihii ay yeelato.

  Kenya waa nidaamkaa waayo Wajeer waxay leedahay Guddoomiye laakiin 'Barasaab' ayaa jira oo 'county' ah, meesha 'county' booskeeda in aan 'Barasaabki' soo celino oo aan hoggaamiyaha ka saarno ayaa ba qabaa, meesha walaalkey iga horeeyey uu cayiliyay oo uu ka dhigay oo uu yiri Madaxweyneyaal ha sii ahaadaan, aniga waxaan qabaa in hoos loo dhigo marwalba waayo dalkaan waa dal aad iyo aad u nugul waxyaabo uu qaadikarin in aan xamilinaa oon dusha ka saarnaa waa laga fiicanyahay.

  Doorashada sharcigeeda ayaa dabcan oo Baarlamaanka labada Aqal ay soo saaraan ayaa qeexi doona lakiin hadda waxay qoreen diiwaangelin, diiwaangelin, doorashada waxay noqon kartaa 'manual' waxay noqon kartaa mid la diiwaangeliyo oo 'computerized' ah waxaana qeexi doona sharci uu soo saaro Baarlamaanka, meelaha hadda diwaangellinta aad ku qorteen in aad ka daysaan oo aan idinka si un usii horkacin waan soojeedinayaa.

- **Qodobka 53(4)(b):** Maxkamada dadka ey ka reebayso doorashada, qofka haddii uu xiran yahay oo xili doorasho kahoraysa la xiro waa ka herayaa doorashada, laakiin waxaa jirta

marmar dhaaxa ah waxaa la isu adeegsadaa siyaasadda aya la iskaga reebaa, waxaad la socotiin dalka muslimka ah ee 'Pakistan' Ra'sul Wasaareheedii in la xiray oo uu xiranyahay xiligii doorashada soo dhawayd si looga reebo doorashada in la xiray.

Kow waa in lacadeeya Maxkamada kareebi karta, labo haddii maanta aan anaga dhiirogelino in siyaasadda la iska reebi kara la isku 'pressure' gareyn karo dhibkeeday leedahay, waxaan qabaa ina la cadeeyo aad loo qeexo qaabka uu uga hari karo qofkaan ma xilliga doorashada soo dhawaato haddii inta laguu yimaado lagu yiraahdo adigoo xisbigaada u 'campaign' gareynaayo ayaa xarfkaas ku hadashay sidaas ayaad ku xirantahay. Waxaan qabaa in laga dhigo qofka arrimaha siyaasad inta uu ku jiro maxkamadaha laguma 'pressure' gareyn karo dacwo na laguma soo oogi karo, tusaale ahaan hadda markii aan doorashada aadaynay wax alaale wixii aad ku soo bixi karto ayaad sameynaysay waa xaqiiqo dhab ah, qofka markii uu doorasho ku jiro lama xaddidi karo, lamana dhihi karo waad xirantahay awood ma la isku adeegsankaro, anigu waxaan qabaa arrimahaas noocaas ah ee hoosgeliska ah ee cutubkaan ka dhexmuuqda in in guddiga ay soo saxaan aad ayay u mahadsanyihiin.

4) **Sen. Farhan Ali Hussein:**
Waan salamayaa Guddoonka Labada Aqal iyo dhammaan Senatorada iyo Golaha Shacabka. Mudanayaal iyo Marwooyihn waxaan toos u abaarayaa

- **Qodobka 51(b)**: Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyadda Dimuqraadiga ayaa toos loo dooranayaa, waxaan aaminsanahay Madaxweyne iyo Madaxweyne Ku-xigeen in aysan wadanka dan u ahayn. Waana sababaynayaa,

Sababta koowaad, waxaa weeye wax yaalaha aan ka cararayno waxaa kamid ah 'prime minster' iyo madaxweyne is heysta, sidaa daraadeed madaxweyne la doortay iyo madaxweyne ku-xigeen la doortay madaxa ayay islageli karaan, marar badan baa anaga 'Puntland' waxaa nasoo martay Madaxweyne iyo Madaxweyne Ku-xigeen labaduba wareegto soo saara dadkuna la kala saftaan, arrintaa iyada ah dhibta ka imaandoonta baa badan ayaan leeyahay meeshayad aan joogno sidii hore ee dastuurku ku socday aan ku socono taasi waa sababta koowaad;

Sababta labaad ummahadaha markay dastuur qoronayaan 4 su'aal bey isweydiyaan su'aasha 1aad ma waxan noqonaynaa 'presidential' ma waxaan noqonaynaa 'parlamanterian', ma waxaan noqonaynaa dawlad federaal ah, ma waxaan noqonaynaa dowlad 'centeral' ah, qodobadaas waxaa looga hadlaa guddiga ergada dastuurka kasoo shaqeynaysa dib-u-heshiisiinta ayaa go'aan ka soogaara, anaga Baarlamaan ahaan waxaan leenahay howlaha kale meelaha mugdiga ku jiro in aan kala faahfaahino, waxaa inoo banaan maanta Baarlamaan ahaan 'prime minster' awoodiisa iyo madaxweyne awoodiisa oo mushkilo ah in aan kala saarno ayaa inoo banaan, waxaa kaloo inoo banaan dastuurka waxyaabaha uu qeexo 4 waxyaabood baa ugu bada oo awood ah: awoodda 'exsecutive-ka' awoodda saddexda ah ee dowlada ka koobantahay in aan awoodahaas kala saaro kala xadeyno ayaa noo banaan, haddaan federaal nahay 4 awoodod ayaan xukuumada siinay awoodahaas iyaga ah in aan koobno ayaa inoo banan, lakiin in aan awoodiii sii balaarino hal gacan oo madaxweyne la yiraahdo 'single executive power' hal qof oo 'power' leh gacantiisa in aan wax walba ku shubno wadankaan dan uma aha horey ayaan usoo aragnay aan kajoogno ayaan leeyahay,

Waxaa kale oo jirta Afti, shacbigu maxay leeyiin markaan dastuurka dhameyno, waxay leeyihiin waanu aqbalnay iyo waynu diidnay inagu faahfaahin baan leenahy, shacbiga soomaaliyeed marka la soo heshiinayana waxay leeyihiin in ay 'foundation' ka keenaan 'foundation' ka in aan gacmo gacmayno inagu maanta awoodaa ma lihin aan niraahno anagu maanta boqor aa suubino anagu awoodaa malihini, inteenaan aan xoghayasha noqono halkaas anagu ma geli karno 'system' baan leenahay federaal baa nahay 'parlamanterian' baanahay meeshaas aan ku socono una deyno dastuurkeen.

Xagga federaalka awoodii bay laxariirtaa federaalku labo tiir buu ku dhisanyahay waa 'check and blance' iyo 'power sharing', awoodda madaxweynaha saddexdii 'branch' ee aan sheegay iyo 4.5 baan ku dhisanahay, 4.5[kii] haddii ladabagediyo oo 'power sharing' ahayd macaha federaal waan katagnay weeye macnaheedu taasna waa sababta kale ee ay macquul u ahayn in aan howshaa ka guurno, howshan iyada ah ee la yiri Madaxweyne iyo Madaxweyne Ku-xigeen hala suubiyo.

'Namibia' ayaa wexey leedahay Madaxweyne iyo Madaxweyne Ku-xigeen waxay kaloo leedahay 'prime minster' iyo 'prime minster' ku-xigeen, haddii la jeclaado madaxweynahay waa loo suubin karaa madaxweyne ku-xigeen isaga la shaqeynaya anagoo weli 'presedential' ah 'option' bannaan weeye, laakiin sideenii in aan ahaano waa loo bahanyahay. Shaqadu haddii ay madaxweynaha ku badato madaxweyne ku-xigeen haloo suubiyo anagoo weli sideenii xukuumadu inoo tahay, qodobkaas intaasaan uga baxayaa.

- **Qodobka 50aad** ee 'closed list' ga ah, liiska xiran hadda kahor waxaa qaadatay 'Afgaanistaan' markii Mareykanku soo galay afar qodob bay qaadatay saddex ka mid ah baan maanta ka hadlaynaa, mid ka mid ah waa labo xisbi maalin kale ayaa loo dib dhigay, labo xisbi macnaheedu markay dunida saddexaad labo xisbi qaadato xisbo magac u yaal weeye iyo xisbi xukuumi ah maalinteedaan u tagi doonaa hadii Allah idmo, lakiin saddexda 'Afgaanistan' qaadatay waxaa weeye 'presedential, close list, two party system' qodobadaas bay qaadatay waxay gaadhay iyo 'presedential' Afgaanistaan waxay gaadhay heer Maraykanku intuu 'corruption' keedii uu xalin waayay 'computer' baa waxaa laleeyahay waa 'close list' halkaas ayaa laga codeynayaa intaas qof baa soo baxday wax soo baxaya ma oga 20 sano kaddib 2 sano ayaa Mareykanku wuxuu heshiis la galay nimankii taalibaan wuxuu yiri nimankaan dawladda hala wadaagaan waayahay bay yiraahdeen "Samcan-wa-daacan", markaan baxayana ha isoo dhagax tuurina oo xabad ha igu ridina buu yiri waayahay bey yiraahdeen markuu kabaxay waad ogeydeen waxa meesha ka dhacay kala carar baa ka dhacay sidaadaradeed aftaa qodob ee awoodda gacanta isugu geynaysa dan inoo ma aha aan ka joogno .

  Guddiga Madaxabannaan ee Soohdimaha ee la yiri wadankoo dhan min degmo 'state' iyo federaal buu matalayaa arrintaasi waa arrin khaldan, waxay tilaamaysaa hal guddi oo wadankoo dhan maamula, sidii aan hadda tahay guddi doorasho oo 'state' iyo guddi doorasho oo federaal ah ayaa dan inoo ah 'supervision' wax la yiraahdo ayay isku suubinayaan labadaa guddi 'supervision"' bey isku samaynayan, waa lagama maarmaan.

- **Qodobka 53(3)** wali waan ku jirnaa guddigaasi ha jiro waa federaal wuxuu kaloo 'supervision' ku sameynayaa guddiga 'state' ka labadaa guddi waa muhiim, saddexdaa qodob baan kusoo koobayaa. Haddii laga tago waxaan dhisayna dowladda tii naga burburtay oo kale ah.

5) **Xil. Zamzam Mohumed Omar:**
Guddoonka iyo Guddoonka Aqalka Sare, Ku-xigeennadiisa salaanta islaamka ayaan idinku salamayaa Ramadaan kareem 'kulu caam wa antum bilkhayr' bisha barakeysan kheyrkeeda Allah nasiiyo, "dhiisha culanaysa ummadda Soomaaliyeed maanta indhaha inagu haysana allah sida ugu kheyrka badan leh uu kheyr kujiro allah inala kulansiiyo".

- **Qodobka 51aad (1)(e)** Hay'adaha sida tooska loo dooranayo: Golaha deegaanka duqa magaalada iyo ku-xigeenkiisa duqa dawladda hoose, ilaa iyo waxa jira lix doorasho in la gali doono, sida caadada ah aniga deegaannada aan ka imid waxaa kamid ah Soomaliland, golaha deegaanka marka la soo doorto waxay ka sii dhex doortaan duqa magaalada halkana waxaa la rabaa golaha deegaanka inta la soo doorto dib doorasho in loo aado duqa magaalada la soo doorto, maaddaama waxani yihiin wax mustaqbal ah waxaa soojeedinayaa golaha deegaanka marka ay yimadaan sida aduunkaba ka jirtaba inteena badan waxaan umalaynayaa dalalka aynu jaarka anahay ama Yurub iyo Ameeriko meesha ay doontaba ha ahaatee ay tagaan sidaas ayaa caadi ah golaha deegaanka markuu soo baxo duqa ayaa toos loo aadaa.

- **Qodobka 52aad** muddada xilhaynta : muddada xilhaynta hay'adaha dastuurka ah sida tooska loogu dooranayo ku xusan qodobka 51(1) waa shan sano, waan soo dhaweynayaa in shan sano madaxweyne ama xildhibaan ha ahaado waxaa jirta shuruuc, haddii aad xasuusataan inteen badan waxaan ugu nimidnay waxaan soo galnay iyadoo ay yaalaan shuruuc naga horeeyay oo la qabanaya xiligeedii in doorasho la aaddo, sidoo kale waxaa jirtay inta doorashada lagu mashquulsanaa mashruuco badano laga shaqeyn lahaa laga tagay. Sidaa daradeed waxaan bogaadinayaa oon soo dhaweynayaa in wakhti ku filan uu xildhibanku ku gudanayo waajibaadkiisa iyo madaxweynaha ku gudanaayo.

- **Isla Qodobka 52 (2)** doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah loo doorto waxaa laga qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormariyo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah sida ku qeexan xeerka doorashooyinka, haddaba su'aashu waxay tahay anaga hannaan dimuqraadiyadeed baan usoconaa waxaan rabnaa doorasho cod iyo qof ah in aynu aadno sidee macquul ku noqonaysaa in la yiraahdo doorashooyin baanu qabanaynaa, tusaale ahaan waxaa iska soo dhici kara in ay soo galaan xildhibaannada, tii madaxweynaha, tii golaha wakiilada, sidee macquul ku noqonaysaa inagoon 'experience' haysanin dhaqaalo nagu filan haysan sidee ay macquul ku noqonaysaa? marka waxaa leeyahay xeerka doorashooyinka ee la soo saarayo halkaa aad ha la inooga hubiyo.

- Waxaan ku noqonayaa **Qodobka 51(4):** Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyada Federaalka Soomaaliya si toos ah iyo si qarsoodi ah ayaa loo dooranayaa, waxaan maanta soo dhaweynayaa hannaanka dimuqraadiyadeed ee aynu u gudbi doono, aniga deegaannada aan ka imid waa Somaliland mar labaad baan idinku celinayaa oo aan aad ugu faanayo hannaan dimuqradiyadedna ay ka jirto doorashoooyinkeedu, in badanba Soomaaliya waxaa curyaan ka qaaday oo ku habsatay masiibo Ra'isul Wasaare iyo Madaxweyne is haysta, aniga ka Gobsan ahaan haddii wasiirkeyga la isiin waayo waxaan leeyahay xukuumadan uu Xamse Abdi Bare garwadeenka ka yahay hala rido mooshin halaga qoro, war waynu ka daalnay dalkan nabad iyo dalkan nabad iyo in aynu shabaab iska xoreyno sidoo kalena aynu yeelano in aan awoodda ku wareejino Madaxweynahay, maha, Madaxweynaha oo kaliya inuu kaligii wax ahaan doono lakiin hanaanka

duqradiyadeed ee 30 sano inagu habsaday, anigoo reer hebel ah aniga hebelkeyga maxay buu yahay reer hebel aynu ka korno oo aynu gaarno doorasho qof iyo cod ah, awoodda ugu sareysana Madaxweynaha leeyahay waana wax jiro oo caadi ah yaynan shareysanin.

Waxa aynu ka koraynaa hannaan siyaasadeeda oo aynu iska bedelaynaa, qofka xildhibaanka ah wuxu jaanis u heli doonaa ka mustaqbal ahaan tiisa, aniga maanta waxaa laga yaabaa wax 4.5 ah in aan ku meereysto deegamadaydii aanu tagi karin doorashana aanu kusoo geli karin, maantoo dhan anigoo reer hebel ah kama bixi karee waxaan rabaa si xor ah xalaal ah oo xita qofka shacabka ah ee banaanka jooga uu ku gor gortami karo Madaxweynaha gacntaydaan ku siiyay codka oo dimuqraadiyad ay Soomaali u gudubtay, waan soo dhaweynyaa waana ku faraxsanahay.

- Sidookale isla **Qodobka 52(5)** hoggaamiye iyo hoggaamiye ku-xigeenka, inta badan waxaa la yiraahdaa Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya, madaxweynihii maamul goboleedka Galmudug, madaxweynihii maamul goboleedka Hirshabelle, madaxweynihii Koonfurgalbeed, runtii madaxweyne madaxweyne markuu xildhibaanku mas'uul noqdo, waziirku mas'uul noqdo, maxdaxweyne maamul goboleed kii Federaalka Ra'isul wasaare dalkiiba wuxuu wada noqday wada madax yaa majo ah marka.

  Waxaas in aanu ka gudubnana waan soo dhaweynayaa, hoggaamiyaha lagu sheegay maamul gobleedada waan soo dhaweynayaa, awoodii waxa naga bixi doonta Ra'sul wasaaraha iyo madaxweynuhu waxay kala wataan, Puntland, Jubbaland iyo Galmudug ee soo afjarmi doonta siyaasadda ahaanta qaboowday ay soomaaliya gaadhayna si shakhsiyan gaar ah ayaan nasiib ugu yeeshay waliba codkayga aan ugu raaxaysanayaa in aan dimuqraadiyad gaadhnay, waxaa leeyahay waan bogaadinayaa qof kasta oo shaqeysay oo ay gudidu ugu horeyso .

- **Qodobka 52aad:** Dorashooyinka sawaxanka hala iga yareeyo, qofkii doodda qabaana waa soo istaagi doonaa, doorashooyin sidee loo qabanayaa, side lix doorasho isaga soo daba dhici kartaa in intaas oo doorasho la qabto ma hayno dhaqaale inagu filan mahayno awoodo anigu filan hadayba deegaanadeena qeybo ka mid ahi ku maqanyihiin, sidaadaradeed waxaan soo dhaweynayaa in wax laga beddelo qodobkaas.

6) **Xil. Mukhtar Ahmed Hassan:**

Guddoonka waa mahadsanyahay sidookale xildhibaannada sharafta leh iyo guddiga dib-u-eegusta iyo hirgelinta dastuurka, la socodka dastuurka aad bay u mahadsanyihiin.

Haddii aan toos u gudo galo cutubkaan afaraad, sida aad la socotaan qodobaa inta badan waa wada cuseeb oo horleh, waxaa haboonaan lahayd ciwaanku waa matalaada shacabka matalaada shacabkana kuma koobnee macal shuruudihii doorashada iyo dhisidii guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka, waajibaadkiisa xubnihiisa iyo shuruudaha waxaas oo dhan ayaa la soogeliyay, xoogaa waa laga haboonaa waxay ku fiicnayd in ay ku koobnaato matalaada shacabka sida ciwaanka laga fahmaayo.

Sidoo kale guddigu waxay xuseen in ay qodobadu saddex qeyb u kala qaadeen qodobbo ka mid noqonaayo dib-u-eegista dastuurka, qodobo noqonaayo xeerar iyo qodobo siyaasadeed iyaduna waxaa fiicnaan lahayd in ay faahfaahiyaan oo ay dhahaan intaas oo qodob ayaa dib-u-eegusta dastuurka gashay, ileen markii ay ka hadlayeen heshiiska madasha wadatashiga

qaran ayaa laga soo qaatay qodobadaan dhan iyadaas ayay saddex u kala qeybiyeen, waxaa fiicnaan lahayd in ay yiraahdaan intaa waxay gashay dib-u-eegista ayaan gelinay intaan xeerar ayay noqdeen intaana waxay noqondoonan siyaasado iyo heshiisyo sidaas ayaa haboonaan lahayd.

Ugu horeyn awoodaha shacabka, guddigu waa mahadsanyihiin qodobka sida ay u xuseen Allah ka sokow, hadii kale waxay 'Alxukmu li shacab' tii dimuqraadiyada tooska ee erayga sida looga soo guuriyay gaalada waa ay ka badbaadiyeen, maaddaama dastuurka sida Ra'isul wasaaraha sheegay dastuurka la rabo in uu noqdo dastuur islaami ah, guddiga arrintaas waan uga mahadcelinaynaa.

- **Qodobka 48(4)** ee cusub ee ay kusoo dareen faqradaas waxay leedahay: "Dowlada Federaalka Soomaaliya ayaa ka ma'suul ah in ay xaqiijiso in dawlad goboleedkasta dhaqangeliso nidaam dimuqraadi ah oo waafaqsam dastuurka", qodobka waajibaadka guddiga ayuu galayaa kuma haboonayn in meeshan hdada mabaadii'da guud looga hadlaayo lagu soo daro ma ahayn qodob shaqo waaye, waxaan ka codsanaynaa in ay ka saaraan ay saxaan oo booska uu leeyahay ay geeyaan.

- **Qodobka 47aad** waxaan ku waafaqsanahay xildhibaannadi aniga iga horeeyay qodobkaas waa la tiray, guddigu waxay sheegeen nuxurkiisa in lagu faahfaahiyay cutubka, xildhibaannada waxaan ka codsanayaa in aan is dhageysano hadal hadal kama dheera si aan anagana u kala faa'iidaysano, qof wuxuu hortaan ka hadlayna aaddan adigu ku daakin hadhowto, waxay sheegeen in nuxurkiisa lagu faahfaahiyay nuxurka laga hadlay iyo maba islaha nuxurka uu qodobkaan ka hadlaayo, xildhibaannadi hore ayaan ku raacsanahay qodobkaan wuxuu leeyahay shuruuc gaar ah oo uu soo saari doono Golasha shacabka waliba awoodaas golaha shacabkaa iskaleh in laga qaadana ma aha, shuruuc uu soo saaridoono uu leeyahay ayaa lagu faahfaahinayaa, xisibiyada shuruudahooda diwaagelintaooda waxaas oo dhan magaranaysaa waxa laga hadlay maba islaha waa in qodobkaan meshiisii lagu soo celiyaa

- **Qodobka 49(h):** Guddiga waxaa ka mid ahaa in ay xaqiijiyaan in uu xaqiijinayo doorshadaas in bulshada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay helaan weliba Federaalka kuma qorna 'Federaalka' hala soogeliyo, in ay helaan matalad caaddil ah siiba beelaha laga tirada badan yahay. Beelaha laga tira badanyahay yaa la yiraahdaa? goormaa la ogaaday? tirokoob miyaa la sameeyay? marka beelaha laga tirada badanyahay kaliya in la iska soo qoro ma aha wax dastuuri noqon kara ilaa waxaan lasoo ogaado tirokoob la sameeyo la sooxaqiijiyo markaas kaddib ayaan u aqoonsankarnaa kuwaan waa kuwo la gatiro badan yahay kuwaana waa kuwo tiro badan, kuwo inay tiro badanyihiin isu haysta oon tiro badnayna waa jiraan, kuwo iyagana in laga tiro badanyahay la sheego oo laga yaabo kuwo badan inay ka tiro badanyihiina waa jiraan taas aan iska saxno .

- **Qodobka 50aad**: "Hanaaanka doorashooyinka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federalka Soomaaliya"; meshaan xoogaa awooddi ayaa golaha shacabka laga xaday Baarlamaanka la yiri waa lanoo qarinooyaa waan u jeednaa dhibmalaha, lakiin fahfaahinta yaa waxay sii galaysaa, faahfaahintibaa waxay dheheen faqradani waxay qeexaysaa hanaanka doorashooyinka in uu yahay mid ku salaysan qof iyo cod xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa qeexaya faahfaahinta habka matalaada isku dheelitiran ee liiska xiran, digiin miyaa hadhowte kuu sheegnay maa laga wadaa mafahmin, faahfaahin

ayaa liis xiran lagu sii tilmamay, horta marka horeba waxaan dastuur magalaayaan sababtoo ah adaa faahfaahinta ku qortay qaybta dastuurka kumajirto.

Liiska xiran aniga labo sababababood ba waan kasoo horjeedaa qof kastana waxaan u malaynayaa markuu meeshaan soo istaago isagaa iskaleh codkiisa waa arki doonaa xildhibaannada kale iyagu codkooda sida ay u dhiibtaan, liiska xiran waxaa waaye marka horeba xisbiga ayaa waxmulaya ciddii markaa guddoonka ah lama yaqaano xisbi ayaa loo codeeyay 'criteria' da qofka musharaxa uu lahaa iyo sidii uu dadkiisa ku qanacsan lahaa qofnimadiisii ba la arki maayo xisbigaas ayaa loo codeeyay.

Arrintaan shareecada islaamka dhinaceeda marka la fiiriyo 'beycul qarar' wax la dhaho ayaa ku jira, sanduuq haddii aan kuu dhiibo tusaale ahaan oo aan ku iraahdo sanduuqaas waxa ku jira ayaan kaa iibiyay, baycaas ma anasaxaayo, qofbaa la rabaa in 'criteria' lagu doorto guddigana wuxuu ka koobnan karaa dad kala duwan qof wanaagsan oo munaasab ku ah oo 'fit' ku ah iyo qof aan ku ahayn mas'uuliyad way dhicikartaa 'jumlatan wa tafsiilan' aa la isku doortay meesha la dhihi lahaa, aniga waxaan taageersanahay shaqsi hebel oo la yaqaano oo hebel hebel ah in 'criteria' diisa lagu doorto, shacabka markaas ayay dhihi karaan qof kaas ayaan dooranay 'beycul qarar' ki meesha wuu ka baxaayaa, taas waxaan leeyahay yaan hadhow naloo keenin xisbiga markii sharciga lasoo saari doono ayunbay ku jirtaa., hadda inta kuma jirto kolay meeshaas ayaan waxaan ka fahmeynaa tusmo in laga siisameeyay

- **Qodobka 53aad**: diwaan gelinta ayadana waxaan rabaa in ay noqoto 'manual' maxaa yeelay dalkeena hadda ayaan bal wadi la garaarin goobo dawladu ay gaarin oo faro badan ayaa jira dadkeenii wacyigoodui iyo baraarugoodii waa uu liitaa, haddii layiraahdo inta diiwaangashan waxaa lumaayo lambaro badan oo coddayn lahaa, marka waxaa leeyahay in iyadana 'maual' laga dhigo oo uu qofku coddaynkaro islamarkaasba.

- Isla Qodobka 53aad cod bixiyayaasha marka laga hadlaayay waxaa la yiri codkooda waa in la ilaaliyaa rabitaankooda iyo kalsoonidooda, macnaha meesha ay iyaga rabaan waa qodob fiican laakiin waa in la ilaliyaa baddelkeeda waxaan qabaa waa in aan lafaro gelin, oo la sii adkeeyo, waa in aan qofka rabitaankiisa iyo kalsoonidiisa lagu farogelin.

- **Qodobka 53(4)** waxa la yiri dadka ka reeban ama aan xaq u lahayn diwaangelinta waxaa lagu soo daray qof ay maxkamadda awood u leh xukuntay, maxkamada in la cayimo ayay ahayd ama cayino ama xukun kama danbeys uu ku dhacay, ama, ama ayaa soo laabatay markas ayaa waxaa la yiri ama danbi uu galay awgeed xabsi ku jira, dembiga waa noocee marka, dembiga qofdhan looga reebi kara waa noocee ilayn waxaa la cadeeyay marki hore arrin doorasho la xariirta ma dembigaan, danbi doorashada la xariirara ayuu noqonayaa? mise wax kale ayuu noqonayaa. Waxan rajaynayaa in gudigu diiwaangashteen.

**7) Sen. Mohamed Ali Yusuf:**

Ramadan Kariim, shirguddoonka, Habdhoowreyaasha, dhammaan xubnaha Baarlamaannada dimuqraadiga Jamhuurıyadda Federaalka Soomaalıya, shaqaalaha iyo ciidamada nabadgelyada, Asalaamu Calaykum Waraxmatullahi Wabarakaatuh.

Mudane guddoomıye qodabada lagadoodayo marka intooda badan kamid ma aha dastuurka kumeelgaarka ah, waxaa weeye qodobo ay soo gudbiyeen madasha wadatashiga Qaranka,

waxaan rabaa inaan halkaan ku xuso oo aan usheego mudanayaasha iyo marwooyinka qodobbadaa madasha laga soo gudbiyay inaan la isku waafaqsanayn oo maadasha qaarkeed diidantahay ilaa iyo shalayna ay kaga hadlaayeen idaacadaha oo ay leeyihiin qodobkaaas la soogudbiyay raali kama nihin kamidna ma nihin.

Hasayeeshee siyaabahaan uga hadlaayo cutubka 4aad iyadoo isku duubduub ah waxa weeye, qodobkaani wuxuu xeerinayaa oo aynu ka doodeenaa waxaa weeyaan ee cusub habka sıyaasadeed ee aan ku noolnahay ee hadda oo aan adeegsano midka duwan ayun xeerinayaa, waxuu xeerinayaa awood madaxtooyo ayuu xeerinayaa iyo labadiisa xisbi, anaguna waxan ku noolnahay ilaa iyo xuriyadiina ku soo noolayn marka laga saaro muddadii yared oo ay ciidamadu wadanka hayeen nidaamka 'parlementarian' ka ah, qodobkaan ama cutubkaan 'totally' wuxuu ka hor imaanayaa nadaamka 'parlamenterian' ka ah waxuuna inoo jıhaynayaa nidaam 'presidential system' ah, nidaamkaas isaga ah anigu waxaan qabaa marxalada soomaaliya hadda ay marayso iyo waxa eeynu ku jirno iyo sida aynu nahay iyo xaaladihii aynu soomarnay oo dagaaladii sokeeye oo aan wali laga bogsoonin, 'system' kaa 'presidential' ka ah in uuna munaasab inoo ahayn, 'system' kaas ma aha qolada ugu horeeyso inagu qaatay ama ka hadlaya, wadamada sookoraayo ee afrika 'Asia' iyo 'Latin America" ayaa ku dhaqma wuxuu gaarsiiyay burbur iyo dhibaato ayuu gaarsiiyay, wuxuu gaarsiiyay nidam kaligıis talis ah oo madaxweynaha iyo labadiisa xisbi ay waxwalba yihiin, xukunkana ay ku joogi karaan 20sano ama 30 sano kabacdına inqilaab, burbur iyo talis ciidan ayuu sababaa.

Sidaas daraadeed, Mudane Guddoomiye waxaan soojeedınayaa qodobkaas isaga ah inta ka hadleysa 'presıdential' ka inayna ina anficin, waa in meeshana laga saaro ayaan soojeedinayaa, oo nidaamkeeni 'parlament" ahaa oo dımuqraadıga ahaa oo aynu ku dhaqmeenay ilaa iyo waqtigii eeynu xuriyada qaadanay aynu isagu haaysano, waxii asaga aynu ka sixikarno oo aynu dastuurka kaga hagaajın karno aynu kaga hagaajino ayaan qabaa. Sidaa daraadeed, qodabbada ka hadlaya madaxweynaha iyo saddexda xisbi waxaan aaminsanahay in meesha laga saaro oo la tirtiro ayaan soojeedinayaa. Aad ıyo aadna waad u mahadsantihiin.

**8) Xil: Mahdi Mohammed Gulaid:**

Bismmllahi Raxmaani Raxiim, Alxamdullilaah. Shirguddoonka labada aqal, xildhibaannada sharafta leh ee Baarlamaanka Soomaaliyeed, waxaynu maanta gudagalnay cutub muhiim ah oo run ahaantii dawlad dhiska Soomaaliya iyo qarannimadeena ahmiyad wayn ugu fadhiya, waxaan soojeedin lahaa xildhibaanno maaddaama uu xilka uu ina saaranyahay in si fiican oo hufan aynu uga doodno loogana qayb qaato waqtiga oo yar awgii waxaan gudagalayaa doodda qodobada ay soojeediyeen labada guddi oo ay ka soo shaqeeyern markii laga reebo qodob, 15-ka qodob ee kale ay yihiin kuwo cusub.

- Waxaan ku bilaabayaa **Qodobka la tiray ee 47aad** oo aan la qabo saaxiibadaydii soojeediyay in qodobkaa la daayo, laakiin maaddaama laba aqal oo Baarlamaan aynu leenahay halka doorkii hore lagu koobay Golaha Shacabka oo kaliya, imika labada aqal ee Baarlamaanka hadda ay ka qaybqaataan shuruucda doorshooyinka, xisbiyada iyo diiwaangalinta oo sidan u qoran: "Shuruucda ku saabsan xisbiyada iyo diiwaangalintooda iyo doorashooyinka heerarka Dawladda Federaalka iyo guddiga Qaranka ee madaxabanaaan ee doorashooyinka oo kolay aad halkaas ku soo dari doontaan iyo xuduudaha, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo ay soo saaraan labada aqal ee

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya", annigu waan soo celin lahaa, waxaana ku talin lahaa in la soo celiyo si gaar ahna loo siiqeeyo.

- Qodobka labaad ee aan rabo wax yar oo toosin ah in aan ku sameeyo waa **Qodobka 49(g)** oo dhigaya "Damaanad qaada dhammaan qaybaha iyo kooxaha" kooxaha halka aad tiraahdeen "ururada" ayaan oran lahaa, ururo bulsho, ururo siyaasadeed, ururo ciyaaro waxaas oo dhan way noqonayaan, kooxuhu macno kale ayay ka tarjumaysaa luuqad sharcina ma aha.

- Waxaan u gudbayaa **Qodobka 50aad**: Hannaanka Doorashooyinka JFS waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo waafaqsan qodobkan, in xeerka doorashooyinka aynu soo saari doono ee heerarka dawladnimada ee kala duwan lagu faahfaahiyo habka doorasho iyo nidaamka doorasho ee aynu qaadan doono. Waxaan kale oo akhriyay faallada Bogga 55aad ee warbixinta oo aad kaga hadasheen hababka kala duwan se taa waqtigeeda ayaan gudagali doonaa, habka liiska xiran iyo habka liiska furan oo labaduba la yiraahdo isku dheelitirka kuraasta iyo codadka ee nidaamka 'Proportional Reprsentative' ee 'closed List' ama 'open list system' oo labadaba midkood uu faa'iido leeyahy khasaarana uu leeyahy, midka kalena uu faa'iido leeyahay sidoo kalena khasaare uu leeyahy daldaloolona uu leeyahy, iyo misana waxa aan u gudibi doonaa habka 'first the past the post', habkana waxay ina horiman doontaa marka sharciga doorashooyinka la gudagalo, waxaana qabaa in habka doorashada aan lagu qorin dastiuurka ee sharciyada loo dhaafo.

- Waxaan kale oo qabaa **Qodobka 51(2)** waan u iman doonaaye sidee ayaynu u xalinaa ama u daawaynaa qaran ahaan sida aynu innaga u naalno, marka aynu doorashooyinka gudagalayno waxaan isleeyahy marka magaalada xamar laga hadlo 'IDP-ga' ama barkacyaasha waxaa ina anfacaya in aynu yeelano 'Single Constituency' nidaamka la yiraahdo oo wadamada qaarkood ay ku soo dhaqmeen waqtina ay ku soo dhaafeen, laakiin markii dambe kursiga inta uu ku imanayo in la qiimeeyo laguna saleeyay, taas waxaa sii waafaqsanahay xiligeedana waan ka hadli doonaaye habka liiska furan oo ah xisbigu wuxuu yeelanayaa oo ku galayaa doorashada 'Proportional Reprsentative open list system"oo ayna ahayn 'Closed list system'. Marka qofka la dooranayo xildhibaannada walwal ayay qabaan, anniga liiska 275 halkee ka galayaa? xisbiga sideeduba qoorwaynta ayuu ahmiyad saarayaa oo xisbigaas uu leeyahy, laakiin marka ay liistadu furantahy waxaa la qorayaa 275 magac oo taxane ah oo ah 'horizental' aan ahayn 'Vertical', marka taxanaha ayaad ka dooranaysaa qofka aad rabtid qofka uu yahay,

- Tusaale ahaan Sh. Adan Maxamed Nuur waa Guddoomiyaha Golaha Shacabka kursigiisu waa 189 haddii aan saxsanahay, haddii habka liistada furan iyo nidaamka xisbiga la is waafajiyo taageerayaashiisa ama cidda uu ka soojeedo waxa ay ka coddeynaysaa Baydhabo, Xudur Koonfurgalbeed oo dhan, Luuq, Baardheere, Boosaaso, Kismaayo, Gaalkacyo meel kasta Jamhuuriyadda ah codka wuu ku soo aruurayaa uuna ku soo dhacayaa, beeshiisa kali ma aha ee taageerayaashiisa ee ku fidsan Jamhuuriyadda ayaa u coddaynaayo, aniga qudhayda habkaas ayaan ku tartami doonaa haddii uu alle yiraahdo. Nimanka reer waqooyiga iyo gabdhaha reer waqooyiga haddii lifaaq raadinayaan iyo haddii kale waqtigeeda haka doodaan, waana u iman doonaa. Waxaan idin xasuusinayaa 19 dal ayaa nidaamkan isticmaala listada furan, 17 dal waxay isticmaalaan listada xiran, doodan oo balaaran waxaan gudagali doona sharcigan waqtigiisa marka la gaaro.

- **Qodobka 51aad:** Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta sida tooska ah ay u dooranayaan waa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Aqalka sare taasi waa (A). (B) Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka ee JFS 2019, Diseembar ayaan hal abuur la imid oo hal abuur soojeedin ah, waxaan ula imid hoggaankii dalka ee xiligaa iyo shirgudoonkii Golaha Shacabka khaasatan guddoomiyaha, waxaan iri wadankan 5 madaxwayne iyo 16 ra'iisul wasaare ayuu marayaa, ee ka rog oo haddana saar, kana siib kana saar ayuu marayaa madax iyo minjo ayaa la iskula jiraa, madaxwaynaha 19 awoodood ayuu dastuurka ku leeyahy, ra'iisul wasaarahana wuxuu leeyahy 4 awoodood iyo 9 uu la wadaago xukuumadda uu odayga u yahay, wuxuu leeyahy 13kaas, madaxwaynaha 19 kaas awood maalinta uu Raiisul wasaaraha magacaabo ayuu Awoodda 1aad leeyahy inta kale oo dhan waxay kaga xirantahay ummadda, ra'iisul wasaraha 13 ka awoodood ee uu leeyahay iyo xukuumadiisu waxay kaga xiranyihiin Madaxwaynaha.

  Waa ra'iisul 'calal caqab', madax iyo mijin ayaa la iskugu xiray nidaamkan inama dhaqayo dee inta ra'isul wasaare la riday soo dhisidooda waqtiga ku lumaya waynu ognahay, marka annigu waxa aan soojeediyay nidaam madaxtooyo, dee odayaashi way joogaan labada hoggaan ee dalka iyo hoggaanka siyaasada dalka iyo hoggaanka sharci dejintaba waan u sharaxay, markaasna annigu waxaan qabay taariikhda aynu leenahay awgeed in aynu qaadano madaxweyne iyo laba ku-xigeen oo ka kala imanaya labadii gobol ee 60kii midoobay ee waqooyi iyo koonfur, madaxwaynuhu isagu waa la dooranayaa labadiisa ku-xigeen ee lala dooranayona halkaas ayay kala matalayaan, madaxwaynaha codka Soomaaliyeed ayuu ku xiranyahay ama Soomaali ayuu noqon karaa ama waqooyi, laakiin laba kuxigeen in ay jiraan taariikh-da labaad aynu leenahay waxaa weeye nidaamka Beelaha ee shanta Beelood oo aynu hadda u samaysanahay.

  Fikirkaygii hore ee 2009 Gdudoomiye Maxamed Nuur saliyada ay iga marqaati yihiin, hadda waxaan ku dhisayaa nidaamka 5 beelood waxaan leeyahy Madaxwayne iyo 4 ku-xigeen aynu qaadano oo 4ta beelood ka kala yimaada oo shaqada loo qaybiyo ama madaxwaynaha gacanyareyaal u noqdaan, dalkan waxa uu u baahanyahay 24/7 in la shaqeeyo, shaqooyinka golaha iyo hay'adaha madaxabanaan ayay madaxweyne ku-xigeenadu kala qaadqaadanayaan, deedna shaqada halkaas ayay ka wadayaan.

  Mid baan idiin sheegayaa maalin dhowayd nimanka tunkawayn ee maraykanka dhagaysanayseen ninka la yiraahdo Antony Bilinken oo aad dhagaysanayseen maalin dhowayd oo lahaa 'if you arn't on the table you are on the menu' ee beelaha Soonaaliyeed 3 beelood ee 23 sano ee u dambeeyay 'on the menu' buu ahaa, waxay fursad u tahay in ay 'on the table' yimaadaan.

- **Qodobka 51(b)** Beelahaa miyaan magaca ku dhuftaa, afka miyaan ku balaariyaa waad garanaysaan, marka nidaamkan aan dagayay khadra ayaa waxa ay ku heestay heesta miyaan halkan ka qaada mar mar waan ku dhuftaye, wa mahadsantihin guddoonka ayaa i eegaya. Walaalayaalow in aynu salka ka degno ayaynu u baahanahay nidaam madaxweyne iyo 4 ku-xigeen aynu wada qaadano, beelaha soomaaliyeedna way ku niyad samaanayaan wayna ku aamin qabayaan, marka ani halkaa waxaan soojeedinayaa madaxweyne iyo 4 ku-xigeen in laga dhigo halka la leeyahay Madaxwayne iyo ku-xigeen kaliya.

  Waxaa ku xigta Hoggaamiye ku-xigeenka waayo sababta aan ku sii duldhisay waxaa weeye waad ogtihiin madaxweyne Xasan Sh. Maxamuud iyo Ra'iisul Wasaare Xamse Cabdi Barre

waxay ku wadajoogaan saaxiibtinimo iyo odaynimo iyo isu dulqaadasho, laakiin sharci kuma wada joogaan. Ra'iisul Wasaaraha haddii uu yiraahdo hadda madaxwaynaha qanjiiri oo xaalad ku fur awoodo badan oo dastuuri ah ayuu leeyahy uu haystaa, Madaxwaynaha haddii uu isyiraahdo Xamse is dhaafi awoodo badan ayuu Dastuurka siiyay oo meeli badan isna dhaqdhaqaajinaayo, marka miyirqab iyo soomaaliyey niyad sami ayaa lagu wada joogaa ee sharciyad laguma wada joogo, nidaamkaas saldhig wuu inoo horseedayaa xaaladana waynu kaga guuraynaa.

- **Qodobka 51(c)** Waxaan u imanayaa Hogaamiyaha iyo Hogaamiye ku-xigeenka annigu waxaan oran lahaa ereyga 'Governor' turjumaad fiican xildhibaan rooble iyo dadka af-soomaaliga innogu fiican 'Governor' nimankaas haloo yara caymiyo, haddii Madaxwayne ma noqonaysaan la yiri haloo yara caymiyo 'governor' turjumid fiican oo ay qaadan karto haloo sameeyo ayaan soojeedin lahaa, marka ereyga 'governor' turjumid taa ayaan ka bixin lahaa.

- Waxaan u imanayaa **Qodobka 51(2)** xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaan lagu dooranayaa halka aad tiraahdeen waxaa lagu dooranayaa si toos ah cod qarsoodi oo madaxbanaan, halkaas ayaan ku joojinayaa. Halkan dambe aad tiraahdeen dhamaan muwaadiniinta buuxiyay shuruudaha codbixiyaha waa in aynu ku faahfaahino dastuurka mabaadi'da guud ee qoran xaga dambe.

  Nidaamka 'Single Constituency' ayaan u imanayaa wax badan ayuu dawo u yahay horayna waxaa u qaatay wadanka Ciraaq waad eegi doontaan 2015 xaalada ayayna kaga soo gudbeen, sideena oo kale ayay u burbureen waxaa kale oo aad ugu dhaqmay wadanka Israel nidaamka hal dagmo doorasho oo wayn oo xildhibaannada la taxo, waxaan aniga ku soo kordhiyay halka listada xiran uu ahaan lahaa aynu ka dhigno liistada Furan.

- **Qodobka 51(4):** Halka 4aad ee Madaxwaynaha iyo ku-xigeenka ah anigu waxaan soojeediyay madaxwaynaha iyo ku-xigeennadiisa, hogaamiyahana waaxaan iri 'Governor'.

- Isla **Qodobkan 51(6)** xubnaha u tartamaya kuraasta golaha wakiilada ee dowlad goboleed kasta waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbanaan, halka aad dhamaan tiraahdeen annigu waxaan oran lahaa waa in gobol doorasho laga dhigaa haddii kale way is dulminayaan, marka gobol kasta gobolada waa 2 ama 3, Hirshabeele xildhibaanadooda waxay u kala jabsanyihiin Hiiraan iyo Shabeelada Dhexe, marka xildhibaanada sidaa haloo qaybiyo oo haku soo baxaan yaan la isku wada qaadanin meesha haddii kale dulmi ayaa ka dhacaya. Koonfur Galbeed 3 gobol haloo kala jebiyo, marka halka dhamaan xildhibaanada iyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka aad tiraahdaan, guddoomiyaha ayay ku soconaysaa ama 'Governor' -ka gobolada hala kala jabjabiyo xildhibaannada sida ay imika u fadhiyaan ayay ukala qaybsanyihiin, marka gobol doorashada aan sii bilowno oo aan dhiiri galino.

- **Qodobkan 51(7)** Taana wax bay ka taraysaa golayaasha deegaanka waxaan qabaa fikirka ah in golaha deegaanka la doorto laakiin duqa magaalada iyo ku-xigeenka golaha deegaanka uu iska sii dhex doorto, haddii kale duqa magaalada 'dictator' buu noqonayaa shacab baa i doortay yiraahda oo aan la loolin karin.

- **Qodobka 52aad:** Muddada xilhaaynta ee dastuuriga ah ee sida tooska loo dooranayo ee ku xusan qodobka 52(1) waa 5sano halka aad tiraahdeen, anigu 6sano ayaan oran lahaa,

waxaan soojeedinayaa muddada xilhaynta ee madaxwaynaha iyo baarlamanka in ay 6sano noqoto, sababtuna waxaa weeye, wadan sidan u burburay muddadiisu way yartahay markiiba khilaaf siyaasadeed baa yaalo, dagaalo rabshado iyo buuq baa imanayo, marka hadhoow hadduu 'term' ka labo ahan lahaa oo min 6sano ah Baarlamankuna termkiisu waa 6sano, anigu intaas baan ku darsaday horumarinta dhaqaalahana haddaad dhaqalyahanka waa wayn ee aduunka aad dhagaysato ummadii inta xasilooni siyaasadeed ay leedahay oo ay salka ka fadhido ayuu dhaqaalahoodu kobcaa, amnigooduna hirgalaa, laakiin haddii uu khalkhal siyaasadeed jiro amnigiina meesha wuu ka baxayaa dhaqaalihiina waa uu burburayaa hal mid unbaan ku biirin waxooga baa ii haray laakiin halkaas unbaan soo codasanayaa.

- Isla **Qodobkan 53(4)(b)** qof ay maxkamad awood leh ku riday xukun kama dambays ah oo la xiriiro dambi doorasho, ee waa halkan qofka dee in loo diiwaangaliyo cod bixiyo aan ahayn ayuu qodobka ka hadlayaa? in kasta oo sharciga doorashada iyo diiwaangalinta cod bixiyayashu uu aad usii faahfahin doono, anigu waxaan oranayaa yaan lagu koobin dambi doorasho oo kaliya ee fal-dambiyeed kama dambays oo uu ku dhaco oo lagu xukumay xiligaas waa uu ka xakamadaynayaa oo uu ka hor istaagayaa in loo diiwaangaliyo cod bixiye, waa mahadsantihiin.

9) **Xil: Abdullahi Farah Mire:**

Bismilaahi raxmaani raxiim: Mahadsanid mudane guddoomiye waxaan ku jirnaa 'chapter' kii ugu muhiimsanaa ee afarta 'chapter' een ka doodeyno waana 'chapter' siyaasadeed oo ka kooban 16 qodob oo 15 qodob oo kamid ah ay cusubyihiin, dhaliisha u weyn uu leeyahay waa in gabigiisa dhan uu yahay 'chapter' la baddalay oo dib loo qoray, laakiin 'chapter' waxa waaye yacnii 'tacdiil' lagu sameeyay ama wax-kabbadal lagu sameeyay mahee waxa waaye mid dib loo qoroo cusub, waxaan galayaa doodeyda oo aanoo qodobbada ugu muhiimsan xoogga saari doona :

- **Qodobka 48(2)** waxaan soojeedinayaa in doorashadaas ay noqoto mid ku saleysan deegaan doorasho wadanka dadku waa in ay matalaan deegaan iyo dad ay ka soojeedaan waa in ay matalaan, laakiin in nidaamkasta oo 'Indicator' bixinaaya ama tala bixinaaya waxaa weeye in uu noqdo 'close list' oo 'single 'constituency' ah, waxaa uu ku keenayaa dadka iyo la xisaabtankooda iyo dadkii ay matalayeen buu ku keenayaa, marka meesha u danbeysa oo ah aan takoor lahayn xukunka si toos ah ama si dadban si fududna u fahmi karo ee xeerarkiisa iyo habraacyadiisa waana in uu noqdaa mid ku saleysan hab deegaan meelo badan oo kale oo ay ku soo uruuri doontana way jirtaa .

- **Isla Qodobka 48(4)** faqradda cusub ee 4aad ani dadka qabaa ma ihi dawlada fedaralku in doorashooyinka dhan mas'uul ka noqoto, waxaan aamisanahay dalku inuu federal yahay dawlad goboleedyana iney jiraan, qodabkaan markaan marka sheegaya inay waxwalba waafaqsanaadaan dastuurka doorashooyinka ku saabsan heer kasta in dastuurka federaalka waafaqsanaadaan waxaan leeyahay yacnii yaan meesha laga saarin dastuurada iyo xeerka ay 'state' yadu leeyihiin waa qodobkaa faqradiisa cusub uu tilmaamaa xeerarka iyo dastuurada dawlad gobaledyada ay leeyihiin

- **Qodobka 47aad** waxaan second gareynayaa Sen. Deeqo iyo Xil. Jeesow oo hadaayay soojeediyay in aan qodobkaa meesha laga saarin ee la soo celiyo dastuurkana tafaasiil badan oo xeerar ah aan agu qorin oo aan xeerarka ku qoron doono.

- Qodobka iigu xiga waxaan second gareeynayaa Xil. Jeesow oo qodobka k ahadlaya mabaadi'da guud, mabaadi'da guud waxaan **Qodobka 49(i)** wuxuu dhigaayaa dhiirigalinayaa nidaamka xisbiyada badan sida qodobada kala duduwan oo ka horeeya u qoran yihiin erey sugan inuu ku qornaado baan soojeedinayaa ay noqoto "damaanad qaadaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada baddan".

- **Qodobka 51aad** oo ka hadlaaya nidaamka 'presidential-ka', waxaan aaminsanahay wadankaan nidaamkiisa siyaasadeed in uu heshiisyo bulsho uu ku dhisanyahay nidaamka madaxweyne iyo madaxweyne ku-xigeen waxaa lagu sababeynayaa dalkuu midnimadiisa ilaalinayaa khilaafkuu waxa weeye yareynayaa, sababta ineysan ahayn in nidaamku baarlamaani uu yahay ra'isul wasaare iyo madaxweyne uu yahay sababtu waxaa waaye dadkaas 'leadership' ka qabanaayay iyo damacooda aan sharci waxa weeye xadeyneyn iney iska horkeeneysay baan aaminsanahay nidaamka aan haysanaa inuusan ceyb lahayn nidaam 'presidential' oo taladii hal meel ah lagu uruuriyay anagu anaga 'state-yada' joogney oo tijaabinay waxaan musuqmasuq iyo ku tagri fal awooded ahayn lagama dhaxlo.

  Sidaa darted baa nidaam kaan is 'balance' gareeynaya, oo nidaamka baarlamaaniga ah baan xoojinayaa haddiiba ay laba jeerba ay tahay awoodda in meel lagu aruuriyo ha noqoto nidaam baarlamaani ah, oo ra'isul wasaare aan leenahay awood badan madaxweynuhuna ama uu noqodo madaxweyne sharafeed ama halkaas xukuumadu waxaa weeye ku dhismato lkn waxaan adkeynayaa oon xoojinyaa in ceebaha nidaamka waxa waaye madaxweyne oo nidaamka presidential ah ay kabadan tahay nidaamka baarlamantariga ah sida saxda ahna ama sida ay kuquruxbadantahay, dalkaani heshiisyadiisa ku dhisan heshiisyada bulsho in loo ilaalsho, oo nidaam xasiloon waxaan ku heli karnaa ineynaan wax la siku khilaafsanyahay oo hadhowdii natiijo siyaasadeed oo miro dhal ah ayna ka dhalaneyn inan manta sharciyeeyno.

- Qodobka xiga oo kusaaabsan in dowlad gobaledyada loo bixiyo hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen anu waxaan qabaa waa iska qodob psychological ah, cidii xataa soo qortay nafsiyad buufis laxiriira, yacnii qodob hadii aniga boqor la ii bixiyo iyo hadii madaxweyne la ii bixiyo waxaa awoodii aan leeyahay baa waxaan ahay xadideysa, hadaan madaxweyne dowlad gobaleed ahay awoodaydu dowlad gobaleed bay ku xadidantahay, madaxwene dowlad federaal ahna awoodiisu meelbay ku xadidantahay, carabtu waxay tiraahdaa 'laa mushaaxata fil isdilaax', magaca la isku bixinayo ma uu laha ceebta, waxa ceebta leh waxaa waaye awoodda loo kala qeybsanaayo, marka hoggaamiyaha hala yiraahdiyo hoggaamiye ku-xigeen hala yiraahdo waxaan aa minsanahay 'state-yada' waxa uu dastuurku u qiraayo in ay leeyihiin dastuuro, dadka deegaankaas dega waxa ay u gartaan dadka hoggaaminaya iyo dadkooda siyaasiyiinta ah in ay magaca ugu yeertaan, magacaas aa hadii ay dimuqraadiyad jirto waxa saxda ah, laakiin waxeena inagu halkaan uga yeerinayno waxa weeye iney noqoto uun hoggaamiye iyo hoggamiye ku-xigeen cid lagu raali galinayana garan maaayo, waxaa dastuurka lagu kala saarayna waxa ay tahay dastuurka waxa lagu kala saaraa awoodo awoodda ayaa lagu kala saaraa, laakiin hebel maxaa magacee yelanaa kan magecee yeelanayaa arrin macno leh ma ahan, dawladaha lehna macno waxa weeye ma tirto oo kan hadda 'Ethiopia' dhow jiraa cid uma dhibto oo kan soomaali galbeed madaxwene la yiraahdo kan 'Oramiya' joogana madaxwene la yiraahdo taasna intaas ayaan uga baxaayaa.

- Waxaan sidoo kale rabaa in aan taabto qodobada dhamaan ku salaysan oo kahadlaaya xubnaha u tartamaya kuraasta wakiilada dowlad goboledkasta waxa ay si toos ah cod qorsoodi ah oo madax banaan oo u codeynaya muwaaddiniinta deegaanka dagan, 'state-yadu' deegaaney leeyihiin dad dagan  ayay leeyihiin, sida saxda ah aan aamisanahay hadey heer dowlad fereraal tahay iyo hadey heer dowlad gobleed tahay xildhiban aan calaamad iyo sumad lahayn iyo deegaan uu matalaayo waa uun masuuliyad, oo la luminaayo waaye sidaa darted baan waxaan **aaminsanahay in ay deegaan doorasho  ku saleysnaato aysan ku saleysnaanin wax duuduub ah aan la garanayn.**

- Mudada xil haynta ee shanta sano laga dhigayna waxaan soo jeedinayaa **in lagu daro oo ka bilaabaneysa doorashada kadhalaneysa dastuurkaan yacnii markii uu dastuurkaan uu hir galo waxaa waye doorashada ka dhalata ka bilaabaneysaa in ay noqoto aysan noqon markas hay`adihii markaas joogay xukunka mid ay budo korarsi ku sameysanayaan.**

- **Qodobka 52(2)** waxaa ku qoran doorashooyinka hay`adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo doortay waxaa la qabanayaa hal xili doorasho oo mideysan marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinaayo doorashooyinka hay`adaha kale ee dastuuriga ah sida ku qeexan xeerka doorashooyinka.

- **Qodobka 2aad** aan  comenti gareynaayo waxaa waaye dastuurku xeerar ma refer gareeyee isagaa reference u ah xeeraka u ah marka dastuurkii inaad hada  ku 'mention' gareysaan xeerar uu waafaqi doono xeer doorashooyin qodobkaasi xogaa dastuuriyan wey dhaawaceysaaye, horta halaga saaro xeer doorashooyin masameynaaye halkaan waxa qeexaya halagu qoro qodoka ah doorashooyin midaysan waxaan aamisanhay  in ay tahay waxaan suurtagal ahayn oo 'practical' aan ahayn natiijada aan rabno ee laga raadinaayana ayasan ka dhalanin doorashooyinka, sida hada wadanku u sameysanayahay weynu naqaana xaalada soomaliland oo an wada hadalkeedu dhammaan waan naqaanaa, Puntland oo 'system' kaan aan wadno aan qeyb ka ahayn, madaxweyneheedana 'January' dooratay waan naqaana, isla sanadkaan 'November' 30 keeda madaxwene hadda la doortaa doorasha mideysan galaaya yacnii culeyska ay leedahay iyo in ay san suuragal ahayna waan ognahay in marka aan dastuur waxa aan ku jideyno aan suurta galeynin ceebteeda ayay leedahay, waxaan soojeedinayaa wixii 'pratical' ah oo soconaaya aan ku qorano sidoo kale waxaan garab taagnahay oo aaan taageerayaa xildhibaanadii iga horeeyay ee amiin jeesow ugu horeeyo oo kahadlay arimaha cod bixinta iyo wixii ku saabsan in xeer lagu soo saaro,  sidoo kale xildhinaan mahdi guuleed qodobadii uu kahadlay tafaasiisha badan ee Meesha ku qoran oo xeerarkiiyoo dhan halkan loo sooo raray waxaan soo jeedinayaa in xeerrkeeda loo daayo.

- Guddiga madxa banaan oo ku xusan qodobka 53(3) waxaan aaminsanahay in 15 xubnood aysan ku filneyn doorasho inta heer dowlad gobaleed iyo heer fereraal ah dastuur hadii uu nidaam federaal ah jiraana waa in dastuurkeenu qiraa in doorashada heer dowlad gobaleedna dowladeheedu qabsanayaan, heer federalna dowlada iskor joogteyn iney yihiin, waxaan garab taagnahay xildhibaan amiin jeesow comentiyada uu ka bixiyay qodobka 4aad.

Waxaan ku soo gabagabeynayaa oo daqiiqadeyda u danbeysa aan ku soo gababa gabeynaya in dastuurkaani hadii larabo in uu dhaliyo soomaali heshiis ah inuu dhaliyo oo mideysan waxaan ku qoraneyno inay yihiiin wax midnimada qoraaya mabaadi`da doorashooyinka waxaa kamid ah oo ay dasturkana hada gudigu ku soo qoreen wuxuu ilaalinaaya midnimada

dalka, doorashadu waa inay midnimada dalka ka turjumeysaa doorashada midnimada dalka ka turjumeysa waxay shegaysaa in ay tahay wax waaqici ah oo aan cidna katageyn oo aa cidna kutagri fal ku ahayn, awoodna aan meel ku uruurinaynin waa mid hufan oo madax banaan, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

10) **Xil: Ilyas Sheikh Ahmed:**

Asalaamu calaykum, Ramadaan kariim mudane guddoomiye waad mahadsantahay runtii in aad noo saxday dooda, sababta oo ay tahay afarta madax maanta lagama bixi Karin, marka in laba madax maanta laga hadlo, xildhibaankuna uu laba madax oo kale uu fursad u helo wax fiican ayay ahayd, marka in aad noo soo celiso fariinta marka la inoo soo diray waan ka naxnay, laakiin in aad gadaal ka saxday waad ku mahadsantahay, waxaan ka bilaabayaa doodayda **Qodobka 50aad** maka reformkaan wuuba na dhibay maa mid kale la keeno oo kan ka fiican oo is taagsan.

- **Qodobka 50aad** hanaanka doorashooyinka Jamhuuriyadda federalka Soomaaliya. Waa mid ku salaysan qof iyo cod waxaana lasoo saarayaa xeer uu baarlamaanka Federaalku soo saarayo,

- Meeshaan faallada lagu soo qoray ee madhabka matalaada isku dheeli tiray representaion close list, waxaas oo dhan xeerka ayay ku imaanayaan, halkaas ayaa looga doodayaa marka halaga daayo, Dastuurkana hada qodob ahaan uguma jirto, laakiin faallada xoogaa shaki ayay dhalisay halaga joojiyo, taasi waa qodob. Een arintaan xildhibaanka iga horeeyayna waa sheegaye Hogaamiye iyo Hogaamiye ku xigeen arin sociological ayada xataa waa in laga daaweeyo ayay rabaan, marka in madax wayne la yiraahdo ama governor la yiraahdo aad ayaan u ayidsanahay, doodayda inta kale oo ka dhiman waqtigayga waxaan rabaa inaan ku aruuriyo **qodobka 53(4)** Madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya waxaa si toos ah u dooranaayo dhamaan muwaadiniinta Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya ee buuxiya shuruudaha cod bixinta meel kasta oo ay joogaan, waxaan rabaa in aan qodobkaas faah faahin ka bixiyo sideedaba inaga ciladeena dalkeena Soomaaliya uu qabo sida la sheego waa khilaafka madaxwaynaha iyo ra`iisul wasaaraha, khilaafkaasna wax iska yimid ma ahan ee waa wax dastuurkeena abuuraayo anni ga doodayda waxaa waaye in aynu focus-ka saarno madaxwaynaha iyo ra`isul wasaaraha waa in awoodooda lagu kala bixiyo dastuurka, halka halamar significant change anaga dhan aan guuri lahayn oo presidential oo pure ah aan aadi lahayn, ani waxaan qabaa in marka hore kow hadi madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen la dhaho in awoodahooda loo kala bixiyo, hadii aan dadka awoodaha loo kala bixinin halkaas ayuu khilaafka ka bilaabanaa, marka labaad waa suno dabiici ah hadii wadanku dimuqraadi yahay in la is khilaafo wadanka markuu halnin haysto oo military ah awood ku haysto ayaa la oran karaa khilaaf ma jiro .
- 21kii sano ee hore ma khilaaf baa jiray oo hal nin baa haystay oo military baa awood ku haysto, markaas ayaa la oran karaa khilaaf ma jiro, hada 21 sano hore ma khilaaf baa jiray qofkii hadlaaba waa la dili jiray maxay ahayd heestii loo qaadi jiray, laakiin hadii aan rabno in aan dimiqraadi ahaano doodo way soconaysaa waana la is qabsanaa, waa doodaynaa waala iska hor imaan hayaa, wax mushukilad ah malahan, waxaa weeye Hay`adaha dastuuriga ah ayaa lagu kala baxayaa.

- waxaan tusaale idinku soo qaadan hayaa **ani waxaan rabaa madaxwaynaha hada jiro iyo ra`isul wasaaraha in awooda loo kala sooco**, **Baarlamaankana uu wax doorto** xitaa hadii

aynaan taas samaynin marka aan ka tagayno oo madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeenka aadayno waxaan qabaa in Baarlamaanka ay doortaan xitaa hadii aan taas dhibsanay oo aan ka tagayno madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeenka waxaa qabaa in baarlamaanka ay doortaan, lakiin Baarlamaanku ay soo doortaan shacabku sababta aan u lee yahay waan shegayaa, waa mida kowaa ee hada wxaan la soconaa dalkaan waxyaabihii ka dhacay hada dowladaan dowladii ka horaysay xildhibaano dowlada ka tirsan golaha shacabka ayaa la yiri xasaanada halaga soo qaado kaliya in ay dowlada ka firkir duwanaayeen, yaana dhahaya waa madaxwaynaha ay doorteen ayaa ka shaqayn haayo, xildhibaan hore wasiir hore ayaa gurigiisa la weeraray ilmihii waardiyaynayay ayaa lagu laayay isagii lagu dhaawacay intaas oo shido ah ayaa loo geestay, yaa u gaysan haya? madaxwayne ay baarlamaanka doorteen weeye, isagii marka maxkamada la geeyay oo qaadigii waxba waa lagugu wayay fasax aa tahay ayaa la yiri, qaadigii xilkaa ayaa laga qaaday waxaa kale oo la ii sheegay ma hubee leesinkii garsoorenimada xataa in laga ceshtay madaxwaynaha samaynhayo waa madaxwayne ay Baarlamaanka doorteen, bal u fiirso madaxwayne ay shacab doorteen oo baarlamaankaan aan aqoonsan doonin kii ay soo doorteen haduu tacadigaas ku sameeyay maxaa ka imaan kara madaxwaynahaas? dalkaan nin jeclaysi yaynaan ku dhisin aniga waxaan aaminsanahay madaxwaynaha markaan runta u sheegno oo waxa dalkaan danta u ah u sheegayno markaas ayaan u hiilinaynaa, laakiin durbaan haddii aan u tumaayo oo aan iskala xadroono hadhow inta wadada socoto ay irida kasoo xidhanto darbiga lagu taago, waxaad ogaanysaan golaha waa laga tagayaa rag kale ayaana ka talinaya arintaas ayada ah, marka ay dhaqaaqi wayso waa kow nidamakaan oo presidential ka ah oo ay dooran hayaan shacabka madaxwaynaha ciladaha uu lee yahay waxaa kamid ah waa la isku qabsadaa natiijadiisa, yaa noo daawaynayo haddaan natiijada isku qabsano? 'Kenya' ugu dambeesay maxakamada ayaa kala saartay maxkamada sare ma leenahay maxkamad wax noo kala saari karta, Waaba la cayrinaa qaadigii ayaa inta xilka laga qaado leesinka xaaa laga ceshan hayaa, managu filan yihiin maxkamadaha bari hadaan isku qabsano doorashada? naguma filna, Mareykanka oo ah world super power ah ayaa madaxwaynihiisii kan kii ka horeeyay Doorashada waa la iga dhacay ayuu yiri waala isku qabsaday, laakiin dal qaan gaar ah waaye codadka laga soo duubay waxaa kamid ah asagoo la hadlaayo 'state' governor oo dhahaya 11kun cod ah ayaan u baah nahay iigu dar uu lee yahay, Sharciga ma ogala laakiin innaga mid uu madaxwaynaha keensaday hadu dhaho 11kun iigu dar ma ahane 200 boqol ayuu ugu darayaa, "haa illeen qaangaar uma nihin uma bislin" dalkaan.

- Mideeda kale markii la yiraahdo doorasho shacab ayaa dooranaayo sensitivity ayay lee dahay, laakiin marka ay xildhibaanadu dadka soo doortaan nin walba deegaankiisa ayuu aadayaa oo isku yimaado ha doortaan madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen, laakiin arinta ah in sidaan lagu sii daayo waxay noo keenaysaa dhib fara badan waxaa kale oo xusid mudan Soomaliland xildhibaanadeeda ayaa madaxwaynaha doorta sidaas ayuu Jamhuuriyadda Somaaliya madaxwayne u yahay, hadii la dhaho shacab ayaa dooran haayo xagay ku arkayaan shacabka Soomaliland madaxwaynaha la dooran haayo diyaarad maa kusoo qaadaynaa? ileen ma tagi karnee laakiin markii mahdi guuleed oo la doortay uu madaxwaynaha doortay way ku filan tahay wax mushukilad ah kuma jirto sidaad ayuu ooga mid yahay oo Soomalilandna legitimacy uga haysanaa.

- Anigu waxaan qabaa walaalayaalow in aan doodaan si fiican u lafa gurno dalka madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeenka hadii uu aadayo iyo hadii madaxwayne iyo ra`isul wasaare aadayo intaba waa in ay labada gole doortaan, waxaa intaas dheer dadkeena waad ogtihiin qabiil iyo kala tag fara badan ayaa ku jira heerka litrecy-gooda iyo aqoontooda waa fahansan tihiin, war social media kuwa ka qaylinayay ee qabiilada kicinayay sida

qaabka daran u hadlaayay baa intay yimaadeen dalka kumanaan kusoo baxeen u jeeda usoo baxeen, yaa fahmi kara dadkeena fahamkaas maba lahan haa sidaa daraadeed dadkeena dadka ay doorteen ayaa la rabaa qofka munasabka ah inay u doortaan heerkooda aqooneed, ma aragtay doorashooyinka waxaas oo dhan uma bisla ani marka waxaan soo jeedin lahaa qodobka ugu mihiimsan oon u istaagayna ah **in qofka dalkaan hogaanka ka noqon haayo qaabka uu rabo ha u noqdee in Baarlamaanka labadiisa aqal ay doortaan** waad mahadsan tihiin.

11) **Xil. Mohamed Muhumed Mohamed:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, alxamdulilaahi rabi caalamiin, wa bihii nastaciinu calaa umurihii dunyaa wa diin, guddoonka baarlamaanka iyo habdhawra yaashu, waa mahadsan yihiin. waxaan is leehay cutubka 4aad markii aynu barbar dhigno cutub yadii hadda aynu ka soo hadlaynay dhawrkii "week" ee u danbeeyey kii 1,2 iyo 3 aad dhamaantood muhiim bay ahaayeen laakiin mid kan waxaa waxoogaa muhiimad gaara siinaaya inaynu ka guuryno qabiilkii oo aynu rabno inaan u guurno qaran nimo, nidaamkii qabiilka ahaa ee kasoo bilawday carte 2000 oo shan iyo labaatan sano ku dhawaad 4.5 iyo dulmi iyo dhibaato ay jirtay iyo nidaam isku dhex qasan oo dawladnimadii habac kuriday inaynu ka guurno una guurno nidaam dawladeed sharci kudhisan ee meel uu kasoo bilowdo iyo meel uu ku dhamaado leh ayaad moodaa inuu cutubkani inta badan qeexaayo dadku muhiimada waxay u siinayaana intaa weeyi, hadaan dooda markaa sii galo.

- **Qodobka 49**: Mabaadi'da guud ee doorashooyinka, faqrada 1 aad waxay leedahya Mabaadi'da guud ee doorashooyinka waa inay ahaadaan mabaadiidu guud kuwo xora ah cadaalada kana madhan eex intaa markii aad la akhriso faqrada h) waxaaa meeshaa ku qoran mabadii'daasi waa inay xaqiijiyaan in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan metaalaad cadaalad ah siiba beelaha laga tiro badan yahay anuu waxaan qabaa beelo laga tiro badan yahay wadankan Soomaaliyeed male hadii aan fiirino mabaadii'da guud ee inoo degan, dadka Soomaalieed waa dad siman cutubka 3 aad baan ku soo qaadanay xuquuqda dadka shakhsiyaadka ah, qof walba markaaa cutubka waxaa loogu dejinayaa ama shuruucdu ku "apply" garaynaysaa isagoo shaqsi ah qofna naf qofkale naftii danbigiis ma qaado,markaa dad laga tiro badan yahay iyaguna qof leh hadda waa nalaga tiro badan yahay majiraan, qolo leh qolo anagaa ka tiro badan ma jiraan, dadku waa shaqsiyaad shuruucdana waa loo siman yahay, markaa dad laga tiro badan yahay anigu ma aaminsani hadaaba saaxiibkay jeegaan ka yara hadlaynoo markaa hadii doorasho sqof iyo hadii la aado 4.5 meesha wuu ka baxayaa dadku shaqsiyaad bay noqonayaan, waxaa lagu dooranayaa ama system ka uu qayb kaga noqonyaa shaqsiyadiisa, akhlaaqdiisa, kartidiisa iyo dad nimadiisa weeyi, arintaasi inayna meeshaas ku haboonayn ayaa aaminsanahay qodobkaa.

- **Qodobka 50** nidaamka doorashooyinka sida ha uu u qoran yahay wakhtiga hadii la fiiriyo wuu ku saxan yahay waa sax, habka doorashooyinka iyo qaabka loo nidaaminayo kolay wakhtigeeda iyo xiliga baarlamaanka looga doodayaan sugaynaa, hadii **"single constituency"** qaadanayno iyo 'close list' iyo 'open list' kuu yahay markaasi in laga doodo insha allah wakhtigeeda uun lala sugo.

- **Qodobka 51** Hay'addaha sida tooska ah loo soo dooranayo nidaamka hadda aduunka ka jira waa dhawr nidaam weeyi, nidaam waa nidaam dictatorship ah oo hal nin talada uu lee yahay nidaamkaasi waxaan u malaynayaa inaan diyaar u ahayn, nidaam kale waa nidaam boqortooyo ah oo ninka boqorka ah iyo ilmihiisa ay dalka lahaan doonaan wadamo badan

oo emirate ka iyo khaliijka ay mid yihiin oo kaleeto ah taasna diyaar uma nihin, nidaamkaleto oo waxa jira oo labo ah oo inta badan aduunku hadda isticmaalo waa “presidential system” ka iyo “parliamentarian” ka anaga markaa waxaa la rabaa sidaan hadda nahay ma ahaanayo waan guuraynaa waxaan u guuraynaa ama madaxweyna nimo aan u guurno ama parliamentarian aan u guurno kee noo fiican anaga soomaalida ah markaa waa inaa “comparison” samayn karno kuna wuxuu ku saxsan yahay kuna waxa qaladaad ku jira kadib ‘qaflu dararayn’ inaan samayno ka dhibaatuu lee yahay kana faa’iiduu lee yahay kan faa’iidadiisu waa shan laakiin dhibaatadiisu todoba weeyi, kan qasaarihiisu waa saddex laakiin faa’iidadu shan weeyi, markaa inaan wax ka dooran karno wadciga aan maanta ku jirno shaqsiyaadka na hortaagan, cida hadda madaxweynaha ah iyo prime minster ka iyo inagoon ku qiimaynin laakiin aan ku qiimayno nidaamka kee sax noo ah, anuu markaa aragtidayda nidaamka madaxweyna nimada ee “presidential sytem” ka madaxweynaha iyadoo xisbiyo lagu imaanayo waxaa soo dooranay qofkastoo soomaaliyeed deegaankuu doono ha joogo, madaxwenuhu wuxuu ku khasban yahay ‘campaign’ markuu samaynayo tuulo kastoo oo soomaaliya inuu tago inuu codka weydiisto dadka baahiyaadkooda inuu kala soo hadlo, wakhtigiisu marnaba uu xadidan yahay uu labo xilo bas uu yahay, waxaa suura gala xisbiga markaa taladda haya macnaha xisbiga madaxweynuhu uu kasoo jeedo iyo baarlamaanku, xisbiga baarlamaanka iyo madexwenynaha uu san ahayn inay ka badan yihiin midka madaxweynaha uu ka soojeedo meeshaa markaa ‘check and balance’ baa imaanaaya, madaxweynuhu wuxuu ku qasbanaanayaa barlamaanka inuu la shaqeeyo kulana shaqeeyo mabaadii’da guud ee wadanka u taala uusan kaligii waxba maroosan karin,

Madaxweynuhu markaa system kiisa wahktigaraysan dhamaan soomali oo dhan uu cod ka rabo waxan isleehay taa markii la eego waxa uu soo hadhay inaad barbar dhigtid midka “prime minister” ka prime misterka markaa dadku ma soo dooranayaan shaqsiga uu yahay cid og maleh wuxuu ku imaanayaa xisbiga markaa majority ga ah ama wadciga soomaalida waad ogtihiin dadku waa qabaa’ilo weeyi xisbi majority inuu san helin baa suura gala, waxaa imaanaya xisbiyadii kaleeto dawlad **“**collusion**”** oo isku dhex jira in hadhaw la isku qabsado kuraastii wadamada inta badan parliamentarian ka aad fiiriso moran fara badanaa ka taagan talyaaniga kamida, ingiriiskaa ka mida oo xukuumadu marwalba ay dhacdo, isra’iil ayaa kamida meelo fara badan oo parliamentarian ka buuq fara badan uu ka jiro marwalba xisbiyada ayaa jira, xasiloonida markaa waxa kaga fiican mida madaxweyna nimada, presidential ku wuu ka xasilan yahay mida parliamentarian ka ah wadamadan hadda dariskeena ah fiirsha itoobiya iyo Kenya oo kaleeto, Kenya system keedu waa presidential way ka xasilan tahay marka la eego midkan itoobiya, markaa prime minister awood leh madaxweynuhuna uu “ceremonial” yahay madaxweynaha itoobiya hadda cid taqaana maleh, madaxweynahaa inaa baarkino parliamentarian aan qaadano oo ‘prime minister’ awood leh ama aan qaadano ‘presidential’ madaxweynanimo oo awood leh wakhtigiisuna uu limit garaysan yahay .

Midda kale ‘parliamentarian’ ka haddaan qaadano prime minister ku wakhti male xisbigaasi markasta oo uu doorashada soo qaato intuu dooni buu joogi karaa 30 sano ayuu joogi karaa Margret Tager hadda islaantii ingiriiska ahayd waxaa u malaynayey 18 sano ayey prime minister ahayd 18 sano , waliba iyadaa ka degtay mooyee xisbigu asoo joogo intuu doonuu joogi karaa limit ma leh markaa anuu waxaa rabaa koley shaqsiyanawaxaan aaminsanahay nidaamka presidential ku inuu nooga fiican yahay kan parliamentarian ka ah prime mister sidaa halayeelo kan sidaa hala yeelo maah ujeedadu ama prime mister awood leh aan

qaadano ama madaxweyna awood leh labadaa option uun baa noo taala, labada option waxaa xasiloon anagoo duruufaha soomaalida eegayna midka presidential ka ah.

- **Qodobka** kaleeto ee ah maamul goboleed yada meeshan hogaamiyayaal ayaa loo qoray markaa madexwenayaasha haddii lagu bedalo hogaamiyaal, madaxweynaa faro badan lama wada qaadi karo ama governor hala dhaho ama halayiraahdo hogaamiye sidoo kale erayga dawlad goboleedka, **maamul goboleed hala yidhaahdo** soomaaliya waa hal dawlad.

- **Qodobka 52(2)** mudada xilhaynta faqrada 2 aad ee doorasooyinka dhamaan muumulada gobolada waxay ka dhacayaan hal marbay ka dhacayaan wakhtigaa hal mar inay dhacaan siday hadda wax u kala dhacdhaceen wax laguma qiimeeyo muhiimadu waxa weeyi waxa hadda markan taagan waxaa laga yaabaa khilaafaad hadda inay jiraan dastuurka waxa looga hadlayaa khilaafaadiyo waxa hadda dhacay ujeedku maaha, laakiin ujeedadu waa principal ka guud ee inoo yaala dalka dhaqaalihiisaa yar doorasho sanad walba lama qaban karo, markaa doorashooyin ka in sanad la iskugu geeyo maamul goboleed yada tankaleetona mar ay dhacdo, wuxu maaha aragtidaa kolay siday hadda u tahay waa sax laakiin waxaa walwal ka qabaa **qodobka 57** dhismaha guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka tirsi ahaan waxaa lagu sheegay 15 waxaa layidhi maadaama uu wakhtigoodu yahay lix sano isku mar yaan la dooranin hadda half hala doorto si kuwa kalena markuu mid ka baxaba kuwa kalena u sii joogaan macnaha ay noqoto wareegto marba lasoo cusboonaysiiyo laakiin hal mar si meesha aysan uga wada bixin, waan ogahay waxaan usoo daliishanayaa midkan, markaa waxaan isleehay guddi 7 xubnood ah ma awoodaan inay dhamaan doorashada ka qabtaan maamul goboleedyada oo dhan hal mar, markaa at least qodobkan in loo dhigo, **doorashada maamul goboleed yadu ha noqoto mudo hal sano gudahooda markaa saddex saddex bilood labo labo bilood,** ha u banaanaato si ay guddigu u helaan in marba maamul goboleed ay doorashadiisa qabtaan, taa qodobkaa intaasaan dhihi lahaa.

- Doorashada deegaanka xildhibaanaa waxa ay soo jeedsheen in golaha deegaanku iska dhex doortaan guddoomiyahay iyo guddoomiye ku xigeenka arrintaa waxaan umalaynayaa dadkayagii maamulada kasoo shaqaynayey arrintaa dhib fara badan bay leedahay meelihii hadda laga wada qabtay barmaamij yada council lada oo dhan ee council ladii iska dhex dooranayeen guddoomiyaha iyo ku xigeenka resource yar oo dhaqaalo ah shaqaa la isku qabsan maalin walba mooshinaa yaala oo laga keenayo guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa, markaa waxaa muhiima si guddomiyaha wakhti loo siiyo, wakhtigiisu wuu xaddidan yahay guddoomiyha degmada iyo ku gigeenku inay ku yimaadaan doorasho dadka degan degmadaa uu ka sharaxan yahay, **council kana lasoo doorto gudoomiyaha iyo ku xigeenkana la soo doorto sida meesha ay ugu qorantaan kolay ayidayaa sidanay sax ku tahay.**

- **Qodobka 53(4)** faafaahin waxaa meeshan la galiyey dadka aan xaqa u lahay diwaan galintulabo kaliyaa lagu sheegay daqdka aan dhimirkoodu dhanayn iyo qof maxakamadi ku xukun tahay muddo shan sano ah markaa taa laftigeeda inkastoo hore loo soo sheegay age ka lasoo xaddiday haddana in halkan lagu xuso inay laftigeedu muhiin tahay **dadka ka yar 18 inaysan xaq u lahayn meeshaa in lagu sheego oo lagu soo darro oo qodobkaa lagu siyaadsho oo c) camal looga dhigo waan soo jeedinayaa,** markaa inataasay igaga dhan tahay.

12) **Xil. Sacdia Yasin Haji Samatar – Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka**

Bismilaah, Aslaamu calaykum, ramadaan mubaarik, dhamaan waan idin salaamayaa , ilaahay rabadaankan mid khayr qaba oo nabada ilaahay ha inooga dhigo,inaan xildhibaanada magacda ugu yeedho ma jecli sababta oo ah wakhtigaa bata qof walba "point of order" buu sii qaadanayaa laakiin jeego igama daba qaadanayee ani inaan ku dulmanahay 31 ma qabo, "minority" ga 31 inay qaataan aad bay xaq ugu tahay, aduunkana "majority iyo minority" baa kal jira laakiin xildhibaan baa intuu intan soo istaagay wuxuu yiri federaal matelaya state dad minority ay degenyihiiin metalaya intuu soo istaagay wuxuu yiri yaa ladhahaa beelaha laga tiroda badan yahay, runtii taasaa ceeba ah oo gaf ah oo khalad ah sababtoo ah anaga "proud" ku ah oo ku faraxsan inaan "minority" ahayn, hadaad 'minority' fiirisid gurigiinaa xataa minority iyo 'majority' ku kala nahay, ani waxaa jira gabadh walaashay ah allah ha u daayee oo toban cunug dhasay ana afar cunug baan leeyahay, halkaa saan 'minority' iyo 'majority' kala nahay markaa qofku inuu 'happy' ku noqdo wuxuu yahay waa wax fiican anuu marwalba waxaan ka doodaa inaan la igu dulmin xaqaygii aan lahaa waxa aan rabaa markaa dadka minority ah intay haystaan ooy Carta ku soo qaateen.

Waxaan aaminsanahay inay tahay in xaqa, laakiin aduunka waalaalkay Mahdi Guuleed baan aad u dhagyastoo doodihiisa aad u jeclahay wuxuu ka hadlayey waxaan xildhibaanada iyo senator duba soo qaadin oo ah dadka barkacayaasha ah nacam wuxuu u hadlaayey dadkaas waxaad og tihiin qofkastoo soo istaaga oo cilmi kasta leh oo diin kasta haystaa dadka aan dadku u doodayn looma hadlo inta badan qofkasta madaxweyne gobol buu iska dhisayaa ama reerka uu kasoo jeeduu iska dhisayaa hebelbaa halgudhaho ku dhahaya lakiin dad aan dadku u doodi Karin ama dadku umatalin dadku kama hadlaan, markaa anigu waxaan meesha usoo istaagay runtii dadka minority tiga ah halbaanan rabaa maanta inaan idiin sheego NCC Soomaaliya Xasan Sheekh wuxuu ku fadhiyaa 4.5 qabiil buuna metelaa laakiin soomaaliya oo dhan baa dooratay, haduuna 4.5 ku fadhiyin ku xigeenkiisaa la reer ahaan lahaa, guddoomiye Aadan madoobey isku reer noqon lahaayeen anigaa cidkale la aah lahaa, horta waa inaan aamino oo soomaaliya iyo calanka aan intan ku dhejisaneyno inaan qabiilad nahay inaan horta aamino oo aynu isku dulmin anuu waa mida aan marwalba ka doodo, markaa inaan usoo laabto qodobkan hada laga doodayey oo ah.

Dastuurkaan gacanta ku soo qaatay qodobka 72 wuxuu cadaynayaa oo uu leeyahay 54 ta senator ina ay metlaan 18 gobol iyo soomaaliya oo dhan beelaha xildhibaanada ah, fiiri dastuurkiibaa khaldan oo aan cadaalad ahayn 54 xildhibaan ee senator da ah waxay ku fadhiyaan baadil markaa gudoonka waxaan leehay maxaa ku sixi doontaan maxaad samayn doontaan see ku salaynaysaan senator da u badan state kayaga ka soo jeedaan waligayana kama filayno in la iqoro 5 xildhibaanu ku jirnaa 11 senator oo naga yimaada labadii senator ba, labadii xildhibaanba meesha fadhiyaa waxay leeyihiin hal senator laakiin anaga, anaga oo shan xildhibaana ayuusan qori Karin madaxweynaha hada jooga kii ka sii horeeyey kii ku soo xigay doona inuu anoo 'point five' ah oo beelaha laga tiro badan yahay aaminsan inuu i qoro markaa mid walboo intan soo istaago wuxuu leeyahay xuquuqda soomaaliya 'John Helton' baa wuxuu yiri hebel 'frizer' wuxuu yiri adiga ama diin soomaaliyeey aan ku dhaqano oo aayad quraana iyo xadiis bukhaari iyo muslim soo qaado oo ku dhaqan ama waddamada aad sharciyadooda ka sheekaynaysid 'minority' gu waxay leeyihiin xuquuq u gooni ah oo aan lataaban.

Aniga hadda' Minneapolis' saan ka imaaday ilhaan ta aad faanisaan calamada u ruxaysaan minority ahaan bay ku qaadatay gabadh miskiinoo qaxootiya oo shalay tagtay bay ahayd inay laandheera tahay oo Majeerteen ay ka timaaday umasa soo qaadan kursiga, inay gabadh miskiina tahay ooy mudantahay ku qaadatay ku qaadatay, markaa ani waxaan rabaa mooshin baan qornay guddigana waan usoo gudbinay NCC waxaan u gali waayey, oo madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka iyo raysulwasaaraha u fadhiyey guddoomiyaha wuxuu u gali waayey kow minority baan ahay labo madaxweynahaygu wuxuu iigu yeedhi nimankan waayey oo afarta ah haddana naag baan ahay, Soomaalida waxaa ceebku ah inay intooy shantii lixdii nin ee meesha fadhiday naag inay soo dhex fadhiisato , ma aaminsana mararka qaarkood meelaha la qorayo hadii wasiiro la qorayo iyo hadii guddiyo la qorayo, aniga hadii aan fadhin lahaa makuu muudey fadhiyey sharcigiisa banaan kaasaa loo dhigi jirey sababtoo aha waa nin, markaa dulmi dumarkii oo qaba iyo minority oo weli dulman hadana markaa ama aduunka ka hadlayno ama meelahaa ka joogno nin walba wuxuu soo qaadanayaa aayad wadaadada u badan wuxuuna ku tumanayaa qof miskiin ah.

Waar soomaalieyeey aniga in la iga badan yahay anaa qirsan anaa proud ku ah oo runtii sheegta laakiin inaa xaqa markaad 100 ay tahay 90 qaadatidaan ogolahay oo 10 kaga ama 1 kaga aad banaanka dhigtaan, markaa meesha dhan waxaan u soo istaagay qodobka 72 inuu san noqon "minority rights" kiisa inaad qortaan hadii kale hadaan mooshin idinka keenayaa la idiinmana asixinayo waxaan la hadlayaa guddoonka labada gole mana la idiin ansixindoono xaqa ay leeyihiin minority meel ku qora 31 dooda ha taagnaato, nin baa wuxuu lee yahay intuu meel soo istaago yaa tiriyey yaayiri waa laga tiro badan yahay waar waa la iga tiro badan yahay laakiin waxaan kuu ogolahay "majority rules" ana waxaan ogolahay "minority rights" kiisa inaad qortaan, aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin salaamu calaykun.

13) **Xil. Abdi Ahmed Kooshin:**

Waxaan salaamayaa guddoonka labadiisa aqal waxaan salaamayaa xildhibaanada inta soo hadhay labo eray aan iska kaftano aakhiru licibaa lagu jiraa waana bil ramadaan baarlamaanka marakaan boodhiyamka soo istaagoba labo eraybaan iska ilaaliya point five .5 iyo afka maayga labadaaba haddaan ka hadlo koley dhirbaaxo kulul uubaa igu dhacaysa markaa kamo haddlayo kuna fogaanayo MM adaana isku geystay.

Aan usoo guda galo cutubkani sidiisaba markaad eegto waa mid cusub, dhamaantiiba wuu cusub yahay marka laga reebo qodobka 47 ee la saaray wuxuu si qeexan ama si dadban ama si cadba u jihaynayaa hanaanka iyo haykalka dawladnimadda, doorashooyinka, xisbiyadda siyaasaddeed iyo maaumulka doorashooyinka, cutubkani yaraantii iyo qodobadiisa iyo meelaha uu asaarta ku yeelanayo dastuurka ku-meel-gaarka ah markaad u fiiriso waa wax baaxad weyn oo u baahan in si qoto dheer ay uga doodaan.

Guddoonku wuu ian jiidhsiyey marxalada 1aad iyo marxalda 2aad buu yidhi laakiin shin tiriskii la inoo soo diray waxaa ku qornayn in marxalad marxald in looga doodayo guddigu waxan marka hore ay soo daabacayaan hadii iga laftigoodu aanay ixtiraamayn in la inoo dhiibaba maahayn in shin tiriska la raacay ahayd in habraaca qodobka 4 faqradiisa 1 aad laraaco bay ahayd qaabka dooda ee halkan lagu ansixiyey ee golaha waliba gacan loo taagay hadaan la isticmaalayn waxa meeshan lagu hayaaba inay yihiin iska qarafaa-dhug, aan usoo gudbee cutubkani wuxuu taabanayaa cutubka afraad gaar ahaan

- **Qodobka 47aad** oo uu meesha ba ka saarayo, wuxuu taabanayaa ama saamayn ku leeyahay cutubka 6aad gaar ahaan qodobka 60 aad muddada xil haynta qodobka 63 aad awooda xeer dejinta shacabka, qodobka 64, tirada xubnaha golaha shacabka, qodobka 71 awooda xeer dejinta aqalka sare qodobka, 72 ee tirade xubnaha aqalka sare ,wuxuu kaloo taabanayaa cutubka 7aad ee haykalka dawladnimada awooda madaxwenha nidaamka aan haysano iyo kan lasoo propose gareeyey, wuxuu taabanaya cutubka 10 ee guddiyada madaxabanaan, wuxuu kaloo taabanayaa cutubka 12 dawladaha xubnaha ka ah dawlada federaalka shaqsiyan anuu markaan qiimeeyey waad dareemi kartaa ama dhamaantiin waad dariimi kartaan baaxada 13 qodob ay lee yihiin iyo cutubada dastuurka ku jira ama siday u hagayaan ama siday u badalayaan ama siday u taabanayaan maaha macnaheedu waxaa lasoo qoray oo dhami inay wada qaldan yihiin laakiin waxay u baahan yihiin maskax furan iyo inagoo ka shidaal qaadanayna khibrada ay soomaali leedahay dawlad dhiska soomaaliya leedahay intii lagu jiray 60 sano ee ugu danbeysay maxaynu haysanay, maxaynaan haysan, waxaan aamin sanahay cutubkani inuu 'reshaping' ku samaynayo dhammaan wixii naqiinay diciifinayana doorkii sharci dajinta abuurayana 'power consolidation' wax layidhaa ama meel hal shay uun inay iskugu ururto awoodii dawladnimadu, waxaan ku raacayaa anigoon waxba ku daraynin doodii Ilyaas soojeediyey xildhibaan ilyaas markuu ka hadlaayey muhiimada ay leedahay in awoodda golaha shacabka la ilaaliyo ama ha noqoto inay madaxweyne doortaan ama ha noqoto madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen aynu nidaamkaa qaadano ama ha noqoto awooda sidaynu hada ku joogno laakiin awoodaha la kala qeexo oo ah.

- **Qodobka 51** aad faqradiisa b) sidaa uu xildhibaan ilyaas u soo jeediyey waan ku raacsanahay, dhawr qodob oo aan u fiirsaday oo ku jira cutubkan 4aad oo uu kaw ka yahay qodobka 64 ee oo isku bedelay 48 faqradiisa 1 aad waxay ani iila muuqataa dib u habaynta lagu sameeyey marka laga tego allahu sawatulaahi calayhi in siiqa ahaan macna ahaan iyo awooda golaha shacabkaba ay ilaalinaysay faqradii hore baarlamaanka labadiisa aqal la ilaalinayey, waxa halkaa iiga muuqata xildhibaan in awoodaadii dastuuriga ahayd kaw lagaga soo bilaabay qodobka 48 in horta lagu diciifiyo adiga iyo agaasime waaxeedkii wasaaradda aminga ama korontada aad isku mid noqotaan oo cid aad la xisaabtamaysaan iyo cidkale aan wada jirin, shacabka ummadaa soomaaliyeed bay xildhibaanadu metelaan, xildhibaanaduna iyagaa la xisaab tamaya dawladihii loogu talagalay inay la xisaabtamaan **markaa waxaan qabaa gebi ahaanba in sideedii loo soo celiyo.**

- **Qodobka 49** mabaadiida guud ee doorashooyinka xarafkiisa i) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda; xaalada amni iyo dhaqan dhaqaale maxaa ka galay xisbi abuurmaya haduu dhaqaale hasto isagaa ama cod haysto isagaa, markaa waxaan qabaa islamarkaana tixgalinaya **xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale in meesha laga saaro baan qabaa.**

- **Qodobka 50** hanaanka doorashooyinka faqrada sida loo soo qoray way fiican tahay sharaxaada laga bixiyey waa marin habaabin sideedaba waa in xeerka doorashooyinka lagu soo saaraa nooca doorasho ee aynu u baahanahay maaha in la inoo sii jiheeyo maaha in sharaxaad lagu bixiyo waxaynu qaadanaynaa liiska xidhan inagoon ogayn in sharaxaad laga sii bixiyo laga sii hor dego waxaan aaminsanahay inay sharaxaadaasi maran habaabin ku tahay u jeedada qodobka sida saxda ah u qoran macna wiyan in laga saaro sharaxaadaas meesha oo liis xidhan wax la yidhaa aanay jirin ilaa xeerkii doorashooyinka la horkeeno golaha, goluhuna ka "debate" gareeyo waxay u arkaan inuu saxayahay markaa la isku raaco

ama open list siduu Mahdi u sharaxayey ama close list labaduba caalamka way ka jiraan laakiin inaga duruufaheena,dhaqankeena, maamul goboleed yadeena, reeraheena waxaa markaynu eegno qaarbaa la isku dulminayaa, qaarna waxa weeyi si "fair" oo cadaaliya ayuu u dhacayaa xildhibaanaduu u yaalaa markuu qodobkaasi yimaado halkasaan kaga baxayaa qodobka 51 waa sidaan hore u soo dheegay.

- **Qodobka 52 (1)** Muddada xilhaynta dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 51aad, faqraddiisa 2aad waa shan sano, waxaan aamin sanahay shanta sano haba jirtee in laga bilaabaa muddo xileedka soo socda haddaan cadaalad raadinayno inaan inagoo xildhibaanoo halkaa fadhina hal sano aan ku darsano waxay iila muuqataa aniga waxay ila tahay gef, muddo xileedku waa inuu ka bilaabmo muddo xileedka dawlada cusub waa ila aragti ahaan,

- **Qodobka 52 (2)** Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, wax allaale waxaan macquul ahayn hadaan meel walba ku qorno dhibaatadeeday leedahay, heshiiskii madasha wada tashiga qaran ay gaadheen waxa jira qodobo lagu fulin lahaa hal bil oon wali fulin oo ay ka mid tahay magacaabida guddiga doorashooyinkee madaxabanaan iyo xuduudaha intii markaa aan la fulin waa la iskaga yimid intii kalaa la inagu yidhi waa dastuuri oo waxaa madasha wada tashi qaran baa ku heshiisay marna ma suuro galayso inay soomaliya oo dhan todobo nin doorasho u qabtaan ama putland tagaan ama tan tagaan ama teer tagaan isku marbay dhacaysaa, xaqiiqada asalkeed maamul goboleedkastaa dastuur iyo xeer doorasho nidaam buu leeyahay iyaga laftarkoodu tixgalinbay u baahan yihiin, wabilaahi tawfiiq, intasaan kaga tagayaa raalina ahaada .

**14) Xil. Ali Haji Dahir:**

Salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu, mudaane guddoomiye iyo dhamaan akhiyaarta xildhibaanada inta ka soo hartay aad baad u mahadsan tihiin.

Cutubka 4aad baan ujeedaa ee matalaada shacabkaa uu baan in yar ka oranayaa haduu alle ka dhigo, aad u sii dhexgalimaayo meelaha iyo qodobada lga hadlay, meelo aan maaganaana waxaad moodaa in xildhibaan Jeego iyo guddoomiya Sacdiya wax ka taabteen inta igaga aaddan ama intaan uga dan lahaa waxa weeyaan.

Dastuurkan maanta ina horyaala ee ku meelgaadhka ah Jamhuuriyada Federaalka soomaaliya wuxuu yimid isagoo indha la' oon waxba arkayn buu soo dhashay hadana isagoon indhii loo fiiqin oon okiyaala loo xidhin la socod siiyo markaa waxaan codsan lahaa horta marka hore intaanu qaan gaadhin in indhaha loo fiiqo oo okiyaalo loo galiyo si uu wax u arko dastuurku.

Dastuurkani waxba ma arko hadduu wax arkana wuxuu arkaa wax gaara, inuu idha la'aa hadii dadka qaar fahmi waayaan anaa idin fahansiinaya, tusaale yarbaan idinku fahan siinayaa, hada ka hor 1980 meelahaa ayaa nin reer baadiya ah oo geel ka lumay oo geelii yaboohinaya ayaa caabud waaq soo galay hadaan qabiilada qaar magacaabo ugama jeedo si kale tusaale uun baan uga jeedaa dhibkale ma jiro geeluu yaboohinayey markaa

reerkoodiibaa niman aan isku xaafadnahay weeyaane ayuu wuxuu wediiyey wax reer khalaf ahi magaalada madegan yahay isagoo doonaya inuu u hoydo dee ka qaxweeyo,

Qolaa waxay tiri qabiilka waa la aasoo dastuurkaa diiday waanad xidhantahay, ninkii reer baadiyaha ahaa ee miskiinkii way xidheen habeenkii saldhigaa la geeyey saldhigii buu ku arkay qof dumara oo umula oo ku xidhan indha la'aanta aan dastuurka uga jeedo ayaa caynaysa gabadhiibuu ku yidhi maxaa lagugu soo xidhay waxay tiri qof dumaraan muranay waa la isoo xidhay, hadda waa gabadh umula naasahana caanihiibaa ka da'aya wuxuu yidhi ilmahaagii mee waxay tidhi ilmihii way iga reebeen ana wey isoo xidheen aad buu ula yaabay runtii gabdhaana qodob distooraa loo cuskadoo waad ogtihiin in iyada iyo ilmaha la kala kexeeyo distoorka indha la' baa loo cuskaday, gabadhii buu waraystay reermaad tahay mareexaan baan ahay yaad ka tahay (dee makara foonda inaga badaloo makarofoono hagaagsan oo wax laga maqlo makarafoonadan laga guuray 1990 haddii qofkii yimaadaaba uu yidhaahdo waxba ma maqlaayo dee makarafoono inoo sameeya denbiga anagu malihin lacag la'aani inama hayso kharash laa'aani inama hayso dhibaatada ina haystaa maxay tahay haddii makarafoonadii iska hagaajin kari laanahay, waa indho laanta aan sheegayo uun bay taasina ka mid tahay).

Inankaa ogayga inantii buu wareystay reer koodii buu waydiiyey maxaa lagu xidhaybuu yidhi laakiin muu fahmin inuu qabiilka uu ku dhawaaqay loo xidhay sababta uu u xidhan yahayna qabiilka uu ku dhawaaqay bay ahayd subixii baa ninkaa odayga ah maxakmada la keenay xeer ilaaliyihii baa yidhi maxakamada sharafta leh hadalka halkasuu ka bilaabay ninkii baa is hayn kari waayey wuu yidhi maxakamada kafadhiiso sharaftaa dhacdaye (aad kuumaan maqal hadaad idinku i maqlaysaan, ma la is maqlayaa) sidaasaa tusaaluun baan ka bixinaayey ninkaa odayga ah baa ka jawaabay waxaa lagu yidhi laba sanaa lagugu xukumay waa ninkii yidhi labo sanoo kanshoo baadidoon baan ahay, ee waad garanaysaan maamaahda labo sano wakhtiba uma hayuu yidhi , sheekadu way dheerayd laakiin waa sheeko aad la socotaan.

Waxaan uga jeedaa beela soomaaliyeed oo aan anigu beel kamida xildhibaan u ahay ayaa waxay ka maqan yihiin metelaada soomaaliya meel walba dawlad gobaleedada, dawlada dhexe, dawladaha hoose toosbay metelaada uga maqan yihiin, hadana waxaa la doonayaa distoorka caynkaaya ee beela soomaaliyeed ka maqan yihiin in la riixo oo la socodsiiyo oo la yidhaahdo sacabka noo tuma oo anaga noo garaaca arintaasi dhicimayso *(an takuuna casiisan qaayiban afdalu bi kasiir min antakuuna xaadiran biilaa qiimah)* waa xikmad carabiya adoo maqanoo sharaflaa kuu dhaantaa la yidhi adoo fadhiyoo bilaa qiima ah inaad maqan tahay baa dhaama.

Arrinta xidhiidhka bulshada oo dadku matelaadooda ay doonayaan oo metelaadoodii ay laa yi'iin *(famaa wisaala bil wasli qad bakhiluu wan tanaasaa fa inaa qad nasaynaahu)* qofkii xidhiidhkaaga diiida inuu ku xidhiidhiyo dee adna xidhiidhin kari maysid oo sidaad u xidhhidhinaysaa waa si kale xaqiiqada qofka iinsaanka ah xaqiiqada, waxa la yidhaa *(xaqiiqatul iinsaan laysa maa yidhiruu laka bal yafcalu min ajlika)* iinsaanku waxa uu kuu muujinayo maahee waa wuxuu daraadaa u samaynaayo waxaad ogtihiin xildhibaanoda sharafta leh ee halkan maanta fadhiya iyo inta kale ee ina dhagaysanaysaaba beelo soomaaliyeed oo badan oo ani beeshaydu ka mid tahay inaanay metelaad ku lahayn, waad aragteen dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada oo soo saaraya liisas dhaadheer oo wasiiro ah 20 iyo wax ka badan oo wada ilmo adeera liis wasiiro ah oo 20, liis wasiiro ku xigeena oo 20 wasiiro dawlo, 60 wasiiroo wada ilmo adeera soo saaraya oo aan odhanayn

waar waa la inala degan yahay dalka beela kalaa inala degane madaxweyne ka daa oo bal dadka taasi waxay muujinaysaa uun (alaysa minkum rajulu rashiid).

Ajendaha waan ku jiraa guddomiye qaybtaan kaga jiraa waxa weeyaan metalaada shacabka iyo inaan beelahayagu matelaad lahayn, waan dhex fadhiyaa hadii aad adigu ajende kale wada tana dee dadka adaa u cadayndoona anuu ajendihii baan ku jiraa ajenduhu waxa weeyaan metelaada shacabka cutubka 4aad ee aynu maanta ka hadlaynaa beela soomaliyeed baa metelaada soomaaliyeed ka maqan oo indhaha la iska qabanayaa oo ladiidayaa waxaanu doonaynaa inaan ku soo darno ama aan wadanka uga guurno siday hada ka hor guddoomiya sacdiya tiri wadanka waa looga guurayaa hadii wax laga qaban waayo arimahaas oo kale waxaan idiin sheegayaa (araadu laayakdibu li ahlihii) ninka sahanka ahi ehelkiisa been uma sheego haddii la wadaagi waayo xukunka oo metelaada la wadaagiwaayo, hadana lagu sii wado waxay noqonaysaa “gabadhii ganbada taabatee gacanta loo maydhaya, ee hadana galisay meeshee gabaygu saw maaha” in halkii lagu celceliyey noqonaysaa waxaan macna lahay uun baa kasoo baxaaya.

Waxaan sheegayaa guddoomiye ama gudoomiyayaasha sharafta leh ee labada gole iyo xildhibaanadaba waxaan ka hadlayaa waa waxaad ka dharagsan tihiin maaha waan ku riyooday ama aan lasoo toosay waa waxaadogtihiin gudoomiyuhuna wuu ogyahay oo waa wuxuu ka dharagsan yahay laakiin hadiise in la isku khawsiiyo aad jeceshihiin way dhamaatay arintaasi runtaynu isku sheegaynaa halkana waa golihii shacabka beelaha aanu u nahay xildhibaanka waxaanu u sheegaynaa golaha shacabka hadii xildhibaanudu ay 10 , 10 u fadhiyaan oo wasiirada dawladaha shan shan, lix lix loo fadhiyo waxay metalaysaa:

Nin soomaaliya oo wadaada axkaamta ka hadlaaya dahaarada ayaa wuxuu yidhi istijada waxaad ku istijootaan dhagax iyo ciid oo lafta iyo waxyaabahaa ka baydha, inan yarbaa ku yidhi hadii ciida iyo dhagax la waayo maxaa lagu istijoonyaa, wuxuu yidhi ciida ku qalji, bahalka madaxa qaboo ciida ku qalji, ciida iska ga qalaji, wuxuu yidhi “dee waa ninkuu u gaadhaa”, inkuu gaadho weeyi ma iskaga qaliji uun baa waa sidee macnuhu adiga haduu kuu gaadhayo ood dhulka ku masaxayso dee anga nooma gaadhay buu yidhi waa ku sidee, waxa lagaa rabaa seed wax u ragtaan xildhibaano waxaynu u baahanahay waxaynu ka hadlayno inaynu isla fahano, hadaad idinku jiqlaysateen dee anagu ma jiqlaysanin aynu arinta isla fahasno guddoomiyuhuna sidaa ha u fahmo aad baad u mahadsan tihiin.

15) **Xil. Hassan Budul Ali:**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mahadsanid Guddoomiye. Mudane Guddoomiye, xildhibaanada sharafta leh, aniga oo doodeyda toos u geliyo. Inkasta oo aad loo buuqayo. Aan is dhageysana wax yar idinka oo raali ah.

- **Qodobka 4aad** ee ka hadlaya mabaadii’da guud ee matalaada shacabka, waxaan u maleynayaa in lagu sameeyay farqadan dib u habeyn. Sida hadda ay u qoran tahay haddaan aqriyo. Waxa ay dhaheysaa Alla SW ka sokow, awoodda is-ixukunka waxa ay ka bilaabaneysaa kuna dhammaaneysaa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaas o oleh awoodda la xisaabtanka hey’addaha dowladda ee heer kasta iyo wakiilada shacabka Codka xiriiryaha *“waxyar idinka oo raali ah xildhibaanka ayaa hadlaya marka in aan xoogaa….”* Xildhibaan Budul: Xildhibaanada aad bay u buuqayaan waan ku celenayaa. Waxaan kahadlayaaa.

- **Qodobka 48aad** ee ka hadlaya mabaadii'ida guud ee matalaada shacabka. Qodobkan guddiga waxa ay ku sameeyeen dib-u-habeyn sida ay soo qoreen. Sida hadda ay u qoran tahay ay soo qoreen waxa uu dhahayaa "Alle SW ka sokow awooda is xukunka waxa aya ka bilaabaneynsaa kuna dhammaaneysaa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaas oo le awood la xisaabtanka hey'addaha dowladda ee heer kasta iyo wakiilada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha." Marka anigu su'aal baan isweydiinaya. Dowladdu sidaan ognahay waxa ay ka kooban tahay saddex qeybood. Waa fulinta, sharci dajinta, iyo xeer ilaalinta. Marka sida meeshaan ku xusan waxaa la yiri, "hey'addaja dowladda ee heer kasta iyo golaha wakiilada" marka su'aasha aan isweydiinaayo waxaa weeye golaha wakiiladu saddexda laamood oo ay dowladdu ka kooban tahay miyaa laga saaray? Su'aasha marka taagan weeye in li isweydiiyo mudan. Iyada oo hor looga sii socdo hadana waxaa la yiri, "golaha wakiilada ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha." Haddaba, su'aasha kale ee imaaaneysa waxaa weeye: maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha, ma fulinta ayaa laga rabaa arintaa fulinta ayaa laga rabaa. Marka laba su'aalood ee meeshaa ka imaan kara ee aniga shaqsi ahaan aan isweydiinayo. **Marka waxaan soo jeedin lahaa aniga in lagu joojiyo erayga dhahayo "hey'addaha dowladda ee heer kasta" halkaa in lagu joojiyo. Inta dambe in laga saaro ayaan aniga shaqsiyan soo jeedin lahaa. Sidaas ayay iila muuqaneysaa.** Koley xildhibaan kastana wuu heystaa sida ii muuqaneysa. Qodobka 4aad oo la yiri waxaa loo raray.

- **Qodobka 50aad** waxaan dhihi lahaa in qodobkaan sidiisa loo daayo. Waxaad maleyneysaa runtii awooda golaha shacabka ayaa iska leh laakiin hadda sida laga dhigay qodobka 50aad ee ka hadlaya nidaamka doorashooyinka. Waxaa la yiri "hanaanka doorashooyinka Jamhuuriyadda Federalka Somaaliya waa mid ku saleysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Sidi ay ahaydna runtii waxa ay ku caddahay.

- **Qodobka 47aad marka aniga waxaan dhihi lahaa sidaa haloo daayo.**

- **Qodobka 51aad** "hey'adaha sida tooska ah loo dooranaayo **faqradda 2aad** waxaa la yiri, "xubnaha u tartamaya kuraasta golaha shacabka ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliya waxaa ku dooranayaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madax banaan dhammaan muwaadiniinta buuxiyay shuruudaha codbixiyayaasha. **Marka dhamaan, dhammaantaa waa in la caddeeyaa**. Kuraasta aynu ku fadhino beelo ayaa iska leh deegaan doorasho ayaa laga leeyahay. Marka waxaa layiri "dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyed ee buuxiyay shuruudaha." Marka waa in la caddeeyaa. Haddaad fiiriso qodobka isla asaga ah farqadiisa 3aad iyo farqadiisa 4aad. Farqadiisa 4aad waxa uu ka hadlayaa, "xubnaha ku tartamaya kuraasta aqalka sare cidda dooraneysa waa la caddeeyay. Waxaa la yiri, "xubnaha ku tartamay kuraasta aqalka sare ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliya waxaa si toos ah cod qarsoodi ah, oo madax bananan ku dooranaaya oo kaliya muwaadiniinta degan dowlad goboleed kastsa ee buuxiyay shuruudaha codbixiye. Marka waa la cadeeyay, "muwaadiniinta degan dowlad goboleedka ayaa la yiri. Hadaaad hoos u degto, isla qodobkaas faqradiisa 4aad waxaa la yiri, "madaxweyna iyo madaxweyne ku-xigeenka dowladda Federalka Somaliya waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madax banaan ku dooranaya dhammaan muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyay shuruudaha codbixiyaha meel kasta oo ay joogaan." Madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenkana cidda dooraneysa waa la caddeeyay iyadana. Muwaadiniinta Soomaaliyeed

meel kasta oo ay joogaan ayaa la yiri. Sanataradana cidda dooraneysaa waa la caddeeyay, waxaa la yiri muwaadiniinta buuxiyay shuruudaha codbixiyaha ee degan maamul goboleedkaas laakiin golaha shacabka lama caddeynin. Waxaa la yiri, "dhammaan" **marka dhammaantaan in la caddeyo waaye.** waayo kuraastaan aynu ku fadhino deegaan doorashaa laga leeyahay. Marka sidaas ayaan soo jeedi lahaa iyadana. Mudada xil heyntu sida hildhibaanadii iga horeeyeen in badan oo ka mid ah ay sheegeen. **Waxaan taageerayaa muda xileedka in uu shan sano ahaado.**

- **Doorashada in la mideeyo in (harmonized election) in laga sameeyo.** Sida aynu ogsoon nahay dalkaan doorashooyin kala duduwan ayaa ka dhaco. Any given time waxaa lagu jiraa pollical tension oo maamul goboleedyada iyo dowladda Federaalka doorashooyinkooda ma mideysna. Marka haddii xitaa aan la mideyn kareynin laaakiin labo doorasho oo dowladda federalka mar ah iyo maamul goboledyada mar ah la mideeyo si dadka service delivery u helaan runtii aad baan u soo dhaweynayaa. Muddo xileedkana in shan sano laga dhigo ayadana aad baan u soo dhaweynayaa. Nadaamka dowladda ee ama presidential ama parliamentary waa sax in laga doodo keebaa qaadanaa in la is weydiiyo wax aad u fiican waaye. aniga shaqsiyan doodeyda iyo waxa aan ku hadli lahaa waxaa u maleysaa in xildibaan ilyaas mar hore qaatay. Waxaan ta'kiidinayaa sidii uu xildhibaan Ilyaas horay u yiri, **in nadaamkaa sidaas loo daawyo, madaxweyne iyo ra'iisulwasaare. Lana kala cadeeyo qof walba shaqadiisa.** Dastuurku uu caddeeyo. Anigu shaqsiyan sidaas ayaan soo jeedinayaa. Baarlamaankana ay doortaan madaxweynaha aniga sidaas ayaan soo jeedinayaa. Haddaan ku laaabto qodobka mabaadii'da guud ka hadlaya ee

- **Qodobka 49aad faqradiisa g** damaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah sida haweenka iyo **dadka baahiyaha gaarka qaba.** Waxaan u maleynaya sida marar hore looga dooday dadka baahiyahaya gaarka qaba kalimadda ayada ah in badan baa laga dooday. Qof kastaa sometimes waxaa la yiri wuxuu yeelan karaa baahi gaara ah. Marka in kalmadaa kalmad bedeli karta ayaa in la raadiyo. In la dhoho xataa dadka naafada ah oo kale iyadana waan soo jeedin lahaa. Inta nadan halkaan fadhida qof walba baahi gaar ah buu qabaa. Kalmadaa iyada waa lagu duuday in ayadana wixii bal lagu bedali karo lagu badalo. Qodobkaan ka hadlaya maamul goboleedyada. Hey'addaha sida tooska ah loo dooranayo erayga hogaamiye iyo hogaamiye ku-xigeen ayada lafteed sidii xildhibaanadii iga horeeyay ka dhawaajiyeen waxaan dhihi lahaa eray ka haboon in la raadiyo. Aniga waxaanba qabaa in loo daayo Maxadweyne iyo madaxweyne ku xigeen laakiin hogaamiye iyo hogaamiye ku-xigeen haddii madaxweyne iyo madaxweyne ku-xigeen aan la qaadaneynin eray kaga haboon in la helo. Anagu dalkanagu waa dal dagaal iyo colaado soo daashadeen. Hogaamiye kooxeedyadi ayaa wali dadka dhagahooda ka sii qeylinaaya marka wali in hogaamiye wali nalaga sii daba wado **waxaan dhihi lahaa waa laga haboon yahay ee erey ku haboon in la raadiyo.**

**16) Xil. Abdisalan Haji Ahmed Liban "Dhabancad":**

Shir Gudoonka sharafta leh, Xilibaanada sharafta leh, kor joogayaasha, Guddiga dib-ueegista dastuurka, wariye yaasha, adeegayaasha, kulligiin waad salamantihiin, Asalaamu caleykum Waraxmatullahi wabarakaatuh. Waxaan u maleynaya raggii meeshaan soo istaagay, xiliibaanadiina anaa ugu war yaraanaya, marka waan ugu qashiinsanahay, waxaan aadayaa aan ka abarayaa.

- **Qodobka 51aad** waxaa la yiri awoodoo dhan, waxay ka bilaabataa, ku dhamataa xilibaanada, laakiin iyagu madaxweynihii ay doorteen, markala madooranayaane, ha'iska dhigeen awooda, hadajiyeen, awoodda halaga qaado, anugu waxey ila tahay, inaan awaal aanan mudneyn, anagoo madaxweynihii dooranay, haduu dadka dhibana ridi karna, in layiraahdo yay doorane, madaxweynaha dadka, ha doorto, magac layiraa Wanlaweyn, Daafeed ayaa la oranjiray magaaldaas, Wanlaweyn waxaa loo yiri, iyadoo dadka dagani 500 kun ka badneen, aa waxaa la yiri 90 kun baa soo dooratay, dastuurkii xaqiijisay, markii allaah ha'u naxriistee, Aadan Cabdulle Cusmaan, dastuurka loo qaadahayay, magacaas waxey la baxday, waxa weeye, Wanlaweyn baa xamar ka dad badatay, marka Wanlaweyn, walaalahey reer waqooy baa noo bixiyay, hada dadkoo la aado, waa naqaanoo, waxaa la oronayaa, xudur 2 million baa ka dooratay madaxweynaha, nin baa un taar soo diraaya, taarkaas un baa wax lagu fulinaya, waxa weeye, sidi xilibaano badan sheegeen, oo Ilyaas iyo Senator Cabdixakiin iyo ay ku jireen, "ama rag kalaba yiri, in aan baarlamaanku mudneyn, in la yiraahdo idinku awoodiina dajiya, idinkuna halidin doorto, idinkuna wax hadooranina, labada aqal iney doortaan madaxweynaha, baan anugu ayidsanahay.

  Waxaa kaloo jira madaxweyne ku xigeen, waan araknay waana layaqaan, waanna joogaanoo goboladey joogaan, madaxweyne ku xigeen waa un hade anigu, iyagu shaqsiyan xumeyneynin, waa un Cabduqaadir lugu dheere, seylici, aan meesha soo dhigto, halkaa madaxweynaha iska ak fariiso, waxna maqaniinahayo, asna lama maqaniinayo, waxaan anugu ayidahayaa, in nadaamka hada socdo, oo sahlaaya in la xisaabtamo, oo qeybtu ku socoto, in loo daayo, raisal wasaare jiro, madaweynahana dhib kuma qabo, haduu asagu doorashada leeyahay, ninkuu rabo inuu ka dhigo, dee waa u fadhinahayaa, haduu garan waayo, uu qaniinana, waa qaniinahayaa, wuu ka eryayaa meesha, horeyna u dhacday wax badan, marka sidaa lagu xisaabtamo, xisaabtey sahleysaa, **waxaan qabaa in loo daayo sida ay tahay,** markey timaado goboladda, magacii hore kuma habooneyn, madaxweyne marwalba in la yiraah, madaxweyne, madaxweyne, oo ayagana isku qabaan madaxweyne yaal siman iney yihiin, madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ayay dhib ku tahay, in nin walba madaxweyne saa ku noqdo, oo ay is ak fadhiistaan, iyagoo 5 madaxweyne ama 6.

  Waxaa oo dhan magacaana, hoggaamiye, dee nin kastoo meel loo dhiibo, waa hogaamiye, waxaan qabaa in ayaga ay liideyso, waxaa xaqiiqada u dhow, 'Governor' oo magacaa badi loogu qoro, aduunkaa laga yaqaan, waa awood layaqaanoo meel taala, in halkaasi la yiraah "Governor" ku xigeenku ma imaanaayo, laakiin si kaloo ku imaan karaa, barlamaan markey noqoto, meeyarka caasimadda, ama kuwa kaleba, meeyaradda, waa inuu deegaanka lasoo doortay iska dhex doortaan, oo awood u yeeshaan, sidaa anugu madaxweynaha Jamhuuriyadda awood ugu leenahay, inaan doorano aan ridi karnana, hadii dhibkiisa bato, ineyayaguna ay doortaan, qof, iskana ridi karaan, markaa shir gudoonka sharafta leh, anugu waxaan qabaa, inaan waqtiga lagu raagin, waxan lasoo gabagabeeyo, ay soo dhawaadaaan, ramadaana waa kanaa waa bilowday, markii dadkana waxaan ka ilaaway, ramadaan mubaark, in waxaan lasoo gabagabeeyo, ee sidaasna, raggii yiri, ama Ilyaas lahaa, ama ku ayiday, daahir jeesow baan ku ayidsanahay, ayadoo saas ah, walaal key in kastoo meesha ka maqan yahay, xilibaan, waaba fadhiyaa, kooshin horaa loo sheegay, arintii aad sheegtay, aad tiri maa saas la yeelo, horey baa loo sheegay, iney ka bilaabaneyso, wax kastoo hada la sameeyo, wixii ka danbeeya, maamulka hada jira, xilibaanada, iyo madaxda, iyo waxoo dhan, **wixii ka danbeeyo, bilaabaneysaa, 5ta sanadood, midaan lagama dhigi karo, waaba, dabayaaqay mareysaa**. asalaamu caleykum.

17) **Xil. Dr Abdirashiid Mohamed Nor Jilley:**

Bismillaah raxmaani raxiim, alxamdullilaahi wasalaatu wasalaamu calaa rasuulihil amiin, sayidinaa waxabii binaa muxamadin wacalaa ahlihi wasac bihii wasalam. Een ramadaan mubaarak. Xilibaanada sharafta leh, hadii aan gudaha u galo doodeyda.

- **Qodobka 46aad** awooda shacabka ee mabaadi'da guud ee matalaada shacabka, een faqradda (1) ee waxaa la dhigay Allaah Subxaanahu Watacaalaa kasokow, awooda isxukunka waxay ku bilaabataa, kuna dhamataa, shacabka Jamhuuriydda Feferaalka Soomaaliya, kaasoo leh, awooda laxisabtanka, hey'adaha dowladda ee heer kasta iyo wakiiladda shacabka u xilsaaran maamulada dalka iyo adeegada dadweynaha, mesha waxaa laga saaray oo lagu wiiqayaa, awooddii golaha shacabka, anaga waxaan nahay mumataliinta shacabka, waxaan nahay wakiiladii shacabka Soomaaliyeed, wakiiladii shacabka soomaaliyeed anagoo ah waxaan awood buuxda u leenahay inan la xisaab tanno korjoogteeno hey'adihii kale ee dowladda, agaasimoo kalaa lagaa dhigay marka, waxaa lagaa dhigay, agaasime oo kale, shaqadaa adiga qabaneysid kaliya waxaa waaye maamulka dalka iyo adeegida dadweynaha, meeshaa laguugu ekeeyay, xilibaanow iska fiiri meeshaas, **qodobkaa sidii sii nuxurkiisii, sidiisii hore in loo dhaafo rabnaa, akhyaarey inaad "note" gareysataanna waan jecel nahay taas**. Ee tan kale madaxa labaad ee doorashooyinka, nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyadda, nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyadda, shuruucda ku saabsan, xisbiyadda diiwaan galintooda, doorashooyinka, heerka dowladda Federaalka, iyo Guddiyada qaranka ee madaxabanaan ee doorahooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah, oo uu soo saaro, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan rabnaa in shuruuc gaar ah lagu qeexo, nidaamka doorashooyinka, sababtoo ah nidaamka doorashooyinka, xeer kaas waxaa xaq u leh, awood u leh, Golaha Shacabka, xeerkaas aan kaga hadalno noocee rabnaa doorasho, ma liis xiranaa rabnaa, misa liis furan, **waa in dastuurka laga saaraa taas, oo aan laga dhigin dastuuri.**

  Een dowr jeer waxaa soo noqoqday, qodobkaan kale mabaadi'da guud ee doorashooyinka, mabaadi'da guud ee doorashooyinka, waan ognahay, doorashada waxaan rabnaa iney ahaato doorsho xor ah, cadaalad ah, codkuna qarsoodi uu yahay, oo kamaran takoor , eex, musuqmaasuq, cabsi galin, hanjabaad , marin hababin, iyo faragalin shisheeye, doorasho walboo dhaceyso iney faragalin ka maran tahay rabnaa anaga, waalaga saaray waxaan ala dhahay, madasha wadatashiga qaran, sidaasay wax usoo qoreen, sidaasaa u qaadanay, marka nuqulkii golaha wada tashiga qarana nasiiya maheysanee, ee sidii hore inaad u deysaanna waan jeclaan laheyn, oo aad qaadataan talooyinka aan idin siineyno. Ee mida kale,

- **Qodobka 50aad** nidaamka doorashooyinka, nidaamka doorashooyinka, waala galay waxaa laga hadlay, liis xeran iyo liis furan midkood, hora u sheegnay, liiskaan iyo liis xeran iyo liis furan wuxuu noqonaayo xilibaanada ka go'aan gaareysee, inta yaan lagu soo qorin, marka waxaan u fahamnay anga, ujeedadda laga leeyahay, ay tahay, hadhow marka xeerka ama sharciga doorashooyinka lasameynaayo, in lagu dhaho, waaba dastuuri, luuqad dastuuriya, loo badalay, liiska wuu xiran yahay ka hadal ma leh in lagu dhaho la rabbaa, ka hadalee leedahay hadaana ka hadleynaa, waxan leenahay, **liis xiran iyo liis furan waxuu noqo naayo xeer gaara iyo sharuuc gaara halaga soo saaro**, markaas aan is wareysano sidey noqoneyso. Mida kale

- **Qodobka 51aad** hey'adaha sida tooska ah loo dooranaayo, nidaamka presedentioal system ka, waa nidaam dalkaan qatar u horseedaayo, burbur u horseedaayo, nadaam dalkaan uu hada qaadan karo maahan dalka wuxuu leeyahay , "parlamentry system" , "parlamentry system" faaidada uu noo leeyahay aa waxey tahay, is qabqabsiyaa jiro sidaxda hey'adood, garsooka ,fulinta iyo hey'adii sharci dajinta, wey kala madaxbanaan yihiin, inkastoo wali garsoorka lagu laban yahay, marka isqabqabsigaas siyaasadeed, bey Soomaaliya xal u tahay, maadaama burbur wax badan ku jirnay, nidaam qabalina aan kuraasta ku fadhino, ninkastana uu qabiil meeshaan ku fadhiyo, waxa dalkaan ka dhacana waala og yahay, dhibaatada dalkaan soomarayna waala ogyahay, ee cuqdada iyo qalbiga waxa dadka isugu jira waala og yahay, si lisku aamino maleh, **si xal loogaaro dalkan, nidaam Parlementry-guu xal ku jiraa, nidaam kaas inaan qaadano ayaan soojeedin lahaa.** Ee arinta dowlad gobleedyada, dalka horta federaal waaye, aan dhahno dalka fadaraal maahan, luuqad layqaano waaye, laakin dal haduu federaal yahay, madaxda dowlad gobleedyadda habmaamuuskooda, sharaftooda xasaanadooda, xurmadooda ixtiraamkooda, ay mudan yihiin , in la bahdilana waxaan yeeleyno maahan, dowlad gobleedyadda aniga waxaan qabaa, magaca loo bixinaayo ala yiraahdo, madaxda, ama madaxa dowlad gobleedka, hala yiraahdo, laakiin hogaamiye, ma Khawaarijaa qofka, hogaamiye, iyo hogaamiye kooxeed, shabaab iyo waxaa is ticmaalaayay, hogaamiye kooxeedka, dib maanoocelineysaan 20 sano, taasna ma'idinka yeeleyno, taladaas qorta walaalayaalow. Een marka hadaan nuxurka isku soo uruuriyo, laba arinaa laga hadlay,oo arinta aheyd doorashooyinka, taladeedi waan soo jeediyay, arinta kale 'Presidential system-ka' waan soojeediyay, arinta matalaada shacabka oo larabay in lagu wiiqo, awooda Golaha shacab, waan dajiyay, een waxaaan rabba marka gunaanudka, ***hadii marka nadaamkaan la qaato, nadaam kaan la qaato oo la iska indha tiro oo talooyinkaan aan soojeedinay Guddiga ay iska indho tiraan, horta meel ay gaareyso, iyo meel ay ka soconeyso horta malahan, dalkaan wuxuu galaya, xaalad qatar ah, waxanna meel ay kasoconayaan oo ilaahay abuurtay malahan,*** xilibaanaa nahay mumataliinta shacabkaa mahay, bulsho waxaan matalnaa 60kun ka badan, talooyinkeena iyo tusaalaheena wax badanaa la iska indho tiray, yaanan la iska indho tirin, hala qaato, hadii la qaadan waayo, cawaaqib xumaa ka dhalaneyso, "beceuas" deegaan iyo dhul ayuu matalaa, ninwalbo dhulkiisa haka taliyey ku tageysaa akhiiran. Waan ka baxay.

**18) Xil. Mahad Abdalla Awad:**

Bismillahi raxmaani raxiim, mahadsanid Gudoomiye, ramadaan mubaarak, dhamaantiin waan idin salamaya, salaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh. waxaan is lahaa, cutubka 4aad wuxuu noqonaya, cutub aad u adagoo, dood badan laga gali doono, show waaba kan ugu fudud, asagaa ugu fudud. Een arinta ku saabsan.

- **Qodobka 50aad** oo ugu danbeeyay, oo xilibaanadu ka hadleeyeen, waa run weeyaan. Ee Guddiga lasocodka iyo Guddiga madaxabanaan, waxaan kula talinayaa, faahfaahinta arinta ay soo galiyeen, liiska xiran iyo ku saabsan, arintaas haka daayeen, arintaasi waxey keeni kartaa, yacni cutubka dhan iney, qaribto, idinkuna inaad wax hagaajisaan baad u baahan tihiin, marka liis xiran iyo liis furan, iyo qaabka leys ku dooranayo, sharciga doorashooyinkey nootaalaa, shaqo adag weeye, yaanan qodobkan caqabad u dhigin, marka taas iyadu waxa weeye, ineysan iyagu ugu dan laheyn, caqabad, baan rumeysnahay. qodobka kusaabsan system kee dowliga aheen qaadaneynaa, een horta "system parliamentary" ah, dalkeenu ma leh, mana laheyn, waligiis na meynan yeelan, dhaqan keena siyaasigana maaha, "system" keenu 'Hybrid system' ahoo, oo talyaaniga noo sameeyoo, "system"kii waa baqal weeye, farasna maaha, dameerna maaha, waa wax u dhaxeeya, baqal

baala yiraahdaa isku jir, een marka inaan, fursad u helnay hada, inaan system qaadano, oo system kee noogu haboon, ayaa waajib ahe, system baanu heysanay aanu deysano, horta meesha inooma taal, qaab dowli ah, oo lagaranayo, oo caalamka garanayo, malihin, system talyaanigu uu noo habeeyoo, oo asagaba iska nacayoo, uu ka guuray, weeye system kan, inaan ka guurnana wey nagu haboon tahay, een walaala yaal, waxaad la socotaan, madaxweyneyaal baa noo yimid, farabadan, midwalbo waa tii teendhada nagu heystayoo, 'platform' waxaasan qabanayaa, waxaan balan qaadayaa, dalka waxaasan ka dhisayaa, waxaasaan ka hagaajinaya waa kii lahaa, mid kamidaanu dooranay, waxaan ku dooranay, 'mandate"kii uu nasoo hor dhigay, iyo book tii uu inoo qeybiyay, waala baxayoo nin kalaa hadana la keenay, oo isagaa keenay, ninkii iyo qolo xukuumad ah, iyaguna waxey keeneen, 'mandate' bey la yimaadeeno book cusub, ayay la yimaadeen, aanba kiiba aheyn, kiina saan ansixinay, markaa laba fulinood, ayaanu siinay, 'mandate' ogaada yaah, system kan "presidential" ka, lasoo jeediyay wuxuu sheegaya, labadaasuu mideynayaa, hal fulin aan la xisaabtanno, hada madaxweynuhu meel buu fadhiyaa, raysalwasaarihiina meel buu fadhiyaa, dalka wixii ka qaribmaba meel aan u raacano manaqaan, waxa weeye, fulintu waa iney mideysnaataa, dhibta kalee nagu dhacday waxa weeye, waa aan laheyn waxbaan sameyneynaa, ayaan laba aqal abuurnay, labada aqalna, waxey ku shaqeeyaan, hadba sidey isku afgaranayaan, Gudoonka labada aqal, hada hadey isku kacaan, wax dambe oo noo hagaagaya, iyo shaqo danboo, qabaneynaa majirto, anagaa dhibtaas nagu soo dhacdoo, sanad iyo sadex bilood baan fadhinay, oo aan hal sharciya sameyn, calaashan labadii Gudoomiyaa is fahmi waayay, marqaataa ka wadatihiin intiinii hore, u joogtay, hadana waxaan ku wada joognaa, madaweynaha iyo raysalwasaarahaa isku fiican, caawa hadii ay is fahmi waayaan, dalkeenu "crisis' labada aqal gudoonkooda haduu is fahmi waayana "crisis" buu dhax taagan yahay, laba fulinoodoo qeybsan, iyo laba aqaloo, kala qaaran, afartaasi dalkaan, 'fragile' ka ah ma u dhaxeyn karayaa, waxaan kala go'aan saneyno, hada qurux maahan, waxa weeye, maba noo socon kareyso sidii aanu ku jiri jirnay, mashaqeyn kareyso, weeyaan, een hadaa taa ka baxo,

- Qodobka 51(4): Oo war keygu uu cad yahay, oo ah, waxaan qaadaneynaa oo aan idin soojeedinayaa, dhibtii aan anugu soo marnay, aanu soo marnay, 2000 , oo aan anugu xildhibaan kasoo noqday ilaa hada, inaan lagu sii jiri kareynin, oo aanu mideyno, laanta fulinta, waxaanu ku mideyneynaa, "team" kii , guuleysta iyo xisbigii guuleysta, ayagaa madaxweyne la imaanaya, madaxweyne, ku xigeenna la imaanaya, xukuumadooda, la imaanaya, ayagaana lala xisaabtamayaa, warku inuu sidaas ahaado ayaan ku qancinaya, xilibaanada walaalaheyga sharafta leh.

- Qodobka 51(5) ku saabsan hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen, walaalayaalow, arintaa ayada ah naga daaya, arintaas wax macno ah ay soo kordhineyso, oo aan "semantics" ka aheyn, majirto, waxa weeye, hadaan anagu dhahno kawarama, xildhibaanaa nala yiraahdaa, kuwa dowlad gobleedyadda, car xilibaan haloo bixiyo, ma aqli baa waxaas, see ku noqonayaa anagaa xilibaano, nala yiraahdaa, halaga soo tirtiro ayaga, magac kale haloo bixiyo, waxaasi wax shaqeynaya maaha, baarlamaanada dowlad gobleed yadda, xildhibaanaa
- niraahnaa, anagana xilibaanaa nala yiraahdaa, laakiinsa laba "level" oo dowladeed baan nahay, "system" Federaal ah ayaan qaadanayy, walaalayaalow nimankaasi madaxweyneyaal baa la yirahdaa, si fududna loogu tirtirimaayee, kuwa danbe, haka tirtiraanee, hadda, hogaamiye iyo madaxa xukuumada, bahalkii, maxaa la yiri, madaxa maamul gobleedka, markaa haye, **Madax**, maan leenahay, waxaas ka daaya walaalayal wax macquula maahee, cidda waxaas soo jeedisay anugu garanmaayee.

- **Qodobka 53aad,** qaan gaarka, maxaa hadana keenay 18 ka keenay, sownagii niri waa 15, yaa, war waxaas naga daaya 15 jir wax waa kala garta, waxna waa dooran karayaaye, dad muslim baa nahaye, waana soomannahaye, maxaad ku keenteen 18ka lala ordayo, qaargaarka hadii la yiri waa 15 Guddigow, arinkaasi qaargaarka meel danbo, oo 18 ku qoran tahay yaanan arkin, asalkiisaba naga daaya 18, hadii kalena, qolo gaalaan ka cabsaneynaaye, dhaqaalahey naga goysayane 15 aanu ka deyno maan leenanay, wallahi hadeysan wax kale aheyn, qof soomaali oo miyirqaba oo aaminsan 18 majirtee, beesha caalam kaa aminsan, marka waxooda yar ha iska goystaan hadey rabaane, 15 keena noogu qora dastuurka anagaa iska lehee, qaan gaarka islaamku waa 15, codbixiyahu 15 jir buu ku bahal kiyeen karayaaye, guri buu ku yeelan karayaa, waala guursan karaya gabadhu, wiilka waa gursan karayaa, waa qaan gaar, hadey cidkale aaminsan tahay wax kale, ayagey u taalaa, labadaa qodob ayaa maanta lagu soo koobay, waxa weeye system ka dowliga ah, waa system fadhiya, oo xeer dajintii iyo ,iyo kala qeybsanyihiin, oo isla xisaabtamayaan, ee dadka aaminsan baarlamaanka ayaa laga tagay, warmheedhaha, xisbiyaa loo kala dhaqaaqay, xisbigii "majority" qaataa fulintii qaadanaya, magaratay, marka , qaabkii hore inta aan 275 "constituency" an aheyn oo inta, iyo 54 aqalka sare oo inta meel leysku kaayo soo xareeyo, aan qof dooraneynay, anagoo qabaa'il ah, ma aheyn, maaha bahashu, waalakala fadhiyaa, xisbi "majority" iyo xisbi minority loo kala fadhiyaa, madaxweynaha ku xigeenka iyo fulinta, xisbiga "majority"ga yeelanaya, intii mucaaradka, yacni xisbi mucaadradka noqotana, la xisaabtan keeda iney too toosiyaan bey leeyihiin, aysa kuwaasi dhumin, ayay ka shaqeynayaan "mandate"ka intaas, markaa qolo wax kuxunta iyo qolo la xisaab tameysa noqonayaa, magaratay, ee laakiise sidii hore maaha, 330 qofoo, waxa weeye codka laga tuugtuugayo majirto, shacabkaa lagu soo kala baxayaa, intii aqlabiyadda baarlamaanka noqota, ayaa fulinta mandatekaas yeelaneysa, inta kale wey suganeysaa, ilaa doorashada kaley suganayan, wax dhib leh maahee bili aadamkaa saas u dhaqma, markaa isbadalka yeynaan ka cabsanin, isbadalka hala soo dhaweeyo, wax aynu Meesha ku heynayoo macna lahoo aad u weyn oo ayna ka guuraynaa majirto, madax weyne ee raisal wasaare uu keensaday asagu, oo markiii hore uu isku soo taago aan aheyn, waxa weeye wax oo la difaacdo iyo wax macnoo sameyneysa majirta, fulintu ha midowdo, waxa weeye, waxaanba dhihi lahaaa, baarlamaankana hal nooga dhigo, iyagana hal halaga dhigo dhihi lahaaye, weydan yeeleyn, marka "at least" bal fulinta uun, aynu saas ku mideyno, aad baad u mahsantihiin wasalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

19) **Xil. Abdirisak Hassan Ahmed Dhookir:**

Mahadsanid mudane guddomiye, Mudaneyaasha sharafta leh Ramadaan kariim, salaamu calaykum waraxmatullahi wabarakaatu, runtii cutubkani marka aad fiiriso waa cutub ahmiyadiisa leh, sidii xildhibaanadii iga horeeyayba ay sheegeen, waa cutub "structure" kii Dawladnimada ee Soomaalidu muddo ay kusoo dhaqmaysaba badalaya, waxaan is waydiiyay marka sadex qodob oo ah:

- Waxaynu qaadanay "presidential system", maxaa keenay marka inaynu qaadano?, baahida inagu kaliftay inaynu nidaamkan qaadano maxay noqonaysaa?, taas oo la qodobeeyay, horta waxaanu karabnaa Guddiga intay halkan soo istaagaan, inay u faahfaahiyaan ooy dhahaan waxaa keentay baahida 1 iyo 2 iyo 3 iyo 4 inaynu nidaamka caynkaas ah qaadano.

  "presidential system"ka hadaad fiiriso aduunka ama aad, aad u akhrido, wuxuu leeyahay nidaam oo wadamada ay "institutions"koodu dhisanyihiin haday qaataan "presidential system" waxa ay leedahay "dictator"nimo inay halkaa ka imaanayso, waxaa lumaya

"check and blance"kii, aduunka Dawladnimadu heshiis ayay ka bilaabatay, markii la heshiiyay ayaa shuruuc la samaystay, shuruucdaasaa lagu dhaqmaa, markaa dalkeena oo Dawladii 1991 ay dhacday, muddo kadib hadana aad rabto inuu soo kabto, hadii aynu hada qaadano "presidential system" oo "check and blance"kii uusan jirin, miyaynaan markale halis kale wajahayn, maxaynu kala dagaalamaynay Dawladii hore oo loo riday? Waxay ahayd "dictator"nimo, aniga halkaa waxa ii muuqata halis wayn oo hadii Soomaali oo wali aan cagaheeda isku taagin ay nidaam kale ku boodo, iyadoo aan "institutions"keedu aanay dhisnayn, nidaamka uu qaatay ee "presidential system"kana uu wali ilaa iyo hada khilaafkiisu taaganyahay inay halisteeda leedahay, waxaan fiirinay Africa wadamada qaatay oo dhan, waa wada "dictatorship", awoodu hal meel ayay ku jirtaa, marka aniga waxaan qabaa inay taas halisteeda leedahay,

- Ta labaad ee iisoo raacda waxy tahay, "close list", nidaamka doorasho ee uu dalkeenu qaadanayo, aniga waxaan qabaa inaan lasoo duuduubine, iyadana bahashaas meesha laga saaro, dib loo dhigo, Soomaali aynaan waqti badan ku lumin, waxaan lagu heshiinayn, hadii aynu halkan waqti badan gelino, waxaan lagu heshiinayn oo laysku qabsado, waxaan u malaynayaa in aynaan waxba soo kordhin, siyaasadu waa "problem solving", inagaa ummada Soomaaliyeed matalna, inaynu inagu "problem"kii xalinno meeshay ahayd, iyadana waxaan qabaa yaynaan "problem" abuurin ee taana aynu iska dayno,

- Qodobka kale ee meeshan ku jira, labada (2) xisbi, iyaduna waa arin u baahan in lays waydiiyo, maxaynu ku dooranay labo (2) xisbi "two party system", aniga waxaan qabaa aragtiyan, hadaynu ka cabanaynaa 4.5, waxaan ka cabanaynaa Soomaali inay is dulmiday oo ilaa iyo hada aan xal loo helin, hadii iyadana marka iyadoo aan waxyaalahaas loo fiirin aan ku boodno, ma qaadayaan "two party" siyaasiyiinta Soomaaliyeed oo dhan? Dadkaan doonaya ee 4.5ka isku haysta, labo (2) xisbi horta ma qaadayaan?, iyadana waa in aynu waaqiciga ku salaynaa, okay madaxwayne ayaynu dooranay, xildhibaanadaa doortay, sanduuq kooban ayaa halkan yaala, waa lagu wada riday, Soomaali waxaynu ku wada niyad samaatay, doorashaadaasi inay ahyd xalaal waxa keenaya waa codadkii sanduuqa lagu wada riday oo la arkayay intay yihiin, qof kastana sidaas loo tusay, 2007dii Kenya labo (2) xisbi ayaa tartamay, xisbigii ODM oo Raila Odinga uu hogaaminayay ayaa wuxuu idhi doorashadaydii waa lagu shubtay, dadkii markuu intaas idhi way dareereen, baangad bay qaateen, kumaan kun ayay madaxa iskaga jareen, hadii marka labadii (2) xisbi mid kamid ah uu idhaahdo maanta way tolaay, waliba Soomaali way hubaysantahay oo waan ognahay, oo reerkiisii intay qoryaha qaataan dadka kale baabah ka dhigaan, iyadana side loo xalinayaa?, marka aniga waxaan qabaa Dastuurka in aynu ka shaqayno waa muhiim, laakiin waxa muhiim ah inaynu waaqiciga waafajino, inaynu dhibaatadii ku dhacday wadankeena waafajino, ta hadda aynu ku jirno waafajino, **iyadana waxaan qabaa "two party system" Soomaali ma qaadi karto, arintaa iyadana tashi kale haloo yeesho, waad mahadsantihiin.**

**20) Sen. Muuse Suudi Yalaxow:**

Bismillaahi raxmaani raxiim, alhamdellahi rabil caalamiin wabihi nastaciinu calaa umuuri dunyaa wa diin, Mudane Guddoomiye, guddoomiye ku xigeenada labada aqal, habdhawrayaasha labada aqal, xoghaynta labada aqal, xildhibaanada labada aqal, Guddiga Dastuurka madaxbanaan iyo Guddiga lasocodka Baarlamaanka, idaacadaha, ciidanka amniga, in ala iyo inta joogta iyo intaan wakiilka ka nahay, waxaan ku salaamay salaanta islaamka, salaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatu, salaam ka bacdi.

Aniga kow ayay ii tahay meeshaan, dood badana waan dhagaystay, waana kala duwantahay, qaar waxay daafacahaayeen walaxey meel ku ogyihiin, qaarna daacadey u hadlaayeen, aniga waxaan rabaa, meeshaan waxaa la iri, qolo oo la xaqiri karo malahan, shan (5) beelood ayaa layahay, xisbiyaalaa la noqohaa ayaa la iri, adiga xisbigaaga "minority" haduu noqdo waa haree, hadaw kii baasa noqdana xisbigaad kamid noqoto, "minority"na malihid, "majority"na malihid, qabiil badana malihid, 'Hal-yarna ma lihid', gabarna malihid, wiilna malihid, waa lagu wada jiraa, markaa horta labo (2) xisbi ama sadex (3) xisbi aan dhahno, afar (4) xisbi inaan ku heshiino maahane, waxaan hada lagu noogaayo waxaan qabaaba arintu inay ka gudubsantahay, xisbiyada markii la gaaro meeqaa laga dhigaa, meeshaas ma taqaan aan ku kala ra'yi duwanaano, laakii hadii ceelkii oon la gaarin bacaadkaan aan kusii noogno, waan sii xiiqaynaa, meeshaan xisbiyaa la noqohaa haa layiri, madaxwaynuhuna qof uu noqohee lama yaqaan, shanta (5) beelood beeshuu ka noqdo oo xisbigaasu bormooso, kaasaa loo hogaansamaa, haddii ay rag wadaanta ceelka ka celihaayo ay noqdaan madaxwaynaha, ayagaa loo hogaansamaa, haday kuwa ceelka ku jira noqdaan waa loo hogaansamaa, haday kuwa kaloo ceelka meel kale ka rooga noqdaan waa loo hogaansamaa, inta Dawlad Goboleed oo jirto iyo inta Soomaali jirto, kuligood xisbiyadaasaa aga mid noqohaa, dalkaan isma raacsana, isna raaci maayo iyadoon xisbiyada lanoqon, ma is raacaayo, waa in gees ka gees xisbi walba dad uu ka gaaro, kuwa uugu badana waa inay markaas mudada loo qabtay, dalka xukumaan, waxaa soo hartay, anigu "horror"na ma ihi oo hada darajo jecle i raaci mee, oo hada senatorkaan wax ka badana mana rabi, manaba noqona karo, isgaanba hada insha Allahu ama ay muddo iga reebee ama ay da' iga reebee, hada waxaa layiri madaxnimada shan (5) sanno halaga dhigo, waa fiicantahay waana waafaqsanahay, nin walba markaan soo dooranaynay, waxaa la iri umuli hilmaansho dhawaa haa la iri, aqalkii teendhada ahaay markaan ku jirnay, nin walboo "microphone"ka noo joogsado, wuxuu nalahaay dastuurka waan dhamaystiraa, waan yeelaa, waa kii kale. waan yaabaynay, hadii la dhamaystiri tagana, kuwii lahaay hala dhamaystiro aa maanta xoog u hor taagan, dad waan la tashahaana tiro uuguma jirto, nin walba anaa dhamaytiraahuu lahaa, hada halayla tashado, hadaan layla tashan dhaweey dhash maleh, horta aniga hadaanan wadin, xaa loo wadaa, xuu u dhamaystirmaa. Waxaasu ceeb waaye waa wixii ciyaalka oo "Gow iyo Gash maleh waaye" waa lagasoo gudbay, anakaa magaaladu noo kala xirnaan jirtay, Illaahaa nagasoo gudbiyay, waa lagasoo gudbay, dadkaan hada boodaayoo dhacaayo, juuq madhihi karin, hadana qof la arkaba waxay rabtay sheegi kartaa, Guddoomiye marka aniga raalina halayga ahaado, ra'yigayga waxaa waaye xisbiyadaas, ninkaas guddoomiye ku xigeenkii hore ah (Mahad Abdalla Awed) ra'yigiisa aan boqolkiiba boqol raacsanahay, waa jiraan dad badanoo ra'yigooda aan wada jeclahay, qofaan ra'yigeeda necbahay majirto, qoftii Gow iyo Gash maleh tiraahda kaliyahaan ra'yigeeda necbahay, intii wuxu inay socdaan jecel waan waafaqsanahy, selaamu caleykum waraxmatullahi wabarakatu.

**21) Xil. Roda Arab Sharif Abdi:**

Bismillaahi raxmaani raxiim, awalan salaam Guddoonka sharafta leh, xildhibaanada labada aqal iyo qof kasta oo ku jira qolkaan, waxaan idiinku salaamayaa salaanta islaamka asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu, inta aanan dhex galin qodobadayda marka hore waxaan leeyahay umadda Soomaaliyeed Ramadaan mubaarak dhamaan meel kastooy ku noolyihiin. Waxaan rabaa inaan iraahdo 40 sanno kahor, meeshii aan ka dhaqaaqnay ayaan manta u soconaaye, Illahy khayr ha inooga dhigee duceeya, ummado waxa jiray la halaagay oo kamid ahaa ummadihii hore oo 40 sanno jahwareersanaa, inaga

marka 40kiina waynu sii dhaafaynaaye Soomaaliyeey halaysku tanaasulo, Illahayna halaga cabsado, waxaan dhex galaayaa markan qodobada.

- **Qodobka 49 (G)** Damaanad qaada in dhamaan qaybaha iyo kooxaha Soomaaliya ay helaan, matalaad cadaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba. Siiqadaas xoogaha waxaan ku badali lahaa, in la iraahdo, meeshana maadaama ay ku qorantahay qaybo iyo kooxo, kooxo ma garanayo waa lagasoo gudbay kooxaysigii, in laga dhigo **Muwaadiniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya dhamaan waa inay helaan, damaanad qaad matalaad cadaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.** Waliba waxaan rabaa inaan ka cawdo, haweenka marka la sheegaayo marwalba waxa lagusoo daraa dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo caruurta iyo waxbaa lagusoo daraa, walaalayaalow bulshada Soomaaliyeed waa Rag iyo Dumar, anigu waan simanahay idiinma lihi laakiin Rag iyo Dumar baynu nahay, markastoo haweenka aad soo qaadaan inay jilicsanyihiin meelaha jileecaad kusoo dartaan, noomana ogolidin xaqayagii, bal kootadii diyaar ha idiinka ahaataan leeyahay dhamaan raga Soomaaliyeed iyo Guddoonka iyo Guddiga doorashada iyo cidii imaqlaysaba, kootadii waa loo baahanyahay maadaama meel kasta aad nagusoo qaadanaysaan ood leedihiin, dadka laga tirade badanyahay, iyo dadka baahiyaha gaarka ah qabo, oo aad leedihiin waa dad liita, bal aan liidanee 30keenii diyaar ha idiinka ahaadaan, siiqadaasna sidaasaan u hagaajin lahaa.

- **Qodobka 51 (C)** Hay'adaha sida tooska loo dooranaayo, waxa ku qoran Hogaamiye iyo Hogaamiye ku xigeen, walaalow goormaan ka guurnay nidaamkii Federaalka ahaayee "state"yada ahaa, wadanku "state"yuu ahaaye, hadii laga guuray maxaad Dastuurka uugusoo dari waydeen ood u cadayn waydeenoo aad u dhihi waydeen wadanku "county" ayuu u guuray, maadaama "county" loo guuraynа, waxa la bedelayaa madaxweynayaasha ereygii ahaa, aniga in la bedelo waan qabaa oo madaxweynayaashu inay isdabayaacaan maaha dalku hal madaxweyne ayuu leeyahay, laakiin weli state baa lagu jiraa maadaama state lagu jiro oo County-yo sidii dalka Kenya aanu u guurin, dee magaca madaxweynaha aad bedeshaa waxba ma taraayo, still dowlad goboleedkii baa taagan, **kolkaa waxaan jeclaan lahaa in dib loogu noqdo oo lagu soo daro oo lagu xaqiijiyo inay ka guurnay nidaamkii ahaa federaalkii state-yada oo aan u guurnay County oo aanu Governor-yaal u bixino,** taasna waan ku talin lahaa.

- Madaxa 2aad qodobka 51aad Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen: Waxaan odhan lahaa Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen dalku inuu yeesho, waxaan jeclaan lahaa Madaxweynuhu inuu soo magacaabo Madaxweyne/kuxigeenka, se hadiiba laga crarayo Raysalwasaare awood leh oo haddii raysal wasaarihii awood leeyahay oo maanta la leeyahay way isbarbar socdaan way iskhilaafayaan, miduu isagu eryi karo inuu soo doorto ayaan ku talin lahaa, waxaa kaloo aan ku talin lahaa nidaamkii horee dowladii Kacaanka 4 Madaxwyne/xigeen ayaa joogay ama Gole sare ayuu lahaa, si beelaha ay ugu qadin wali kamaynaan guurin nidaamkii ahaa 4.5,si beelaha soomaaliyeed ugu qadin in 4 Madaxwyne/xigeen laga dhigana waan ku talin lahaa iyadana

- Cutubka 4aad weli waan ku dhexjiraa. Qodobkan 1aad ee ahaa awooda isxukunku waxay ka bilaabanaysaa, qodobkaa waxaan jeclaan lahaa in lagu daayo sidiisii oo lagu soo kordhiyo "Allahh subxaanu watacaalaa" ka sakow awoodu waxay ka bilaabanaysaa, in sidaa loo daayo ayaan jeclaan lahaa oo lagu kordhiyo "Allahh subxaanu watacaalaa" maxaayeelay halkan waxaa laga saarayaa awoodii baarlamaanka, markaa anigu waxaan qabaa oon

xoojinayaa xildhibaanadii iga horeeyey **in halkaa sidiisa loo daayo oo lagu kordhiyo "Allahh subxaanu watacaalaa" maadaama intaasoo keliyihi ka maqantahay**.

- Madaxa 2aad Qodobka 47aad waxaa ka hadlay xildhibaano badan, inagiyo aqalka sare isqabqabsiyo badana waa jiri jireen, waxyaabo aan ka wada shaqaynona waa jirijireen, haddii labadii aqal layiri shuruucda doorashooyinka way soo wada saarayaan waxba kama qabno, **laakiin qodobka 47aad isagoo meeshiisa ku yaalo halagu caddeeyo oo ha la yiraahdo uun labada aqal ha lgu soo daro** sidaasaan iyadana ku talin lahaa.

- **Qodobkan 51(2)** xubnaha u tartamaya kuraasta golaha shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxan ku dooranaynaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbanaan dhammaan muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiyeyaasha, halkaa waxa ka maqan shuruudaha codbixiyeyaashaa deegaan doorashadiisa, haddii kursigii la lumiyo deegaandoorashadii lama luminayo, khaasatan aniga reer baan kursiga ugu fadhiyaa ilaa hadda saacadaan weligeed gabadhi may qaadan, waa markii ugu horeysay ay gabadhi qaadato, haddii dee dadka qaar Baarlamaanka ku jira kuraastooda qaar Carta ka bilaabantayna, kursigaan anigu aan ku fadhiyo waxaa iska lahaa oo ku fadhiyey 1960-gii Cumar Macalin oo lawada yaqaanoo dowladdii Soomaliya ka tirsanaa, marka in degaan doorashadii la lumiyo kursiga summadiisa anigu waan ka soo horjeedaa, waa in halkaa lagu daraa deegaan doorashadiisa oo lagu caddeeyaa, macnaha dhamman muwaadiniinta buuxiyey shruudaha codbixiye ee deegaan doorashadiisa waa in la dhahaa, kursiga waa inay deegaan doorashadiisu lumin dee maantoy gabadhi naga fadhiisatay intay baarlamaanka tegtay bay doorashadiina lumisay layma odhanyo, markaa aniga waxaan rabaa in deegaan doorashooyinka la cadeeyo kursi walba deegaandoorashadiisa meeshuu ka soo galayey, sidoo kale

- **Qodobka 52** muddada xilhaynayta hay'adaha dastuuriga waxaan odhan lahaa in 6 sano laga dhigo, weliba waan ayidayaa lahaa xildhibaanadii yiri yeynaan noqonin kuwii ay suuradii Mudafifiin sheegtay ee markay wax miisaamanayaan iyagu miisaanka xagooda u badin jirey, markay dadka u miisaamayaana miisaanka naaqusin jirey caddaalada halkaa aynu ka fiirino oo yeynaan noqoninoo, waxaan odhan lahaa dowladda soo socota ha ahaado muddo xileedka aan hadda ka hadayno ee yaan inaga ahaan baan odhan lahaa Soohdimaha Arrintan Guddiga madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Xuduuduhuu ahaan jirey, horta guddiga qaranka iyo doorashooyinka waxay ahayd intaan Dastuurkaanba la keenin in la soo magacaabo, madasha qaran markii ay ka hadleenba in bil kadib in la soo magaabo ee may ahaanaan laakiin hadda laftarkeeda xuduudaha ayaa waxaa lagu soo daray meesha soohdimaha, afsoomaaliga markaan dhexgalno soohdin waxaan u malaynayaa daaqsin laba reer u dhexaysa soohdin magaran karo xuduudaha ayay ku roonayd ayaan u malaynayaa, maxaayeelay waxa jira daaqsimo reero gaara ay leeyihiin oo marwalba reeraheenu waa reer miyi oo waxaan isku qabsanaa waa daaqsinta iyo seerahaan isku qabsanaa wax kale iskuma maagaan bulshadeenu waa la ogyahay, marka waxay ku fiicanaan lahayd in soohdinta laga daayo oo xuduudaha lagu qoro, wabillahi towfiiq, soomaaliya ha noolaato dastuurka halaga shaqeeyo.

**22) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu.**

Mudane Guddomiye iyo xildhibaanada dhamaan Guddiyada Salaamu calaykum Ramadan Kariim.

- **Qodobka 48aad: Awoodda Shacabka: Qodobka 48(4)** Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed kasta inay a dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Waxa laga hadlaaye awoodda shacabka hadana waxa la keenay dowlad marka qodobkaas waa qodob meesha lagu dhax qarinaayo marka uma qalmo inuu meesha ku jirro ina waxa qaba in laga saaro sababto ah waxu ka hadlaayo awood shacabaa laga hadlaaye.

- **Qodobka 49aad: Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka: Qodobka 49(a)** Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan
- Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye. Doorashoyin keena hada anaga si caadiya u hadleena een dalal shishiiyo oo na faragaliyo hada uguma baqeene waxan ugu baqeena maragtay dowlad gobaleedyada iyo dowlada federaalka marka meeshas in la yiraahdo ayaa sax ah. In la yiraahdo ka madaxbanan faragalinta madaxda maamul gobaleedyada iyo dowlada federaalka Soomaaliyo sababto ah shisheeyihu weyn oo hada dhib badan ku haayo ma aragno ee nimankaasa ayaa faragalin badan ku haayo doorashooyinka.

- **Qodobka 49(g,h)** waxa ku soo noqnoqotay Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah Meesha ka hoosaysan waxaa lagu yidhi inay bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah marka mataaladahas laga hadlaayo matalaad caaddil ah iyo marwalba waxa la leeyahay nidaamka isku dheelitiran Soomaaliya waa naqaana hada ayaaba nidaam caadil ah ka jirin sababtoo ah dastuurkeena waxa ku qornaa qofka markuu madaxweynaha oo xiligiisu dhamaado madaxweyne ayuu sii ahaanayaa marka caadiyanna waa naqaana dalkeenu Jenyo iyo Horseed ayaa qaadato madaxtinimadda already xisaabtu wey ka badantahay marka in waxa yaabaha in aad loogu fiirsado.

- **Qodobka 50 Nidaamka Doorashooyinka: Qodobka 50** Nidaamka Doorashooyinka xildhibaano faro badan ayaa ka hadlay waan laqaba sababtoo ah waxaa lagu soo daray wax aan meesha quseynin faafinta oh close list iyo proportional representation waxaas laga soo buuxiyay oo aheen in meelkalo loga hadlo anaga ma aqbalin nidaamkas hadhowna waxa la lee yahay waxa laguu sheegay barigii laga doodaaye marka yaanan ma aragtay meel aan nidaamka doorashadda ugu hadalno ayaa la gaari doonaa yaanan waxan nalagu dhaxqarinin marka in nalaga saaro waa soo jeedina.

- **Qodobka 51aad: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo: Qodobka 51** Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare iyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya Anaga Marka hore wadankaan qaab siyaasadded oo Soomaaliya isku soo raacday ayaa ku naqmeynay tan iyo mar aragtay labatankii sano ee udanbeysay aan ku naqmeynay Hadii aan rabno inaa ka guurno waa in la sheega oo la yiraahda anaga hada nidaam aan ku dhaqmeynay waa nidaam ri,aasi ah in la yiraahdo ka dib ayaa waxa laga hadli lahaa laakin aya laga hadlin ayaa lagu soo qoray oo la iska bilaabay Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeen. aniga sidaa aaminsanhay dalkaan ma aragtay habka hada ku soo jirnay dee hab ka fiican marka la aadaayo waxan u baahanahy heyya'addo macquuli ah oo dastuuri ah oo xoog badan inaa lee nahay maxkamada inaa lee nahay ayaa aasas ah oo maxkamad dastuuri lee nahay maxkamadda ma jirto marka hada dhahno Madaxweynaha iyo Madaxweyne

Kuxigeenka aadeyna  hada aaba fiicannahay markas sababta labo madaxweyne oo la soo doortay oo mid walbo doorasho qof ku yimid oo deegan ku yimid oo dalkan aan ognahay inuu kala qeyb san yahay hadii labdoodi ay kala tagan hada labo meel ayaa lakala tagayaa cid walbana dadka soo dooratay marka kan hadda aan joogno markee madaxweynaha iyo rasi'al wasaaraha is qabtaan marwalba madaxweyna ayaa awooda oo dhahayo iga saara ninkaan marka wax ka fiican inaa aadno waan rabnaa laakin waxii aasaaska u aha oo muhiimka u ahaa meesha ma yaalan. Arrinta ku saabsan Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleed ka waa sax in madaxweyno laga reebo laakiin eraygaas Hoggaamiye kooxed iyo waxkasta iska noqon karo marka eray ku haboon maaha waxaa la dhihi karaa "head of regional states"  macnaha Meesha "head of state-ka" uu iska ahaa, kana in la yidhaahdo madaxda ama madaxa dowlad gobaleedka laakiin madaxweyne waa president iyo wixii kaloo ka fiican ma aragty laakiin dadkan hada uma maleenaayo waqti dheer ayee naga qaadaneysa hadan governess dhahno iyo dooddo badan ayee ubaahan tahay nimankaan muddo badan ayaa madaxweyne la soo lahaa marka waxey u baahan tahay wax un u meesha kala reebaayo oo labadii sawir ee is garab taagnayd   oo kala hakinaayo in la keeno.

- **Qodob 52: Muddada Xilhaynta:** Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan **Qodobka 51aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano wixii hada ka danbeeyo in lagu darro**. Hadaa sidiisa lagu dhaafa waxee keeneysaa shaki badan marka in la muujiyo in waxii hada ka danbeeyo ee waxan hirgalayaan.

**23)Xil. Mukhtar Mohamed Guled:**

Guddoonka iyo xildhibaanada labada Aqal dhamaan Salaamu calaykum Ramadan Kariim. Madaaba waqtigana gabaabsi uu yahay oo maalin Ramadan lagu jiro toos ayaan u abaarayaa. Qodobada aan comments ka qabo

- **Madaxa Koowaad: Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka**
- **Qodonka 48(1)** Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta iyo wakiillada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha.

- Qodobkaas inta badan waxan la qaba xildhibaanada Hassan Budul oo iga horeeyay siduu u dhigay oo ahayd meesha dowlada ee heer kasta in lagu ekeeyo, ka dibna lagu daro iyadoo oo  ay wakiil uga yahiin Golaha shacabka ee ayagu soo doorteen ayaan qabaa oo meeshas lagu muujiya maadama shacabweynaha dowlada ama xukuumada la xisaabtankeeda wakiil uga yahiin Golaha Shacabka in lagu muujiyo ayan qaba oo la yiraahdo. "Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta ayagoo wakiil uga yahiin Golaha Shacabka oo ay ayaga soo doorteen, qeybta danbe oo ahayd iyo  wakiillada shacabka ee u xilsaaran  **wixii ka danbeeya waxaan qabaa in laga saaro oo la tirtiro.**

- **Madaxa Labaad: Doorashooyinka** Waxan qabada ayadana qodobkii hore lo tiray ee ka hadlaaye nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyada oo ahaa qodobka 47aad in sidiisa loo soo celiyo qabaa sida xildhibaano badan ay sheegen in sidiisa lagu daayo ayan qabaa.

- Sidoo kale waxana qabin in Aqalka sare lagu soo daro ma qabo ayadana in sidii hore oo ahayd Shuruucda ku saabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ayey u qornayd waxa qaba in sideeda lagu daayo dadka ku dooddayo markii hore Golaha Shacabka kaliya jiray Dastuurka marka la samaynaayey Aqalka sare awooddahiisana waa lagu qeexay Golaha Shacabkana awooddahiisana waa lagu qeexay sidaa darteed awooddihii ay lahaayan Golaha shacabka iyo Aqalka sare in la isku qaso ma qabo **waxan qabaa in Golaha shacabka awooddisa sidiisa loogu daaya qabaa qodobkaas waxan qabaa siduu ugu qorna dastuurka in sidiisa loo daayo.**

- **Qodobka 50aad: Nidaamka Doorashooyinka:** Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

- Qodobkan 50 waxuu muujinayaa qodobka 47 sabab loo soo tirtiray waxay ahayd in meeshan kaliya in lagu soo daro Aqalka sare oo labada Aqal inay isla leeyahin lagu soo muujiyo ahayd.

- Sidoo kale qodobkan muhiimada meesha loogu soo daray ayada waxay tahay in meesha lagu muujiyo in dalka uu aadi doono labo xisbi kaliya iyo doorashada nidaamka liiska xeran uu aadi doono sababtana waxee tahay lifaaqa ama qeybta faalada oo ay soo qoreen Guddiga oo ay ku lee yahiin qobobka (1) heshiisyadda ay galeen Golaha Wadatashiga Qaran ay ku qeexantahay ama laga tixraaci karo ay leeyahiin qodonkaas (1) waxuu qornaayen sadax farqadood oo A,B,C, ah Golaha Wadatashiga Qaran waxey ku heshiiyen markaa waxaa ceeb iyo fadeexad Golaha iyo Guddiga Dastuurka ee Madaxabanan iyo Guddiga la socodka labada Aqal waxaa ceeb ku aha wixii Golaha Wadatashiga Qaran ay soo xarxariiqen inee toos golaha sidooda ukeenan oo dastuurka ku soo qoraan ceeb iyo fadeexad ayey Golahan ku tahay labada Guddina ay ku tahay.

- Waxa raba marka xildhibaanada inay fahmaan qobobka (1) oo Golaha Wadatashiga Qaran ku heshiiyen waxee ahayd:
  A) Golaha Wadatashiga Qaran wuxuu ku heshiiyay inay dalka oo dhan ka dhacdo doorasho qof iyo cod ah oo ay ku tartamaan labo xisbi qaran oo kaliya xisbi sadaxaad ma soo gali karo lagama doodi karo doodna kama furno waa labo xisbi qaran oo kaliya ayaa ku qoran siddaa darteed marka waxan qabaa in qodobkaas kontanad sidiisabada la tuura qaba oo qodobka afartan iyo todobaad sidiisa loo soo celiyo maadaama aan loo baahaneynin qodobka kontobad hadii la soo celiyo
  B) Hanaanka doorashooyinka dalka waxuu noqonaya nidaam matalada isku dheelitiran oo liiska xeran ama proportional representation close list already meshan waxa ka muuqato shaqadii xeerka doorashooyinka lagu soo saari ahaa inee raban guddiga inee toos dastuurka ugu qoraan taasna wax la qabali ayadana sidoo kale ma ahan oo waxan qabna xeerkas in loo daayo xeerka doorashooyinka oo Golaha Shacabka soo saari doono ama ay ka shaqeyndoonan.

- **Qodobka 51aad: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo: Qodobka 51(1)(a)** oo aheed Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxa rabnaa inaa ka guurno nidaanka aan hada joogno ee ah parliamentary iyo

madaxtooyada isku dhafan waxan rabnaa in la aado nidaamka Madaxtooyo ama presidential waa arin fiican waana soo dhaweenayaa lakiin waxan qaba waxa hada looga cararaayo nidaamka parliamentary waxkale ma aha nee waxa waaye ra'isal wasaaraha iyo Madaxweynaha ay markasto madaxa iskula jiraan sidaa darteed markan waxan qabaa meesha Madaxweyne ku xigeenka ah inuu Madaxweynaha soo magacaabo sababto ah hadii Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka labada ay ku yimaadan doorasha dadweyne hadhow si loo kala saaro ayaa adkaaneyso waxaba fudud hada Ra'isal wasaraha iyo Madaxweynaha in laka saara fudud sidaa darteed marka ayadana waxan soojeedinaa in Madaxweyne ku xigeenka ah inuu Madaxweynaha si toos ah usoo magacaabo,hadii u la shaqeyn waayana oo xilka ka qaado marka taas ayan qaba oo aan soojeedina oo xildhibaanadi iga horeeyay qaarkod soojeediyen.

- **Qodobka 51(1,c)** Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Kuxigeenka Dawlad Goboleedka ayadana waxan qabaa in Hoggaamiyaha laga daayo hadii Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka aan loo deyn Karin sida wadadma dariska u isticmaalan waxan qaban in laga dhigo Guddomiye gobaleed ama governor ayaan soojeedina ayadana in laga dhigo,laakin ma qabo in Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Kuxigeenka lagu magacaabo.

- **Qodobka 51(2)** Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye. Waxan qabaa sida xildhibaanadi hore ay sheegen kuraasta aan ku fadhino waxee noo lee yahiin sumad reera iska leh deegaana lagu matalaa deegaanadi iyo reerahii waa lagu matalidoona oo meelna kama bixi doonan ayadana waxan qaba meesha udanbeyso oo codbixiye in lagu daro ee deegan doorashadiisa kuraasta inee sumad lahaata qaba ayadana la calaamadeeyo.

- **Qodobka 51(3)** sidoo kale isla Aqalka sare sida loo dooranaayo waxan qabaa meesha ay ku qorantahay dowlad gobaleed kasta in laga badalo oo laga dhigo dowlad gobaleedkiisa oo la cadeeyo senatorka meesha laga soo dooranaayo ama dadka ugu codbixinaayo inay yahiin dadka deegan doorashadiisa ama dowlad gobaleedka oo matalaayo in lagu cadeeyo ayan qabaa.

- **Qodobka 53(4,b)** Qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama danbays ah oo la xiriira dembi doorasho shantii sano ee la soo dhaafay ama maxkamaaddaasi ay ka mamnuucdo xaqa codaynta, ama dembi uu galay awgeed xabsi uu ku jiro Ayadana waxan qaba meeshas maxkamada awooda uleh in lagu badalo Maxkamada Dastuuriga ah sababtoo ah waxan ognahay maxkamadaha dalkeena ka jiro si ah u madaxbanan yihiin waa dhahnoo oo magac ahaan ayaan u sheegna laakiin hadan runta isku sheegno manta ma madaxbanaano oo xafiisyada qaara laga xukumaa oo aan ognahay sidaa darteed waxan qabaa in laga dhigo meesha maxkamada awooda o leh oo hadhow la doonaayo maxkamada la rabo in loo adeegsado qofkii la rabo in doorahada laga celiyo waxan qabaa in Maxkamada dastuuriga ah lagu cadeeyo madaama aysan noo dhisnayn markii la dhiso markaas ayada noqon doonto ayada dadka ka joojiso sida hadhow hadii madaxweyna mooshin laga keeno oo u ogalaaneyso usoo fasaxeyso maxkamada dastuuriga ugu qorantahay dastuurka ayadana waxan so jeedina meesha maxkamada awoodda u leh in lagu badalo maxkamada dastuuriga.

**Taariikh:** Maarso 13, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 25aad ee Wadajirka labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeysa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Ajendaha Kulanka 24aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:17 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:40 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh, Aadan Maxaned Nuur "Madoobe |

**Ajendaha:**

(4) Furitaanka aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(5) Ansaxinta ajendaha.
(6) Dib-u-eegista dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 4aad. MATALAADDA SHACABKA, Doorashoyinka. Madaxa 1aad ilaa madax 4aad. QODOBKA 48aad ilaa 53aad

**Kulanka 25aad**

**Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe:**

Bismilaahi Raxmaani Raxeemi, xildhibaanada, sentarrada iyo guddoonka waad salaamantihiin, sidii horayba caadiga inoo ahayd waxaan sii wadanaynaa ka doodistii cutubka 4aad si qodobbadii dhinnaa loo dhammaystiro aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, isla meeshii ha laga billaabo.

1) **Sen. Abdihakim Moalim Ahmed:**

Mudane guddoomiye, xildhibaannada sharafta leh dhammaantiin waan idin salaamay, een salaan ka bacdi horaan u galayaa anigu. Halkan horta intaan Qodobka 49aad galin, Qodobka 48aad maddax kobaad.

- **Qodobka 48(4):** xogaa '*typing error*' ayaa qoraalka xaggiisa ku jira Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka masuul **ka** ah, **ka** ha laga tiro intaa waa iga mulaaxado yar weeyaan.

- **Qodobka 49(A):** iyadana waxaa la yidhi marka laga hadlayay inay doorashadu xor noqoto, waxaa la yidhi: "Waa inay ka Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodiyahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye" markaa faragelin shisheeye la yidhi waxaan qabaa mid sokeeyo iyo mid shisheeyaba midna doorashada farogelin xalaal umay aha.

  Markaa in farogelin in lagu soo koobo, farogelintaas ayadaa shisheeye iyo sokeeyaba soo galaysee inaan shisheeyahaa lagu qaydine, **meesha farogelin shisheeye la yidhi in farogelin bas lagu soo koobo ayaan soojeedinayaa**.

- **Qodobka 49(G):** Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha, kooxaha meesha la yidhina xildhibaanno horena way soojeediyeen **ururo in lagu beddelo meesha kooxaha ayaan soojeedinayaa.**

- **Qodobka 51aad:** Hay'adaha Sida tooska ah loo dooranayo,waxaa la yiri: **"**Waxaa ka mid ah madaxweynaha iyo madaxweyne Kuxigeenka, aniga mulaaxadadaydu halka waxa weeyi horta marka aan ka hadlayno madaxweynaha iyo madaxweyne Kuxigeenka toos loo dooranaayo iyo raysalwasaare iyo madaxweyne waa labo "system" oo caalamka ka jira tusaale ahaan,waxaa la yidhaahdaa waxaa jira **انظمة الحكم** ama waxa la dhaho nidaamyo la isku xukumo oo kala duwan, waxaa jira nidaamkii ri-aasiga ahaa oo madaxweynuhu power-ka uga badan leeyahay.

- Waxaa jira nidaamkii baarlamaaniga ahaa, sidoo kale waxaa jira nidaam inta badan lagu guuray oo la yidhaahdo **مختلط** ama isku dhexjira labadooda oo midba wax ka soo qaata kan baarlamaaniga ah iyo midka ri'aasiga. Markaa midwalba miiso ayuu leeyahay, tilmaamo gaar ayuu leeyahay, horta nidaam saddexduba **انظمه ديمقراطيه** weeyaan waa nidaam dimuqraadiya, saddexduba waxay ka tarjumaan dowladaha Dimuqraadiga ayaa wada isticmaala, midkoodna nidaam **استمداد** oo xukun maroorsiya ma aha, kii la qaataba markaa dadka iyo dal walba midka ku habboon waa la doortaa. Qolo walba kay rabto way doorataa oo nolashooda la jaanqaadi karaan. Laakiin, saddexda nidaam kii la doortaba waa nidaam dimuqraadiya weeyaan.

- Tusaale ahaan nidaamka Baarlamaaniga mid walba dhaliilo ayuu leeyahay, sidoo kalena mid walba amaan ayuu leeyahay. Tusaale ahaan nidaamka baarlamaaniga ah waa nidaam ay qaybsanayaa awoodda fulinta madaxweynaha iyo Xukuumadda ay qaybsanayaan weeyaan, ciladaha nidaamkan lagu dhaliilo waxaa ugu horraysa marka awooddu qaybsantahay oo ay qayb madaxweynah ay jirto, qaybna ay jirto Xukuumadda.

- Madaxweynaha Baarlamaanka kuma laha **اشراف** yacni madaxweynaha ma la xisaabtamo baarlamaanka asagoo masuuliyada badan oo **مباشر** Oo asagu qabanaayo ay jiraan ayaa haddana baarlamaanku saamayn badan ku lahayn, oo kaliya waxa uu la xisaabtamaa xukuumadda, wasiirradii iyo shaqadii ay qabanaayeen.

- Markaa waa dhaliilo ay leedahay weeyaanoo waa jiho shaqana qabanaysa, haddana aan kormeer toos ah baarlamaanka "oversight" toosa uusan ku lahayn. Waxaa kale oo la yidhaahdaa, baarlamaanka, xukuumadda si haddaba aan dhinac ugu dhaqanno, xukuumadda ayaa baarlamaanka hortiisa masuul ka ah qaranka iyo shaqadiisa. inta badan nidaamkaa baarlamaaniga ah madaxweynihiisa waa madaxweyna sharafeed.

- Isaga laftarkiisa isagoo baarlamaaniya ayaa labo loo qaybiyaayoo marna **سلظات.** fulineed ayuu leeyahay. Dawladdaha qaarna sida ingiriiska oo kale waa baarlamaani baa la yidhaahdaa, laakiin awooda waad aragtay boqorku awooda uu leeyahay, awoodihiisu siday yihiin markaa waa sharafeed waa sida "Ethiopia" ka jirta oo kale inkastoo dawladaha dimuqraadiga ay **مستويات** kala yihiin.

- Nidaamka ri-aasiga (**رئاسى**)ah oo madaxweynuhu u sareeyo ama Madaxweynuhu awooda xoogeed leeyahay waxaa la yidhaahdaa **سلظة** ama shaqada fulinta oo dhan madaxweynaha ayaa masuul ka ah.

- Madaxweynaha ayaa markaa, ma jiro wax la yidhaahdo **الوزراء مجلس,** gole wasiirro ma jiro; laakin waxaa jira **مساعدين** dad ah oo madaxweynaha caawiya, waad ogtihiin Maraykankaa ah nidaamka ri-aasiga (**رئاسى**) dalalka haysta marayka ayaa ka mid ah.

- Waad ogtihiin Maraykanka madaxweynaha waxuu leeyahay waxaa la yidhaahdaa '*secretary*' ayaa lagu magacaabaa ninka wasiirka ah, yacni xilalka **مساعدين** waaye madaxweynaha ayey ku caawiyaan shaqadiisa; laakiin, cidda lala xisaabayo oo **مسؤلية مباشره** Leh ee dalkan iyo dadkan masuuliyadda tooska iska leh waaa Madaxweynaha, waxaan toos u soo doorta shacabka oo uu ka yimaaddaa.

- Baarlamaanka awoodihiisa iyo shaqadiisa waxa kale u nidaamkan ri-aasiga ah uu caan ku yahay saddexda suldo ama seddexada awoodeed ee Garsoorka, fulinta iyo sharci dajinta waxay kala yihiin saddex awood oo si toos ah u kala madaxbannaan oo qolo walba masuuliyadeeda iyo shaqadeeda ay si gaar ah u leedahay, markaa inaga ishkaalka la qabo in nidaam laga guuro oo nidaam loo guuro ayaan mulaaxado yar ka leeyahay, horta waxaa nidaam oo aan haysanno marka dalkeena la fiiriyo haba yaraatee ma jirto.

- Dastuurkeenna sida ku qoran anigu aad baan u soo akhriyey mawduucana, sadddex nidaam mid aan waafaqsanahay ma laha, waxaynaana ahayn Baarlamaani ,walaa Ri,aasi ,walaa kan kale **مختلط** ee isku dhafka ah midna ma nihin.

- Madaxweynaha awood iyo **سلظات** balaadhan hadaba leeyahay, raysalwasaaruhuna intaas oo kale ayuu leeyahay awoodda isku mid ah oo aan qaybsanayn ayaa dastuurka ugu qoran madaxweynaha iyo raysalwasaarahaba. Waxaa la dhihi karaa marxalad adag oo dalku soo maray, malaha dadkii qorayey waxay ugu jeedeen si **استثنائيه** waxa noogu qoreenoo kala raaraca laftigiisa ayey maslaxo ku jirtay inaan la kala tagin oo qof walba dhiniciisa wixii ka akhrsito ayaa malaha looga jeeday; laakiin, waxaan aamisanahay hadda nudji baan gaadhnay xogaa bisayl ah baan gaadhnay, mar haddii heerkaa la soo gaadhay kaddib ka la raarici iyo isku dheganaantii dalku kuma sii socon karee, waxaan u baahanahay inaan nidaam sax ah qaadanno. Nidaamka saxda ah ee aan qaadano hadduu yahay baarlamaaniga noqda ceeb ma laha, haddii uu ri-aasiga noqdana ceeb maaha, kan kale ee isku dhex jirka ah waxaa la yidhaahdaa dawladaha '*Europe*' dawlado badan ayaa wali isticmaala; laakiin, aad waxaad caam ugu ah "France"mid waxaa isticmaala maraykanka oo ri-aasiga ah, kan "France" waxay isticmaashaa ka midkaa isku dhexjirka ah, sidoo kale ingiriiskana waa baarlamaani. Dawladaha dimuqraadiga ah ee la yaqaanno meel ay ka yimaaddeen caanka ku ahaa waxan ay wada isticmaalayaan kolay wa iska **انظمه** weeyi, wada shaqeeya oo wada dimuqraadiya oo wada jira, markaa waxaan aaminsanahay haddii guddigu ayagoo tixgalinaaya madashii iyo heshiisyadii ay gaartay, aragti ku salaysan in hal dhinac loo guuro oo la qaato, aniga waxaan isleeyahay ceeb malaha.

- Nidaamaka ri-aasiga ee ay hadda noo keeneen waa laga yaaboo dee Soomaalida dadka inta badan waxaa lagu dhaqmayey ee la haystay marka laga guuraayo, waxay leedahay xanafteeda iyo danaysigeega, laakiin marka loo guuro ee la dultago waxaa laga yabaa inay iska xumayn. Markaa nidaam ka mid ah **انظمه** adduunka ama qaabka adduunka dawladaha dimuqraadiga ah ay u noolyihiin ama u shaqaystaan kuwooga ugu waawayn waaye in la qaato nidaam ri-aasiya. Baarlamaanka laftigiisa **سلظات. iyo** power-kiisa waad ogtihiin maraykan hay'ad sharci dajin oo ka xoog badan baarlamaanka "America-ka" ka jira ama

'*congress*' ah ahaado ama '*senate*' ah ahaadee ma jiro ayaan filayaa. Waad la socotaan. Markaa aniga kaas waxaan dhihi lahaa intaas aya rabay inaan halkan ka sheego.

- Magaca madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka malaha rag baa la rabay in Madaxwayne loogu yeedhee, in laga raro aad bay u culus tahay. Madaxweynaha wayn ee Jamhuuriyadda in magac loo raadiyo ayaa dhihi lahaa, midkaa madaxweynayaasha ha looga tago qolyahaas runtii dowlad goboleedyada ha looga tago Madaxweynaha. Wayne iyo isaga wax halla yiraahdo oo halaga sii raro meesha.

- **Qodobka 53aad:** ayaa rabay isagana hal kalmad ka idhaahdo, da'da 18ka iyo arrimo la xariira wakhtigu aad noogumu noogumuu saamaxaayo. Ee meelo yaraa rabay hal meelaan rabaa inaan inaan wax ka sheego, waxaa la yidhi: marka la dooranayo aqalka sare xubnihiisa, waxaa dooranaya baa la yidhi: xubnaha degan *state-ka* dadka deggan *"state-ka"* waxaa dhici karta in bannaanka dalka laga codeeyo. Masalan safaaradaha dalka ayaa muwaadiintu meel ay joogaaba ka codaynayaan. Marka uu safaaradda ka soo codaynayo senatarka *state*-kiisa laga soo dooranayo qofka safaaradda America ka codaynaaya xaq ayuu u leeyahay inuu codkiisa dhiibto, markaa degan markaad ku qaydaan xaqaas baa la dhaafinaa dad soomaaliyeed oo ay tahay inay codeeyaan oo ayna u codeeyaan senatorka ayagu rabaan inay doortaan. Markaa Meesha deggan la yidhi qofka muwaadinka isaga is diiwangalinaya daa-irada iyo meesha uu ka codaynaayo, **markaa meesha deggan la yidhi in laga beddelo ayaan rabaa oo lagu beddelo ka soo jeedo in lagu beddelo**. Waad mahadsantihin.

**2) Xil. Sahro Abdullahi Igal:**

Guddoonka iyo xildhibaanadu waa salaamanyihiin. Tobankii daqiiqo miyaa laga raray? Anigu waxaan moodayay saddex daqiiqo in uu hadlayay sanatarka, maadaama warbadani igu jiro, tobanka daqiiqo si aan kala go' lahayn aan u dhammaysanno.

Een qodobka u horreeya cutubkan ayaa waxuu aad u sharaxayaa, in la rabo dalka inay ka dhacdo doorasho in matalaad la helo, in wax la doorto, in habka doorashooyinka isku dheellitirin la geeyo waa arrin fiican. Soomaaliya 30 iyo dhowr sano ayay hadda ka joogtaa burburkii, in dalku ka guuro oo wax cusub loo guuro qof walba oo Soomaali ah waa taageersanyahay, sababtoo ah sidaan u ogolaanay habraacii dastuurka una furnay; laakiin, umaan furin kumana talo galin in laga guuro waxaan 32sano degaansho qayb ka mid ah aan ku soo helnay oo meesha aan hadda joogno ku soo gaadhayn oo xasilin ah. Inaan u guurno mid nooga daraysa looma furin dastuurka sidaas. Waxa loo furay in wax la dajiyo. Markaa xildhibaanadu marka ay halka soo istaagaan qaarkood waxaa laga yabaa inay inta badan yidhaahdaan: "Dad laga tiro badanyahay ma jiro, walaalayaalow, dastuur baan haysannaa, waa inaan ku dhaqanaa dastuurkeenna. Dastuurka Soomaali intay wada fadhiisatay ay carta isugu tageen oo Impegati isku tageen, waxay ku soo heshiiyeen oo ay ku soo galeen in la yidhaahdo 4.5 aan samaysano bal inta xal laga helayo.

Soomaali baa isku soo raacday, waa la soo sameeyey. Dad inaga mid ah oo Soomaaliyeed oo aan la tirin inay inaga badanyihiin iyo inaga yaryihiin waxaan isal soo qaadayn, in 30 kursi la siiyo halka beelaha kale 60 ,60 laga siiyey. Xidhibaanka halkan imanaya waa inuu ogaaladaa in la kala tiro badanyahay. Waa inuu ogolaadaa iyadoo dadkii la tirin, horta taa dastuurka waa inaan isla waafaqsanaa inoo qoran, taa markaan ka soo gudbno waxaan

rabaa si toos ah inaan u galo **qodobka 48aad**: waxaa ku qoran awoodda shacabka een qodobkaa waan ka gudbayaa, waxaan toos ugu gudbayaa **qodobka 47aad** ee laga tiray.

- **Qodobka 47aad:** qodobkaas waxaan qabaa guddiga dhegahooga si fiican ha u furan. Xidhibaanadii hadlay oo dhan waxay isku waafaqeen badankoodu, in qodobkaa meeshiisii lagu soo celiyo in la dhegaysto weeyi haddii loo furay dastuurka, inta xildhibaanadu hadlaan aan la dhegaysanin dee dastuurkaasi meesha u ku soconaayo guddiga ayaa la waydiin!

- Qodobkan sidiisii ayaa lagu soo celinayaa; sababtoo ah waa la firdhiyey, waxaa lagu firdhiyey qodobbada kale, dastuurkuna waa in la isla ogalaadaa inuu yahay wax lagu dhaqmaayo.

- Dastuurku ma galo qudbosiro, wax la qariyana ma galo. Waa in banaanka la keenaa. Dalka Soomaaliya waa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dadkuna waa dadka Soomaaliyeed dhowr mar ayaa idinlahadlay, dad Soomaaliya la yiraahdo ma jiro, dal Soomaaliya la yidhaahdo ayaa jira, dadkuna waa dad Soomaaliyeed taana waa inaan isla ogolaano, madaama badankoodii ka wada hadleen **qodobkaa waa in sidiisii loogu soo celiyaa**. Madaama aan ka shaqaynayno **qodobka 49aad in** mabaadii'da xor laga dhigo, nidaamka doorashooyinka caddaalada la helo, dhaqandhaqaalo la helo kan la helo, waxan tirida badan ee aad meesha ku soo qorteen waa inay ka muuqataa qaabka doorashooyinka aad u soo samayseen.

- **Qodobka 51aad baan** toos u galayaa. Een qodobkaan waxaa aad la isku soo celceliyey Madaxweyna iyo Madaxweyna ku xigeen, een waan ku soo celinayaa haddii la rabo in la guuro waa in la wada guuraa.

- Nidaamkii **4.5** ayaan haysanaynaa, madaxweynaa la samaynayaa raysalwasaarihii waa laga guurayaa isma raacayso, waa in la is waafajiyo oo la isku waafajiyaa dalka, dadka inay wada leeyihiin, haddaan la wada lahayn dastuurkan ma shaqaynayo. Dhinac maad aragtay hoggaamiyaha, horta koonfurta Soomaaliiya badankeed waxaa soo maray hogaamiyaal kala duwan oo kuwa argagixiso, kuwa jidadka xidha iyo kuwa dadka dhibaateeya, laakiin, ereyga hoggaamiye waa fiicanyahay. Hogaamiye SSC khaatumo maamulkeeda ayuu ka jiraa waa lagu caano maalay, dhibaato kuma qabno waan isku raacsanahay waan isku waafaqsanahay.

  Gobolka Sool ama SSC Khaatumo waxay ka midtahay Soomaaliya, haddaan dee Soomaaliya qayb ka mid ah la ogolayna dastuurka ha lagu soo caddeeyo, wadamo kale ayaan wax ku darsanaynaa malaha oo aan iska guuraynaa haddaan Soomaaliya dastuurkeeda loo wada sinayn. Haddii laakiin la yidhi waar heedhe way adagtahay madaxweynayaal waan isla wada qirsanahay. Gobolka Banaadir ayaa soo socda ma waxaa la leeyahay madaxweynaha magaalada Mugdisho? Mayee waxaan isla waafaqsanahay xildhibaanada labada aqal, in ay ku fiicnayn in Madaxweyne loogu yeedho; laakiin, ereyga **'*Governor*' ayaan anigu la qaatay**. Wax badan badhasaab la soojeediyey '*chief*' badhasaab balaadhan ayaa la soojeediyey, aniga magaca 'Governor" ayaa ila qumman sababtoo ah ama madax maamul goboleedada qofbaa asna yidhi ha looguyeedho, sidaasna way qummantahay.

- Waxaa jira gobolo ama '*state*' ka tirsan maraykanka oo 70milion gaadhaya oo ka dhaqaalo badan gobollada qaar oo '*Governor*' ah markaa macneheegu maaha haddii madaxweyne laguugu yeedhi waayo, inaad dadka ka liidato ama aad waxba haysan maaha.

- Gobolkaa state-kaaga sidaa nabad ugu dhaliso, sidaa argagaxisada uga saarto, sidaa caddaalad u keento, sidaa u dhisto ayaa horta ugu qiimo badantahay magac kasta ha laguugu yeedho, **markaa anigu waxaan qabaa in '*Governor*' loo daayo**. Magaca hoggaamiyana xumaynta laga daayo.

- Een 4madaxweyne ku xigeen ha la qaato waan maqlayey, dadku waa inay wax ka bartaan wixii la soo maray 2011, maamulkaa khaatumo *state* wuxuu isku fahmiwaayey state-nimadii waxay yidhaahdeen anagaa idinka tiro badan maya, reer hebel baa tiro badan may, waa la isjiijitay waa caado Soomaaliyeed inay qabaa'iladii yidhaahdeen anagaa idinka tiro badan, waxaan ku heshiinay intaan 3 intaa u qaybsano aan 3 madaxweyne aan samaysanno.

  3 Madaxweyne ma shaqayn waa suuro galiwaysay waa inaan taariikh ka qaadanaa wixii dalka soo maray. 3 Madaxweyne ku xigeen iyo 4 Madaxweyne ku xigeen suurtagal kama ah dalkan. **haddii lagu heshiiyay in madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen, waa in waddanka kuligiis la sugaa la xaqiijiyaa amniga halkaasna loo guuraa**.

  Een een qodobka ee doorashooyinka dibaa loo dhigay si '*confuse*' aan u qaadno xildhibaanadeenoo oon ku wareerno waxaan tirada badan oo meesha ku qoran. Ma waxaa la qaadanayaa list xidhan? Ma waxaa la qaadanayaa list furan? Doodihii inta badan gadaal bay jiraan. Marka aad halkan ka doodaysid waxaa ku xiraaya wax badan; Sababta ay kuu xidhayaan waxa weeyi, laguuma caddayn wixii gadaal baa la mariyey. Markaa waxaan jeclaanlahaa qodobbadan faraha badan ee halkan noogu qoran in loo daayo nidaamkii ay horay noogu qornaayeen.

  Maalin dhowayd waxaan waydiiyey guddiga markaan ka hadlayey qodobkii 44aad maamullada ayna u dhanayn ee dawladu hadday ka maarantay qayb dalka ka mid ah, ha noo sheegto. Guddigu markuu halkan ka hadlayay qodobkaa kumu soo darin Muu odhan xubin baad leedihiin namuu odhan kuma jirtaan. Dalku waa balaadhanyahay. Magaalada Buhoodle markaad ka timaado ee aad u socoto Fiqifuliye oo Sanaag ah 400 baad soconaysaa. Waa nabad, kama jiro hoggaamiye kooxeed u xiran isbaaro u taal, argagixiso ma joogto. Dad Soomaaliyeed oo nadiif ah oo doorasho raba oo qaban kara ayaa jooga. Marka haddii laga saaray sidee loogu talo galaa? Dastuurkaanse aad leedihiin waa loo sinaanayaa, sidee loogu sinaanayaa? Waxaan xoojinayaa in la qabto doorasho anoon diidanayn oon taa loo fahmaynin, waxa loo guuraayo si cad halasgu sheego dastuurkana si cad ha loogu qeexo. Waana mahadsantihiin.

**3) Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

Bismilaahi Raxmaani Raxiin**.** Guddoonka labada aqal ee baarlamaanka, xubnaha baarlamaanka labada aqal ee sharafta leh, labada guddi ee dib-u-eegista iyo guddiga madaxbannaan, saxaafadda, amniga waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka salaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Waxaan rabaa hadii alle awoodo ogolaado inaan ku hormaro.

- **Qodobka 47aad:** ee lagu soo celceliyey inta badan xildhibaannadu ay yidhaahdeen in sidiisii u qornaa booskii lagu soo celiyo, kaas oo dhigaayey Shuruucda ku saabsan xisbiyada, diiwaangelintooda, doorashooyinka heerka Madaxabanaan ee doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. **Qodobkaa waxaan la qabaa xildhibaannadii soojeediyey in faqraddaas sideeda loo soo cesho**.

- **Qodobka 48aad:** oo ka hadlaya awoodda shacabka, faqradiisa 2aaad waxaa lagu sameeyey toosin iyo siiqayn si matalaadda heerarka kala duwan oo loo dhanyahay muwaadiniitu uu ka qayb gali karo, waa run meesha loo dhanyahay waxaan rabaa in la raacsiiyo oo **lagu daro loona simanyahay**. Waa run waa loo dhanyahay; laakiin, waa lagu wada jiraa baarlamaanka oo kale ka soo qabo, laakiin lama sina, waxaan rabaa sida hadda xukuumadda oo kale ay tahay 5ta wasaaradood shanta beelood ayey ku salaysantahay, in loo sinnaado waxaan ka rabaa tanna inay ahaato baarlamaanka inay qolo ahaato **61,** qolana ay ahaato **31** macquul maaha, markaa sinaanta taas ayaan ka wadaa.

  Waxaan rabaa in loo sinnaado, madaama loo dhanyahay hadda meesha waxaa ka maqan sinaantii oo ay shan beelood ay ahaato oo min **61** ah in loo simanyahay weeyi ujeedkaygu ee ay san ahayn qaarna la siiyo tiro badan ,qaar la siiyo oo la yidhaahdo "half" taa weeyi ta aan ka soo horjeedo ee ay ahaato in loo simanyahay.

- **Qodobka 49aad:** oo Mabaadi'da guud ah kaas oo ka hadlay xaqiijinta in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaada caadil ah siiba beelaha laga tiro badanyahay, war yaa laga tiro badanyahay? Ta aan qabo taa waaye.

- Cidda laga tiro badanyahay maanta yaa waaye? Aniga maanta maa la iga tiro badanyahay? Anigu waxaan rumaysanahay maanta beelaha Soomaaliyeed ee 61 61 61 la siiyey inaan anaga ka tiro badanahay, haddana in meeshan lagu soo qoro laga tirobadanyahay. Hadda filayaa in meeshaa weli lagu socdo ereygii ahaa xaq ma rabno ee xal ayaa raadinoohaynaa, bilaahi calaykuma hadda xaqii ayey taagantahay, madaama dastuurkii dibu-eegis hadda lagu samaynayo, waxaan soojeedinayaa in lagu qoro shan beelood oo siman.

- Baarlamaan wayn waa kanoo labadii aqal isku jira maanta cid dhihi karta gacanta ha taagto waa laga tiro badanyahay Jareerweyne ha la ii sheego ma jirto. Ha la yidhaahdo beel shanaad waan oggolahay, ha lagu qaybsado shan beelood oo siman. Dastuurkiibaa maanta dibu-eegis lagu samaynayaa oo ha lagu gudbo ereygii ahaa xaq ma rabo maanta xaqii ha la qoro, ha naloo qoro in maanta lagu qaybsaday shan beelood oo siman waan ogolnahay, waxa sidaa loo leeyahay waxay tahay waxaa la yidhi, laga tiro badanyahay laga tirobadanyahay ma jirto ereygaas waa erey aan ka soo horjeedo ee aan diidanahay.

  Aniga la igama tiro badna maajooratid baan ahay. Dadka maanta ugu tirada badan Soomaaliya ayaan ahay, ereygaasi waxa uu ka soo baxay sidaad ogtihiin uu ka soo bilaabay xaq ma rabnee xal ayaan rabnaa wuxuu lasoo bilawday Soodare. Dadku waxay u haystaan inuu ka soo bilaabay Carta, waxaa uu ka soo bilaabay Soodare. Dalkani waxa uu soo maray marxlad bacdo rabasho, heer waxa uu soo maray dalkani ay dadkani siday nabad u jecelyihiin, horumarka iyo wanaagga ay u rabaan, in hal beel oo beelaha Soomaaliya ka mid ah inay madaxweyna qaadato, Raysalwasaare qaadato, wasiir arrimo

dibadeed qaadato, wasiir arrimo gudo qaadato, wasiir gaanshaandhig qaadato ay raalli ka ahayd.

- Beeshii markaas fursadaa iyo awoodaas iyadaa beerdaraysay, markii la isku yimiday halkaasi ee la yidhi shirwayne loo dhanyahay ayaa lagu qabanayaa Addis ababa ee Soodare la iskugu yimid ee miiska wadahadalka la soo fadhiistayna waxaa ka soo baxday sidaad ka wada dhagarsantihiin, in dadkii ayaga ahaa ee markaasi fursadooda beerdareeyey laftigooda ee aniga dad ahaan u soo dhowaysanayey inay yidhaahdaan dadkaani wax ma dilin lanama simikaraan!

  Ereygaas Allah u naxariistee ninkii kow meeshaa ka dhiidhiyey oo joogay sadexdiiba hadda waa dhinteen sidaan ka warhayo abukaate Raajis ayuu ahaa, waxaa la fadhiyey asaga iyo Mawlid-macaan Allah u naxariistee iyo Maxamed Rabadaan Arbow. Abukaate Raajis waxa uu yidhi: "Waad ujeedaaye Mawliid iyo Arbow inaan nalagu haysan tiro iyo tayo laydinkuna haysanin; hase yeeshee, waxa la isku haysto wax maadan dilin waaye ee qoryo aan qaadano oo wax dilno. Dhabbaha intaan istaagno dad uun aan layno, waxa la rabo waa kursi dhiigle ha lagu fadhiistee" dadaalka heer uu ka gaadhay abukaate Raajis. Sidaas darteed waxaan leeyahay eregya la leeyahay tiro badnaa iyo tayoba lanaguma haysto nalagumana dhama.

  Ereygaasi guddiga marlabaad, marsaddex dibu-eegista ee ka socda labada guddi ee la isku daray ha naloogu daro maanta ay xiligii xaqa loo hiilin lahaa ayaa la taaganyahay. Beesha shanaad ha lagu qoro in loo dhanyahay ha lagu qoro in loo simanyahay ha lagu qoro oo maanta sida xukuumadda wax ay ku maamusho oo lagu qaybsado oo kale wax loogu qaybsado.

- **Isla farqadda qodobkaasi 49aad** ee madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeenka fursaday noo tahay haddaa nahay beel shanaad. Maxaan u leeyahay? Waar haddiiba madaxweyne iyo madaxwayne ku xigeen la bixinayo waan soo dhowaynaa se, maxaa ku soo dhowaynaan sida hadda aan sheegayo oo kale, haddii madaxweyna la sameeyo 4ta kale ha laga dhigo madaxweyna ku xigeenyaal, si meesha loogu wada sugnaado.

  Yaysan ahaanin madaxweyne la doortay madaxweyne ku xigeen baa la doortay kuwa kalena dadkii kale ayaa laga dhigayaa macquul ma noqonaysa taasi mana ogolaanayno. Waxaan raalli ka nahay, haddii madaxweyne iyo madaxweyna ku xigeen la samaynayo ee la qaadanayo ee laga guurayo nidaamka raysalwsaare loona guurayo madaxweyne ku xigeen waa inuu ahaadaa si siman ayadana madaxweyne madaama shan beelood la yahay ,4ta kale soo harayn madaxweyne ku xigeenyaal la siiyo si miiska wada fadhiga la iska wada arko; laakiin, in maanta haddii la yidhaahdo sharci baa la dajinaa ,go'aan ayaa la soo gaadhayaa meel wa lagayaa meelna waa la faadhisanaya ee aan ka maqanahay yaa ii fadhiya aniga? Macquul ma noqonayso taasi.

- Si miiska la iska wada arko anaguna aan ku qanci karno oo la dhihi karo hebel waa u fadhiyaa waa iyadan in la sameeyee 4 Madaxweyne ku xigeen sidii uu horay ugu dhawaaqay meesha looga sheegay xildhibaannadii iga horeeyey ee fikirkaa soojeediyey waa la qabaa.

- Qodobkaas waxaan leeyahay, hadda markii aqalka sare la samaynayay maamulka kaliye ee ka run sheegay qodobka 72( c) ee dastuurka ku meelgaadhka ah ee aan haysanno waa

maamul goboleedka dawladda Hirshabeelle, maxaa jira dastuurku waxa uu qoraa in meesha 5 xubnood ay ka soo baxdo oo beesha shanaad ah ay aqalka sare timaaddo lagama hayo. Maamul goboleedka Hirshabeelle kaliya ayaa ka jira aqalka sare inay ku soo daraan hal qof inta kale lagama hayo. Sidaas oo kale ayaa la rabaa in meel walba in lagu soo dardaro, waxaan diidanahay waa taas madaama loo simanyahay ereyga la leeyahay ee la xaqiijinayo ee la rabo in la fuliyo "gentleman agreement" oo aan qornayn ee wixii dastuurka ku qornaa aan la fulinayn, wixii heshiis ee banaanka ah la fulinayo.

- Mudanayaal iyo marwooyin, xildhibaanayaal waxaan rabnaa arrintaas in meel looga soo wada jeesto, sharciga aan ku heshiinay ileen dastuur waa heshiis bulsho, wixii lagu heshiisay ee inoo qoran ee la wada saxiixay ee madaxweynuhu saxiixay inaan ku dhaqano haddii Alleh awood leh yidhaahdo.

- **Qodobka 52(1):** xilhaynta Madaxweynaha waxaa la sheegay 5 sano in ay tahay, ama 5 sano ha la yidhaahdo waa ok 4 sanno waa yartaha ama 6 sano ha la yidhaahdo; laakiin, lama cayimin wakhtiga ay ka bilaabayso, waa in la sheegaa wakhtiga ay ka bilaabayso ayada ee lagu soo qoraa ee la leeyahay teeram-ka danbey kabilaabanee ama kanay kabilaabanee. **Waa in iyadana la caddeeyaa** guddigu labada qolo ka kooban.

- **Qodobka 53(1):** ee iyadana dhahaysa waxay dhahaysaa**,** muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano doorashada cod bixinta, anaga hadaan ok anaga haddaa nahay Soomaali 17 jira waxaa la helayaa 3 ama 4 caruur leh,15 jir waxaa la helayaa 2 ilaa 5 ciyaala leh ma waxa la leeyahay xaq uma leh codbixin ma gaadhin! Maadaama uu qof wax dhalay yahay oo masuul uu yahay, ma wax la leeyahay 18 ayuu ka yaryahay cod ma laha la leeyahay? Taasina suuragal maaha, madaama horay loo soo qoray qaangaarnimadu waa 15 sano. Qofku haddii uu baaluq yahay uu qaangaar yahay waa inuu isaguna cod bixin karaa ee aan lagu xanibin 18 sano, madaama la helayo 17 jir iyo 16 jir awlaad Ilaaha siiyay oo masuul reer dhan ka ah oo masuuliyad qaaday, in maanta maanta dastuurka la yidhaahdo cod ma laha 18 sano wixii ka yar cod ma laha, taasina waa meel ka dhac? Ummadda Soomaaliyeed ama bulsha Soomaaliyeed oo dadkooda intooda badan hoos u dhacayaan ayadana waxaan soojeedinayaa **faqradaas in lagu daro 15sano markuu gaadho inuu leeyahay cod. Waad mahadsantihiin.**

**4) Xil. Abdiqani Ismail Said:**

Shir guddoonka iyo dhammaan xildhibaanada, marti sharafka kale dhammaantiin waad salaamantihiin. Saalumu caylaykum warxamatullaahi wabarakaatu.

Anigu badin maayo, waxaad mooddaa mushkilada ina haysta, wax yaalo badan waxay u baahantahay oo dhiba dadka cudurda haya adduunyada qola kastaaba way la noolyihiin, wayna yaqaanaan sida loo la noolaado; laakiin, inaga waxaad moddaa mushkilada ina haysta inaynu isdiidsiinayno meel kalena aynu doonayno inaan xalkeeda ka raadino. Taasi waa dhibka keenaysa inaga oo isku luuqada, isku af ah, isku diin ah, markaynu maqaaxiyaha iyo meel kasta wada joogno ganacsiga wada leenahayna aynu wada qoslayno, haddana waxa inoo dhexeeya oo kale ayna jirin, hadana aan is wada haysno.

Markaa waxaan odhan lahaa aynu fahano mushkiladda in haysta inay tahay xal dibadda laga keenayo. Taas ayaa keenaysa inaan isdilno oo aan is haysanno oo adduunyada ka danbayno oo maanta heerka aynu taaganahay aynu taagnaano.Aduunyada sidaad wada

ogtihiin waa labo geesood, qayb ishtaraakiya iyo qayb raysalmaaliya. Qayb saddexaad baa jirtoo oo ah qaybta ilaahay adduunka ugu talogalay oo ah alwasadiya oo islaamka ah oo nidaamkii dhaqaale, nidaamkiisa xunkunka mid walba la ogyahay siduu yahay iyo siduu ummadda u ilaaliyey iyo sida loogu horumaray, taasna tusaale waxaa kuugu ah Soomaaliya oo aan dawlad lahayn oo burbursanayd ayaa haddana sidaas u noolayd, aduunyada kale ma ka dhici kartaa in labo cisho fawdo lagu noolaado? Ma dhacayso. Waxa dadka kala haya ee kala ilaalinaya ee isku haya waa islaamnimada iyo nidaamka iyo dhaqanka aynu leenahay. Dadku haddii ayna kaas fahmina markasta mushkilad baa loo keenayaa lagu soo ururinayaa deetana dhibaatadii sidii bay sii ahaanaysaa.

Haddaad eegtaan qoladii raysalmaaliyadda iska xigsatay, way jirtaa mar ay hoos u dhacdo iyo mar ay kor u kacdaba, kuwii ishtiraakiga ahaana waa jiraan mar ay soo kacaan iyo mar ay jiraanba, qoladii wasadiyada ahayd ee loogu talo galy inay adduunayda hoggaamiyaan ee hoggaamin jirtay 100sano ka hor adduunyada iyagaa hoggaaminayey imikana waa laga yabaa inay hoggaamiyaan, waxay ku hoggaaminayaa waa maxay? Waxay aaminsanayaa waxooda iyo xalkooda iyo nidaamkooda. Waxaa fiicnaanlahayd in dib loo eego. Ninkii gaalka ahaa ee Afghanistan loo diri jiray mar uu ka waramayo muxuu yidhi? anna xalkaan soo qori jiray, dadka deegaankuna iyagoo hawlahooda dhammaysn jiray intay geed bay intay hoosfadhiistaan bay garanayaan sida arrimahooga loo xaliyo.

Haddaan taa intaa kaga gudbo oo aad mooddo mushkilada in haysata inay tahay taas oo ah inaynu garanway sidii aan u wada noolaan lahayn. Hadda nidaam baa laga hadlayaa doorasho, nidaam baa laga hadlayaa dastuuriya wax yaabo badan oo imika lagu celcelinayo halkan ma jirayo.

Doorashaa loo gudbayaa qof iyo cod baa la doonayaa in la tago, waa lakala badanyahay, waa .5 waxaasi ma jirayso. Anagaa ku soo dhaqmi jirnay anagaa codayn jirnay. qofku waxaa la yiri: Sanduuq baa la dhigayaa, ciddii u baahataatagaysa.

Dadka muwaadiniinta qaar badani maba tagayaan sanduuqa, maxaa iga galay ayuu leeyahay qofka la dooranayo. Qaarkood maba galayaan tartan, qaarkood lacag badan bay bixinyaan meedhiyay isticmaalayaan, dadkii bay kaxaysanayaan, kii reerkiina ahaa baa laga wadanayaa oo meel kale ugu ridaya.

Markaa qofku waa inuu ogaadaa nidaamka soo socdaa, inay ku xidhantahay, reernimo inaanay, ku xidhnayn ee ay ku xidhantahay sadaa u shaqaysato iyo sidaad dadka hee *program-kaaga* siyaasiga ah aad ugu dhaadhiciso. Taa haddaad ka adkaan waydo waad ku fashilmaysaa, markaa waxaan oran lahaa halagu baraarugsanaado 4.5na ma jirayso, sidaa meesha ku qoran ama aan ka akhriyey doorashaa la aadayaa. Doorashadaa la aadayana waxay u baahantahay hal meel baa khalad yari kaga jiraa kaana waan u soo noqonayaayoo waan sheegayaa haddii Alle yiraahdo Intaa hadaan ka dhigo hordhac oo aad mooddo cutubkan 4aad inuu yahay heshiiskii lagu galay madasha oo aan sidiisii aan ahayne; laakiin, la inoo soo farsameeyey, anigu waxaan jeclaanlahaa isaga oo sidiisiya in la inoo keeno oo aan akhrino kaasaaka fududaan lahaa waxaan filayaa hee, waxay guddigu edit-ka ku soo sameeyeen.

- **Qodobka 48aad:** qaybtiisa labaad ee dhinac kalena ah qodobka 46aad anigu waxaan oran lahaa qodob 46aad ee qaybta labaad sida uu qoranyahay baa ka fiican sida ay qolada guddigu u soo qoreen; waayo, qolada guddiga waxaad mooddaa hee, inaanay dastuur

qorayn. Sheekho dheer bay qorayaan. Waxaasi dastuur maaha, waa in hadalka la soo koobaa nuxurkiisa, wixii faahafaahin ah sharci yaqaankaa galaya. Taa waxaan odhan laha sidiisa ha lagu daayo.

- **Qodobka 48 qaybtiisa 4** Dawladda Soomaaliya ayaa ka masuula, xaqiijinta dawlad goboleedyada doorashooyinka ka dhacaya, baa ku qoran. Waxa laga tagay maxay? Dawlad Goboleedkii, Dawlad goboleedka hadaanad doorkiisa siinin yaa kuu wadaya? Ilayn iyagaa meeshii jooga oo hawshii wadee, waa in lagu qoraa maxay? Iyo dawlad goboleedka inay ka wada shaqeeyaan. Hadday kawada shaqayn waayaan, adigoo maamulkaagi wata iyo iyagoo kaasoo horjeeda hadday iska hor imaadaan, waxay noqonaysaa maxay? Inay waxba kuu socon waayaan. Mida kale waxa uu kahor imanayaa qodobka 54aad ee kala qaybinta awoodaha dastuurka ee markale dhinaca kale ku qoran.

- **Waxaad mooddaa qodobka 49aad** waxa ku qoran hadal aad u faro badan, oo intiisa badan ay u baahnayd in lagu sheego maxay? Xeerka doorashooyinka; laakiin, siday usoo qoreen markaad eegto, ani ima cajabin oo wuxuu u baahanyahay qodobkaasi hee? Dhammaantii in dib loogu wada noqdo. Waxa ku qoran, xaqiijinta bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya, **xarafkiisa H:** ay helaan matalaad caadil ah siiba beelaha laga tirada badanyahay, si loo gaadho caddaalad bulsho. Caddaaladdaa bulsho ee la sheegaayo maxay? Waxa lagu sixi karaa nidaamka xukuumadda; laakiin, marka la leeyahay beelaha laga tirada badanyahay haddana nidaan doorashaan qaadanayaa oo *'one man one vote'* ah isma galayaan. Waxaad mooddaa hee, dastuurku inuu iska hor imanayo, dadkuna uma laha maxay? khibrad, waar sanduuq baa la tagayaa, sanduuqaana wixii kasoo baxa hee, qof walbaaba wuu iimaansanayaaye hala ogaado. Imika haddii la doonayo wax gaar ah cid in loo xidho, waa inay dadku hee, hadda laga sii heshiiyaa.

- **Qodobka 50** Hanaanka Doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa mid ku salaysan qof iyo cod, waa wax fiican; laakiin, sharraxaadan ay keeneen qoladan guddigu, xagay ka keeneen sharraxaadaa ay ku sheegayaan maxay? Inuu yahay, hab matalaad isku dheelli tiran ee liiska xidhan, xaggan liis xidhan kuma qorna dee, ha ku soo qoraan hadday doonayaan maxay? *'closed'* inuu yahay; laakiin, kuma qorna markaa wax sharaxaad laga bixinayo oon dastuurkiina ku qornayn, waxaasi dastuur ma noqonayee halaga daayo. Qolada qoraysaana hee, latashi badan hasameeyaanoo hayska eegaan, waxan dad aqoonyahanaa loo gaynayaa, 100 qof oo jaamacado kasoo baxay oo law-ga dhigtay baa jooga, khabiiradii baa jooga, dadkii kalaa jooga halayska eego waxani waa muraayaddii ummadda.

- **Qodobka 51aad xarafka D** Waxa la sheegay maamul goboleedyadu inay yeelanayaan labo baarlamaan, gollaha deegaanka iyo gole baarlamaan oo kale, anuu waxaan odhan lahaa halaga saaro xarafka maxay? Xarafka **D** oo haloo daayo gole deegaan uun ha yeeshaan. Gole baarlamaan hadday yeeshaan waa awood kale iyo dawlad kale. Dhaqaalena mahaynno maamulkalena uma hayno, wax alliyaale wax ay soo kordhinaysaana majirto.

- **Qodobka 51aad qaybtiisa 2** xubnaha u tartamaya golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si toosaa loosoo dooranayaa baa la idhi, qaybta 3aad eeg aqalka saree e Baarlamaanka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya si toosa waxa si toos ah waxa u soo dooranaya maxay? Keliya baa la yidhi. Xubnaha ku tartamaya kuraasta aqalka

sare ee baarlamaanka fadaraalka waxa toosa, cod qarsoodi ah oo madax banaan ku dooranaya oo kaliya muwaadiniinta deggan deegaanka. Halkaasi waxay xadidaysaa, halkaa ufiirsada xildhibaanadow, nin kastaaba inuu kursi ilaaliyaa buu doonayaa, mushkiladii in la ilaaliyaa la doonayaa; laakiin, halkaasi aqalkii sarena way xadidaysaa meeshii laga dooranayay, qaybta 2aadna baarlamaanka ma xadidayso meeshii lagu dooranayay, halkaasi waa inay noqotaa gobol, waa in lagasoo doortaa gobolkiisii, taasi maxay yaraynaysaa, in lays qabqabsado, qof kastaana hee, Qoladani kuraasbay, waxay yaalan gobollo, waa inuu gobolkiisii uu la tagaa oo lagasoo doortaa, haddii lagasoo dooran waayo oo xal kale la raadinayana,ama  isxambaar hanoqoto ama si kale hanoqoto ama sidan nalagusoo doortay hanoqotee, waa inay jiraan; laakiin, haddii la idhaahdo halkanaa lagu wada dooranayaa, dhibteeday leedahay. Waa inay caddaataa, halkaasi ma cadda. Anagu doorashadaan soo gali jirnay gobol kastaba waa la yaqaanaa kuraasta intuu leeyahay, isagu ama hasoo kala boobo ama ha isku qabsado.

Ee muddada xilhaynta 5 sanno. Ma xuma waan soo dhowaynayaa, 5taas sanno qofka xilka loo dhiibay hakaga bogto wuxuu ummadda u qabanayo, inkastoo 5 sanno ay badantahay, marka hadhaw toole hee, '*amaamalaalhi wa amaama taariikh*' waxan waa lays waydiinayaaye hee, ay timaado waa badantahay inagana ha ahaatee.

- Qodobkaa, -waar waxyar isii- qodobka 53aad ee ka hadalaya da'da waxaad moddaa waxyaabo badan oo si dhib yar lagu xalin karo, inay inagu adkaanayso xalkeedii, lama diidana qaangaadhka, qofku waxa uu ku qaangaadhayaa maxay? 15 cid beddeli karta ma jirto cid odhan kartaana ma jirto dhaqankiiba ah waynu ku dhaqanaa, waynu nahay waynu nahaanaynaa; laakiin, ha la yidhaahdo maxay? Qofka marka la sheegayo 18, gaaladu may keenin dee, dadka qaar baa moodaya inay gaaladu keeneen. Islaamkaa keenay, culimada islaamka keentay, waxaa loogu talo galay maxay? Waa da'da ugu danbaysa ee qofku ku gaadhi karo bay yidhaahdeen markay sheegayaan culimada qaarkood.

18 kaasi haysaga qornaado; laakiin, qofka codaynta noqonaya waa inuu hee,15jira uu ku codeeyaa, anigu kuwaan dhalay way soo codeeyaan. Waa inay soo codeeyaan wax dhib ah oo sheegaya 18 inoo qoran passport-ka ha lagu siiyo; laakiin, ha la yidhaahdo maxay? Dadka qaangaadhay way soo codayn karaan. 18 kana passport-ka ha lagu siiyo wax dhib ah oo keenaya hee, ma jirto. Dawladunimaduna waxay jiraysaa intay maxay? Intay awoodaada adiga hee, kalsoonidaa iyo waxaaga aad adigu aad wadanaso.

Waxaan u soo noqonayaa. –waar kan madaxwaynahaa ii hadhaye maad sugi? Ee qaybta madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka anigu dhib uma arko,anigu dhib waxaan u arkaa maxay? Dawlad daciifa oo aan qayrkeed ka hadhay oo aan waxba iska celinayn oo Soomaaliya 30sano sagaashankii baannu burburayoo lagu jiro oo aan waxba qabsaynan taa ayaa dhibaata ah.

Waar ama madaxweyna ka dhig ama Raysalwasaare awood leh ka dhig waar meesha ha laga soo kacoo hee, dadka ha la soo gaadhsiiyo maxay? Qayrkood. Haddii madaxweyne laga dhigo in wax la qabto ayaa la rabaa, hadday sidan imika tahay marwalba hee, in wax la qabtuun baa la rabaa; laakiin, madaxweyne haddii laga dhigo hadda imika saaxiibkay Caymo iyo Jeegiyo, anagayo iyo dad badan oo kale iyo qolo kastaaba waxay doonaysaa haddii nidaamkii laga guuro hee, waar malaha raysalwasaare helimayno, malaha ku xigeen heli maynno malaha hee maxaa dhacaya? Waar 4 madaxweyne ku xigeen ugu dhig hadday

mushkiladda xallinayso 3 ugu dhig, hadday ka wada muuqanayaan halkaa hee, oo dhibtii ku haystay kaa qaadayso u samee ugu qor.

Adigana hee, waad kaga raysanaysaa dhibaatadii; laakiin, maxaa la rabaa? Halka shay ee la rabo waa maxay? Inaynu dad noqono oo aan boodhka ka kacno oo reer hebel baan ku habsaanay aan iska dayno. Dawladda hee, dadkii iyo adduunyada labadii dhinacba way shaqeeyeene way noolyihiin; laakiin hee, innagu ma jirnee aynu dadka dhinac ka raacno. Wasalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu.

5) **Sen. Samsam Ibraahin Ali:**

Bismillaah. Senatarrada, xildhibaanada, miidiyaha, marti sharafta, howlwadeennada guddiga dhammaan waxan idinku salamayaa saalanta Islaamka salamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu. Bacdu salaa. Haddii aan guddo galo doodayadda maanta.

- **Een qodobka 51aad cutubka 51aad sorry, qodobka 51aad**: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Doorto. Haddii aan ku hormaro een madaxweynaha iyo madaxweyne Ku- xigeenka ayaa la yiri aad ayaan u soo dhoweenayaa arrinkaas; maxa yeelay, waxa soo noqnoqday is qabqabsi iyo is barbaryaac marka sidaa daraadeed marka ugu horraysa **waan taagersanahy inaan guurno una guurno madaxweynaha iyo madaxweyne Ku- xigeen.**

Waxan ku talinlahaa, in madaxweyenaha iyo ku xigeenkiisa ha la soo doortaa la yidhi, madaxweynaha doorasho ha ku yimaaddo ku-xigeenkana uu magacaabo. haddii madaxweynahii uu labadii madaxwayne, madaxwaynihii iyomadaxweyne Ku- xigeenka la soo wada doorto, awooddaha kala xakameymaayaa maxatahay? Qof sidii madaxweynaha ku yimid mala xakameyn kara isleeyahay, marka waxan qabaa madaxweynaha inuu soo magacaabo madaxweyne ku- xigeenka.

- **Een qodobka ah,** hoggaamiyayaalaa la yiri madaxda Dawlad goboleedyada ma qabo aragtidaas. Hoggaamiye horta saasay ku yahiin ee magaca hoggaamiye yaan la xumeynin; laakin, madaxweynayasha dawlada goboleedyada iyo madaxweynaha dowladda federaalka hadaba la dhahaa wax dhib ahna iskuma qabaan.

Een xisbiyada in la'aado wa soo dhoweynaa sida loo ilaalin lahaa kuraastana waa u tagi donna; maxaa yeelay, een xildhibaan walalkeyga oo halkaan soo istaagay ayaa wuxuu yiri: " Saddex beelod baa waxii isku fuuqsaday" waxaan u malaynaa anna anna asaan wax ku tuhmaa walalkeygaas; sababtoo ah, maanta waa la xisaabtama haddii la dhaho markay ugu yartahay halkaan labo qofaa ku matasho anna qofaa igu matasho.

Eenna marka waxan oron lahaa, xisbiyada ninkii ku faa'iido iyo ninkii u darsada waa la is arkidoonaye tirana haddee booto waa iska dhammaaneysaa, ninkii tiro badan, ninkii deegankii ballaadhan yahay, ninkii een qabaa'illada iyadoon aan la istirinin la isbowsanaaya waxaas wey iska dhammaandoonta. Waa ku faraxsanahay in doorasho qof iyo cod ah la aado; waayo, waxan ku kalsoonahay meel sideed iyo tobanka gobal ee dalka Soomaaliya haddii kuraasta la dhigo, dadka ka soo galaaya inay aniga noqondoonan, dadka aan ka soo jeedo. Marka sidaa daraaded, een ani waxan leeyahay aniga xiraga haayaba xoola kuma jiraane, dadka waxa ay heystaan haddana, waxan maqli jiray maahmaah oraneysa: "Hasha geela inta cuntay ayay cabaadda." Dadka ayagoo toban xil oo Illaahey xaalkooda ogyahay heysto dhahaayo xisbiyaan ku caani

maali doonaa, aniga waxan dhahaa xisbiyaan ku taban caana maalidoonaa; *because, waa* anaa tabasho qabo, anaa waxa isleeyahay waa ku dulmantahay haddii waxbaa la magacaaba la dhaho waala ogyahay cidda la so magacaabo, marka anaga markasto suubis ayaan aheenee suubisnimada si aan ugu baxno horta halla aado xisbiyo halkaas ku soo caana maaleynaa haddii Alle awoodda leh yiraahdo.

Een haddii aan hoos u galo hadda madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka markay ugu yartahay intuu xilka yimid, soddon qof ayuu tikreeto ku soo saaray, waan jeclaan laha in *projector* la keeno halkaas lagu soo dhajiyo, la fiiriyana reerahii la soo magacaabay. Aniga reerka aan ka soo jeedo hal qof kuma jiro marka; sidaa daraaded, dadkii magacownaa haddii la soo magacaabay oo loo roonaaday hadday cawdaan aniga cabashadeyda marka intee la aada? Marka ma garanaayo meesha aan cabashadeyda la aadaayo, dadka hadday kii dhibka qabay iyo kii dheefta qabayba ay dhib sheegtan, marka waxan isleeyahay dhibanayasha booska lagu soo cariirinaaya ayaan isleeyahay. Marka sidaa daraaded waa ku faraxsanahy in inta la baxo, doorasho qof iyo cad la aado. Nin walbo deegankiisa oo ku soo caano maalo. Kalsoonin 100% ayaan ku qabaa. Aad iyo aad ayaa umahadaantahiin.

6) **Xil. Hassan Hurre Ugaas:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Wasalaatu wasalaamu calaa sayidinaa Muxamed, wacalaa aalihii wasaxbihii wasallam. Een guddoonka labada aqal, ee guddiyada madaxabanaan, guddiyada dastuurka, labada aqalee baarlamaanka, marti sharafta kale waad salamaantihiin. waad mahadsantahay Nuux- Anigu waxaan rabaa in aan ka hadlo qodobka 51aad kaliya, een waxaa muran kataagan yahay maxaan ugu yeedhnaa? Halkan waxaa lagu sooqoray maamul goboleedyada ragga xukuma hoggaamin haloogu yeedho. Dadkii ka talo bixiyay qaar waxay yidhdeen barasaabo ha loogu yeero qaar waxay yiraahdeen "*Governers*" hala yiraahdo labaduba na waa iskumid baan u malaynayaa, dhibka ina haysta waxaa weeye ereybixin Soomaali ah beynu raadinaynaa, Soomaalidu waagii uu af Soomaliga abuurmayayna maynaan maamul goboleed lahayn madaxweynana meynanan lahayn.

Oday dhaqameedyo ayaan lehayn, hoggaamintuna waxay soocaanbaxday baryihii Warlords soo caanbaxdoo anuu hadda hoggaamin badan maba aqooninba warlords-kii uun baan ku bartay hoggaamiye hebel iyo hogaamiye kooxeed. Een in loogu yeedho waxay ayagu hadda isu yaqaanan ee madaxweynenimaduna ceeb ma aha. Jaamacadahaa madaweyne yeesha. Iskama hor imaanayso in madaxweynihii wadankuna madaxweyne noqdo maamul goboleedna madaxweyne yeesho, labo wax oo aan isqaadan Karin ma aha. Way isqaadan karaan jaamacadihi baa madaxweyne yaal leh, waxa u baahan in la kala miiro oo aynan isku dhex darsamini, waa awoodaha ay yeelanayaan. Magacu macno badan ma leh ee wakhti ha inaga dilina umana hayno, haddaad *'Governer* ugu yeerno oon dhahno Governert-ooraha Jubaland hadaan dhahno kii jubada hoose muxuu noqonayaa? Isna maxan dhehynaa Governatooraha Jubada hoose. Kii Gedo muxuu noqonayaa? Yaynan isku sii dhex murjinine sida ay iyaku isu yaqaanaan aan u daynno, ogaada iyaga laftoodu dastuuro ayay leeyihiin, hadday la qumanaato in ay wax-ka-badeshaan haka bedeshaan; lakiin, anaku aan sidooda u dayno Governer-toraha Jubada hoose na ma abuuri karno Governat-ooraha maamul goboleedka Jubaland na ma abuuri karno, aynu u dayno Madaxweynaha Jubaland, **aynu u dayno Gudoomiyaha Gobalka Jubada Hooose, aynu u dayno duqa magaalada Kismaayo, sidaa is hoos taale ee "hierarchy" leh aan u dayno taas ayaa ila quman.**

Qodobku wuxuu kale oo uu qorayaa oo uu leeyahay, hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka dowlad goboleedka: wuxuu xadidayaa lambarka guddoomiye ku xigeenka ama madaxweyne ku xigeen ee ay yeelanayaan '*Again*' marlabaad dastuur bay leeyihiin iyagoo fiirinaya wax isugu qeybinta beelahaa maamulladaa wada samaystay haday haday go'aan sadaan, in ay saddex madaxweyne ku xigeen sameystaan maxaa inaga inga galay inagoo baarlamaankii ah? U farogashanaynaa haddii ay maslaxadoodu kujirto masalaxadoodu ka dhex arkaan in ay saddex guddoomiye kuxigeen sameystaan, saddex madaxweyne sameystaan taas oo howshooda fududaynaysa dee aan u dayno waa yara ferogelin dheeraad ah weeye, yaynan xadidin lambarka madaxweyne ku xigeen ama hoggaamiye ku xigeen kii laqaataba ee ay maamul goboleedadu yeelanayaan yaynan xadidin. Taana halkaas ayaan ka leeyahay.

**Qodobka51(2)** : xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa ku dooranaya si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbanaan dhamman muwaadiniinta buuxiyay shuruudaha cod bixiyey, dhinaca kalena waxaa inoogu qoran oo la inoo sheegayaa in uu jiro in ladooranayo xisbi, xisbigaasna uu xubnihiisa"MP" yadiisa ku soo xulan doona "close list" qaabka aynu u dhignay haddii xisbi la aado qaabka loodooranayo 'close list-ga ahi shacab wax soo dooranayo oo "MP" soodooranayo majirtee xisbigaa loo codeyn doonaa xisbigana liis kiisa way u qorantahay aynu is qabadsiinoo yayna noqonin "Ludda na jecli feedhana jecliye" aynu is qabadsiino.

Haddii aynu rabno in aynu xisbi u guurno, 'close list' la isku doorto xisbigana uu xubnihiisa isaga soo qorto dee farqadda meesha aan kasaarno ma qabatee oo shacab wax dooranaya, yaan shacabka been loo sheeegin yaynana ugu qorin, haddii xisbi la aado shacab "MP" ma dooranayee xisbiguu dooran doonaa, xisbiguna isagaa qoranaya xubnihiisa marka aynu dastuurka '*at least*' dastuurka aynu is waafajino. Wa Billaahi tawfiiq. Anigu intaasaan kaga baxay.

7) **Xil. Sareda Mohamed Abdalla:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoonka iyo xildhibaannada waan salamayaa.

Warka waa la iga boobay. Aniga waxaan ka hadlayaa, qodobka 47, sideedii in ay kusoo noqoto ayaan rabaa. siiqadi ay u dhignayd oo ahayd oo ahayde, doorashooyinka in ay meel ay u kala aadeen, kaas haddii lawaayo doorasho majiraysaba waaye. **Kaas in lagu sooceliyaan rabaa meeshiisa oo uu sidiisa ahaado xildhibaanno badanaana ka hadlay**.

Waxaa kaloon ka hadlayaa, haddii Ilaahay yiraahdo, soojedinta madaxweyne iyo ku xigeen. Madaxweyne iyo ku xigeen dalkaan ma qaadi karo, waxaa charter-ka kumeel gaar ka ah noogu qornaa oon ku soo heshiinnay, waxaan kusoo heshiinnay waxaasan ku soo heshiinnay Empagati "*prime minister*" iyo seddexdiisa ku xigeen. *prime minster*" iyo seddexdiisa ku xigeen ayay ummaddaan ku soo heshiisay oo wasaarado leh, prime minster-kii iyo seddexdiisa ku xigeen waa inuu imaadaa. 12kii yaa la baabi'iyay markii dowladda 10ka ah lasameynaayay marka si lagu saxo 4.5 ta dalkaan oo aan la daynin doorasho kama dheceysee yaanan been isku sheegine. markii dalka la nabadeeyo oo uu dego uunbay doorashoo imaan kartaa.

Inta laga gaarayana 4.5 tii aaba hadda la isku wiiqay oo lagu kala badsaday wax walbo. **prime minster-kii iyo ku xigeenadiisa waa inay imaadaan dalkaan doorashadana xisbiyada badan ay ahaataa**.

Dimuqraadiyadas wayn oo ay adduunyadu ku dhaqnayso aan ku dhaqanaa, ma ahee madaxweyne iyo ku xigeenaa lasameynaa, madaxweyne iyo ku xigeen nama anfacaayo. Madaxweyne iyo ku xigeen haddaba waa joogaan. Kuxigeen oo weliba '*power* leh ayaa jooga, waa baarlamaanka guddoomiyhiisa oo intaan oo wato cod ah, mana lagu dhaqmo afarta koone ayaa laga dakhray. 4.5 ma nihin 4.10 ma nihin waxaan anahy ma naqaano! Agaasimayaashii iyo wixii iyo adduunkii mar horaa hawada lagu kala fuuqsaday. Marka waxaan aniga leeyahay, prime minster-kii iyo seddexdiisa ku xigeen iyo qaabka aan hadda anagu ku dhaqmayno oo aan kusoo caano maalnay, in lawado ayaan rabnaa intii '*one man one vote*" looga gudbaayo qofwalba tuuladiisa laga soodooranaayo oo katagaayo oo nabad laga helaayo saas ayaan rabnaa.

Waxaan kaloon  rabnaa, waxwalba 4.5 in lagu qeybiyo sidii Empagaati loogu soo qeybiyay oo Cabdullaahi Yuusuf oga tagay, oo Sheekh Shariif oga tagay in lagu soo celiyo ayaan rabnaa, hadda ma nihin saas.  Waxwalba qofkii rabaa magacaawdo. Dastuurka xitaa ereyo badan oo khalad ah ayaa lagu soo daray inta uu hadda uu saan yahay qabyada yahay! Wax aan la kasi jirinaa lagu soowada daray. 10 wasiir oo oo safiiroo gooni loo qoraayo adduunoo dhanaa lagu soowada daray! Waasoo dhan in laga bixiyaan rabnaa anaaga meesha oo proposal-rada Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo ay keenaan oo sidii hore loogu soo heshiiyay charter-kii nadiifka ahaa oo saldhigga Soomaaliya u ahaa lagu sooceliyo aan rabna haddii Ilaahay yiraahdo.  Waxaa kale oo fiican, in dalka marka horeeto muxuu qaadi karaa la dhaho?

Haddaanba iswiiqnayba 4.5 dhexdiisaan isku wiiqnay, haddii kale sidii Bosnia 10 ninaa na xukumi doonto, awal 5ta golaha saraa nala dhihi jiray ama shir danbaa naloo qaban doonaa, waxaan tagi doonaa haddana Afrikadaan waa na nacdee, meela kale. Turkey ayaa nala geyn doonaa, haddii kale waxaan soo qoronay sidoodii haloo daayo, anaga hadda ma tirtiri karno ku meelgaar ka aan ka bixinno, wixiiiska hor imaanaayo aan ka nadiifinno inta kalna aan gacanta u taagno aan shacabka u gudbinno shacbkana sidii uu ugu codeyn lahaa falankeed hala galo oo shacabkii ha helo nabad. Tuulo tuulo ha ku socoto, odayaashu haysku tagaano ha la isu tago, ha laga heshiiyo haloo dad badsado ha la isla fiiriyo. **aan isla fiirino ceeb ma aha lakiin aniga lee fiirinaayo ceeb waaye, adiga lee ha fiirinin ha la isla fiiriyo isla fiirskaa fiican hadii aan waxa la isla fiirinin oo aan loo dad badsan way halaawayaan, dastuurkan yaan lagu boodboodin siiqadiisa way isku dhex darsantahay**
Ama, ama, ama, dibaa lagu wareeray meel laga akhrin kara maleh waxa ay hadda wiilasha qoreen, ama lee maan haynaynaa sanadkaan dhan? Sharci baa waxaan qeexay sharci yaqaano xeel dheereyaal ah, ayaa waxaan loobixin doonaa yaan anaga oo soomman ku danbaabin wixi iska hor imaanaayo lee mataqaanna halla qorqoro soojeedinta "NCC" iyadana wixii nadiif ah aan gacanta u taagno. Walalayaalow, yaan isku danbaabin.

Waaddankaan waa dimuqraadiyad madaxweyne ku xigeen hadaad maqashana Fedraalkaa lagu tirtiraa, aniga meel ayaan ka urihooayaa waan ogahay taasna ma yeelaayi haa, mayeelaayi taas; *because*' Soomaali wxii soo kala dhexmaray waa la ogyahay. Goormee la heshiiyay?  amaa la isla bundubtay? Yaah.  kanaa isku keen haaya kan iyo charter-kii ku meel gaar ka ahaa. Ummad kastana waxa isku haayo waa dastuur iyo nidaam. "Nabadaa naas la nuugo leh" aan kan nadda ku wadno. Walaalayaalow, maxaan iskula darnaa? Inteen ka fiirinnaa intaa waa ku khaldan yihiin aan dhahno. Aan saas yeelno; laakiin, waxaan u jeedaa een ma taqaannaa anaa tun weyn, haddii qof ba qofkuu ka xoog badan yahay hala tumo la dhaho dad badanaa laga xoog badanyahay marhoraa la is tumilahaa; laakiin,

dastuurka aan ku wada dhaqanno meelaha uu kawada jabanyahayna waan ognahay aan ka saxno, kheyraadka dalka halloo sinnaado, jagooyinka la magacaabayo haloo sinnaado, wasiirrada haloo sinaado. Waxwalba waa 4.5 inta xisaabta ka dhacayso, markaas qofka laga bato hala qadiyo lama dhihin, waxaa jiro dad badan oo aan tayo leheen oo dad yar ay ka tayo badan oo ay ka aqoon badan yihiin oo ay hoggaaminaayaan, waddankaan dadyar ayaa soo hoggaamin jiray waligeed oo aqoonyahano ah oo waxgarad ah.

Markaa anaa farabadanma ahee walalayaalow, aan is tixgalino dastuuraan iskula joognaa, heshiis bulsho waaye, bulshada inta aan ka gaarsiinayno yaanan dakhrin, 10 meel yaanan ka dakhrin saddexdii *prime minster* ku xigeen iyo *prime minster*-kii, fadaraalkii alaabtiyoo is wadata iyo xisbiyadeedii aaniga fadhiyaa.
Taas aan ku soo indha qaaday aana rabaa intaan noolahay haddii Ilaah yiraah intaan noolahay inaan waddanka 'onae man one vote degmadayda la iga soodoorto tuulooyinkayga aan bun ku soo dubto ayaan rabaa. Waxkale oo dalkaan lagu dhaqi karo ma leh yaanan isku danbaabin.

Haddii kale waxay noqonaysaa shinbirayoow heesa, shinbarayow heesa dalkaan waa kusoo burburay. Shinbiryow, heesa danbe hanoo celinina, inaan mardanbe dagaal galno marabno. Yaanan dowlado kale haddana naloo qaadin walaalayalow, hala sooceliyo dimuqraadiyada 47 iyadoo sidedii ah meesha halagu sooceliyo. Guddiyadi qaran oo hadda la baabi'iyayna sidoodii haloo sooceliyo, maxkamad dastuuriya ah na dagdag haloo sameeyo. Wax dalkaan iyo dadkaan kala celinaayo maleh maxkamad dastuuri ah haddii la waayo. Maxkamad dastuurka ah inay timaaddo waaye. Guddiyadii qaran ee madaxabaanaa in ay soo wada noqdaan, guddigaan danbe oo hadda inta ku qoran wuxuu yahay waa kasi waayay ani. Mid wuxuu ka imaanaa meel hebel, hebelow 1 luu soodirsanaa, wixii qururxda badnaa ee aan soo qornay aaway? Oo min labada ahaa. Kuwaas hala sooceliyo oo 4.5 ka ahaay.

Wax is aaminaayo maleh aw aamin waa dhammaaday taxadar lee nool, taxadar ayaa kujirnaa hadda taxdirka ha lasooceliyo si la isku aamino walalayaalow, aniga saas ayaa leeyahay. Halkaasaan fadhiyaa prime minster-kana ku xigeennadiisa halookeeno oo wasaaradii iyagoo wato oo 12kii tirtiraynay. Salaamucalaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu. Wax nus ahna majiraan meel walbaba shan qof ayaa laga rabaa 5 agaasime 5 wasiir 5 ku xigeen shan shan shanaa laga rabaa hal qof inta laga gooyo meel ma fariisanaayo.

8) **Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**

Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu. Mudane guddoomiye labada aqal. Een waxaan rabaa in aan sii gudo galo een mawduuca laga doodayo manta. insha Allah waxaan rabaa in aan ku bilaabo **Qodobka 47aad** oo si aad looga hadlay runtii qodobkaas waxaan rajaynaynaa in sidiisii loo soocelin doono iyadoo lagu daraayo dowlad goboleedyada, sida aad la socotiin haddii qodobkaan la sooceliyo waxaa meesha ka baxaayo qodobka 49, 50, 51 oo dhammaantood ka hadlaayo barnaamijka dooroshooyinka; waayo, haddii la sooceliyo wax dood badan u baahan ma aha in la soo celiyo.

- **Qodobka 48** matalaadda shacabka: waa laga soo sheekeeyay runtii waxaa la yiri: "Maqaamka iyo awoodda golaha Shacabka ayaa la rabaa in lagu wiiqo waana sax, haddii qodobka sidaas looqaato waxay noqonaysaa in awooddii golasha Shacabka uu lahaa ee yaraa ee uu kusoo dooranayay madaxweynaha, Resulwasaarana ku ansixinaayay xukuumaddiisa ayaa meesha ka baxaysa , marka waxaan rabnaa in qodobka 48 awoodda golaha Shacabka loodaayo; waayo, wuxuu matalaa wakiil ka yahay shacabka, waan

ognahay in shacab hadda wakhtigaan lajoogi Allah baa wax og;lakiin, dhowrka sano ee soosocda aan suurogal ahayn shacab inta ay wax soodoortaan ay xukuuumad la xisaabtamaan ay weli dhimantahay, laga yaabe xitaa in la isku diido in lagu shiro hoteelada in banaanbaxyo lasameeyo, waan ognahay wixii waddankan ka dhacay, waxaa la diididoonaa bananabaxyada iyo isu imaatinka.

- Waxaan rabnaa awoodda golaha shacabka, in ay sidiisii ahaato inta laga gaaraayo wakhti, hadda oo aan anaga saan nahay ayaan waxaan la xisaabtami la nahay xukuumadda, waad ogtihiin in heshiisyo la galay oo aan baarlamaanada labada aqal midna la keenin, haddii la yiraahdo shacab baa wax dooranaya ama awoodda shacabka lasiiyo anagaa siyaasiyiin ah oo intaan soo shaqeyneynay ayaa waxaan ogaan weynay heshiisyada lagalo, heshiiskii "East African Community" iyo kii hadda Turkiga labadaa heshiis kaliyaa baarlamaanka la keenay waxaana la gayaabaa 30 meeyo heshiis in ay jiraan oo ay xukuumaddu gashay aan weli la keenin, hadda awoodda golaha shacabka xoogaa waxaad mooddaa in ay xoogaa yar daciif yahay; lakiin, haddii la yiraahdo shacabka awood loogeynayaa goormuu shacabka la xisaabtami karaa dowldda? Way adagtahay.

- **Qodobka 49** ee farogelinta looga hadlay runtii way jirtay waana ognahay, haddii la is indho tiraynin farogelin shisheeya aan doorashooyinkii la soodhaafay ka marnay, waxaa kale oo jira oo la ogyahay madaxda dalka naftooda in ay farogeliyaan doorashooyinka, haddiiba la qorayo **qodobkaasi farogelinta shisheeyaha iyo madaxda markas joogto in lagu daro.**

- **Qodobka 49(g)** meesha koox lagu qoray in laga baddalo waa sax oo lagu qoro urur ama qeyb isla qodobkaas meesha baahiyahagaar ka meesha ku qoran dhowr jeer baa laga hadlay baahiyaha gaarka ah; lakiin, dadka ay quseyso arrintaan ee naafada ah waxay ogol yihiin oo raali ku yihiin in loogu yeero naafo, waxaan codsan lahaa anigoo katirsan guddiga xuquuqul insaanka oo aan la kulanay naafada iyada laftoou waxay raalli kuyihiin naafo, **baahi gaar ah qofwalba ayaa qaba ereygaas in lagu beddelo naafo**

- **Qodobka 51aad:** ee looga hadlay magac bixinta hoggaaminta: runtii kuma habboona in maqaamkooda meesha la gaarsiiyo; waayo, waxaa laga yabaa qof 8sano, 9sano,10sano madaxweyne loogu yeerayay manta hoggaamiye ama gudoomiye in aad tiraahdid, adiga xitaa marka aad danka leedahay aad u tagtid aad tiraahdid guddoomiye waxaa lagayabaa in uu kusoo fiirin waayo ama attention-kiisa ku siinwaayo; waayo, gugdoomiye wuxuu u yaqaannaa guddoomiye gobol iyo guddoomiye degmo.

  Way adkaanaysaa hadda hoggaamiye ama guddoomiye in loogu yeero, maqaamkooda aan sare u qaadno haloo dhaafo madaxweynaha dowladda hebel, madaxweynahaa Jamuuriyadda waa la ogyahay, madaxweynaha dowladda goboleedyadana iyagana waa la ogyahay in magacaas madaxweynaha sideeda loodaayo, qof intaas madaxweyne loogu sooyeerayay madhici karto in uu ogolaado ama ku soojeesto ma *attention*-kiisa kugusiiyo hoggaamiye in aad tiraahdo.

  Dastuurka waxaa lagu sooqoray go'aamo labo xisbi, labo madaxweyne waxyaalo ayaa lagu sooqoray, haddii dastuurku yahay heshiis bulsho, waxaa fiican golaha shacabka ayaa ka wakiil ah bulshada in golaha shacabka go'aan ka gaaro wixii uu golaha shacabka sheego in dastuurka lagu sooqoro; lakiin, haddii la yiraahdo labo xisbi go'an ayaad soogaartay

'*social contract*' maaha "*personal contarct*" ayay noqonaysa adad go'aan soo gaaray in lakeeno, waxaan rabnaa wixii uu baarlamaankan yiraahdo In la qoro waxan rajaynaynaa in sidaas looqaadan doono insha Allah waxaan kusoo gabaggabeynayaa ducadii ahayd " Allahumaajcal hadihi dastuur naafican li shacab wal wadan". Salaamucalaykum waraxmatullaahi wa barakaatuhu

9) **Xil. Da'ud Abdikarim Omar:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulillaahi wasalaatu wasalaamu calaa rasuullullaahi sallaahu calayhi wasallam. Mudane guddoomiye mahadsanid. Dhamaantiin waxaan idinkusalaamayaa salaanta islaamka asalamaku alaykum waraxmatullahi wabarakatu.

Waxaan jeclahay in aa horay ka galo een ajadaha. Qodobka aan manta ka hadlaynaa waxa weeyaan dastuurka jabtarka 4aad. Waxaan rabaa inaan ku billaabo een *'iftitaaaxa'* een odayaasha xeer beegtidii Soomaalidu marka ay xaajo noocan oo kale ah ama xeer ay sameynayaan, waxay ku furan jireen: "Ilaahow, aqoon la'aan hanagu cadaabin eex na naga ilaali."

Intaa haddaan ogabaxo arartayda waxaan rabaa laba, labo ayaan u kalaqaaday dastuurka chapter-ka maanta ina horyaala chapter ka 4aad labo qodob iyo ra'yiga "NCC" oo aan dhammeyn haddii aan ku hormaro. Qodobka 46aad ee ka hadlaya awoodda shacabka **waxaan qabaa sidiisa in loodaayo sida uu dastuurka ugu qoranyahay in loodaayo ayaan qabaa kaliya lagu siyaadiyo "Alle ka sokow awoodda shacbkaa leh" in intaa lagu daro ayaan qabaa**.

- **Qodobka 47** Gudigu waa tirtireen waxaan rabaa qodobkaas isaga ah Guddiguna fasax uma haystaan qodob dastuuri ah in ay tiraan "NCC" na ma tiri karto, dastuurkaan aynu haysano qodobadiisa waxaa lagu tirtiri karaa oo kaliya 2/3 oo labada gole ah iyo madaxweynaha oo degrato kuso saara, lamatirikaro talo "NCC" na laguma tirikaro guddiguna ma tirikaraan, waxaan qabaa qodobka isga ah doorashooyinka iyo axsaabta qodobka ka hadlaayo in sidiisa loodayo, guddiga waxaan ka codsanayaa u soo jeedinayaa mardanbe in aysan dhicin qodob dastuur ah in layiraahdo meeshaa laga saaray ama waa latiray waxaa jira siiqo kale oo loo soogudbin karo option-no ama khiyaaraad bey soojeedin karaan, khiyaar1 khiyaar2 iyo khiyaar 3; lakiin, waa la tiray awooddaas malihidiin guddiyow, 'note' gareysta haddii Alle idmo.

- Haddii aan u galo 14kaan qodob ee"NCC" oo weliba ay ka maqantahay Puntland Soomalilandna horay oga maqnayd dastuur ma aha waa ra'yiyo odoyaal ay soojeediyeen anaga dastuurkeennnu waa kaas, madaama"NCC"ay ra'yi soojeedisay waxaa loo bahanyahay ra'yigaas haddii aan wax ka iraahdo 14 qodob wuxuu saameen ku leeyahay ogu yaraan 10 *chapter*, wuxuu saameen ku leeyahay "*chapter*" 1aad,2aad , 4aad , 5aad , 6aad .7aad 8aad, 9aad,10aad, 12aad iyo 15aad intaas oo *chapter,* in ra'yi aan loodhameyn in uu saameeyo macnaheedu waxaa weeye, dastuur cusub baa la qorayaa.

  Mudanayaal waxaan qabaa waxa aan ka hadalayno haddii uu dastuur ummadda Soomaaliyeed yahay. haddii uu yahay wax 18 gobol ee Soomaaliya la rabo in lagu dhaqo Soomaaliland oo mar hore ku dhawaaqday in ay gooni isu taagtay oo go'day iyo puntland oo aan ra'yigeedii meesha ku jirin, waxaan qabaa ra'yi "NCC" oo aan dhammayn in lagu dul shaqeeyo waxaa ka habboon in aan si kale u fakarno.

- **Qodobka 51(1)B:** oo ka hadlaya madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeen, hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen iyo qodobka 56aad tirada xisbiyada siyaasadeeed qodobka 51aad ayaan xoogga saarayaa haddii Alle idmo, mudanayaal dastuurkaan waxaan u sooqaatay in aan "clarification" ku sameeyo, inagu anigoo ka duulaya qodobka51 horta innagu maxaanahay? Maxaa lagu heshiiyay? Carte muddaa la fadhiyay Empagaatina muddaa la fadhiyay, waxaan ku heshiinaa oo lagu heshiiyaya Federaal *Republic* waxaa lagu heshiiyay '*parlamanterian*' oo aan hadda ku shaqeynaynaa waxaa lagu soo heshiiyay '*multy party system*' oo dastuurkeenna *chatter* 1aad *declaration*-ka ku cad, Carte waxaa lagu heshiiyay '*power sharing*' iyo 4.5 ama 5 beelood intaas ayaa hadda waxay tahay waxa Soomaali ku wada joogto oo aan dowlad ku nahay oo aan meeshaan ku fadhino.

- Haddii laga guuraayo waxaa ii muuqata 14 qodob waa geeddi hayaan ah weeye waa in loo dhammaadaa, dooda ah Maxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen hormar iyo wada socod iyo isla jirid bey noo horseedaysaa waxaan ka leeyahay, war dowladnimo is jeceyl iyo is caashaq ma aha *check and blance* waaye hay'ado is blance gareeya oo garsoor leh oo baarlamaan leh oo '*executive*' leh waaye, hadde haddaanu rabno *team* isleh aynu Boqortooyo sameyno boqortooyaa noogu sahlane, haddii aan dowlad demuqraadi ah, federal republic-ah parlamnterian-ah, multi party system-ah power shareing-ah oo sidii lagu soo heshiiyay aan ahayn ah hadde '*unitary system*' iyo "centerlized" Soomaaliya waa soomartay.

- Dood baa jirta la leeyahay dowlul mukhaalada ama "hypred" Soomaaliya waligeed "hypred" ma noqon parlamanterian bey ahayd, dowladdii rayidka parlamaterian baan ahayn tii Carta ilaa hadda "parlamaterian" baa nahay waxa caddaynayana waxaa weeye baarlamaanow, madaxweynaha idinkaa doorta, haddii uu dambi galena qiyaano qaran gala idinkaa impeach garayn kara xukuumadda idinkaa ansixiya '*oversight*' idinkaa kulli kuleh, waxay ila tahay, aniga Soomaalidu waxay ku maahmahdaa: "Hibo Eebbe kusiiyay habeen la iskama qaado" waxaan ku nuuxnuuxsanayaa, awooddu aktiinay taalaa, labada gole ayay taallaa, Soomaalidu waxay tiraahdaa:"Wiil mudug jooga Alle uma xilqarin" Soomaali oo dhan baa maanta ina daawanaysa, waxa laga hadlayana waa masiirkoodi weeye, taladaan meeshaan taala oo aad awoodeeda aad leedihiin, sida aan ka yeelno Allah wana dalacanayaa Soomaali wayna waa nagu qiimaynaysaa.

  Waxaan ku soo gabaggabaynayaa, Soomaalidu waxay tiraahdaa: "shahaadosuur" furoow Allah ku og, ka aad u furtayna og, ka aad ku furtoo shacabka Soomaliyeedna og" yayna nagu dhicin. Salaamu calaykum waraxmatullaahi wa barakaatu.

10) **Sen. Abdiqani Gelle Mohamed:**

Een mahadsanid guddoomiye. Bismillahi alxamdullilaahi Rabil caalamiin, sumas salaatu wasalaatu wasalaamu calaa sayidinaa wa nabiyinaa Muxamed wa calaa aalihii wa saxbihii wa salim.

Axamdullilaahi waxaan aad ugu faraxsanahay in aan ka mid ahay baarlamaanka jamhuuriyadda federaalka ah ee Soomaaliya oo maanta ku guulaystay in ay ka shaqeeyaan dhammaystirka dastuurka. Waxaan rabaa in aan dhowr qodob taabto qodobka 1aad waxaa weeye **qodobka 49aad xarafkiisa G** damaanad qaadaya in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan metelaad caddaalad ah siiba haweenka iyo

dadka baahiya gaarka ah qaba. Waa garannay haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba. lakiin, kooxaha maanaan fahmin ma kooxaha kubbadda miyaa? Ma kuwa diinta islaamkaa? Ma kuwo kalaa? maanaan garan mise waa kuwa siyaasadda?

Waxay ku fiicantahay mar haddii uu dastuuur yahay waxa laga hadlayaa in wax qarsooni aysan ku jirin ee la caddeeyo wuxu waxa ay yihiin. Kooxahaasi waxa ay ku habboontahay in meesha laga saaro oo wixii ku habboon la geliyo.

**Isla farqadaas (H)** waxaa ku qoran xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya metelaad caddaalad ah siiba beelaha laga tirada badanyahay si loo gaaro caddaalad bulsho. Waa run, waan bogaadinaayaa in lagu soo daray aadbaan ugu faraxsanahay cid kasta oo Soomaali ah ama ha badnaato ama ha yaraatee, in ay xuquuqdeeda heshaa waalagama maarmaan, si gaar ah waxaan u bogaadinayaa guddoomiyaha oo maalin dhawayto halkan ka difaacay cidda uu metelayo iyo inta halkaan ku qoran. Arrintaani waxa ay muujinaysaa nidaamkii beelaha Soomaaliya oo wax qeybta ahaa oo soo jireenka ahaa ilaa Carte lagu dhaqmayay, qeyb ahaan in halkaan lagu soodaray, waxaan jeclaan lahaa, in si fiican loo qeexo, oo la yiraahdo: "Beel walba wixii ay leedahay oo ay xaq u leedahay oo soo jireenka ahaa sideedii ayay ku imaanaysaa" ee in aan cid gaar ah la xusin, anigoon cid gaar ah hadda caaliqayn; sababtuna waxa weeyee dadka baqayoo laga tiro badanyahay, aniga laftirkaygaa ka mid ah, ninkii isagu haatan laandheeranimo ku faanayay isagay u taallaa. Ninka aannu walaalaha nahay oo aan beesha isku raacsanahay 50 xillibaan baa golaha shacabka u fadhiya anna 3 baa ii fadhiya! Wuxuu rabaa in uu seddexdayda ku darsado ha la yaabina. (Carabi iima qorayo halkan waxa galaysa ن هذا أخي له تسع وتسعون نعجة ولي نعجة فقال اكفلنيها وعزني في الخطاب )

Haddii la doodayna waa iga adkaaday buu yiri: 99 baa walaalkay leeyahay ida ah ana mid quraan leeyahay, igu biiri buu yiri 100 kay ku qurux badantahaye haddii la doodayna waa iga adkaaday. Haddii la aado doorosho qof iyo cod ah oo state-yo la aado soo iga soo qaadan mayo? Waa hubaal waxaan qabaa in lagu qeexo dastuurka, xuquuqda cidwalba leedahay in ay ku caddahay, inta laga gaarayo doorasho qof iyo cod ah oo loo simanyahay oo qof walba uu helaayo caddaaladdiisa oo aan la ismaquuninayn qodobkaas halkaas ayaan kaga gudbayaa.

- **Qodobka 51aad**: Madaxweynaha iyo madxweyne ku xigeenka; innaga umaynaan bixin iyagaa la baxay, haddana uguma wanqali karno hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen, madaama ay states yihiin wadankuna uu federal yahay waxaan qabaa, in magacooda loo daayo hoggaamiye iyo madaxyare midna uma bixin karno waxaan qabaa, in magacooda loo daayo; madaama, ay hadda xasaasiyad kicinayso oo ay buuq abuurayso. Magac baa nalaga qaaday qaarna maqanyihiin, waxaan qabaa in madaxweynahooda loo daayo oo aan hoggaamiye hadda waxba lagu cadaadin aynaan hadda ugu wanqali karin.

- **Isla Qodobka 51(2):** xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa dooranaya si toos ah oo cod qarsoodiya oo madaxbanaan muwaadiniinta buuxiyay shuruudaha. Dalku in xisbiga la doorto iyo in qofka la doorto waxba kama dhaxeeyaan labaduba isma gali karaan, haddii aan anigu halkaa doorasho madaxbanaan aan kursi kala imaaddo anoon xisbi ku jirin saasay caddaynaysaa tani, ma oran karo xisbi hebel baan metelayaa, waxaan qabaa in taasna laga daayo oo loo daayo cidda loo codeenaayo in ay noqoto xisbiga ee laga daayo baarlamaanka waxaa dooranaayo

shacab, ee loo daayo xisbigaa dooranayaa, shacabku xisbiguu ka soo dhexbaxayaa qofku sidaasaan qabaa.

- **Qodobka 52aad** in aanan ka gudbin muddada xilhaynta dastuuriga ah ee si toos ah loo dooranayo ee ku xusan **qodobka 51(1)** waa 5 sano taas aragti ahaan waxaan qabaa, in 6 sano laga dhigo waxaad ogtihiin marka dawlad cusub la dhiso sanadka ugu horreeyo waxaa lagu jiraa socod barad iyo abaabul sanadka u dammbeeyana waxaa lagu jiraa doorasho iyo olole wakhtigii oo dhan waxa uu noqday 2 sano haddana 3 sano ayaa laga dhigayaa taa **waxaan qabaa in laga dhigo 6 sano, saasayna ku habboontahay laguna gaari karaa dawlad taam ah oo midda tagaysa laga dhaxli karaa wax la taaban karo.**

- **Qodobka 53aad**: Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo gaarayna da'ada 18 sano. Innagu dad islaam ah ayaynu nahay dadkeenuna waxa ay ku qaangaaraan diiniyan 15 sano, markuu qofku 15 sano gaaro ayaa lagu kallifay wixii uu ilaahay ku adoonsaday oo soon iyo salad iyo wixii la mid ah, ayaa laga doonayaa sidoo kale waxaa la qorayaa dunuubtiisa iyo ajarkiisa, ma qaadan karno reer galbeed warkooda ah 18 sano waxa ka yar qaangaar ma ah in la yiraahdo, innagu diin baynu leenahay, sidoo kale dad keenna waad ogtihiin tiradeeno waa yartahay deegaanadeena oo dhanna doorasho kama wada dhici karto, maadaama aan u baahanahay dad tiro badan bulshada hadda Soomaaliya ku dhaqanna boqolkiiba 70% waa dhallinyaro, dhallinyaradaas kala bar in ku dhawna waa 15-18 inta u dhaxaysa, si ay xuquuqdooda u helaan **waa in halkaa laga dhigo 15 sano innaga oo cuskanayna diinteena iyo sida aan u dhaqano**, Salaamullahi Calaykum.

11) **Xil.** Abdinur Ali Adan

Bismillahi Raxmaani Raxiim. Guddoonka waan salaamayaa, xildhibaannaada sharafta lehna waan salaamayaa.

Anigu waxaan rabaa in aan ka hadlo, dad badana waxay leeyihiin dadka laga tiro badanyahay, runtii horta qodobkan 50aad waa laga boodboodayaa, wanaa qodobka ugu fiican oo qofkasta oo ciil qabay ama islahaa waxbaa kaa maqan uu wixiisa ku heli lahaa, sababta oo ah qodobkan wuxuu leeyahay: Doorashada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu baarlamaanka uu soo saari doono.

Horta in laga gudbo oday ayaa wax qori jiray, labaatan qof ayuu wuxuu ku yiri hebel adaa qoran iyo hebel adaa qoron, oo been noqotay oo uu hal qof kaliya qornaan jira., 50 qofaa wax dooran jirtay dhibaataa ka dhacday, 101 hadda innagaa ku soo galnay hadda waad ogtihiin, marka horta in qof iyo cod loo gudbo, anigu hadda waxaan kamid ahay dadka laga tiro badanyahay na ma ihi, dadka tirada badana ma ahi ee dhexdaa ku jiraa, sababta oo ah 5 xildhibaan ayaan leeyaahay haddii qof iyo cod noqoto waxaan filayaa in aan 10 xildhibaan heli karo qalbiga sida ay iigaga jirto;

Marka horta in qof iyo cod loo gudbo ama la yiraahdo beesheyda laga hadlo labadaa horta isma qaadayso, oo isma qaadi karaan halakala qaado, qof iyo cod haloo gudbo beel halaga reebo, maanta wixii ka dambeeyo oo xisbiyo ayaa loo gudbaa, doorashada sidaas ha noqoto, qodobka 50aad aaba qeexaya oo uu leeyahay qof iyo cod ayay noqonaysaa.

- **Qodobka 51aad** iyo 50aad Labadaas bes ayaan annigu ka hadli rabaa, qodobka 51aad madaxwaynaha iyo madaxwayne ku xigeenka aad baan u soo dhowaynayaa, habka loo dooranayo baarlamaanka federaalka ee Golaha shacabka iyo Aqalka sare ayadana aad ayay u wanaagsantahy, aadaa ugu kalsoonahay weliba.

- Hogaamiyaa soo haray, hoggaamiye magacaaba xun; sababta oo ah hoggaamiye kooxeedyo ayaa horay ugu baxay magacaasaa xoogaa dhib leh, in madaxwaynayaasha dowlad goboleedyada iyo madaxwaynaha federaalka ay ka heshiiyaan ama hab la siiyo way habboontahay; laakiin, magaca hoggaamiye magac xun oo horay u baxay waaye, nimankii isbaarada dhigan jiray, nimankii dadka layn jiray magac u baxay waye, Soomaaliyana wuu ku cusubyahay, magacii ayaaba la necebyahay maadaama magac lanecebyahay uu yahay isagana halaga daayo, intaas ayaan ka hadli rabay wassalaamu calaykum waraxmatulahi.
  Wa barakaatuhu

**12) Sen. Abdi Hassan Awale:**

Bismillahi Raxmaan Raxiim. Guddoonka baarlamaanka, xubnaha labada gole, labada guddi ee hawshan ka soo shaqaysay, baarlamaanka iyo bahda warbaahinta dhammaantiin asalaamucalaykum waraxmatullaahi wa barakaatu. Waxaan u soo istaagay, waan akhriyay runtii buugga ay soo diyaariyeen dastuurka ay soo qabteen labada guddi waan aragnay, haddaan inyar dib u fiiriyo dastuurka ku meelgaarka ah ee lagu midaysanayahy oo Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya, wuxuu ka koobanyahay 15 cutub iyo 143 qodob buu ka koobanyahay, ee awoodaha jiray ee ku dhex yaalay waxa ay ahaayeen garsoorka, Xeer dejinta iyo Fulintana, waa ka koobnaayeen, waxaa ii muuqatay anniga ii soo baxday dastuur cusub ayaa la qoray ayaan oran karaa.

Daastuurkan wuxuu ahaa inta qodob ee aan sheegay 15-ka cutub Dowladda Soomaaliyeed ayay oo maanta dhisan ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxay ku dhisantahay 15-kaas Cutub iyo 143 qodob bay ku dhisantahay, haddii dastuurka wax laga bedelayana wuxuu sheegahayaa, laba qodobaa wax looga baddalayaa:arrin waa arrin siyaasadeed oo ah arrinta siyaasadeed, in dadka siyaasadda hoggaaminayaa inay qodobada siyaasadeed ka heshiiyaan ayagoo heshiisana loo keeno guddiga loo keenay, guddiguna markaas uu geliyo ee daabacaadda ku daro, waxaa kaloo la samayn guddigu leeyahy ee muxuu ahaa, farsamada farsamayn, in la farsameeyo oo wax alliyo wixii shaqo la hagaajin karo in la hagaajiyana guddigu waa leeyahay.

Laakiin, awooddu guddigu ma siinayso inay arrimihii siyaasadeed ayagu soo dhigaan, guddiga ma siinayso, sharcigu ma siinayo, meel hadda ay ku midaysanyihiin oo siyaasiyiinta dadka uun hadda hogaaminayaan waa dowladaha dowladda Federaalka iyo dowladaha xubinta ka ah.

Arrintan ah dastuurkan meesha la keenay ee hadda la akhrinayo ee la rabo in la ansixiyo ma wato dariiqii sax ahaa oo Soomaaliya shalay ku heshiisay waa baalmarsanyahay.

Waxaa marka loo baahanyahay annaga inaan ka darno ma aha. Kaddarimayno Baarlamaankii Federaalka Soomaaliyeed, oo halkan fadhiyoo maanta dastuurkan saxayow, yacni inaan ka darno ma ahan. Waxaan heshiiska ku ahayn haddaan ka leexano oo aan loo dhammayn, iyadoon loo dhammayn haddaan ka leexano, waxii aan dhigno ma shaqaynayaan, meesha aan joogno hoos ayaan ka sii aadaynaa, waxaan marka ku

talinahayaa, arrinta siyaasadda ciddii lahayd in looga dambeeyo loo daayo oo ay awalba dastuurku tilmaamay waa dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda Federaalka, in ay ka keenaan wixii siyaasiyan la beddalayo. Waxaa hadda kadaran meeshan waxa yaalla, qodob dhan ayaa la tuuray oo leeyahay: "Qodobkan waannu tuurnay, qodobkaan waa tuurnay yaa siiyay xaqaas guddigu ku tuurahayo? Xaggay ka keeneen? ee la leeyahay guddigaa tuuray oo ra'yi kale keensanaya!

Marka walaalahayga ee baarlamaanka sharafta badan een waxaan anigu ku talinahayaa, inaan ee annagu aanan dhibaato aan hadda dalka ka jirin , dalku wuxuu ku midaysanyahay dastuurkaas ayuu ku midaysanyahay dalku hadda, ninkii dastuur kaloo aan lagu midaysnayn daabaca, dalka darajaduu rabo ha lahaado xilkuu rabo haw hayo, wixii ka yimaadda asagaa masuuliyadeeda, ciddii waxaas samaysay baa masuuliyadda qaadaysa. Waxaan marka annigu ku soo gaabinayaa, markaan akhriyay, kanna waan tuuray kanna waan beddelay, kanna waan bixiyay ay tahay hadde arrintaasi maahan.

Dastuurkaan haddii een madaxda ee federaalka iyo madaxda dowlad goboleedyadu, hadii ay ku heshiiyaan, in la beddelo guddi khubaro ah sida ragga hadda soo diyaariyay oo kale baa loo dirahayaa, waxaan waa la beddelahayaa, wixii laga heshiiyaana la beddelahayaa. Wax walba la beddeli maayo, marka annigu ma rabo inaan, ma rabo in maantay taariikhda halkaan aan joogno dadka waxaan ognahay arrimaha xasaasiga ah kanna waan tuuray kanna waan qaatay, kanna waa cusubyahay een laguma heshiinin meel madaxwayne iyo Raysall wasaare in la qaato, prime Minstry-kii iyo madaxwaynihii horena ee in *prime minstry* ku xigeen laga dhigo laguma heshiinin, Soomaaliyina kuma heshiin. Yaa noo fakarahaya baarlamaankii Federaalka waa kanaaye, yaa soo diyaariyay? Cidda ka dambaysana yaa waaye arrintaa iyada ah?

Arrintaas waxaan leeyahay een yaynaan ka darin. Yacni waa u baahanyahay dastuurkani meelo badan in laga saxo waa u baahanyahay; laakiinm awoodaa a la rabaa cidda samaynaysoo cidna tuuraysa cidna qaadaysa ee boobsiiska lagu wado. *Cutubka* 3aadaa laga tagay cutubka saddexaad 4 baa loo aaday, maxaa dhacay? Waxaa la yiri: "Waan ka soconaynaa, waa laga soconaayaa"

Anigu ma qabo degdeggaas dalkaan in wax ugu hagaagayaan, maanta masuuliyadda halkaan inta fadhida weeye ayagaa ka masuul ah dastuurka, aan dhowrno wixii lagu heshiiyay ilaa ay yimaadaan wax lagu heshiiyay. Yacni inaanaan annagu qardajeex in aanaan samaynin. Wasalaamu calaykum warraxmatulaahi wabarakaatuh.

**13)Xil. Mohamed Abukar Abdi.**

Bismillahi Raxmaani Raxiim.Asalaamu calaykum waraxmatullaahu. Ee mahadsanid guddoomiye, Labada Guddoon ee Xildhibaanada labada aqal waad salaamantihiin. Salaan kaddib, cutubkan maalmahan laga doodayay ee metelaadda shacabka. dabcan si fiican ayaa looga wada hadlay waana arrin aad u wanaagsan oo ah cutub gebigiisaba innagu cusub oo kii W; laakiin, cusubnaantiisa wax dhibaato badan kuma qabo maadaama uu haddaba ina horyaallo wixii ra'yigeena ah in hadda ka dhihi karno maaddaama uu inna horyaallo wax dhibaato wayn ah kuma qabno.

- Waxaan rabaa **qodobka 48(1)** oo la leeyahay Alle S.W ka sakoow awoodda xukunka waxay ka bilaabanaysaa kuna dhammaanaysaa Shacabka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, kaas oo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dowladda, marka middaas

waxaan ka codsan lahaa oo aan guddiga u soo jeedinayaa saaxiibadii hore u soo jeediyayna in aan ku raaco, awoodda la xisaabtanka waxaa iska leh baarlamaanka; laakiin, shacabka lama xisaabtami karaan awoodda dowladda iyo wasaaradaha iyo fulinta **qodobkaas waa in lagu daro ugu yaraan, in isla xisaabtanka uu leeyahay baarlamaanka.**

Sidoo kale **Qodobka 47aad kii hore ayaa ka wanaagsanaa sidii hore ay u qornayd in lagu soo celiyo ayaan soo jeedinayaa**.

- **Qodobka 49aad** qaybta dhexe ee cusub dastuurkii hore ayaan firiiyay waxaa ku qornayd tirada iyo xuduudaha dowlad goboleedyada waxaa go'aan ka gaaraya Baarlamaanka Golaha shacabka, dabcan meesha waa laga saaray, anigu waxa aan is leeyahay waa arrin jirta oo taagan maalin walba, gobol oo tabasho yar qaba in uu dowlad goboleed sheegto oo ay maalin walba dowlad goboleed ay soo kordhaan marka annigu arrintaas waxa aan soo jeedin lahaa, haddii ay jirto cutub kale oo looga haddli doonana waa gaarkeed; laakiin, haddii kale waxaa wanaaagsan in go'aan laga gaaro Soomaaliya inta dowlad goboleed ee ay yeelan Karto haddii kale maalin walba ku cusub ayaa soo kordhaya , kuwa hadda jira oo dhisan baan lagu qanacsaneen sida ay u dhisanyihii oo lakala boobay, maalin walba in kuwo cusub lasoo kordhiyo macno ay yeelanayso malaha, marka qodobkaas meesha waa laga tirtiray marka haddii meel kale loo raray guddiga waxaan ka codsanayaa in su'aashaas ay iiga jawaabaan, marka waqtigeeda la gaaro xuduudaha iyo inta tiro dowlad goboleed ay yeelan karto Soomaaliya waa in uu go'aan ka gaaraa bnaarlamaanka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, si loo gaaro go'aan kama dambays ah oo lagama gudbaan ah.

- Isla **qodobka 51aad** meesha la leeyahay hay'adaha sida tooska ah loo dooranayo ee hay'adda dastuuriga ah ee muwaadiniinta ee ay soo dooranayaan baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo madaxwaynaha iyo madaxweyne ku xigeenka, dabcan meeshan saaxiibbo badan ayaa ra'yi fikrado ka soo jeedsadeen in uu dalka yeelan karo madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen, aragti badan ayaa laga dhiibtay.

  Anigu arragtidaydu waxay ila tahay, dabcan Soomaaliya muddadii ay dhisnayd ee 60-kii sano ay dowladnimadu soo jirtay mar ay burbursanayd tol baa iska haystay madaxwaynanimada iyo waxa la sheego oo dhanba. Dadka Soomaliyeed ayaa waxay sugayeen in maalin  dalkan la gaarsiiyo qof iyo cod oo dadku ay ku ciil baxaan codkooda oo ay madaxweyne ku helaan ama ay ku waayaan, saaxibbo badan ayaa soo jeedinaya oo lahaa waddanka sidan xal uma aha, war xalka dad badan oo Soomaaliyeed ayaa sugayay waxay ahayd in dalka uu gaaro qof iyo cod, madaxwaynuhu in ummaddaas uu hortago oo ay dadkaas soo doortaan, dad baa waxay sugayeen in maalintaas ay timaaddo, maalintii taas lasoo propose gareyayneh dadka iska leh weli sidan ayaan leenahy.

- Anigu waxaan aaminsanahay waddankan madaxwayne iyo madaxweyne ku xigeen Presedential waddankan hadda ayuu yahay, qofka hadda leh wadankan presedential ma aha yaa waaye? Yaa i dhihi kara, Constitution-ka uu ku qoranyahy micno malaha laakiin, habka aan maanta wadanka ugu dhaqano oo dowladda loo maamulo Iyo sida ay hay'adaha dowladda loo maamulo iyo sida ay u socdaan waa presedential, marka maxaa diidaya waxaa lagaa baqayaa in afka laga sheego, laakiin in aan ku dhaqano waan ogolnahay in la sheegana lama ogolo right now oo aynu hadda taaganahay ayaan ku dhaqanaa wadanku waa Presedential.

Inteena waxaan line ugu jirnaa kan Prime Minstry-ga haddii aad awood leedahay oo xildhibaan isku filan aad tahay maxaa maalin walba la ima qaabilo aad u leedahay? Wadankan madaxwayne Presedential hadda ayuu yahay aan sharciyayno, intii la inooga baahanyahay waa intaas, wiilal iyo gabdho Soomaaliyeed ayaa sidaa ugu soo heshiiyay annigu waxaan aaminsanahay maanta maalin ay kaga mudantahay malaha , waddankan in uu yeesho madaxweyne iyo madaxwayne ku xigeen in la soo doorto dadka aynu annaga matalno oo ay dad badana matalaan xildhibaan Ceymoy oo halkan fadhiyo dadka uu matalo ayay ka midyihiin waxa sugayaan in qof iyo cod la gaaro oo codkoda ayay ku kalsoonyihiin, waxaan aaminsanahay in madaxweyne aan heli doono lacagta ayaa la innagu bartay wadanka hore ayaa loo dhacay, lacag ayaa lagu helayaa marka anagana tirada dadka markii la gaaro in aan ku gaarno marka arrintaas sidaas ayaan ka leeyahy aad ayaana u aaminsanahay.

- **Qodobka 51(3)** xubnaha ku tartamaya kuraasta aqalka sare halka meel ay ka jirto dhibaatada sida uu aqlaka sare u dhisanyahay iyo sida loo qaybsaday iyo habdhismeedkiisa dad Soomaaliyeed oo tiro badan ayaa cabasho iyo dhibaato ka qaba, waxa uu ku dhisanyahay lama yaqaano, Ma state ayuu ku dhisanyahy? Haddii la dhihi lahaana kuma dhisno ma qabaa'il ayuu ku dhisanyahay? Kuma dhisna. Ma gobol ayuu ku dhisanyahay? Iyadana kuma dhisna. Annigu waxaan dhihi lahaa aqalka sare waa in dib u eegista dastuurka go'aan looga gaaraa nidaamka loo dhisayo ma in shanta beelood lagu qaybsadaa? Waa wax la fahmi karo waana waxa kaliya ee aynu heshiis ku nahay, shanta beelood halagu qaybsado hana lagu dhiso.

  Maaha haddii gobollada la dhihi laha xitaa 18gobol Soomaaliyeed sidaas ay tahay xitaa dad ku dulman ayaa jira, marka ani waxaa dhihi laha aqalka sare si dulmi ayuu ku dhisanyahay waa in la toosiyo baarlamanka hadda fadhiyana arrintaa go`an ha ka qaatan wax loo wada dhanyahay ummadda Soomaaliyed wada leyihin haddii laga maarmana Laga maarmo gabigisaba, horayba waa loosoo sheegey dadba halkaan kuso qoray.

- **Isla qodobka 51(5)** meesha La leeyahay hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen ee dowlad goboleedyada waa sax oo waala qabaa, laakin at least halaga fiiriyo magaca loo bixin karo haddii waddanka dhan madaxwayne wada yahay problem bay leedahay laakin at least magaca madaxwaynaha jamhuriyadda federaalka ka hoseeyay in loo helo nooca uu doono ha noqdee in la raadiyo arrtintaas waan qabaa oo waxay noqoneysaa dee madaxwayne in lawada noqdo.

  Dhibatada hadda jirto waaye, madaxwaynihii jamhuriyadda federaalka wax ayuu soo saarayaa, madaxwayne dowlad goboleed baa diidan isbaaro ayuu u dhiganayaa marka si taa looga gudbo nimankan jaakadaha waawayn ee madaxwaynaha gashtay in magac kale loo helo waan qabaa dadka ku taamayay ayaan kamid ahay in maalin meesha hoggaamiyo; laakin, aan magac madaxwayne ahayn in loo helo ayaan qabaa.

- **Isla qodobkan 51(7)** meesha la leeyahay golaha deegaanka iyo duqa magaalada iyo ku xigeenka magalada waxaa si toos cod qarsoodi kuso dooranayo shacabka la leeyahay waxaan soo jeedin lahaa oo aan la qabaa in golaha deegaanka shacabka ay soo doortan; laakin, guddomiyaha degmada golaha deegaanka ay iska dhax doortaan taas waan soo jeedin lahaa taas ayaana ka macquulsan.

- **Qodobka 52aad** mudada xilhaynta waan la qabaa soo jeedinta halkan ku qoran maalin walba waxa la leyahay muddo kororsi baa lagu darsaday, sidaa waxaa loo leeyahay waqtiga ayaan ku filnayn, marka sidaa daradeed taas waan la qabaa saaxiibada, waxaan kale oo aan qabaa saaxiibo badan ba inta ay soo istaagaan waxaa la leeyahay waala baddalay waxba ku cusub, war waxa cusub hadda noo yaalo kuwa aan u dacwonayno oo waala baddalay aan leenahay soo rag iyo gabdho inala mid ah masoo qorin, ma munasal Ilaahay cirka kasoo dajiyay baa kitaabka Ilahay la baddalay miyaa? Halka haddii lasoo istaago waala badalay kii hore mid ka wanagsan sow ma keeni karno?

  Aniga arintaa waxan qabaa iyadana inaga isku kalsooni la`anteena ayaa dhibaato keenaysa, dastuurka maanta na horyaallo oo maanta lagu dhaqmayo waddanka siduu ku soo bilowday waan ognahay, meesha uu soo maray ayaan naqaanaa saxiixyaal 7 ah iyo dad go`aan kasoo gaari jirey, maanta 500 xildhibaano ayaa halkan fadhiya qof walba 50,00 iyo kabadan ayuu matalayaa, innaga kuwii hore ayaa naga caqli wanagsan oo naga garaad wanagsan oo wax walbo nooga wanagsan, haddii aynu leenahay anigu ilama aha mid wanaagsan, wixii halkaa ku qoran qofka ha saxo wixii qaldan, laakin yaanan la dhihin kan waala baddalay kii hore ayaa ka wanaagsan, dadki hore ayaa khubaro ahaa meel ay kutaalo ma fahmi karo, waxaan aaminsanahay go`aanka maanta meeshan ku qoran waxaa leh baarlamanka labadiisa aqal halkan fadhiya ee dhowr maalmod ka dooday iyagaa go`aan ka gaari kara wixii ka wanaagsan iyo wixii ka xunba, marka arrintaas saas ayaan u aaminsanahay. Aad baa u mahadsantihiin.

14) **Sen. Laila Nur Maax:**

Bismillaah, shir guddoonka labada Gole iyo labada Gole ee sharafta badan, guddiyada baarlamaanka iyo guddiga madaxbanaan ee dastuurka, Hawlwadeenada iyo Bahda saxaafadda waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, bacda salaan.

Inkastoo guddoonku ay yidhaahdeen salaanta hala soo gaabiyo, waxaan dhihi lahaa guddoonkana, 2 daqiiqo hanaloogu daro aan idinka idiinku salaanno, maaddaama aad noo diideen ood waqtigii noo qabanaysaan, anigu waxaan ka hadlayaa:

- **Qodobka 49 (G)** waxa ku qoran, damaanad qaad, in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh, horta waxaan rabaa kooxaha inay cadaadaan, kooxuhu ma kooxihii ay faacali ladhihi jirey baa? Ma kooxihii ciyaal weero la dhihi jiraybaa? Ma qolo "gangs" ah baa? Mise hoggaamiye kooxeedkii baad dib noogusoo celin rabtaan? Mise hoggaamiye kooxeed diimeedka hadda jira ayaad caddaalad halkan uga raadinaysaanoo aad rabtaan inaad halkan caddaalad uga heshaan? Inay meeshan ku cadahay horta waan u baahanahy marka koowaad.

  Tan kalee labaad horta qodob haween ku jiro haddaan arko aniga hawadaasaan maraa halay dulqaato, waxaad tiraahdeen haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh, horta haweenka dastuurku intaanu furnayn marmarsiyo ayaad u hayseen laakiin hada dastuurkii maaddaama uu furanyahay, waxaanu rabnaa oo aanu awalba soo qoranay in aanu 30% helno, oo dastuurka uu noogu qoranyahay, sidaa la'ajligeed, hannagu marin habaabinina dadka baahiyaha gaarka ah iyo adduunyo hanagula meeraysaninee. Horta 30% meel noo dhiga, maxaa kusoo haray? Waxaad tiraahdeen dadka baahiyaha gaarka

ah leh, weliba waxaan u sheegayaa haweenka Soomaaliyeed, in aanan anaga qolada ku fadhida xilka Baarlamaanka aanan 30% rabine, Haayadaha Dawlada meesha laysku magacaabo iyo meeshii laysku doortaba in 30% aan ku xaqiijino ayaan doonaynaa, marka intaa lagasoo tago waxa la idhi: "Baahiyaha gaarka ah." Baahiyaha gaarka ah waayadan madmadow badan ayaa ka soo dhex muuqda haddii la fiiriyo, sababtoo ah anigu waxaan kamid ahay dhallinyarada "tiktok" isticmaala baraha bulshada, weliba waxaan ku dhex arkaa gobolka Banaadir, niman dhallinyaro ah oo wiilal ah oo qoob kaciyaarka dumarka soo bandhiga, markaa sidaa la'ajligeed inagu waxaynu nahay ummad muslim ah oo islaam ah, sidaa la'ajligeed waxaan ka codsanayaa in xarafkana loo daayo Naafada ummadda Soomaaliyeed, oo aan nalagu marin habaabin waxyaabaha madmadowgu soo galayo, marka intaas lagasoo tago.

Nin Madaale la yidhaahdo oo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna xaganaan uuga mahadcelinayaa iyo laamaha amniga iyo saraakiisha gobolka Banaadir, dhaqan celinta ay ayaantan dib uugusoo celiyeen in ummadda Soomaaliyeed aanay ka weecanin wadadoodii tooska ahayd, iyagana waan umahad celinayaa.

- **Qodobka 49 (H)** waxa ku qoran xaqiijin bulsho Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caadil ah, siiba beelaha laga tirada badanyahay, waxaan leeyahay horta caddaalad Illahay baa laga heli karaa, Soomaali caddaalad Illahaybaa ugu maqan; laakiin, iyadu isuguma maqna, anigu waxaan kamid ahay beelaha ugu tunka waawayn, Illahay baa wayn oo waaxid ahe, waxaanan ka dhex ahay "minority", walaalahay .5na waxaan u sheegayaa in aydaan kaligiin dulmanayn, Soomaali oo dhan haddii la idhaahdo yaa dulman? Soomaali oo dhan gacantay soo taagaysaa; laakiin, aniga si gaar ahaaneed, reerka aan kamid ahay waan ku dulmanahay ee beesha Direed, anigu naag Biyomaal ah ayaan ahay waxaanan kuleeyahay baarlamaanka 9 xildhibaan, haddana saami qaybsigii siyaasadda kama dhex arkin, sababtoo ah -guddoomiyaha ha ii tilmaamin habaryar ifraaxeey, guddoomiyaha isaga laftigiisa heshiis bulsho weeye waxaan doonaya laftigiisa inuu kahadloo wixii heshiiska bulshada ku qoran uu isagana halkaan oraahdiisa uga dhiibto, waxaan intaa ku darayaa aniga reerka aan ka dhashay, markii Puntland iyo Soomaaliland laga reebo, waa reerkii Soomaaliya ka hirgaliyay maamul goboleed la yidhaahdo Udubland ayuu ahaa; laakiin, waayay garab iyo dawlad garab istaagta iyo garab walaal waayay, ha ahaatee ma xumee haddana waxaan leeyahay matalaad way imaan doontaa insha Allahu tacaalaa, waxaanan leeyahay deegaanada ugu badan ee Soomaaliya, ilaa iyo Raaskanbooni ilaa iyo Xamar inta u dhaxaysa ayaan degaa ee ugu barwaaqada badan, hadday bad iyo webi tahayba, hadday dhul beereed tahay, hadday kaluunkii tahay intaba, markaa waxaan idin leeyahay bal bulshadana hoos haloo eego, caddaaladuna ha shaqayso, dastuurkana halaga shaqeeyo, midnimada Soomaaliyeedna dastuurkay ku jirtaaye si dhab ah aan uga shaqaynno oo walaaltinimo iyo ixtiraam iyo Soomaali inay ku wada calool fayoobaato, waan soo dhowaynayaa.

- **Qodobka 52** waxaan rabaa inaanay noqonin 5ta sanno inaga in aanay innaga billaabane, inay ka billaabato qolada inaga dambaysa. Waana idiin wada salaamayaa dhammaantiin wixii aan khaldayna halayga raalli ahaado.

15) **Xil. Maxamed Abdi Mohamed:**

Bismillaah mudane guddoomiye waad mahadsantahay, xildhibaanada sharafta leh dhamaantiin waxaan idiinku salaamayaa salaanta islaamka asalaamu calaykum waraxmatullaahi tacaalaa wabarakaat, bacda salaam. Waxaan rabnaa maanta oo doodeennu ahayd mabaadi'da guud ee matalaadda shacabka, ayaan horay usii guda galayaa.

- **Qodobka 48 (1)** awooda iyo is xukunka waxay ka billabanayaa kuna dhammaanayaa shacabka, asagoo adeegsanaya awoodda in markasta oo uu u baahdo uu hay'adaha iyo wakiiladda shacabka ku oogi karo la xisaabtan, qodobkan oo faqradiisan la baddalay waxaan soo jeedinayaa, horta waan ognahay in oo shacabka Soomaaliyeed maanta aysan la xisaabtami karin hay'adaha dawladda, marka sidaa darteed waxaan qabaa qodobkaas in lagu qoro, **oo ay wakiil uuga yihiin lana xisaabtamayaan xildhibaanada golaha shacabka,** oo wakiil ka ah dhammaan dadkii iyo bulshadii ayaga ay soo wada doorteen**.**

- **Qodobka 47** oo ah: "Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada" Qodobkaas guddigu waxay sameeyeen, way ka saareen mana garanayno sababta ay uga saareen, waxaan soo jeedinayaa xildhibaanada intoodii ugu badnaydna ay ka hadleen in qodobkaas sidiisii loosoo celiyo, sababtoo ah qodobkaasi wuxuu ka hadlayaa dhowr qodob oo uu kamid yahay xisbiyadii, doorashooyinkii iyo waxyaabo badanoo aasaasi ah, 13 qodob camal ayuu ka hadlayaa, **qodobkaasi sidiisii haloosoo celiyo**.

- **Qodobka 50** waxaan soo jeedinayaa qodobkaan in *totally* laga saaro, oo ah nidaamka doorashooyinka, qodobka 47aad haddii lasoo celiyo maba loo baahanaayaba in oo qodobkaan 50aad uu ka sheekeeyo nidaamka doorashooyinka, sababtoo ah qodobka 47aad ayaa qexaayo, qodobka 47aad ee dastuurkii hore wuxuu u qornaa sida tan: "Shuruucda ku saabsan xisbiyada diwaan gelinta doorashooyinka heerka Dawladda Federaalka ah, iyo Guddiyada Qaran ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya." Kaasaa saxan kaasaana ka wanaagsan, nidaamka iyo qaabka iyaga hadda ay usoo qoreen.

- **Qodobka 51** waa isla sidii oo kale isagna, hay'adaha sida tooska loo dooranaayo, wuxuu leeyahay waa: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha aqalka sare iyo Golaha shacabka.

- Madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen. Hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen. Horta *totally* waxaan rabnaa guddiga inay noo caddeeyaan, dalkaan oo aan wada ognahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dawlad Federaal ah, markii hadda aan u laabanno faqradda (C), hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen oo loo bixinaayo madaxdii maamul goboleedyada oo meeshaas lagu baabiinaayo habmaamuuskii iyo magacii wanaagsanaa ooy lahaayeen oo lagu burburinaayo hoggaamiye kooxeedyo, tusaale ahaan hoggaamiye magac maaha uu uqalmo maamul goboleedyada madaxdooda, waxa habboon, sida hadda uu yahay inuu ahaado, madaxwaynayaashii dawlad goboleedyada, sababtoo ah dalku waa Federaal, dad iyo deegaan ayayna matalaan sidoodaana loogu qanacsanyahay, **waxaan soo jeedinayaa horta kaas inay sidoodii ku dhaafaan.**

Halkaan waxay ku soo qoreen madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen, horta guddiga waxaaba khalad ku ah halkaan inay ku soo qoraan madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen oo meel looga heshiiyayna aanay jirin, tusaale ahaan waa inay dhahaan qaabka inaga hadda aan ku jirno oo parliamentarian-ka ah iyo qaab kale, dhawr qodob inay is barbar dhigaan, kaddib loo kala codeeyo kaddib ay kusoo daraan ayay ahayd; laakiin, waxa kale oo ay sii sameeyeen tusaale ahaan marka ay qodobka 50aad faahfaahin ka bixinaayeen, waxa kale ooy sii dhaheen liis xiran uu yahay qaabka laysku dooranaayo, yaa ku heshiiyay inuu liis xiran yahay iyo in kale? Horta, laftirkeedaa u baahan in la ogaado, marka halaga daayo ayaan dhihi lahaa qodobbada qaar oon u qalmin in meeshaan lagusoo qoro, haloo kala codeeyo tusaale ahaan, dhawr shay oo ma qaabkan ayaan qaadana, ma qaabkan parliamentarian-ka ah, qaab "*presidential*" miyaan qaadanaa, ma sidan kale ayaan qaadanaa, kaddib haloo kala codeeyo oo markii loo kala codeeyo kadib hala keeno oo markaa baarlamaanka haka doodo, qodobkaas sidaasaan ka dhihi lahaa, wayna wanaagsantahay kolay haddii baarlamaanka markuu ka doodo kadib lagusoo daro,

- **Faqradda (7)** Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku xigeenka duqa magaalada waxa si toosa oo qarsoodi ah u dooranaaya muwaadiniinta degan degmooyinka ee buuxiyay shuruudaha codbixiyaha, **ee deegaanka** horta taas halagu daro, taasna waxaan soo jeedin lahaa horta golaha deegaanka marka ay shacabka soo doortaan, kaddib ayaga ha iska dhex doortaan qofka oo guddoomiyaha noqonaayo marka **waxaan soo jeedinayaa inay ayaga iska dhex doortaan**.

- **Qodobka 52 (1)** Mudada xilhaynta, sidii xildhibaanadii iga horreeyayba ay soo jeediyeen waxaan soo jeedin lahaa, mudada xilhaynta maadaama ay tahay 4 sanno, aad bay u yartahay, halkana hadda waxa ku qoran 5 sanno, **waxaan soo jeedin lahaa inay ka dhigaan 6 sanno si waqti fiican loogu helo.**

- **Qodobka 52 (2)** Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ee sida tooska ah, qodobkaan isgana haddii lasoo celiyo qodobkii 47aad, waxaan aaminsanahay qodobadaan oo dhan maba loo baahanaayaba, isagaa ka hadlaaya, qodobka la tiray ee 47aad halasoo celiyo, qodobkaas markii lasoo celiyo nidaamkii loo mari lahaana qodobkaasaa noosii tilmaamaayo.

- **Qodobka 53** Cod bixiyayaasha, muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamaayo, gaarayna da'da 18ka sanno, waqtiga diwaan gelinta wuxuu xaq u leeyahay, inuu is diwaan galiyo si uu u codeeyo, qodobkaan waxaan soo jeedin lahaa maadaama oo heerarkii kala duwanaa oon kasoo hadalnay dhammaantood aan uga hadalnay, qaangaarnimada qofka markaan ka hadlaynay waxaan ku qeexnay inay tahay 15 sanno, qodobkaana waxaan soo jeedin lahaa in la geeyo sidii kuwii kale een horay ugasoo hadalnay ee da'da uu **qofku ku codaynaayo waa in laga dhigaa 15 sanno**, maadaama qofku markaas uu yahay qof oo garaadkiisu buuxo. Waad mahadsantihiin.

**16) Xil. Rooda Arab Sharif:**

Salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu. Anigu kolay labadan qodob ee kore ayaan u diyaar garoobay oo islahaa maanta 4ta qodobba waa laga wada hadlayaa, wax badan hadda kama hadlaayo waan soo gaabinayaa.

- Number 1 waxaan rabaa inaan idhaahdo wax qodob oon ka hadlaayo oo saas ah masii jiraan, waxaan guddoonka ka codsanayaa meel walba waxa ku jirta heshiiskii madasha qaran, baarlamaanka Soomaliyeed lama keenin heshiis madasha qaran ay ku heshiisay, waan arkaynoo wuxuu noo dul marayay sidii saxamada heehaaba. Guddiga joogtada ah, Baarlamaanka, wasiirrada, xukuumadda, madaxwaynaha, uu heehaabayay. Anaga horta kama war hayno waxay ku heshiiyeen si cad nalama horkeenin, waxaan ka codsan lahaa maadaama dastuurka meel walba uu ku qeexanyahay heshiiskii madasha qaran, in heshiiska madasha qaran naloo keeno, waxaan aaminsanahay in maanta haddii la waydiiyo madaxwayneyaasha gobolada iyo madasha qaran kuwii saxiixay inay maanta ka shalaysanyihiin; maxaa yeelay, mabay filayn in dastuur laga dhigayo, marka waxaan codsanaynaa *because*" nina gacantiisa iskuma dileen, halkan waxa loogu soo qoray hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeeno, waxaan codsanaynaa heshiiskii madasha qaran in naloo keeno.

- Ta labaad, waxaan codsan lahaa  oon cod dheer ku codsanayaa, baarlamaanka Soomaaliyeedna hortiisa aan ka jeedinayaa, dalku wuxuu aadayaa doorashooyin qof iyo cod ah sidii lagu heshiiyo, dalkani malaha maxkamad dastuuri ah oo doorashadu markay dhacdo haddii lays khilaafo lala hortago, wax inaga hortaagana ma garan karo maxkamada dastuurigaa, waxaan codsanayaa madaxwaynuhu inuu soo dhiso maxkamaddii dastuuriga ahayd intaan doorasho la aadin noocay doontaba ha ahaatee, si haddaba haddii la is qabsado loogu kala baxo ayaan codsanayaa.

- Guddigana waxaan u sheegayaa dastuurka xildhibaanadii iga horeeyay ayaan *second* garaynayaaye, qodob dastuuri ah ma tiri karaan, waxaa loo dirsaday wax ka baddal iyo siiqayn, qodob dastuuri ah dib u eegis bay ku samayn karaane ma bixin karaan, Xildhibaanadii iga horeeyay ayaan *second* garaynayaa.

- Ta labaad waxaan leeyahay qodobkan 4aad waa qodob xaasaasi ah; maxaa yeelay, wuxuu taabanayaa dhinac walba, 45 faqradood oo cusub ayaa ku jirta, 15 qodob oo cusubna way ku jirtaa, waxaan codsan lahaa in dib loogu noqdo qodobkan 4aad, oo aan la dhayalsan oo si tartiib ah oo miyir leh aan uga shaqayno, taas ayaan codsan lahaa, taas ayaan codsan lahaa qodobkan 4aad waa qodob xaasaasi ah, waa qodob wax walba ka hadlaaya, 45 faqradood oo cusub iyo 15 qodob ciyaar maaha, waxaan marka codsan lahaa ugu dambayn waxaan Illahay subxaanahu watacaala waydiistay waxaan ka shaqaynayno waa bil Ramadaane uuna noqon wax aan ku dambaabno.

- Waxaan rabaa halkan inaan farriin uga diro ragga madaxwaynayaashii hore soo maray ee dalka, waxaan rabaa inaan idhaahdo madaxwaynayaashii hore ee dalka soo maray ee haddana rajadu hayso, waxaan u sheegayaa madaxwayne lasoo doortay inaan dib loo dooranayn ee rajadiina liqa.

- Ereygii ahaa hoggaamiye, hoggaamiye way dhibsadeen dadkii deganaa gobollada dalka iyo *stateyada*, waxay yidhaahdeen: "Ma aanaan arag annagu madaxwaynaha Soomaaliya, wuxuu xukumaa dawlada Soomaaliya wuxuuna daganyahay Caasimadda, anaga waxa madaxwayne noo ah, madaxwayne goboleedyada nala jooga een baahideena u sheegano, marka hoggaamiye kooxeed waan soo dhaafnaye dib hanoogu celinina" Ayay dhaheen. Insha Allaah labada qodob ee dambe ayaan ka hadli doonaa, farriimahaygana gudbiya. Waad salaamantihiin.

17) **Sen. Zamzam Abdullah Ahmed:**

Bismillaah. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu. Guddoonka labada aqal, Xildhibaanada labada aqal, hawlwadeenada, Guddiyada madaxbanaan iyo kan dastuurka waad salaamantihiin media-ha dhammaan. salaan kaddib waa mahadsanyahay xoghayaha. Waxaan rabaa ugu horayn inaan ku bilaabo, **Cutubta 4aad**

**Qodobka 48** awoodaha shacabka, waxa lagusoo daray **faqradda 4aad,** Dawlada Federaalka Soomaaliya ayaa masuul ka ah xaqiijinta dawlad goboleed kasta ay dhaqan galiso nidaam dimuqraadi ah oo waafaqsan dastuurka iyo xeerka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan rabaa halkaas inaan ogaado dawladda Federaalka Soomaaliya iyo dawlad goboleedyada waxay leeyihiin dasaatiir, waxay leeyihiin guddiyo doorasho, wixii oo dhan miyaa la baabiinaayaa, waxan ay waafajinayso iyo dimuqraadigan iyo dawladan ay waafajinayso muxuu yahay? Faqradaani ma cadda.

- **Qodobka 47** Waxaan qabaa in sidiisii loosoo celiyo, marka laga reebo Golaha shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo aan rabo in lagu baddalo, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya labadiisa aqal usoo galaayo, **marka qodobkaas in lasoo celiyo ayaan anigana aad u xoojinaayaa**.

- **Qodobka ka hadlaya mabaadii'da guud ee doorashooyinka farqaddiisa (g)** Oo ka hadlaayo mabaadi'da guud ee doorashooyinka, kalmadda ku jirta ee **Kooxaha** waan qabaa iyadana in lagu baddalo **urur,** kooxahan wax ay yihiin ma caddo, kooxooyin badan oo is diidan ayaana waddanka ka jira, **marka in lagu baddalo urur ayadana waan qabaa.**

- **Qodobka 49 (E)** Waxay sheegaysaa, sharci ku salaysan geeddi socodkiisuna loo maareeyay loona korjoogteeyay si madaxbanaan oo sugaya hab daah furan oo isla xisaabtan leh, sharcigaan muxuu yahay? Yaa maareeyay? Xagguu ku qoranyahay? Wax cad maahan, waxan meesha ku qoran wax ay yihiin wax la fahmayo maahan.

- **Qodobka 49 (H)** Oo sheegaaya, xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caadil ah, siiba beelaha laga tirada badanyahay, si loo gaaro caddaalad bulsho, maadaama aan u guurayno oo laga guuraayo 4.5kii oo qof iyo cod loo guuraayo, cid laga tiro badanyahay ani inaysan jirin ayaan aaminsanahay, tiro badnaan Soomaaliya waxba laguma qaybsanine, yaa awood badan? Ayaa lagu qaybsaday runta markaan ka hadalno, qof walbana uu ogyahay taasi, Soomaaliya dadkan hadda .5ka la leeyahay, Soomaaliya dadka ugu tirada badan inay yihiin ayaan aniga aaminsanahay, marka maaddaama qof iyo cod loo guuraayo, waxan haddana dastuurkii in dib loogusoo celiyo oo mar labaad lasoo qoro sax maahan, kolay ani waxaan aaminsanahay in cid laga tiro badanyahay aysan jirin, qof iyo cod haddii la aadayana qof walba codkiisuu meel ku gaari karaa, codkaagaad ku noqon kartaa ama in lagaa tiro badnaado am aaad tiro yari noqotid, qof walba codkiisuu ku gaari karaa, marka nidaamkii 4.5 halaga guuro oo qof iyo cod ayaa la aadayaa haddana tiro badni ayaa la sheegayaa isma qabanayso, qodobkaa waxaan rabaa in laga saaro.

- **Qodobka 49 (I)** Kalmadda u dambayso oo ah **Iyo** waxba kuma xirna, markaa waxa ay u taagantahay ma fahmin.

- **Qodobka 49 (J)** Ee ugu dambeeyo, kahortagga hurinta colaadeed, kahortagga hurinta colaadeed, guddi doorashooyin malahee hay'adaha amnigaa iska leh, laamaha aamnigaana hawshaasi ay u taallaa, guddiga doorashooyinka qodobkaasina masoo hoos geli karo.

- **Qodobka 50,** Ee dhahaaya hanaanka Doorashooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uusoo saarayo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa '*very good*' uu fiicanyahay, wuxuuna meesha ka saarayaa, faqraddii **H** ee xaggaas lagusoo qoray beelaha laga tiro badanyahay iyo waxaasoo dhan, waxa saarayaba kan ah qof iyo cod ayaa la aadayaa, ayaaba tirtiraysaba, marka dastuurka yaan laga dhigin wax iska hor imaanaya haddaa la hagaajinaayaaye si fiican haloo hagaajiyo.

- **Qodobka 51** hay'adaha sida tooska ah loo doorto, wax aad looga qayliyay, hoggaamiye iyo dawlad goboleed, dawlad goboleed uu hoggaamiye hoggaaminayo, iyada laftirkeedaa is diidan, magacii iyo maamulka state-ka labadooduba way is diidanyihiin, **wixii lagu heshiiyo haloo bixiyee hoggaamiyaha halaga daayo**.

- **Qodobka 52 (2)** Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo doorto, waxa la qabanayaa hal muddo xileed, way fiicantahay; laakiin, xeerka lasoo saarayo, yaa soo saaraya? Kuma cadda oo ma ku qeexna xeerka lasoo saarayo oo meeshan yaalo kuma caddo, marka waxaan codsan lahaa in la caddeeyo ama xataa faalada ay ku qoraan guddiga dastuurku faalo ahaan ay u soo qoraan xeerkaas meesha uu ka imaanayo.

- **Qodobka 53(4) (B)** Waxay sheegaysaa, qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama dambays ah oo la xiriira dambi doorasho 5 sanno oo lasoo dhaafay ama maxkamadaasi ay ka mamnuucday xaqa codaynta ama dambiguu galay awgeed, maxkamadaha garsoorka maanta jira waan naqaanaa qaabka ay ku sheqeeyaan, garsoor caadil ah Soomaaliya hadda kama jiro, garsoor madaxbannaana Soomaaliya hadda kama jiro, yaa marka xukumaayo qofkaan oo dhahaayo waxaasuu sameeyay? garsoorka malagu kalsoonaan karaa awood intaa leeg ama kalsooni intaa leeg shacabka Soomaaliyeed maku qabaan inuu qof ka mamnuuco? Anigu waxaan aaminsanahay maya, tan kale mudada qofka uu xirnaanayo xataa ma cayinna oo muddo xukunkaasi muddo cayiman kuma qorna, waqtigu ma mudaysna, marka waxaan qabaa ayadana qodobkaasi in dastuurka dib loo eego lagana saaro. Waad mahadsantihiin, salaamu caleykum.

**18) Xil. Ismacil Shire Jamac:**

Salaamu calaykum waraxmatullaahi wa barkaatu. Waan salaamayaa dhammaan guddoonka iyo golaha baarlamaanka.

Qodobbaynta iyo gudagalidda qodobbada meesha ku yaalla wax cusuboo hadda la keenay iyo wax la laalay intaanan gudaha u galin, waxaan rabaa inaan wax yar ka tibaaxo oo aan dareen ahaan usoo gudbiyo waxa aynu doonayno, wixii hore u jiray, waxa ladoonaayo oo waxa kan ku saabsan salka uu lee yahay. Waa hubaal waxaa lagu heshiiyey qaab qoraalka dastuurka ku yaalla 4.5, *piont lix,* point-tiyo dastuurro adduunka point-tiyo ku yaalaan. majiro heshiis madaleed oo dadku ahayd meel ay ku gaadhaan taa qodob baan ka leehay, wax kastoo lagu soo heshiiyo way qurux badantahay hore in looga dhaqaaqo aad bay u

qurux badan tahay ma oran karnaa, lama oran karo waxaynu ku heshiinay ee aynu ku joogno  yaa qoray ee ka dhaqaajinaaya?  Waagaa lagu heshiiyey yaase ku heshiiyey? Wagaa lagu heshiinayay waxaa ku heshiiyay dad degaana kuraas iyo baarlamaan iyo AC-yo ay leeyihiin guddoomiyaal fadhi aysan jirin oo dalka dibaddiisa jooga baa waxa kan soo taag taagay maantana alxamdulilaahi Rabil caalamiin baarlamaan Soomaaliyeed oo maroowaxado  iyo tallaagado ku baxayaan, baa la fadhiyaa markaa wax kastoo lagu soo heshiiyey tiradiina ka badan, intiina ka aqoon badan, waaba ka daalanaayeen kuwii hore daal xun baa hayee kuwani waaba kuwo soo nastey baan nahaye waxaan leehay wixii wax laga  baddali karo oo macquula  waxbaan ka badalaynaa,  wixii aan waxba laga baddali karinna kama badalaynoo waxaan u  aragnay wax waajiba.

Waxaa qodobbada ku jiray oo laga hadlaayay qaan-gaadhnimada, dee qaan-gaadhnimadana ingana inagu soo dara baarlamaankana haynu nahay goormaanu qaangaadhaynaa? Inagu goormaan qaan gaadhaynaa? Qaan gaadhnimadii goormaynu dastuurka wax ka baddali doonnaa?  Goormaan dastuurka oran doonnaa golihii baarlamaankaa dastuurka qodobkan sidaa u badalay? Qaangaadhnimaday ku jirtaa. Inagu haddaynu qaan gaadh ahayn maxaan uga hadlaynaa dadka 18 ka jira wax waa ka badalaynaa.

Wax yarna xusid kalay iga tahay, sheekada maanta taallaa baarlamaanka, waxay naga soo martay putland oo gobollada deegaanada Soomaalida ka mida, ninka madaxweynaha xilligaa joogay oo hadda ah maxweynaha dalka oo dib loogu doortay, arrintaa darteed wuxuu yidhi: "Dalka doorashaan ka qabanayaa asxaabna waan ka furayaa" Laba masalo ayey nala noqotay, waxay nala noqotay inayna suuragal hayn waa kaw, mar labaad waxay noqotay kuwii rabay xukunka inay ka qaadaanna waa ka hor yimaaddeen. Tii ahayd in suuragalka ahayn wuxuu na tusay, inay dhacday oo uu si toosa noo tusay wayna dhacday waxayna ku dhacday si nabad galya ah, nin tiro badnaa iyo nin tira yaraaba labadiiba inuu nin waliba codkii uu lahaa ku soo baxay.

Taa waxaan uga socdaa tii bay maanta joognaa, tiibaynu maanta joognaaye aynu dhaqaajinno, puntland way ka da' weyntay federaalka Soomaaliyeed ilaa iyo xilligaa waxaan wax ku qaybsanaynay beelo maanta putland 33 degmo oo kamida golayaasheeda deegaanku waxay ku soo baxeen asxaab "one man one vote", maalintuu Siciid bilaabayayna waxaa loo arkaayay waxaan dhici karin wayna dhacday, maxay kasbatay? Waxay kasbatey in Siciid Cabdilaahi Deni dib loo soo doorto oo la dareemo inay faa'iido ku jiri karto, markaa saw ma dhici karto inaan imika cabsida inaynu ka baxno oo dalka niraahno waa inuu doorasho gala? Asxaab gala, xisbiyo gala.

Misaal yar oo kale oo kooban baan idiin sheegayaa cisho dhawayto,  halkanaan waxaanu niri aynu hor istaagno (dastuurka)  muxuu ahaa habraaca waan sheegnay goodan baan soo galay mise toban oo reerkayga baa taagan, dadkii baan eegay mise tiro badanaa intan fadhida, gacantaan qabtay waar ha inagu ceebaynina, gadaal baanu fadhiisanay waar bal hadda daya waan ka baxayoo SYL baan tagay, niman guri ku jiraan u tagoo 80 nina  waar maxaad ahaydeen? Hilbay cunayaan, waxan lahaa "*great party*"  waan la fadhiistay waan isku daray habeenkii ku shan ahaa madaxweynahaa la joogay waxaan kala hadlaynay danta dalka.

Waryaadaheen haddaan asxaab la helin oo xisbi la helin cid meel gaadahyasaa ma jirtee aanoo putland meel gaadhi waayee  hala inoo furo, asxaabtana hala furo, doorashadana

halla ogolaado. Waxa soo hadhay point five-ka waxa la yidhaahdo, point five waxa layidhaahdo misaal waxaan idiin siinayaa isla Putland baan ku noqonayaa nin walba goofkuu ka yimid buu ka waramaa reer waxaa jira magaalada qardho la yiraahdo waxay ka waayeen hal kursi ninka maxweynaha ka ah iyo reerka ugu laandheeraysan 6 kursi bay dheer yihiin, waagii hore point five looma quudhi jirin maantana 6 bay dheer yihiin maxaa keenay? Waa asxaabta iyo xisbiyada cabsida dalka halga daayo. Hadaad maqashaanna dastuurka waa la isku hayaa, la iskuma hayo, waxa isku haya nin xil hadda doonayaa iyo nin kale oo raba hodhaw inuu ku qabsado anagay nagu dhacay. Yaadiiday dastuurkii in la furo oo asaxaabta la badiyo? Waxa diiday intii maxweynaha Siciid Cabdilaahi ku haysatay baa diiday oo yiri halkaa lama dhaafin.

Anagoo u jeedaan inaan faa'iido ku qabno 60 kiibaa la yidhi halagu noqdo shacabkii waxay dareemeen in Siciid u roonaa oo asxaab u furay isagiibay dib u doorteen. Bal hadda day, hadda way imaan doontaa haddii uu Xasan furo oo ay socoto oo ay shaqoyso oo shacab ka helo dibbaa loo dooranayaa, ceeb noqonmayso waayo bar tilmaameed bay noqotay wax buu curiyey ninkii wax curiya waa lagu daynayaa halana ogaada waan idiin raacinayaa maalin rabadaana oo maantoo kale ah baynu dhaaranay oon ku dhaaranay inaynu baarlamaan nahay oon dalka u shaqaynayno maantana waa rabadaan waanan soomannahay.

Ilaahay aynu talo saarano danta waxa ay ku jirto in asxaab la qaato oo dadku xisbiyo noqdaan baa dadka dantu ugu jirtaa aynu hor kacno wixii qodobbo dastuurka laga badalaayana marka qobkaa la leeyahay in ku dhacaa majiro, waa lagu dhacaaye dee muqdal baan nahay waan qaangaadhee, haddaan qaan gaadhnay waxna waa ka badalaynaa waxna waa laalaynaa.

Mid saddexaad waan raacinayaayoo waxaan leeyahay bal barmaamijkan dhinaca laga eegaayo oo shanta sano madaxweynahaasaa danka leh maxwenyne iyo madaxweyne ku xigeen iyo asxaabta laga hadlaayo madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen hadday asxaab ku yimaadaan reer ma qaybsamaayo, wagii dhowayd dadka lahaa baarlamaanka waxaa la bedalayaa constitution-ka sida hadda lagu wado madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen baa loo baddalayaa waxa loo arkayey qolodii reer hebel raysal wasaare waa waayi doonaaan , reer hebel madaxweynaha hadhow reer hebel baa qaadanaaya maxaaba reer intaaba reer baan ku jiri karaa niman baa halkan point five-ka sheegay waxay la haayeen laan gaabaan nahay, nin Cali Saleebaan aan ahay oo Majeeteen ka ah oo Boosaaso deggan gobolka ugu ballaadhan Soomaaliyaan degannahay hal xubin baan leehay maxaan ku helay qabyaalad qabyaaladna ima anfacdo wax ka badan baan doonayaa sidaan "undergreen" ugu jiro lixda "guard" midka balaadhan inaan galaan rabaa. Waan idin salaamayaa wasalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa bara kaatu.

**19) Xil. Sharif Mohamed Abdalla:**

Bismilaah wal xamudulilaah wasaatu wasalaamu calaa rasuulilaah, gudoonku way mahadsan yihiin, xildhibaananda iyo inta joogta oo dhan asalaamu calaykum wa raxmatulaahi wa barakaatu.

- **Qodobka 48(1)** waxaan ka jari lahaa inta danbe hadaan soo akhriyo, "Allaah Subxaanahu Watacaalaa ka sokow *(bakadka waa ka dhaafeen qolooyinkan)* awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta",

wixii ka dan beeya in laga tiraan soo jeedinayaa, faqradda 2aad sideedaan u qaatay faqrada 3aad waxyaaba yaryar oo madbaciya maahee waxba kale kama qabo.

- Qodobka madaxa labaad ee doorashooyinka waxaan ayidayaa **aan ku raacsanahay, in qodobkii 47 aad ee nidaamka doorashooyinka meeshiisa ha la soo dhigo**, meesha laga tiray sobob badan ma garanaayo.

- **Qodobka 49 xarafka (a)** waxbaan ka goyn lahaa ee waxay ahayd haddaan soo qaato Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo: a) "Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay". Waxaan ku talinayaa inta kale in laga joojiyo laga jaro looma baahnaan is leehay, intaasaa mudnaanta gudanaysa.

- **Qodobka 49** anigoo ku socda markaan soo gaaro g) "Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah". Sidii hore loo sheegay waxaan ka bixin lahaa meeshaas **iyo kooxaha** "dammaanad qaada in dhammaan qaybaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah siiba haweenka (siiba waa dhaafi laaha waan ka tirilahaa) iyo dadka baahiyaha gaarka ah lehna loo helo kooto ama qismo cayiman; " ayaan ku darilahaa qolooyinkaas .

- Xarafka (h) dhammaantiis in loo baahan yahay uma malaynaayo meelo kaleetaa tilmaamaaya waxaana loo gudbayaa waxaan ka hadlayno markii dastuurkani meelmaro oo asxaab la gaadho, markaa xisbi haddii ay noqotana xisbi qabiil ma soconaayo waxaaweeyi dadku isku dhaf bay noqonayaan; sidaa darted xaasiyadii horeba u jirtay meesha way ka baxaysaa marba haddii xisbi la yiraahdo. Xisbi reer maaha sidaa darteed looma baahnaan isleehay.

- **Qodobka 51** Hay'adaha sida tooska ah loo dooranayo aniga number 1 waan ka aamusayaa. Faqradda (2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa si toos ah cod qarsoodi ah loogu dooranayaa cod qasoodi ah oo madaxbannaan (markaa waa la is daba mariyey) loogu dooranayaa ama ku dooranyaa muwaadiniinta (ku dooranaya ayaan gadaal soo marsiin lahaa) faqradaas waa iska farsamo.

- Haddii aan **qodobkii (1)(e)** u noqdo golayaasha deegaanka sida golayaasha baarlamaanaduba ay iskaga dhex doortaan guddoomiyahooda ama guunkooda , golayaasha deegaankana inay iyagana iska dhexdoortaan, duqooda magaalo ama guddoomiye wuxuu rabo hala yiraahdo waan arrin taariikhya oo soo taxnayd sabab hada kalifaysa ma garanaayo.

- **Faqradda (4)** waan ka aamusayaa hadday rabto micno hawadato sidii tii hore ba.

- **faqrada (7)aad** golayaasha deegaanka waa tii hadda ka soo hadlayoo kaleeto weeyi way soo noqnoqotay.

- **Qodobka 52** oo mudada in la kordhiyaa ani waxaan qabaa madaxweynaha lix sano inay noqoto xildhibaanaduna ay shan qodaan, wax sababoo kalifaaya in hal mar la isla soo doorto aysan jirin ayaan ku talin lahaa madaxweynuhu sii joogo inta baarlamaanku

tartanka ku jiro,  haddii hadda laga bilaabana waxba kama qaboo inaan soo noqonaayo isma hubee anuu taydaan ku darsanayaa.

- **Qodobka 53:** Da'da cod bixinta waxaan qabaa inay tahay arrin runtii in si fiican looga baaraan dego ay tahay inagu shuruuc iyo nidaam iyo dalal kalaa jira maahee midbaan samaysan karnaa; madaama, sidaa laga dhawaajiyey *facts* aan loo arkayn qof carruur leh ma codayn karto qof secondary dhiganaaya, 15 jirka waa class ka koowaad ee secondary-ga markuu bilaabo, sidaa darteed waxaan qabaa aniga in loo daayo 15 kii qodobbada kale markii la furo ayaan ka hadlayaa. 54 iyo wixii ka dan beeya waatii shalay la kala qaaday in kastoo ajendaha ku qornayd ilaa meesha ugu danbaysa. Wa salaamu calaykum.

**20) Xil. Said Ali Muse:**

Bismilaahi raxamaani raxiim al xamdulilaahi Rabil caalamiin, wa bihii nasta ciinu calaa umurihii dunyaa wa diin amaa bacdu. Waxaan salaamayaa guddoonka labadiisa gole, xildhibaannada sharafta leh labadooda gole, guddiyada dastuurka labadooda qaybood intaa ka gadaal, waxaan salaamayaa saxaafadda sidoo kale marti sharafta.

Intaa ka gadaal wixii aan odhan lahaa iyo wixii aan qornay, horaa loo yidhi; laakiin, yeelkeeda ishaa Allaah wixii nala gudboon dastuurkan qoraalka xaq baan u leenahay

- **Qodobka 48 (1)** waxaan la qabaa sidii xildhibaannadii iga horeeyey ay sheegeen, in awoodda laga qaadin golaha ee awoodda loo daayo golaha shacabka. Isla cutubkan qodobka 48 (4) "Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka masuul ka ah xaqiijinta in dawlad ghoboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan dfastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya." Anuu waxaan qabaa inaanay dawladda federaalka Soomaaaliya kaliya yeelan karin masuuliyaddaa; waayo, waxaan ognahay maamul goboleedyada dawladda federaalku inay ku leedahay saamayn siyaasadeed mid dadban iyo mid toosanba, markaa sidaa daraadeed waxaan anuu qabaa qodobka fikirkayga in aanay dawladda dhexe kaliya aanay yeelan karin awoodda. Hadday doonto waxay oran kartaa berri doorasho ma dhici karto markaa qodobkaa sifiican hoos ha loogu fiiryo.

  Madaxa labaad doorashooyinka anuu waxaan qabaa, **in qodobkaa sidiisii loo soo celiyo sidii xildhibaannadii iga horeeyey ay sheegeen** waxba laga bedelin qodobkaana sidaasan ku xoojinayaa.

- **Qodobka 49 farqada (h)** wuxuu u qoran yahay sidan  "Xaqiijinaya  in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caadil ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad bulsho;" Horta anuu waxaan qabaa kalmaddaasi runtii inaanay munaasib ku hay, in ummadda iyo golaha dhexdiisa laga yidhaahdo "Bulshada laga tiro badan yahay "waxaase ka sii liita kan ku qancay isagu inuu yahay dadka laga tiro badan yahay.

  Anagu ma arag meel Soomaali ay isku tirakoobtay oo layiri dadkiina kanaa badan oo idinkaa (A) ah iyo idinkaa (B) ah, markaa anuu waxaan taaganahay qodobkaa hadalkaa waxaa isticmaala dad daneeyayaal siyaasadda ah, ayaa isticmaala oo atigooda ku kacsada oo yiraahda hadallada noocaas ah, waxaan nahay beelaha laga tiro badan yahay ereygaasi ma dhaafisiisna golaha baarlamaanka banaanka ugama baxo, ka maqlimaysid

xafladaha, ka maqlimaysid shirarka, haddii aan maanta beesha aan ka dhasay la dhex fadhiisto waxaynu nahay beelaha laga tiro badan yahay, dhibta iga soo gaadha weligay iga hadhimayso.

Markaa waxaan rabnaa inaan ummada Soomaaliyeed u sheegno, beelaha aniga la igu tiriyo inaan ahay beesha shanaad, inaan u sheego inaan ereygaas ahayn erey munaasiba, uu yahay erey siyaasadeed, teeda labaad waxaan rabnaa inaan beelaha u sheegno, inaan jirin beel liidataa; laakiin, uu jiro qof liita, beel liidataa ma jirto laakiin qof liita ayaa jira. Waxaan kaloo u sheegayaa labada guddi ee baarlamaanka in ereygan aanu maalin ku biyo cabnay haddaanu nahay beesha shanaad anagoo Soomaali wax la qaybsanayna, aanu ku helay xuquuq maalintaa aanu ku dhacsanaynay, intaa wixii ka danbaysayna ummaddu ay tahay shan beelood oo siman, waxaan mar labaad iyo mar saddexaad ba codsanayaa golaha in laga daayo 4.5 ka kalmaddaa in laga daayo hadday suuro gal tahay oo dadka la yidhaahdo shan beelood oo siman, shan beelood oo siman in layidhaahdo; laakiin, aan hoos looga degin waxani wax u cuntama maaha in dastuurka lagu soo qoro.

- **Qodobka 51(4**) "Madaxweynaha iyo madaxweyne Ku xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan"; qodobkan waxaan ku haystaa kalmadda dhammaan, waxaan rabaa siiqadda wax loo qoraayo in la fahmo aanu fahamno waxaa ku qoran dhammaan muwaadiniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed muwaadiniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed ee dhammaystirani xagay joogaan?

  Waa su'aal aan waydiinaayo guddiga labadiisa gole ma ogin anagu maanta duruufta iyo xaaladda dalka xildhibaan qaran baan u ahay xogogaal baan u ahay majiraan maanta soomaali dhammaystiran meel ay joogaan waxaanu ognahay dastuurkan aannu hadda ka hadlayno inaan loo dhannayn; sidaa daraadeed, in lagu soo qoro dhammaan waxaan qabaa kalmad saxa maaha sidaad ogtihiin Soomaaliland ayaa maqan, waxaa maqan Putland oo qayb ka ahayd ayaa ka maqan, lama oran karo meelaha ay joogaan dhammaan inayna doorasha ka dhici karina inagoo dhan waynu ognahay, markaa qodabkaasna ereygaa waa ku haysta.

- Isla numberka **faqrada(5)** wuxuu u qoran yahay sidan "Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku xigeenka dawlad goboleed kasta; waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; "waxaa la leeyahay waxaa loo ogol yahay dawlad, maamul goboleedka waxaa loo ogol yahay inay dawlad yihiin bal akhriya, waxaa ku qoran hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka dawlad goboleed, dawladnimaa loo ogol yahay madaxweyna nimana waa loo diidan yahay! Yacnii intay isku jiraan? Waxaan leehay waa dawlad, waxaanan leenahay maxaynu ugu yeedhnaa ninka meesha madaxda ka ah? Ma hoggaamiyanynu niraahnaa? Mayee yanaanu oran madaxweyneka-yare? Mayee madaxka-yare waar maxaynu niraahnaa?

- Waxaas oo dhan waxaan qabaa wax inaga munaasib inoo ah ummadda aynu ku matalno dalka iyo dadka aynu masuulka uga nahay waxaasi wax aynu oran karno maaha, waxaan qabaa in loo daayo madaxwenayaasha mansabka ay leeyihiin marba haddii

dastuurkii loogu qoray in yihiin dawlad oo dawladnimadii banaanka loo dhigay. Waxaa intaa ii sii dheer oo aan raacinayaa qaangaadhnimadii,

- **Qodobka 53(1)** waxaa laga hadlaayey inuu cod bixin karo qofku markuu gaadho 18 sano sida raggii xildhibaanadii iga horeeyey ay sheegeen ummad islaamaynu nahay , haddaynu nahay ummad islaamana waxa weeyaan diin baynu leenahay xaniifa oo suubban oo wax kasta inoo qeexday oo ka hadashay oo Alla yidhi ( maa faraqnaa fil kitaabi min shay i) kitaabkan waxba kagama aanaan tegin waxa jooga iyo soo coda iyo waxa imaan doonaba, qofka islaamka ah wuxuu leeyahay xilli uu ku baaluqo oo ku qaangaadho, hadaynaan qancinayn ummad shisheeye waxaan qabaa sidii xildhibaanadii iga horreeyey ay sheegeen in da'da qofka muslimka ah ugu weyn uu ku qaangaadhaa waa 15, xataa gabdhaha waad ogtihiinoo dhiigga xaydku kuwaa sagaal sano ku hela.

  Inagu ma nihin reer galbeed, inagu dad islaamaynu nahay qofku waxa uu ku qaan gaadho waa la inoo sheegay wiilkuna waa marka uu xuubka riyoodo oo ogaado riyo raga nimuu helay, gabadhuna waa markay is ogaato, markaa waxaan qabaa anigu 15ka in loo daayo, dastuurkana waxaan umalaynayaa danaha ingaga xirani inagoo dhan waynu ognahay dawladeeniibaa u xaniban wasii tradii baa u xanniban golayaasha dawladoo dhan baa u xaniban, waxa weeyaan waxa la inaga sugayaa oo la inooga jeedaa inanynu ansixino; laakiin, ansixintu yayna noqon ansixin indhala, ha noqoto ansixin sharci ku salaysan, muwaadin nimo ku salaysan, mustaqbal ku salaysan, Ala ka cabsi ku salaysan yaysan ku ka xayn ama yaysan haadaan kaa tuurin, rabitaan shaqsi ahaaneed, intaa haaheey,intaa rabayna idin iri. Salaamu calaykum.

**21) Xil. Osman Mohamed Mohamud (Xaadoole):**

Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Dhammaan xildhibaananada labada gole, guddoonka labada gole, saxaafadda, marti sharafta dhaammaantiin waxaan idinku salaamay waxaan idinku salaanta Islaamka, Asalaamu caleykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuhu.

Waxaan rabaa marka in aan ka hadlo xildhibaanno maalmahaan dastuurka dooddiiisa ayaa socotay, marka waan dhegeysaneynay. Dastuurka marka waxa waaye…. waddankaan mid hadda qodob hebel iyo qodob hebel iyo halkaas iyo xaraf halkaas iyo B waxaas iyo marabo in aan ka hadlo, waxaan rabaa in aan ka hadlo… muhiim in uu noo yahay waxaa noo sheegay, in uu dastuurku muhiim dalku u yahay, in dadkii musharixiinta ahaayeen, musharax kasta waxa uu sheegay, in uu dhammaystiri doono dastuurka, haddii uu ku guuleysto dalka. Haddii uu madaxweynanimada ku guuleysto in uu dhammaystiri doono.

Meeshaas waxaa ka muuqata, in uu san xumeyn dastuurka in la dhammeystiro, oo uu muhiim ahaay ayaa meeshaas ka muuqato. Marka ay Sharaf u tahay Baarlamaanka 11aad ee labadiisa gole, maadaama aanu nahay in aan dhammeestirnana ay Sharaf noo tahay. Dastuurkaan yaa dhammeystiraaya waaye? Cidda dhammeystireysa dastuurka waa baarlamaanka. Baarlamaanka ayaa dhammeystiraaya. Baarlamaanka ayaana gacanta ku haaya hadda. Waxaan maqleynaa, in la dhahaayo macnaha. Soomaaliya aniga waxaan aaminsanahay inay u dhantahay. Ma dowlad goboleed aan xildhibaanadiisa meeshan fadhin ayaa jira? Waa maya, Soomaaliya oo dhan meeshaan ayay ku dhantahay. Dadka Soomaaliyeed anagaa matalna. Waxaan u dhaaranay in wax kasta oo dalka wax ku ool u ah in aan qabanno. Waxaan rabaa marka….. aniga hadda xildhibaan ayaan ahay hal cod

ayaan leeyahay. Codkeyga amaba waan diidi kara amaba waan yeeli karaa. Meeshaan raabo ayaan la aadi karaa. Wax waan ku mucaaradi karaa. Wax wanaagsan xataa waan uga hor imaan karaa; laakiin, baarlamaanka in aan afduubo sax ma aha. Baarlamaanka in la afduubo, oo la yiraaho waxaas haddii la qabo waa la dhmmeestiraa waa la hoogaayaa.

Anigu waxaan taageersanahay in la dhammeestiro dastuurka. Wadankaan waxaan taageersanahay dhinaca madaxweynaha iyo madaxwyne ku xigeenka. Madaxweynaha dalka oo dadka ay dooranaayaan iyo madaxweyne ku xigeen. Madaxweyne power-leh. Xow taraa madaxweyna aan *power* leheen Ilaahay ayaan idinku dhaarshee? Madaxweyne ayaa la doortay, aniga haddaan warramo howl allaale howsha uu wado waa istaagee. Xoow taraa qofkaas? Wadankaan waa in gacantiisa la galshaan qabaa. Waxaan qabaa aniga tan waxaa la soo qoray, in term-ka shan sano uu noqdo. Waxaa la soo sheegay in xisbiyo la kala aadaayo. Shan beelood ayaa wax lagu qeybsaday Soomaaliya. Dadka Soomaaliya oo siyaasiyiinta ahaay ee xiligaas joogeen ayaa u arkeen in shanta beelood markaas wax lagu qeybsado. Dastuurka aan hadda ku dhaqanno marka la soo dhisayay hal dowlad goboleed ayaa dalka ka jirtay. Maantana afar dowlad goboleed ayaa sheegatay, sixiixday in dastuurka la dhammeystiro. Walaalayaaloow, waxaan idiin sheegaa xildhibaano horta waxaan idiinka mahadcelinaa waxyaalihii badnaay magaga badnaa ee aad soo ansixiseen oo ay ugu dambeysay maalinki dhoweyto baddii iyo xadgudubkii badeyna lagu haayay iyo kuwii Itoobiyaanka ahaay ee nagu soo xadgudbay ee markaan shabaabka in aan ka adkaan rabno amaba xoogaay riixnay baddeyna goostay.

In aad intaa ka xoogoowdiin oo xoog ka yeelatiin aad macnaha aad ku wareejiseen dowladda Turkiga, in amnigiinna iyo xadduudiinna ay ilaaliso aad ku wareejiseen waan idinku hambalyeynayaa. Wax badan ayaadna ka hor tagteen. Qashinki badda lagu shubi jiray ayad ka hortagteen. Waxaad ka hortagteen kuwa hadda badda naga xoogi rabay. Waxaad ka hortagteen kuwa kaluunka iska daldalan jiray, burcadbadeeddii waxaas oo dhan idinkaa ka hortagay. Waxyaabo badan ayaad *passgareysen* oo bnaaarlamaanadii 7aad,8aad, 9aad ayna qabanin ayaad qabateen.

Dastuurkana waa waajib muqadis waa in aan dhammeestirno. Waddankaana waa in aan gelino nin gacantiisa waa in aan gelino. madaxweyne *power* leh waa in aan dhisno. Yaa looga dayahaa halkaan? Qofka looga dayahaa sheega? Qof looga dayahaa ma jirto. Dastuurkaan yaa nala isticmaalo? Koo waxa uu ku leeyahay amay saas naqataa. Amaa waxaas yimaadiin? Wax imaanaaya Ilaaha og. Anagu waxaa waajib naga saran yahay in aan dadka Soomaaliyeed anagaa matalna meeshaan fadhinaa matalna. Soomaali maqan aniga uma jeedi. Ma dekeddaas iyo eeraboorkaas Banaadir aa la rog rogaa? Dalka in la furaa la rabaa. Basaski ka shaqeyn jiray Jubaland iyo Kismaayo inta u dhaxaysa, Hargeyso iyo Muqdisho inta ka dhaxayso. Hiiraan iyo Xamar inta ka dhaxeyso. Baydhabo iyo Xamar inta ka dhaxeyso . wadanka in aan furnaa la rabaa. sow ku furmaa wadanka? Waa in aan wadani nahay oo wadanka aan u naxeyno. Anagaa xildhibaano ah in aan naqano aa eh. Waa in aan wadanka furno. Waa in aan dowladaha dhisno. Waa in gobolo kale iyo dekeda kale iyo adduunyo la dhiso.

Waa in shabaabka aan ka mideysnaano. In aan meeshaan ku aragno kula dagaalano. Waa in qabiil kastoo Soomaaliyeed gurigiisa iyo goofkiisa ow shabaabka kala diriro, ownan u oggolaanin nin ficiisa ah ow gabartiisa, gurigiisa iyo gasarkiisa aan korka ka soo korin oowna ka soo bixiyo asogoo aan qofna ugu yeereynin. Dowladdana waxaa waaye waxa ay qaban karto waana qabahee waana qabatay. Waxaan soo marnoo aan ognahay, oo aan

joogi jirnay hotel hebel aa casirki xalay toban saac aa la galay, subaxaan afar saacna waa ku jiraan lix nin ayaa gashay. Magaaladaaan Muqdisho ayay ka jirtay. Shalay ma ahane daraad ayay ka jirtay. Hadda dhow ayay ka jirtay waan isla ognahay. Xeey ka qabaayaan? Weli xabado ayay ka soo ridowhaayaan. Maanta laakiin magaaladii sidii ma ahan isbedel ayaa ku dhacay.

Car wakaas ha yimaadiin ha ka dhex dagaalamaan Xamar. Rag ayaa u taagan oo taagan oo dagaalamaya ha umalayn inay iska taagan. Ragga taagan ciidanaa taagan dawlada shaqayhoosa, madaxweynahaa ugu horeeyo waa la taagan yahay meesha. Waa la ilaalinayaa amnigaa la sugayaa hadda. Marka sheeg in aa boorinoo aan ku amaanaa leenahay. Waxan nalaga rabaa marka geedkan marabo hadda xaraf hebel iyo walax hebel waxaas in aan ku daldalmo. Waxaan rabaa marka nalaga doonaa, maadaama aan dad Muslim ah nahay da'da 15 sano marka ay gaarto in lagu soo celiyo waa qabaa**.** Wax kasto oo diinta islaamka wax u dhimeynin ha na laga fiiriyo. Dastuurka aan dhammeystirno. Wadankaan xag ha aado xisbiyo, nin walba xisbigiisa markuu ku guuleysto wadanka ha xukumo. Kuwa kalana ha u shaqeeyo. Adduun iyo aaqiro ha lagula xisaabtamo. Kursiga ninki qabsado asaga ha daydo. Anagan aan fiirino siduu wax yeelaayo. Garabna aan ugu noqono. Aniga intaas ayaan ku dardaarmayaa. Geedkaanaa soo heray soonka ha nalaga dhammeestiro. Asalamucaleykum waraxmatulaahi wabarakaatuh.

**22) Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, alxamudu lihaahi wa salaatu wasaalamu ramadaan mubaarak een, guddoonka waad salaaman tihiin. Aad baad u mahadsantiiin. Xildhibaanada sharafta leh iyo dhammaan bahda saxaafadda iyo martidaba iyo guddiyada dhammaantood waad salaaman tihiin  waxaan umalaynayaa dooddu aadbay u dheeraatay waanay waxbadan waa lagu soo noqnoday anigu kolay meelo kookaaban baan wax ka sheegayaa, haddii markaasi aan ku bilaabo.

- **Qodobka 48(1)** wuxuu ka bilaabmayaa "Allaah Subxaanahu wa taxaalaa ka sokow awoodda is xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya", dabcan intaasi waa inta marka laga reebo Allaah subxaanahu watacaalaa ka sokow marka laga reebo, waa inta ay dimuquraadiyad ay inta badan yiraahdaan muxuu ahaayeey  shacabku inuu isagu is xukumo; laakiin, anuu waxaan oran lahaa, in meel walba lagu soo celiyo Allaah subxaanuhu watacaalaa lagu soo celceliyo awooddiisa lagu soocelceliyo oo falsafad  kalmad caqiida ah lagaliyo, waxaa ka habboon in siyaroo waanaagsan oo siiqa ah ilayn dastuurkeenuba shareecaduu ku dhisan yahay wax shareecada baal marsana lama ogola, inay sitoosa uga bilaabanto "Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa leh awooda is xukunka iyo la xisaabtanka hay'addaha dawladda ee heer kasta, iyaga oo umaraya golayaasha la doortay ee u xilsaaran ee maamulka dalka iyo adeegyada dad weynaha".

  Shacabku isagaa is maamulaya, isagaa la xisaabtan samaynaaya isagoo u marayo haayadihiisa dastuuriga ah  ee ladoortay isagoo umaraya, taasaa runtii kaga filayd *beacause,* haddaad sidan u dhigto waxaad leedahay awoodda is xukunka marka laga reebo baad leedahay, markaa doodo kale ayey galin kartaa oo afkaarta xagjirta ahi ay adeegsan karto ayey markaasi  galin kartaa, markaa waxa fiican siiqo fiican loo qoro oo sharci ah oo qaanuuni ah; maxaa yeelay, sharcigu wuxuu ka hadlayaa waxaana ha samayn waxaana same, ficil buu ka hadlayaa ficilkaasina waxa mabda' oo aasaas u ah oo

gundhig u ah shareecada islaamka gundhig u ah, markaa yaan la galin had iyo jeer falsafad dad kale si qaldan ay u isticmaali karaan.

- **Faqrada 2aad** "Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay," halkaa waxaan ka yar saxayaa, waa inay ahaataa baan ka hadlaynaa ficilka qaabka uu udhacayo damiirku uu u dhacayo iyo isma leh jumlooyinka ku xigaayi, waxa weeyi dawladdeed waa in ay ahaataa, mid furan oo loo dhan yahay muwaaddin kastana fursad u siinaya" markaa isma qabsanayso fiiri inay ahaataa iyo fursad u siinaya damiirkaasi islama socdo **"fursad usiinaysa"** waa inaad tiraahdaa, taana markaa waxoogaa ina la toosiyo taana oran lahaa, waxa kaloo faqradan ku jira oo soo noqnoqotay, inay si fudud u fahmi karaan xeerar kiisa iyo habraacyadiisa, faqradani waxa lagu sheegay intani qodonka 49 faqradiisa (c) markaa waa '*repetition'* ee mabaadiida guud ee doorashooyinka, halkaasaa lagu sheegay markaa halkan inay haddana ku soo noqotaayi ma fiicna, markaa halkan in laga jaro oo mabaadii'da lagu sheego ayey iyada laftigeedu ku qurux badan tahay.

  **Faqrada 3 aad** waxaan oran lahaa sidii horey ku qurux badantahay ee ay u qornayd markaa **sidii hore ha loo daayo oo ha lagu soo celiyo taasaan markaa oran lahaa**.

  **Faqrada 4aad** Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka masuul ka ah xaqiijinta in dhaqangelinta nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya., waxba iyadoon dawlad goboleedyo la sheegin ayaa la oran karaa iyadaa ka masuula dhaqan galinta arrimaha dimuquraadiyadda iyo xeerarka u yaalla, markaa in lagu sii daro dawlad goboleed waxaan u malaynayaa in laga habboonaan lahaa.

  Madaxa labaad haddaan gudubo **qodobka 50** mabaadii'da guud ee doorashooyinka sida uu u qoran yahay xagga numberin-ka maadaama aanu ka horyan number kaw ka bilawda because consistence gu waa muhiim inay is waafaqsan yihiin ayaa waxaad ka bilawdeen xuruuf a, b,c iyadoo number kaw ahi ka horeyn, markaa waxa fiican 1,2,3 in la taxo si iskula jaan qaadaan sida kuwa kale ay u taxan yihiin, **markaa taxanaha tirsigu isaga laftigiisu in sidaa loo hagaajo ayaan jeclaan lahaa**.

  Waxaan jeclaan lahaa guddigu, inay na dhegaysanayaan warbixinada, markaa halkan haddaan u imaaddo faqrada i) oo anuu qaybtaasoo dhan numbero u bixin lahaa oon siin 1,2,3,4,5 ay noqon lahay ooy sidaa u tixmi lahayd faqrada i) "Dhiirrigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda iyo Ka hortagga hurinta colaadaha, laba meelood baan faqradan ka sixi lahaa, dhiirrigelinta nidaamka siyaasadeed ee xisbiyadda badan haddii aad tiraahdo, dhiirrigalintu ha noqoto xisbiyo badan in lasameeyo, dee xisbiyo badan oo la sameeyaayi dalka fawdo uu bay ku sii horseedi kartaa, markaa in la dhiirrigaliyo maaha ee waa in la yiraado kobcinaya ama horumarinaya nidaamka asxaabta waa in la yidhaahdo; laakiin, in xisbiyo badan laga dhigo *focus* ka waxay tahay fawdo inay sii abuuranto, markaa halaga yidhaahdo kocinaya ama horumarinaya xisbiyadu inay tayo lahaadaan oo *interal democracy* xoogle ay lahaadaan baa ka fiican, in xisbiyo badan oo iska magacuyaala uun la dhiirrigaliyo oo markaasi ay soo bataan

Midda kalena halka iyo ka hortagga hurinta colaadaha,  sidii la soo jeediyey intaana halaga reebo faqradaasi, wax kaloo ku jirtay **faqrada g)** Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan, **ereyga kooxaha in meeshaasi laga saaro** ayaan iyadana runtii soo jeedin lahaa.

Haddii aan u imaado,**qodobka 51** oo runtii qodobada aadka u mihiimka ah tahay oo ah hay'addaha shacabku sida tooska ah u dooranayaan inay tahay, markaasi la taxay oo madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen laga bilaabay inay toos u doortaan waa arrin muhiima weeyi oo shacabku doortaan; maxaa yeelay, madaxweynuhu madaxweynihii astaantii qaranka waa hoggaamiyihii qarankaa, markaa inay shacbiga oo dhammi doortaan waa mid muhiima oo siinaysa awood dawladnimo u yeelaysa weeyi, markaa in taasa la sameeyaayi oo dastuurkeena ku qornaayi waana muhiim, waana ku qornayd dastuurka guddiga doorashooyinku muhiimadaha ay qabanayaan ayey ka mid ahayd doorashada madaxweynaha dastuurka hada isticmaalo waa ku qoarnatahay, doorashada madaxweynaha, markaa in madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen la sameeyaayi waa mid muhiima; laakiin, waa inaan had iyo jeer daraasaynaa waxanu u socono hadafku muxuu yahay? "Stability" siyaasadeed degenaansho siyaasadeed xasillooni siyaasadeed in madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen la sameeyo ayaa shayga ugu degana? Mise madaxweynaha in madaxweyna ku xigeenka lala doortaa? Mise waa in uu madaxweynu magacaabo ku xigeenkiisa

Dawladaa ku dhaqma inuu magacaabo, dawlado badan baa soo magacaaba madaxweyne ku xigeenkiisa. Markaa wey dhacday system-yada adduunka jira inaad madaxweyne magacawdo ku xigeenkiisii oo uu madaxweyne magacaabo prime mister-kiisii, prime minster la doorto, madaxweyne iyo madaxweyne la doorto intuba waa system-yada jira weeyi ayey ka mid tahay, markaa aan niraahno keebaa ugu deganaansho wanaagsan? uun bay qadiyaddu, markaa taasna sida ugu deganaanshaha badan is qabqabsi ka jirin madaxweyne ku xigeen darafka la haysta madaxweynihii meelo badan ay ka dhacday oo qaar badan anigu goob joog u ahaa oo xitaa dhexdhexaadin ka galnay ayaa  jira; laakiin, waa inaan niraahnaa sida ugu deggan ee ugu habboon taasoo kale ay noqoto.

Waxa kale laga hadlay waxa soo noqnoqotay ereyga, meelkasta arinta meelkasta iyo dawlad goboleed kasta *consistency* kama dhexeeyo, waxaa loo fahmayaa in laga dooranyo dawlad goboleedkasta masalan, aqalka sare oo kale markaad leedahay dowlad gobaleed kasta ma waxaa laga dooranyaa dawlad goboleedyada oo dhan? Because waxaa tiri madaxweynaha waxaa laga dooranyaa meelkasta oo ay joogaan, markaa haadaad meelkasta aad ku isticmaashay, in madaxweynihii laga dooranayo haddana hadaad tiraaahdo, dawlad goboleed kasta wuxuu macnihiisu noqonayaa, in laga dooranay xildhibaanadii dowlad goboleedyada oo dhan, in laga dooranay markaa ereyga kastada la isticmaalayo aad u fiiriya iska hor imaadyo badan baa halkaa ka jira oo u baahan in la saxo.

Waa faqradda waxay ka mid tahay 4aad wey soo noqnototay iyo 3 aad ee qodobka 51, dabcan **muddo xileedka shanta sano waa okey sida caadiga ah. Ereyga lagu soo noqnoday hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen, anuu waan qabaa in laga daayo** hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen, haddaan madaxweyne la oranayn dee madaxaba halayidhaahdo oo madax dowlad dawladeedka, madaxa dawlad goboleedka in la yidhaahdo madax xigeenka; waayo, way noqotaa ***'head of state' 'head of federal member***

***of state'*** waa la yidhaahdaa waa la isticmaalaa, markaa ama madaxa la isticmaalo ama ku xigeen kiisa kolay meelahaasaan ku soo gabaggabayn lahaa.

Midda Kaleen oran lahaa arrinta diwaan galinta halkan distoorka yaan lagu sii cadgaynin; maxaa yeelay, hadhow haddii la diwaan galin kariwaayo si aad uga booddaa majirto, markaa sharciga doorashooyinka ha lagu daro arinta diwaangalinta ee halkan distoorka yaan lagu qorin. Waad mahadsan tihiin wa salaamu calaykum.

**23) Xil. Dr Ahmed Aadan Ahmed:**

Bismilaah, raxmaani raxiim, mahadsanid gudoomiye, labada gole, baarlamaanka sharafta leh, waan idin salamay, Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh, ramadaan kariim. Een maqabo dood badan, waxaan rabaa inaa toos u abaaro, een qodobadeyda, kow,

- **Qodobka 47aad** waxaan qabaa sidiisiii haloo sooceliyo, xilibaannadii halkaan ka hadlay dhammaan wey wada taabteen, **markaa qododkaa 47aad, sidiisi haloo soo celiyo,** waala tuuray, waalaga saarayda, halaga reebo, Waa qodobkeyga koowaad. Midka labaad iyo ra'yigeyga wuxuu yahay:

- **Qodobka 48aad** waxaa ka maqan, ee waa sida loo dhigay, Allaah subxaanah ka sokow, awooddu iyo iskuxunku, waxey ka billaabataa, ku dhammaataa, Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa sax; laakiin, Meesha waxaad mooddaa, isla xisaabtankii golaha Shacabku, uu ku lahaa, xukuumadda, iyo dowladda,, iyo is korjoogteen tii, meesha awoodda golaha shacabka wey ka maqan tahay, marka haddii dee Shacabka awood waa yahay, waxbuu soo doortay, waa run;laakiin, korjoogteyntii golaha shacabka iyo baarlamaanka uu lahaa uu fowladda ku lahaa iyo Isla xisaabtankii, waxaad mooddaa meesha laga saarayoo, baarlamaanka awooddiisi meeshaa ka maqan tahay, marka waxaan qabaa, qodobkaas dib haloo eego.

- Ee meel yar baan rabaa inaan taabto, oo ah barnaamijka doorashooyinka, aniga ra'yigaan qabo waxa weeyaan, dalka inuu hore u socdo waa sax, doorasha qof iyo cod in lagalo waa sax, laakiin waa goorma? Seebaa loo gali? Goorta waxaan qabaa, waxa la dooranayo qof iyo cod loo dooranaayo, waa asxaab, sida hadda xilligaan aan u bisil nahay, oon xisbiyo ladooranayo, xisbiyadana Barlamaanka ee golaha shacaka, iyo b aarlamaanka kale aqalka sare ba, wey ku imaanayaan doorashadaa; laakiin doorashada madaxweynaha waxaad moodaa , hadaan dhahno madaxweynii xilligaan aan hada ku jirno, qof iyo cod haku imaado, Shacab badan oo Jamuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayaan u heli doonin, "*Access*" ama fursad ay ku doortaan madaxweynahooda, oo ay ka mid tahay, gobolada Waqooyi, marka gobolladii Wagooyi miyaa laga maarmi codkoodii? Miyaa ayagiiba laga tagayaa?

- Xilligaan, fursadii mar hadeysan sineynin, in qof iyo cod madaxweynihi ay ka qeyb galaan, arintaa dib haloo fiiriyo, Aniga ra'yigaan qabo marka waxa weeye, dalku weli wax yaabo badanoon ceyriin ku nahay baa jirta oo ay kamid tahay, amnigeenii iyo xaaladiis meeshuu maraayo waan ognahay, ee dhaqaalaha dalku meeshuu maraayo waan ognahay, kalsoonida shacabka Soomaaliyeed meelwalboo ay joogaan, maanta meeshay mareyso waan ognahay, halbeega aan adeegsaneyno, oon wax aan ku cabbireyno, marwalba ha noqdo, mid ku saleysan, duruufta iyo xaaladda dalkan

Soomaaliya, iyo marxaldda shacabka Soomaaliyeed ku jiro hanoqoto; laakiin, dal daris ah, iyo waddamo kale hortena, weli dagaal sokeeya ka dhicin, oo kalsooni darro dhaxdooda ka dhicin, haddaan halbeeg uga dhigano waxaad mooddaa, in wax badan ay meeshaa ka baxayaano, luga, fakin keyn ama maskax keyn aan aheyn, tu kale inaan ku soconeeno, sidaa darted, dadka qabo aan ahay, fikirka ah, xilligaan lagu jiro maanta, Kalsoonida Shacabka dhaxdiisa ah, wax badan baa si ah, hala tafatiro, kalsoonidii hala dhiso, amniga dalka halaga shaqeeyo, baarlamaanka xisbiyadiisa halagu soo doorto qof iyo cod, baarlamaanka ha doorto madaxweynaha, inta gala gaaraayo.

- Dastuurku maalin waxlbo *Amedment* uu furan yahay, in dibu-eegista dastuurka, maalin walba, marwalba wuu furan yahay, waa wax furan, ra'yi noo furan weeye; laakin, yay noqon dadka inaan kala qoqobno, shacab Soomaaliyeed qaar wax doortaan, qaarna wax dooran, goboladda qaarkood aan wax laga dooran, in dad goboladii waqooyi, dee marka hore xaaladood banaan kaa taagneyn lahaa, hadana qiil loo siisameeyo, layiraahdo madaxweynihii waxaa dooratay, uun intii kalaa dooratay la yiraahdo, xoogaa sawirkaley bixineysaa, markaa waxaan qabaa, dalka sidii liis kugu haayo midnimadiisa, afkaartaa u mira dhasho, waxaan qabaa, madaxweynah, baarlamaanka ayaa lagu wad adhan yahay, labada golo iyo dhammaan gobolladii 18ka gobol ee Soomaaliya ku dhan yihiin, baarlamaanka hadoorto madaxweynaha, inta laga gaari doono, qof iyo cod.

- Madaxweynaha Wogooyi iyo Koonfur labada ka midoobaayo, dib marnaamijkaa dib u hishiisinteeda, ileyn dalku, dib u hishiisinteeda, dib u dhaqaaleyn, iyo dib u dhisid baan ku jirnaa, waxaa lagu jiraa tifaftirid badan, sidaa darted waxaan rabaa, waxaan qabaa arintaa iyada dib loo eegoo, arintaa iyada dib loo fiiriyo.

  Muddo xileedku, waxaan qabaa maaddaama maanta dib u hishiisiintii iyo dib u dhiski, shuruucdi dalka iyo xaaladaha hadba jiro dhan la og yahay, in ee xukuumadda, ama madaxda lasoo doorto waqti lasiiyo, waxasoo dhan lagaga baaraan dagoo , anigu waxaan qabaa dadka qabo 5sano, 6sano, fikirkaa afkaartaa waan qabaa, aniga rayigeyga, saasaa, goortay ka billaabani aniga waxaan dhihi lahaa, hadda halaga billaabee;laakiin haddii lagu heshiiyo, baarlamaanka ogolaado weeye, saasina waa sidaa.

  Markaa xagga madaxweynaha ee magacyadda waxaan qabaa , wixii hadde maanta kalsooni aan abuureyno, oo aan tifatirid, kalsooni iyo xaalad abuur aan ku jirno haddana in magacyada qaarkood, siiqeynta qaarkood aan qurux badneen, aan dib iskugu soocelino ma quruxbadnaanayso, aniga waxaan qabaa Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, oo is teedyada magacyadooda haloo daayo, waa ra'yigeyga aniga Axmed ahaan, wax ka baddal manta haddii ley yiraahdo, ee hoggaamiye, xoogaa siiqadda magacaa ma fiicna, siyaaba badanoo dalkaaan soo maray iyo magacyada badane la soo bixiyay, yaanan dib loo celininee, madaxweyne, .madaxweyne ku xigeen koodana haloo daayo Muddo xileedkana sida hadda aan sheegay bey ii tahay. Wakhti idinka luman mayo salaamu caleykum warax matulaahi wabarakaatuh.

**24) Xil. Axmednur Sh. Mohamed Lohos:**

Asalaamu caleykum waraxma tulaahi wabarakaatuh, Ramadaan kariim, mudane guddoomiye, mudanayaal, maalin wanagsan. Aan u daadago waqti danbaa la joogaa meesha waa lagu kala tagay; hasa ahaatee, nuxurka qodobbo dhawra inaan ka hadlo, intaanan u galin, ee Soomaalidu waxey tiraahdaa, ee "Libaax ninaan ogeyn baa lax ka rita", mararka qaarkood dasturka, iyo xeerarkii ay ka mid ahaayeen, axdigii ku meel

gaarka ee dalkaan lagu mideeyee, lagu dhisay dowlad, Dowlad dhiska lagu gaaray, dadbaa siyaaba badanoo uga hadlaaya, laba sano oo "*Compoleto*" waxaa loo fadhiyay sidii wax leyskugu fahamsan yahay leskuna aamino loo sameeyo, saasna waxay aheyd sababta awoodaha loo qeybiyay, ee oo maaddaama, dagaal sokeeyo dhacay lakala fogaaday, dadka in lagu mideeyo arrintaa sal dhig u tahay.

Anugu waan soomanahay, Ilaahay hortii qofna ku raaligilin maayo ra'yigeyga, qofna kaga careysiin maayo ra'yigeyga, waxay ilatahay arrintaa ka ogahay, ka oranaya. Ee sida hadda dastuurkeena iyo dowladdeena u dhisantahay, haddii is qabqabsi laga fogaanayo, anugu waxey ila tahay ra'yiga ah, in madaxweyne iyo madaxweyne kuxigeen lawada dortay, ay ugu inkaaran tahay isqabqabsiga, dowlahada lagu dhisay ee jaarkeena, waxaa ka mid ah, ee dagaalka sokooye ka dhacay, Sounth-Suudaan, laba goor bey dagaalameen, madaxweynaha, iyo madaxweyne ku xigeenki oo labadaba shacabka doorteen; sidaa darteed, ee waxa weeye, dadka aad iyo aad awoodaha baalansi gareysan, midna baarlamaanka taalla, midna ee ma arakte, raysawasaaha taalla, midna madaxweynaha taalla, waxa weeye sida kaliye ay dalkeenu uu ku wada socdee kusoo wax kusoo gaareyn weeye, mararka qaarkood, haddii ee awoodda meel ku uruursan tahay, inuu xaalka sidaan kasii xumaaan lahaa, baa laga yaabaa, aan u daadago qodobbada.

- **Qodobka 47aad** ee in badan laga hadlay, aniga waxaa qabaa in sidiisi loo daayo, iyada oo laga dhigaayo, mesha golaha shacabka, in loo baddalo, golaha federaalka baarlamaanka say labada aqalba ay awood ugu yeeshaan, een shurruda ku saabsan, xisbiyada diiwaan galinta doorashooyiinka, heer dowlad federaalka ah iyo guddiga qaranka ee madaxabanaan, doorashooyika waxaa lagu qeexi doonaa, Shuruuc gaar ah oo ay soo saaraan **Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya inlaga dhigo oo lana daayo sidiisa loo daayo** Dowladda federaalka Soomaaliyeed.

- Ee waxaan u gudbaayaa **qodobka 48aad** dowladda Federaalka Soomaaliyeed, ayaa ka masuul ah xaqiijinta dowlad gobleed kasta oo dhaqan galeysa, nidaam dimoqdaari ah, oo waa faqsan dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya baa la yiri, **Soomaaliyeed** , **waxaan la qabaa, saaxiibbadii hore.**

- Een qodobka madaxweyne **qodobka 51aad** ayaan usoo daadagaayaa, legitemacy" Sharciyada madaxweyne iyo madaxweyne ku xiggeen, anugu waxaan qabaa iney ku habboon tahay, sidii dalkeena uu ahaa, "parliamentary" buu ahaa isla markaana ee madaxweyne iyo reysal wasaare, iney ku habboon tahay sida uu ahaa in loo daayo, parliamenterial-ka uu ahaado, ee dalkuna maadaama, madaxweynihii doorashadiisa ayna ka dhici Karin, meelaha qaarkeed sida: Soomaaliland oo kaleeto, waxaa buuxinayaa xilibaannada jooga oo dooranaya madaxweynaha, si legitimacy iyo sharciyada laftigeeda, aynan mararka qaarkood, ay meesha uga saarinoo u lumin waxey ku habboon tahay, inaan sidaa uu ahaa aan u deyno.

- Mida kaleeto hoggaamiyaasha meesha ah, ee iyaduna, dowlad gobleedyada markii ay ku meelgaarka ahaayeen baa hoggaamiyaal la oronaayay, een hoggaamiya kooxeedyo la oronaayay, sidaa darted, meeqaamka dowlad qobleedka kuma habboona, in hoggaamiye la yiraahdo, in loo daayo madaxweynayaasha dowlad gobleedyada, wax dhib ah oo ay ka qabta majirto. Madaxweynaha dowlad gobleedka ee heer federaal isku maleynaayana majirto, madaweynaha federaalka Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo

**madaxweynaha dowlad gobleedka ay awalka ahaayeen, sidooda in loodaayaan qabaa.**

Waxaan ugu danbeyn usoo gudbaayaa**, qodobka, 51**(3) codbixiyaasha diiwaan gashan, waxey si siman oo xaq u wada leeyihiin u dhiibanayaan oo ay u dooranayaan, mudanayaasha deggan, in lagu daro deggan ama ka soo jeeda; maxaa yeelay, meela kaluu jiri karaa, dibaduu jiri karaa, si doorashadu qofkasta oo kasoo jeeda degmadaas ama deggan oo codkiisa u dhiibto, in taas lagu daraan soojeedin lahaa. Waxaan arkaahayay een qodobkaan kaleetu oo xuquqda dadka laga tiro badan yahay, laga hadlaayay, baan aad iyo aad anigu u waxeeyay, dad fara badan oo tiro badan kuwaa aan tiro badneyn inee jiraan wey dhici kartaa; laakiin, laga tiro badan yahayda, waxey xaqiijineysay ee in qof laga yaabo in laga tiro badan yahay haddii tiro badnidiisii tiro yaraantiisii inaan lagu xadgudbin, laakiin hadda waxa lagu kala baxayaa, maaddaama aan isla qaadanay meeshana ku jirto ee qof iyo cod in la aado ee qofka badan iyo qof yar, halkasuu kasoo bixi doonaa, oo lagu kala bixidoonaa; laakiin, anugu waxaan garanayaa persempio beelaha Soomaaliyeed, waxaa laga yaabaa Cumar Maxamuud oo laba xilibaan leh, iney 5 beelood oo ka xilibaanno badan haddii la arkana ay ka yaryihiin, ay meesha ku jiraan, si kuwaa xuquuqdooda loo ego, haddii lagu qore iyagaa wax loogu tarayee, waxaan qabaa inaan waxba laga bi'inin, dadka saaxibbadey ee ka caroonaaya intaa iyada. ,
Wasalaamu caleykum waraxmatulaahi wabarakaatuh,

**25) Xil. Raysal Qorone Abshir:**

Bismillaah, Alxamdullillah, ee mahadsanid guddoomiye, waan salaamayaa, dhammaan xilibaanada waan salamaya, labada guddina waan salamayaa, iyo dhammaan Habdhoorayaashaba.

- Een hadaan usoo galo **qodobka 48aad,** matalaada Shacabka, farqadiisa (2) matalaada Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee heerkasta ee dowladeed, waa iney ahaataa mid furan, oo loo dhanyahay, muwaadinkastana fursad u siinaysa, inuu si madaxbanaan, oo aan takoor laheyn uga qeyb qaato, waxaan rabnaa horta marka xaqiiqda laga hadlo, anigu horta waan soo dhoweynayaa in lahelo, doorasho qof iyo cod ah, muwaadinka Soomaaliyeedna uu ku bogan karo, codkiisa kuna doorankaro hoggaamiye uu doortay. Anigu runtii waan soo dhoweynayaa; laakiin, xilliga aan manta joogno, ma aaminsani iney dhici karto, waana sababeynayaa, ee runtii marka ay tahay qofka muwaadinka ah marka codkiisa si xor u heli karo, si aan takoor laheyn u heli karo, sida unba hoggaamiye u dooran karo, suurta gal matahay ayadoo gobolada Waaqooy gacan teena ay ku jirin, oo ay ka maqan yihiin, ayadoo Putland wax ka saxiixin hishiiskaan madasha? Anigu koley kii madasha maba aanan arage, aysan ka saxiixan, oo aysan ku jirinin, dalkeeni intiisii kalene uu cadow heysto, uusan nabad aheyn, marka runta laga hadlo dalku wada tagi karin, qofka waxaa la rabaa santuuqa in meel la dhigi karo.

  Bandarbeyle in la dhigo larabaa, in la dhigo la rabaa, maaxaa la dhahaa Sheekh, Hargeysa in la dhigo larabaa, Boosaaso in la dhigo larabaa, in la dhigo larabaa, Galmudug meeleheeda hadda shabaabka "Is Oke", Hiiraan , in la dhigo larabaa, mayeeli karnaa, Awood ma u leenahay? Ma aaminsani xataa Muqdisho, qeyb kamidi in la dhigo ma aaminsani, marka waan jeclaan lahaa doorasho qof iyo cod inaan helo, oo aniga isoo doorto shacabkeyga iyo dadkeyga isoo doorto, madaxweynaha isoo doorto;

laakiin, waqtiga maanta la joogo, oo Soomaaliya joogto, awood ma ulihin, mana sameyn karno, sababtoo ah Soomaaliland gacanteena kuma jirto oo Soomaaliland 60ka halkaan fadhida dooraneysa, misa Xamar baa lagu soo aruurinayaa? Waa iney Hargaysa waa in Burco lageeyo, waa in Barbara lageeyo, waa in santuuqa la dhigan karaa, bari waa in lageeyaa ilaaa Xaakuul, Bandarbeela lageeyo, ma awoodno, xaqiiq runtaa la rabaa ma ogta, marka waxaan aminsanahay, Guddiga u sheegayaa, taas waxaan aminsanahay ineysan dhici karin, doorasho qof iyo coda, taasi waa mid.

Een **qodobka 49aad** farqaddiisa (g) dammaanad qaada in dhammaan qeybaha ay iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweeenka , dadka baahiyaha gaarka ah qaba, xaqiijiyaan in bulshada Jamahuriyadda Federaalka Soomaaliyeed matalaad hesho, horta waxaa la rabaa xaqiiqda, marka laga hadlo, haweenka Soomaaliyeed, waxaa lagu daray dadka baahiyaha gaarka qabo, waxaa loo leeyahay waa dad jilacsan, oo runtii cid wax u ogali aysan jirinin, een marka horta haweenka, qoondadooda lasiiyo % 30 waan soo dhoweynaya, waxaan kaloo soo dhoweynayaa midda ah, een xaqiijinta in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay, horta yaalaga tiro badan yahay?

Dadbaa iney halkaan soo istaagaan baa waxey leeyihiin: "Aniga waaleyga tira badan yahay, Anigu laan dheeraa ahay" Aniga hadda hadaan dhaho, naag Daarood Ismaacil baan ahay, mana heysto wasiir, xaqiiqiyan markaan runta idiin sheego, ma haysanno annaga matalaada aan laheyn, oo 4.5 ta aheyd, oo golaha wasiirrada aan ku laheyn, ilaa iyo hadda ma haysanno, aniga beesheyda markaan runta ka hadlo, saddex bilood baan wasiir nimo haysannay, saddex bilood, saddax bilood markaan heysanay, wasiirkeyga waala dilay, lugahaa lagajabiyay, dhaqtar baa loo qaaday, ka baddina waxaa layiri, safiir baa tahay, ilaa hadana wasiir ma haysto, beelaheyga kaloo daarood ma haystaan wasiiro, wasaaradda Arrimha Dibadaan ku qorneyn ma haysanno, wasaaradda Badroolkana wasiir ku xigeen ka laheyn ma haysano, marka horta tiro badni iyo tiro yaraan ma leh, xaqiiqda marka laga hadlo waaye.

Waxa waaye markasta qofka meesha jooga, asagaa wixiisa qaata, ayagoon lagaarin doorasho qof iyo cada, waxaa la burburiyay oo labaabi iyay, oo la tirtiray, waxqeybsiga 4.5 waala tirtiray, marka runta laga hadlo, sababtoo ah nin walba ina adeerkiis buu soo qabsaday, sida gabadha halkaa fadhiday oo habdhooraha aheyd, oo maxaan ku dhahaa, aqalka sare ay sheegeysay oo laheyd, 45 qofood ama 35 qofoo, digreeto madaxweyne ku soo baxday, oo ina adeer, eedo, oo walaal ah, xaqmiyaa? Marka, marka runta laga hadlo waaye.

Marka dalkaan doorasho qof iyo coda, in dadka xuquuqdiisa helo laandheere iyo laangaab aysan aheyn, iyo reer habel baa badan, way fiicnaan lahed; lakiin, lama helaayo, marka sideynaan hadda iska dhallacnaasilka aan iska wadano, teendhadeenana aan aadno, aan iimaansanno, madaxda dalkuna teendhadooda ha iimaansadeen, baarlamaanku soo doorteena ha iimaansadeen, anugu horta taasaaan oran lahaa, waayo mala helaayo marka runta laga hadlo, laan dheeraa ahay, wax iga weyn maleh, Beeney noqotay, marka runta laga hadlo, aniga hadda wasiirkeyga ma heysto, beelaheyga wasiiradeyda meeley jiraan, dastuurkaan u xaniban yihiin, waxaa kaaga daranoo kaloo dhibaato ah, wax alaale wixii xilibaan ahaa waxaa layiri: "Wasiir baa la'idinka dhigayaa" waxey u diyaarsan yihiin wasiir, nin walbo jaakadiisuu soo xiranayaa, xoogaagi

carruurta caanaha  carruurta, ugu gadijiray , jaakaduu kuwada iib saday, wasiir baan noqonayaa kulahaanaya, saas kuma jiri karno annaga, marka aad baan uga xumahay, inaan laan dheeraa nahay iyo laangaabaa, wasiirba maheystee maxey ii tareysaa? Taasina halkaasan uga baxayaa.

- **Qodobka 51aad,** raalli ahaada haddaan xoogaa, ciil baa iga qabtay laan dheera iyo laangaab nimo markaan maqlo. **Qodobka 51aad** haddaan usoo galo hey'adaha dastuuriga ah, hey'adaha dastuuriga ah, muwaadinka sida tooska u dooranaya, waa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, oo ka kooban, Golaha Shacabka, Aqalka Sare, Madaxwyne iyo  madaxweyne ku xigeen ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen, een horta runtii qodobkaan,  waa qodobka inta badan baarlaamka uu isha ku haayo, markaa runta laga hadalno, anaga madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen, xili aan hadda niraahno ma joogno, madaxweyne iyo reysalwasaare, sidey qorantahay, in loo daayaan qabaa, waa midoo horta  marka runta laga hadlo, m,adaxweynayaasha waxaa dhiba reysal wasaarayaal, sanka ka gala, asagoo shalay keenay, maalinkalena ladirira, marka nin kasta wuxuu rabaa, shaarkiisa inuu asaga ku ekaado, uusan nin ka daba hadlo uusan asaga keenin, waan soo dhoweynaya waa saxoo dee, qof adugu keentay, xilsiisay, maxaan ku dhahaaye haku yimaado 4.5, inuu kula diriraa waa ayaan darro; laakiin waqtiga hadda lajoogo, annaga kama dhigan karno, lagama bixi karo.

- Sababtoo ah, wax dib u hishiisiin ah, iyo Soomaali Cartey wax kusoo qoratay, Carta wixii kusoo qoratayna wax laga badalin, oo nacamti, intey Soomaali wada fariisatay, sidii Cartey kale  u fariisatay, shalay wixii qoranay, aan badalano, lama oranin  waxa weeye dastuurka hala baddalaa la yiri, guddiga la qoray gudigaasaa la yiri soo sameeya, wax Soomaali ku hishiisay, maaha, 4.5 lagu joogaa, reysalwasaaraha 4.5 ku jogaa dadbuu matalayaa, Madaxweynaha, 4.5 ku joogaa dadbuu matalaaya, guddoomiyaha baarlamaanka  4.5 ku joogaa,  dadbuu matalaya, guddoomiyaha Aqalka Sare, 4.5 ku joogaa,  dad buu matalaya, marka sidii shalay loo soo hishiyay, oo qabiilaadka ugu hashiiyay, anugu in loo daayaan qabaa, awoodahoodana sida ay dastuurka ku qeexan tahay, loo kala sii qeexo.

  Xataa '*At least*' waxaa madaxweynaha uga soocday reysal wasaare siduu u keenay, u saarikaro in laga dhigo waa macquul, anugu waan dhihi karaa wey ila qumman tahay, reysal wasaare siduu u keenay uga saari karo hadana inuu keenaa, laakiiin madaxweynaha ku xigeen magacuyaal ah, oo dad dhan fiirsanaayo, ileyn reysal wasaarahiisa magac leh, qofkasta reysal wasaarihiisa wuxuu leeyahay, madaxweynaha wuxuu qoranaayo muu qorto, qabiil buu matalaa, dadbuu matalaa, xaqiiqda marka laga hadlo, marka anigu ma qabo, magacaasi la badalo, reysalwasaaraha, reysalwasaarihiisa loo daayo, maaxweynaha, madaxweynihiisa loo daayo.

  Een midda maamul gobleedyada, horta waxaan aad ugu xumahay, oon ugu tacsiyeynaya, oon karaalli galinayaa, madaxweynayaasha maamul gobleedka in loo quuri waayo, in madaxweyne la yiraahdo, anaga oo xilibaana oo 275 ta xilibaan oo kuraastaan ku fadhiya, ayagaa soodoortay xilibaano kasoo dhigay, inaan madaxweynayaasha, madaxweynidooda, aan ku tixgalino aan ku ixtiraamno, beeleeyihiin, sababtoo anagay Madaxweyne noolyihiin. Dadaan Madaxweyne kale aqoon bay madaxweyne u yihiin, hadda haddii laga baddaloo la yiraa hoggaamiye kooxeed, baa tihiin, hoggaamin looqoro, ma qabaneysaa? Ma loogu yeerayaa? Ma ogol

yihiin? Maba garaneynee, madaxeynaha sideeda in loogu yeeray, oo magacaani u baxay, in loodaayaan qabaa, waayo, madaxweynaha Federaalkuna waa madaxweynaha federaal, madaxweynaha maamul gobleedkuna waa madaxweynaha maamul goboleed.

Markaan shalay kuraasta ka rabnay, xataa madaxweyne maan dhihi jiran, Madaxweynaheena Sharafta leh, baan dhihi jirnay, run baa larabaa inaan isku sheegno ma ogta? Maanta markaan kuraasta ku fariisanay, inaan niraahno, hoggaamiye kooxeed halaga dhigo, nimankii qoryaha watay beekee'em yada iyo baasuukayaasha watay oo kale la dhigo, aad bey ceeb noogu tahay, waana ka raalli galinaayaa, waa uga tacsiyaynaya, aadbaan ugu xumahay runtii in la yiraahdo, hoggaamiye kooxeedyo aa tihiin. Waa madaxweynayaal waa madaxweyne maamul gobleed, awoodna umaleh, Madaxweyne maamul gobleed xilli waxaa jirijirtay, markaan runta ka sheegno, ay hishiisyo ay lasoo galaan dowladaha, inta tagaan hishiiyo soo gali jireen; laakiin, hadda, cidna hishiis lama soo galaan, goboladoodaasay joogaan, halkoodaasay Madaxweyne ku yihiin, barlamaan ku leeyihiin , dastuur ku heytaan wasiirro ku heystaan, anagey namatalaan.

Noo daaya, haddaa idinka nacdeen. Haddii la yiraahdo aniga magaca ley dhaho yaanan hebel la dhihin, aad bey ceeb u tahay runtii, madaxweyne federaal ah, iyo madaxwey isteed waa lakala yaqaanaa, dalal kale lama soo hishiin karaan, meel kalane ma aadi karaan. Hadda aniga tusaalan idin sheegayaa, reysalwasaaraa ley yiraahdaa, magaceyga Reysel ah, waa reysalwasaare, hadduu reysalwasaare yahay, oo gabadhaa, yarta oo meelaha dhowdhow leh, maxey tahay reysal wasaare loogu bixiyay, maxey noqon kartaa? Hooyaday iyo aabahey baa ila baxay Reysal wasaare, waa magaceygii waaley yiraahdaa, reysalwasaarena waa Reysalwaaraha qaranka, iskuma qaldameyno halkaasaan ku kala joognaa.

Madaxweynayaasha maamul gobleedyada, madaxweynayaasha maamul gobleedyada, xurmay naga mudan yihiin, ixtiraambey naga mudan yihiin, tixgilin bey naga mudan yihiin dadkaan ugu jecel nahay, haloodaayo magacyadooda, intaasan ugu deynaya.Guddigana waan u sheegayaa, xoogaa waxan is leeyahay, saaxiibkay Burhaan oo kursiga soo waayay, iyo waxaasaa ka shaqeeyay.Burhaanow madaxweynayaasha sida u dhaan, intaasna waa iga kaftan.

Midda muddo xileedka, horta muddo xileed waxaa la yiri 5sano halaga dhigo, haddee qof diidaaya majiro kursiga halaguu badiyo, koley annaga ineysan naga badnaaneyn baan u maleynayaa, baarlamaanka naga danbeeyaa ha noqdeen, ama anaga aan noqone qofkasta wuu rabaa inuu wax ku korarsado, anugu waan soo dhoweynayaa 5ta sano, laakiin waxaan rabaa 5sano in la cayimo, in kursiga leys kaga fadhiyo waxaad arkeysaa, arkeysaa qof ku dhahaaya Imbagaati baan xilibaan ahay, Cartaan xiliban ahaa, wardad muusan kursigaa laheyn? Reer dhan maad kaligaa kursi iskaga fadhinee kursiga kaligaa isa fadhi, 20sano baan xilbaan ahaa, maalinta kursiga ninkaa, kaca waxaa la leeyahay, kursiga hebel ama kursiga hebla, wuuba is kalahaaba.

Waxaan guddiga ka codsanayaa xilibaanku inuu leeyahay, waqti cayiman uu xilidhibaan noqon karo, labo teeram hanoqoto, hal teeram hanoqoto, saddax teeram hanoqoto, labaan anigu, usoojeedinayaa, laba teeram , ka badan uusan xildhibaan nooqon, uu qofkale siiyo, anigu taas waan soo dhoweynaya, koley xildhibaanno badan iney kusoo noqnoqdaan wey igu xanaaqi doonaane, xildhibaannimada laba teeram halaga dhigo, oo

5sano ah, labadaas teeram, isku mar hanoqoto, ama laba teeram kale ha ahaato, haleyska daayo kuraasta leys ku dhajinaayo, oo larabo in 20sano.

Waxaa leygu heystaa makaroofankiiye, waxaan rabay in ley daayo 20 daqiiqo. Waxaan kaloo rabbaa in xukuumada lakala saaro, anigu waankasoo horjeedaa xilibaan wasiir laga dhigaayo marka runta laga hadlo, waan sababeynayaa, maahaninaan u diidanahay, xilibaannada waalaheyga, wasiirrada rabo iyo kuwa hadda wasiirrada ah waxaan usabaneynayaa, dadkeenu ma leh, shaqooyin fara badan, beelaan nahay, aniga markaan kursiga xilibaan ku fadhiyo, wasiizrka ku darsado, ina adeerkooyo wax kusoo bartayoo, dalkiisa dib ugu soo noqdayoo, ama jooga oo bini aadamoo, wasiir rabo oo banaanka taaganyahay, madaxweynihii u tago ama reysalwasaarihii u tago, masiin kartid qofaan xilbaan ahayn waa xaaraan.

Anaga xildhibaanan noqoneynaa, xilibaanno halanoo daayo, wasiirradana halaga keeno banaanka, dadka banaanka jooga oo aan siyaasadda ku jirin in la siiyo ayaan anigu qabaa, oo xukuumada iyo lakala saaro baarlamaanka, sababtoo ah, madaxweynaha loogu goodinaya, reysalwasaarihii loogu goodinayaa xildhibaan baa ahay, haddad kursiga iga qaaddo, baarlamaankaan ka dhawaaqaayaa buu leeyahay.
Intaasaan ku soo gabaggabaynayaa, waa leygu heystaa, kuweyga kale dib baan u dhiganayaa, marka waxaan rabaa xukuumadda iyo baarlaamka in la kala saaro, fursadda la siiyo dadka shaqo la'aan ta ah, banaanka jooga, wax soo bartay, aqoon yahano ah, in lasiiyo wasiirka, dadka kalena xilibaanadooda ay heystaan, laba teeramna aan nalookagaa badin. Salaamu caleykum warax matullhai warakaatu.

**26) Xil. Omar Yusuf Galadid:**

Bismilaahi raxmani raxiim alxamdulilaahi rabil caalamiin wasalaatu wasalaamu calaa rasuulilaah salalaahu calayhi wasalam. Guddonka labada aqal, xildhibaanada labada aqal, guddiga madaxbanaan iyo guddiga la socodka, howlwadeenada salaamu caleykum.

Marka hore waxan rabaa farriin malin dhaweed ayaan xabsiga dhexe ayaan booqday, nina qaraabo nahay baan ugu tagay waa xabsiga dhexe weeye, waxa ugu tagay runtii een oon aad uga xumaaday condition-ka ay ku noolyahiin hal jooradi baa saddex qof ku jiifata -sax waaye laakin farriintaas waa la isoo dhiibay- inaan sideeda u dhahana waan wan jeclaan lahaa marka waxan ka codsanaya Madaxweyna Jamhuuriyada Federaalka, inuu dadkaas maxaabista ah qaarkood danbiya yaryar bay ku xeranyahiin marka in cafis la siiyo ayaan ka codsanayaa kuwa danbiga waaweyn aanan laheen intaas ayaan rabay inaa sheego.

Tan kale waxa jirta ninkaloo asagan xildhibaan ah runtii ah oo in badan igu soo laalaabta oo hadalkiisa runtii *Night meer* igu noqday oo markasta igu dhaha: "Muna way xirantahay , Muna way xirantahay, Muna way xirantahay" Anigu ma garanaayo kuley Muno waa gabar xildhibaanad ahaan jirtay baan umaleenaya arrinteedana, in badan buu ninkaas odayga ah barlamaanka farriintaas soo gaarsiiyay, waxan codsan laha arrintaas barlamaan ahaan iyo Islaamnimo iyo Soomaalinimo ahan in arintaas gabadhaas la fiiriyo ayan jeclaan laha intaas markaan ka gudbo.

**Cutubkaan afaraad oo ah cutub muhiim ah qodobka 48** awoodda shacabka markasto horta waa alxamdulilaas anigu dowlad muslim ayeenunahay markastana, inaa Allaah subxaanahu watacaala iyo Kutubkeena Quraanka ah aan cuskano oo aan loo maleynin,

dastuur aan anagu hadda sameynay ama xeerka hadda jira aan ku dhaqano oo markasto ahaado marjaceen Kutaabka Quraanka kariim iyo Sunada Nabigeyga SCW, marka ummadda Soomaaliyeed ama shacabkeena Soomaaliyeed inee saas u fahman oo dastuurkeena rasmiga ah uu yahay Quraanka kariimka iyo Sunada Nabigeen SCW.

Xeerku waa sax waa xeer bulsho weeye oo aan ku dhaqmayno aniga dhaxdeena; laakiin marjaca loo noqonaayo inuu yahay kutubka Quraanka kariimka Sunada Nabigeen SCW

- **Qodobka 48faqradda(4)** Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka masuul ka ah, halkaas waxa rabaa in sixitan lagu sameeyo ayaa ka masuul ah oo **ka** laga saaro intaas qodobkaas ka dhahi.

- **Qodobka 49** faqradiisa (a)Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo:

A. Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye.
   waxa la qabaa saaxibadey sida ay dhaheen faragalin shisheeye iyo faragalinkalaba oosan noqonin kaliya shisheeye ay faragalintu meelkasto ka iman karto oo noqonkarto qof jecleysi xitaa.

- **Qodobka 49isla faqraddaas xarafka(g)** Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh.  Een waxan umaleenaya halkan koox areygaas kooxda ah 'concern' badan ayaa laga muujiyeen xildhibaanadu inkasto anigu waxbadan oo differenta aan u arkinoo urur iyo kaax labaduba waa isku mid marka haddii urur la dhaha isdhihi laha waa ka fiicnaan laheed.

- **Qodobka 49(h)** Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad buuxda. kulay waxan umaleenayaa mar haddii laga hadlaayo one man one vote iyo doorasho xalaal ah inaan loo baahnaan doonin tiro badan iyo tiri yar ee asxaabtaas lagu kala bixi doono qofkasto waxii uu la imaado iyo siduu dadka iskaga gado ayay noqondoontaa marka tan waxaa dhihi lahaa "khayru naasi anfacahum" ayuu Nabigu dhahay CSW marka dadka waxa ugu qeyr badan midka dadka anfaca. marka qofkii hadduu beel yar ka soo jeedo iyo hadduu beel weyn ka soo jeedo qofka waxtarka leh ayaa anfacaya laandheera ahay iyo laan gaaba ahay midna ma anfaceyso

- **Qofobka 51** Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa:

A. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare;
B. Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
C. Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka tan waxaa umalaynayaa. kolley meesha wax umaleenayaa xildhibaano badan wey sheegeen hoggaamiyaha iyo hoggaamiye Ku- xigeen Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku- xigeen baan dhahi lahaa macquul ma ahan adduunka mansabka horaa loo socda ee dib looma socdo koox magac laga soo daalay waaye runtii oo fahanka qofka markoo la dhaho hoggaamiye kooxeed iyo waxii ayaa maskaxdoda soo galaaya oo dad badan oo ay

saameysay ayaa ku jira marka dib u noqoshadaas waxan umaleenayaa inuu ku habboon tahay Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku- xigeen

- **Qodobka51(3)** Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kasta ee buuxiyey shuruudaha codbixiye. waxan u fahmay maamul gobaleedyada deeganka ku sugan ayaan u fahmay haddii sidaas tahay ula jeedadu waxa jiro ummad Soomaaliyeed oo dalka inala leh oo ku nool dibadaha oo ayaga naftirkooda ubaahan inee codeeyan oo talo ku yeeshan.

- **Qodobka 51(4)** Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan.

- Marka guddah iyo dibadda aan fahmay in lagu doorankaro waxa lakiin, meshaan rayigeyga kaga darsanaya horta madaxweyne iyo madaxweyne ku- xigeen anigu waa ayidsanahay; laakiin, sidee ku ayidsanahay? Waxaan ku ayidsanahay, in xildhibaanadu doortan inta waqtigeeda laga gaaraayo oo ay doortan labada aqal sida aan haddana usoo doorahay; laakin xildhibannada la soo dooranaayo halaga soo doorto deegankiisa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhan asxaab ha ku soo galan si xisbiyo ah ay ku soo galan marka Federaal aahan bey doorashadu u dhaci oo xildhibaanki lagu soo dooranayaa; laakin, parliamentary markee imaado madaxweynaha iyo madaxweyne Ku-xigeenka bey dooranayan micnaha waqtigan hadda la joogo waddankii lama wada hayo oo xor ma ahan maamul gobaleedyo maqanna wey jiraan qaarkood, een tira koob sax ah ma dhacin kaar bixin in dadka lagu gaarsiiyo ayada naftirkoodu wey ubaahantahay kaarkii codbixinta la helaa.

- Arka waqtiga la joogo waqtigeena ma ahan waa qiyam waa ka soo hormarka is lee yahay marka markii la gaaro waqtigeena dastuurki kutub quraan ah ma ahan markasto ayaa wax laga badali karaa marka waxa qabaa taas, in madaxwenahu halkaas lagu soo saleeyo waxa garabtaalo haddii larabo madaxweyne sharafeed ah la sameeyo oo Raisalwasaare barlamanka soo doorto; laakin, waa iney noqoto saldhigga barlamaanka sikasti halagu soo doorto ama asxaabta ha dad banaato ama yeesan dadbananin waa in barlamanku Madaxweyne iyo ku-xigeenkiisa doorta haddii Raisalwasaare loo daanayo oo Madaxweyke sharafeeed laga dhigaayo waa in barlamanka soo doortaa.

- **Qodobka 52** Muddada Xilhaynta waa shansano **waa okey waa wax** macquul ah muddada xileedku waa in naftirkeeda ku cadyahay in labo tream-ka badan aan la dooran karin ayadana lagu xaqiiya ayan rabaa.

- **Qodobka 53** Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo. Anagu ummad muslim ah ayaanu nahay siddeed iyo toban waa da weyn waa western aya dhahi karaa anaga shan iyo tobansano waa qof weyn waaye dumar hadduu yahayna ciyaal ayeeba lee dahay wiilal ahadeey yahiina waa dad waaweyn marka

qaangaarkeenu waa 15sano Soomaali ah waa nin weyn anagu waxaanan dhahnaaba qoyahanagu waxanba dhahnaa "Toban jire Ogaadeen waa looma taliyaan" tobansano markuu garo ninka ogadenka ah waa nin baaluqay oo naag loo doonaayo.

Ugu danbeytii xildhibaannada sharafta leh waxaa markasto muhiim inaa anagu ummadda Soomaaliyed oo dhan aya masuul ka nahay marka waa ina masuuliyadeenna qaadanna oo guddanaa oo barlamanka masuuliyaddiisa aanan iska qaadin. wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

**27)Xil. Mohamud Abdirahman Omar:**

Bismilaahi raxmaani raxiim alxamdulilaahi Rabil caalamiin salalaahu calaa nabiyinaa wacalaa ali wasaxbihi wasalam. Shir guddoonka, howlwadeenada iyo dhammaan xildhibaanada waan salaamayaa

Ku dheeraan mayo waan soo gaagaabinaayaa madaama la daalay waxaan toos ugalayaa qodobada.

- **Qodobka 48 faqraddiisa(4)** ee sheegaysa dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta doorashooyinka, in Dawlad Goboleed taas waxan oron lahaa doorashada waa wax adag marka dowladda federaalka oo kaliya ma wadi karto taana waxa oran lahaa doorashada waa wax adag marka dowladda federaalka oo kaliya ma wadi karto, dowlad gobaleedka hadey ka baxdana waxba lagu hishiin mayo marka wadatashi Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleed iney ka wada shaqeeyan ayaan aad u habboon, in saas loo caddeeyo waaye meelo farabadan aanu Dawladda Federaalkaa awood ku laheen aanu ku shaqeyn Karin sidaa darteed iney u wakiilato Dawlad Goboleed ayaa habboon marka qodobkaas, **in saas loo xoojiyo la dhaho waa laga wadatashanaya Dawladda dhexe iyo Dawlad Goboleed**.

- **Qodobka 49(a)** waxa ku qoran ineey doorashooyinku dhacaayo xor iyo xalaal iyo caddaalad yahiin kana maran yahiin faragelin dowlado shisheeye ama dadka shisheeye kaliya ayaa lagu qoray. Sidoo kale xildhibaannada hore wey ka hadleen aniga waxaan ku xoojinaa, in laga ilaaliyo faragalinta haddee dad shisheeya yahiin iyo haddee dad guddaha yahiin xukuumadda qaarkood ayaa toos ufaragalinaayo doorashadiyoo xor u socota ayaa cidda kolba meesha joogta ayee doonta iney faramaroojiso xoog ufagaliyan marka ani waxan ku dari lahaa farqadaas **inlaga ilaaliyo faragalinta gudaha iyo dibadda qodobkaan intaasa ku darayaa**.

- Waxaa kaloo halkan ku jiro marka laga hadlaayo mabaadii'da doorashooyinka waxa laga soo dheegtay ama laga keenay hishiiskii Madasha Wadatashiga ee Qaran hishiiskaas ma ayna arag horta ha noola keeno hishiis ayna arag in dastuurku lagu soo daro barlamaanki dhamaa Jamhuuriyada Federaalka la soo hordhigin in qodobbo ka mid ah in dastuurka la soo galiyo aniga waxan u arkaa, arrintaas inee deelqaaf tahay marka horta hishiiskaas hala keeno barlmaanka labadiisa aqal hala keeno halaga dhergo hala aqriyo kaddib waxii lagaga soo daraayo halaga soo daro anigu marka aanba hishiiski arag oo aan qodobadiisa akhrinin ama aan eegin in la yiraahdo waxba laga soo darayaa dastuurka aad iyo aad ayee ila qaldantahay marka waxaan codsaneyna in hishiiskaas la keeno golaha barlamaanka labadiisa aqal la keeno.

- **Qodobka 51(b)** oo ka hadlaayo Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo waxaa ka mid ah madaxweynaha iyo madaxweyne Ku xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya xildhibaano dhowr ah ayaa ka hadlay madaxweynaha iyo madaxweyne Kuxigeen waab xoojinayaa haddii laga guurayo nidaamka barlamaaniga ah oo madaxweynaha iyo madaxweyne Ku xigeen la qaadanayo oo 4.5 lagu saleenayo oo sidii horoba loo sheegay madaxweynaha iyo afar madaxweyne Ku xigeen la sameeyo taasna yaan faabiyo laga qaadin sida xildhibaanada qaar ka hadleen oo yiraahdeen: "Madaxweynayaashu iyo madaxweynaha wey is qabsanaayan" horaba waxan usii ognahay ku xigeenka wuxuu qabto waxey tahay waxee un dirtaba ciddii ka sareyso aminka wasiirka iyo wasiir ku xigeenka baajira wasiirka asigaa wasaaradda ka masuul ah goormu wasiir ku xigeenka wax qabanaaya waxii uu ugmaddo wasiirka un weye saaso kale madaxweynahuna madaxweynayaasha afarta ah ama shanta ah laga dhigayo waxii uu uigmaddu uun beyqabanaayn horeba waa loo ogahay maadaama uu kuxigeen yahay, shaqadiisa iney tahay markuu booskaas bannaanado ama madaxweynahu meel ku maqan yahay ama shaqooyin gaar ah udirto madaxweynahu saasan isku qabsaneynin taas ayada xoojinaaya.

- **Qodobka 51(c)** Hogggaamiyaha iyo hoggaamiye Ku xigeenka dawlad goboleedka aniga waxan xoojinaya in loo daayo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka why carabta waxey yiraahdan. Sidaa darteed Madaxweynaha Dawlad Goboleedka ayaa marwalba xadidaayo hadda Madaxweynahii guud ee qaranka ma noqonaayo marka aniga waxan oron lahaa **haloo daayo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka** Puntland, Jubbaland heblaayo land wada landta aan hadda sheegno oo dhan lagu daayo sidaas ayada waan xoojinayaa.

- **Qodobka 51(2)** Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye. Waana kala gaar Aqalka sare waxa lagu soo dooranayaa Dawlad Goboleedka.

- Laakin, xubnaha Golaha shacabka dhammaan Soomaali Maxamed ayaa dooraneysa masalan, anigu waxan ka soo jeeda Gobalka Waqooyi Galbeed waxaa la iga dooranaaya, Kismaayo waxaa la iga dooranaaya Beydhabo waxaa la iga dooranaaya Eyl waxaa la iga dooranaaya Boorame waxaa la iga dooranaaya Muqdisho anigu arintaasi niyoow aad bey baciidi utahay consequence iyo matalaadi ayaa meesha ka baxeysa run ahaantii aniga saan u arko qofka waa inuu meel ku xadidnaada ama deegan oo dadkaa mesha dagan matalaayo representative u yahay baan 100% anigu soo jeedinaaya; lakiin, haddii la yiraahdo halka sharraxaada ku qorontahay arrintaa aniga aad ayaan ugu soo horjeeda, haddii kale waa in lagu caddeeya meesha xisbi baa la dooranaaya ee qof lama dooranaayo xisbigu ciddi oo doono meesha ha soo gashto taasa ka clear-san oo ka cad sida aan anigu u arko.

- Run ahaantii xisbi hebel intaas oo liis ayuu qortay 275 oo mandiqadaha Soomaaliya oo dhan ka soo jeeda xisbigaa kalana intaas ayuu qortay , xisbigaa kalana intaas ayuu qortay waa in la yiraahdo kaddib la yiraahdo xisbiyadaas ayeey dadku dooranayan sidii aqlabiyada ukala helaan ayaane ugu kala guuleysanayan kursiga madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka in la yiraado ayaa ka clear-san wadhi iyo hoos galisay ayaa la

yiraahda tanoo kale in la isku hoos galiyo ma ahan waa inee caddato oo aqrinkaro oo la fasirikaro.

- **Qodobka 52** Mudda xileedka in shan sano lagu daayo waan soo dhoweenayaa waana taageersanahay.

- **Qodobka 53** Codbixiyaha ka hadlaayo ee la yiri siddeed iyo toban sano ayaye sharuudiisu tahay taas aniga aad ayaan ugu soo horjeedaa, dad Islaama ayuunu nahay waa run markan weydiiyay xubnaha guddiga ka shaqeyneyso dib-u-eegista dastuurka waxan ku dhahay: "Maxa ugu qorteen halkaan waa idinka kala soo tashaday Culimada iyo cidwalaba qaangaarka shan iyo taban tahee waxay igu dhaheen: "Waa masuuliyad oo iminka madaxweynaha waxa lagu xadiday afartan jir yahay Ra'isalwasaaraha afartan jir yahay wahaakadaa" waa run waa la xadidi karaa da'da lakiin doorashada wey ka sahlantahay masuuliyada Madaxweynaha Qaranka.

- Doorashu waa inuu qofka wax aqriyo waxna kala doorankaro xitaa carrbuurta yaryar markee waalidkooda kala tagaan kola ayadoo qaangaarin ayaa lakala dooransiiya ma aabaha ayaa raaceysaa misa hooyadaa raaceysa oo sharaacadda Islaamku ogoshahay sidaas marka waxa la raaciyaa cidda ay doorteen marka doorashadooda ayaa la cibtidaadiyay ilmahu markuu shan iyo toban sano yahay reer lee yahay carruur u joogan in la yiraahdo doorashada ma gali kareysid oo under Age baa tahay absaloodli aad iyo aad ayee u qaldantahay, run ahaantii bulshadda dad farabadan oo daddooda 15-18 inta udhaxeyso a yaaba dadka ubadanyahiin iminka ayaa marka meesha ka baxeysa oo carqalad baa ku imaaneysa codbixiyasha ama tiradii codka bixinaayen

- Runtii taarikhda Islaamka waxyaalo badan baanu ku leenahoo waxaa ka mid ah axaadiista Nabiga jihaadka marka la galaayo asxaabta cidda jihaadka galeysa cimri baa lagu xadidaaye Abdulaahi ibnu Cumar oo aa wada garaneysan Cumar binu Khaidaab waxuu uu sheegay, in asigoo afar iyo toban jir ah oo dagaalki Uxud dhacay kaddibna Nabiga loo bandhigay asigoo dhallinyarada ku jiro kadibna Nabiga uma ogalaanin waxuu dhahay afar iyo toban hadda tahay jihaadka ma galaysid sanadkii danbe oo dagaalkii Khanadaq dhacay ayaa mar labaad loo bandhigay Nabiga Abdulaahi ibnu Cumar waa loo ogalaaday jihaadka jiahaadka dhan oo shaqada ugu adag oo bini'aadam qabto ayaa ilmo yaroo shan iyo toban jir loo ogolaaday, ineynu u ogolaan weynay qof shan iyo toban jir ah inee kala saaro dadka musharaxinta u ah Madaxweyna inee kala sareen aad iyo aad ayee u qaldanthay, anigu taas aad iyo aad ayaan u xoojinaaya halkaas shan iyo toban iyo waxii ka sareeyo ayaa codeyn karo in lagu qoro ayan taagersanahay.

- Waxaan kaloo ku darsanayaa habdhowre ama gugdoomiye, qodobka 54 aad waxaa lagu qoray xisbiyada siyaasadeed ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama mucaarada waxay kamid yihiin tiirarka nolosha siyasadeed ama dimuquraadiyadda, anigu halkaas waxaan soogalin lahaa xisbiyada qaranka ee doorasho ku soobaxa waa in layiraahdo waa xisbiyo qaran oo miisaanidda qaranka kuleh. aad iyo baad umahadsantihiin een shir guddoonkana waan salaamayaa iyo hmabdhofwraha siduu wakhtiga iigu daray. Salaamucalaykum waraxmatullaahi wa barakaatu.

**28) Xil. Salah Sharif Sayid Ali:**

Bismilaahi alxamdulilaah wasaatu wasalaamu calaa ashrafil muslimiin wa imaami mutaqiin sayidinaa maxamedin wacalaa aali wasaxbihi ajmaciin amaa bacad. Guddonka labadiisa aqal, xildhibaanada sharafta leh, saxaafadda Asalam caleykum waraxmatulaahi tacalaa wabarakaatuhu.

- Ramadan kariim taqabalaahi mina saalixal acmaal. Waaxaan is xasuusineyna Xildhibaanada sharafta leh waxan ku jirnaa bisha Ramadan sidoo kale waxan nala soo dhaariyay maalim Ramadan ah marka labadaas waxee tilmaamayan masuuliyad aad u weyn inee naga saarantahay shaqada qaranka danta guud inaa ka hor marino.

- Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa aayaha ummadda Soomaaliyeed waa mustaqbalka jiilasha soo socdo, waxii ay ku dhaqmi lahaayen hadda inaa ka shaqeyno waaye ma ahan shaar qof hadda joogo oo isku cabiyaaro ma ahan marka marwalba waxa habboon in laga fiiriyo danta guud. xildhibaanada sharafta leh sida ay xildhibanada tilmaamen, q**odobka47** oo sheegaayo nidaamnka doorashooyinka iyo xisbiyada waxa ila habboon sida xildhibaana iga horeeyay ay sheegen in sidiisa loo soo celiyo .

- **Qodobka49** oo ka hadlaayo Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku oo u qoran mabaadii'da guud ee nidaamka doorashooyinka waa, in ay ahaadaan kuwo Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin shisheeye marka faragalinta banaanka iyo guddaha, in ladhoho faragalin shisheeye haddii la dhaho waxa is faragalinkara Dowladda federaalka iyo maamul gobaleedyada iyo siyaasin intaba wa is fara galin karaan, marka faragalinta nooc walba ay ahaataba in la mamnuuco waa qaba.

- **Qodobka49(g)** Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh. waxa ila habboon, in laga sooro meesha kooxaha waxa ila habboon inaa dhahno, dammaanad qaada in dhammaan qaybaha kala duwan. kooxaha waxa waaye hadda kooxo badan ayaa wadankeenna ka jiro khawaarij ayaa ka jirto kooxoyin kala badan oo magacyo laha jiro, marka kooxaha haddii la dhaho waxkala ku soo ganbankaro oo aan aqoon, garanwaa badan ayaa soo geli karo marka si aysan garanwa usoo gelin oo koox khawaarij oo afkaar qaldan aaminsan si ayan san ugu soo dhuumanin, in qeybaha kala duwan ay bulsha Soomaaliyeed lagu soo koobo ayan qabaa.

- **Qodobka 49(h**) Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad bulsho. wey fiicantahay; laakiin, waxa igala horreeyo sida ogaado yaa badan iyo yaa yar? Tairakoob in la sameeyo, Soomaaliya hadda waxa wax u qaybsanna goballo States, States qaar wax deggan ma aleh boqol kilometer markaa socotid ayaa waa arkeysaa hal tuulo, states qaarna waxa arkeysaa dadkooda si aad ah ayee u badanyahiin tusaale degmada Buurhakabe oo ka tirsan gobalka Bay maamul Koofur Galbeed dagmadaas kaliya waxee lee dahay afar boqol oo tuulo wax ku dhow marka dagmana waxee lee dahay afar boqol oo tuulo iyo ka badan dagmana waxa laga yaaba xooga yar dadkeeda, haddii la tilmaamo gobal oo dhan ayaa laga yaaba inee hal dagmo ka tiro badan tahay, marka kala badnaanta si loo helo waxa ila habboon, in aan sameyno tira koob si bulshada Soomaaliyed haddna xildhibaanada meesha bulshada ku tira badantahay

kuraasyo badan loo dhigo meesha bulshadda ku yartahayna kuraasta ku habboon loo dhigo.

- **Qodobka51(1)** Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa:

a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare.
b) Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
c) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka. inta waxa la yiri: hoggaamiyaha iyo hoggaamiye Ku- xigeenka ee Dowlad goboleed dowlada iyo hoggaamiye wax isqaban karo ma ahan waxa ila habboon, ugaar wax u dhigmo halagu qoraa la dhahi jiree waxa ila habboon dowlad haddan dhahnay oo dowlad gobaleed u ogalnahay madaxweyne gobaledna aan ogolaano sideebana magac la bixinaayo, micno ma sameeyo; laakin, waxaan micno sameeyo awoodaha in lakala qeybiyo, marka si awooddaha la isku qabsandoono ama hadaba la isku heysto ayaa u baahan, in aan kala saarno; laakin, ninkaan hoggaamiya waaye iyo madaxweyne waaye iyo habel kooxed waaye iyo waxee soo kordhineyso habayaraate ma arko.

   Marka waxa ila habboon, sida ay hadda yahiin madaxweyna maamul gobaleedka laakin, baryahan waxa soo cusboonaaday Madaxweyna puntland, Madaxweyna Galmudug, Madaxweyna herbel inta halaga dhaafo madaxweyna dowlad gobaleed in lagu daro oo lagu qasbo; laakin, madaxweynaha Soomaaliya camal isla markiiba inaa ka baxan oo ay isku xeraantas in laga reebo ayan qabaa.

- **Qodobka 52** mudda xilheynta waa soo dhoweyna in Shan sano laga dhigo oo dadka fursad u helaan dowladii la soo doortaba doorashadeeda iyo doorashada kalebo waa isku dhowyahiin, marka si fursad fiican u helaan soo dhoweyna in shan sano laga dhigo.

- **Qodobka 53** Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo. anaga waxaan ka soo hadalnay **qodobkii 27(2) page 25** haddaa u laabtin da'da lagu qaangaarayo madama aan nahay busho Soomaaliyed 100% muslim ah oo diin islaamkana qeyxeyso dada qaangaarka.

- Qofka hadduu qaangaaro qof caqligiisa iyo kartidiisa iyo dadnimadiisa ay u dhantahay waaye shacabka Soomaaliyed 70% in ka badan, waa dhallinyaro ku dhowaad 50% dadda 18-15 ayee u dhaxeeyan marka bulshadaas oo tirada badan oo saameynta badan leh si ay codkooda u dhiibtan waxan soo jeedin lahaa meeshan 18 sano lagu **soo qoray da'da qaangarka in lagu soo qoro 15 sano**.

- **Qodobka 53(4)** Dadka aan xaqa u lahayn diiwaangelintu waa:

A. Dadka aan dhimirkoodu dhammayn;
B. Qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama danbays ah oo la xiriira dembi doorasho.
C. Qofka danbiyo badan ayuu geli karaa marka danbigaan in ka caddeeyo danbiga uu yahayin in kale sidoo kale maxkamada danbigan xukunto in la sheego; lakiin, haddee iska noqoto danbi furan oo hadhow la joojiya bannaan iy lajiifaya bannaan waxaa yalo badan aya halabyo. Marka waxan soo jeedinayaa, in danbigan la caddeeyo oo la qeyxo

tankale, waxa ad ugu faraxsanahay in shacanka Soomaaliyeed kantomeeyadi sano oo ay ugu danbeysay aysan codkooda dhiibanin oo dulmana in codkooda ay dhiibtaan ay doortaan madaxda ay jecelyahiin oo lakala ogaado, Soomaliya sida loo kala badan yahay hadda eabeelaa badan heebeelaa yar aan maqanlaanye; laakin, waxan aaminsanahay dadban oo hadda la leeyahay waa yartahiin kooxo badan oo sheegayan inee badanyahiin inee ka soo badandoonan, waxan aaminsanhay haddii codka la furo oo shacabka isdoortan oo shacabkooda masakiinta ah oo kaamamkan ku jira ku dhibaateysan oo codkaada aan ku ciilbixin, waxa rabna inee codkooda ku ciilbaxan oo shacabka Soomaaliyeed xaqaado dooroshada, in la helo waxan aaminsanahay, haddii doorasho cod iyo qof dhacdo deeganada aan ka soo jeedo, in madaxweyna Soomaaliya ay qaadandoonan why dadka ugu tirada badan waaye ilaa hadda aan ogahay iska

- sidoo kale Ashraaf waxan rajeena oo cidda aan ka soo jeedo in ayagana tirada ugu badan ay Soomaaliya ka heli doonan, marka dhammaan shacabka Soomaaliyeed ha bishaareystan codkooga haku ciil baxan waxan rajeeneynaa barlamaanka in bulshada Soomaaliyeed oo dulman ay u gargaari doonan.  Aad ayaa ugu masantahiin sida aad ugu shaqeyneysin Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya dhammeystirkiisa.

**29) Xil. Fawzia Yusuf H Adan:**

Bismilaahi raxmaani raxiim. Ciddiba ma joogte labada guddoon xildhibaanada iyo Senatorda iyo guddiyada ka soo shaqeeyay waa idin wada salaamayaa. Waxan si gaara ugu mahadnaqayaa, Guddomiye Xuseen Iidow iyo Senator Siciid oo had iyo jeer si waafi ah  inooga dhergiya qodabadi ay soo qaroon oo laga hadlay iyo kuwa kalan inuu diyaariyan aad ayaa u mahadsantahiin.

- Mulaaxiddooyinka aan sameeyay ma badna in badan aan saakac joogay waxan arkaayey kuwoa aan rabay oo laga hadlay ku noqon mayo

- **Waxaan eeka billaabayaa qodobka 48** mulaaxada  aan ka sameeyay waxna waa technical yar yar waxana waxan isleeyahay siiqada halaga baddalo iyo faker aan qabo waxan maqlaaye oo  lagu celcelinaaye Cart, Carta, Carta waqti bay  aheed oo laga soo gudbay qeybinta Soomaaliyeed iyo heerka aanmaanta mareyno Carta ayaa hooyo iyo aabbo u ah marka aniga ma jecli ama i ilama ahan in lagu faano Carta.

- Carta waa meesha 4.5 haddii maalinkaa xisbiyo lagu dhawaaqi lahaa, maanta meel weyn beyno gaari laheen anago mideysan marka taas waan hormarsaday.

- **Qodobka 48 qodobka koowaad**, wuxu odhanayaa: "Allaah Ska sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sii socona; lakiin, waxaan raba inaa soo gaagaabiyo halkaa waa muhiin **In lagu daro xildhibaanadaa**, la wakiishay iyagaa markaas la xisaabtanka sameyn doono.

- **Een lanba (2**) Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed, waxaan ku baddali lahaa heer kastoy tahay. Haddaad hore u sii socoto, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato xukunka, waxaa sii raacsan si toos ah ama si dadban intaas danbe waan ka saari lahaa.

- **Qodobka 49** waxaa muudda waa technical tani xarafka koowba ka maqan oo A, B, C baa la raaciyay marka hadday kowda ka maqantahay in lagudaro haddii laguu talagay sidaan 1,2,3, in laga dhigo marka taasi waa technical.

- **Qodobka 49** xarafka (G.H) waa labo isku  mid ah isu eeg aad iskugu egoo midna oranaayo. Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha iyo kooxaha kala duwan-kooxaha aadbaa looga qayliyay, waan ku raacsanahay, in laga saaro- ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh; ka xigaana wuxuu odhanayaa: Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah, siiba beelaha laga tirada badan, **waxa jeclahay in lagu hor mariyo beelaha; laakin, hal qodob laga dhigo oo labadaa la is raaciyo** .

- **Qodobka 50** nidaamka doorashooyinka wuxuu ku billaabanayaa: Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya,

- Halkaa waxaan ka hormarin laha oon ku dari lahaa sida ku xusan cutubka koowad xarafka (1) kaaso ah article ka ugu horeeyo constitution-ka ee odhanaya sidan: Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matilaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan.

- Marka wey isleeyahiine in kaa lagu xoojiyo maadaama kaa loogu horeysiiyaba. **Een halkaa haddaan ka sii gudbo qodobka 51(2) waxaan ku talin lahaa in lagudaro halka ugu danbaysa, waxaa qoran:** Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye; laakiin, kuma jirto maxay dooranayaan? Waa inay  axsaab doortan oo weliba lagu daraa liiska xedhan sidii la go'aamiyay.

  Hal ka madaxweynaha iyo madaxweyne Kuxigeenka aad laaga dooday, waan qabaa anigu madaxweynaha iyo madaxweyne Ku xigeen lagu daro oo ay caalamka kala mid ahaano oo dowlad gobaleedyada aan kala mid ahaano sababtoo ah i thing waaba Afrika Ethiopia waaba, dalka kaliya oo raisalwasaare leh. Iyagana iyagaa og sababahooda, inaga tii uun baa naloo soo guuriyay fedaraalkii iyo Raysalwasaarihiiba.

- Hoggaamiyaha haddii ay Golaha Wadatashiga isla garteen, in magacoodaaloo baddalo hoggaamiye, inugu waxan qabaa in loo daayo haddii an lagala tashanina in lagala tashto oo hadhoow aan buuq constitution waxaa la qoraay muddo aad u dheer aad iyo aad u dheer, marka intii laga cararikaro khilaafaad, in laga warwareega fiican oo wax lagu wada hishiis yahay la sameeyo.

- Muddada Xilaynta hadday timaaddo, anigu waxan qabaa barlamaanka shan  looga dhigo madxweynaha lix haddaan todobaba sidii Lixdankii laga dhigeynin; sababtoo aha, afar sano 40% madaxweyna waxuu ku mashquulsanhay baahida dadweynaha uu qaabilaayo, waxaa kaloo dheer sanad ama labbo  oo kaanbeen lagu jiro, goorta dalka

wax loo qaban karo aad bay u kooban tahay, **marka ugu yaraan lix sanadood halooga dhigo ama todoba sano ayaan anigu qabaa, baarlamaankana shan taa halooga dhigo**.

- **Qodob 53** waxay u baahantahay uun siiqada in la hagaajiyo kaliya.

- **Qodob 53(2) waxa weeye,** Codbixiyeyaasha diiwaangashan waxay, si siman, xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda, waana in la ilaaliyo rabitaankooda iyo kalsoonidooda
- Aniga kalmaddan kalsoonida waan liqi kari waan garankari waayay micnaha ay sameyneyso, marka waxan oran lahaa, in laga dhigo: waa in la ilaaliyo rabitaankooda ama go'aankooda in halkaana taa lagu daro.
- **Qodob 53(3)** Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu masuuul ka yahay diiwaangalinta halkaa waxa ka maqan xisbiyadda iyo codbixiyaasha isagoo diyaarinaya diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. intaasaa Contrbution ka dhigay maanta waana mahadasntihiin.

**Taariikh:** Maarso 18, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 26aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeisa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Doodda Marxaladda 1aad iyo 2aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:33 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:53 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka<br>Xil. Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" |

**Ajendaha:**

(7) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(8) Ansaxinta Ajendaha.
(9) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 4aad. MATALAADDA SHACABKA, Doorashoyinka. Madaxa 1aad ilaa madax 4aad (QODOBKA 48aad ilaa 53aad)

## Kulanka 26aad:

**Xil. Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow"**

Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha Shacabka: Bismilahi Raxmaani Raxiim, Allhamudulilaahi Rabilcaalamiin dhamaan xildhibanada sharafta leh, waxaad ku salaamantihiin asalaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu,salaan ka dib ajendaheenu hore ayaa socda ee dib u-eegista dastuurka buu ahaa gaar ahaan marxalada labaad oo ahayd sii wadista ka doodista soojeedimaha wax ka bedelka dastuurka,waxaan ku jirnay cutubkii 4aad oo ka hadlaayey matalaada shacabka iyo doorashooyinka. Wuxuu u qaybsanaa 4 madax, madaxa 1aad ilaa madaxa 4aad.

Doodii waxaa socotay madaxii 1aad iyo madaxii 2aad, waxaan maraynay gabogabadii maalintii ugu danbaysay xildhibaano baa noo hadhsanaa, markaa doodii meeshii bay ka soconee, maanta waxaan dhamaystiraynaan madax 1aad iyo madax 2aad.

Xildhibaano doodeenu sidaas bay ku soconee maanta, markaa waxaan rabnaa inaan yeedhis bilowno xidhibaanada si ay doodooda u wataan.

Shirkeenu waa inoo furanyahay, habdhowraha inuu u yeedho xildhibaanada baan rabnaa, aad ayaad u mahadsantihiin.

1) **Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed:**

Guddoonka labada **Gole, baarlamaank**a labada gole, hawlwadeenada, warbaahinta, ciidanka amniga dhamaan Asalaamu Caleykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuh, allah idin xiftiyo, intaa ka dib **وَلَا تَنَٰزَعُواْ فَتَفْشَلُواْ وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ اي قواتكم** wuxuu yidhi abwaan Soomaaliyeed isaguna "Aboorkuba alaylka ayuu dhistaa aqalo waa wayne, markuu ururay daartuu abyey la ashqaraaraa, ilko wada jirkooda bay hilbaha adag ku gooyaane, haday iniba meel taagantahay adhax ma feenteene. Itifaaq la'aan laguma helo lib iyo iimaan. Dad is jecel gacmaha wada jiraa jabiya qayrkood, Jamhuuriyadii waagay jirtay gees u wada jeeday, ha iska jidif badnaatee intaan iilka lagu jiidin jeeraaradii hore ragii joogay baa garan maantana

jamboob baan nahay jaabo jaabo ah. Jaboobka iyo jaabo jaabuhu xooluhu markay wayd noqdaan taag dareeyaan ee jaqaasho waayaan baa la yidhaahdaa waa janboob. Jaabo jaabana waa kooxahan yaryar ee aan imika nahay weeyi. Jiridii gudmaha lagu jaray ee jidibka loo qaatay, bal inay jeleecaan bulshada jidhidhicoonwayday, jiradaan ka daawaynayaa jiilka soo kacaya. Jabhadihii la eed iyo sharkii jiifta loo tumay, jid qaloocan bay nagu fureen oo jariimad ahe, waa se ceeb jahligu leeyahay oo joogay waligii, hadaase taliskii jowrfalin dagaal lama jeclaysteen misna lama jikaareen haday xaqa ku joogaan jaariga qabiilkiyo duliga uma jibooteen, awrkii jabuubiye hadaan kayne lagu jiidin jeegada ma ogaabiyo sooma joogsadee, waxay jalabutaysaba mar bay jiidhay miinadee, jago doonadii sow axmaar nooma galin jeebka. Waayahay aan ujeedadayada u kaco, bismilaahi waxaan wax yar ka odhanaya oo kooban.

- Qodobka 51aad: ee ka hadlayaa Madaxweynaha iyo Madaxweynaha iyo ku xigeenka iyo hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka, waayahay sidaan wada ogsoonahay cid taariikh ku dhigatay iyo cid soo joogtayba 1960-kii ilaa 1969-kii waxaynu ku jirnay nidaam baarlamaani ah. Anigu kuray baan ahaayoo waan garanayaa dawladahaa kala danbeeyey dadku waa ka caban jireen midwalibana baarlamaaniga iyo ri'aasiga labadaba mid walba mid waliba salbi iyo ijaab waa leeyahay.

  Waa tii tawradu beerka ku dhuftay, wixii ka danbeeyey markii aan ka soo guurno ilaa carta ilaa maanta waxaynu ku soo sugnayn baarlamaani. Horta dhaqanka Soomaaliga markaad eegto, soomaalidu waa reer guuraa waana geel jire, dadka reerguuraaga ahina **qawaaniinta u hogaasamaan waan necebyihiin sharciga**, waa necebyihiin sharciga dadka reer guuraaga ahi waayo xoriya mudlaqa ayey ku soo Koreen aan xuduud lahayn xeer kasta oo loo sameeyo waa jiidhaan waa halka dunida sadexaad la kacaa kufayso ay dhismi laadahay, markaa inkastoo marka aad ka soo qaado xiligii carta  cali khalif galaydh iyo abdiqaasin salaad xasan ilaa farmaajiyo iyo Mohamed xuseen rooble wixii ka dhacay waynu garnaynaa is haysad koodii, madaxaa la iskula jiray intaas oo raysal wasaare ayaa la bedelay. Labada oday ee hada inoo joogo allah dhowree malaha waa iska odoyaal mutadayiina ohoo wali qaylo kama yeedhin sidaan wada ogsoonahay inay kala xishoonayaan waa laga yabaa, nidaamka ri'aasiga ah waa nidaama lagu dhaqmo dunidu waa isticmaashaa waa adeegsataa.

  Dunida horumartay qaar adeegsadaayina waa jiraa sida markeykan oo kale, dunida saddexaad qaar adeegsadaayina waa jiraan laakiin waxaa lagu tilmaamaa nidaamkaa, nidaam takhalufa, intabadan takhaluf baa lagu tilmaamaa, afirkada madaw iyo carabta kuwa jamhuuriyaadka sheegtiyo ilahaasaa isticmaala inta badan raysal wasaaruhu, madaxweyne ku xigeenkuna wuxuu iska noqonayaa waraabe utaag marka aynu kuwaa hore ka qiyaas qaadano, waraabe utaag buu iska noqdaa dabadeedna meesha nin kaliyaa gacanta ku qabta inta badan ilaa mid ilaahay u naxariistay mooyaane, markaa waxaan ka qabaa halkaas dhaqanka soomaalida , hogaanka dhaqanka inta badan waa dhaxaltooyo marka laga reebo beesha ciisaha intaan ka aqaano waa dhaxaltooy, markay dhaxaltooyo tahay hadii ninka ugaaska, ama ugaaska ama suldaanka kuu doono hanoqdee uu dhinto wiilkiisoo weynbaa laga dhigaa hogaanka, ayaa la caleema saaraaa hadii aanu jirina walaakiis, markaa nin waynoo ugaaska qabaa'ilka soomaalida kamid ahaa baa bari geeriyooday, laba ninbaa dhaxalkii isku soo gaatay labada nin, nin waa nin layara nuuneeyo, nina waa nin aad loo jecel yahay, dadkii baa waxay u bateen uun kii u weynaa oo labada kii aan la jeclayna in xilka la saaro, nin abwaana oo la oran jiray gabay hawle ayaa yiri waar ka daaya ka daaya ina wadi maayee, dabadeetana waa laga diiday wuxuu yidhi " hayin nimuu ka jiifsaday , wuxuun  hilayga  saar saar, hayin nimuu ka jiifsaday waynaan helaynine, xirsaa kaga

haboonaaye, fartoon  aan haaramanee igaga heeryeeya, hawraareey ninba si kuu qaaday mowqifkaasaan ka qabaa igaga heeryeeyaan ka qabaa anuu maanta arinkaas.

- Qodobka 51(5): Xagan kale hadaan u soo gudbo allahu masala calaa muxamad, hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen, ayan fikirka oranaaya hogaamiye waxaan leehay maamul goboleedada asalkeeda wuxuu ka dhashay 4.5kii soodara lagu soo aasaasay buu ka dhashay fikrad soomaaliyeed maahayne fikrad xabashiyeed buu ahaa waa la soo qaaday jabuutibaa lagu bacrimiyey aakhirkii waakaa faderaal iyo wax sidaaya noqday, anigu barigaa aad baan uga shikiyoon  uga caalaacalay, markaa tixdan baan ka curiyey barigaana aan ka curiyey "siduu cadawgu noo kala sitee saxalku noo fuulay, caqligii wax suuradin lahaa waa la saanyadaye, sagaal dalawladoo yaryari sabi ma deeqaane, sida amxaardu rabtiyo saalax waatuhuye, sacabkaygoo madhan markaan sare u taagaayo, soomaaliweynoo midaan saadiyaa waliye, hayeeshee lama dawayn suntii saancadka lahayde(waa qabyaaladii), suxulada siday uga jabtee sabirku noo ciiray, sahwi iyo halmaan baa igu dhaca saacadaha qaare, surtaad aragtay ee suuban ee sixinka moodayso, sikastaba wa dhurdaha waxa sameeyaayi, sabankiyo wuxuu kaga baxaa surufta jiilaal, lafo soohan seed iyo cad iyo saani kuma taalo , sikalaa ramaanku u khalqiyo sawrac gooniya, sinaan iyo is maqal buu filkii kaga sareeyaaye, wax walba markuu wada soduu sare uguuraa, marhadii khilaaf lagu salido seege marinkiiye, silic iyo wareer kama baxaan waa sidaan nahaye" markaa barigaa sidaasaan uga werweray  oo uga sheekeeyey intaasaan ka idhi, waxaanse leeyahay hadii nin cali la yidhaahdo maxamed loo bixiyo ma waxbaa is baedelay waa cali uu baa maxamed loo bixiyey, markaa wax leehay maamulada awoodooda oo la dhimo mooyee magac la badelaa waxba kordhin maayo, markaa anuu waxaan ku talin laha oon soo jeedin lahaa waa aragtidaydee in horta magaca laga dhigo governer kii Mahdi Guuleed iyo rag uu ka mid ahaa ku dhawaaqeen  kaw oo magaca loo yara qurxiyo in  iyadana laga bedelo.

- Qodobka 51(6): waxan la ydhaahdo baarlamaanka goboleedkana meesha laga saaro oo la abuuro dawlad hoose oo xoogan gole deegaan oo xoogan la dhiso ayaan ku talin lahaa oo soo jeedin lahaa.

  Dhinaca kale wax yaabahan  in guna doorshooyin in qarsoodi lagu bixiyo codka iyana waan taageer sanahay, waxa kaloon taageersanahay iyadana

- Qodobka 53(1): qodobka oranaaya ee nagu soo noqnoday ee qaan gaadhka "muwaadinkasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamaayo gaarayna da'da qaan gaadhka" markaa da'da qaangaadhka ee 18 ina daba socoto dee islaamku wuxuu ku xukumay, wuxuu inoo xukumay 15, **markaa taana waxaan leehay halkeedii halgu daayo 15kii halgu daayo , 18 kan French ga laga sooray  hala inaga tuuro,** wa bilaahi taw fiiq, asalaam calaykum wa raxma tulaahi wa barkaatu, waad mahadsan tihiin.

2) **Xil. Said Mohamed Ali:**

Mahadsanid Gudoomiye, xilibaanada labada aqal, labada Guddiga ee dastuurka, marti sharafta, meediyaha. Asalaamu Caleykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuh.

Een xaqiiqdii waxaan bogaadinayaa, sida waaagsan ee ay usoo diyaariyeen labada Guddi ee isdabayaala **marnaamidk**a, tan labaadna, waxaan bogaadinayaa sida fiican ay xilibaanada xilka iskaga saareen, ay maalmahaan ay aad iyo aad u adaroosayaan, ayna u dul istaagayaan markastaba, ee waxa aan ka shaqeyneyno waa dastuurka, dastuurkana keenii

hore marka la fiiriyo asalka ah, waa 106 waa kan, wuxuu ka kooban yahay 106 "page" iyo 15 Cutub, iyo 143 qodob, dhamaantoodna wey is aqrinayaan weyna is dabayalaan, waxaa markaa jirta, kuwa lanoo soo sameeyay Guddiga ay kasoo shaqeeyeen labada Guddi, kan koowaad, wuxuu faahfaahinayaa, wax alaale wixii dastuurka laga badalay ama lagu daray, ama laga dhimay, een sifiicanna wey u qoran yihiin, oo asalka bogga 1aad ayaa lagu qorayaa, bogga 2aad na waxaa lagu qorayaa, waxa hada u jeedno, inaan badelno ama aan rabno dastuurka cusub inuu noo noqdo, boga 3aad na ama colomka sidaxaadna, waxaa lagu qorayaa faahfaahinta, waxaa aad leysku dul taagay, markastana leys weydiiyaa, een wixii dastuurka ku qornaa, waa fiicanyahay, in tilmaamtiisa asalka lasameeyo, waxa hada naheysto kaliya waxey aheyd, ee meelaha kale aan cuskanay, oo ah hishiiskii madasha, hishiiskii madasha, ee lagu gaaray, hadana aan cuskaneyno, ama aan dabataagan nahay, badanaaba dadka waxey codsadeen, in la keeno hishiiskaas, balse aniga waxaan ku talinayaa kaliya, ee oo aan rabo, inaan aad u iftiimiyo, Meesha ku aaddan hishiisyada, qodobada, 49 wixii ka dambeeya Cutubka 1aad ee qeyb tiisa, ee cutubkiisa 2aad, ee Meesha ka banaan ee la cuskaday, ama laga soo wariyay, laga soo qoray Guddiga waxaan ku talin lahaa, kaliya, tala ahaan ugu soojeedin lahaa, in lagu daro, ee lagu soo qoro qeybti yareed, ee laga soo qaatay, ee micnayneysay, qodobadaan Meesha, ku qoran, intaasaa usoo is taagay, in lagu soo muujiyo, sida loo helay, dastuurkaan in xeerkana ay Meesha ay ka muuqdaan, sidaa looga faa'ideysto, anaga iyo umada wax naga sugeysaba, ay wax waadex ugu noqdaan, oo u cadaadaan, waa mahadsan tihiin.

3) **Xil. Abdullaahi Hassan Rooble:**

Mahadsanid Guddoomiye, xildhibaanada sharafta leh ee labada aqal, Guddiyada, inta kale ee inala joogta, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu. Shayga 1aad een isleeyahay waa loo baahanyahay in la taabto, wuxuu ahaa go'aankii aan shalay ka maqlayay, Guddoomiyaha iyo labada Guddi, ee ahayd ummada soomaaliyeed ayaa loo fidinayaa arintan, iyaga ayaa codka iska leh waayo matalaada shacabka ayay inoogu jirtaa arintani, iyagaa leh, wixii ay idhaahdaana waxaan jecelnahay in la dhagaysto, haloogu gudbiyo qaabka aynu hada niri ee "electronic"ga ah hadii la doonayo ee la sameeyay, iyo in loo tago labadaba, waa in lagu daro maamulada oo dhan oo meelahooda loogu tagaa, dabadeedna la ogaado waxa ay ka qabaan fikirka noocani oo kale ah, waa fikrad aad u saraysa, waxaan qiyaasay soomaalida oo lagu qiyaaso ilaa 30 milyan, waxaan qiyaasay inta aynu ka nahay inteena go'aanka u gaadhaysa, Dawladii iyo Baarlamaankii ayaan isku daray, 400 oo qof ayaynu noqonay, 30 milyan markii loo qaybiyay waxaynu ka noqonay 1.3 ayaynu ka noqonay ummada soomaaliyeed, marka in aynu matalaadooda in ay go'aan soomaaliyeed iyo shuruucdiisa iyo Dastuurkiisa ay boqolkiiba 1.3 ay ka gaaraan, lafteeda **waxa ka wanaagsan in loosoo bandhigo, waa in ay codkooda soo gashadaan oo qof walba la dhagaysto oo dabadeeto go'aanku halkaa kasoo baxo iyadoo la tixgalinayo qofka uu yahay.**

Qodobka 2aad een soo qaadayaa waxa weeyi, waxa jirta sheeko, sheeko xariiro ayaa la iraahdaa, laakiin waa wax ku salaysan maamulada iyo sida loo sameeyo, 1983dii nin abwaan ah baa wuxuu sameeyay sheeko, wuxuuna ku magacaabay, Jamhuuriyada Xoolaha Soomaaliyeed, Dawlad buu u abuuray markaa oo uu usameeyay, Dawladu shirar badan bay gashay, go'aano badan bay gaadhay, way tashatay, aakhirkiina waxay ku heshiisay inay noqdaan Dawlad lagu magacaabo Jamhuuriyada Xoolaha Soomaaliyeed, Dawladaasi waxay ka koobnaatay oo markii dambe lagu heshiiyay 5 Raysimood, Raysinta waad garan karaysaan baan u malaynayaa, hadiise aan fasiro waxa weeyaan, waa Geela, Adhiga, Lo'da,

Fardaha iyo Dameeraha, waa 5taas weeyi, 5taas qaybood Dawlad ka kooban oo kala madaxbanaan ayay samaysteen, 5taas Dawladood waxay samaysteen Madaxwayne, Dawlad Federaal ah ayay soo qaateen, calankuna wuxuu noqday kii Soomaaliya, waxay samaysteen Madaxwayne, nasiib wanaag waxa madaxwayne laga dhigay oo loo gartay in la idhaahdo Orgi reer Hiiraan ah, waxay samaysteen Raysalwasaare, Raysalwasaarahana waxa laga dhigay Dibi reer Badhan ah, Dawladaasi waxy ku heshiisay inay 5taas Dawladood yeeshaan laakiin 6 xisbina ay yeeshaan marka dambe, 6daas xisbi waxyaabo badan oo kala duwan ayay aaminsanyihiin, qaarbaa hanti-wadaag ah, qaarbaa hanti-goosi ah, qaar baa "islamist" ah, magacyo badan bay ukala bix-bixiyeen, mid walbana mabda'iisa way soo qoreen iyo waxa uu yahay, waxay ku heshiiyeen marka, markay intaasi dhamaatay, waxay ku heshiiyeen in calankuna noqdo calankii Soomaaliya, 6daas xisbina laysku raaco, Raysalwasaare iyo Madaxwqaynana la samaysto sidaana uu go'aanku noqdo, aakhirkii markuu dhamaaday shirkaasi ee lagu heshiiyee laysku afgartay, waxa lagu heshiiyay oo ay qaadeen heestii calanka, heesta calanka waxay yidhaahdeen, Irdo badani khayr maleh, albaab xidhani khayr maleh, anaa idhidu khayr maleh, dood abid ah khayr maleh, "khayrul umuuri awsaduhaa", halkaasay kusoo gabagabeeyeen, in dalku uu sidaas noqdo, sidaas laysku maamulo, iyagoo kala madax banaana sidaas ay u shaqeeyaan, markaa waxaan uga dan leeyahay waxa weeyi, bal abwaankaasi waxa uu sameeyay 1983dii iyadoo Dawladii kacaanku ay jirto oo waliba aad laysku ilaaliyo, Dawlada noocaasa ninka sameeyay bal waxaan maanta ka rajaynaynaa in dadka soomaaliyeed bal hada, ninkaa abwaanka ah ee maanta maqan ee dhintay bal fekerkiisii in ay kusoo daraan, in noocaas ay jiri karto oo kale, salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

4) **Xil. Dahir Amin Jesow:**

Mahadsanid, gudoomiye mahadsanid, profesoorka orgi inaan siiyo maahayne isaguna dibi isa siiyee, dibi iyo orgi waa kala weyn yihiin waana kal xoog badan yihiin orgi madaxweyna ah oo dibi xukumaayaa wali anuu taariikhda kumaanaan arkin intaa xaaji muusaan ku kabayaa arintiisa.

- **Qodobka 50 aad** ee dastuurkan wuxuu leeyahay qaybta faahfahinta (aawey gudigii) qaybta faahfaahinta waxaad sheegaysaan inuu close list uu jiro ama liiska xiran ayaad ku soo qorteen, dhulkii aan soo marnay ee aan kasoo hadalnay qodobadiina meel looga hadlaayo aniga close list ama xisbiyo midna ma arag, dalkana waxaa la rabaa waxaa weeyi in la qaabeeyo nidaam xisbiyo ah loo qaabeeyo, tusaale aan u soo qaato doorshada halkan

- **Qodobka 51** hay'adaha sida tooska ah loo dooranayo waxay ahayd kaw inaad tiraadiin waxaa la dooranayaa xisbi, inlayn close list baad wadatiine, close list na xisbi uun baa soo samaysan kara inaad tiraadiin waxaa la dooranayaa asxaab xisbi ee waxaa tiraahdeen qof iyo cod waxaa lagu dooranaa hay'adaha dastuuriga ah sida muwaadiniinntu sida tooska ay u dooranayiin waxaa ka mida ah Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya labadiisa aqal waa inay ka tirsan yihiin xisbi, hadayna xisbi ka tirsanay oo xisbi laga soo dooranayn qaab close list loo sameeyo malaha waayo idinkaa ku soo qortay meeshan, waxay ahayd inaad dastuurka u soo qaabaysiin qaybtan doorashada inay asxaab ay jirayso oo qofku asxaab uu ka soo dhex baxaayo xildhibaanku asxaab ka soo dhexbaxaayo inaad sheegtiin ayey ahad maad sheegin, waxaa tiraahdeen waxaa la dooranayaa Baarlamaanka, Madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeen,

- isla **Qodobka 51(1) (b)** madaxweyne iyo madaxwene ku xigeenaa la dooranayaa baa tiraahdeen si toosa ay shacabku u dooranayaan waxaan ka cararaynaa raysal wasaare lasoo magacaabay oo xilkana baarlamaaku ka qaadi karo, madaxweynahana madexwenayaashii dalka soomaray kii ugu yaraa labao iyo saddex marayaa waa ognahay, madaxweyne la soo doortay oo waliba codka shacabka lagu soo doortay hadaan masalan tusaale sida ay u dhisan yihiin hay'adaheena madaxweynaha koonfurta ayuu kasoo jeedaa goroowe iyo kismaayo iyo gobolka la yiraahdo gedo raysal wasaaraha, mesalan haday madaxweyna yaashu sidaas u samaysan yihiin codna lagu soo wada doortay haduu inta uu wado baxo madaxweyne ku xigeenkii iyo madaxwenihii intay is qabtaan xaafad magaalada dhinac ka dego oo uu yiraahdo aniga iyo isaga isku coda la nagu soo wada doortay, xilna igama qaadi karo ilaah baan idinku dhaarshee wax ka khatar badan maajiraa dalka doorasho maa loo dirayaa dib maa loogu dirayaa, yaa kala saari kara baarlamaakii wax kala saarayey waa laga tegay, cod iyo qofaan ka dhignay shacabaa weliba la yidhi iyagaa dooranaaya meeshaas waa kud ka carar waxa kale carar waaye, wax gedgedi ha kula gedoontii lasheegi jiray waaye sidaan wax u rogrogeynay dalka meel khatara inaan u wadnaan ani u arkaa, anuu **waaxaan qabaa oo aan input keyga ku darsanayaa madexwenaha waa lasoo dooran karaa si toosa, raysal wasaare isagu soo magacaaban karo isaguna uu xilka ka qaadan karo baarlamaanku uu xilka ka qaadi karo almiino aan samayno,** si is qab qabsiga Raysal wasaare iyo madaxweyne hadba meel buu maraa raysal wasaarehee anagoon cidna ugu daraanayn madaxweyne iyo raysal wasaare aan isku qataarmaynin aan samayno waan samayn karnaaye ee aan ka dayno madaxwene iyo ku xigeen shacabku ay soo doorteen, maxadweynayaalkii hore ee dalka soo maray ayey qaarkood dawladii hore xaafadaha intay degaan hebelow kasoo baxay guriga lahaayeen bal madaxweyne la soo doortay oo gobolka banaadir u dhashay ninka rajiiminkaraa waa kee, waar runta aan ka hadalno dalkan aan khatar ka badbaadino, xildhibaanka waxaa loogu tala galay dastuurkuna sida uu tilmaamaayo inuu ka shaqeeyo waxa danta dalku ay ku jirto, hadii nin reer baydhabo ah madaxweyne ku xigeen loo doorto shacabka soomaaliyeed ay doortaan uu baxo baydhabo iska fadhiisto uu yiraahdo ani iyo isaga waa is qabanay, qaybtan anaa xukumaaya qabtaasna isagaa xukumaaya khasaare ka weyn maajira, waxaan awoodnaa inaan niraahno madaxweynaha waa lasoo dooranayaa raysal wasaaruu soo magacaabanyaa isagaana xilka ka qaadi kara baarlamaankuna wuu ka qaadi karaa waan awoodnaa oo raysal wasaaraha awoodiisa sidaas u khafiifino inaan dalka u samayno laakiin labo nin oo isku awooda miyeydaan ogayn deni iyo karaash inay isku dhacaayeen kan markuu baxo kan kale xilka ka qaadayey kuwaa kale waan wada ognahay runta hadaanaan ka hadlayn, nimanyahow dalkan aan u naxno waxa aan samaynayno wax dalkan u roon oo ka bixin kara dhibaatada ha noqoto, doorshada nidaamaka ay u dhacayso inta badan waa la sheegay,

- Qodobka 50 lagu sheegay waxaa soo saarayaa sharcigii doorashada baarlamaankaa soosaaraya, laakiin dastuurka hadii aad rabtiin inaad ku muujisiin waa inaad tiraahdiin dalkan wuxuu galayaa doorasho asxaaba xisbiyo ah ama labo hanoqto ama saddex hanoqoto ama afar hanoqoto intii la isku raaco ayaa galeysa, inkastoo marka ugu horeysa xisbi qaran inuu noqdo ay ka horeyso in dawlad goboleedyada iyo degmooyinka iyo gobolada lagu tartamo wixii ku tartami lahaa sheeg inta ku qoran, waxaad ka bilowdeen in baarlamaanka la dooranaayo madexweynaha la dooranaayo, madaxweynayaasha deegaanada oo hogaamiye aad u bixiseen la dooranaayo, hadana la dooranaayo golaha deegaanka la dooranaayo golaha deegaankaa ugu horeeye xisbiyo iyo ururaa ku tartamaaya, ururadu markay ku soo tartamaan haddana doorashadii dawlad goboleedyadaa ku xigta ka dib hadana xisbiyo ku tartamayaan markaasuu xisbi qaran soo baxayaa waa inaan qaabkaas u qornaa oon u qaabaynaa , hadda waxaa moodaa khamiiska waxaad ka bilowdeen lugaha

koraad u wadiin walaalayaalow indima dhaliilayno wax fiicanaa soo qabateen guddiga sharafta leh, laakiin cutubkan waa isku dhex yaacsan yahay ilaa iyo hadda inkasto noo dhiman yihiin dhawr qodob waa isku dhex yaacsan yihiin for example "xubnaha u tartamaaya golaha shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ee Soomaaliya waxaa cod qarsoodiya ku dooranaaya muwaadiniita soomaaliyeed" **iyagoo ku imaanaaya nidaam xisbi inaad intaas ku dartiin baa idinka dhiman waa inuu nidaam xisbi ku yimaadaa**

-
- Qodobka 51(6): sidoo kale aqalka sare sidoo kale ee hogaamiya yaasha aad la baxdeen magacan anuu waxaan ka jeclaan lahaa governor in la yidhaahdo lagana joojiyo misalan labada gobol ee hadda hirshabeele ka tirsan tahay gobol walba wuxuu leeyahay governor gudoomiye looma baahna, for example gudoomiyaha gobolka shabeeha dhexe iyo gudoomiyaha hiiraan looma baahna mar hadii waxa la dooranyaaba governor yahay lakiin golihii deegaankaa la dooranaayaa magaalooyinkii jawhor, hiiraan, buulaburde governor na waxaa ka ah ninka hadda madexweynaha ka ah laakiin asaga ruuxiisu wuxuu ku imaanayaa nidaam doorasho concell hadii isaga ladoorto oo dadkii shacabku isaga u doortaan hadhaw wax xilka ka qaadi kara malaha in dalka doorasho la galiyo mo ogiye waa in 'Council-ka' la doortaa.

- **Qodobka 52(1)** muddo xileedka meesha ay yiraahdeen 5 sano, ani waxaan ka dhigi lahaa 6 sano waayo dalkani dal burburay waaye marwalaba waa uu u nugul yahay inuu doorasho inuu galo 5 tii sano ama 4 sanaan dhib ku qabnaa, labada sanee ugu danbaysa waa tartankii doorashada iyo campaing waxa la shaqaynaayaba waa hal sanno hadii 5 sano lagadhigo hadii kelana oo 4 sano ay tahayna hadaa campaing lagu jiraa, campaing kii yaan hada wadnaa, labada sanee ugu danbaysaan ku jirnaa, **markaa ani waxaan qabaa labada sano oo si xasilooniya loo shaqaynayo si loo helo in 6 sano laga dhigaan qabaa meesha aad 5 san ka dhigteen**, aad baad u mahadsan tihiin.

5) **Xil. Bashir Abdi Mohamed Mohamud:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, Guddoonka labada aqal, xilibaanada labada Gole dhamaan waad salaamantihiin, iyo Guddiyadeena dastuurka. Waxaan marka hore u mahadcelinayaa laga soo bilaabo madaxda ugu sareysa ilaa iyo dablayaasha, ciidamada qalabka sida, oo marwalbo heegan u ah, dalkaan daryeelkiisa, Qoloda u cararta waxa aanu ka cararno, dabbaa dhacaayo anu waan ka cararnaa ayaguna wey usii cararayaa, qarax baa dhacaayo inagaa kasii carareyna, ayagaa usii cararaaya, waxey mudan yihiin amaan iyo bogaadin, taa markaan kasoo gudbo. arimaha Baladweyne na waxaan leeyahay, Allah fududeeyo.

- Cutubka aynu ka hadleyno ee 4aad, markaan usoo noqdo, waa Cutubka ugu muhiimsan caam ahaan dastuurka oo dhanba, inta kaleetood waa "Skeleton" waaye, ama shaqooyinka sida loo qabanaayo hanoqoto, ama hanoqoto, een xaquuqda uu qofka xaq u leeyahay hanoqoto, dastuuriga ah, Cutubka ugu siyaasada badan ee ugu mashqulsan Cutubkan waaye. Cutubkaan wuxuu saameyn ku yeeshay Cutubkii 6aad qodobadiisa, 60, 63, 64 , 71, 72, Wuxu kaloo Cutubkaani saameynayaa, Cutubkii 7aad, 8aad, 10aad, iyo 12aad, waxaa la keenay, 15 qodob oo cusub, hal qodob oo ah 47 isna ah waala tirtiray, ee waxa lagu saleeyay, shirkii ay qaateen Golaha wadatashiga qaranka, markaan qodob qodob ugu soo noqdo, **Qodobka 47 waxaan ku talin lahaa in meeshiisa lagu soo celiyo**.

- **Qodobka 48** waxaan ku raacsanahay, waxaa ka hadlay Dr Barako marbuu ka hadlay, xilibaan kooshin waa ka hadlay, xilibaano badanoo kalaa ka hadlay, oo u daauud ka mid

yahay in awooda dib loogu soo celiyo, Golaha Shacabka, inagu waxaan u sameysan nahay, saynu wada ognahay, sidax awoodood. Sharci dajinta oo aniga ah, fulinta iyo Garsoorka, Garsoorka shaqadiisha waa wataa, fulintu ayagaa awooda iska leh, waxaan rabaa inaan kor istaago, Fulintu markeynu niraahno, sharcigu awood buu siinayaa sharcigu, iyagaa wax badala, iyagaa Golaha Waaziiradda magacaaba. Iyagaa safiirada magacaaba, iyagaa talyaha magacaaba, laakiin inaga Golaha Shaacabka waajibkena waxa weeye, in aynu ku ilaalino fulinta, inanay ka leexan wadadii loogu tala galay, inaanu u adeegsanin awoodaas uu sharcigu siinaayo, si ka duwan sharciga, aniga waajibka ina saran waxa weeye, inaan fulinta ku ilaalino, oo 'Check and balance' waxaa jira isku milan aynu isku milannay, inagii iyo fulintii, isku milankaas leysku milmay, maaha wax hadeer bilowday, waxey bilaabatay, maalintii la yiri xilibaanku wazziir ha noqdo, ilaa manta isku milanay, marka 50 xilibaano ay Golaha Wazziirada soo fariistaan, misna Golaha shacabka go'aan ku gaaraya, 50 kalane ay sugayaan in ayaga 'Reshuffle-ka' badalaan, een taa waxaan ka oranaya, arinta ah, awooda wali waxan kor istaagaya, markaan Madaxweynayaasha ka hadlayo, awooda Golaha Shacabka, markaan kusoo noqdo.

- **Qodobka 51aad** ee ka hadlaaya Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, Hogaamiye iyo Hogaamiye ku xigeen, "narrative" ka ugu weyn markaa tiraahdo, maxaan ugu guureynaa system kii ay inagu heysanay, oo ugu guureynaa kan cusub, "narrative" ka ugu weyn weeye waxa is qabta, Madaxweynaha iyo Raisal Wasaaraha, waxaa is qabta, Madaxweynaha iyo Raisal Wasaaraha, "narrative" kale kasii fog maba jira, waxeynu ognahay awooda waxaa gacanta loogiliyay, hal qof, meeshay nagaarsiisay, waatey maanta taagan nahay weeye, een markeynu niraahno Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, aynu soo qaadano, 'assumption' sameyno, anagoo qaadanay system kaasi, Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, aynu qaadano, xagee buu xageebuu nageynayaa, waad arkeysaan suudaan waxa ka dhacaaya, dhibka ka dhacaaya, waa Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen waaye, daahir jeesow waxa uu ka hadlaayay, waa Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, Sounth-Sudaan waxa ay u dagi la dahay, waa Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, dhibkaasi "eminet" ee socda ee la arkaayo, oo inoo muuqda, markeynu usoo dariseyno 'Prime Minister-kii' markii Dowlad Parliamentry, ay tahay, waxeynu ogsonnahy ayna inaga qarsooneyn, awooda uu leeyahay, Golaha Shacabka, in 7daqiiqo lagu direy nin Reysal Wasaara ah, xal beynu heli karnaa markaa, hadey wax dhacaan, dalkaan wuu badbaadayaa, taa waxaan ka leeyahay, waxaa qabaa ra'yi ahaan, in system keynu ku soconay lagu wado,

- een qodobka ah 51aad f (2)xubnaha ku tartamaaya Golaha Shacabka, hala saxo, oo halagu soo sameeyo deegaan doorashadooda, kuma qorna, siday ugu qoran tahay, Golaha Aqalka Sare, caqabadaha yaalay, oo marwalba meeshaan noo yaalay, dastuurka waxa weeyaan, caqabado farsamo iyo caqabado siyaasadeed. Qodobkaan 54aad wuxuu koobayaa, caqabadihii siyaasadeed, oo u baahan dhamaantood in heshiisyo, 'Challenges-ka' ugu badan ee loo baahan yahay in laga gaaro go'aan, oo leysla qaato oo saan loo bisleeyo, awooda wadatashiga, awooda qeyb siga , kheyraadka, cadaaladda, caasimmada, waxaa soo dhan waxey u baahan yihiin wadatashi , go'aan siyaasadeed oo loo dhanyahay, meelbeynu ka boodeynaa anaga kaligeynu soconeyno masoconeyso, Qodobka 54aad hadada fiirisaan, ee dastuurkii aynu qabnay anaga, Dowladda federaalku wuxuu siinayaa afar awoodood, weynu wada ognahay, Arimaha dibada, Arimaha Gudaha, eena maxuu kuu qadaraa lacagta, "Immigration" ka wixii la mid ah, laakiin qodobka 50aad, ee dastuurkeynu ku dhaqanno wuxuu sheegayaa, wixii siyaasiga ah waalaga wadatashanayaa, geed dhow iyo geed kor waa loo koraayaa, waxa siyaasiga ah waaxaa loobaahan yahay inlaga wadatashto, een dastuurkaan ilaa Somaliland ay kasoo xarooto waa ku meel gaar. Yay naan iska

dhaadhacsiin riyo kaleeto, hadii Soomaaliland ay timaado, iyada laftigeeda siyaasadaadas waxey, keeneysaa, saameyn iney ku yeelato dastuurka lagtikiisa, marka waxaan kusoo gabagabeynaya, hadaan la helin xal siyaasadeed, oon loo helin dhaamaan arrimaha aynu soo sheegnay, dastuurkaan wali qabyuu ahaanayaa, siyaasadaas, iyaduna waxaa lagu gaarayaa, iyadoo qolo walba la gaarsiiyo, oo codkooda ay ku darsadaan. Asalaamu Caleykum Waraxmatulaahi.

6) **Sen. Sareedo Mohamed Hassan:**

Bismillaahi rahmaani raxiim, alaabtaan isku kariska ah meel aan ka bilaabaan garan la'yahay, Baarlamaan baa halkaan jooga, dood baa noo socotay, "mandate" baan leenahay Xildhibaano ayaan nahay, xalay wuxuu Guddoomiyuhu daah furay barnaamij kale oo isna Baarlamaan ah oo na garab socda, latashiga dadwaynaha, yaa in dastuurka inta aan la furin la sameeyo, yaa in aftida la sameeyo, dastuurkaan dood baa ka socotay, maqaamka muqdisho waxaa la sheegay cutubka 5aad in lagu cadayn doono, waa lasoo hormarsaday, waar magaaladatan daalan, waar magaalada Baarlamaankan aynu ku shirayno Baarlamaankiisa kale ay xaarka dameeruhu yaalaan, oo waxa weeyaan maalin illahay keeno qaraxyada ay ka dhacaayaan oo anaga xildhibaaada ah aan shalay mid ka badbaadnay, maqaamkeeda maxaa loogu ciyaarayaa, maxaa loo hagar-daamaynayaa, waar bahalkaan doolka ah ee xalay la furay jawaab maleh waad u jeedaan oo waad wada gasheen, jawaabtu ma cada, bari wixii la ii sheegaan qaadanayaa, 'why' Baarlamaanka dood looga garab furay, Dastuurkii waa furanyahay doodiisii xildhibaano ayaa ku jira, ma anagaa waxaan nahay dad aan lagu kalsoonayn, oo aan ka gaari karin go'aan Dastuurkaan, doodii way socotaa, ma dhanka ay usocoto ayaa wuxuu yahay dhan aan la rabin, ma wixii dadku rabi lahaayeen oo dadka u roonaa baa la aaday, why looga garab furay Dastuurkii oo furan oo doodii Baarlamaanka iyo xildhibaanadu socoto maxaa doodaan kale looga garab furay, 20 su'aalood baa lasoo gurtay oo su'aalaha qaarkood sida maqaamka caasimadu aysan ku jirinba meeshaan, oo la ciyaarsiinaayo oo maalinba meel la gaynayaa, caasimadaan wayba daashay, 6deeda milyan baa cashuur ahaan iyo "revenue"ba uugu filan, halaga guuro, ha nasato, wax loo haayo ma jirto, caasimadu inay nasatay u baahantahaye buuqaan iyo ninkii rabo haka nasato, anaga haweenka ah, qodobkii noogu jiray ee aaan mooshinka ka keenay markii la arkay inuu soconaayo, markii la arkay gabdhuhu inay soo jeedaan, markii la arkay gabdhuhu inay midaysanyihiin, markii la arkay maanta codkoodu inuu mid yahay halkanaa lasoo dhigay, mooshin baa ka yaala hawshiisii way socotay, qodob doodi ka taagantahayba maaha, 90 xildhibaan oo rag iyo dumarba isugu jira ayaa saxiixay, why loosoo dhigay su'aalaha, teeda kaleeto su'aalahani waa "servey" ahaan ee maahan "poll", hadoo "poll" yahay halkaasaan ka arki lahaa, 90%, 60%, "campaing" ayaan u gali lahaa, meeshuu ii marayaan arki lahaa, laakiin barito Guddigaan habeenkii markuu seexdo, 6 saac oo habeenimo soo daynaayo qaraaraadka iyo aaraada iyagu ay rabaan, sideen u aaminaayaa aniga inay saxantahay fikirkooda halkaan boqolkiiba maxay baa ka helay sideen ku ogaanaaya, bari saw ima dhahayaan bulshadaa soo dhiibatay, waxaan idiin cadaynaayaa gabdhaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku jira inay Muqaadaceen Dastuurka, inay Muqaadaceeyeen oo aanaan ka shaqaynaynin oo aanaan u codaynaynin oo aanaan la jirin, waanan ka baxaynaa gabdho, banaanka ina geeya dood baan ku qabsanaynaa banaanka, halkaas ayaan ku cadaynaynaa in aynaan wax shaqo ah ku lahayn dooda meeshaan ka socota, aad ayaad u mahadsantihiin.

7) **Xil. Rooda Carab Sharif Cabdi:**

Salaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarkaatuhu, xildhibaanada sharafta leh, Guddoonka uu mahadsanyahay inaa ayido inuu ii siiyey.

Mooshinka gabdhu keeneen, gabdho badan baa dood ka qaba "reason" ka ay ugu qabaana waxay tahay 30% anagu ma diidanin, gabadhuhu waxay is kor saareen hooyada Soomaaliga ah ilmaha ay dhasho inuu jinsiyada qaato oo dastuurka lagu qoro.

Gabadho badan oo xildhibaano iyo senataro ah oo arrintaa ku raacsanayn baa jira, markaa mooshinkaa waa in la ogaadaa.

Waan raacsanahay kootada 30%, laakiin anaga lanama afduubi karo intay ku keeneen in leeg ayaan ku diidanahay. Hooyada Soomaaliga ilmaha ay dhasho Aabo ayaa lagu abtirsadaa jinsiyada buu ku noqonayaa Soomaali, waxaana soo socda sharciga jinsiyadaha sida uu u qaadanayo dhalashada, laakiin hooyo Soomaali ah ilmaha ay dhasho ee la leeyahay Soomaali baa laga dhigayaa kuma raacsanin anagu.

8) **Sen. Zamzam Dahir Mohamud:**

Bismillaah Asalaamu Caleykum. Wax yar, wax yar aan is dajino, meeshaan is faham waa yara ka dhacay, een wax yaraan rabaa inaan cadeeyo, gabdhaha muushiney geeyeen waa sax, een xuquuqda gabdhaha soomaaliyeedey u doodeen waa sax, xuquuqda loodoodaayo xuquuq Baarlamaanka kaliya ku ekeyd maaha, %30 aan raadineyno anaga wuxuu ahaa, mid Dawladda dhan saameynaayo, oo boosiishanada leys ku magacaabo, shaqaaleynta, dalacsiinta, dhinackasta taabaneyso, horta mahaan wax gabdhaha Baarlamaanka ku jira kaliya, ay ku rabaan in Baarlamaanka lagu soo galo, Baarlamaanka waxba kama faa'idaan, waxna kuma haayaan, laakiin waxa aan u doodeynay oo mooshinka loo qoray, gabdhaha Soomaaliyeed, ee dhalin yarada ah. ee jaamacadaha ka baxay, ee dhibka ku heysta xafiisyada Dowladda iyo kuwa 'Private' kaa ay ahaayeen. Marka annaga waan ku hishiinay inaan dastuurka gabdhaha ay wax ka ansixin, oon banaanka ugu baxno, laakiin xiligeedii lama gaarin, ansixinta markey timaado, qododeenii aan qoronay iyo mooshinkii aan qoronay lagu soo dariwaayo, markaasey gabdhah Soomaaliyeed bari ka yihiin, banaanka ka istaagayaan, ee Baarlamaanka ku jira oo labada Aqal, aysan cod ku laheyn, laakiin hada maaha raali ahaada, doodiiyaa noo socoto, hala gaaro, markii dooda Guddiga kasoo shaqeeyo, oo codeynta lagaaro, haduu alle idmo aadaa u mahadsantihiin.

9) **Xil. Omar Hanshi Ibrahim:**

Bismillaah Gudoonka golaha shacabka iyo aqalka sare, dhamaan labada Gudi waan idin salaamayaa. Marka u horaysa horta waxan rabaa wax yar inaan second gareeyo Senator Sareedo arinta sheegtay, Baarlamaanka "Constitution review" marka lamaraayo "process" baa jira, 'Constitution' ka marka lasoo diyaariyo oo uu "draft" yahay oo Baarlamaanka la keeno Baarlamanka waa in loo daaya, marka Guddiga waxan ay ku garab wadaan ee ay leeyihiin "consultations", meelaha malin walba aan maqlayno "civil society" ayaa lala kulmay, dad kala aragtidooda la dhagaysanayaa, culimadii aya lala kulmayaa, odayaashii aa lala kulmaaya, arintaa iyada ah waxay ahyd mar hore in la sameeyo. Marka "product"ka la keeno Baarlamaanka "draft"ka la keeno Baarlamaanka waa inuu Baarlamaanka isaga uu tafatiraa oo uu soo diyaariyaa, markuu Baarlamaanka diyaariyo kadib uunbaa dadka loo gudbin karaa oo uu Barlamaanku go,aan ka gaadho,

Intii looga codaynaayana waligiis “draft” ayuu ahaanayaa. Marka gadaal way ka imaan kartaa aragtida marka hadhaw dambe codayn hadii la idhahdo shacab weynaha oo la dhaho waxaa la aadaya “referendum” markaa iyada wa la waydiin kara dadkaa iyada waa looso bandhigi karaa , war Baarlamanka waxan ayu idiin soo diyaariyay waa “draft document” in loo codeeya la rabaa shacabkaana u codynaya, markaa iyaga dadka waa laga siin karaa “civic education” laakiin waxan la isku garab wadaayo oo Baarlamaanka kalana iska socdo oo maalin walba “consultation” soo samaynaayo, arintaa iyada ah waa arin aad u khaldan ayaan umalaynayaa, “process”ka ayay baal marsantahy, “position review process” waa “very clear” sida “constitution”ka ku cad bahashan anaga hanaloo daayo, wixii lagusoo dari karo afkaar iyo aragti waa lagusoo daray, anagaa inan tootosino nalaga rabaa, markaas kadib aan dadweynaha usoo bandhigaynaa, markaa Guddiga waxan ka codsanaynaa “parallel process” kaas ay nagu garab wadaan ha joojiyaan. Intaas iyada ah waxaan uga baxayaa arinta aan ku second garaynaayay Senetoradd a.

- Hadii aan usoo laabto hadal jeedintayda manta, waxaan leeyahy horta “constitution review”ga cabaar buu soo socday, waa maxa la dhihi jiray “draft” kan “project” ka iska soo noqoday dhawr sanno ayuu iska soo jiitamaayay hadda waxa nasiib u yeelanay inaa annaga gacanta nalooso galiyo ladhaho go’aan ka gaadha, “constitution” kan inaan dhamaystirno waa muhiim, wuxuuna laakiin noqonaaya “constitution” rasmi ah markii afti loo qaado, aftina waxa loo qaadi karaa markii wadan kan oo dhan laga codayn karo oo laysla wada joogo’

- Somaliland arinteeda go’aan laga gaadhay oo meel walba wadanka la xoreeyay oo shacab weynaha loosoo bandhigi karo oo “referendum full” ah la qaadi karo markaa uunbu “constitultion” oo rasmi ah noqon karaa, intaas ka horaysa “draft” lee ka guurayna “draft” kle lee aadayna taas waxaa la rabaa inan isla fahano.

- Qodobka 51(4): Mida labaad qodobka hada cutubka 4aad waxaa waaye qodobada ugu ‘Contetious-ka’ eh waa waxa la dhahy waa “system of governance”ka cusub ka guuritaanka “prime minister” loo guuraayo “presidential system”, aniga waxaa leeyahay hortaa dhawr sanaan kusoo jirnay system kaas in la guuro oo system kale oo cusub la aado wax dambi ah maaha, constitution ka in la badalo qaaabka aan isku maamulaynay ee dawliga ahyd aan badalno oo wax kale aan tijaabino horta dambi maahan.

- Dadka yaan laysaga dhigin wax oo diin ka bax ah laga dhigaayo yan loo qaadanin. System kaa cusub waxaa la rabaa in lasoo dhaweeyo uu noqdo madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen la dooranaayo waa system cusub waan ka war doonaynaa, kii hore wan tijaabinay wan garan karnaa faa’idada iyo khasaaraha uu lahaa marka system kale aan ka war doono waan is dhihi karnaa. markaas arinkaas oo laga dhigaayo dembi in meesha in laga saaro waa muhiim, system ka hala soo dhaweeyo waxaan rabnaa mar walba madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen oo iskula joogaayan sharci iskula joogayan oo la garanaayo shan sano la isla soo dooranayo ninkii oo madaxweyne ku xigenku aaminsanyahy shacabka soo doortay shacabka ayu u taaganyahay oo u adeegaya oo mar walbana asagu uu garanaayo shaqadiisa waxay tahy inuu yahay deputy president oo ‘clear role’ leh waxaa la dhihi jiray, waxaa kaloon rabnaa inaan ogaano, dadka “mis information”ka abuuraayo in meesha laga saaro oo dhahaayan hada marka saa loo bedelo madaxweyne Xasan Sheikh iyo Xamza Madaxweyne iyo Madaxwayne ku xigeen noqonaayo, arintaas iyadana waxan rabnaa “mis information”ka dadka halaga daayo, dad masuulina ayan nahay dadka waxaa la rabaa inay

fahmaan "constitution"kaan markaa marino, wuxuu dhaqan galayaa maamulka cusub, markaa qaadan mamulka kala waixii ka dambeeyu qaadanaa. Meel ay ku qorantahy toos ayuu isku badalayaa systemka majirto, marka "mis information"kas waxan arkaayay dad siyaasiyiin iyo aqoonyahano oo dadka ku marinhaabaabinaya oo meelahaa wareejinaya, taasna inaan ka waantowno way iska fiicnaan lahayd.

- '**Plitical disposition'** cusub hadii la qaadanayo mar walba wuxuu iska lahaana caqabadihiisa laakiin in laga war doono waaye marka hore, kedib waa la "review" garayn karaa, waxan maaha aayad quraana waa sharci waa heshiis bulsho marka aan iska tijaabino aan ka war doono wan badali karnaa.
- Dadka dhahaaya 4.5 iyo qabaa'ilo ayaa wax waayaya iyo qabiilaa meeshan iska lahan jirtay aa wax waynaya, taa iyadana waxaan leeyahay waa 'misleading information' wadankan waxaa la rabaa dad masuuliyiin ah oo u adeegaaya qabiilkay doonaan ba ha noqdaane in la helo oo la soo doorto codkooda iyo afkaartooda ay galaan oo ay ku imaadan xisbiyo oo xisbiyadasi afkaartoda ay bulshada uga gadaan kadib dadka ay iyagu saa ugu adeegan qabiilku noqdoana muhiim maaha, shacabka ruux dhex gali karaa la rabaa oo meel walibana ka ololayn kara kasoo bilawata Somaliland, Puntland, Jubaland, Koonfur-galbeed meel kasta gala afkaartisa ku ololeeya oo dadkiisa ay ku dooran karaan, qabiil iyo waxas yaan lagu salynin. waxay gaadhay hada heer xataa shaqooyinkii dawlada manta la dhahaayo kursigaas ama jagadaas iyada ah qabiil hebel baa iska leh, dadka maalinba maalinba ruux loo magacaabay, marka arintaas iyada ah inaan ka guurno oo shacabka aan afkaar ka gadi karno oo dadka shacabka aan u adeegi karno, aan dareemi karno, anoo soomaali ah inaan masuuliyada wadankaas, dadkaas iyo diintaas ay iga saarantahay, markaa arintaas iyada ahna waxaan leeyahay, qabiil hebel ayaa wax waynaaya waa arin oo iyadana aad iyo aad u ah, marka waa inaan iyadana ka guurnaa, dad baa "narrative" wareejinaayo oo dadka aan aniga ka soo jeedo camal, constituencyga aan aniga kasoo jeedo waxay ku leeyihiin "prime minister"ka ayaa nalaga wareejinayaa anagoo ku fadhina ma iska dhiibaynaa. Waar prime minister adi yaa kuu qoray, madaxwayne nimo maad raadsatid, hadii marba qabiil la isku dooranaayo imika oo qabiilkaaga lagu ololaynaayo maad madaxwaynenimo raadsatid uu furanyahaye "is an open contex" cid walba ha ololayso, waa la is xulufaysanayaa waa laysku biiri karaa, shaqsiyaad ayaa is qaadan kara oo saaxiibtinimo iyi isku afkaar isku qaadan kara mar qabiil ayaa is raaci kara, oo kasoo saari karaan dad quman oo wadankan u adeegi kara, marka taasna waxaan leeyahay dadka yaan la "mislead" garayn constitutionkana fursad hala siiyo aan ka wardoono, haduu caqabad yeesho oo hadhow " challenge" aan lakulanana fursad ayay u helayaan dadka anaga naga dambeeyo inay wax ka badalaan haduu Alle idmo.

- Qodobka 56(2): Mida xisbiyada waxaan ka leeyahay, xisbiyada waa muhiim in axsaab la helo, meesha laakiin labo xisbi la leeyahay, waa in laga dhigaa axsaab oo ku imaaanaya shuruudooyin, shuruudaha hala adkeeyo waa okay, shuruudahaa cidii kasoo baxda ayaa axsaab noqonaysa waa wax la garto laakiin labo xisbi ayaan ku gawracanahay 'I think' waa laga quruxsanyahay, democracyga ayay wax u dhimaysaa hadii marka waan soo dhawaynaynaa laakiin aan toosino dadkana "mis information"ka aan ka dayno, Guddigana fariintaa aan idiin faray fadlan qaata, "parallel process"ka naga daaya, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.

**10) Xil. Hassan Abdi Ismail:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, gudoonka, xildhibaanada labada aqal salaamu calayku wa raxmatulaahi wa barakaatu. waxaan ku jirnaa wali dooda cutubka 4aad waxaanad yara moodaa baarlamaanka labadiisa aqal waxyaabayo yaryar intaanan galin dooda ayaa

waxaan rabaa inaan hordhac ahaan u sheego marka koowaad horta Gola shacab kaliya Meesha mafadhiyo laba aqal baan ku fadhinaa xildhibaano badan oo gola shacaba soo istaagaya markay qobobo hadlayaan marwalba gola shacab ka hadlaya arin dastuuraa laga hadlayaa laba aqalbaana fadhiya markaa arintaa marwalba in la saxo oo xildhibaanada kale aqalka sare ee walaalaheena inala joogana ay dhibsan in la saxo waa muhiim.

- Qodobka labaad baarlamaanka arrinta hadda laga hadlaayey ee shacabka consultation in la galiyo ama 'civil society' ama culumada habraac bay ku qorantahay, waxaan ummalynaa dadku inaanay aad ba u fahsanay habraacan ay akhrinayeen dib u eegista dasuurka. habraaca waxaa ku qoran in wadatashi la la yeelanayo dawladaha xubnaha ka dawlada Federaalka muddo bil ah bay soo haysanayaan xafiiska madaxweynaha, xafiiska raysal wasaaraha, gudoonka, civil society kuli iyo bulshadaba markaa habraaca waxaa ku qoran in la dhaho haddana wax waa la quray waxaan u malaynayaa dadku rayigoodii uubay ka dhiibanayaan rayiga markay soo dhiibtaan waa la soo ururinayaa aarada meesha laga dhiibtaa lagu soo wadadarayaa marka akhriska ugu danbeeya la keenaayo markaa habraaca dastuurka waxa ku qoran aad inaan loo fahmin ayaad yara moodaa dadka qaarkood ayna fahmin xildhibaana ah markaa anuu waxaan qabaa guddigu shaqo fiican bay ka wadaan wada tashiga hala badiyo qof walba oo soomaaliya oo lagaari karo talo inuu ku yeesho waa muhiim waa heshiis bulsho qof walboo soomaali ahi xaq buu u leeyahay dastuuka dee baarlamaanku wax ka badalis wax ka dhimis wax ku daris wuu leeyahay, arinta kale muhiimka ah dib u eegista dastuurka iyo heshiiska madasha dadka uma kala soocna iyadana heshiiska madasha waxa hadda ka hadlayno ee meesha ku qoran hal qodobaa cutubka 4 aad baa kaga jiraba, cutubyada kale ee saddexda aynu soo marnay heshiika madashu kuma qorna waan dib u eegista dastuurkee ogaada cutubka 1aad iyo cutubka 2aad iyo cutubka 3aad heshiiskii madashu hadda soo gashee qodobadii ilaa lixda ahaa wali ma imaanin ba hal qodobaa kaga jira oo kan hadda u dabeeya ahoo kan hadda ku jirna ah cutubka 4aad ah, markaa dib u eegis dastuuraan ku jirnaaye heshiiska madasha tan in looga hadlana iyadana meesha kum jirto markaa dib u eegista guud ahaan 15 cutubaa dib u eegis lagu samaynayaa ama qabyo tir lagu samaynayaa ayey tahay macnaha hawsha meesha taalaa, intaa markaan ka baxo.

- Qodobka 48(4): Qodoba badanoo Wadan kani waa dadan Federaal ah waxaanad yara moodaa qaab qoraalada qaarkood u dhacayaan in xaga center ka loo guurayo oo Federaaliisamaka la yara daciifinayo tusaale waxaa lagu soo daray dawlada Fedaraalka Soomaaliya ah ayaa ka masuula xaqiijinta in dawlad goboleed kasta ay dhaqan galiso nidaam dimoqoraadi ah oo waafaqsan dastuurka, dawlada Federaalku iya laftigeedu haday nidaam dimuquraadiya oo waafaqsan dastuurka ay qaban weydo iyada yaa ka masuula macna yaa la xisaabtamaya iyadada laftigeedu meesha kuma cadda **anigu waxaan qabaa qodobkaasi in meesha laga saaro oo sidiisa hore loo daayo**.

- **Qodobka 47** oo ah shuruucda ku saabsan xisbiyada diwaangelinta Doorashooyinka heerka dowladda Federaalka ah iyo guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya" **golaha shacabka meeshaana in laga dhigo labada aqal qodobkaana sidiisa loogu soo celiyo laga tuurayna marka hore labada aqalna laga dhigo, iyadana qodobkaas ayaan qabaa**.

- waxaad yara moodaa cutubkan ama qodobkan qodobada awooda baarlamaankiyo kuli xiran cutub cusub ah laga soo dhigay oo qoraalkiisu cusub yahay nidaamka doorashada iyo hawshaasi oo la rabo in laga guuro parlamenterian dad badan hada waxay leeyihiin parlamenterian ma nihin ee wax isku dhex karisaan nahay waa sax aduun ka labo system baa ugu muhiimsan oo kajira parliamentarian ama madaxtooyo in la aado laakiise inagu waxaan nahay dal burburay oo la isku hayo oo dhibaato badani ka dhacday oo la isku celcelinayo waa lagu soo caano maalay maanta meeshaan joogno waa la arkaa,

- Hadii la guurayo wax yaabahaan aadka ula yaabo waxaa ka mida Madaxweyne iyo Madaxwene ku xigeen in la aado danbi maaha waa sax parliamentarian in la noqdo oo full parliamentarian la noqdo oo xisbiga ugu tiradabadan raysal wasaaraha helo dalka uu hogaamiyo, madaxweynahuna ceremonial noqdana iyadana danbi maaha labadaas labada qodabee ugu muhiimsan ama parliamentarian in la aado ama in madaxtooyo la aado laakiinse.

- waxa aad ula yaabaysaa doodaha qaarkoodoo meeshan ka dhacayana aadka ula yaabaysaa marar qaarkood cadaalad baan ka hadlaynaa dad baa dulman baan ka hadlaynaa cudurka ugu badan ee soomaaliya hayana in lahaystaa la rabaa, cudurka ugu xun ee soomaliya haystana waa 4.5 waxa raysal wasaare iyo madaxweyne madaxa isku gelinaya waxa baarlamaanka madaxa isku gelinaya waxa gudoonka madaxa isku gelinaya kuli markaad fiirisid waa 4.5, hadana waxaan leenahay 4.5 ayaa hoosta lagu yara haystaa kuli dhamaan waxna aan qalno midiyana aan qarsano, 4.5 iyo xisbi iyo doorasho qof iyo coda isma qaataan hadii la guurayo waa la wada guurayaa nin walba nasiibkiisa wuxuu ilaahay siiyo oo codkiisa uu ku heli karo raygiisa uu ku gato xisbi loo galayaa qabiilkaagu waa xisbiga aad gashay waaye afkaar baad aaday, afkaartaada ummada ka gado adoo xisbi ah ama 100 xildhibaan soo hel ama 50 xildhibaan soo hel ama 80 xildhibaan soo ama 275 soo hel adoo xisbiya laakiinse 4.5 ayaan ilaashanayaa waana la guurayaa meeshaasi isma qaadanayso, hadii la guurayo waa lawada guurayaa 4.5.

- qodobka ugu xun tusaalaha ugu yar hadda maanta labay ku fadhiyaan gudoonka aduunka meel ay ka jirto aqal intay laba aqal wada fadhiistaan 6 gudoomiye ay soo fadhiistaan oo wax wada shir gudoominaya aduunka meel ay ka jirto lama arag 6 gudoomiye ee guudoonkana 6 duba 4.5 bay ku fadhiyaan midkamida in badanbay doodahani kadhacady mid kamid ah haduu nin xildhibaanihi mid si uu yara jag kasiiyo ama uu wax waydiiyo , midkaloo ina adeerkiiyaa meeshaas ka soo boodaya maxaa laga rabaa gudoomiyihii buu leeyahay wayna dhacdaa in badan bay ka dhacay waanad ogtihiin waanad garanaysaan waxay noqotay macnaha la caadaystay markaa anuu waxaan qabaa qodobka ugu xun hadaan u hiilino oo soomaali wanaageeda aan ka shaqayno oo doorasho qof iyo coda aadno oo afkaar aadno oo labo walaala ah ay soo baxaan oo ay ku guulaystaan xisbiga oo saddex walaala ah afar ilmo adeer ahi ku guulaysan karto inaan kaguurno oo **doorasho qof iyo cod ah shacabka Soomaaliyeeed asxaab iyo afkaar lagu kalo baxo aniga fikirka aan qabo waa kaas hadii laguurayo in lawada guuro hadaan la wada guurayna sidii ay inoo ahaan jirtay hanoo ahaato dalkuna tartiiba ha u socdo qodobkaa intaasan kaga baxayaa.**

- Qodobka 57(1): tan gudiga doorshada heshiiskii hore waxaa ku qornaa lcc madasha waxaa ku qoran 15 buu ka kooban yahay state walba labuu keenayaa dawlada dhexena 3 bay keenaysaa waxaasaa ku qornaa ka dib waxay qabanayaan doorashada heer degmo oo june

heer state oo November ah madaxweynahaha, guddiga doorashada waxaan qabaa in labo heer loo kala qaado heer state iyo heer federaal uu kala ahaado taa halkasaan uga gudbayaa.

- Qodobka 56(2) qodobka kale ee axsaabta waxaan rabaa asxaabtu inay tiro bad naato oo lagu kala reebo xisbigu tirada uu helayo tiro in loo sameeyo oo lagu kala reebo ayaan qabaa iyadana mudanayaal iyo marwoowin anigu doodayda waxaan kusoo gaba gabaynayaa baarlamaan baan nahay anagaa xaq uleh marka umadda Soomaaliyeed afkaarteeda lasoo ururiyo dastuurka waxaan ku darayno iyo waxa aan ka dhimayno iyo waxa cusub ee aan ku soo kordhinaynaba anaga xaq uleh laakiin in shacabka Soomaaliyeed iyo qaybaha kala duwan ee bulshadaba in lala tashado oo aaraadooda ay keenaan oo guddiga fursad loosiiyo waxa aan kahadlaynaa waa dastuur xeer hoosaad maaha hindisa sharciyeed maaha waa heshiis bulsho wuxuu u baahan yahay turxaan bixin badan wuxuu u baahan yahay waddatashigiisa in la balaadhiyo, doodiisuna ay noqoto dood miro dhal ah oo waxa meeshan kasoo baxan wax Soomali oodhan ay kuwada qanacdo ay u hogaansato dalkana lagu wada maamulo taasaa inaan kawada shaqayno loo baahan yahay hadda sidaad arkaysid mudane gudoomiye tiradda xildhibaanadee meesha fadhiya waad aragtaa dadku inay iska kala tageen baad yara moodaa bal xildhibaanadu hasoo xaadiraan inatay doodu socoto.

11) **Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud:**

Mahadsanid Guddomiye ramadaan kariim. Ee dhamaan xilibaanaa iyo waan salamaa. Salaam ka dib, ee doodeena horay u galayaa waxaan rabbaa, ee Cutubka 4aad, maadaama aan joogno, sida laga warbixiyay, waa Cutubkii ee doorahooyin ka iyo matalaada shacabka iyo ka hadlaayay, waana Cutub siyaasi ah, wax badanaa lagu celceliyay, ee halkaan xilibaanadu ay ka sheegeen, waa halka Cutuboo madashu ay wax kasoo dhahday, xilibaanadu marku iney ka hadlaan, aragtidooda ay ku darsadaan, waxey latahayna halkaas dastuurni ay ku noqoto, oo waxaan rabnaa, ay masiiri ay ka noqoto, horo loogu gudbo, markaa doodeydan hore u galayaa.

- **Qodobka 48aad** farqadda(2) waxey leedahay, matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, heer kastoo Dowladeed waa iney ahata mid furan oo loo dhan yahay, muwaadinkasta fursad loo siinaayo, si madaxbanaan, oo aan takoor laheyn uga qeyb qaato xukunka, si toos ah ama si dadban, marka **waxaan soojeedin lahaa in halkaas lagu ekeeyo qodobka inta danbe laga saaro** sida madax labaad.

- **Qodobka 47aad** laga hadlo, nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyada ku qoran tahay, ee qodobkaan siduu u faahfaah sanyahay, Guddigu waxey soo qoreen, in nuxurkiisa lagu daray, Cutubka qeybihiisa kala duwan, oo u dhigaayo shuruucda kusaabsan xisbiyada diiwaan galinta doorashooyinka, heer Dowladda Federaalka, iyo Guddiga ee qaran ee madaxanaan ee doorashooyinka waxaa lagu qeexi doonaa, Shuruuc gaar ah, markaa ee in Baarlamaanka labadiisa aqalna laga dhigo oo sidiisa lagu daayo ama la faahfaahiyo meelihiin lakala galiyo qodobadii ay galeen lagu xuso, hada halkaan Cutubkey ku xusan yihiin unbaa ku qoran, marka meshii lagaliyay, qodob hebel halkaasuu galay, qodobadaasay kala galeen ayaan soojeedin lahaa, in aad loo cadeeyo. Ee

- **Qodobka 51(7)** Golayaasha deegaanka, duqa magaalada, iyo ku xigeenka duqa magaaladda, waxaa si toos ah, oo cod qarsoodi ah madaxbanaan, waxaa ku qoran, ee ku dooranaya, muwaadiniinta degan dagmooyinka dagan dagmooyinka shuruudaha cudbixiye**,**

**waxaan soojeedin lahaa marka, golayaasha deegaanka in la doorto, duqa iyo ku xigeenadiisa ay ayaga iska dhex doortaan ayaan soojeedin lahaa**.

- Ee ereyga waxaan kusoo noqonayaa 49aad ee (g) ee Dammaanad qaada in dhamaan qeybaha iyo **kooxaha meeshey ku qoran tahay, ururada lagu badalo ayaana asagana soojeedinayaa**.

- Qodobka 51(5): Ee sida laga hadlay **Hogaamiyaha iyo Hogaamiye ku xigeenka, erey ahaan waxaan qabaa in laga dhigo, ama "Governor" laga dhigo ama madaxa Dowladda laga dhigo, ama magac kaloo ku haboon oo "Alternative" loo raadiya**, oo wixii oo dhan ay Madaxweyneyaal iskuwada noqon.

- Mudada xil heynta oo ku qoran: **Qodobka 52(1)** na waan soo dhaweyneynaa, asagana dalkaan duruufaha uu ku sugan yahay, muda 5sano ah, inkastoo hada ay tahay waxa caadigoo wadama aduunka loogu nool yahay, shanta sanoo leys doorto, anaga duruufaha yago waa ka xoog badan tahay dal soo bur'bursanaa waqti dheer ayaan nahay, marka 4sano kasto in dooraha lagalo, waxey caqabad ku tahay waala arkay, dalka iyo duruufihiisa, hadeer uu Baarlamaan uu shaqeynaayo, 2sano ay dhamaatay, Dowladduna 2sano ay u dhiman tahay waad dareemi kartiin, wixiina ay bilow yihiin, marka in 5sano laga dhigo hadaan laga badin Karin, waxaan leenahay intahay waqti munaasaba shantaa sano.

- Qodobka 51(4): Ee waxaa soo haray qodobka ee xisbiyada, ee Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka, ee waaxaan soojeedinayaa, sida hada la soojeediyay Barlamaanka xilibaano bandan ka hadleen, wax xumaana kuma jirto in laqaato, si aan hada u taalno parliamentary ma nihin presedential ma nihin, marka lugaheena meel laskuugu duwa waan soodhaweynenaa,waana qabaa waana wax hada lagu caana maalay, dalka hada kuma cusbo, Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka, maxaa yeelay, maamuladaaba ku shaqeeya, oo hada maamulada dalka waxa ay ku shaqeeyaan, oo ah Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeen, marka in federaalkkina uu cudur ku jiro, maamuladiina ay caafimaad qabaan wax sax ah maahan, Madaxweyne iyo raysal wasaare isku qataaran oo aan kala baxeen, oo shuruucdooda ay is leeg yihiin, iyo awoodahooda, waxaa ka haboon oo ka system wanagsan, in dalka uu yeesho, wado iyo muxuu ahaa masuuliyad, hada halkaan dastuurka waxaa noogu qoran, Madaxweynu wuxuu leeyahay awood ah markuu raysal wasaaraha soo magacaabaayo, wixii ka danbeeya waa ka haraayaa, asagaana ku xusanoo, teeramkii waxaa la leeyahay Madaxweyne hebelaa ayaa la joogaa marka si taas loogu gudbo, oo masuuliyda dalka , qofka loo doortay iyo dadka loodoortay, Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka, ay u shaqeyaan ayna ka baxaan ,in is qabqabsi dalka uu ka her galo, cudarkaasna Meesha ka dhamaado, waxaan soo dhaweyneynaa inaan soo tijaabino, system kaas, oo aan aragno.

-

- Qodobka 56(2): Labada xisbi wey fiican yihiin, dalku inuu axzaam aado maxuma, laakiin waa in lacadeeyaa sidey ku imaanayaa, "treasury" lagiliyo, oo ay noqdaan , 2,3 iyo 4, waala noqon karaa, lakiin dalkaan duruufihiisa laba ka badan ma qaadi karo, doorasho markii laga hadlaayo, qarash iyo juhdi iyo waqti dheeraada, marka ee waxaan is leeyahay, iney ku haboon tahay lagu daayo labadiisa hadii la rabana waa laga badin karaa.

- Aad iyo aad ayaan u mahadsantihiin waxaan rabaa inaan cadeyno, latashiyada iyo howlaha socda, iyo dadaalada socda dastuurkey qeyb ka yihiin, qof kastoo soomaaliyaa xaq u leh

unuu talo ku darsado, aragtidiisa waa loobaahan yahay, Guddigana shaqadooda waan soo dhaweyneynaa, Baarlamaankana ayadoo ramadaan ah iney shaqeynayaan, dalkaan inuu dhaqaaqo oo hore u socdo, markaa aan iimaan sano, aan ka shaqeyno dastuurka, Baarlamaanka 11aad aa nahay, aragtideena ku dareynaa, Baarlamanada naga danbeeyana, codbey ku leeyihiin wax bey ka badalikaraan, aayad quraane maahan, marka aad iyo aad u mahadsan tihiin. Asalaamu Caleykum Waraxmatulaahi Wabarakaatuh.

**12) Xil. Omar Sharif Mohamed:**

Dhamaan xildhibaanada sharafta leh, Guddoonka labada aqal, waan idiin salaamaa waxaan idiin leeyahay Ramadaan kariim, horta inta aanan u galin cutubka 4aad waxaan rabaa maadaama ay hadeer ku dhanyihiin, labada aqal ay meesha wada fadhiyaan, waxa waaye cadaalada, markasta waxa lagu dhawaaqaa cadaalad, Dastuur, nidaam, horta Aqalka sare ma iswaydiiseen qof Banaadiri ah inaanu ku jiro, uu kamid yahay, malays waydiiyay, Aqalka sare ayaanba ku dhisnayn xalaal, sababtoo ah ani kuma jiri, xalaal miyaa marka, waxa aan akhrinaynoo dhan waa ruwaayad, waa ruwaayadihii aabahay samayn jiray oo la dhahaayay, riyo iyo waxaan haynaa ruwaayad la iraahdo maxaa hadhay oo laysku haystaa, sababtoo ah markii Aqalka sare la toosiyo oo qabaa'ilada Soomaaliya oo dhan u dhamaadaan, ayaa Dastuur iyo wax ka badalkiisa iyo Dawladnimo iyo nidaam laga hadli karaa, laakiin iyadoo intan aan ku fadhino cadaalad daro ayaa waxaad rabtiin maantoo dhan inaad maskaxda naga mashquulisiin oo, dastuurka hala ansixiyo, dastuurka hala yeelo. Okey taas waa codsi labada Aqal aan usoo jeedinaayo, Guddoonkuna uu imaqlaayaa, waa in ay horta Banaadiri ka dhex muuqdaan Aqalka sare, hadaysan ka dhex muuqanin waxaan samaynaynoo dhan waa ruwaayad, sababtoo ah waxaa kaloon rabaa inaan xildhibaanada sharafta leh ka codsado, dalka marxalada uu ku jiro waad u jeedaan, dhibaatooyinka dalka haystana waad u jeedaan, waxaa la rabaa xildhubaanada sharafta leh inaan isku keeni karno Maamul Goboleedyada iyo Xukuumada iyo Baarlamaanka is qabadsiin karno, iyadoo aan intaasi is qabanin wixii meeshaan aan ku ansixino bari Maamul Goboleedyadaa kahor imaanaaya, waxaad ogaataan in wali la leeyahay qaska uugu wayn Soomaaliya waxaa iska leh Baarlamaanka, marka mid aniga I khusayso ayaa jirto.

- **Qodobka 49** Mabaadi'da guud ee Doorashooyinka, waxa la iri waa in ay ahaadaan kuwo xor ah cadaaladna ah codkana qarsoodi yahay, waxaa lagu dhahay eex, takoor, midab kala sooc, musuqmaasuq, cabsi galin, hanjabaado iyo faro-gelin shisheeye, Illahay ayaan idiinku dhaarshee kuraasta Baarlamaanka labada aqal ee lasoo doorto, Dawlado shisheeye maa faro-geliyaan mise qabaa'ilada markaas aan la daganahay ayaa faro-geliyo, kursi majiraa oo si xalaal ah lagusoo doorto markaan daacad uhadalno? Ma jiro. Waxa jiro kuraasta waxa waaye markaan runta idiinla hadalno waxaan rabnaa anaga, culayska na saaran oo ah, anaga waxa faro-gelin nagu haayo markastaba qabaa'ilada aan la daganahay ayaa xoog kuraasteena ku qaata, markaan anaga iska hadalno. Kursi xor ah oo Banaadiri ah oo Gobolkaan kasoo baxaa ma jiro, marka waxaan idiin sheegaa anaga yaanaan samaynin in aan markastaba ka hadalno waxyaabo mujaamilo ah, Baarlamaanka waxaa la rabaa waxa matala shacabkaas, shacabka soomaaliyeed in lagu awr-kacsadana maaha, shacabka soomaaliyeed waxa la rabaa, ayagana wax ma doortaan, ayagana wax ma sameeyaan, markastaba Dawlada joogta ayaa ku takrifasha, marka laga hadlaayo horta dadka meeshaan deegaan doorashada lagu doorto waa Banaadiri iyo Somaliland, wixii soo qabsadayna waan wada ognahay, anagaana iska war qabno, waxaan rabna marka, horta in qodobkaan 49aad lagu daro, faro-gelin shisheeye iyo faro-gelin sokeeyaba in aysan soo faro-geshan karin doorashada xildhibaanada.

-

- Laakiin inay meeshaan laf ku duugantahay waxaad ka dareemee, shisheeyana masoo faro-geshan karo, sokeeyana wuxuu rabaa inuu xoog igaga qaato kursigayga bari, marka caqligu inuu shaqeeyo oo waxyaalaha khaladaadka ah, Guddigii Dastuurku halkaasay fadhiyaan, sababtoo ah ninka Gudoomiyaha ka ah, waa ninka aan ka cabanaayo oo bari kursigayga xoog ku qaadan doono, waxaan rabaa marka, Guddoomiyow, faro-gelin shisheeye waxaad ku dartaa, faro-gelin sokeeyana in layga qabto, sababtoo ah adaa barito xoog igaga qaadanaayo, adaana Dastuurka iisoo qoraayo, ma suurta galee? Ma suurta galayso. Waxaan rabaa marka xildhibaanada sharafta leh, marka aan idiin dhahaayo maxaa haray oo laysku haystaa, waxa haray Dastuurkaan, Dastuurkaan hadaad dhamaystirtaan nin kastaba gurigiisuu aadaa, wax kaloo kuu haray maa jiro, wax kaloo laga shaqeeyo oo dalka yaala ma jiro, wixii aan soo ansixinay, qaar dayn cafin ayay ku dhamaadeen, qaar waad ogtihiin laakiin kan waaye waxa noo haray, kana waxaan rabaa si cadaalad ah, bil Ramadaan ayaan ku jirnaa, waan wada soomanahay, Guddoomiye Abshiroow hadaan xataa ansixinayno bacda Ramadaan nooga dhig, barkey labo dambi, anagoo sooman hadana wax been ah ma ansixin karno, hadaad rabtaan wax xalaal ah inaan ansixino, bacda Ramadaan ayaan ansixinaynaa, intaasaan idiin leeyahay.

13) **Xil. Mohamed Sheekh Noor Osman:**

Asalaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarakaatuhu,Guddoonka labada Aqal waan idin salamaayaa,anigu waxaan toos u galayaa doodayda,waxaan kaloo rabaa waxa hadeer la isku qabsadoo,xildhibaanada qaar ay ka hadleen,arrinta ku sahabsan"civil education" ee habraaca. Qodobka 3aad ee habraaca ayaa wax uu qabaa in bulshada laga talo galiyo oo sidaas ayuu u qoranyahay, waxaa fiicnaanlahaydaa in xildhibaanada saaxiibaday ah ay habraaca ay akhriyaan. Hadaan doodayda u soo dago.

- **Qodobka 48aad:** ee madax kobaad dhamaantiisii waxa uu ka hadlayaa awoodaha uu leeyahay baarlamaanka Soomaaliyeed labadiisa Aqal, halkaa waxaad moodaa Guddiga inay ayagoo la dagaalamaya awoodihii baarlamaanka u lahaa, awoodihii ay dhimeenoo hoos loo dhigay. Xildhibaanada aysa awoodihii ay iyagu lahaayeen baarlamaanku u lahaa inta badan laga hadlayn.

- **Qodobka 48(4):** arrinta dhahaysa Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Dalkan waxaan ognahay inay maxkamad dastuuri ah ka jirin, haddii dastuurka la isku khilaafo ama qodobadiisa la isku qabsado ama doorasho intay dhacdo la isku khilaafo.

- Doorashadaas dhacday cid ka garniqi karta ma jirto, tusaale hada dalka 'Kenya' anaga dariska inla ah doorashooyin ayaa la isku qabsadaa, maxkamad dastuuri ah ayaa kala saaro. Baarlamaankii Soomaaliyeed ayaa nahay doorasho ayaan rabnaa inaan ka hadalno, waxa baan rabnaa inaan saxno, maxkamada dastuuriga kama hadlayno, markaa dawladda Federaalka dalka Soomaaliya ayaa la dhahaa in Federaal la qaato waxyaalihii sabab waan garan karnaa,waxaa sababay dhimaatooyinkii dalka ka soo dhacay 30 sano ee ugu danbaysay.

  Soomaaliya markaa waxay isku aamintahay inay qaadato nidaamka Federaalka ah oo dawlad Goboleed walba uu isagu u madaxbanaan yahay doorashadiisa hoose, markaa waxaa la yidhi dawlada Federaalka ayaa xukumaysa. Dawlada Federaalka ciidamada iyo

wax walba iyadaa xukunta, haday dawlad Goboleedkaa ku duusho ayada laftigeeda yaa ka qabanaya, yaa dawlad goboleedkaa ayada lafteeda inay cadaalada samaynso, markaa waxaan qabaa qodobkaa, faqradaha cusub ee lagu soo daraayo dastuurka in ay Guddigu naga dhaafaan, waxyaalahana farah badan ee maalin walba mid cusub mid cusub inay ka dhaafaan ayaan jecelaanlahaa**, faqradaa bataatanba in Meesha laga saaro.**

- **Qodobka 47aad:** Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada,dastuurkii 2012 la ansixiyey ee ku meel gaadhka ahaa ee aan hada ku soo dhaqmaynay, wuxuu sheegayaa Shuruucda ku saabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka heerarka dowladda Federaalka ah iyo guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxaa qeexi doona shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Maxaa loo tiray faqradaa iyada ah? Waaba faqrada fiican oo qeexaysa nidaamka doorashooyinka ee la samayno doono. Xagee lagu arkay dastuur, hada qodobadan Meesha ku qoran ee doorashooyinka ka hadlaaya, waxaad arkaysaa sharciga sideeba waxa uu qaybsamaa labo. Dastuurku waa arrinta ku sahabsan doorashooyinka ee la rabo in xeerka lagu soo saarana, waa qaabkii doorashooyinka loo qabanayo iyo siday u shaqaynayaan Guddiyo iyo qaabakaasi, wixii baa lagu dhex qoray dastuurka oo lagu dhex diyaariyey. Dastuur lagu dhexdiyaarinayo qaabka wax loo qabanaayo oo la rabo doorashada hadhow la isku khilaafi doono inay dastuur u noqoto oo lagu dhaganaado, meeshaa iyada ah waxaa ku jira "hint" **waxaa qabaa in qodobkaa sidiisa loo dhaafo, awoodahaa baarlamaanka sideeda loo dhaafo, faqradaas la tiray la soo celiyo.**

- **Qodobka 49aad:** Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka, waxaan qabaa inta maxkamad dastuuri laga helayo in dalka doorasho laga qabaninba waa fikirkayga aniga. Dadka waxa kala saarayo ma leh, maxaa doorasho loogu daalayaa, waxaysa noqon doontaa bahashu meesheeda uun ku laaban doontaaye oo dawlada goboleedyada ayey aadi doontaa yaan dadka la wareerin, qodobkaa intaas ayaa kaga baxayaa.

- **Qodobka 48(h):**Laftirkiisa hadaan sii fiiriyo caqliyada bini'aadamka waxay qiyaasayso aan sii fiiriyo,waxaa la leeyahay wuxuu xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah,siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loogaaro caddaalad bulsho, saaxiibkay shariif wuxuu sheegay inaysan Aqalka sare lahayn,laakiin doorasho maanta hadii la dhigi lahaa,Shigaani iyo Xamarweyne,waxaan aamisanahay inuu 3 senatar soo heli lahaa,markaa cadaalada aan lagu dhaqmaynin dadka yaan lagu daalinin.

- **4.5** arrinta ku sahabsan ee la leeyahay doorasho ayaa la qabanayaa oo la guurayaa iyo **4.5-na** isma keenayaan. Wuxuu na galinayaa nidaam siyaasadeed ee xisbiyo badan,isla markaan tixgelinaya xaalad amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyada Soomaaliya tan laftigeedu waxay tilmaaysaa way fiicantahay qodobkaasi dhib male waan arki doonaa,laakiin meelaha qaar waxaa ku qoran arrin ku sahabsan **4.5-ka** aniga waxaan qabaa Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod,xaguu 4.5 ka soo galayaa,ha la is amaano Soomaaliyey,ha is aaminto,qabyaalada ha laga tago ,qof walba qabiilkiisa xisbigiisa ha noqdo baan qabaa xildhibaanada soojeedieyey arrintaa in la raaco. **4.5** iyo cod iyo qof isma gali karaan.

- **Qodobka 51aad:** Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo, waxaa lagu sheegay halkan Baarlamaanka iyo labadiisa Aqal baa lagu sheegay kolay waxaan u malayanana qaabka ay hada u dhigeen doorashooyiinka qaabka ay u dhigeen inay cadeeyaan oo ay sharaxaan waan

jecelaanlahaa. Anigu inkastoo qabo meesha hogaamiye la leeyahay, madaama la leeyahay dalka ha laga guuro nidaamkii hore ee "parliamentarian" oo Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen ha loo guuro la leeyahay "check and balance" si uu yimaado dawlad goboleedyada ha la xoojiyo ayaan qabaa anigu. Dawlada Federaalka haday doorasho qaban waydo cida xadidi karta oo awoodeeda qaba karta, waxaan aaminsanahay inay dawlada goboleeyada tahay, sababtoo ah dawlada Federaalka tamarteeda waan garanaynaa dhul badan ma haysto, nimanka odayaasha ee dhulka haysta si "check and balance" loo helo oo Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen loo qaato waa in Madaxweyneyaal xoog xoogan laga dhigaa oo aad loo cayiliyaa.

- Qodobka 51(4): Wax walba oo aan qabanayno xildhibaanow, baarlamaanka waa laga sheegto waxaa la yidhi wax walba isaga aya sahlaya, waxaan qabaa anigu in maxkamad dastuuri ah la helo, inta maxkamad dastuuri ah laga helaayana dalku inuu siduu ahaan jiray iska ahaado oo nidaamkii is balance garaynayey ee "parliamentarian" uu kuu sii socdo, hadii kale oo loo guuraayo nidaamka ee aadka u dhibka badan ee labo Madaxweyne oo xoog xoogan intaan soo doorano. Madaxweyne ku xigeen waad soo doortay cod ayaad ku soo doortay uu xoog badanyahay, sidii uu hadeer nin saaxibkay sheegay haduu Baydhabo tago oo Baydhaba laga soo doortay oo u dhaho Madaxweynihii xamar ayaa isku soo dagaalnay ana xagaa ayaan fadhiyaa maxaa lagu samayn? Laftigeedu waxay noqon kartaa dood kale oo Meesha ku jirta ayey noqon kartaa,intaas ayaa ra,igayga ku soo koobayaa, anagu dadka marka kobaad aan u ifino,waxa aad dadka u sheegaynan inay sax ahaadaan ayaa fiican. Waan idin salaamayaa salaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarkaatuhu.

**14) Xil. Abdirisak Abdullahi Moallim:**

xildhibaanada labada gole, labada gudi ee iskudhafka, howlwadeenada, ciidamada amingeena sugaya dhamaan waxaan kusalamayaa salaanta islaamka Assalamualykum waraxmatullah wabarakatuh, waxaan rabaa in aan wax yar ku halqabsado saxiibkey cumar doorasho xor iyo xalaal ah anaa soomaray o soo arkay waa kadhacday dalka waana jirtay taas haka raalinoqdo, lakiin waxaan raali ka ahy in uu marwalba xaqiisa difaacdo, oo waxa kamaqan uu sheego xaq ayuu u leeyahay dad ayuu matalaa waana sax,waxyaabo yaryar ayaan halkaan kusoogudbin doonaa oo haa iyo maya ah, wax badanaa horay ayaa looga soo hadlay oo loosoosheegay, shan sano haa oo aysan lasocon sanadka qootoqootada ah, afar sano marka lagaaro Madaxweyne walbawaa siijiitamaa oo sanad ayuu kusii darsadaa marka shan sano oo "fixed" ah oo uusan lasocon sanadkaas haa waan ogolahay,"Yes" Madaxweyne iyo Madaxweyne kuxigeen waan ogolaha, maya laba xisbi labo xisibi ma ogoli waa lafahmi karaa soomaha intaas, haa Hogaamiyo iyo "Governors"midkii loogu yeero waan ogolahay, maya wadahadalada danabaysan ee xalay lasoobandhigay maya, danab waxaan ku aqaanay chemistry iyo physicis laakiin wadahadal danabaysan waligey ma maqlin hadii ururada bulshada loobandhigaayo qaab ayaa jirto loo aado ama gobal halatago ama si kale haloo wacyigeliyo dadkii halooga dhaadhiciyee waxan danabeysan oo "online"ka ah maya, mid sedaxaad oo waxaa jirta haa iyo maya u dhexaysa oo waxaan u bixiyay lajiifiyaana banan waan a "single constituency"kaas waxay ilatahay lajiifiyaa banaan hadii laqaatana "ok" ilatahay hadii ladiidana "ok" ilatahay, waxaa hadalada xildhibaanda aad ogu badnaa oo kusoonoqnoqday erayada laga tiray dastuurka oo waa latiray laleeyahay erayadaas, waxaan laqabaa xildhibaanadi iga horeeyay Gudigu xaq umalaha in ay hal eray katiraan meeshaas, waxaa kaliya oo lagarabaa in ay yiraahdaan "original version" kii waakanaa kii dastuurka noogu qornaa, waxa aan rabno in loobadelo na wakanaa taladiinana meeshaan ayay galaysaa, laakiin mararka qaar waxaad arkaysaa waaba la soo masaxay,

oo buugaagtaan aan haysano kumaba qornaba dastuurku siduu ugu qornaa taas khalad waaye ma aheen in ay sameeyaan iyagaa ku xadgudbay dastuurkaas, waxaan laqabaa intii sheegtay in ay khalad ahayd, lama tirikaro ilaa "final version"ka la sameeyo oo la iskuraaco meesha ay u bateen xildhibaanada.

- Waxaan rabaa in aan usoonoqdo waxaan maqlayay maalmahaan in uu dalka uu galayo "chapter seven",Soomaaliya "chapter seven"magalayso mana kujirto 30kii sano ee lasoodhaafay maanta maalin ay kafiicantahay majirto, Horumarka, Barwaaqada, Amniga iyo xasiloonida maalin uu kafiican yahay majirto, sidaa darteed waxaan oron lahaa dadka musuuliyiinta ah oo dalkaan soomaamulay qaarkood oo "incitemet" sameynaayo oo dadka kicinaayo qalibyadooda, meeshaan aan taaganahay oo aan maanta kahadlayno waxaa waaye qofwalba oo Soomaali ah oo dalkiisa danaynaayo waana dhagaysanayaa, dadkaas waxaa larabaa wax qalbiyadooda anfacaayo oo dadka isku soo dhawaynaya oo dalkooda rajo kagelinaayo in aan ku hadlno ma ogiye suurtogal ma aha in layiraahdo "chapter seven" ayaa lagalaayaa tuulooyinki yaraa oo lagayimid ayaa loonoqonayaa hadlkaas hadal sax ah ma aha kumana haboona nin dalkaan soomaamulay oo rabo in uu maamulo, hadlkaas khalad ayuu ahaa waxaan rajaynaa in laga noqdo oo raaligelin lagabixiyo hadalkaas, dadka Soomaalida ah ee kutabaalaysan aduunka dacaladiisa waxay rabaan in ay maqlaan dalkoodii oo nabad ah dadkoodii oo heshiiyay oo gacmaha is qabsaday,laakiin marabaan maanta 30sano kedib tuulooyinki yaryaraa oo laga yimid aa lonoqonaa in ay maqlaan lamarabo "chapter seven" lagalaayaa oo gaalo ayaa dib noomaamulaysana in lamaqlo lama rabo, sidaas darteed waxaa waaye in laga waantoobo oo aan dadka niyada laga jibin, marwalba oo "organizational change" uu dhacaayo ama isbedel "institution"uu dhacaayo waa adagtahay dadka in ay aqbalaan, cabsi ayaa jirta maxaa ka imaankaro ayaa laleeyahay lakiin waxaa larabaa in lagu dhiirado, dhiiranaantaas ayaa waxa ay keenaysaa in uu wax wanaagsan ka soo boxo , waxaan rarabnaa umada Soomaaliyeed waxaa kamaqan oo aan dareemayaa xildhibaanada markay meshaan soo istaagaan ay sheegayaan in ay jirto cabsi qabiil, reerkayga saanaa kudhacayso ,saanaa dhacayso, aniga laigatagay, waxaa war dadka dib u heshiisiin sax ah in loosameeyo ayaa wajib ah, umada Soomaaliyeed in gacmaha la isugeliyo ayaa wajib ah in wakhtiga intiisa badan lasameeyo safaro dib u heshiisiin iyo wacyigelin, sidaan aaminsanahay na dadka Soomaaliyeed naga dhaw anaga xildhibaanadeena iyaga heshiiswaayoo gacmaha ayay ishaystaan ganacsiyadooda shirko waaye wali isdhexgelkii iyo arimihii bulshada waa wataan , laakiin meeshaan ayaa xoogaa kicinta kubadantahay , ninka markuu maqlo oo qabiilkayga lagu dulmaa uu kayiraahdo meeshaan waxay sameen kuyeelanaysaa meelo kale oo hada meeshaan kadhawayn, waxaan rabna meeshaan waxa looga hadlaayo in ay noqoto wax dadka isu soodhaweynaayee aysan noqonin meeshii dalka lagu kala diri lahaa, sidaa darteed aniga maanta ma rabin in aan imaado laakiin waxaa isoo kiciyay waxaa is iri maanta Amnigaa laga hadli doonaa waxa kadhacay qaraxii madaxtooyada horteeda ahayd iyo isla xisaabtan laamaha amniga markaan imid na waxaan u malaynayaa in aan wali laga hadlin lakiin waxaan rajaynayaa fadhigaan fadhigiisa danbe in aan kula xisaabtano laamaha amniga lakeeno halkaan oo ay ka jawaabaan wax alaale wixii dabacsanan iyo habacsanaan oo kadhacay meeshaas in ay ka jawaabaan lagulana xisaabtamo.

**15) Xil. Abdillahi Bidhaan Warsame:**

Gudoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waxaa rabaa in aan dhowr kalmadood dhowr qodob ka hadlo arimahaan dastuurka ee maanta laga hadlayo runtii cutubka 4aad oo aan u malayn in uu gabogabo yahay,

- Qodobka 49aad: hadii aan kubilaabo toosbaan ugalayaa arimaha laga hadlayo oo ay ugu horeyso Doorashooyinka,: Mabadii'da guud ee nidaamka doorashooyinka waa in uu ahaado kuwa xor ah caadil ah codkuna qarsoodi yahay,waxaan rabaa in aan ka ahdlo arimahaas doorashooyinka qofka iyo codka ah iyo sida cadaaladoodu ku dhicikarto nidaamka doorasho qof iyo cod ahi lagu yaqaano sida uu yahay, waxaan ognahay doorasho qof iyo cod ah waxay latimadaa nidaam daahfuran iyo shuruudo, shuruudahaas waxaa kamid ah dadku in ay u simanyihiin qofkasta oo muwaadin Soomaaliyeed ah oo gaara meesha la isku doorto in uu wax doorankaro isaguna ladoorankaro, laakiin aanu xakamaynayn waxyaabo kale oo ay lamidtahay 4.5, waxaan rabnaa hadii la aadaayo doorasho qof iyo cod ah waa waxa dastuurkeen kuqornaa waa waxa aynu u ooman nahay mudo badn suganay doorashaa lagalayaa qof iyo cod weeye wayna xanibantahay 4.5 baa lagu xanibayaa halkeeni hore in aanu joognaa fiican madaaman 4.5 la ilaaninaayo waa in aan halkeeni hore joognaa.

  Waxaa larabaa doorsha qof iyo cod ah waa laguuray doorasho qof iyo cod ah aya la aaday waxa loo ooman yahay weeye, waxaan kale oo haynaa "practice" hadeer Soomaliya dhexdeeda ka dhaca doorashadii hada ogu danbeysay ee "council"ka ladooranayay ee kadhacaysay deegaanada puntland doorasho qof iyo cod ah ayaa lagaqabtay oo "council"ka lagusoodoortay, waxaa dhacday maagaaloyinka qaar reero kuraas badan kaqaadanjiray in ay kuraasitii wayaan reero kalena ay kuraas badan heleen way dhacday, halkan markasta waxaa laga hadlaa dad ba badan la isma tirin dadka badan iyo dadka yar iyo cadaaladuba waxay kusoobaxaysaa doorashada marka alfuro, waxaa dhacday in ay soobaday hadeer nin iyo xaaskiisa doorasho kusoowada bexeen labo walaalo ay doorasho kusoo wadabexeen, nidaamka cadaalada ah oo deeegaanadi had doorashada lagaqabanayay ayay kamid ahayd deegaan Soomaaliyeed oo hada lagaqabtay waaye waa wax laqaban karo, meesha ay hada gabdhuhu kadoodayeen oo lahayeen 30% shaqada iskadaa siyaasadee xafiisyada lamahelo side loohelaa wixiba waa 4.5 bay ku egyhiin reer kastana nin buu rabaa in uu meesha geysto, marka 4.5 lagatago gabdho iyo wiilal kuraasta iyo shaqooyinka u qalma baa fadhiisan doona, waxaan oran lahaa waa laguuri doonaa in 4.5 ka laga tago.

  Arinka kale oo la aaday oo muhiimka ah ee Madaxweyne iyo Madaxweyne kuxigeen ka, bilawgii dowlad dhiskeenii markii dowlada Federalka ah ama dowlada Carta nidaamka laqaatay oo "presidential" "parliamentery sysrem" kana aan ahayn ee meel dhexe kujira horta cida kaliya ee nidaamkaa leh inaga waaye "paralmentery system pure"na ma aha presdensial na ma aha , waxa loo qaatayna waxay ahayd is aaminaad daradii waagaa jirtay iyo dakharadii dagaaladii sokeeya kataagnaa waxaa larabay in lagu meelgaaro, runtii anigu waxaan isleeyahay waa lagu soomeelgaaray lakiin shakigii iyo dhibaatadii inahaysay inagamasaarin maadaama aan shakigi inagasaarin in nidaamkale latijaabiya oo presidential la aado wax dhibaato ah maleh waa la aadi karaa,waxayse kuxirantahay presidential waa la aadi karaa, aduunka wadamo badan baa iskumaamula boqol iyo dhowr iyo toban dowladood baa isku maamula qaarkood kuwa ogu fiicfiican bay kamid yihiin, waxaa lagu aadi karaa oo lagu guuri karaa in doorasho qof iyo cod ah laqabto, Madaxweyne iyo Madaxweyne kuxigeen la aado nidaamkii aynu joognay ee aaan kawada baqaynay lagawada guuro halmar oo xagaa lawada aado, wuxuu nidaamkan aan haysano ee "parliamantery"ga ah qeexayaa awood qeybsi, hadii awood qeybsigii dhinacna laga ilaalinaayo oo 4.5aan lagatagayn dhinicii awood qeybsiga kale parliamantery ga uu ilaaalinaayay lagatago cadaalada daradii ugu badnayd baa looguuray, waxaa la rabaa hadii aan guurayno in aan halmar wada guurno,

- Qodobka 51(4): nidaamka 'presdential" ka ah waxba yaan la iska cabsiin waa looguuri karaa kii hore waan tijaabinay dhibaatadii waalagu soomooday laa kiin sidii larabay dhibaatada inoogama saarin, kana aantijaabino bal madaxweynaha ladoortay in uu 5 sano awoodiisa uu isticmaalo aan fiirino, laakiin nidaamkaa hore wixii uu ilaalinaayay hadaan laga wada guureyn lagama wadatagikaro , Raysalwasaare ayaa jiray awood qeybsi buu ku imaanayay, Risulwazaare kuxigeen ayaa jiray awood qeybsi buu ku imaanayay, waxaas oodhan waxaa laga wada guuri karaa in 4.5 ka lagatago Madaxweyne iyo Madaxweyne kuxigeen la aado dad tiro badan oo xildhibaano ah oo reero kala duwani soobaxaan dad kuraas badani haystay waayaan nidaamka xagaa loowada guuro, 4.5ka iyo geedigu isma galaan ha laga wada guuraa waxoo dhan.

- Qodobka 47aad: shuruucda kusaabsan xisbiyada iyo diwaagelinta doorashada heerka dowlada Federaalka ee gudiga qaran,aniga **waxaan kuraacsanahay xildhibaanadii yiri sidooda haloo daayo** oo gudiga doorashada aan qaadan doono oo doorashada maamulaysa gudi heer Federaal ah ha noqoto, xildhibaanada sidaa yiri baan kuraacsanahay, dowlad goboleed iyo gudiyo wadaagaan waagii dhaweyd doorashadi dabani jirtay dhibaatooyinkii kadhacday waan ogayn 8 bilood baa waxaa u jiitamayay kuraastooda in qolo soo magacawdo, labo kursi baa qolo haysataa laba kursi kalena qolaa haysta marka la isuba keeni maayo sida la isugu keeno ayaa adkaanaysa marka gudi qaran oo doorashada qabta sidii hore loogu qaban jiray in loo daayo gudiyada goboladuna sida loo maamulaayo la siugu raacayo doorashooyinka qabanaayo, hada gudiyo kala duwan bey qabtaan maganayo in lagu guulaysan karo in ay halmar wada qabtaan, laakiin doorashada Federaalka qabanaya waa in gudi Federalaysan oo goloyaasha soomagacaabaan oo Baarlamaanka lakeeno Baarlamaanka lamarsiiyo ay noqdaan.

16) **Xil. Dr. Mohamed Sh. Axmed Mohamed:**

Asc Guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh iyo dhamaan akhyaarta Salaanta islaamka ayaan idinku salaamay, salaan kadib waxaan filayaa dooda waa gabogabo in badana waa laga hadlay, si guud waxaan rabaa in aan tusaaleeyo Adimada ama hababka xukunka ee lagu dhaqmo hadii ay tahay mid madaxtooyo iyo hadii ay tahay mid parliamentary ah ama ay tahay mid isku dhaf, hadii ay tahay Dimuqraadi, hadii ay tahay shuuci hadii ay tahay mid diini ah iyo hadii ay tahay federal, xitaa hadii ay tahay qabiil iyadu laf ahaanteeda inta ay ceebaysan tahay iyo inta sida aynu innagu u dhaqan galino ay fool xumaanayso, waxaa badan inta innagu sida aynu u dhaqangalino ay fool xumaanayso. Nidaam kasta oo aynu qaadano kama run sheegno oo si xun baynu u hirgalinaa oo wuu fool xumaadaa, marka Qabiilka soow ma ahan waxyaabaha aad loo dhaleecaynaayo ee ugu xun, nidaamka Qabiilka ah hadii la isku ogaado oo sida saxda uu yahay loogu dhaqmo ceeb wayn ma keenayo, macanaha awoodii xukunkii iyo Hantidii in la qabaysado ayuu micnaheedu yahay, laakiin innaga habka aan u dhaqmayno ayaa wax walba xumaynaya, sidaa darteed haydaarin badan malahan Andimadu iyo Ashkaalaatka, inta badan waa inaga oo federaalka Magacaaban ka sheeganaya, Dimuqraadiga hada aan sheegayno magac buu yahay ee nuxur malahan , Diin hadaan shegano cudur baan isooga dhignay aan daawo lahayn.

- Waxaan rabaa marka 1aad in aan ku soo dhowaano horta waxa aan qaadanayno aan ka run sheegno aan ka dhabayno oo aan ka gun gaarno, in intee la eg ayuu qiimo leeyahay oo macno uu lee yahay? farqiga u dhaxeeyo Nidaamkii hada ka hor aan ku dhaqmaynay 20 kii sano ee lasoo dhaafay iyo midka hada lasoo sahmiyay ee waa loo guurayaa la lee yahay, waxay ahayd Dadku way dagaalameen kalsoonidii dadka bulashada u dhaxaysay baa

burburtay is aaminaadii baa yaraatay, een waxaa la yiri marka iyda oo aan si sax ah loo heshiinin xukunka dadka haloo qaybiyo oo qolo walba waxbaa la siiyay, marka maadama aysan is aaminaaad aysan jirin waxaa la xadiday awooda in ay Hay`ad kali ah go`aan qaadan karto oo waxay noqotay  hala iska daba wareegaysto, seeto ayaa lagu wada xiray Hay`adihii, marka go`ankii waxaa weeyaan Xukuumadii Baarlamaankii iyo madaxwaynihii iyo wixii oo dhan ilaa wax la isku waa faqsan yahay la helo talaab lama qaadi karo.

- Marka dadku yayna kala tagin ee si dagan ha uwada socdaan ha siriqsadeen oo yayna ordin ilaa inta heshiis sax ah laga gaarayo falsafad haku salaysnaado nidaamkii hore kii, marka dhowr iyo labaatan sano meel waan gaari waynay waan guurguuranaynaa waxba waan xaqiijin waynay wax himilo umadeed ah waan xaqiijin waynay, umaduhu dagaal waa ka dhex dhacaan wayna kasoo kabsadaan dhowr sano gadahood baana looga gudbaa, Ruwanda oo dagaalka nooga dambeesay hada waa dowladaha tusaalooyinka u ah Afrika, marka kan dambe falsafadani waxay sahminaysaa war dee muda dheer baan seetaysnayne seetada halaga furo dowladanimada iyo nidaamka iyo maamulka, hanaan saamixi kara go`aan qaadashadu in ay fududaato si dagana wadanka loogu hormarin karo oo go`aanka qaadashada hala fududeeyo, uu ku salaysan kan ri'aasiga ah nidaamka dambe ee hada la lee yahay xisbiyada hala soo koobo oo nidaam madaxtooyo halaga dhigo.

- Qodobka 51(4): waxaa weeyaan wixii bal ha fududaato in dowladnimadii la hormariyo ileen dadkii adeeg iyo nolol bay u baahan yihiin, 50kun oo Arday ah baa sanad walba soo qalinjabisa Dawladuna kun ma shaqalaysiiso sanadkii marka xagee la aadayaa? waxaa loo baahan yahay mashariic in la abuuro oo khayraadkii dhulkaan in lasoo saaro, sidaa darteed waxaan soo dhawaynayaa si guud ahaan iyada oo andimada midna uusan ceeb lahayn **lakiin nidaamkaan la sahmiyay ee madaxtooyada ah oo soo dhawaynaysa go`aan qaadashada madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeenka ah aynu  ka war doono, laakiin aan ka run sheegno.**

- Qodobka 56(2): xisbiyada kooban waxay la socdaan ayada fududaynta awoodda go'aan qaadashada oo in aysan wixii kala baahin oo dowlada lasoo dhisi karo ayay fududaynaysaa. iyaduba 2 iyo 3 wiixi laga dhigo ma xumee aan ka war doono, laakiin aan ka run sheegno. shanta sano waa iska ok oo run waxa ay yaraynaysaa mudada ku meel gaarnimada labada xisbi ee doorasho inta u dhaxayso ee wax la qaban karo ayay fududaynaysaa.

- **Qodobka 57(1): Ayaduna ma xuma Guddi doorasho oo midaysan waa fiican tahay waan soo dhawaynayaa**, waxaad moodaa qolyaha maamul gabaleedyada ah in ay dareen ka qabaan qodobka ah in dowlada federalku ay kor meerto ay hubiso oo si sax ah doorasho nadiif ah in ay dhacayso ay hubiso, in si sax ah doorasho nadiif ah in ay maamul gabaleedyada ka dhacdo, qodobkaas in ay dareen ka qabaan baad moodaa, lakiin waa lagama maar maan hadii dowladuhu dowladahooda siman yihiin dee dowlada federalku micno ma samaynayso, marka awooduhu waa in ay kala sareeyaan dowlada federalku waa in ay yeelato ugu yaraan xaqiijinta doorashada maamul gaboleed ka dhacaysa in ay tahay mid sax ah Malaga run sheegayaa, run sheegida waa qodob kale oo kee ayaa damaanad qaadayo dolwda lafteeda in ay run sheegayso, taas waxay u noqonaysaa run sheegida, lakiin in ay awoodaha dowlada kala sareeyaan waa lagama maar maan.

- marka waxaan dhihi lahaa si guud marka la soo aruuriyo waxa aynu dooranayno aynu ka run sheegno, sidaas ayuu wax inoogu hirgalayaa, laakiin hadaan dhano Nidaam federaal ah ayaan qaadanay oo qolo walba ay xero oodato oo ay tiraahdo federaalkii anaaga sidaan u

hirgalinayno oo shaar qabiil loo huwiyo ama shaar qolo kale loo huwiyo dhib ayaa ka dhacaayo waad mahadsan tihiin dhamaantii wasalaamu calaykum.

17) **Xil. Nur Ahmed Dirie:**
Guddonka Labada Aqal Xildhibaanada Senatorda iyo Labada Guddi marka hore waxan idinku salaamaya Salanta Islaamka Asalamu Caleykum.

Runtii hadal badan hada uma soo istaagin marka hore waxan u mahadceliyaa labada guddi oo shaqada adag soo qabtay oo runtii aad ugu soo shaqeysay arintan een sidoo kale Xildhibaanada iyo Senatorda oo doodda waday waxan lee yahay waa masantahiin.

waxa kaloo halkan inaa ugu mahadceliyo rabaa bulshada rayidka Culumaa, awdiinka iyo dadka ku howlan arintan dastuurka oo kala docdo dibadaha iyo kuwa gudaha ku jira intaba waxan kee yahay intaba waa mahadsantihiin oo ku dari fakiradoodo oo usoo gudbiyo xildhibaanada qaar inta ay ka gaaran iyo inta kale dhamaan usoo gudbiya dadkaasna waan umahadcelinaaya.

waxan kaloo lee yahay runtii waxan raba inaa anigu hal arin sharaxo arintas waxa weeyee dastuurkan waxu u qalanyahay Barlamankan kow iyo tobanaad asaagana xaq uleh inuu ka hadlo qodob walba dul istaagi wixii lagu balamayna oo ahaa wax ku xadgudbaya diinta Islaamka iyo masiirka umada Soomaaliyeed mid inaa lagu dhax arkin intaas inuu ka ilaaliiyo barlamaanka ayaa laga rabaa qaataba talada dadka ehelka u ah ay sojeediyan qaatana waa laga doonayaa. Runtii waxa la yaableh oo marwalba mararka qaar soo noqda waxa meeshan ka hadlo marwalba dastuurkan socodkiisa ayadoo muddo badan dastuurkan laga soo mashquulay saa ogtahiin waa labatan iyo dhowr jirsadan umaleenaya sidaano kale wali baarlamaan xooga usaaray ma jiro runti baarlamankan 11aad waxuu ku amaananyahay waxuu u barbardhigay sharuuc ay ansaxin waayen baarlamaanadi hore hadana waxa muuqata diyaar inuu uyahay in dastuurkan uu meel saaro taas wuu ku amaanan yahay baarlamanka 11aad waxii hada arimaha shaqooyinka aan soo qabanay waxee dhaleena waad garan kartan deyn cafis bey dhaleen, cunuqabatayn hubka qaadis bey dhaleen hadana waxan sugeyna shacabkii oon udiyaarino dastuurkii oo aan soo aruurinay baarlamankana intas ayuu udiyaarsan yahay waxan marka leenahay dadka ku furaaya shucaaca oo umada Soomaaliyed niyad jibinaayo inee ka joojiyan oo ka tanasulan baa nala muuqato oo waliba masuuliyinta Soomaaliya soo martay ah arintaas arin sax ah ma ahan. xaqiiqa baarlamankan howshan asigee utaala hadii Chapter 7 iyo waa lakala tagaya iyo erayada noocas ah dadki badi wey ka hadlin siyaasiyin badana baa hadashay laakin waa lakala tagayaa kalmada ah la yiraahdo kalmadaas waa kalmad dhibtay umada Soomaaliyed laba habeena laga seexan waaye xaqiiqa kalmadaas kalmad sax ah ma ahan baarlamankana sharaftiise dhaawac ku tahay umada Soomaaliyeedna dhaawac ku tahay.

umada Soomaaliyeed waxay soo guurtay carto ilaa hada baa la soo kakabaaye dowladnimadan saake ninka yiraahdo waa lakala tagayaa oo tuula la'aadayaa waa xasuusaneysan hadalkaas ninka ku hadlay habeenkii la doortay ninkii muqdisho joogay wuu jooga baaburta ciidamada shacabkaa fuulay sida loo soo dhaweeyay shacabkaa raacay waxwalba la sameeyay illaahey waxuu qadaray kalmadas inee yeerto waa lakala tagayaa xagee uqalantaa arintaas Shacabka Soomaaliyed mid uqalanto ma ahan shaqada la haayo mid uqalanto ma ahan arintas waxa leenahay waan ka xunahay ka baarlamaan ahaana waan cambaareyneyna kalmada noocas ah.

siyaasigu wuu hadli karaa waxna wuu sheegi kara waa lakala tagaya Soomaliya cidey ka yeeleyso ma jirto intaas waxan lee yahay kalmadaha aan munaasabka ku aheen runtii umada Soomaaliyee dhagahooda inee maqlaan masuuliyinta ay ka soo yeereyso inee ka waantooban ayan usheegeyna.

intaas waxan ku darahaya waan iska soo gaabinaaya hal qodob baan raba inaa usheego baarlamaanka.

- **Qodobka 52(1)** oo xil heyta ka hadlay baan ku daraya runtii qodobka xil heyta ka hadlaya sidaa la socotaanba waxa muushin 97 xildhiban iyo 17 Senator baa qodobkaas mooshin ka keentay muda xileedka ah Guddi baa la soo saaray oo labadan ah oo labada Aqal ah waad ogtahiin anigu guddigaa ayan ka mid aha waxan uyeeranay guddomiyaha iyo guddigisa Xussen iidow dhinaca kalena waan uyeeranay waan la kulanay labada dhinacbo anago rabna markas inaa halkaas qodob meel saarno sida la socotan oo kale Madaxweyne Abdulaahi yuusuf, Sheikh Shariif, Madaxweyne Hassan Sheikh Maxamud, Farmaajo intaba waxe ku dareen muddo xiliyadooda taarikhdana ina wax kagu dhisto wey fiicantahay waliba xiligii udanbeeyay oo muddo xileedkii udanbeeyay shan sano iyo afar bilaad buu ahaa saas waa u ogtahiin baan umaleyna qiyaasta halkaase ku aadantahay waa yahay shan sano iyo afar bilaad tii sharciga aheedba ma heysanon oo ma aanan qaadanin muddo xileedkiina saas ayuu iskaga socdaa **marka waxan soo dhaweynaya ama aa soojeedinaya mudda xileedka mahdi guuled baa dhahy lixsano bey ku filantahay baan dhahi karnaa dooro qof iyo cod ah in lagu gaarsiyo** goorme ka bilaabaneysaa rag badan baa isku qabtay goorme bilaabaneysa baa la yiri waxey bilaabaneysa baarlamanka baa meerito uleh iyo xukuumadiisa iyo Madaxweynahiisa baa meerito uleh sababtoo ah shaqadda ay qabteen baa keeneyso baarlamankii shuruucdu ansaxiyay cunuqabateenta lagu qaaday dayntii lagu cafiyay ganacsiga bariga Africa ku loogu biirnay intaas baarlamankii qabtay kan waaye waxan leeyahay baarlamankan ayaa meerito uleh xaqna uleh inlasiiyo taasna waa goorme bilaabaneysada.
- waxan runtii ku soo koobaaya yuu ila sii gudbin cabaar baan ku jiraa umaleyni in muddo xileedkana sidaas uu noqdo.

waxan kalo aan halkaan kala hadlo aan rabaa Media ama baraha bulshada dadka ku jiro oo suurad xumeenaya barnaamijkan socdo arintas waxan lee yahay ka waantooba anaga waxan ushaqeyneyna umada Soomaaliyed waxan rabna inaa meel gaarsiino raadkiina baa muuqdo iyo shaqadii aan qabanay daraad xalay baa taleefon la isoo diray waxa la yiri guddomiya guddiga aminaga tahay shaqada la joojina barlaman lagama shiraayo arintas waxan ari shaqadana wey soconeysa waxii kiis ahna kiiskiisa waa gaar sababto ah zoobe qaraxii marku dhacay kun qof baa dhimatay subaxii shaqadana wey socotay Guddomiyaha gobalka banaadir baa subax la tooktay shaqaddina wey socotay ma shaqa istaagty shaqadana wey soconeysaa howsha amnigana dadka ay qoseysa ka hadlidoono insha allah dhamaantiina waa idin salaamayaa baarlamankana waxan lee yahay aad iyo aad ayaa umasantahiin wixii xaquuq ah hadiiba Soomaali xaquuq lagu leeyahay baarlamaanka 11aad baa ku leh.

18) **Xil. Abas Ali Ibrahim:**
Guddonku waa mahadsanyahay xildhibaanada sharaft lehna wan salaamaya Ramadan mubarak.

- **Qodobka 51(4):** Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen insha allaah. waxan lee yahay **Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen waa ogolnahay waa diyaar hore dalka waa uga jirijiray wax laga argagaxo ma ahan wax xuman ahna ma ahan waa soo dhaweyneynaa insha allaah**.

- **Qodobka 51(5):** Hogaamiyaha kalmaadas si xildhibaanada sharafta leh horteyda ugu hadleen waa yara qalad waaye **Madaxweynahoda inaa udeyno Dowlad gobaleedyada taas ayan soo dhaweynaya ayadana**.

- **Qodobka 49aad: doorasho qof iyo cod ah waa soo dhaweyneynaa insha allaah**. **Doorashada qof iyo codka waxa laga gooraya 4.5 waan ogolnahaywaa soo dhaweyneynaa insha allaah 4.5 halaga guuro** een ragii shalay udhabar adeegay ama oglaaday geesinimo ka muujiyay 4.5 kaas oo intaas ku soo gaaray umadda Soomaliyeed ayee aheed dadka ku xaqirna oo dhahaayo wan ku xaqirannahay 5 kaas insha allaah maanta ayaan ka guureyna in aan 4.5 ka baxno doorasho qof iyo cod ah aadno xisbiyo aan aadno waan waa soo dhaweyneynaa 100% si umadda Soomaaliyed oo dhan umidooban oo mid u ahaadan tas ayadana halkas ayan leeyahay. waxa kaloo jiro qalqal badan iyo wax ayaa la abuurayaa xildhibaanada sharafta leh labada Aqal ka kooban si xildhibaano horteeda sheegen dad sharaf leh oo la soo xulay umadda Soomaaliyeed laga soo dhaxsaaray kana turjumaya dowladnimada Soomaaliya ayan nahay hadalada khadafka ah inaa iska ilaalino waa wax muqadas ah oo nalaga rabo si dalkeeni qaxootiga dadka ku maqan ey uyimaadan oo nagu daydan waxyaaba aan heyno oo dowliga ah oo ay ugu soo biiran.

  waxan raba waxan joognay dalkani ayadoo burbur dhacay la barakacay lakala carayay oo dowlad aan jirin system ayaa la sameeyay oo dowli ah waa lagu soo caana maalay waxan xamar u joognay wadada maka almukarama aan la mari karin oo liif saaranyahay waxan mari jirnay wadada dakada saas km4 iyo Airpot ku gali jirnay marxalad noocas ah ayaa la soo maray maantana wadada maka almukarama carwooyin ayaa daadsan Colow tower iyo Xayad mall five star ayaa daadsan  lagu caweeyo waxwalba yaalo lagu iibsado waxaa lagu helay nabadii iyo hormarkii lagu soo gaaray dalkaan anagoo soomarnay ama ogayn ayadoo la mari karim wadada maka almukarama maanta waa meesha wax walba ku yaalan oo lagu ganacsado umadda Soomaaliyee ay isku dhaxmarto taa horta inee ogaadan xildhibaanada sharafta leh waan hubaa umadda Soomaaliyed intaba wadanka horumar ayuu sameeyada baqdinta badan dadka lagalinaayi halaga daayo si aan hormar usameyno 4.5 waa ka isku boobaya ayaa ka yiri barito kursi nin lee yahy aya nin kale boobaya ninka boobaayo waa kee ninka tartamayo waa nin Soomaali ah anigu kursiga aan ku fadhiyo beesha aan ugu fadhiyo waxa kaliya ee ibadalidoono waa nin beesheyda ah sidda aan aaminsanahy hadii doorasho iyo qof la dhaho dadki waa joogan wey codeenayan arintas waxan raba inaan  dad baqdin badan laga galinin xildhibaanada sharafta keh marka halkan soo istaagan wararka qadafka inee iska ilaaliyan war fiican ay sheegn umadda Soomaaliyed iyo aduunki dhana na fiirsanayo si loo yiraado hornar ayee sameenayan insha allaah qodobada aan ka hadlay intaas ayan ka aaminsanahay ayaan lee yahay **doorasho qof iyo cod ah 4.5 aan jirin Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen dowlad gobaleedyada oo Madaxweynayal ah intaba waan soo dhaweenaya**.

Qodobka 57(1): waxan kaloo rabaa guddiga doorashooyinka in ayagana sidooda loo daayo heer federaal iyo heer state intaba sidaas in laga dhigo insha allaah waxan rajeeneyna cododkan dheer aan ku hadleeno guddiga u xilsaaran dastuurka inee soo saaridoonan ugu danbeyna marka ay gobodalada ka yimaadan oo la geeyo dastuurka afarta cutub ah in meel marindoono insha allaah. waxan lee yahay xildhibaanoy Ramadan mubaarak waa noo balan ah janatul fardowso iyo war fiican.

**Xil. Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" Gudoomiye Abshior:** Xildhibaannada sharafta leh, waxaan salaada wakhtigeed ugu ciriirinayney "list" dhamaan rabay. Maanta madaxii 1aad iyo 2aad xildhibaanadii qornaa oo 105 gaadhaayey, waxaa ugu danbeeyey Xil. Cabaas, markaa sidaas baa keentay inaan wakhtiga waxyar ku darno markaa waad mahadsantihiin doodeenii maanta way dhamaatay. Waxaa dhamaaday madaxa 1aad iyo 2aad oo ka tirsan cutubka 4aad ee ah matalaada shacabka iyo doorashooyinka. Bari waxaan toos u bilaabaynaan madax 3aad iyo madax 4aad oo ka hadlaya axsaabta iyo Guddiga doorashooyinka,markaa xoghayaasha waxaan faraynaa inay fariinta si dhakhsaha u diraan hada, bari waa jiraa shirka, waxaan laga hadli donaan madaxa 3aad iyo madaxa 4aad ee cutubka 4aad ee ka hadlayaa mataalada shacabka iyo doorashooyinka aad ayaad u mahadsantihiin xildhibaano shirkeenu maanta uu xidhanyahay.

**Taariikh:** Maarso 19, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 27aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeisa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Doodda Marxaladda 2aad iyo 3aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:40a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:43 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" |

**Ajendaha:**

(10) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.

(11) Ansaxinta Ajendaha.

(12) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Sii wadidda ka Doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 4aad. MATALAADDA SHACABKA, Doorashoyinka. Madaxa 3aad ilaa madax 4aad. QODOBKA 54aad ilaa 62aad

**Kulanka 27aad:**

**Xil. Sh. Aadan Mohamed Nur "Madoobe" – Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Bismilaahi Raxmaani Raxeemi, Guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin, sidii horayba xaaladu noogu socotay, ajendaha waa kii daraad la ansixiyey labadii madax ee horay hadii ay dhamaadeen, waxaa loo baahanyahay labadan maanta dadkii dooda diyaarka u ah inay is qoraan si ay doodeenu inoogu socoto aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

1) **Xil. Roodo Arab Shariif Abdi:**

asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, Dhamaan xildhibaanada labada aqal Gudoonka sharta leh, waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, maanta waxaan ugudubnay madaxa sedexaad

- **Qodobka 54(1):** xisbiyada siyaasadeed : xisbiyada siyaasadeed waxay si nabadgeliya ah dimuqraadi ah uga tartamaayaan hogaanka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda, Gudiga waxaan ka codsanayaa meelo badan waxaan ku arkay "only" iyagoo kusoo qoraya **Jamhuuriyadda** waa qodob dastuuri ah beri markii la isku cuksado waxaa la dhihi karaa qodobkaan "only" waxaa ku qornaa **Jamhuuriyadda** marka waxaan ka codsanayaa Jamhuuriyaddu waa tee in ay cadeeyaan, marwalbana ay kuqoraan Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliyeed meelo badan oo buuga kamid ah waxaa kuqoran Jamuuriyadda.

- Isla qodobkan waxaa qoran fadlan eeg cilmibaris lagu sameeyay xisbiyada siyaasadeed ee ku xusan bogga 59aad, buuga fura bogga 59aad kuma jiraan wax xisbiyo siyaasadeed oo lagu xusay fura buuga qof walba wuu haysaa halkaasna ha saxaan.

- **Qodobka 56(2)**: labo urur siyaasadeed, aniga fikirkayga kolay **labo urur siyaasaded mataageersani in ay kabataan oo sadex ama afar noqdaan baan taageersanahy**.

- **Qodobka 57aad**: waxaa ladhisaayaa Gudi madaxanaan ee doorashooyinka qaranka ah oo u xilsaan maamulada dorashada dalka oo dhan iyo maaraynta heerka kasta si loo helo doorashooyin hufan oo daahfuran, halkaas waxaan dhihi lahaa Gudiga Doorashiiyinka waad nagala daahdeen sababtoo ah waxa aan ka shaqaynayno ee meeshaan qodobka afraad kuxusan waa sahqadii gudiga doorashooyinka taasna waxaan ku talin lahaa in dagdag loo soodhiso.

- **Qodobka 58aad**: Gudiga madaxa banaan ee doorashiiyinka qaranka iyo soohdimaha waxa xilkiisa iyo waajibaadkiisa kamid ah, hadii la isku diido doorashiiyinka laqabanaayo maxkamad dastuuri ah ilaa hada malihin, waxaan codsanayaa in Maxkamad Dastuuriga ah oo ina kala hagta si uu wadanka u badbaado, waan arkaa waa laguuray geedi caano leh hanoqdo, lakiin in lasameeyo maxkamad dastuuri ah oo cadaalada ah.

- **Qodobka 58 (j):** in uu u soojeediyo talooyin Baarlamaanka Federaalka ah sidi loo sohdimeen lahaa xuduudaha iyo deegaanada isagoo tixgalinaayo xogta dadka dhulka xaaldaha siyaasadeed iyo kan dhaqan si uu Baarlamanka go'aan oga gaaro arimaha xuduudaha: taas laftirkeeda Gudiga xuduudaha waxaan kula talinlahaa dadka soomaaliyeed sida ay hada ku dagan yihiin dhib kuma qabaan soohdimaha iyo daaqsimahana waa lakala yaqaanaa ayadana aad halooga fiirsado.

- **Qodobka 59aad**: oo ka hadlaya: Gudiga madaxa banaan ee doorashooyinka iyo soohdimaha, horta soohdimaha in laga daayaan ku talin lahaa oo laga dhigo **xuduudaha** oo loodaayo, 15 xubnoodna in laga badiyaan ku talin lahaa maxaa yeelay gudigan doorashiiyinka 15 xubnood kuma filna kaasaana aragtidayda u arkaa.

- **Qodobka 60 (1)(b):** waxaa ku qoran meelwalbo qofka shaqada lasiinaayo in uu leeyahay anshax iyo sumacad wanaagsan, side lagu ogaan karaa anshaxa iyo sumcada qofka uu leeyahay, qofka ma gurigiisaad kula nooshahay ma faamil baatihiin miyaad lashaqaysa? Meelwalba waxad kusooqorteen anshax iyo sumcad wanaagsan halkaan waa inaad ka dhigtaan in uu "maskixiyan u fayoowyahay.

- **Qodobka 60(2)(c):** qofkasta oo ka haya xil dowladeed Hay'adaha Dowladeed ee heer Federaal iyo heer dowlada goboleed xiliga magacaabista ama lixdii bilood oo ka horeysay, meeshaan waxaa ku qoran qofkasta oo uu ka mamnuucnay xeerka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, qofka xeer Jamhuuriyadda uu ka mamnuucay shaqadana waa in aad noosoo cadaysaan xeerarka mamnuucay iyo meesha uu ku mamnuucay.

- **Qodobka 61:** mudadda xilhaynta xubnaha gudiga madaxabanan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha waa 6 sano oo aan halmar dib u cusboonaysiin lahayn, meshaan qodob cusub ayad kusoo qorteen faalo ayaad kusoo qorteen gudiga waxaan ka codsanayaa intay soo istaagaan dad badan oo aniga ila mid ahna way ka hadli doonaan mafahmin sedex sanaa laga qaadayaa sadex sanaa loo cusbonaysinayaa, dowlad goboleed baa keenaysa, meeshaan horta inad noo sheegtaan oo noo sharaxdaan waan ku rayn lahaa, meelkasta oo ay ku qorantahay dowlad gobleed kasta, **kastadana** waa in aad cadaysaan, dowlada

goboleedkastaa meelo badan kusooqorteen oo ku xusan, **qofkasta oo ladoranayo dowlada gobleedkiisa** in aa kudaysaan waan jeclaan lahaa .

- **Qodobka 55 (1)(f):** xisbiyada siyaasadeed marka lasoo xulanaayo in uu siiyo mudnaan gaar ah haweenka soomaaliyeed, anaga mudnaan gaar ah idinkuma haysano mana idinka sugaynee 30% haweenka hala idiinka helo, kuraas gaar ah oo haweenka soomaliyeed u xiran sida wadamada dariskeena ah xataa hadii aydan 30ka kootada xirayn waa in la helaa "women Rep" kii haweenku lahaa, **kuraas ay haweenku ku tartamaan oo gooni ogu xiran waa in lahelaa.**

- Waxaan rabaa in aan ku darsado maadaama cutubka 4aad uu gabogabo yahay, waxyar ayaan rabaa in aan kaftamo labo reer oo reerahayga oo daris ah ayaa waxaa layiri way is sheegteen dhowr jeer, marka reer baa gabay sootiriyoo waxay dheheen "reer hebelkan halkaa jooga hadii nalaga dayn waayo danba noqotay geediga kudara noqonay reer hebele" , hada dastuurkii joojiya cutubka 4aad halaga fiirsado waa la dayn waayay, waxaan ku talinayaa xildhibaanada sharfta leh xildhibaan walba in uu aragtidiisa kadhiibto waa muhiim xildhibaanow aragtidaada dastuuriga ah in aad kadhiibato, hadii aadan aragtidaada kadhiiban waxaad ka gaabisay shaqadii dastuuriga ahayd iyo matalaadii shacabkaaga aad matalaysay, xildhibaanada sharftaleh waa muhiim aragtidiina in aad ka dhiibataan oo aad kudarsataan , waxan rabaa oo kale in aan sheego nin walba oo xilka Soomaaliya sooqabta waxaa ka go'nayd in uu dastuurka qabyo tiro, walalayaalow dastuurkii waa qabyo aan qabyo tirno, inagoo waxkasta oo aan ka shaqaynaynana diinta islaamka ku salaynayna sababtoo ah inagaa masuuliyadeenii ay tahay , waa la guuree geedi caano leh waad mahadsantihiin .

2) **Xil. Abdiqani Ismail Said:**

Xildhibaanada sharaftaleh iyo Gudoonka iyo marti sharfta kale dhamaan waad salaamantihiin, Guddoomiye maalintii dhaweyd waxaan moodayay in ay ahayd in kooram loobaahanyahay, laakiin magaranayo waxa isbedelay, qorshaha saas ayaan moodayay inaad nagu tiri, lakiin hadii sidan lagu wadayo waan wadayaa, lakiin balantu waxay ahayd in kooram maanta loo helo, "Gudoomiyaha ayaa hadlka kasoo dhex galay oo yiri xildhibaan maalinti dhaweyn ayaan cutubka guud ahaan afarta madax ansixinay, lakiin dooda ayaan labo ka kala dhignay" .

- **Qodobka 54(2)**: qeybtiisa labaad ee xisbiyada siyaasadeed waxaa ku qoran oo ay Gudigu sooqoreen xisbiyada mucaaridka iyo kuwa muxaafidka ah, halkaa waxaan oran lahaa halaga dhigo xisbiyada qaranka un halagudaayo waa mucaarid iyo waa muxaafid toona makala laha waa xisbiyo qaran sidaa halagu daayo saas ayaa ku haboon, lakiin hadii layiraahdo waa mucaarid waxaad mooda in durbaba laga sii saaray meesha.

- **Qodobka 56(2) :** tartamayaasha xisbiyada siyaasadeed marka ay soo gudbaan waxaa layiri labo urur siyaasadeed baa soobaxaya, halka horena waxaa inoogu qoran oo aynu soo ansixinay xisbiyo badani in ay jiraan, markaa magaranayo siday isku waafaqayaan xisbiyo badan iyo labo xisbi, anigu waxaan ra'yigayga kudarsanayaa xisbiyo farobadan looma baahna oo tiro badan oo lagu kala jibiyo mucaaridka oo dowladu ay dadka bulshadu ra'yigooda kudhiiban waayaan oo aad u farobadan, lakiin waxaan taageersanahay in lagadhigo sadex ama afar xisbi, lakiin labo dhinacna ha u ciirsan weeyaan, labo xisbi

siyaasadeed hadii aynu isku sookoobno waa dhinacna ha u ciirsanina, markaa taa laftirkeeda xisbiyada halaga diktoonaado oo hala ogaado .

- **Qodonka 57aad:** dhisida Gudiga madaxabanan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha; labadaana labo shey oo la iskukeeno ma ahee hala kalasaaro, Gudiga doorashooyinkana sidiisa hanoqdo wixii xuduudaha iyo soohdimaha ka shaqaynayana sidooda hanoqdaan, labo khilaafaad iyo labo howlood iskuma dhexwadi karaane, doorasho markay timaado deegaankaa la isku qabsanayaa howsha way isbadelaysaa anagaa halkan ka codaynayna, anagaa halkan ka codaynayna, ilayn waxaa layiri waxaa looguraya "system one man one vote" marka arinkaasi isma galo, taana hala kalasaaro oo ha lagu celiyo labo guddi oo madaxbanan hakala noqdaan, hadii ay lakiin isgalaan anaga hebelbaa nogu jira, anaga xaganaan ka codaynaynaa, tan labaadna ogaada oo dadkeenu marka aad wareysato waxay moodayaan doorashada "one man one vote" marka latago in jannadii la galayo, war hadii "one man one vote" aan galno iyo hadaynu doorashadaa dadban iska wadano saas unbaynu ahaanaynaa ee waxaa isbadalaa waxaa weeyaan doorashada waxa loosameynayaa waa wado wax lagu gaaro ee hadafkii ladoonayay ee lagu danbeeynayay ee barwaaqada lagu gaarayay "one man one vote" ka ma aha , dadka bulshada soomaaliyeedna intaas ayaan u sheegayaa iyo xildhibaanada in aynu ogaano "one man one vote"ka in aanay ahayn halkii loosocday, laakiin waa wado wax lagumaro oo wax lagu gaadho .

- **Qodobka 59(1):** xubnaha Gudiga mdaxabanaan ee doorashooyinka, **soohdimaha** kudarimaayo waanba kasiireebay be, halkan xubnaha kuqoran Gobalada waqooyi Soomaaliland waa kamaqan yihiin magaranayo waxa loogasaaray, ma Soomaaliland saas ayaa lagu ictiraafay oo hawsheedii waala sii daayay, xubnahoodii halagu soo daro meesha waan joognaa waan katirsanahay, hadii lagusoo dari waayo waxay noqonaysaa in aanay kujirin, tan labaad doorashadana waa in lagusoo daraa sida aan u galayno doorashada, hadii layiraahdo"one man one vote" halkan kaga gala dee yaa nadooranaya ee meesha noo jooga? Taasina waa su'aal kale oo meesha taala, waad mahadsantihiin.

3) **Xil. ZamZam Muhumed Omar:**

Bismillaah awalan selaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaat Labada Gudoon iyo ku xigeenadiisa mudanayaasha xildhibaanada marlabaad iyo mar sedexaadba waan idin salaamayaa Guddoonka iyo bahda warbaahinta.

- **Qodobka 56(2):** wadanku wuxuu yeelanayaa labo xisbisiyaasadeed, waxaan soojeedin lahaa aniga aragtidayda wadankan labo xisbi siyaasadeed maqaadi karo ugu yaraan sedex xisbi, "maximum" waa in lahelaa dhexdhexaadin oo qof dhexda uu kusoo dhacaa xisbi lahelaa, **sidookale hadii ay ka fursan waydana in 5 xisbi lagadhigaa waa aniga aragtidayda.**

- **Qodobka 56(1):** halagu cadeeyo oo haloo sheego tirada ururada siyaasadeed ee ka qeyb gali kara doorashada golaha deegaanka si ayna ururada xadhko u goosan oo ayna u noqon "xadaaf" ama ururro u dhisan qaab qabiil, hadii aan imika niraahno doorasho qof iyo cod ayaan aadaynaa 4.5 ayaan ka cararaynaa qabiilkii xanaaqaba uu yiraahdo waxaan samaysanayaa xisbi waxaa taasina "damage" noqonayaa qaabkii qaranimo iyo isbedelkii iyo qadiyadii lawaynaynaayay.

- **Qodobka 57aad:** wuxuu ka hadlayaa dhisida Gudiyada madaxbanan ee doorashooyinka iyo soohdimaha, sidaa daradeed waxaan soojeedin lahaa una soojeedinlaha Gudoonka iyo Hay'adaha dowlada ay quseeyaan in ladhamaystiro lana dhiso Gudiyo madaxbanaan doorashooyinka , inta aan lagaarin doodista cutbka shanaad ee dastuurka, maadaama aynu ognahay shaqada balaadhan ee u taalo Gudigaas in ay u baahan yihiin waayo aragnimo badan laxidhiidha shaqada baaxada leh iyo mustaqbalka ay qaban doonaan , maadaama laga guuraayo qaabkii xulashada oo loo guuraayo doorasho qof iyo cod waxaynu u baahanahay in aynu ka galaangal galno ama heegan ugu jirno isbedelka soconaayo, sidaa daradeed waxaan soojeedin lahaa in hada hadii afarta cutub sidaa lagu ansixiyo in lasameeyo Gudiga sida ogu dhaqsiyaha badan leh, " ninbaa wuxuu yiri laantii lulataay idhageyso hoobanta agtaada taala" , ninki cabdiqani ahaa baa wuxuu yiri Soomaaliland ictiraaf malasiiyay, lama siin cabdiqaniyoow carabka hadlkaga kadhowraysi maadaama dadka deegaamada Soomaaliland matala

- **Qodobka 59(1):** waxaa ku qoran xubnaha Gudiga madaxabanaan ee doorashooyinka iyo soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 15 xubnood oo u soojeeda Golaha wasiirada xukuumada Federaalka Soomaaliya oo lala tashaday Hay'adaha ay khuseeyaan Baarlamaanka Federaalka uu ansixinaayo Madaxweynaha Jamuuriyadda kumeelgaarka ah ee xeer madaxweyne, 15 kan laqoondeeyay 12 kamid ahi waa Maamul Goboleedada ay kujiraan Gobolka Benaadir, aniga "NCC" waxaa igu matalaayay Raysalwasaare kuxigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Saalah Jama mana kadhex muuqdo sadexda qof ee soo haray, waxaa laga yaabaa mid Dir in ay qaadatay, Dir koofur waliba, mid kamid ahna in ay qaadato beelaha 5aad, aniganа wa hadii in aan qaato hal xabo ay iisoo hadho, hadii aanu Saalah Jama miiska uu fadhiyaa aanu kusooqaadaynin labadayda xubnood, siyaasadu ma aha sadaqo la isa siiyo hadiyad la isa siiyana ma aha, hadaanan siyaasad ka shaqaynaynin miiska aan fadhiyana waxba la igu siinaynin maxaan marka hore miisaska oga dhex muuqanaynaa , qolada Gobolada waqooyi kasoojeeda beelaha kasoo jeeda Soomaaliland carabka waxaad ka ilaalinaysaa in aan anagu is eedayno, hadii aanu kadhex muuqanay siyaasada Soomaaliya oo aan Aqal Sare haysano , oo Raysalwasaare kuxigeen haysano oo maanta la leeyahay 15 xubnood Soomaaliland kumajirto dee dadka kuraasta uuga kacoo iska dareera waxba ma gashaane runta aan idiin sheegee, hebelbaa wax noo diiday iyo , hebelbaa saan sameeyay iyo wax kudiiday iyo wax ku eryaday malehee adigaan matalaad lahayn, siday kudhacday 15ka xubnood oo halkaan aad kusoo qorqorateen in aan kamuuqan waayo maxay kudhacday, ma miiskaa nagala adkaaday, hadii nagala adkaaday Saalah hasoo sheego anagaa heegan uugu jirnee waxayaga sooqadanaynee, saxiibada dastuurka kashaqaynayoow dastuurkan 10jeer oo horena carbkayga waan ku dhuftay, Bini'aadamka waxa uu sameeyo waanaagu uu sameeyo ama shaqo uu sameeyo lama yaso sidii ugu qurxda badnayd bay intooda badan u qoranyihiin laakiin waxbaa hoos maraayo, inaad iska soo qorqortaan 15 aad sooqaadaan ood isoo horkacdaan oo halkaan isoo fariisataan tiraahdaan hadhowna ha la ii ansixiyo, aniga xildhibaan Gobsan markaad I aragtaan waxa ogu horeeya oo idnku soodhacayo waa Madaxweyne Xasan Sheik Mohamuud , laakiin siyaasadaydu waa maya aragti baan leeyahay waxii aragtidayda ah ee halkan aan kadhexwaayo dastuurka meelna uma socdo, Soomaaliland masraxeeda iyo baraxeeda hadii aan ka dhexwaayo buuga waa la iska laalayaa, qolada dastuurka iska soo qorqoranaysana marka aad wax sooqoraysaan heyb baan ku fadhiyaaye heybteyda yaan kadhexwaayin, aad baad umahadsantihiin.

4) **Xil: Daahir Amiin Jeesoow:**

Mahadsanid Guddoomiye, guddiga Dastuurka soo qoray waxaa fiicnaan lahayd dastuurka aan wax ka badalayno waa dastuurkii 2012 la ansixiyay waxaa fiicnayd in qodobada dastuurkaas ku qornaa ee 143 qodob ahaa in aad soo qaadataan, oo aad ku kor falaadaan oo waxa aynu ka doodayno ay qodobadaas ahaadaan, waxaad moodaa in qodobo badan aad ku soo darsateen hada qaybtan aan gudagalanay dastuurkii hore wax uga jiro waxaa ka jira hal qodob oo aad soo qaadateen oo ah Guddiga doorashooyinka iyo waxa ay ku imanaayeen, isagana ma aydaan soo qaadanin oo meeshiisii kuma aydaan soo celin, waa hagaag, mahadsanid Guddoomiye.

- **Qodobka 53** Ee cod bixiyayaasha ah, waa fiicantahay in la qoro laakiin waxa iska leh shaqadaas Baarlamaanka Soomaaliyeed xeerka uu soo saaraayo in aad ka daysaan ayaan anigu idinkula talinayaa, sababta oo ah waa sharcigii la soo saari lahaa waliba farqooyin badan ayaa ku jira.

  Qaladaadka aan ku arkay waxaa kamid ah diiwaangalinta marka la samaynayo tusaale ahaan; doorashadu waxay u dhacdaa laba nooc sida caadiga ah, mid maaweelo ah oo qofka uu feel iska galaayo oo meeshaas lagu diiwaangalinaayo oo xogtiisa iyo suulka looga qaadaayo oo sumad la saarayo maaweelo ayaa la yiraahdaa, mid kaloo diiwangalinta ah way jirtaa oo lix bilood ilaa sanad ka hor dadka lasii diiwaangalinaayo, tan la qaadanayo maxaad dastuurka ugu soo qoraysaan, Baarlamaanka ayaa go'aan ka gaarayo idinka maxaad go'aan uga soo gaadheen oo aad tiraahdeen diiwaan galin ayaa la samaynayaa, hadii uu Baarlamaanku soo qoro Maaweelo ayaa laga dhigayaa, dastuurku wuxuu u baahnaanayaa sadex meelood in laba meel lagu bedelo waxaad ku soo qorteen, marka waxyaabaha u baahan in loo daayo xeerka Baarlamaanka uu soo saarayo inta haku soo qorina oo Beri carqalad keeni karta.

- **Qodobka 55aad:** shuruudaha xisbiga siyaasadda asagana waxaa jira xeer uu Baarlamaanka soo saarayo, sharciga xisbiyada la yiraahdo in aad idinka maanta sii qortiin oo berina Baarlamaanka si kale ay ula muuqato runtii waa wax aad u nasiib daran, sharciga xisbiyada in la sugo ayaan soo jeedinayaa, sida waxaa ku jira beelaha laga tirade badanyahay inuu tixgaliyo iyo haweenka, Haweenka anigu waxaan aad u jeclahay in sida Kenya ay u qaataan qoondo tilmaaman oo "women rep" la iraahdo loo qoro, xoogaa waxaad moodaa ilbaxnimada maanta in ay ka wayntahay in dastuurka lagu qoro 30%, laakiin in la yiraahdo "women rep" oo loogu talagalay haweenka ama 50 ha ahaadaan ama 60 ha ahaadaan oo xoogaa ilbaxnimada qurxinaya ayaa jira, waxaa kale oo jira ayaga kaligood ma aha dadka curiyaamiinta ahna iyaga laftigooda in qoondo meel loogu qoro oo dastuurka waa loogu qori karaa 30% xoogaa in laga qurxnyahay ayaad moodaa, inkastoo aan ka war sugayno mooshinkii la geeyay oo aan ku go'aan qaadan doono.

- **Qodobka 56** Anigu waxaan qabaa shuruudaha lagu kala reebi karo xisbiyada, noocyo badan ayaa lagu kala reebi karaa, wadankeena waad ogtihiinoo 1960-kii sideetameeyo xisbi ayaa horseed u ahaa musuqmaasuq fara badan oo markii dambe keenay in ay ciidanku afgambiyaan, hadana in ay faraha ka baxaan ayaa suuro gal ah anigu waxaan qabaa marka ugu horreysa in Sadex xisbi laga dhigo oo aan labo lagu soo koobin oo sadex laga dhigo, labo way yartahay hadii afar la dhahana afarta beelo ee ugu cayilan ayaa kala boobaya shan hadii la dhahana shanta beel ayaa isku qaybinayaa, marka ani waxa aan qabaa in sadex laga dhigo oo qof kasta xaq u leh xisbiga uu doono in uu gali karo, qaabkii lagu kala reebayo

anigu maanta ma qabo doorashada soo socoto  cod bixin iyo golaha deegaanka in lagu kala reebi karo maqabo, waayo waxa aan qabaa wax precentage (%) la yiraahdo in la isticmaali karo, ururkii keena 25% ayaa ugudbaya in la dhoho oo percentage lagu kala qoro, laakiin waxyaabahaas oo dhan sharciga doorashooyinka ayaa xaq u leh in lagu qoro, oo dastuurka hada in lagu sii qoro waa laga fiicanyahay.

- **Qodobka 56(1):** Doorashooyinka Golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhamaan ururada siyaasada ee ka diiwaangashan guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka qaran iyo soohdimaha, in lagu daro goleyaasha Dowlad goboleedyada, mar hadii deegaan la yiraahdo Gobol deegaankiisa waaye, laakiin dawlad goboleedyadana Baarlamaan ayay yeelanayaan ee Baarlamaankoodu in xisbiyada ay ku tartamaan waaye, ayaga ruuxooda inaad ku dartiin waaye, Gollayaasha Dawlad Goboleedyada inaad ku dartiin waaye meeshaas oo aad raacisiin, hadiiba laga maarmi karin  ilayn sharciga oo waxa la samaynayaa, meel walba waxaa ku qoran sharci uu soo saaro Baarlamaanka, sharcigii uu Baarlamaanka soo saari lahaa Dastuuri haduu noqdo oo wax Dastuurka ku qoran uu noqdo, Dastuurka barito wax ka bedelkiisa sidaan hada sheegay 3/2 ay keeni karto, waxa meesha aan ku qoranayno ay noqoto in dastuurka wax laga bedelo dhibkeeda ayay leedahay.

- **Qodobka 58aad** xilka iyo waajibaadka Guddiga Madaxbanaan ee doorashooyinka, waxa aad tiraahdeen waxa aan ka soo qaadanay qodobka 111( E) iyo 111(G)  qoodbka sidiisaba soo rara ee ku qora meeshan banaan isaga ayaad tirteen oo ay meeshiisu banaantahay, waxaad naleedihiin waxaan ka soo qaadnay qodobkaas, marka ani waxaan qabaa Dastuurka waxaa mudnaanta 1aad noo leh dastuurka hadda lagu dhaqmaayo, waxyaabaha cusub ee aad ku darteen waxaa ka xoog badan dastuurkii hore, marka waxyaabaha faraca ah iyo waxyaabaha mudnaanta gaarka ah in aan kala saarno waaye.

- **Isla qodobka 58 (C)** in uu diyaariyo abaabulo oo uu fududeeyo qabto heerarka kala duwan ee doorashada, waxaas oo dhan waa wixii lagu soo qori lahaa xeerka, ma ahan wixii dastuurka lagusoo qori lahaa, dastuurkan waxaan rabnaa  maanta wax laga bedalyo in uu moqdo "provessional" qodobadiisa iyo qoraalkiisu uu gaabanyahay oo habaysan in uu noqdo ayaan rabnaa, ee wixii guddi doorasho aynu ku samaysan lahayn in lagu soo qoro xeerka baarlamaanka ayaa la rabaa in lagu qoro, waxyaabaha u baahan xeerka Baarlamaanka iyo shuruucda lasoo saaraayo in aan dastuur ka dhigano sax ma aha.

- **Qodobka 61aad** mudada xil haynta xubnaha guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaran iyo soohdimaha waa 6 sano oo halmar ah oo aan loo cusboonaysiinaynin, waayo waxaa hoos ugu qoran sadex mar ayaa la bedelayaa guddi 15 ah, markii 3 mar la bedelo 7.5 iyo 7.5 loo kala tuuro maxaa loo reebaa? 7.5 marka la tiraayo oo 7.5 kale la midka yihiin sow isma burinayo qoraalkiinii oo ahaa 6 sano, loomana jadiidin karo waa halmar Sow ma burinayo in haaf laga tiro haafna lagu daro, Marka waxaan qabaa inta hore intaas ayaa  ku filan in la yiraahdo xilhaynta guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha waa 6 sano oo halmar ah oo aan dib loo cusboonaysiinaynin intaas ku joojiya, inta kale ka saara way hadal badanyihiin waad mahadsantihii.

5) **Xil: Mahdi Mohamed Gulaid:**

Bismiilahi Raxmaani raxiim, alxm wasalaatu w-----

Gudoomiyaha iyo guddoonka iyo xildhibaanada labada aqal waan idin salaamayaa waxaan toos u guda galayaa dooda

- **Qodobka 54(1)** xisbiyada siyaasadeed waxa ay si Nabadgalyo iyo dimuqraadi ah ugu tartamayaan hogaanka siyaasadda ee JFS ee golayaasha sharci dejinta ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed ayaan ku soo daray. Mudenayaal sida aad ogtihiin golaha Baarlamaanka ee labada Aqal waxaa ka samaysmay kutlado aad maqasheen marba kutalada Green Party iyo kutlada Midnimo qaran iyo Kutlada Toosin qaran iyo kutlad kale oo sadexaad oo ahayd Badbaado, taas macnaheedu waxa ay ku tusaysaa xiisaha loo qabo in dadka intii isku neef ahayd ama argti ahayd xisbi siyaasadeed ay isugu tagaan, marka waxaan aaminsanahay dalkan waa uu bisilyahay in loo gudbo nidaamka xisbiyada badan waan dhiiro galinaya waana soo dhowaynayaa, innaguna Baarlamaan ahaan Guulo badan ayaynu gaarnay intii aynu jirnay Baarlamaanka 11aad in hirgalinta nidaamka xisbiyada ay innagu inoogu suntanaadaan oo suurto gal ah, waxaan is leeyahy guul inoogu biiraysa guulaha taariikhiga ah Gole ahaan iyo Baarlamaan ahaanba aynu gaarayno.

- **Qodobka 54(2**) xisbiyada siyaasadeed waxaan ku raacsanahay cabdi qani waxay ka mid yihiin tiirarka Nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda JFS, xoogaa kala faquuqa aynu ka dayno Oo ah mucaarad iyo muxaafad.

- **Qodobka 56aad** Tartanka xisbiyada siyaasadeed, doorashooyinka iyo xisbiyada farqada 2aad oo leh in labada urur siyaasadeed ay buuxiyaan shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada iyo ku guulaytayaasha doorashada golaha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran oo u tartamaya kuraasta Golaha shacabka iyo aqalka sare, Madaxwaynaha iyo ku xigeenada sida aan ani horay u iri oo aan soo jeediyay oo ay aragtideedu tahy, waxa aan doonayaa in aan halkaas dib ugu noqdo taariikhdii aan soo marnay ee sadexda marxaladood ah; dowladii rayidka ahayd ee 1960-kii iyo 69-kii Buugga faalada waxa aad ku soo qorteen in doorashooyinkii 64 xisbi ay u tartameen, anigu waxa aan maqli jiray ururada iyo xisbiyada marka la isku daro 86 ayay ahaan jireen, waxaa dhacday nin iyo xaaskiisu in ay subax soo toosaan oo ay ku dhawaaqaan xisbi siyaasadeed ay iyagu leeyihiin, waxaynu ognahay oo aynu ka marqaati kacayanaa oo taariikhdu xusaysaa in ay beeluhu sii kala furfurmeen oo jilib ama jibsin kasta urur siyaasadeed ama xisbi siyaasadeed ay samaysato, waa saluugii doorashooyinkii ka dhacay iyo kala qaybsanaamtii bulsho ee balaarnayd ayaa keentay in uu kacaankii curto waagaas, dabadeedna aan marxalad kale galno.

- Marxlaada 2aad waxaynu ka nimid 86 xisbi oo ahayd 1979-kii dastuurkii jiray iyo ka horba xisbiga hantiwadaaga kacaanka Soomaaliyeed oo hal xisbi ahaa marka la yiraahdo umad maxaa xisbi uu u qabtay ama nidaam uu u qabtay, anigu waxa aan qabaa xisbiga hantiwadaaga kacaanka soomaaliyeed iyo intii ay jirtay dowladdii kacaanka in ay tahay waqtigii u dalku dhismay, saluugyaha jira tabashooyin ha jiraan, lakiin dalka dhismo ahaan iyo ummad ahaan hadii ay tahay infrastructure iyo hadii ay tahay Magac milgo iyo maqaam, ee aynu dunida ku leenahay waa mudadii xisbiga kaliya aynu lahayn, Marka muwaafaqadeen ay israacday oo aynu hanaqaadnay, waxaa kadambaysya jabhadihii reer walba xarafka "S" uu xagga hore uun ugu darsaday SNM, SSPf, USC, SNF, RRA, waa reer Magac xisbi uun leh, marka S-tii uunbaa xaga hore loogu darsaday, hadii Eebe idimkeedu leeyahy imika maxaa inoo yaalo? Sadaxdaa marxaladood baynu soo marnay.

  Marxaladda sadexaad baan idiin sheegayaaWaa 2021 baa la mari waxaan iri ururadii hala furo, Diiwaanka guud ee guddiga doorashooyinka waa lagu noqon karaa anigu xafiiskaygu waxaan samayn jiray wax la yiraahdo profyling, urur baanu doonay xisbigii baynu doonay

in aynu u samayno dabadeedna guddiga doorashooyinka yaan u tagay deedna waxa ay i yiraahdeen 22-kaas ayaa imika diiwaangashan ee magacaad samaysanaysaan waa in uu ka duwanaadaan marka 22-kii baan soo qaatay profyling baan u sameeyay mid kasta oo maalin kasta lagu dhawaaqana waan qori jjray, xaafsikygu waan ka shaqayn jirnay ileen tartan baa la galayaa, 110 urur siyaasadeed iyo xisbi ayay ku joogsatay 2021, xisbiyada siyaasadda 110kaas 75 kamid ah waa laga lahaa Galmudug iyo Hirshabeele, 15 meelahaasna waxaa laga lahaa Puntland 4 ilaa 5 meelahaasna waxay ka soo jeedeen Somaliland, 4 waxaa ay ka soojeedeen koonfur galbeed, 4 waxay ahayd beesha 5aad, 6 meelhaas soo haryna waxay ahaayeen Jupland, Marka waad arkaysaan hadaynu mar 2aad dib ugu noqono nidaamkaas xisbayada badan ee aan dabarka lahayn waxaynu galaynaa in aynu reerihii dib ula fariisano, 110 oo imika ahayd iyo 60-meeyadii oo 86 ahayd labadubada tafaraaruq iyo in umuddu kala tagto ayay keenaysaa, annigu markaa waxaan aaminsanahay in labada xisbi siyaasadeedna lagu kordhiyo wax kabadan aan la gaarin, waxaan qabaa 3 xisbi siyaasadeed in aynu ku soo koobno oo dastuurkana sidaa ku cadayno, sabbatu waxa ay tahay laba xisbi siyaasadeed marka ay nidaamka beelaha dowlad goboleedyaduna ay isu kaashadaan, waxaa imanaya xisbi dhexe oo masalan “politacal Islam” Iyo dadka afkaarta kale mideeya, aqoonyahanada Soomaaliyeed bulshada rayidka ah dad aan labadan xisbi aan doonaynin in ay ku biiraan ayaa xisbigan 3aad isugu imanaya, marka aynu ka dhigno 3daas xisbi siyaasadeed, hadii aynu ka badino ogaado hadii aynu 4 niraahno ama 5 niraahno 5taas beelood oo aynu ukala fadhino unbuu magacii “S” reer waliba uu gashan ayaynu 5 xisbi siyaasadeed ka dhigaynaa, marka maynaan soo aruurinin mujtamaceenii jiritaankii waynu sii baahinay, anigu xagga xisbiyada siyaasada 3 daas ayaan aaminsanahay, dastuurkana in lagu cadeeyo laguna soo koobo.

- **Waxaan u gudbayaa Qodobka 59aad** oo ka hadlaya Guddigaa Doorashooyinka madaxabanaan waxaan aaminsanahay anigu 17 sanadood ayaan Guddi doorasho ka soo shaqaynaayay, ama aan comissioner ahaado xili ka mid ah ama aan la taliye sharci ahaado ama madaxa operation-ka iyo la talinta sharcigaba, marka shaqada doorashada la galo way balaarantahay hawhsa guddiga doorashada ku soo baxaysa marka xarunta oo hoolkii ah marka lagaga tago 3 commissioner ugu yaraan, tirada soo hadhay waxay u baahanyihiin in gobolada ukala baxaan, markaa waxa aan aaminsanahay 15 shaqada taalo in ay ku yartahay, labadii la isku daray Guddiga xuduudaha iyo guddiga doorashooyinka 99 bay ahaayeen halkaas waxa ay noqonaysaa 18 si ay tirada u noqonin **aynu ka dhigno 19, marka waxaan qabaa guddiga doorashooyinka ee madaxa banaan iyo soohdimahada laga dhigo 19 xubnood, beelaha soomaalida ee caban doona xal bay u noqonaysaa waayo 5 iyo 5 sida ay ku imanayaan imika waynu isla garanaynaa, 9ka soo haray hala isugu dheeli tiro matalaada ay guddiga qudheedu ay ku yeelanayaan**.

- Waxaan u imanayaa Gudoomiyaha **Qodobka 59(2)** gudoomiyaha iyo gudoomiye ku xigeenka guddiga waxaa iska dhex dooranaya xubnaha guddiga, anniga oo aan madaxawaynaha u diidaneen awooda iyo shaqada uu qabto hadana madaxbananida guddiyada doorashooyinka marka la eego waa in ay iyagu iska dhexdoortaan guddoonkooda, marka halkaa aad tiraahdeen kadibna meel marinata Madaxawaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, annigu waxaan is leeyahay Madaxbanaanida guddiga ayay meeshaas taabanaysaa, halkaas halaga reebo oo halagu joojiyo guddiga iska dhex dooranaya gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa.

- **Qodobka 60(1)** in uu yahay Muwaadin Soomaaliyeed leh jinsiyada in aad ka daysaan oo muwaadin Soomaaliyeed Da'diisuna ka yarayn 40 sano, anigu 40-ka sano waan taageersanahay waayo waa masuuliyad wayn waana shaqo wayn oo xasaasi ah.

- Waxaan u imanayaa **Qodobka 61aad** mudada xil haynta ee xubnahaha guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaran iyo soohdimaha waa 6 sano halkaa in aad ku joojisaan baan taana qabaa, hadii ay noqoto in dib loo magacaabo qaarkood, marka hore waan 6 -da sanaba lawada magacaabaa waayo way isla qabsanayaan way isku tababaranayaan, way iskaashanayaan, laakiin marka ay 6-du ka dhamaato, kala barna ha baxaan kala barna hala reebo habraacaasna sharciga doorashooyinka halagu cadeeyo, in kalabadh la reebaayo oo sadex sano dib loo magacaabo doono dastuurka waa lagu sheegi karaa, marka faqrad baan ku kordhin lahaa waa 6 sano hase yeeshee, waxaa lasoo celinayaa kalabadh xubnaha guddiga muddo 3 sano ah oo kale, markaa habraaca ay ku soo noqonayaan halkan mabda'ii baynu ku dhignay, habraaca ay ku soo noqonayaan sharciga doorashooyinka ayaynu ku faahfaahin doonaa oo faqrad sadexaad ah, habraaca shaqo iyo guddiga xeer ayaa qeexaya ama waxaa lagu qeexayaa xeerka doorashooyinka, inahaas baan ku soo koobay, marka waad mahadantihiin.

  Marka laba minute baan ka codsanayaa, labadaas minute ama minute ayaan ku soo koobayaa doodayda sida maalmahanba la soconay dooda dastuurka oo siyaasiyiin iyo xildhibaano kala duwan ay kaga hadlayeen Soomaliland oo ay lahaayeen Soomaliland baa maqan waxaan u fahmay in ay tahay Owr ku kacsi waa halkii haddaawi uu lahaa " hayaay cabdi qaadir hareer qabo owrka iyo hadaad magaciisa dantaydu ayna gaarin ma soo hadal qaado, markay muraad iyo dan ka gasho ayay oranayaan Soomaliland baa maqane Dastuurka yaan la dhamaystirin. Soomaaliland arrinteedu waa xaalad gaar ah oo sida jamhuuriyadda shiinaha iyo Taiwan ay uwadajireen ay jamhuuriyadda shiinaha dadka iyo doorashooyinka shaqaduba uma qabsoonto, laakiin xal loo raadinayo taiwan ayaa Soomaliland xal nabad ah loo soo celin doonaa midnimada Soomaliyeed-na ay kamid noqondoontaa, dunidu waxay aaminsantahay one china policy Duniduna waxa ay aaminsantahay one Somali Policy, marka yaynaan ku raad gadanin waan idinka mahadcelinaynaa waxyaabo kale oo tabashooyin ah baynu qabnaa hadaad nooga gurmanaysaan kuwaa wax nagala qabta.

  Qodobka 2aad ee aan ku gabgabaynayo waxaa weeye isagana waxaan ku dari lahaa Nidaamka Madaxwaynaha iyo 4ta ku xigeen, wadanka Switzerland wuu ku hanaqaaday dhaqaalaha aduunkana weeye, koonfurta Sudan Madaxwayne iyo 4 ku xigeen bay leedahay kadib khilaafkii ka dhacay nidaamkooda " Revised Comperhensive agreement-gooda ayaa dhigaya, marka iyaguna sidaas ayay uga hana qaadeen oo waajaarkeena East Africa.

  Mudo xileedka ayaan u imanayaa madaxweynaha iyo Baarlamaanka dastuurkeenii 60-kii madaxwaynuhu 6 sano ayuu ahaa Baarlamaankuua 5 sano ayuu ahaa, marka hadii aynu rabno in dowladnimadu jirto waxaan isleeyahay ama Baarlamaanku waa in 6 sano noqdaa ama Madaxwaynuhu waa in uu 6 sano noqdaa, oo midkeedna 5 sano noqdo, marka waxaan ayidayaa 6 sano oo madaxwayne ah iyo 5 sano oo Baarlamaanka ah, si madaxwaynaha uu uga shaqeeyo doorashada Baarlamaanka, ugu dambayntii Dooda wax ka bedelka dastuurka iyo dastuur cusub ereyga "Constitutional Review" ama "Ammendment" dunida waxay uwada taqaanaa in Dastuurka wax cusub lagu kordhinayo meelo la saxayo, meelo la wanaajinayo wax laga bedelayo, wixii jirayna la daynayo, marka doodaha aan anigu maqlay

ee ah Dastuur Cusub baa la qorayaa waxaan u arkaa Dood jaban iyo nin daad Qaaday Xunno Cuskay, WSC

6) **Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur:**

Bismilahi raxmaani raxiim, Guddoonka sharafta leh, xildhibaanada bahda saxaafada dhamaantiin marti Sharafta iyo gudiyadaba asalaamu caylkuma waraxmatulahaai wabarkaatuhu waad salaamantihiin.

- Waxaan u malaynayaa maanta waxaan joognaa qaybihii ugu danbeeyey ee cutubkan, waxaan filayaa meelo badan oo aan qabay inaan ka hadlana xildhibaan mahdi oo "expert" ku ah baa iga horeeyey oo waxbadan iyo xildhibaanadii ka horeeyaba baa aad u sheegay.

Dhowr qodob uun baan rabay inaan halkan ka idhaahdo kuna waafaqo runtii sidii horay loo sheegay, horta intaan qodobayda toos u galin cutubkani meel muhiim ah ayuu ka hadlayaa sida la sheegay waan meesha inta badan moranka dhalisa, waxa aan is leehay inaga oo ku turjumayna xaaladeena cutubkani wuxuu daawo u yahay xaaladaha murugsan ee siyaasadeedna guud ayuu daawo u yahay "options" iyo ikhtiyaaraadka inoo furan runtii waa koobanyihiin, labo arrimoodba yaa inaan hoosta ka xariiqno u baahan, mid waxa weeyi inaynu ka baxno isjiidjiidka siyaasadeed ee xaga madaxtinimada hogaanka dalka oo ah runtii intii soo joogtay baarlamaankii 9aad iyo intii ka danbaysay dadkii soo joogayba ay garan karaan dawladnimadeenu Meesha ay ka dhaqaaqi laadahay inay tahay inuuna dastuukeenu ka cadaynaynin hogaankii "executive" inuuna kala cadaynaynin iyo sidii ay u wada shaqayn lahaayeen, markaa halkaa in loo helo dalkan hogaan "executive" oo lagula xisaabtamo oo isaga kaliya loo raaco in la helaa waa mid muhiim ah weeyi.

Afar nooc baa jira madaxtinimada madaxweyne "executive" oo shacabku doorto, madaxweyne "parliamentarian" oo markaa iska "ceremonial" oo markaa "prime minister-ka" la doorto, markaa hogaankii dalka iyo "executive" lagu aamino. Madaxweyne iyo "prime minister" sidaan u naalno hada oo "hybrid"laakiin siyaasadu u kala qaybsantahay oo runtii qaabkeenan ahayn, laakiin wadamada isticmaala ay distoorkooda si qayaxan ay markaa ugu qeexeen, markaas noocyadaas ayaa runtii aduunku "presidential, parliamentarian" iyo "semi presidential" iyo "parliamentarian" iyo "primarial" oo "prime minister"ka ah. Markaa nidaamyadaasi waa nidmaayo jira weeyi, inagu qaabka aan u samaysanahay waa xeer jajab weeyi, xeer jajab baad moodaa inuu ku dhex jiro, markaa taa in la saxaa waa mid muhiim ah weeyi. Markaa xaaladaas aan ku soo jirnay, xaalada lagu sii jiri karayo maaha taa inaan ka guurno waynu u baahanahay oo aynu saxno oo Madaxweynaha isaga la doortaa, isagaa doorashada galee, isagaa "program"-kiisa lagula xisaabtamaaye isagu uu noqdo fulintii hawsha loo igmaday inuu fuliyo ay tahay, markaa inaan sidaas aan u qayaxnaa waa mid muhiim ah weeyi.

Markaa aniga waxay ila tahay arrintaas inaynu saxno "because" hab dhaqankeena dawladnimadu u shaqaynsayo iyo dastuurkeenu isma waafaqsano waa kala duwanyihiin, markaa waa in la is waafajiyaa habka doorashadeena, markaa aniga waxay ila tahay taas horta xaalada aan ku jirnay kuma sii socon karno, mida labaad waxa weeyi ee inaan hoosta ka xariiqno u baahanahay doorasho cod iyo qof ah inaynu rabno, doorasho xeer jajab ah oo dagaal sokeeye halis u galnay baynu ka soo baxnay oo dadban.

Doorasho dadban baynu ku imanay dhamaanteen, doorashadii dadbanayd kuma noqon karno ee noocii soo marnay ahayd kuma noqon karno. Doorashadii dadbanayd waxay inoo

keentaa inaan madaxweyneheena si dadban loo doorto oo inagii markaa hogaankii dalka aynu u doorano taas bay markaas inoo keentaa, markaa waxa haboon waa inaynu u guurno inaynu doorasho xildhibaanadeenee shacabka soo doorteen in runtii aynu noqono oo toos u matalno shacabkeenii u matalno.

Nidaamkii aan ka soo baxnayna aanu dib danbe aan ugu noqon, markaa doorasho dadban kuma noqon karno, waxaan u baahanahay doorasho qof iyo cod ah si ku gaadhno, markaa inuu dastuurkeenu kaa qeexee waa mid muhiim ah weeyi.

Madaxweyna toos loo doortay oo "executive" hogaan dalka ah qaabkee u doonayno oo isaga lagula xisaabtamo doorashadiisii ay toos dadwaynuhu u doorteen waa inuu helo markaa, hadii adiga toos laguu doorto, maxaa diidi kara in madaxweynaha toos loo doorto wax diidi karaa ma jiraan.

Markaa inaynu shacabka "accountable" u noqono inaan taana runtii aynu gaadhno ayeynu u baahanahay, markaa xaaladaynu aan ku jirnay hogaan siyaasadeed kuma jiri karno ee mugdiga badan iyo is qabqabsiga badan keenaysa, xaaladaynu xildhibaan ahaan la inagu soo doortay ee dagaal sokeeye halis u galnayna kuma jiri karno labadaa arrimood inaynu ka baxno ayeynu u baahanahay, intaa intaa ka sokaysa waxay noqonaysaa arrin farsamo sideebaa loo quruxin karaa ayey markaas noqonaysaa.

Markaa meelahaa markuu taabanayo distoorku waa inaynaan odhan distoor cusub baa la keenayaa ee waxaynu doonaynaa dalkeena inana samatabixino oo aan doonayna inuu stage kale uu markaas u gudbo, anigu waxaan ku talin lahaa markaan taa ka soo gudbo qodobada halkan ku qoran inta badan waa kuwo farsamo weeyi waa kuwa taabanay xisbiyada iyo taabanaya Guddiyada, marka xisbiyada la yidhaahdana sida laga dhawaajiyey waa xisbiyo qaran weeyi, xisbiyo maaha mucaarid iyo muxaafid loo kala qaybsho maaha. Xisbiyadu markaas sida laga dhawaajiyey mabda ahaan inay koobnadaan inay mabda inaga noqoto oona fowdada Soomaalidu is garab yaac, hada jeer waxaynu aamisanahay garbo siman nin walba wuxuu doonayaa markaa inuu meeshiisa ka dhaqaaqo,"even" hada fiiri waxkasta oo kale la samaynayo Soomaalidu waa isgarab yaac baynu ka shaqaynaan, fowda baynu ka shaqaynaa xitaa jaamacadeena fiiri,magaalada mogdisho intee jaamacadood baa ka samaysan, hadii qof jaamacad samaysto cid kastana jaamacad bay samaysanaysaa boqol iyo siyaado jaamacadeed baynu furaynaa.

- **Qodobka 56(2):** Markii hadii xisbiyo la samaystayna 200 ilaa 300 waan gaadhi karnaa, markaa nooca fowda nocaas ah inana habaynaa waa mid lagama maarmaana ah, markaa xisbiyadeenu inay koobnaadaan, laakiin qaab lagu koobo oo "threshold" loo ilaaliyana waa in loo sameeyo oo lagu xakamayn karo oo shuruudo loo sameeyo, waxase isleeyahay arrintaas faafaahinteeda marka mabaad'iida guud laga yimaado waa in sharciga axsaabta lagu qeexaa oo markaas halkaas runtii lagu faahfaahiyaa, markaa inta xisbiyada ka hadlayso oo dhan anigu taas baa runtii odhan lahaa qodoban iyada ah,

- **Qodobka 57(1):** sidoo kale waxaan odhan lahaa xaga Guddiyada marka laga hadlayo dhismaha Guddiga madaxbanaan waa in iyadana lagu faahfaahiyaa sharcigii lagu dhisayey Guddiyada, anigu waxaan ka mid ahaa Guddigii ka shaqeeyey sharciga lagu dhisay Guddiga doorashooyinka qaranka ee hada la kala diray, sharcigii lagu dhisay Guddigii ka shaqeeyey bay baan ahay, markaa hore baa la dhisaa sharcigii Guddiga lagu dhisi lahaa oo lagu faahfaahiyaa Guddiga intee buu jiraayaa sidee buu isku dooranayaa intee buu ka

imanayaa, mid kalena Guddigan madaama uu Guddi heer Federaal ah yahay, **waxaan soojeedinayaa inuu Federaalku maamulo oo heer Federaal lagu maamulo ee aan heer dawlad goboleed lagu maamulin oo aan dawlad goboleeyadow soo xulo aan la odhane ay noqoto inuu Federaalku u sameeyo macaayiir iyo "criteria" lagu soo xuli karo oo intii la "advertise" gareeyo dadka aqoonta u leh arrimahan ee sharciga iyo doorashooyinka aqoonta u lihi laga soo dhex xulo, iyadoo la eegayo inay bulshada Soomaaliyeedna ay wada matali karaan, isla markaan xiligan ay ka bixi karaan, markaa waa inay tayo, runtii waayoaragnimo iyo aqoon in lagu dhiso ayey tahaye in gobol hebalow keen la yidhaahdo anu waxaan isleeyahay taas lafteeda hoos bay u dhigaysaa magtabadoodii waa inuu heer Federaal kaliya ka hoosayn "because" wuxuu qabanayaayi waa doorasho Federaal waa madaxweynaha waa Golayaashii Federaalka weeyi, inta ka hoosaysa "supervision" bay ku yeelana karaa oo dowlad goboleedyadu ku yeelan karaan.**

Markaa in la yidhaahdo Guddigu inuu Guddi noqdo, Guddi heer Federaal ah inuu noqdo oo lagu soo xulo tayo, qaabka ay isku dooranayaana iyo qaabka runtii qodobada halka qeexayaan inay noqoto wax lagu faahfaahiyo sharciga lagu dhisayo Guddiga doorashooyinka lagu dhisayo.

Markaan si guud ugu hadlo, waxaan odhan lahaa qodobada xisbiyada oo ka soo bilowday ilaa 54 ilaa 62 ee khuseeya xisbiyada iyo Guddiyada,waxaan ka ahayn mabaad'iida guud asaasiga ahayn, waxaan odhan lahaa ha loo raro sharciga axsaabta iyo sharciga lagu dhisayo Guddiyada lagu dhisayo, hadii aan lagu noqon halkan labo xisbi bay noqnaaniyo waxay isku dooranayaa Guddoonkooga bay isku dooranayaan aan halkan faahfaahinta "details" aan halkan lagu galin ee macaayiir " because" markaad sharciga guud ahaan u akhrido ayaad fahmi kartaa baahida Meesha jirta, laakiin marka qodob yaryar oo kokooban laguu soo dhexdhigo, waxaa laga yabaa ina lagu wareero aadna sharcigii si guud u ahaynin, runtii intaas ayaan ku soo gabogabaynayaa waad mahadsantihiin.

7) **Xil. Seynab Mohamed Amir:**

Asalamu Caleykum waxan salaamaya Guddomiyaha Baarlamanka iyo guddiga fadhiya waan salamaya. Xildhibanada waan salamaaya qoladas halkaas fadhisana waan salamaya. Waxan umaleenaya markaa soo istaagay dad badana qoslaya maxa dhacay qeyr baan soo wadaa.

Horta waa lahadlay xildhibaano badan hadlay waxa hadlay Ra'iisul wasaare ku xigeenkii hore baa hadlay, waxaa hadlay Elmi group keyga oo dhan waa hadleen waxan lee yahay wixii aad hadasheen oo dhan waa ogolahay lakiin midbaa diidanahay.

- **Qodobka 57(1):** waxan diidanahy guddiga doorashooyinka guddomiye qolooyinkiina dastuurka maxa isxambaarsiye guddiga doorashooyinka iyo xaduudaha maxa isku rakibay oo shan iyo toban u tiraahdeen sababtoo ah xuduudaha waxey eegayaan meelaha doorashada laga galaayo xuduudaha gobalada see kala yahiin aye ilaalinayan qolana waa qolada commension la yiraahdo oo doorashooyinka maamuleysay.

Marka waxa waaye inla isxambaarsiyo ma ahan waxa sagaal xubnood aye ahaayen guddiga doorashooyinka sagaalka waxee uqeybsadeen labo labo, afarta beelod iyo beesha shanaad sagaal bee ahaayen ayaga is dooranaaye maxaa keenay in uu Madaxweynuhu Gudoomiyaha Guddiga asaga magacaabo.

- **Qodobka 58(2):** Guddiga dhaxdiisa is doorto sagaalka xubnood maa iska soo saaraaye Guddomiye, Guddomiye ku xigeen iyo Xoghayn. Guddiga xuduudahana sidaaas ayey ahaayen aniga waxa leeyahay marka waxbaa madoow oo la isku dhaxqasayaa guddiga doorashoyinka iyo xaduudaha waxba la qaldayaa aniga saan uheysto oo Seynab ah.

  Aniga waxan ka soojeedinyaa siday raga iga horeeyay sheegen Somaliland, Somaliland waa labo gobol oo waqooyi iyo koonfur la isku darsaday weyaan marka guddiga la qeybsanayo waxa la sameeya 4.5 labo reer hebel ah, labo reer hebel ah, labo reer hebel ah war away wadankii soo guuray oo ku soo darsaday Soomaalida labadoo gobal ee Somalida xorowday oo isku soo darsatay maxa loo diiday sagaal iyo sagaal inaa uqeybsano ileen beelahii Soomaliyed xaga wey jiraane horta qodobkaas waxan leeyahay ragoo meeshan joogo fadhiyoo dastuurka hala eego.

  Waxan umaleenaya shanta nine e meesha fadhisa hal nin oo reer waqooyi ayaa ku jiro afarta kale Soomaalida soke waaye marka aan qeybsano wax sida xeerka uu dhigayo aan qeybsano.

  Tan labaad guddomiye guddomiyaha baarlamaanka tahay waxn isdaba socona ilaa inbagaati dastuurkan waxuu soo jiitamaya ilaa inbagaati ilaa manta aan joogno Ra'isal wasaarahi ugu horeeyay ee balanka qaaday markaas Madaxweyne balan ma qaadin Ra'isal wasaarahi ugu horeeyay ee balanka qaaday waxuu ahaa Ali Mohamed Geedi waxuu yiri hadan labo sano iyo bar dastuurkas hagaanjnwaayo waan iscasilaa wuu waddi waaye labo sano iyo barkii Ra'isal wasaarahi wuu iscasilay waxuu yiri waa wadi waaye waa kas hala iga wado.

  Marka waxan rabnaa Madaxweynayasha hada dhaaratay aa arkeynay maalintii doorashada ey galaayen waxee yiraahden dastuurka hagaajineynaa Madaxweyne Hassan Sheikh waxuu yiri anaa dhameystiraayo ha dhameystiro lama diidano aniga ma diidina inuu dhameystiro, laakiin waxa waaye meesha sheekada laga bilaabo xooga yara qaldan meesha laga bilaabay dastuurka anaga dastuurka 2012 la ansaxiyaa jirto oo book kiisa aan heynay book lama soo qaadinee waa laqaaday book waxaa loogeeyey qolooyina loo geeyay dasruutka hagaajinaayan la yidhi, waa ladaba roge waa arkeysen xildhibaanadi hadashay oo dhan xildhibankasto waxuu dhahaaye dastuurki hore dib ha loogu celiyo qodobkii aad sameyseen dib ugu celiya dib ha laguu waxeeyo waxyaalo badana jiro daldaloolo badana jiro aniga waxa raba ma rabo hooyo waxan ahay intaas oo sano joogto mucaarad ma ahi inaa wax qodqodana ma rabo oo waxa rabaa inay wax hagaagan.

  Waxaa kaloo usheegaya xildhibaanada Soomaaliyeed ee dhalinyarada ah ee hada baarlamaanka joogta, senatarada waa salaamantahiin idinka karaame leedahin waxa tahiin dadkii wax loo celin lahaa ayaa tahiin adinka.

  Waxaa rabaa inaa wax usheegaya xildhibaanada dhalinyarada ee Soomaaliyeed waryaada waxa la noqdaa mucaarad waa la noqdaa muxaafidna waa la noqdaa markaa gashaan group yada aad sameysaten waxbaa lakala haraa waa lakala haraa waxyaalaha aa ku hadleysan iyo qaladaadka iyo magaciisiga hooyo waxaa dhahi lahaa joojiya hala joojiyo dadka wey kala dheeraynsaa ma ahee iskuma soo dhaweyneyso dastuurka waxa rabna anaga, wixii aan diidnee ee baarlamaanka isku raacaan diidaane inay qolooyinka ka soo shaqeeyan, lakiin ma ahan inaa iska hor imaano oo la isdiido ma ahan waqtigeeda lama joogo raga dhahaya

one man one vote horta taas ha sugina waligen waxa ahaneyna dadbanaan, dadbanaantas baan joogeynaa sababtoo ah ayaan idin sheega aan dadbanaantaas ku joogeyno si fiican hala iidhageysto waxbaan ogahay.

Hadii la yiraahdo xisbiyaa la sameynayaa aniga waxan ahay guddiga arimaha guddaha iyo amniga baarlamaankii 10aad, waxan iskugu yeernay xisbiyada todobaatan iyo todobo xisbi baa halkas soo fariisatay waan heynaa file ka guddiga wuu haaya waxa ka mid ahaa jeesow joogay oo goobjoog ahaa dadbadan aya joogau guddoomiyasha ka mid aha waxan heynaa todobaatan iyo todobo.

Maxaa xal ah marka in la yiraahdo labo xisbi iyo todobaatan iyo todobo ma isku imaankaran iskuma imaan karaan waxa la raba ragii ka shaqeyn lahaa ee joogo meesha ma ahan guddigan doorashooyinka waa baarlamaanka, wixii ka shaqeyn lahaa inay  soo saaraan xisbiyada inta laga dhigayo inay  soo saaran, aniga waan maqlaye rag dhahayo oo Ra'isal wasaaraha ka mid yahay oo dhahay sadex xisbi halaga dhigo, sadax xisbi lagama dhigayo anaa hada amarkaa bixinaayo waa shan xisbi waa inay  noqotaa wax la yiraahdo 4.5 mawa jirtabo, shantaa xisbi anaaba guddomiye ka noqon karo xisbi hadan rabo oo dhahi karo guddomiyaha xisbiga hebel hebel oo haweenka ama  waxa dhahi kara oo Soomaaliyed ayan dhahi kara. marka waxa waaye war hooy hala isdajiyo wadanka nabad ayuu ku fiican yahay.

Haweenka gala marka  anaga iyo haweenka waaye marka aniga waxa raba gabdhahani Soomaaliyed hada ka bacdi waxan ahaya umaleena inaa pension ayaan galaya gabdhah dhalinyarada ah sidaa ufakireysan looma fakiro anaga hadan  xaquudana allaah baa na siiyay hadaa Quraanka dhigateen raga qaara yaqaano,  qaarna ma yaqaanan Quraankee allahey baa nagu sharfay Quraanka nalagu sharfay suurad aan leenaha jirto suuratul Alnisaa waxa jirto suuradkaloo suuratul dalaaq la yiraahdo, waxa nala siiyay naagta hadii la furo xaqaa leenahay, hadan dhalo xaqaa leenahay, haduu odaygeyga dhinto xaqa leenahay, hada dhaxal leeyahay xaqaa leeyahay, war waxaasaba na qanciyee oo waxa la yiri janadana waxaa lagu galaa raga lagu gala hadaad  raaliyo noqotid, halkaas janada lagu gala gabdhahiina markaas siyaasada u ordayoo waxan rabaa 30% xaq baan uleenahay, laakiin waa na la  heystaa  raga na haysta.

Waxa la rabaa marka anaga markii baarlamaankii hore waxan aheen dhowr iyo lixdan iyo dhowr iyo todobaatan, waxaa la galay doorasha la galoo waa nala boobay xoog aa lagaga soo qaatay gabdhaha, gabdhaha naga baarlamaanka siiba gobalka hiiran iyo gobaleedyada Jubbaland iyo Puntland iyo balaayo  oo dhan gabdhaha waa la boobay waa laga wada qaatay. Somalilandta halkaan  ka galaysay  doorashada waanala boobay, marka waxan lee raga aan iska barbarino raga hala baryo wax 30% lagu qoraayo majirtee waa ogahay ragan 30% ma qoraayaane, wixi xeer ah aan sameyno gabdhaha dagaalamayo oo ordayo waxba ma tari karno wax alaale aan uteri karno maanta dumarkii.

Waxa jirtay carte markii carte waanoola dagaalamay, waxaa jirtay shan qofaad guddomiyaha wuu maqnaa ayaamahas gadaalo nooga yamid carte shan guddi ayaa lasameeyay iyo haweenko la yari beesha lixaad. Caasho Xaaji ilmi ninkii yaqaano ayaa u ahayd haweenka u aheed beesha lixaad see uwada fariisanaayen shan rag ah iyo Caasho oo guddomiya ahayd aaway Caasho weysoo dagaalantay gabdho, waxaa jiray gabadha hada wasiiro dowlaha ka ah wasaarada maaliyadda Raaxo, away Shariifo Cadow gabdhahii Soomaaliyed Puntland ka imaaday meelkaste ka imaaden waxan marsanay 12% la meel mariyay waab ku guuleysanay halkaan imid waana boobay orod iyo xoog noolaga qaadaaye.

Marka waxan leeyahay gabdhow dhiigiina qaboojiya, anaga waanala dulmaa haday tahay dowlada, xukuumada hadee tahay, haday Madaxweynaha tahay, haduu baarlamaanka yahay, hadee wasiirada tahay, gabdhahii wala dulmaa hada aniga Seynab ah wax ma tari karo aniga waxaan raacay suuratul Nisaa ,aniga waxan raba raaliya inaa noqdo oo odaygeyga ka danbeeyo oo janadii gala raba haduu yiraahdo siyaasada ka har waan ka haraa oo waxan leeyahay oday xaajiyoow siyaasada waan ka hara marka gabdhaho raga iska barbarya hadaa rabtiin xubinee.

8) **Xil. Mohamad Hussein Abukar (Gaaraxo):**

Guddoonka labada gole baarlamaanka labada gole guddiga sharafta leh ee shaqadaan noo soo diyaariyay iyo saxaafada, ciidamada amniga dhamaan waan salaamaya Asalamu Caleykum. Salaam ka bacdi hore baan ugalayaa

- **Qodobka 55** oo xisbiyada waxan umaleenaya guddiga hale eray buu dhafo oo ah xisbigo waa inuu cilmaani ahaado inuu eraygaas guddigu dhaafan umaleenaya sababtoo ah waxa meeshan ku yaala dhamaantood wa xaquuqul insaan iyo ma aragtaa.

- **Qodobka 55(c)** hadii fiiriso waxa ku yaalo waa in la adkeeyo xaquuda insaanka iyo human right iyo waana garaneysa waxa ka dhalanayo mar hada maqasho xaquuda insaanka oo aan shareecadda lagu darin oo lagu darin dhaqankeena waxa ka dhalanayo waa garaneysan.

  Waxaa so galaya xisbiya ninka hogaaminaayo inuu noqdo nin aan diinta muslimka heysan, waxa ka dhalanayo inuu noqonkaro een ma argta nin haduu dooono dadkii la sheegayo ah LGBTah.

  Waxan leeyahay xisbigu inu dhamaan hoos u fiirsho shareecadda Islaamka inuu ku soo daro meeshan inay buddhig u ahaato xisbiga ninka furanaya. xisbiyadda inugu kuma arko hal meel oo sharciga Islaamka ku qorantahay shuruudaha lagu xeray qofka xisbiga furanaayo wiil iyo gabadh.

- **Qodobka 56(2)** waxa ku taala in xisbiyadda noqdan, labo hore waxan usoo arkeenay in xisbiyadda badan, xisbiyadda badan, xisbiyadda badan lagu soo yidhi markii danbana lagu soo koobay labo anigu wax badan waxan u qaana waxa markii ishaado aragto afsoomaaliga waxa la yiraahda wax markii ishaadu aragto inaa tiriso ubaahan lakiin wax markee ishaado aragto ay tiran karto ama labo ama sadax ah xisbiyo badan waxaas lama yiraahdo.

- Waxan leeyahay xisbiyada badan oo hore loogu soo sheegay ama halaga reebo meesha ama haloo daayo xisbiydda badan oo xisbiyadda badan meesha ah hala dhaho xisbiyadda badan, Hadan sii galo practical waxan usoo aragnay xisbiyadda yar marwalbo dadku positive bey xisbiyadda yar ka dhigaan waxa heysto Somaliland waa aragteen sodon iyo dhowr sano sadax xisbi baa "hostage" uheysto oo diidan in xisbiyaddi la furo waa dhibaato oo xisbiyadda yar leeyahiin.

  Puntland sadax xisbi bay lahayd, markii la damcay in la furo dhiig iyo dhibaata ka dhacday waxan anigu aaminsanahay in xisbiyaddu la baddiyo oo hadhooweyto xisbi walbo uusan ku dhagin meeshiisa si uu maqaamkiisa u ilaashaddo oo an dhibka imaanin.

- **Qodobka 59 (1)** waxa la sheegay guddiyo, guddiga habraaci dowlad gobaleedyadda si baa ku qorneed halkaana si baa ku qoran bal si isku waafajiyeena guddiga waan ka rabnaa labadas. Xaga labo labo u imaanayan baa ku qorneed dowlad gobaleedyadda keensanayan halkaan waxa ku qoran inee dowlada soo magacaabeyso sidda la isku waafajinayo ayagaa laga rabaa guddiga meesha kuwii hore cudurdaarka ugu tageen taasi waa halkaas.

  Hadan usoo noqdo midda guud ee dastuurkan waxanu arkaye sidda dastuurkan loogalay in qabyaalada meeshan ka hanaqaaday oo nin walba lasoo taagna wax allaale waxii afkiisa karo, baarlamaanka sharafta leh waxan leeyahay ha laga xishoodo aniga qabiilkeyga, aniga qabiilkeyga, aniga qabiilkeygain laga xishooddo ayan oday ahaan usoo jeedina.

  Waxan kaloo arkaye dastuurkan waxaa ku yaale qof iyo cod qof , qof iyo cod ayadoo ku taalo la leeyahay dad leh anagu waxan arkeenay gabdhahu ha ubadnadeene kooto waa in naloo xeraa, in la xiro koontada horta waxaa ka horeysa qodobka sheegayo qofka inuu waxu rabona dooran karo waxuu rabana lala doorankaro in meesha laga saaro. qodobkaas markii meesha laga saro aye imaaneysaa waxa la yiraahdo kooto iyo in dad gaar ah gaar loo qasiso.

  Hadii aan fiirsho waxa meelaha marka qaar arkaya massage meeshan la marinaayo oo aan isleeyahay waxuu udhacaya fariimo la soo dhiibay oo ah kacin, qeybin isku dir raga saan loogalaya wiil iyo gabadh aabihii,wiil iyo hooyadi, gabadh iyo aabahed, nin iyo xaaskii lakala dhaxgalayo marwalbana kacinaya caadifad aad iyo aad uqota dheer. hadalkaas wuxuu dhaxlay in waxan u aqaana qofka baahiyaha gaarka ah leh qof il la uma aqaan qog lug la uma aqaan waxan u aqaana qofka aan wax qabsan Karin oo liita.

- Gadhahaani boqoradda ahaa **Qodobka 49(g)** dadka liito ayaa lagu daray anigu ma aqan. Waxa la yiri haweenka, dadka  baahiyaha gaar ah war gabdhahanu waa dad naga cilmi badan oo boqora ah oo dadka u horeeye ahaayen sababta loogu daray dadka liita marwalba loogu daryo anigu waxba kama fahmin, sababta ay ayaguna uqaabileen waxba kama fahmin waa wax aad iyo aad u dhibadan,  waxan leeyahay waxan  umaleenayaa mabda'aas inuu san anaga naga imaanin kama imaanin Soomaaliya meel kala laga keenay.

  Waxan leenahay dadka liito gabdhaha ma liitan yaana lagu darin dadka liita waa gabdhahanigii waa boqoradanadii waa hooyoyinkanagii waa kuw noogu xaqa badnaa. Marka intaa ka bacdi mar labaad waxan ku celiyanaa hadana waxa dib yar ugu noqonaya meesha ah dowlad gobaleedyadii hogaamiye waxa laga soo qaata umaleena leader afsoomaaliga iyo English kana meela badanee iska diidan anaga hogaamiye wax fiican nooma ahan, laakin English waa wax uwanaagsan, hadaad hada fiiriso waxyaaba Afsomaliga iyo English isku diidayn  waxa ka mid ah gabadha quruxda badab English hadal buu ugu yeera anaga gabdhaheena ugma yeeri karno 'sex' anaga ma dhahi karno gabdhahena sidaa daraaded English laga soo qaatay hogaamiye wax fiican m ahan halaga dayo hadiiba  dowlad meesha ku jirto oo marba  dowlad gobadaleed la yidhi, anigu Madaxweyne wax diidayo ma aqan dowlad Madaxweyne bee yeelataa magaca waxa ka horeeya hogaamiyaha in la diido in Madaxweynaha gobadaleed la diido , waxa ka horeeya in dowlad  gobolaleed la badalo, marka hore waa intaa la badalo oo magacaas dowlad la soo badalo la badado midkana  Madaxweynaha la bedelo.

  Mar labad iyo mar sadaxaad waxan ku celinaya xildhibaanada sharafta leh waxan maqlaaye kuwa leh anaga beesha shanaad anigu laan dheere iyo laan gab shaqsiga u aqaana qofka shaqsigiisa ayaa laan dheerana ah iyo laan gabna ah hadan masaal idin soo qaado dowladii

Hassan Sheikh oo tan ka horeysay malkiila la sheegayee waa nin .5 ayuu ahaa dowladii ku xigtahay farmaajo malkiila la sheegayee waa nin .5hada mida joogta malkiila la sheegayee waa nin. shaqsigiisa ayaa aha 0.5 laan dheerana ah iyo laan gabna ah waxan lee yahaya dadku waa dadsiman mana jiro qof qof wax dheer laakin qofka tiiso la gaabiso yuusan qabiilooyinka ku rafanin.

9) **Xil. Sahra Abdullaahi Igal:**
Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, Guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waan idiin salaamayaa.

Maalintii horena waan sheegoo xildhibaanadu, Dastuur ayaan haysanaa dalku Dastuur buu leeyahay, Dastuurkana 4.5 ayaa ku qoran, anagoo og dadku inaanay kala sharaf badnayn, laangaabka lasheegana uu shaqsiga yahay, Dastuurkaan halaga tiro 4.5ka ku yaala, adinkaa jidayseen, dad badan oo soomaali ah oo aan la tirin inaad 31 siiseen marka xildhibaanooy ha iska indha tirina waxa saxda ah ee dastuuriga ah ee ummad soomaaliyeed intay meel fadhiisatay ay go'aan kusoo gaartay yaan layska dhaga tirin, waxaan rabaa inaan dib uugu noqdo.

- **Qodobkii 51aad:** Guddiga labada aqal ee Baarlamaanka waan umahad celinayaa laakiin mahadcelintoodu waxay dhamaystirmaysaa markii araar xildhibaanadu muddo dhawr bilood ah halkaan aan kaga darsanaynay oo aanu maskax iyo waqti galinay, markay dhagaystaan oo ay kusoo daraan markaasay mahad naqooda iyo sharaftoodu ay kaamil noqonaysaa, shacabku hasoo doortaa la idhi madaxwaynaha iyo madaxwayne ku xigeenka iyo labada aqal ee Baarlamaanka, wadanka waxaan rabnaa inaan dhibaatada hada uu ku jiro ee uu galiyay Baarlamaanka dastuurka lasoo qoray inaan ka saxno, maaha inaan dib uugu celino hubaanti la'aan iyo dhibaato,

- **Qodobka 51(2):** Anigu waxaan qabaa shacabku inay soo doortaan xildhibaanada,

- **Qodobka 51(4):** madaxwaynahana Baarlamaanku uu doorto, madaxwaynuhuna ku xigeenkiisa inuu isagu doorto, madaxwayne iyo ku xigeen ay shacab soo doorteen, waxay ku heshiin karaan ma garan karo anuu waa isku awood marka ma qabo, halkaan waxa laga sheekeeynaayay, in lays boobay, qabiilada in la boobay, dumarka in la boobay waxaan jeclaan lahaa in la dhagaysto oo loo dhago nuglaado baaqa gabdhaha soomaaliyeed ee labada aqal ay soo jeediyeen, mooshina waa ku keeneen maadaama lays boobayo hadana loo socdo qof iyo cod oo aan ognahay maamuladii dalka kasoo jiray markii qof iyo codka la aaday inaan gabdhaha loo codaynin aan ognahay, si hubaanti loo helo si deganaasho loo helo waxaan soo jeedinaayaa gabdhaha 30% in lagu qoro Dastuurka, waxaan maqlaayay hadaaya inuu lahaa dastuurka laguma qori karo 30%, wax ka foolxun ayaa ku qoran, ummad soomaaliyeed inay half tahay ayaa ku qoran wax ka foolxuna anuu ma garanayo, markaasaa waxa la leeyahay gabdhaha laguma qori karo koontada gabdhaha waa in Dastuurka lagu qoraa oo dastuuri laga dhigaa.

- **Qodobka 54(2)** xisbiyada siyaasadeed ha ahaadaan kuwa tartanka haya ama kuwa mucaaridka ah waxay kamid yihiin tiirarka nolosha siyaasada iyo dimuqraadiyada jamhuuriyada, Jamhuuriyada waa laga hadlay, Xisbiyo aan abuurmin in hada lasii qoro oo waliba lagu qoro Dastuurkeenii mucaarad inay sii noqonayaan, arintaasi ma qabato, xisbiga qayb kamid ah haday daku mucaarid noqonayaan iyo gabi ahaanba xisbigu haduu

mucaarad noqonaayo marka xisbiyada la sameeyo ayaan u daynaynaaye laakiin waxaan qabaa halkaa in laga saaro, Dastuurkaan horta waa dhamaystir iyo toostoosin iyo siiqayn maaha Dastuur la badalayo, xildhibaanadii horay u idhi ee dastuurkan markii la samaynayay sameeyay ee mid walba lagu daray 3 qof oo ergo ah oo 825ta ahaa, wixii ay soo qoreen ee halkaan ku yaalay ayaan kalsooni ku qabnaa ayagii ayaan wadnaa laakiin wixii iskasoo horjeeday oo iska hor iyo dabo imaanaayay oo uu dadku ka dagi waayay ayaa waxaan ka badalaynaa ama ay xildhibaanadu ka badalayaan sidii ay u arkaan, codkana waxa loo raaci doonaa oo uu guddigu ka shaqayn doonaa siday ukala badanyihiin.

- **Qodobka 56 (2)** doorashooyinka labada urur, labada urur siyaasadeed oo buuxiyay shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada eek u guulaysta goloyaasha deegaanka ayaa noqonaaya xisbiyada qaran ee u tartamaaya kuraasta Gollaha shacabka, aqalka sare xilka madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, kuraasta Golaha wakiilada, xilka hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeenada maamul goboleedada, anigu ma garanayo sababta loogu soo daray xisbiyada qaranka inay dooranayaan hogaamiyaasha maamulo goboleedada iyo ku xigeenadiisa, waxaan qabaa maamulo goboleeda in loo madaxbaneeyo doorashooyinkeeda deegaankooda ku qabsadaan. Gole degaan bay leeyihiin qaarna waa u socdaan xisbiyo bay u socdaan, markaa in loo daayo oo aan xisbiga yar ee hada la samaynayo qaranka aan la dhex galin kuwaa degaanka.

  Labo xisbi anigu urur siyaasadeed ma qabo, waxaan soojeedinayaa in ugu yaraan 3 laga dhigo, xildhibaanadii hore ayaa ka hadashay 5 hadii laga dhigo inay shanto beelood ay aadayso, hadii la badiyana ay noqonayso reer walba inuu xisbi samaysto.

  Markaa 1960-kii waxaa la yidhaahdaa 86 ama 83 xisbi ayey ahaayeen tirade ka bateen waa la fahmi waayey aakhirkii waxay noqotay hal xisbi in lagu soo ururo, markaa hadii xisbiyada la furo oo la badiyo waxaa ka dhalanaya in aakhirka hal xisbi wadanka yimaado, ka dibna dib loogu noqdo qalalaasihii.

  Xisbiyadu markay bataan waxaa dhacaya in waxaa jirtay 2018 dalka Sweden doorasho ayaa ka dhacday, 8 xisbi bay leedahay ,8-dii xisbi percentagekii codadka way is buuxin waayeen, hal xisbi oo waxaa la waayey talada dalka hogaamiye, lix bilood ayuu dalkaasi wuxuu haysan xukuumad, laakiin waxaa dajiyey wuxuu lahaa dastuur, waxay leeyihiin dhaqaale waa dal dagan, waa dal isku filan.

  Lixdaa bilood jah wareer siyaasadeed may galin wadanku waxa uu socday sidiisa, dal Africa ah ma qaadi karo khaasatan dalka Soomaaliya ma qaadi karayo in la galiyo jahwareer siyaasadeed.

- **Qodobka 57aad** waxaa la dhisayaa Guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha oo u xil saaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntooda, anigu ma qabo in la kala reebo soohdimaha waa isku xidhanyihiin, markasta Guddiga doorashooyinka iyo xuduuduhu way is raacsanyihiin, laakiin waxaan su'aal ka qabaa ama dood ka qabaa 15 qof ee lagu soo koobay, waxaan horay dooda ugu qabay 54 markii la samaynayey dhulka oo aan dadka Soomaaliyeed dhulkeed iyo ilaalinteeda loo dhanayn oo dad khaas ah xubno laga siiyey . dalku wuxuu u baahany in la wada control, hadii doorasho la rabanna waa in dalka xubnihiisa la wada gaadhsiiyo si cadaalad ah ama maamulo

goboleed ha lagu gaadhsiiyo ama maamulo goboleedka inta laga bood 4.5 lagu gaadhsiiyo waa in la wada gaadhsiiyaa.

**Qodobka 59(1)** waxaan maqlayey 15 xubnood,xubnaa ka maqan Somaliland waa la sheegay in lagu soo daro, sidaan u dhahayey Somaliland waa maamulo goboleed tiawan ma aha china ma aha, dalka Soomaaliye la yidhaahdaa qaaraddaa 7 ku naalnaa waa in loo sinaado xubnihiisana la wada helaa.

Guddiga doorashooyinka 15 waxaa la yidhi waxaa la dirayaa 3 sano half, half waxay noqonaysaa 4.5 dee qof badh ahna ma jiro 15 inay qaldantahay halkaas ayaad ka arkaysaa , markii qaab la dirayaayo 7.5 bay noqonaysaa, markaa waa in xubnaha la badiyo oo 19 laga dhigo xildhibaanda hore ayaan la qabaa oo aan loo dayn 15-ka, isla markaana mudada xil haynta qaybna 3 sano ay hayn, qaybna aan loo daynin 3 sano ee lixdood sano si toos ah u wada dhamaystaan oo laga reebo total inta danbe ee gadaal looga daray .

**10) Sen. Mohamed Abdi Osman:**

Mahad sanid gudoomiye, xildhibaanada labada aqal, guddiyada doorashooyinka labada, media, marti sharafta iyo dhamaan kasoo qayb galayaasha waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.

Intaaanan doodayda hore u galin waxaan rabaa wax yar oo araar ah inaan ka hormarsado sida runta ah mudaynu hada soo shaqaynaynay 4 cutub oo ugu horeeyey dastuurka ayeynu ka shaqaynaynay waxa runtii amaan iyo bogaadin mudan gudoonka iyo xildhibaanada oo mudadaa shaqadu socotay si deganaansha leh oo aad iyo aad u fiican ay xildhibaanadu dooda u dhiibanaayeen runtii waxa weeyi aad bay sharaf u tahay waxaanan leehay waa ku mahadsan yihiin xildhibaanadu in doodooda ay soojeediyeen iyo in qof waliba uu dhagaysanaayey doodu siday u socotay runtii waxaan leehay waa arrin aad iyo aad muhiim u ah guddiyada maxadabanaan ee doorashooyinka runtii waxaan ku amaanayaa hawl aad u adag oo baaxad lay soo qabteen, muhiimahada ugu weyn waxa weeyi in hawshaa sida ay tahay dadku u arkaan ugana shaqeeyaan waxaan isleeyahay waxaa arintan digitalka ah oo ay soo bandhigeen oo ay soo saa'idiyeen si ummada soomaalieed wixii gudaha jooga iyo wixii dibada joogaba cid waliba u arki karto oo ugana qaybgalikarto runtii waxa weeyi waxaan leehay talaabo muhiima ayey ahayd taasi guddiguna waa ku mahadsan yihiin, intaa hadaan kaga baxo, waxaan rabaa markaa inaan doodayda guda galo.

- **Qodobka 54(1)** Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda, markaa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, markaas **halkaas waxaan ku dari lahaa Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.**

- Qodobka 54(2): Xisbiyada siyaasadeed, ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah, waxay ka mid yihiin tiirarka nolosha **tiirarka nolosha waxaan ku badali lahaa waxay saldhig u yihiin siyaasadda iyo dimuqraadiyadda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya .**

- **Qodobka 55(1)** shuruudaha xisbi siyaasadeed, 1) Xisbi Siyaasadeed kasta waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda: a) In uu ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeyaa, horumariyaana

midnimada Jamhuuriyadda. **Qodobka 55 (1)(d)** In uu u hoggaansamaa mabaadii'da waxa halkaas iska type error inuu u hoggaansamo dimuqoraadiyadda iyo maamul wanaagga;

- **Qodobka 56 (1)** Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed ee ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha; farqadiisa 2aad xildhibaanadii iga horeeyey way ka hadleen arintaan.

- **Qodobka 56 (2)** Labada urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka; halkaa waxa weeyi waan la qabaa mudanayaasha horeeto inay noqodaan saddex xisbi baan unuu **soojeedin lahaa inay noqdaan saddex xisbi.**

- **Qodobka 57** Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimahaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntoodaba heer kasta, si loo helo doorashooyin hufan, furan oo xor iyo xalaal ah. Taasna waxaan dhihi lahaa guddigan mudana yaalbadana waa ka hadleen waxaan anigu dhihi lahaa labo guddi oo la isku daray bay ahayeen markaad eegto doorashooyinka iyo soodimaha markaa labadii guddi hadii hadda la isku daray waxa weeyi tiradii dadka in wax lagu daro anuu markaa **waxaan soo jeedilahaa markaa inay noqdaan 21.**

- **Qodobka 59 (1)** Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 15 xubnood, oo uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo. Hay'addaha ay khuseeyaan waa fiicnaan lahayd kuwee weeyi hay'addaha ay khuseeyaan oo la rabo in lagala tashado in guddi halkaas clarification ka keeno waa fiicnaan lahayd.

- Qodobka 59(2) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Kuxigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga dhexdiisa iyagaa iska dhex doora naaya.

- **Qodobka 60 (1)**Xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudahan soo socda: a) in uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda (inuu yahay muwaadin soomaaliyeed baan dhihi lahaa jinsiyadda inuu yahay muwaadin soomaaliyeed) Jamhuuriyadda Soomaaliya; da'diisuna ka yareyn 40 sano; halaka khibrada 10 sano anuu waxaan dhihi lahaa maadama qofkii 40 sano uu jiray khibraqda anuu waxaan dhihi lahaa in laga dhigo ilaa 7 sano in laga dhigo meeshii 10 sano ahayd, 7 sano laga dhigo baan dhihilahaa.

  Xubinnimada Guddiga looma magacaabi karo dadka soo socda: a) Qof ka tirsan xisbi siyaasadeed; b) Qof ay maxkamad ku ridday xukun kama danbays ah oo ay ciqaabtiisu gaarsiisan tahay 5 sano; c) Qof kasta oo ka haya xil dawladeed hay'adaha dawladda ee heer federal iyo heer gobal. Taasi waa cadahay waxa weeyi dadka aan loo ogolayn inay runtii ka mid noqdaan waa dadka halkan lagu soo qoray.

- **Qodobka 61** Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn,

ayadoo kala bar xubnaha la magacaabayo saddexdii sanaba hal mar. arintaaas mudanayaal badana waa ka hadleen hadii iyagiiba intaasi ahayeen markii horena hadba qaar fasax lasiiyo oo mar mid loo magacaabaayo halkaasi waxaan rabay in cadaato ama wax lagu daro.

- **Qodobka 62aad** Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan arrimaha soo socda : ama Inuu dhinto geeri ; Istiqaalad Guddiga lagana aqbalo; Xil gudasho la'aan joogta ah oo sababi karta la xiriirid mid jireed ama maskaxeed.

  Markaan dib u noqdo qodobka xisbiyada badan waxynu cagta saarnay oo loo bogayaa in dalku aado doorashoqof iyo cod ah, doorasho qof iyo coda hadii la aado waxaa weeyi waxaa meesha ka baxaaya 30 sano mudadaa intaynu joognay arintii xalka ahayd oo aan xaqa ahayn oo mudodaas in daba joogtay oo ahayd 4.5 ka waxaa weeyi shanta beedood qof iyo cod marka la aado waxay u sinaanaayaan maqaam kasta oo dawladu leedahay waa u sinaanayaan shanta beelood way u sinaanayaan waxaa halkaa kabaxaaya markaa arintii 4.5 ahayd oo ummad badani ku dulmanayd mudadaa dheer ku dulmanayd waxaan leenahay markaa waa la guuray hadii laguurana waa lawda guurayaa, waxaa loo guurayaa in qof iyo cod la aado waxaa loo guurayaa in 5 kii halkaa ku dhamaado, waxaa loo guurayaa inay dadku helaan xuquuq siman oo qof waliba kartidiisa iyo aqoontiisa iyo galaangalkiisa uu doorashada kaga qayb galo, markaa waxaa weeyi taasina waxaa weeyi waa arrin aad iyo aad muhiim u ah arrin la sugaayey weeyi, waa la guuray reerkii waa guuray 5 beelood isku xuquuq bay noqdeen meel bay uwada guureen waana u siman yihiin xuquuqda dalka munaasibka la qabanaayo kuli waa u siman yihiin aad baad u mahadsan tihiin.

11) **Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

   Bismilaahi raxmaani raxiim shir gudoonka labada aqal xubnaha baarlamaanka labada gole guddiga labada guddiga dib u eegista iyo guddiga maddaxa banaan, saxaafada waxaan idinku salaamay salaanta islaanka asaalmu calaykum wa raxma tulaahi wa barkaatu, bacdasalaan waxaan rabaa inaan ka hadlo haduu allah awooda lihi ogolaado.

- **Qodobka 54(2)** ee ka hadlaaya dhawrka xisbi siyaasaded xisbiga siyaasadeed horaa loga hadlay inay ahadaan kuwo xunka haya iyo kuwa, inaan ka dhihin markaa kuwa xunka haya iyo kuwa mucaaradka ah waxba la kala weecin waa xisbi siyaasadeed qaran xildhibaanadu horey uga hadleen ayaan waafaqsanahay qodobkaasi in sida uu yahay loo qaato oo la yidhaahdo xisbiyo siyaasadeed qaran kaliya lagu ee keeyo ee mucaaarid iyo muxaafid lakala qaad qaadin .

- **Qodobka 55(1):** shuruudaha xisbiyada siyaasadeed, xarafka e) In uu xaqiijiyaa matalaadda dadweynaha oo loo dhan yahay siyaasiyiinta gaar ah beelaha meeshaas ayaan wali taaganahay ee uu wali leeyahay beelaha laga tirada badan yahay ha ahaato guddigu waa imaqlaa beesha 5 aad **beesha 5aad in la yiraahdo taas ayaan iyadana soo jeedinayaa,** meelkastoo beelaha laga tiro badan ku lagu qortahay oo beesha 5aad lagu badalo taas ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 56(2)** tartanka xisbiyada siyaasadeed waxbadan baa isagan laga hadlay xildhibaanadii iga horeeyey ee halkan soo istaagay waxaan waafaqsanahay xisbiyada tartamaaya ee siyaasadeed inay ahaadaan saddex ama shan, labo xisbi hadii layidhaahdo waa lagaran karaa waxa ay noqonayaan waaxaa loo baahan yahay sideedaba tirsi ah hadii ay labo hal iyo hal iska soo horjeestaan meesha waa lagu kala tagayaa oo waa lagu kala

badinayaa laakiin mid oo lagu kala tartamo oo labada dhanac inuu  ahaado shan haday ahaatana sidaasoo kale labo is raacdo mid shanaad waa inuu jiraaa sidaa darteed waxaan leehay waa inay ahaadaan saddex ama shan uma arko meesha la lee yahay  shanta markay noqdaan shanta beelood bay noqonayaan uma arko laakiin waxaan u arkaayi waxay tahay aniga in ay ku haboon tahay tirada dhabanka ah ee labo marka layiraahdo iyo afar marka layidhaahdo inay ka haboon tahay tirada kisiga ah in saddex maadaama hal iyo hal haday iska horyimaadan oo halkaa lagu kala badin karo labo iyo labona  hayd isku raacan labda dhanca lagu kala badin karo sidaa darteed **waxaan soojeedinayaa meesha labo laleeyahay waa inay ahaato shan ama saddex in la qaato xisbiyada tartamaya ee siyaasadeed.**

- **Qodobka 57aad:** dhisida guddiga madaxa baan ee doorashooyinka qaranka, guddigaasi waxaa la yidhi waxaa dhisaaya guddiga maxabaan ee doorashooyinka waxaana lagu soo qaatay qodobka 12 ee heshiiskii doorashooyinka ee golaha wada tashiga uu gaaray 2023, heshiiska meelo badanaa la yidhi waxa lagu soo qaatay iyo waxa lagu gaaray  2023 wadatashi qaranka , heshiisyadaa mahayno wax ay sheegayaan laftigoodu waa in la helaa.

- **Qodobka 59(1)**  Xubnaha Guddiga Madaxabannaan Doorashooyinka iyo Soohdimaha, **faqrada 1aad** Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 15 xubnood, eraygaasaan hadda waxaan rabaa inaad dul istaago senatorkii hadda iga horeeyey  ayaa wuxuu lahaa waa laga guuray eray qax ma rabnee xal aan rabnaa inata ka muuqata ayana laga guuray maaxaa jira waxaan sidaa u leeyahay 15 xubnood marka la yiri 5 state ama 5 shanta maamul goboleed iyo gobolka banaadir ee layiri min labo xubnood 6 min laba xubnood waa labo iyo taban(6x2=12)aaway markaa waa la siman yahaydii oo waa laga guuray shanti beelood oo wax lagu qaybinaayey majirto sidaa darteed waaxaan leehaqy meesha hadii runta la rabo halayirahdo 15 ha ahaato dadii ladoono shanta beelood min saddex (5x3=15) shanta beelood ha lagu qaybiyo si siman laakiin hadiila yidhaahdo shanta dawlad goboleed iyo gobolka banaadir waxaa ka imaanaya min labo xubnood waa 12  saddexda kalena xildhibaanadii kale iga horeysay ku nuuxnuuxsatay ee xildhibaan gobsan ee ay lahayd meel hebel hebelbaa ka imaanya meel hebel hebalbaa ka imanaya cida ka imanaysa saddexda xuboon oo lakeenayo waan iska garanaynaa caymow(Aimoy) iyo xildhibaan jeego inaan lakeenayn waan dareemayaa,waayo waxaan sidaa u leehay ee aan u xaqiijinayaa waxay tahay 2016 markii aqalka sare lasoo dhisay beesha shanaad hal xubin kaliya maamul goboleedka hirshabeele kaliya ay ku soodartay, waxaa la isku  qabsaday banaadiriga laba xubin halaga siiyo dadkoo dhan way ka muuqdaane xataa hal halgu daro ayaa waxaa loo fadhiyey mudo lix bilood ah, la iskuna mari waayey ee la go' aamiyey inaan waxba laga siinin ilaa iyo haddana lagu dulman yahay dulinku inuu  sii socdo maaha waxaa loo baahan yahay inuu soo af jarmo maadaama hadda la raadinayo xalkii ee la yiri xaqdaradii waan ka gudbaynaa, waxaan raadinaynaa xalkii, xalku waa in markaa loo helaa shanti beelood oo siman waa in wax lagu qaybiyaa min saddex kuri loo qaaato waa lagu qanci karaa laakiin hadii la yiraahdo shanti dawlad goboleed ee jiray ilaa iyo gobolka banaadir min laba xubinaa laga keenayaa ee 12 xubnood halkaasi ka timaado saddexda soo hartayna waa lasoo magacaabayaa oo qofkii larabo lakeenayaa inay meeshaasi cida beeshu ku qasan tahay aysan laga soo qab galinaynin banaadiri iyo jareer waa dareemikartaa dulin ayaana meeshaas ka socda sidaa darteed waxaan rabaa in xaqii maanta la raadinayey ee xaqii waa la gadhay lalahaa sidhaba loo gaaadho laguna gaadho si siman in wax loo qaato.

- **Qodobka 59(2):** Isla qodobkaasi gudoomiye iyo gudoomiye ku xigeenka ee xubnaahaa madaxabanaan ee doorashooyinka **waxaan u soojeedinayaa ka Aimoy ahaan in lagu daro**

**ayadana maadaama ay iska dhex dooranayaan gudoomiye iyo gudoomiye ku xigeen iyo xoghayn ku dara maadaama guddigu iska dhex dooranaayo**.

- **Qodobka 60(1)** shuruudaha guddiga madaxa banaan ee doorashooyinka qodobka 60 aad maadaama uu lee yahay shuruudihiisa in uu leeyahay ugu yaraan waayo aragnimo 10 sano ah khibrad ah in meesha 10 sano qodobkaasi uu dhigayo in layiraahdo **waxaan soojeedin guudigana u soojeedinayaa inay yiraahdaan 5 sano.**

- **Qodobka 61aad** mudadda xilhaynta xubnaha guddiga waxaa inta badan lagu soo celceliyaa in ay tahay muddo cayiman 6 sano ah korina lahayn, halkaa xarafkiisa a) wuxuu lee yahay in la magacaabo kala bar xubnaha ka dibna saddex sano lagu soo daro xubnaha dhiman meeshaas **waxaa dhihi lahaa laftigeeda in layidhaahdo la kordhinkaro hal mar hal teeram oo kale haduu allaha awooda ogolaado ayaan aniga fikir ahaan qabaa oo aan jeedin lahaa haduu allaha awooda lahi ogolaado**.

- **Qodobka 62aad** xilwaayida xubnaha guddiga waxaan rabaa oo ku soo gebagabeynayaa xarafkiisa 7aad oo dhahaaya Arrin kasta oo oo kale (macnaha wax kasta oo kudhexjira ayuu leeyahay dib u eegistan dastuurka ee aynu dejinayno meeshsan kale ee la leeyahay arrin kasta oo kale lagu xuso dastuurka dhexdiisa ayaa xilka lagu weynkaraa la leeyahay way badan yihiin waxaa fiican qodobada xukunka oo kaleeto ah oo maxakamadeed kama qayb galaayo, aqbalaad uu xilka isagu ogolaado wax nuucaas oo kaletoo ah wuxu inay cadyihiin arrinkasta oo kale hadii layidhaahdo halkaas mugdi ayaa kujira halkaas ayaanan rabaa inaan ku soo gaba gabeeyo wa salaamu calaykum.

12) **Xil. Omar Hanshi Ibrahim:**

Bismillaahi, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Wali waxaa noo socota Cutubkii 4aad, ee oo na muhiim ah, ee siyaasad xanbaarsan, dastuurka hada aan dib-eegista u sameyneyno, Cutubka ugu xasaasisan baan u maleynaya, Cutubka 4aad, doorashooyika taabanaaya, heykalka Dowlad nimada aan tiigsaneyna, xisbiyada, waxyaaba badan buu qeexayaa, marka waxyaroo hordhac, waxaan rabaa inaan sheego , su'aal baan is weydiinaayay, Meesha waxaa laga hadlaayay heykal cusub oo Dowliya, oo Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, mana arak wax qodob oo qeexaaya nidaamkaa cusub, marka horta Guddiga waxaan codsanaya haduu jirana koley, waan " research " gareyn doonaa, haduu jiranna in lagu soo dara, qodob dhahaaya nidaamka cusub, soojeedinaaya nidaamka cusub, ee heykalka Dowlad nimada Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen ka, meeshaan wuxuu ka bilowdaa, qodobka 51aad, hey'adaha sida tooska loo dooranaayo, marka waxaa la sheegay, Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen,Golaha Baarlamaanka saasaa loo qeexay, bal " At least " qodob kaloo horta qeexaaya, nidaamkan cusuboon qaadaneyno, in lagu soo daro ayaan soojeedin lahaay, oo la dhaha waxaan aadeynaa ee "presedential System " Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, waxaan leenahay, sidax hey'adood, hey'adda Baarlamaanka oo madaxbanaan, iyo hey'adda " Judiciary " maxkadda iyadana oo madaxbanaan, saa in loo qeexaa, horta nimdaam ka Dowliga cusub wey fiicnaan laheyd, een waxaan kaloon rabay inaan wax yar hoos ka xariiqa, horta xisbiyada losoo yareynaaya iyo hogaanka la qeexaaya, oo talooyoonka ay ka go'aan oo lasoo yareynaaya, marwalba horta muhiim ay noo tahay, in marwalba aan fahanna, " The more " aan soo yareyna, meelaha ka go'aan, go'aanada, xisbiyadda lasoo yareeyay, ho'gaanka wadankoo lasoo yareeyay, oo ahaa

Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, lagu soo koobay, waxaasoo dhan horta waxey aruurineysaa, "Direction ka Leadership " ka uu qaadanaayo, go'aandda wadanka oo dhan uu qaadanaayo ayay soo aruurineysaa, is qabqab siga badan bey yareyneysaa, is dhaxgalka bulshadda, masuulidda ruuxa uu qaadanaayo, dhan bey sifiican u qeexeysaa, qofka wuxuu dareemayaa, Soomaalida dhan inuu masuul ka yahay, marka waxaan la dhahaayo, aniga miiskaan ka maqanahay, qabiil hebel baa miiska ka maqnaa iyo looma dhana, horta Meesha ka baxeysaa, arintaa iyada eh aad iyo aad baan usoo dhaweynayaa, waana rabaa in lasii xoojiya , haduu Alle idmo. Mida ku saabsan, Guddiga doorashada, ee aad baalooga hadlay, idana waxaan dhihi lahaa Guddiga doorashada, laba qeyb in laga dhiga waaye, horta Guddiga doorasha iyo xuduudaha, markii laga hadlaayay, waa sida leys ku raaciyay waa arin muhiim ah, doorashooyinkana wuu "manage" gareynayaa, wuu maamulayaa, xuduuda, oo dabacan marka wadankan lasameynaya, "constitution review" asagana Guddiga inuu ka shaqeeyaa la rabaa, hadhow u uku qeexa, xildhibaanka Meesha laga soo dooranaaya, iyadoo "Geographical " eh, iyo " population " marka taasna wa in leys raaciyaa , labadaas isla socdaan waa arin sax eh, Guddiga laba qeyb in loo kala qaado aniga dhihi lahaa, qeyb ta koowaad, Guddi qaran doorashooyinka iyo soohdimaha, qeybta labaadna uu noqdaa "technical" oo ay noqdaan regional coordinates, reiginal election Coordinates camal, arimaha "technical"ka ay maamulaan, Guddiga qaran wuxuu dajinayaa, siyaasada doorashooyinka iyo soohdimaha, wuu dajinayaa, wuxuu siinay 'Leadership' asaga ayaana qeexaaya, waa iney ku "base"gareys naataa qibrad, competence base ay ahaato, qibrad ay ku imaadaan, ka dibna Guddi kale ka wada shaqeeyaa, oo iyagana cadidan, maamul gobleedada, iyo meelaha doorashooyinka ka dhacaayaan, maamuli doonaan, oo "technical level"eh, marka labadaa " level " loo kala saara Guddiga doorashooyin ayaan dhihi lahaay, kootada dumarka aad baa looga hadlay, in "amendment action" la sameeyo wey fiican tahay, lakiin dumarka waxaan kaloon kula talin lahaay, horta siyaasada kaliaya ha fiirininee, xaga kale dhaqaalaha fiiriya, oo dumarka dhaqaalahood in kor loo soo qaada, een maxaa la dhihi jiray "Job"meelaas horta hala soo kobciya marka u horeysa, intey siyaasada un laga bilaabin, markii hoos laga soo dhisa sifiican, arimaha bulshada iyo dhaqaalaha, iyagoo siyaasada markii danboy iska soo kaalin buuxda ka qaadan lahaayen, in lagala shaqeeyo duamrka, intii hoos looga soo xoojin lahaay, iyadana horta xooga lasaaro, siyaasada marwalba, 30 iyo 40 iyo waxaas aan laga hadlin, intaas waxaan marka u gudagalayaa qodobada. Waxaan rabay wax yar dibueegis lagu sameeya,

- **Qodobka 51(5)**, hey'adaha sida tooska loosoo dooranaya, maamul gobleed hogaamiyaa la dhahay, hogaamiyaasha aniga waa sida dadkale "concern" ka ugu qabena ayaan uga qabaa, marka magac kaloo munaasab eh , Madaxweyne na aheyn hala raadiyo, sida premia, "governor" "regional coordinator" wax yaabo noocaas, magaca saxda in loo hela wey iska fiicnaan laheyd, ee qodobka 51aad faraqadda 2 sida Baarlaamka, xubnaha Baarlamaanka loosoo dooranaayo runtii in la xeeqa wey iska fiicaan laheyd, lama sheegin lakiin sanatarada iyo waala sheegay, " marka "constituency" qaabka ay ku imaanayaan in la qeexana wey fiicnaan laheyd.

- **Qodobka 52**(1) mudada xlheynta hey'ada dastuuriga, sida tooska loo daaranaaya, waxaa fiicnaan laheyd iyadana in la qeexa, bisha iyo taariikhda la dooranaya, dabcan ee matalan, in ladhaha, ee 5 bisha sebteembar camal in The fifty year sanadka shanaad, bisha iyo taariikhda At least in la qeexa, si aan mardanbe loo dhihin, wareer iyo jahweer waqtiga doorashada dhaceysa si aan leys kugu qabsan.

- **Qodoobka 55(1)** shuruudaha xisbiyada siyaasadeed, in meeshaa iyadana loodhaafa, xisbi siyaasadeed walba waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda, shuruudahaas in meeshaan lagu qeexinoo, loo dhaafa xeer hoosaadka hadhowti, politicol parts" ayaa jira, oo imaani doona, misa hada, misa asoo darafta jirijiray, dib u eegis lagu sameynaaya, marka in loo daaya xisbiyada, ee maxaa la dhuhi jiray, shuruucda xisbiyada ku imanaya, qeybta xisbiguu ku imanayaa, taasna At least un la qeexa, in xisbiya la aadaaya, laakiin faahfaahin aan laga sameynin,

- waxaa kaloo jirta, Qodobka 55(2) waxaa la sheegay, wax yaala reeban xisbi kasta, ama xisbi walba ,uu maxaa la dhihi jiray, unuu iska ilaaliya ay tahay, meeshaa iyadana waala siyaasadeen karaa, marka waxaan soojeedin lahaay, waa wax loo isticmaali kara, markaa in xisbi qadka laga saara, wax yaalahanloo adeegsan karaa, marka dee waa oo u noqda geed fadhi in lasameeya waaye,

  Marka tribunal waa in lagu soo daraa, waa in la istaabilsh gareeya, ee, political tribunal body iyada At least in la qeexa, runtii u gar qaadi kara xisbiyada qaarkood oo la beegsanaayo, Meesha labada xisbi shalayna waan yara taabtay, ee xisbiyada waa in shuraada iyo Threshold loo sameeya, ay ku imaani karayaan , xisbiyada buuxiyaan aanan la badinin, sidax xisbi, iney ka bataan muhiiim mahan, si ay isku balance gareeyaan, qabaailadana hadhow xisbiyay sameysan karaan, si looga hortaga marwalba in lasoo yareeya, xisbayadda nambarkooda, lakin shuruudada la adkeeya ay kusoo bixi karaan , Meesha urur siyaasadeed la leeyahayna, laga saara, xisbi lagu soo celiya, urur siyaasadeed hadaa ladhaha waxey noqonayaan, waala business gareyn karaa, marka un uu ahaada xisbiga la istacmaalaya , urur siyaasadeed aan la dhahin,

- Qodobka 59(1) xubnaha Guddiga madaxabanaan, iyagana waxaan dhihi lahaay, xubnahaas inaan qabiil lagu soo celin, in aan gobol lagu soo xulin, ay noqdaan xubno qibrad ku imanayaan, la qeexaaya, TOR kooda, la shaacinaaya, maxaa la dhihi jiray imtixaan laga qaadaaya, Guddiga madax banaan oo Expert eh, imtixaan ka qaadayan, xobnahasna lasoo yareeya, 7-9 laga dhiga, oo qabiil aan laga eegin, lafiiriya nin walboo Soomaali eh qibrad u leh, CV giisa fiican yahay, wuu qaban karaa jagadaas iyada eh, Gudoonkooda yo Gudoomiyahane, iyagana sidaan camal ay ku imaadaan, iyaga dhaxdooda oon iska dooraneyn , laakiin ay ku imaadaan, imtihaan laga qaada ay kusoo baxaan, oo uu noqdo qof soomaali eh, oo qibrad u leh, expert espically, constitutional law iney garanayaan, **Meesha muda xil haynta xubanaa Guddiga, 5sana ee loo dib u socbooneyn lagu sameyn kara, ayaan soojeedin lahaa**,

- **Qodobka 61aad,** ee 5sana ee loo dib u socbooneyn siin kara, laakiin iyadana la dhahahaya, nidaamka ay ku shaqeynayaan waxaa loo dajinaya xeer hoosaad, xeer hoosaad kaasi xeexaaya, retirement Age imaan karta , waxaa dhici karta ruux, asagoo retirement Age laba sano uga dhiman tahay, in Guddiga lagu soo dara, marka labadii sana ay ka dhamaata uu retire noqda, waa in ruuxa labadali kara, so qaabkii loo buuxin lahaa, waxaa xeer baa lagu sooo saarayaa, laakiin 5sano lasoo cusbooneysiin kara in meeshaa laga dhiga ayaan soojeedin lahaa, ee intaas baan kasoo gaba gabeynayaa, waa mahadsan tihiin.

13) **Sen. Iftin Hassan Iman:**

Bismilaahi raxmaani raxiimi, waad mahadsantahay marka hore waxaan salaamayaa xildhibaanada baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed iyo Guddiyada dastuurka oo aan

anigua ka mid ahay, waxaan halkan u soo istaagay waxay ahady sixid. 'Memberka' 50 jeer inta la soo istaagay ayaa beelaha siday wax u qaybsadaan lagu soo carobaabay, waxaan rabaa inaan meeshaas faahfaahin cad ka bixiyo beesha shanaad sida ay wax u qaybsato iyo siday tahay, markaa marwalba oo la hadlo waxa la yidhaahdaa hal senator ayaan ku leenahay hal senator ayaan ku leenahay, anigu sentarkaygu waxa uu ku soo baxaa beesha shanaad.

Xildhibaanda iyo wasiirada deegaanada aan ka soojeedana waxay ka soo baxaan beesha shanaad. Beesha shanaad waxay wax u qaybsataa 4 oo kala ruutis, kulmis, jareer iyo adeerkood oo aniga oo cowr male ah oo ku darsaday kursigaya iyo wasiirkayga, maalin allaala maalinkii gollaha wasiirada 5ta beelood la simayay waxay ahayd gollaha wasiirada malaha 0.5, 5 wasiir ayay leeyihiin sababta looga dhigayna waxay ahayd adeerkood oo kusoo darsamaym markaa beesha 5aad anaa adeerkood ah sidaana haloola socdo labo senator ayay ku leedahay hada kadib, Soomaalidu waxay tiraahdaa hadii lagu sheegana waa laysa sheelaa hadii lagu sheelana waa lays sheegaa, markaa halkaas waxaan ka cadaynayaa beesha 5aad inaan adeerkood ahay, senatorkaygu uu kursigaas ku Imaado sidaa haloola socdo, asalaamu calaykum waraxmatullahi wabarakaatu.

**Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe".** Xildhibaanada sharafta leh maanta shaqo dheeri ah bay ahayd xildhibaano badan oo qoran bari, waxaan idin codsanayaa subax in la yimaado, bari inaan doodan aan gabogabayno ku dadaali doonaa aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

**Taariikh:** Maarso 20, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 28aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeisa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Doodda Marxaladda 3aad iyo 4aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:40a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:50 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe" |

**Ajendaha:**

(13) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.

(14) Ansaxinta Ajendaha.

(15) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Sii wadidda ka Doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 4aad. MATALAADDA SHACABKA, Doorashoyinka. Madaxa 1aad ilaa madax 4aad. QODOBKA 54aad ilaa 62aad

**Kulanka 28aad:**

1) **Sen. Farhan Ali Hussein**

inagu aan "fit" garaynayno ama nooca aan galayno, wadanka 2 xissbi leh waa wadanka 95% codadka ay 2 xisbi helaan, masalan Maraykanka xisbiyo badan ayaa ka jira laakiin 2 xisbi oo kamid ah ayaa shucuubta Maraykanka waxay helaan 95%, inagu maalmahan waxaan wadnay "green party" sanad walba waxay galaan tartanka waxa jira "independent" dad iskood u madaxbanaan oo tartanka gala jira laakiin 2 xisbi ayaa 95% hela waxay la macno tahay inaga soomaali ahaan hadaan labo xisbi niraahno waa inaan heli karno labada aqal marka laysku daro 313 xildhibaan inay labo xisbi ukala jabaan, markaasoo kale ayaa la odhan karaa 2 xisbi, wadan xisbiyo badan macnaheedu maxay tahay, waa 80% shucuubta wadanka dagan inay codkooda helaan, 80% waad garan kartaa waa number aad u badan weeyaan, soomaliya haday tahay 20 milyan waa inay helaan dhawr iyo toban milyan oo cod inay helaan sidaas daraadeed hadaan barbar dhigno inta xildhibaano, waa inay 264 xildhibaan helaan weeyi, "single party" macnaheedu muxuu yahay, markasta oo uu tartan galo waa inuu 51% iyo ka badan heli karaa, masalan hadaan tusaale usoo qaadano Turkey barigii dhawayd oo doorashadu ka dhacday wuxuu helay Erdogan 49% ayuu helay, waa xisbiyo badan, xisbiyadu markay tartamayaan way isasoo kala reebreebaan, hada Kenya 2 xisbi maaha waa xisbiyo aad u badan 5tii sannaba doorashaa lagu gala group group ayaa laysku raacaa, laakiin wadan la leeyahay 2 xisbi kaliya ayaa la wareegaysa waxoogaha waa arintaasi aad bay u culustahay, marka xisbigii 2aad 44% ayuu helay kii kusoo xigayna wuxuu helay oo 3aad 5%, markaa doorashadii in lagusoo celiyo ayay noqotay ilaa 51% iyo a badan uu ninkaasi ku guulaysto, marka maanta hadaan 2 xisbi suubinayno "at least" waa inuu heli karaa shucuubta soomaaliyeed 51% cod markaa dadka waa inuu heli karaa, waxyar baan rabaa inaan ku laabto taariikhdii 1954 waagii aan daakhiliyada ku jirnay ayaa waxa la suubiyay doorashooyinka dawladaha hoose ee 1954tii, 8 xisbi ayaa codadka uugu badan helay, wadaniyadu aad bay u saraysay, xisbiga SYL marar dambe waxa la iraahdaa

uu khasaaray iyo way ku shubteen iyo waxbaa la iraahdaa laakiin markaas codku sax buu ahaa, waxaa lagu tartamayay 281 cod ayaa lagu tartamayay, SYL waxay heshay 141 50% ayay heshay, xisbiga Digil and Mirifle waxay heleen 20% oo dhiganta 57, xisbigii kusoo xigay 9% ayuu helay, xisbiyadii uugu codka yaraa waxay ahaayeen xisbiyada magaca qabiilka wata, markaa wax laga cararo meeshaan ma yaalaan hadii aan rabno xisbiyo inaan u gudubno, "coalition" markay dhacdo oo laysku tago ayay wax noqonaysaa laakiin wax laga baqo maleh, ninka gaar u istaaga ama shaqsigii kaligii xisbi wato hada codba heli maayo, hada Dawladii ina dhaaftay waxa is "register" gareeyay 110 xisbi ayaa is "register" gareeyay, waxaan la fadhiyay saaxiibkay Mahdi oon shalayna dhagaystay wuxuu 75 qabiil bay ahaayeen markaan hoos u fiiriyay, 15na qabiil kale ayay ahaayeen, macnaha shakhsi shakhsi marka loo eego oo tartanka la galo waxaasi daaqaday ka baxayaan, doorashadu markay soo dhawaato 1000 xisbi ha is qoraan laakiin ninkaan heli karin cod ku filan daaqaduu ka baxayaa, sidaas daraadeed in xisbiyada albaabka lagasoo xirto maaha.

- Qodobka 56(2): Waxa kale oon tusaale usoo qaadanayaa, **waxaan "support" garaynayaa hadalkayga aan cadeeyee xisbiyadu inay bataan ayaan "support" garaynayaa**, maalin dhawayd halkaan ayaan joogay nin saaxiibkay ah oo Amiin Jeesow ayaa wuxuu iri waar horta 5 xisbi inaga ilaaliya 5ta qabiil yaanay noqone, mid taageersan 2da xisbi wuxuu iri mid baan idiinku daraynaa ee aqbala halkaasaanu fadhinay, marka waxaan leeyahay maxaa horta shuruudaha marka xisbi la suubinayo waxa la suubiyaa waaqiciga maalinkaas wadanka ka jira, masalan doorashadii hada u dambaysay waxa soo baxay intaasoo qof oo codad helay oo shaqsiyaada laakiin xisbi aan haysan oo soo "campaign" gareeyay oo "resource" badan uu ka baxay,

- Qodobka 54 (2): Shaqsiyaadkaas hadii la iraahdo albaabkaa laydinka xirtay, macnaheeda wadanku "stable" noqon maayo, dadkaas shakhsiyaadka ah ee soo dadaalay ee codka helay ee "resource" ka bixiyay waxay u baahanyihiin "platform" ay haystaan ooy banaanka mucaarid ka noqdaan in albaabka laga xiro maaha sidaas daraadeed anigu waxaan ku "base" garaynayaa, doorashadii hada dhamaatay ilaa 8 qof ayaa number badan helay, dadkoo dhan bayna isugu jiraan markaa waxa la odhan karaa ugu yaraan 8 ama 9 ayaa numberka uugu fiicani uu noqon karaa, "first round" 4 qof ayaa anaga waxay soo gala, 4taas qof "resource" iyo wax badan baa kasoo baxa waxa lagu dari karaa uugu yaraan 3 ayaa lagu dari karaa 7, si ayna unoqon 5 beelood oo umada oo dhani isaga dhex aragto magicii qabiilkana looga baxo, waxaan oran karnaa, kaba soo qaad 18 Gobol ayaan nahay, qofkii 18 kasoo "campaign" gareeyay, oo helay kiiba kasoo qaad 30 iyo intaasoo xildhibaan, lama odhan karo xisbigaas waxaagii waxba kama jiraan, waxaan usoo laabanayaa xukuumada hada jirta hadaan tusaale usoo qaato ama dhaqanka had aan ku dhaqano waxa la iraahdaa "winners take all" waar hadii hal qof ama 2 xisbi ay iraahdaan inta kale albaabkaan ka xiranaynaa waa " winners take all" waxa hada jirta 16% ayaa "first round" xuskuumadani ay heshay, xukuumadii ka horaysay waxay heshay 22%, markaa "problem"ka ina haysta waa cilada la iraahdo "winners take all" marka waa inaan xisbiyo suubino laakiin xisbiyo nidaamsan oo dhaqankeena ku "base" garaysan aan suubino ayaan leeyahay.

Midda kale yayna noqonin sida Somaliland muddo badan baa waxa ku jira, 3 xisbi ay hor taagantahay, 5tii sannoba, hadii 5 sanno go'aan lagu gaaro xisbiyo hala doorto, doorashada halagiu galo "dismiss" halaga dhigo si ayna u noqon dad waligood ina hor taagan, Kenya waxaa ka jirta xisbiyo badan, 5tii sannaba dhan bay isku raacaan markaasay doorashada galaan, labo xisbi ayay badanaa u kala jabaan taas ayaan soo jeedinayaa, waxa kaloon xasuusinayaa aan rabaa "article" saaka markaan toosay aan akhriyay oo nin la iraahdo Baadiyow uu kusoo qoray

SoomaaliNet.com wuxuu tusaale usoo qaatay Adan Cadde, madaxwayne Adan Cadde, wuxuu idhi walgiis sharci ma jabin, waligiis musuqmaasuq ma suubin, wax lagu eedaynayo maleh, waxaan xasuusinayaa hada inagu Baarlamaankaan nahay, Guddoonka waxaan xasuusinayaa bal horta waligiin sharci hoosaad iyo sharci ma jabiseen?, intaasaan uuga baxayaa asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

2) **Xil. Omar Yusuf Galadid:**

Assalamu calaykum wa raxmatulahi wa barakutu, Gudoonka labada Gole, Xildhibanada labada golle, Hawlwadeenada, Saxaafada, assalamu calaykum wa raxmatulahi wa barakutu. Bacda salaam waxan raba Guddiga madaxabanan iyo Guddiga la socodka runtii waan u mahadceliyo shaqa fican ayay soo qabteen oon u igmanay inagu, Guddiga madaxabanan halkanan ku ansixinay inagu. Guddiga labada golena ee lasocdka dib u eegista dastuurka Barlamaankay ka socdaan,

Marka waxan raba arrinta iyada ah waxad moodaa wax badan inaanynu ka hadalno Barlamaanka waa laxoogaya oo kale, micnaha Guddigu shaqadii loo direy shaqa aan ahyn ayay qabteen, sida wax aan loo baahnayn ayay ku soo dareen oo dastuurka ah iyo dastuurkay tireen, marka arrinta waxan rabaa runtii inaan ogaano, Guddigu waxay tireen oo ay iyagu maskaxdooda kala imaadeen ma jirto waa inaga u idmanay hadii oo wax khalad ah jiro ay soo saxaan hadiii ay wax kuso daraana inagay nagu xidhanthay inan qadano, inaga ah gollihii ugu sareeyay dalka ama sharci dajinta marka innagu hadii aan awoodeena arki waynay ama shaqadeena aan qabsanwaynay inaynu cid ku eedayno maaha, hadda kahor baa waxa la yidhi, Maroodibaa tuugsadayba la dhahay, markasu wuxuu yidhi magan Alle magan Rasuul wax isiiya, ninkii i siiyana waa sidan rabay ninkii ii diidana xoogban kaga qadan buu dhahay oo ma baryaayo xoogban kaga qadanaya, marka inagu waxan gollaha sharci dajinta ama gollaha dalka ugu sareeya ayaynu nahay inagay wax kasta ina soo hoos marayan, waxkasta inaga la raba inan halkan go'nkeeda kaga qadano oo aan hadaan wax ku darayno raga runtii odayaal ah oo aad shaqa culus qabta oo uu Raysal wasare ku xigeenku ka mid yahay runtii talooyin badan oo wax ku oola uu kuso daro oo uu la imaado, marka qofkii oo la iman kara ama keeni kara, dastuurku aayad Qur'aana maha ee wa la badali karaaye ha kuso darro.

Arrinta kale Madasha Qaranka ama Golaha Madasha Qaranka waxay inoo keneen heshiis siyaasadeed, Sharci inoomayna keenin heshiiska inaga la inaga rabaa waxan kaqaadan karno inan ka qadano waxynaan ka qadan karina inaan iska dhaafno laakiin macnaheedu maha waxyabahan aan mararka qaarkood ku hadlyno ama raga qaarkii ay ku hadlayaan xidhibanada saxibaday ah eey leeyhihiin mesha “dictator”nimo iyo awood baa lagu socdaa ma jirtee inaga awooda iska leh Ilahay kasokow, inaguu shacbiga soomliyeed inoo wakiishay inaan shaqada qabano intaa markan ka baxo.

Dooroshooyinka qof iyo cod, Dooroshooyinka qof iyo cod horta waa midda aan radinyno oo qof kasta oo shacab ah oo soomaaliyeed ama qof kasta muwaadin soomaaliyeed ah uu ku dareemaayo inuu maalin maalmaha kamid ah xuquuqdiisa uu helo, oo waxbarasho uu helo, biyo nadiif ah uu helo, caafimaad uu helo markaa “one man one vote” waa waxa aynu raadinayno inay ka bilaabato sida hada micnaha cutubka 4aad aan uugu jirno, in doorashada gollayaasha “one man one vote” ee deegaanada waa ururo ayaa la dhahayaa.

- Qodobka 56(2): Marka ururadaas soo baxa ayaa isku badalaaya xisbiyo, xisbiyadaas 2da xisbi ee uugu cod badata ayaa doorashada qabanaya, marka anigu fikirkayga kolay waxaan

qabaa, dadka waxaan ahay kamid ah inay xisbiyadu 3 ku koobnaadaan haday ka bataan oo ay 5 noqdaana 5tii beelood ayaa imanaysa, 5tii beelood haday imaadaana bahashu dee meeshii aan joognay uunbay joogaysaa, **anuu waxaan qabaa 3 xisbi inaaan kusoo ururino**, anigu xisbi ayaan kamid ahaaba oo dawladii hore, xisbigayaga 9 Gobol ayaan ka diwaan galinayba oo uu ka jiraa oo Gobolkiiba ama Degmadiiba 1000 "member" aan ka helno, waanan ka helnay oo xisbigayagu uu dhisnaa laakiin nasiib daro waxaan u taagdarawnay Dawladii hada tagtay ayaan lahayn aad kaga qayb gashaan laakiin ma dhicinba teendhadii uunbaa lagu laabtay, Illaahay waxaan ka rajaynayaa teendho dambe inaynaan ku laaban, dhibkeeda iyo culayskeeda ayaan ognahaye.

Hal qodob oo waxaan rabaa aad loosoo celceliyay oo ay ka hadleen gabdhaha walaalaheen ah, horta gabdhaha baryahan aad bay olole u wadaan oo ah tiro 30 ah hanala siiyo oo hanaloo xiro, hanaloo badiyo, gabdhaha soomaalida waa gabdhaha aduunkana uugu qaalisan runtii, wax loo diidayna anuu maba garanayo, anigu waxaan qabaa gabdhuhu inay si equal ah ay ula tartami karaan raga, ayna ka cod badnaan karaan ayna ka dadaal badanyihiin oon ognahay, sababtoo ah ayagaa uugu naxariis badan, ayagaa soo koriyay, ayagaa waxkasta ugaga haboon, marka kuraastan ay leeyihiin 30 30, maxaa loogu xidhayaa 30% ka badan ayayba heli karaane, halka mid een rabo laakiin inay iyaga micnaha loo xiro waxaan dhihi laha 18ka Gobol in gobol kasta gabar women rap ay ku soo baxdaa, taas waan qabaa. Laakiin kuraastan kale ee loo xiraayo ka badan ayay heli karaanba ee waxba yayna isku koobin 30ka.

Hal qodob oo ay aad uugu soo celceliyeena waxoogaha dood yar baan ka qabaa hana iga raali ahaadaan, qodobkaas waxaa waaye gabadha soomaaliga ah ee nin ajanabi ah guursata ilmaheedu waa muwaadin soomaaliyeed, waa sax waxba kama qabo taas laakiin marka aad fiirisid gabdhaheena ani hada wadamadan "western"ka ah 33 sanno ayaan soo joogay meel aanan soo marin maleh, carabtaan ka bilaabay ilaa iyo "all the way Europe" oo dhan ilaa America waan soo maray, gabdhaheena ama intaan wadankeena uu burburay halka arin een ku guulaysanay ee Illahay inagu guulaysiiyay waxa weeyi, ummada horta risaalo ayaan u noqonay dadka islaamka ah, meel kasta ood Europe martid gabadh soomaaliyeed oo jalaabiib qabta oon cabsanayn ayaad arkaysaa oo ku soconaysa, meesha dadkan kale ee Morrocanka iyo wadamadan kale ay gabadhu boorsada ku wadato oo markay masaajidka soo gasho iyadoo cabsanaysa ay soo gasho ay tukanayso, gabadha soomaaliyeed jalaabiibtay iska qabtaa meel aad arkayso oo "nazi" oo Germany iyo Denmark xuduudka la ah ayaad arkaysaa iyadoo jalaabiib iska wadata, waa risaalo waaye waxaasi, alxamdullilaah meel kasta ooy tagaana way ka muuqdeen, hal qodob oo laakiin aan markasta anigu ku diidanaa ayaa jira, nimankan walaalaheen ah e carabta, Holland markaan joogaybaa nin baa wuxuu soo islaamiyay nin Hollandaise ah tawxiidkuu usoo qabtay, waa ninkii carabka ahaa, gabdho tiro badan buu leeyahay, gabdhihii intuu kasoo leexiyay buu dhahay gabdhihii soomalida ahaa ayuu dhahay ninkaasaan hayaa, gabadhii ninkii baa lagu daray markaa Hollandaiseka ahaa, anigu arintaasi way fiicantahay oo dadka muslimka ah in diinta lagusoo jiito waa wax wanaagsan weeyi, laakiin waxaan wanaagsanayn ninka carabka ah wuxuu dhahay wallaahi soomaali way na astureen wallhi "humaa kuweeyz" way na astureenoo dee isga gabadhiisii uuma ogola inuu u guuriyo, teeniina wuxuu leeyahay " allah yasturhum" way na astureenoo gabadhaasay noo geeyeen, anigu markaa mala qabo, waan qabaa oo gabdhaheena ma cunsuriyaynayo waa gabdho fiican, ma rabo aniga gabadh soomaaliyeed inay nin kale guursato maba rababa, umaba quuraba, nin aan soomaali ahayn uumaba quuraba laakiin haday noqdaan iyagu waxyaabaha hada social mediaha ka socota rag ajaaniib ah intay soo guursadaan oo ay social mediaha soo galiyaan bay cay nagala

daalayaan, waar inaguna aan iska dayno Morroco iyo meelahan la aadayoo gabdhaheena aan iimaansano oo gabdhaheenaa inaga badane.

- Qodobka 57(1): Guddiga doorashooyinka, ani waxaan qabaa guddiga doorashooyinka in la kala saaro Guddiga heer Federaal ee Doorashooyinka Madaxbanaan iyo Guddida stateyada inay kala madaxbanaanaadaan, wadanku waa Federaal weeyi ma qaadi karo Guddi Federaal ah oo lasoo magacaabay oo hadii la rabo la daba socdo inay noqdaan guddidii min Raaskambooni ilaa iyo Lughaya noqonaysay inay qabtaan doorashada, **marka waxaan qabaa Guddiyada in lakala saaro sidii ma argtay "Federalism"ka, tan guud ee doorashada Federaalka ah uun ha qabtaan laakiin tan kale in lakala saaro oo labo loo kala qaado, sidii hadaba ay ahaayeen SEIT IYO FEIT oo kale inay u socoto.**

- Qodobka 51(4): Tan oo madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen ayaan rabaa inaan hal kalimo ka dhaho, sidii aan hada kahorba halkaan aan uuga sheegay anigu waxaan qabaa dadka raba inay ka guuraan 4.5ka oo ay u guuraan doorasho "one man one vote" ah ama qof iyo cod ah dadka qaba fikirkaas ayaan ahay, waan qabaa in doorasho xisbiyo ah lagusoo baxo oo xildhibaanada Federaalk ah lagusoo doorto, xildhibaanada Federaalka ah halagu soo doorto "one man one vote", laakiin waxaan qabaa madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeena waxba kama qabo, waxani waa heshiis bulsho madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen ay soo doorteen labada Gole ee Baarlamaanka "parliamentary system" oo ah xildhibaanada inay doortaan madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen taas ayaan ayidsanahay,

- Qodobka 50(1): Qodobka kale ee ii raaca waxa weeyi "parliamentary" oo raysalwasaaraha Baarlamaanku uu soo dooranaayo iyo madaxwayne "ceremony" ah, oo aan ahayn micnaha madaxwayne sharafeed ah, **waxaan kusoo aruurinaayaa oon codkayga ku aruurinayaa in "parliamentary" aan ahaano, madaxwayne iyo madaxwayne ku xigeen ama hadii laga gudbo Raysal wasaare laakiin Baarmaanka awooda dalka uu gacanta ku hayo,** aad baad umahadsantihiin.

3) **Sen. Zamzam Abdullah Ahmed:**

Gudoonka labada Aqal xildhibaanada labada Aqal, howlwadeenaada, Gudiga dastuurka, dhamaantiin waad salaamantihiin, waxaan rabaa in aan bilaabo doodayda .

- **Qodobka 54(2):** waxaa ku qoran xisbiyada siyaasadeed ha ahaadaan kuwo xukunka haya ama kuwo mucaradeed , halkaas kalmada mucaaradka waxaan rabaa in laga tiro maadaama xisbiyada wali yihiin kuowo cusub yaan lagu sii astaynin mucaaradnimada, hadiiba ay "winer site" ka noqon waayaan ayagaaba mucaaradka iska noqonaayee lakiin mucaaradnimada yaan loosiiqadimin muraacaradkaas in xoogaa laga daayo.

- **Qodobka 55(1)(e):** dadka naafada ah iyadana waxaan jeclaanlahaa in lagu bedelo **"Baahiyaha Gaarka ah"** .

- **Qodobka 56(2):** labada urur siyaasadeed, waxaa jiray faqrad aan kaga soo hadalnay isla cutubkaan 4aad qodobkiisa 49aad I:waxay sheegaysaa dhiirogelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, xagan waxaa la leeyahay labo xisbiyaa lagu sookoobayaa, halkaas waxaa ka imaanayo is diid ama taas halaga saaro, tanna waxaan qabaa ogu yaraan sadex xisbi in laga dhigo labo xisbi oo waaweyn iyi xisbi "winer site"

ka hadhow "check and balance" danbe kusameyn doono iyadana in laga dhigo oo sadex xisbi lagu soo kobo "instead of" labo ay yihiin, labo waa xisbul xaakim ama xisbul mucaarad laakiin xisbi sadexaad oo aan labadan kujirin oo hadhow gorgortan siyaasadeed lala galo hadhow "winer site" xoojiyo ama kuwa kale gorgortan lagalo in laga dhigo .

- **Qodobka 59(1):** eek a hadlaya Gudiga madaxabanaan ee doorashooyinka , waxaan qabaa aniga Gudiga Federaalka iyo "state" ka in lakala saaro Federaalkana uu "opservers" u noqdo siduu markii horeba u ahaa Gudiyada "state's"ka lakiin uu kor ka maamulo laakiin Gudi hoosaad oodoorashada "state's" in ay yeeshaan ayaan ayadana ayidayaa .

- **Qodobka 60(1)(a):** wuxuu leeyahay, in uu yahay muwaadin leh jinsiyada Jamhuuriyadda Soomaaliya, mar sii horeysay Gudiga dhulka laga hadlaayayna arintaas way soo noqnoqotay, walalayaloow qofka Soomaaliga ah isir ahaan uu Soomaaliga ugu dhashaaye jinsiyada Soomaali qof qaadanaayo ma aha, halkaas jinsiyada in lagadaayo **qofka Soomaalinimadiisa in lagu daayo oo laga saaro jinsiyadaas** , xarafka D oo ah 10 sano oo khibrad ah in uu qofka leeyahay ayadana **waxaa "Recomand" garaynayaa in 5 sano laga dhigo** .

- **Qodobka 61aad:** faqrada ugu danbeysa ee dhehaysa iyadoo kala bar xubnaha lamagacaabayo 3 sano ba hal mar si waafaqsan xeerka gudiga lagu dhisaayo, faqradaas macno badan masoo kordhinayso fahakeeduna wuu adag yahay xildhibaano badan oo meeshaan soo istaagayna way ka hadleen in 6 sano lagu joojiyo oo uu inteedii hore ahaanayo mudo xileedkiisa gudiga 6 sano uu ahaanayo aan la cusboonaysiinayin waa "fine"wixii kale oo qorsho hoose ahna in lagu qoro xeer kooda gudiga loosoosaaraayo in lagu qoro lakiin qeybtaan danbe aan la fahmaynin in lagasaaro dastuurka ayaan qabaa.

  Guud ahaana waxaan filaayaa Alxmadulillah in uu noo dhaamada afartii cutub dastuurka oo aan ku soogabagabaynay dooda maanta allah baa mahad leh, waxaa noodhiman un codeyn teedii iyadana aan raacino, kheyr baan idin dhaafay .

4) **Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane:**

Bismillaahi raxmaani raxiim, alxamdu lillaahi rabbilcaalamiin, wasalalaahu wasalama calaa nabiyinaa Muxamed, wacalaa aalihi wasacbihii ajmaciin. ramadaan mubaarak, xililibaanada sharafta leh Guddoonka, Xilibaanada sharafta leh, een waxaan rabbaa inaan ku bilaabo aniga doodeyda.

- **Qodobka 49aad,** oo ka hadlaayo mabaadi'da guud ee doorashooyinka, markii la tiriyay, (h) ama xarafka (h) waxaa la sheegay meeshaas, in la ilaaliyo nidaamkii 4.5 ka ahaa, waxaana la leeyahay, doorasho qof iyo cod ah, ayaa la rabaa wadanka iney ka dhacdo, waxaad muudaa marka arintaasi, ineysan is qabaneynin, doorasho qof iyo cod na waan qabaneynaa, 4.5 iyo qabaa ilo kuraas loo xiroo loo ilaaliyo, waxaad moodaa isma qabaneyso arintaa iyada ah, sababtoo ah dadka la leeyahay, waa in la ilaaliyo, waxaaba laga yaaba iney ayaga noqdaan, markii la tartamo, qofka ugu codka badan, xaqiiqatanna weyna dhacday, halkan qabaailada 4.5 ku qoran, Soomaaliland ninka ugu codka badan halkaan .5 ayuu ku qoran yahay, ee xilibaandii lasoo doortay, marka meshan waa in la qadariyaa, aqoonta iyo "quality " qofka, iyo een inuu tartamo, oo cidka hor istaagi karto

aysan jirin xaqa asaga ah, laakiin qabiil baa loo xirayaa, 4.5, qabaa'ila kalena waa laga qaadayaa, waxa waxey noqoneysaa, in ama lawada daayo, oo dadka kuwada tartamaan, oo layiraahdo, 4.5 kii baa lagu tartamayaa, sey isku qabeysana ma aqaan qof iyo codiyo markaa 4.5, ama wixii Meesha in laga wadasaaro, ee labadaasi bey mid noqoneysaa.

- **Qodobka 51(4):** hey'adaha sida tooska ah loo doorto ama loo dooranayo, **Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, aniga waan qabaa nidaamkaas in loo guuro**, Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen, wadanka uu yeesho, sababtoo ah dhibkan reysal wasaaraha waala arkay, Soomaaliya markey burburtay ka dib, rubuc qarni baan heysnaa reysal wasaaraha ah, maalin walbana waziir cusub, oo inta reysal wasaarihiisa la tuuro, xukuumadii la dhacdo, waziir markuu sanad shaqeeyo, xafiiskii laqabsada, iyo shaqadii siduu u shaqeynayay, ayaa waziiro cusub la keenaa, hadana waxey waqti ku qaadataa, inuu xafiiskii barto een shaqadiina la qabsado, dhibaato aaad iyo aad u fara badan baa ka imaaneysa marka, wax yaabaha kaloo ka imaanaya waxa weeye, reysal wasaaraha asagoon mooshin laga keenin, ooinaba ha yaraate wada sharci loo marin, ayaa daqiiqad lagu ceyrinayaa, halkaan waxaa ka dhacday, Dowladdii hore ama teeramkii hore, Baarlamaankii 10aad, reysal wasaaraa 7 minit lagu cunay, asagoonan laga keenin wax eedeyn ah, mooshin laga keenin, wax isugu yimidna aysan jirin, sidaana la yiri waalagu mariyayoo, waa sharciyoo reysal wasaara kale wadanka u dooratay, siyaasiyiinta banaanka joogtana waxey rabaan, si ay ugu helaan meshaas meelay kasoo galaan, reysal wasaaha iyo Madaxweynaha jooga, in madaxa leys ku galiyo, marka iyaga dantooda meeshaa ay ka dhaxsaartaan, Dowladdii marka waxey ku dhisnaaneysaa un, isqabqabsi , waqtigeeda dhan wuxuu ugu dhamanaya, waxa weeye , intey u shaqeyn laheyd ummda, in leys heysto oo leys ka lusho, oo maalinwalba, muran iyo buuq iyo mooshin iyo dhibaata inuu jiro, aniga markaa waaa qabaa, nidaamkaas in la tijaabiyo, oo loo guuro,

- Qodobka 51(5): een qodobka kale ee qodobka (c) ee aad dhahdeen **Hogaamiye iy Hogaamiye ku xigeen, magacaasi inuusan ku sinneyn baan qabaa,** een raga Dowladd gobleed yada Madaxweynayaasha ka ah, hadii in lakala duwo ay tahay, Madaxweynayaasha, heer federaal iyo heer Dowladd gobleed, magac midkaa ka wanaagsan in la keeno, ayaa aad iyo aad muhiim u ah. Intaa hadaan uga baxo labadaa qodob, een waxaan u gudbayaa.

- **Qodobka 56(2),** ee ka hadlaaya tartanka xisbiyada siyaasadeed, qodobkaa asaga ah, faqradiisa 2aad, waxaa la yiri labada urur siyaasadeed, wadan kaan siyaasiyiin fara badan baa jooga, laba urur siyaasadeedna inuusan ku filneyn na waala og yahay, urur siyaasadeedna in laga badalaan qabaa oo la yiraahdo, laba xisbi, Meesha qoraalka ku qoran, laakiin laba xisbi in laqaata maqabo, waxaan markey ugu yartahay, xilibaanaduna inta ay mareen sida araktida ah, **sidax xisbi markey ugu yartahay in la qaato, ayadoo leyku " balance " gareynayo** , oo labada xisbi waxaaa la orankara dee waalaba xisbi is wataba , oo Dowladdii isla wada dhistay, oo saaxiib noqday hishiis noqday, midkaan unuu dhaxtaal u noqda, oo uu " balance " gareeyo oo saxo, sidaxdaa xisbi hadii la helo, qabaa'il kan lawada ordayo warqadaha, ee nin walbe xisbi iska qoranahayana, iney meeshaa ka baxda oo la joojiyo, sababtoo ah hada 100 iyo hayaay xisbi ayaa waxa waaye diiwan gashan, oo term -kii hore la diiwaan galiayay, anigu waxaan aqaanaa, xisbi magaciisa markaad araktid, qaran iyo waxa uu wata aadan maleyn kareynin, ninbaana qabaa'iladiisa markuu fiiriyay, aa markaan is wareysanay wuxuu igu yiri, xisbiyada inta fiiriyay, baa nin qabiilkeyga xisbi wata inta waayay, anaa sameystay buu yiri, hal nin kaloyaa ku qoran, waah al ninoo qura, ayaa wata, waxaasa hadii la yiraahday ooda halaga

qaado, ooh ala fasaxa oo nin walba xisbi ha qorto, waxaasoo kalaa dhacaaya, xisbiyada markaa, sidax xisbi qaran, in waxa weeye lagu ekeeyo, ayna ka yimaadaan, ay codka soo siiyaan, xilibaano lagu xiro, maa een, een 75 xilibaan baad dhihi kartaa, 90 xilibaan inuu ku yimaado, waxyaaba noocaasoo kale in lagu qiimeeyo, oo waxa weeye uu kusoo gudbo, marka hore ayaa aad iyo aad muhiim u ah, **sidaxdaa xisbi, ayaan anigu qabaa**.

- **Qodobka 58aad** ee xilika iyo waajibaadka gudiga, faqradiisa (A) inuu maamula, la socdo, xaqiijiyo, habsami u sacodka, ee xalaal nimada iyo hufnaanta doorashooyinka jeerarka kala duwan, **anigu waxaan qabaa Guddiga in lakala qaado, Guddiga in lakala qaado heer Federaal iyo heer " state " inuu noqdo Guddiga**, een hada hishiiskii odayaasha ay galeen, Guddigaan market sameynayeen, ama ay ku hishiiyeen, doorashada inay juune ba qabsoonto, oo Golayaasha deegaanka laqabta weeyaa la yiri, taasi waxaa cad inaan laga gaari karinba hada, sidaa daraadeed Dowladd gobleed yadii, waa soo dhawaaday waqtigii doorashooyinka ay gali lahaayeen, een Guddigani goormuu marka howl galayaa, goormee shaqaalhihiisa iyo wixiisi iyo dhan u dhameys tirmayaan, waqti dheeraaduu sii luminayaa, waxaan qabaa marka Guddigaan heer Federaal, Guddi kor joogteyn iyo nidaamka " policy " siyaasada doorashooyinka iyo wax yaabaha dajiyo ,dhaqaalaha iyo korjoogteynta iyo lasocda inuu noqdo, Dowladd gobleed yadana iney yeeshaan Guddiyadooda, waa wax caalamka ka jirana, oo Dowladaha, Dowladdan weyn ee Mareykanka iyo wax ka jira waxa weeye, oo state yadooda iyo ay ku dhaqmaan weeye, **Guddigaa markaa in sidaa loo kala qaado, ayaan waxa weeya ayaan qabaa.**

- **Qodobka 59(1)** xubnaha Guddiga doorashada inta ay ka koobmayaan, qodobka 59aad, waxaa la yiri waa 15, **halkaa reer Soomaaliland cabashey ka keeneen, dee Soomaaliland marna inaan dhahno maamul Gobled baan u aqoonsan nahy, oy ka mid tahay, marna aanan kootadooda Meesha lagu darin, sax maaha,** si ay Dowladd Gobleed yada uga imanayaan, labada xibnood, waa iney markey ugu yartahay, labadooda xobnood ay waxa weeye ka yimaadaan, ninmeeshaa cabdiqani wuxuu ileeyahy afar baan rabaa, afar qaadimeysid, Dowladd Gobleedkaad la mid tahay, een labadooda xubnood in lasiiyo ayaa aad iyo aad muhiim u ah, si Guddiga uu u noqdo 17, Guddiga haduu sii bato, marwalba uu bato,marwalba shaqadiisu ay naaquseyso, iney tahay, baan anigu aaminsanahay, Guddiyada sagaal iyo waxaas in laga badiyo majecli, laakiin hadii Dowladd Gobleed yada lawada sheegay, Dowladd Gobleedkaan Meesha lagu sheego, oo waxa weeye Xubnihiisa meeshaa lagu daro, ayaan qabaa,

- Qodobka 59(2) een isla faqradda labaad, waxaad dhahdeen, Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen ayay iska dhax dooranayaan Guddiga, faqradaasi aniga in la tiraan qabaa sideedaba, dastuurkuna wax yaabo xeerarka lagu nidaamin karo inaan halkaan ku qorno maahan, xeer buu Baarlamaanka soo saarayaa, Guddiga doorasahda looga hadlaaya, shaqadiisa dhan dhameys tireysa Guddoomiye ku xigeenna iney iska dhaxdooranayna waa wax la ogyahy, wax dhibaata ah maaha, Madaxweynena kuma jiro, Gudoomiye iyo Gudoomiye ku xigeen ayagaa iska dhex dooranayaan sidaa seyna ku shaqo galayaan, hadey is tuurayaana, oy waxa weeye shaqadiisu u bogi waayaanna, Guddigooda doorashada, ayay shaqadaa iyada ah u taalaa, waxaan aminsanahay marka , Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen iyo faqrooyin halkaan lagu qoray, in meeshaan laga saaro, xeerka Baarlamaanka uu soosaarayo loo daayo, si buuga iyo waxa weeye dastuurka soo baxayo, uu u noqdo dastuur yar oo gacanta lagu qaadi karo, dadkana wada aqrin karaanoo waxa weeye aanan balaarneyn, laakin waxa uu noqonayaa, qaamuus

inaan Meesha keeno, oo xilibaanada qaadan waayaan, ayuu noqon doonaa, hadii waxaanoo dhan lagu qoro.

- **Qodobka 61aad** ee sheegayo mudada xil heynta Guddiga, waxaan niri waa lix sano, lix sano daasano in lagu daayo, sidaxdaa sano oo dib loogu qoray, inta bandanna fahamkeeda uu adag yahay, ee la leeyahay sidax sano loo cusbooneysiinayaa, in la daayaan qabaa, Guddiga shaqada uu qabanayo, wa shaqo aad iyo aad u adag waaye, shaqada uu qabanaayana waa shaqo xasaasi ah, madax banaanidiisaa in la dhowraa aad iyo aadey muhiim u tahay, sidax sano markii lagoogo hadii la yiraah waala kala dhex galayaa, oo qolaa loo cusbooneysiinayaa, waxaa halkaa ka imaaneysaa faragalin in lagu sameeyay madax-banaani diisa ah, oo ninka aniga ugu fakarka ahna, oon is wadan karnana inan Guddiga u deys to, ninkii kalena inan Guddigii kasaarey noqoneysaa, taas **markaa lixsano oo mudaxileed kooda dib loo cusbooneysiineynin, intaa kaliya in lagui daayo, inta kale dib loogu daray in lagu daayo ayaan qabaa**.

- **Qodobka 62aad** ee sheegaya, waayida xubnaha Guddiga waxaa Meesha ugu danbeysa, in in faqro yar lagu daro, oo ah, een horeyna waaloo soo sheegay, shuruuda, laakiin shuruudii loo sheegay ka dib, oo qofka hadan fakar kale qaadan karaa, wax yaabaha ka mamnuuca ama xilka lagu weyn karo, marka la sheegay, faqra 8aad oo ah, ku biirida xisbi siyaasadeed in lagu daraan qabaa aniga, sababtuna waxey tahay, Soomaalidu, ku biirida xisbi siyaasadeed in lagu daraan qabaa, haduu xisbi siyaasadeed ku biro, ama si toos ah ha ugu biro ama si dadban ha ugu biiree, inuu qofkaasi xubin nimada luminaayo, sababtuna waxa weeye, Guddiyada doorashada inta badan, shaqadooda kuma ekaadaan, shaqadooda kuma ekaadaan, xisbiyadey dhax urdaan, hebelow Meesha anaa kuugu jiro iyo, anaa kula shaqeeyo, wax yaalahaasaa dhacda, si markaa taa looga baaqsado, qododkaasi in lagu daro ama faqradaasi in lagu daro ayaan arkaa, aad iyo aad baana u mahadsantihiin,

  Hal qodob baan ku dari lahaa oo ah, dastuurkaan odayaal baa ka qeylinayoo leh, waala badalaya, waxa dee Meesha loo furay dastuurku, oo noogu furan yahay oo u qalan yahay, waa in wax laga badalaa, in wax laga badalo weeye, hadii dee aan wax laga badaleynin, dastuurku xilibaanada ay bdaleenin, xeerna looma sameeyeen, habraacna looma sameeyeen, Baarlamaankana lama dhex keeneen, waqtina lama galiyeen, intaa kamaanan doodneen, mida kale odayaasha hada ku goodinayo, wadanka chabtar 7 buu ku jiraa iyo " Un " howlahaan iyo xalane galay, war xalane waqtigii la galayay, waa laba sano in waxbaa ka dhiaman, ee hada xalane hanagu furinee, bar horta Baarlamaanka imaadoo, iyo Baarlamaanka iyo halkaan, horta wax aan iska dhahno, xalane waxaaba laga yaabaa xilibaano badanoo in raaci lahaa in Meesha ku jiraan, ee Chabtar 7 hade, Chabtar 7 waxa Baarlamaankan u dheh yaalo, dastuurkaan loo furayba, waa in Chabtar 7 ka laga saaro weeye ba. Waa mahadsantahy Guddoomiye waa igula dhagtee.

5) **Xil. Mohamud Abdirahman Omar:**

Bismillaahi raxmaani raxiim, Alxamdullilaahi rabin caalamiin, Wasalilaahuma Calaa Nabiyinaa Mohamed, Wacalaa Ahlihii Wasacbihii Wasalam. Shir gudoonka qiimaha badan xubnaha labada gole iyo Guddiyada madaxa-banaan ee dastuurka iyo dhamaan howlwadeenada Baarlamanka iyo saxaafada waan idin salamayaa. Salaam kabadi howsha aynu ku jirno ee wax kabadalka dastuurka hadan kusii socono, oo ka bilaabo.

- **Qodobka 54(2)** ee kahadlaya xisbiyada siyaasadeed ee u tartamaya maamulka dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, ee waan taagersanahay, inuu wadanka yeesho xisbiyo tirabadan oo u tartama Maamulka, xisbiyadaas oo ay sida ku qoran, ee faqrada labaad qodobka 54aad iney lafdhabar u yihiin, ama ay nolosha tiir adag u yihiin, ee xisbiyada soo baxa xisbiyo qaran ah,

- Qodobka 55(1): taa maraan ka imaado sharuudaha xibiyada siyaasadeed, sharuudo fiicanoo badan baa la qoray, xarafka(d) ee layiri inuu u hogaansamo mubaadi'da dimuqraadiyada iyo maamul wanaaga.taa muliyaxad yar baan kaleeyahay, dimuqraadiyada inaan iska iqlaaqno maahee sicaam uniraahno waa in mabaadi'da dimuqraadaya u hogaansamo xisbigu, dimuqraadiyada wey noocyo badantahay, wax yaalo bandanna waay kashaqeysaa, lakiin inagu, waxaynu kaqaadano bay ilathay qeybtaa is doorashada iyo codeenta marka in qodonkaa laxadido, oo layiraahdo mabaadi'da dimuqraadiyada, ee qaabilsan doorashoyinka in lagu xadidaan anigu qabaa, haddii lakiin layiraahdo mabadi'da dimuqraadiyada oo dhan u hogaansamo, qatar bey ku sugnanaynaa markaa xalisbey ledahay dimuqraadiyada faraha badan marka waa inay iska shaandheeno.

- **Qodobka 56(2)**, ee tartanka xisbiyda ka hadlaya faqradiisa (2) ee waxaan taagesanahay aniguu xildhibanadii horey ugu hadlay tirada xisbiyada dalku, ugu yaraan inay noqoto sedax xisbi, Soomaalidu gabigeedu waa wada siyaasiya, islaanta ariga ilaalinaysa iyo midka phd-ga haysta kuli meelbay kuwada taagan nahay waana wada danenaa run ahaantii, markaa haddii lasoo kobo oo layiraahdo labo xisbi un baajiraaya, waxay u muuqataa markaa in ee meel ay dadku ku tartamaa awoododa iyo fikirkooda iyo hal abuurkada kusoo bandhigaan, inay ciriiri gasho anaga maraa qabyaalada ka cararna in lasoo kobo saxmaaha qabyaalada aan karareenay inaan daynenin, qabyalada ilaa intuu qimaamuhu dhacaya qabyalada waanu ka shaqenaa hadaynu soomaali nahay iyo ilaahay faraj kale keenu muyaahe dhiigeena bahasha raacsantahay, diinteena xitaa qabyaalada inay nagala horeso taa waynu ognahay, hala minimize gareeyo, halasoo aruuriyo qabyalada lakiin xisbiyda inaan lasoo aruurinin, ugu yaraan ilaa sedax xisbi qaran, een dalku yeesho ayaan anu xoojinayaa xisbiyada laso koobin.

- **Qodobka 57aad,** dhisida Guddiga madaxa-banaan, ee doroshooyinka qaranka iyo soohdimaha, doroshoyonka qaranka iyo soohdimaha, ee anugu waa kala saarilahaa, waxaan soojedin lahaa laba Guddiga lakala dhigo, Guddiga doorashooyinka guud iyo Guddi kalo oo madax-manan oo -soohdimaha dalka qaalbilsan ama kuwa dowlad Gobaleedada hano qoto ama dalalka kale shisheeyaha lalenahay ha noqotee soodimaha Guddi madax-banan loo sameeyo ayaan aniga soojeedinayaa, tirade Guddiga ee la yiri 15 xobnood ayee noqonaysa iyo meelaha ay ka kala imaanayan lasheeegay, run ahaantii anagu qolyahega kasojeeda Somaliland ee Golasha shacabka ku matala degaankaa dagan , Aad baan u saluug sannahay xunahu halka ka imanaya runtii, in shan iyo toban xubnood oo anay cidi nagu matalin Gudigaasi lamagacaabo run anaamtii anaga lafjab baynagu tahay mana taagersani, tirade Guddiga lakordhiyo, oo igu yaraan 19 xubnood, laga dhigaan, aniga horta soojeedinayaa, maadama howlo baaxad leh ay qaranka u qabanayaan siduu noo sheega, xil Ex, Ra'iisal wasaarihii ku xigeen hore, ee mahdi oo isagu qibrad dheraad uleh qaabka dorashookinka, dorashooyinka aad bay u howl badan yihin run ahaantii marka waa in tirada labadiyo si ay isku qebin karaan Gudidu iyo howlaha u yaala, tirada labadinayo 19 ka laga dhigayo waa inay ku jiraan dad ka soojeeda, deeganada Somaliland xubno lamidiya wayna ku jiraan oo Gudidaa qeybka

yihiin, haddii kala garan mayo si wax loo ansixinaayo ama dastuurka gabigeesu sida u socodo, dastuurlaga leeyahay dalka koonfurta kaligeesa noqdo, oo umadadhani 5 million ku dhadhaw la ignore gareeya ama laga tago, taasi si kale u muuqataa, ama wax yaalo kale oo halkan ka oran karaan runahantii, ayaa laga dheehan karaa, diyaarinta ama wax kabadalka dastuurka dadka horayba ka hadleen. Qodobkan hadaan hadaan kaga tago, tirada iyo halkay ka imaanayaan, Gudida waa inay taas iyadana markasna dhameyay, oo deganada Soomalida melaha dagaan oo dhan waa iney ka yimadaan,

- Isla Qodobka 59aad faqradiida (2) Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigenka inay Gudida iska doortaan waa wax sax ah, oo gudi kasotoo la xulaya ama hay'ad kastoo lasamenayo loona doorto Gudoomiyaha iyo iyagaa iska doorta, iyo ku xigeen kiisa, iyo sida hab maamulkoda isku duyarinayan iyagaa u madax banana waxaana ku tagersanahay .

- **Qodobka 60(1),** ee ka hadlaya sharuudaha xubnada gudida doroshoyinka qaranka A,B,C,D, (e) baan ku darilahaa xarafka leh, oo waxade laga hadlaya inuu qofka haysto jinsiyada Soomaaliya , inuu 10 sanoo qibradiisa leyahay, qodobo badan ayaa kujira inoo afartan jiryahay, qodob kalaan ku diri lahayoo xubnaha Gudida la xilaayo madaama laraba dad aqoon leh oo " Academic " ah, waa inay leys ka soo xulin ma qorta la soo qabaninee, dadka waa iney aqoontoda iyo qibradooda iyo garashadooda banaanka ugu soo baxaaan, qodob kale oronaaya waa inuu ka gudbo imtixaan laga qadayo heer qaran ah, ayan anigu ku soo dari lahaa halkaa sharuudaha loo dhigay, inuu afartan ahaadana waa wax sax weeye sidoo kale xaraf (d) waxan ku sameenlahaa wax kabadal oo halka laga yiri qibradiisa toban sano ahato waan kasoo yare lahaaa sidey xildhibanada kale hadba shegen shan sanaa qibrada lagu soo kooba ayaa sax ah,qof shan sanadood hadduu qibrad leyahay waa qof waxbadan garanayo run ahaantii, markaa taa 5sanadood la dhigo, mudo xileedka ay haynayaan, oo 6 sanadood lagu sheega lixdaa halagu daayo baan oran laha , waa sax, maadama 5tii sanadood mar ay tartan qabanayan, 1 sano oo dheeriya inay iga yeshaan ayaa iyadana sax oon soojeedinayaa.

- Qodob yaro kale guud oo iska siyaasi ah inata ku darsadoso intaasi, maalmahaan waxayni maqlenaa, waxa kabadalka dastuurka oo aad leesku haysto run ahaantii, oo qudaha qaarkood shir jaraa'id ka qabteen, warar fara bandanna suuqa marayan, ani waxaan soojeedin lahaa kula talin lahaa howl wadeenada iyo cidkasto dabada kariixesaba, dastuurka wax ka badal kiisa mindi ka horkeenta inaanu ka deyno, oo cadka loo dhigo oo iminka bil iyo bar ayaan doonenay, oo qof kasta fikirkiisa, aqoontiisi iyo wax ku kor dhintiisii ku darsadayoo " contrabution ", ka geystay, haddii layiraahdo waxaan bil iyo bar kadodenay lab cisho guduhood halagu soo dhameeyoo , iminkaba gacanta u taagno, arintaasi aniga ila muuqato inay saxtahy, wixii aad midi dhowrteysaa , adina way ku midi dhowrteeyaan, oo way kula silbanaysaa, hadhow toole, marka inaa cadka u dhigno maskaxda dajino oo dadkaa sedaxda boqol iyo dhowr iyo labadanka xubnood umada Soomaaliyeed mataleysa , ra'igooda in laqadariyo oo wixii ay ku darsadeen, waxa kabadalkodi ama aaraahdoodi, aan bananka looga tagin, oo aan gacan taagnee, een naynu cagta u dhino, oo aynu sugno, oo aynu ixtiramno ra'iga xubnaha laba aqal, ayaan aad u soojedinayaa, aad iyo aadna waad u mahadsan tihiin asalaamu calekum.

6) **Xil. Mukhtar Mohamed Guled:**

Guddoonka xildhibaanada labada Aqal labadda guddi ee dastuurka marka uhoreyso Asalamu caleykum bacda salaam aad iyo aad ayaa umasantahiin Xildhibaanada iyo Senatorada iga horeeyay ee si fiican ufaahfaahiyay qodobada inta badan maadaama saxibadey qaar ay faahfaahiyen marka aniga waan soo kooba oo hadal badan iyo faahfaahin badan ma galidoono. waxan toos u abaaridoona qodobada aan dooda ka qabo misa comments aan ka soo diyaariyay ayan toos u abaaridoona.

- **Qodobka 54(1) Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed.** Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda. meesha ay ku qorantahay iyo guud aha qodobada kale dhamaan waxan ka codsaneyna ama guddiga usheegeyna inee ku daran Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ay buuxiyan oo magaca kaliya aysan ku ekeynin Jamhuuriyadda kaliya aysan ku ekeynin meela badan oo waxa arkeynay oo ku aktahay kaliya Jamhuuriyadda.

- **Qodobka 56(2) Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed.** Labada urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta.

  Ayadana waxan qabaa xisbiyadda sida hore loo sheegay labbo xisbi dalkan wey ku yartahay oo maadama dal muddo burbursana oo wali dadkiisa aysan is aaminin nidaam awood qeybsi beeleed oo ku dhisanyahay waxa la iskula joogo ay tahay nidaam qabali ah oo wali kaslsooniddi bulshadeed aysan soo laabanin maadaama aytahay waxan qabaa xildhibaanadi iga horeesay sida ay soo jeediyeen oo ah inaan labbo xisbi oo kaliya aysan ku filneen dalkan oo ugu yaran ay noqoto sadax xisbi siyaasadded hadan shan iyo lix la gaarsiin karin **marka waxan la qaba xildhibaanadi iga horeeyay ugu yaran ay noqoto sadax xisbi siyaasadded laga dhiga qabaa.**

  Arintaa hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen in dowlad gobaleedyadda loo bixiyo waxan umaleenayaa cutubyadii hora ugu soo hadalnay comments keena ka dhiibanay.

- Qodobka 51(5) Hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen waxan qabna in sidoodi loo daayo laakiin awooddaha Federaalka iyo dowlad gobaleedyadda lakala qaato laakiin Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen sidoo loo daayo ayaa qabaa dowlad gobaleedyadda madaama dowlad gobaleedyo gaar ah ee yahiin oo Dowladii Federaalka ay pace u yahiin sidiidi hore in loodaaha qabaa laakiin hogaamiye iyo hogaamiye ku xigeen laga daayo oo sidoodi hore loodaayo sidii aan hore ugu dhiibtaybo.

  Sidoo kale meesha ay ku qorontahay dowlad gobaleedkasta waxan qaba in lagu badalo dowlad gobaleedkiisa qofkasto dowlad gobaleed gaar ayuu matala marka maadama matalaad dowlad gobaleedyo ama matalaad qabaa'ilo aan ku joogno in dowlad gobaleedkiisa laga dhiga qaba.

**Madaxa Afaraad: Maamulka Doorashooyinka.**

- **Qodobka 59(1)** Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimah Aniga waxan qibaa dida guddiga usii dhigeen oo ah in labbada guddi la isku daro waan la qaba guddiga ku raacsanahy in hal guddi la ga dhigao labbadas guddi waan ku raacsanahyn laakiin waxa kaga duwanahhamm shan iyo tobanka xubnod sida loo qeynsaday.

  Shan iyo tobanka xubnod faafaahinta qeybta ay soo qoreen giddiga waxey ka soo qaaten qodobka 12 ee xishiiski madasha oo qorna in guddiga doorashadda ee shan iyo tobanka xubnood loo qeybsado sadax xunbood oo dowlad federaalka keeni doonto sidoo kale min labbo xundood oo kala imaan doono dowlad gobaleedyada iyo gobalka banaadir.

  Waxan qabaa aniga shan iyo tobankaan guddi iyo guddiyada kaloo la dhisaayo oo dhan ama ku wii ka sii horeeyay oo dhis oo dhan sidii hore loogu qeybsan jiray in loo qeybsadaan qaba oo **nidaamki 4.5 ama shanta beeleed in loo qeybsaddo ayan soojeedinaya.**

  Madaama guddiyo ay tahay dadka saaxiibadey ah oo inta badan soo jeediyay in nidaamka qabaliga ah laga guuraayo oo qof iyo cod loo socdo guddiyada xulitaankooda ama wasiiradda ama xilalka kalee dowlada qof iyo cod kuma soo baxaayeene waxey ku soo baxaayan magacaabis madaama ay magacaabis ku soo baxaayan waxan soojidina ama aan qabaa guddiyada in koo xulo ama dhamaan awooddaha siyaasadded oo dhan ama xilalka siyaasad in 4.5 lagu qeybiyo ayan qabaa ilaa dalkan shacabkiisa ama qabaa'iladkisa kalsoonini ka dhax abuurinkarto.

- Marka ayadaasna waxan qaba ee sidoo kale guddiga waxan raba inaa wax yar ugu daro meesha ay ka soo qaateen qodobka 12 ee heshiiski madasha hadii heshiiska madasha dib looga laabto heshiiska madasha waxan ku qorna in guddigan lagu soo dhiso muddo hal bil guddaheeda waxa ka soo wareegatay oo waxee ahayd 27/march/ 2023 ayey ahayd hal sano ayaa ka soo wareegatay, marka heshiis asagaba dhacay ina soo qaadatan horta ma aheene waxee in waxii fikradahiina ama dadweynaha aa ka soo aruurisen inaa noo keentan ayee aheed laakiin hishiis dhacay oo waqtigiisa laga soo gudbay inaa noo keentan ama soo qaadatan oo faalooyinka aa soo galisan ama warbixinta ma aysan haboonen waxan soo jeedinaye heshiisa madasha aa ku soo qoreysan malaha faalada ah inaa ka joojisan maamaada oo heshiiskas mar hore dhacay oo waxba aan ka jirin.

- **Qodobka 59(2)** Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku- xigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga, kaddibna waxaa meelmarinaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. waxa fiicneed taas inaa iska dhahdaan waxa soo magacaabaayo dhamaan guddiga xubnihiisa Madaxweynaha soo magacaabayo inaa dhahdaan ayee aheed. Hadii laakiin mar doorasho meesha ay timid guddomiyaha iyo guddomiye ku xigeenka ay guddiga iska dhax dooranaayan sabab aad meesha usoo galisan inuu Madaxweynaha meel mariyo inaa soo galisan xubnahaha Guddiga ma aheen sidaa darteed marka waxan qabaa meesha waxa meel marinaayo Madaxweynaha aad ku soo qorteen inaa ka saartan oo ku ekeysan guddomiyaha iyo guddomiye ku xigeenka waxa iska dhax dooranayo xubnaha guddiga kaliya inaa ku ekeysan madaama doorasho meesha ay timid ama ma ahan hadii aan la rabin in si xor ah doorasho udhacdana Madaxweynaha ha iska soo magacabo meesha aan ku joojino ayadana marka waxan qabaa in laga saaro qeybta Madaxweynaha soo magacaabayo. Aad iyo aad ayaa

umasantahiin commenta aan ka qabay cutubka afaraad gaar ahaan madaxa sadaxaad iyo madaxa afaraad halkaas ku soo koobayaa.

7) **Xil. Mohamed Abukar Abdi:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, salaamu calaykum wa raxmatulaahi wa barkaatu, waad mahadsantahay mudane gudoomiye waxaan salaamayaa sidaa soo kale xildhibaanada sharafta leh. waxaan toos ugalayaa doodayda ku aadan cutubka 4aad madaxiisa 4aaad oo ka hadlaaya xisbiyada siyaasadeed, madaxa doorka xisbiyada siyaasadeed dabcan waxaa lasoo qoray, xisbiyada siyaasadeed waxy si nabadgalya ah iyo dimuqraaadiyad ah ugu tartamayaan hogaanka siyaasadda Jamhuuriyada, intaa aan akhrinaayey waxaan ku arkay dhawr meelbaan ku arkay magaca Jamhuuriyada kaliya markaa at least guddiga waxaan ka cosan lahaa in la dhamaystiro magaca Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya lagu dhamaystiro, sidoo kale dhawr meelbaa horeyna waa loo saxay.

- **Qodobka 55(1)** Shuruudaha xisbiyada siyaasadeed dabcan waxay ahaan lahay shuruudahan horta faahfaahinta in tooda badan ay aadaan xeerka doorashooyinka dhankaas meeshana waa lagu soo qaaday isla sidoo kale mana dhamaystirna sidaan u jeedo oo shuruudaha halkan lagu soo qoray oo xisbiyadu ku dhismayaan ma dhamaystirna oo markaa at least halkaa in loo daayaan ah misna meeshan lagu soo dhamaystiray ahayd, ugu yaraan markaa iyadana dhawr bari baa waxa lagu soo qoray erayga talinta markaa talinta ma aqaano waxa looga jeedo eraygaa si isagana si la fahmikaro ayey in laga dhigay ahayd, shuruuduhuna ma dhamaystirna.

- **Qodobka 55 (2)** xisbiyada waxa ka reeban baa meesha lagu soo qoray oo ay kamid tahay in si qarsoodi ah oo qaab ciidan ah u yaala ama u abaabulan, u ololaynta kala goynta dalka isku dirka bulshada, adeegsiga maaliyad ka timid ilo aan sharci ahay, adeegsiga hanti dawladeed ama layimaada fal kale, markaa shuruudaha ka reeban xisbiyada dhibaatooyinka hada ina haysta mudooyinkii u danbaysay soo kordhay hadii lagu daro waxaa ka mida xagjirka ururada mise teemamka u abaabulan nooca xagjirka in faqradaa lagu soo kordhiyo ugu yaraan faqrad tilmaamaysa ururada u babaaulan qaabka xagjiranysan mise laga arko inay xagjiriin yihiin inaan kamid noqon karin xisbiyada markaa faqradaas in lasoo kordhiyo maadaama waxyaabaha hada jira ay yihiin waxyaabaha ugu culus dhibaatada ugu daran wadankan iyo guud ahaan dunida oo dhan kuhaya ay tahay markaa arintaas waxaan guddiga u soo jeedin alaha in faqradaas lagu soo kordhiyo.

- **Qodobka 56(2)** oo tartanka xisbiyada siyaasadeed faqradiisa (2) waxay tilmaameysaa in ururada tartamidoona labada urur oo codad ku guukaysta oo goleyaasha deegaanka deegaanka ugu tira badan ay u gudbidoonaan laba xisbi qaran dabcan waa la soo sheegay saaxiibo badan baa ka hadlay arrintaa si ugu yaraan umada soomaaliyeed midnimadeeda iyo wada jirkeeda loo adkeeyo way wanaagsan tahay in lasoo koobo xisbiyada, hadan iyadoo la soo koobaayo labo in laga dhigo ilama aha waxaan soojeedin lahaa oo codkayga ku biirinayaa saaxiibada soo jeediyey ugu yaraan saddex xisbi in laga dhigo, maadaama soomaalideenu beelbeel ku salaysan tahay hadii intaa laga badiyo ay wixii beelo noqonayaan si midnimada iyo wada jirka umada loo ilaaliyo at least labadana in laga kordhhiyo tirade badan laga soo yareeyo waa taageersanahay laakiin in labo laga bdaiyo ugu yaraan saddex in laga dhigo taasbaan soojeedin lahaa aad baan u adkaynayaa waasida lasoo sheegay oo reer walba wuxuu yeelanaya hadii kale xisbi gaara wayna

adkanaysaa midnimadii iyo wada jirkii dad waxa la rabaa inay isku qasbanaan oo is qaataan araa iyo fikir ay isku raacaan aan hayb iyo deegaan aan midna isku raacin aanay isku qasbanaan qofka kan imaanaya hargesiyo kan ka imaanaay dhuusa mareeb iyo aanay isku qasbanaan aan is raacno aan isku fikir noqono, markaa laakiin waxaan adkaynayaa fikirkaa in ugu yaraan saddex laga dhigo.

- Qodobka 57(1): Madaxa 4 aad maamulka doorashooyinka waxaa ladhisayaa gudiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaranka iyo soo dimaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan, arrintaa iyadana waan soo dhaweynayaa saaxiibaa ka hadlayaa hadda dhahaaya waxay leeyihiin in lasameeyo guddi Feat iyo seat sheekadii la bartay oo sanadadan lagasoo gudbay anuu waxaan soojeedin lahaa arintaa inaan ka gudubno inay wanaagsan tahay wadankan, dawladnimada iyo jiritaanka soomaaliya maalin walba hadii aanu dhahno gobol walba waxan ha u madaxbanaanaado waa la sii kala go'ayaa waana lasii kala fogaanayaa dadka waxa wanaagsan waxa isku hayn kara inay bataan intay badan lahaayeen wax nakala geynaaya, guddigaas aad baan u ayidayaa waanan taageersanahay in guddi heer qaran ah doorashooyinka wadankan maalmulaalayo. Sababtuna waan dariimikarnaa waxyaabaha ka dhacaaya dawlad goboleedyada, Somaliland ka oo bilaw ilaa meesha ugu dan baysa gee dhamaantood doorashooyi la boobay la isku handaday la isku hayhaystaa ka socda, markaa sitaa looga gudbo waa in lahelaa guddi doorasho oo heer qaran ah oo ummada soomaliyeed cadaalad u samaynaaya

- Qodobka 60(1): Dabcan "criteria" lagu soo xulidoono horaa looga hadlay muhiin waaye in dad "credibility" iyo wagaadooda iyo khibradooda lagu soo xulay iany yihiin oona dad dabcan nidaamamka lagu soo xulayaa aad u wanaagsan yihiin laakiin guddigu heer qaran inuu noqdo waxaan umalaynayaa waxay tahay mid ka mida tiirarka wadankani uu ku dhismikaro dadka soomaaliyeed cadaalad ka heli karaan laakiin hadii hogaamiye kasta oo gobol jooga guddi hasamaysto hadii ladhaho ogaada wuxuu samaysanayaa siduu wax u rabo, beela soomaaliyeed baana ku dulnam state walba oo la tago maanta oo lagu dhibaateeyey oo xuquuqdooda loogu diiday, markaa arintaas guddiyada aad baan u adkaynayaa guudi heer qaran ah doorashooyinka maamulayaa dunidana wax kajira weeyi maaha wax cusub aduunka inta badana sidaasuu ku dhaqmaa,

- xuduudahaa lagu daray dabcan laba guddiyo waxaa la isku doorashooyinka iyo xuduudaha, xuduud waxyaabaha waxay noqondoontaa aay ka imaan doonto dhibaatooyin badan oo is qabqabsi ka imaan doonto markii laga gudbo marxaladan hadda aan ku jirno waxaad arki doontaan dawlad goboleedya bad iyo gobolo isku haysta mid walba lee yahay xuduudaydu halkaasay ku eeg tahay, arrintaa iyna waysoo socotaa markaa in hadda laga fiirsado, guddiga isna dad khubra ah waayo jooga waxaas fahmikara gobolada xuduudahooga si dawlad goboleedyadu hadhaw isku dagaalin, maanta shabaabaa lala dagaalaya shabab hadii laga gudbo waxaan aaminsanahay waxa soo xigaa inay yihiin dawlad goboleedyadu iny xuduuda isku qabsan doonaan la iskuna dagaali doono markaa sitaa laooga gudbo xuduuduhu arin aad umuhiima waaye waxay fiicnaan lahad in guddi gaara oo xuduudah kaliya u qaabilsan oo shaqadaa qabanaaya inay jiri karaan lakiin hadii halkan lagu darayna waan aamin sanahay iyadan inay muhiim tahay in muhiimada ay leedahay la siiyo, siday ku iimaanayan guddiyadu horaa llga hadlay waxaan aamin sanah raacsanahay aad ugu adkaynayaa sida beeluhu ku imaadaan shanta beelood.

- **Qodobka 58** wuxuu dhigayaa madaxbananida doorashooyinka qaranka taas wax badan kama qabo.

- **Qodobka 59** (1): xubnaha guudiga madaxabanaan doorashooyinka iyo soodinta, taa waa sida lasoo sheegay waa 15 xubnood weeyi , waxaan rabaa arrinta saaxiibo badan baa ka hadlay waxaa la leeyahay 4.5 in laga gudbo doorasho hal qof iyo codna la aado siday ku dhici kartaa ani waxaan aamin sanahay doorasho qof iyo coda in loo gudbo karo hadda lo gudbi karo laakiin nidaamka beelaha in la ilaaliyo ay waajib tahay saaxiibada makarafoonka ka hadlaya anigoon si toosa u durayn oo diidan 4.5 dad soomaaliyeed baa lagu dulmiyey oo point five ladhaho oo kan ladhho anuu waxaan ogolahay shanta beeloo la dhaho shanta beelood ee soomaaliyeed wax lagu qayb sado, raali baan kunahay waanan ku qanacsanahay laakiin dadka arrinta ka hadlaaya ogaada waxay ku fikirayaan inay wax sii dulmiyaanay rabaan maaha inay wax sii toosiyaan, markaa qofka ku qancaaya kaliya inuu qof walaalkiisa dulmiyo kali markaasuu qanacsanyahay, marka kaliya uu qanacsan yahay waa marka qof walaalkiisa uu dulmiyo uu "confortable" dareemayaa, ilma adeera yaalow sidaa karaali noqdada, waa ku soo jirnay muday soo socotay inaan wali kusii adkaysano halkan la soo istaagno ani ilama aha in maalintii laga gudbayey in lajoogo. nin odaya oo saaxiibka yaa badhabo marka la joogo wuu dhahayaa marar badan (cilaalka isla korsano may fadaanoo cilaalka inay isala koraan fadayaa waa Af maay ) macnaha cunigaagu haduu iskuul aado kayguna waa inuu iskuul aado, haduu caafimaad helo waa inuu kayguna heli karo laakiin qofkan ilmihii kaliya inay koraan oo ilmaha kale korin ogow meeshas anuu waxaan u arkaa arintaas inay qalad tahay markaa waan leenahay walaaloy (ciyaalka isla korsanee isla koreen wax barasha umadda baan yihiin caafimaad wada helee iskuul helee waa Af Maay) laakiin hadii aad idiido buushka reeb (beeraha yaan ku dogob waa Af maay) ogow gurigaaga qasab maaaha adiguna nabad kuma jiridoontid maalim maalmaha ka mida wuu isa soo abaabulayaa gurigaaas dhagaxuu ku soo tuurayaa markay ugu yar tahay markaa arintaa waan adkaynayaa, markaa taas sidaasan ku dhamaynayaa.

- **Qodobka 60(1)** oo shuruudaha guddiga madaxa banaan oo doorashooyinka qaranka waxa lagu soo daray faqrada 1 aa xarafkisa a) in uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya; jinsiyada qof walbaa qaadan kara waa tan gabdhaheenu hada ku doodayaan ay leeyihii oo halkaa la fadhiyaanoo oo ilmaha ajaanibta aan dhalo jinsiyad hala siiyo na leeyihiin, hadana bari waxay dhihi doonaan lagayaabo midkaan guursano hala siiyo jinsiyad arrintaa in muwaadin soomaaliyeed lagu soo koobaan codsanayaa nooma qaban karo position qof noocaas ah haduu qaban karana xiligeeda, arrinta jinsiyada ani waxaan qabaa in laga badalo muwaandin soomaaliyeed in laga dhigo gudiga taasaan u soo jeedinayaa qodobkan waan dhamaystay.

- **Qodobka 61aad** ma cada sida faahfaahinta mudada xil haynta guudiga madaxabanaan lix sanaa meel lagu sheegay 3 baa laleeyahay faahfahinta qodobka cusub markaad gashidna waxa la leeyahay qaarna hadaa la magacaabayaa saddex sano kadibna kuwo kalaa la magacaabayaa arrintaa ma cadda waxaan guddiga u soo jeedin lahaa at least hal mar in lawada magacaabo dhamaantood oo lix sano ah laakiin kuwana in lasoo hormariyo kuwana gadaal laga sameeyo "confusion" ayey keeni kartaa arintaasi oo waxoogaa jahwareera markaa arintaa waxaan oran lahaa intaa halagu soo koobo, aad baad u mahasantihiin guduumiye waad mahadsan tahay, wa salamu calayku wa raxma tulaahi wa barakaatu.

8) **Xil. Sharif Mohamed Abdalla:**

Bismilaah, guddomiye waad mahadsan tahay xildhibaanada iyo inta kale joogta waan salaamaya, aslaamu calaykum waraxma tulaahi wa barkaatu.

- **Qodobka 54(2)** sida dadbadan ka dhawaajiyeen in laga saaro qaybta tilmaamaysa muxaafid iyo mucaarid tilmaameysa intaas laga bixiyo oo inta kale lagu soo koobo ayaan soojeedin lahaa.

- **Qodobka 55(1)** shuruudaha xisbiyada siiqada in labadalo sida hada u qoran yahay waxaa qoran waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda: a) In uu ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeyaa, horumarinta midnimad iyo wixii la mida dhahaan, markaa waxa weeyaan marka ururada lasamaynaayo wali lama gaadhin inuu adkeeyo, waxay ku fiicnaan lahayd inuu cadeeyo amu ee leeyahay barmaamij wadani ah markaa qodobada oo dhan waxa weeyaan in siiqada ay ku qaran yihii in loo badalo oo layidhahdo waa inuu cadeeyaa , markan diwaan gaintiibaa la joogaa, diwaangalinta markaa lama gaadhin wakhti uu ilaaliyo lama gaadhine, wakhti uu cadeeyo inuu ku ilaalinaayoy weeyi, taasna intaas yarbaan ku darayaa.

- **Qodobka 56 (1)** isagana siiqada waxaa qoran, Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed, waxaan dhihi lahaa waxaa ku tartami kara dhamaan,

- **Qodobka 56(2)** inay laba noqonayaan horta asxaabta qaran ee soo baxaysa ma abadiba kuwaas uun baa jiraaya mise waxa weeyaan muday lee yihiinoo 5,6 ama 10 sano ayaa la furayaa oo loo tartamayaa oo markaa sidaasay ku noqonayaan mise kuwa hadda unkama oo keli ah ayaa weligeedba dadka siyaasiyiinta ah dadka danaynaaya inay ku soo biiraan ay ku qasban yihiin taas dhinicii siyaasada weeyi tan kalena ilama xuma saddexda urur ee ugu codbata in loo aqoonsado xisbi qaran ama axsaab qaran ilama xuna aniga, qodobada siyaasada ka hadlaaya ani waxba kuma darsanaayo meelaha techinkadaan aadaayaa.

  Qodobka 61aad: Guddiga doorashooyinka xubnihiisa waan qabaa in wax lagu kordhiyo faaladan ay gudigu soo qoreen saddex sano qaarbaa joogaaya kuwa kalena, waxay u dan leeyihiin gudigii khibrada lahaa inay wuxuu ka joogaan laakiin xafiiskaas wuxuu yeelanayaa shaqaale joogta ah oo aan ahayn guddiga oo tikno qoraad ah oo wixii toosinayaa markaa laama baahna in laka qaadaado inay noqdaan lixdaas sano lagu dhaafo ayaan qabaa qodobkaasi waxa weeyi qodobka 61 kan aan haddaka halaayo.

  Waxay ila tahay waxa aan ku dansanaayo ee ugu muhiimsan ee cadaynta ah xisbiyada qaran oo soo baxa ma kuwo waligood joogayoo aan lafurayn baa mise fursad waxaa jiraysa in mar laab ururo in loo tartamo dawladihii hoose lagu soo tartamo markaas markastoo doorasho dhacayso shanti sano ba miyaa mise mar hadii halkan lagu kala baxo sidaa uun bay u ahaanaysaa madaxaa ha ku furto, intaasaan ku soo koobayaa wa salaamu calayku waraxma tulaahi.

9) **Sen: Abdihakim Moalim Ahmed**

Mudane Gudoomiye xildhibaanada sharafta leh senetarada dhamaan waan idin salaamayaa Asc.

- **Qodobka 55aad** inta aan guda galin waxaan rabaa wax yar oo madaxa 3aad ee qodobka 54aad ee ka hadlaya dowrka xisbiyada siyaasadeed, kaliya mulaaxado yar ayaan rabay in aan ka muujiyo dhowr jeer xildhibaano halkaan ka sheegayna waan maqlayay, meesha aad mar walba qoraysaan tusaale; xisbiyada siyaasadeed waxay si nabad galiyo iyo Dimuqraadi ah ugu tartamayaan hogaanka siyaasada Jamhuuriyadda ayaa ku qoran, waxaad moodaa dee magaca Jamhuuriyadda ma ahan magac dal, Jamhuuriyadda waa tilmaam waa hayb magaca ama dal isticmaala ama Soomaaliya isticmaal ama Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya isticmaal, laakiin Magaca Jamhuuriyadda marka aad tiraahdid, Jamhuuriyadda waa nidaam la qaato oo la isticmaalo laakiin asagu magac ma ahan .
- Meeshan aad kusoo qorteen hogaanka siyaasada Jamhuuriyadda, waxa aad dhahdaan hogaanka siyaasadda dalka ama Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya dhaha, meeshaan intaas ayaan rabay in aan ka muujiyo, meelo kalana way kusoo aruurtay oo ay ka mid tahay isla qodobkaas 54(2) isagana sidaa oo kale ayay ugu qoran tahay oo gabagabadiisa ah tiirarka nolosha siyaasada iyo dimuqraadiyada Jamhuuriyadda ayaad tiraahdeen, marka waxaad dhahdaan "Dalka Jamhuuriyadda federalka Soomaaliya" dhaha.

- **Qodobka 55aad xisbiyada siyaasadeed:** Xisbi siyaasadeed kasta waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda, hadalkaan siiqadiisa iyo sida aad u qorteen xoogaa in la is waafajiyo ayaa fiican oo qoraalka laftirkiisa uu qurxanaado, ee xisbiyada siyaasadeed ee dalka waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda; in uu ilaaliyaa, fiiri waxa aad dhahdeen in uu ilaaliyaa ku dhaqmaa adkeeyaa hor mariyaa midnimada Jamhuuriyadda, xoogaa dastuurka waxaa la rabaa qodobadiisa horta waa in ay wax la fulin karo ay noqdaan, laakiin wax aan la fulin karin shardi lagama dhigo in la hormariyo dimuqraadiyada, in la ilaaliyo ku dhaqanka lagu dhaqmo la adkeeyo hormarinta midnimimada xoogaa xataa waxay leedahay rakiik waaye sida ay isku saarantahay xitaa qaab ma ahan, marka anigu waxa aan qabaa faqradaas in la iska xadfo oo laga tiro meesha, faqrada kowaad xarafkeeda (A) ee qodobka 55aad in la iska tiro ayaan qabaa hadii kale si kale haloo siyaaqeeyo at least halagu soo koobo "la ilaaliyaa midnimada dalka" saa hala layiraahdo, lakiin ku dhaqmaa, midnimo laguma dhaqmo si loogu dhaqmo midnimo ma garanayo, midnimada ilaalin ayay u baahan tahay iyo ku shaqayn ma aqaano taas.

- **Qodobka 55(1-B)** waxaad dhahdeen marka in uu u hogaamsamo dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya iyo talinta sharciga, anigu waxaaan qabaa sarraynta sharciga haloo daayo meel walba oo dastuurkeena saraynta sharciga kaga qornayd, meel walba waa in uu sharciga sareeyo, fiiri waxaad ka cararaysaan nooc Mas'alo fiqi oo caqiidada la xiriirta waaye waxa talinta sharciga meeshaan loo soo dhahay ee looga tagay saraynta sharciga, sharcigu wuu naga wada sareeyaa, fiiri sharcigaan waxaan ku xirnay dastuurka isagana waxaan ku xirnay shareecada islaamka, shareecada islaamka miyayna naga saraynin? wax kasta oo shareecada islaamka khilaafaya waa "malqi" ayaan niri meel walba ayaan galinay, marka in uu sharci ahaan naga sareeyo ayaan caqiido ahaan maskaxdiina waxaa ka guuxaysa sabata uu sharciga nooga sareeyaa, sabab sarayn loo dhahayo waa dastuuri. aniga waxaan qabaa niman

yahow waxyaabahan naga dhaafa ee meesha halagu soo celiyo oo ahayd sida uu u qornaa "saraynta sharciga" halaga dhigo sida meel walba ku qornaan jirtay hala yiraahdo ayan qabaa.

- Isla **qodobkaas 55(2)** xoogaa qoraalka bes ayaan meeshaas wax yar ka saxay, waxaa la yidhi qarsoodi ah qaab ciidan ama ciidan u yaalle ah ama u abaabulan colaad si ujeedooyinkiisu ku gaaro ayaa ku qorane "si u jeedooyinkiisa" hala yiraahdo meshaas xoogaa qoraalka wax yar halaga saxo, isla qodobkaas 55(2,d) waxaa ku qoran adeegsadaa hanti, macnaha markaas mamnuucid ayuu ka hadlayaa qodobka wuxuu ka hadlayaa waxa ka reeban xisbiyada, marka waxaa la yiri waxaa ka reeban xisbiyada in uu adeegsado hanti dowladeeda ama la yimaado fal laaluush hanti dowladeed, Xisbi siyaasadeed in uu adeegsado mamnuuc ma ahan lakiin "waa sharci daro" in aan "sifo aan sharci ahayn" waa in la yiraahdaa, waxaa dhici karta axsaabta in Budget loo qoondeeyo dowlada miisaaniyadeeda ay wax ku leeyihiin hadii dalka dhaqaalihiisa saamaaxayana xaqbay u yeelanyaan, marka way isticmaali karaan hanti dowladeeda axsaabta, lakiin hantidaas dowladeed ay isticmaalayaan sifo sharci daro ah inaad ka dhigtaan waaye, lakiin hadii aad ka mamnuucdo iyada dhan taas khalad ayay noqonaysaa marka xarafkaas "D" adeegsiga hanti dowladeeda ayaad dhahdeen oo dambi ayaad ka dhigteen oo xisbiyada laga mamnuucayo, hanti dowladeed xisbiga in uu isticmaalo xaq ayuu u leeyahay marka taana waxaan qabaa inaad fiirisaan.

- **Qodobka 56(2)** Laba urur siyaasadeed ee buuxiyay shuruudaha ku xusan xeerarka siyaasada ee ku guulaysta doorashada goleyaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee ku tartamaya kuraasta golaha shacabka iyo aqalka sare iyo madaxda iyo sidaas, anigu meeshaan waxaan wax kala saarayaa marka xisbiyadii dalka marka ay tartamaan oo ay u tartaman golaha deegaanka ee labada xisbi maxay ku kala baxayaan oo maxa kala saaraya? Meel uun in laga soo geliyo yacni midka helaa codadka badan labada xisbi ayaa soo baxaya in la muujiyo waaye, labada xisbi ee ugu codadka badan in la muujiyo waaye si meesha looga jeedo ayaan soo jeedinayaa.

- **Qodobka 58(j)** in uu u soo jeediyo talooyinka Baarlamaanka Federalka Soomaaliya, meshaan hal mulaaxado ayaan ka qabaa inta aan labadaan aqal fadhiyadaan isoogu imaanaynay qolyihiina golaha shacabka ah waxaadba golaha Baarlamaanka u taqaanaan idinka le isku taqaanaan, Sheikh Aadan Madoobe waxa aad u taaqaan in uu yahay gudoomiyaha Baarlamaanka Soomaaliya, marka Shiikh Aadan Madoobe waa Gudoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamanka JFS, marka aad halkan ka hadlaysaan iyo marka aad hadal jeedinaysaan idanka oo xildhibaanadii ah ayaad Baarlamaanka Soomaaliyeed Golaha shacabka uun u yaqaanaa, shacabka Soomaaliyeedna wuu idinka sii fogyahay marka si aan iskaga kiin celino oo aan wax sax ah idiintusno meel walba uu Baarlamaanka Soomaaliya uu ku qoranyahay labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya in la yiraahdo waaye, si maskaxdiina looga dajiyo inta aad la qabsanaysaan aqalka wuu cusubyahay oo aad baranaysaan, marka guddiga sharafta leh waxa aan ka codsanaynaa in ay meel walba yiraahdaan labada Aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya oo ayna Baarlamaanka Soomaaliya ku soo koobin si aan carabkiina u barno.

- **Qodobka 59aad** Xubnaha Guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka waxaa la yiri waa 15 xubnood, sida ay ku imaanayaan waxay ku qeexnayd Heshiiskii ay gaareen Golaha wadatashiga Qaran, Golaha wadatashiga qaranka waxa ay gaareen oo dhan sidiisii baad u soo naqdiseen oo sidiisii baad usoo qaadateen oo halkan usoo galiseen, qodobkan

markii lasoo gaaray ma fahmin sababta keentay in aad dib u riixdaan, Marka waxa aan codsanayaa kaas sida uu ahaa in loo qoro sida uu u qaybsanaa in loo qaybiyo.

- isla guddigaas markii laga hadlayo waxaa la yiri 15ka xubnood qaabka ay ku imanaayaan , arragti baad faalada ku soo gudbiseen in ay sadexdii sano ba is bedalaan, annigu waxa aan qabaa 6 sano kadib in ay noqoto isbedelka macnaha dad hadda la doortay oo lawada doortay 6-dii sano ee loo magacaabay in la yiraahdo sadex sano ayay qolo baxaysaa xoogaa way adagtahay, waxaa ka fudud in la yiraahdo lixda xubnoodba waa la magacaabayaa 6 sano marka ay shaqeeyaan ayaa qayb kamid ah lasoo celinayaa qaybta kalena meesha ayaa laga saarayaa, saas in la yiraahdo ayaa ila quman, qori tuur halagu kala saaro ama si kle halagu kala saaro marka option-ada aad meesha ku soo gudbiseen in aad option-kaas ku soo dartaan oo aad ka dhigtaan 6 sano kadib in ay noqoto xiliga lakala saarayo.

- Qodobka 59(2): Gudoomiyaha Iyo Gudoomiye ku xigeenka Guddiga ayay xubnaha guddiga iska dhex dooranayaan kadibna madaxwaynaha ayaa degreto ku soo kala saaraya, war annaga halkan waxa aan raadinayno waxa weeye Guddi madaxabanan oo doorashada dalka ah ka shaqaynaya, Madaxwaynuhu hadii uu diido markii laba xubnood lasoo magacaabo oo Gudoomiye iyo Gudoomiye ku xigeen lasoo magacaabo madaxwaynaha hadii uu diido maxaad samaynaysaan? Hadana laba kale ayay soo magacaabayaan ilaa uu Madaxwaynuhu kuwa uu rabo laga keeno wuu diidayaa, marka waa conflict interest, Waxay kaso horjeeda doorashada mabaadi`deeda aasaasiga ah oo madax banaanida iyo cadaalada ah oo gudigan in lagu dhiso ahayd, Marka qodobka waa in meesha laga tiraa oo lagu koobo guddigu ayaga ayaa gudookooda iska dhax dooranayo.

- **Qodobka 60(1)(a)** meesha 40ka sanno laga dhigey madaxa guddiga xubnihisa shuruudaha loo xiray waxaan qabaa 40 sano in laga yareeyo oo 35sano laga dhigo,

- Qodobka 60(1)(d) khibrada 10aano laga dhigayna waxaan qaba in 5sano laga dhigo.

- Isla qodobkan **60(2)(d)** qof kasta oo ka mamnuuco xeerka jamhuriyada federaalka Soomaliya marka aad soo tiriseen shuruudihii ayaa gadaal waxa aad ka raciseen hadal yar oo dhahaya **"qof kasta oo ka mamnuco xeerka jamhuriyada federaalka Soomaliya"** waxan aad umalaysaa in aad ishkaal raadineysaan, dastuurka ka daaya yacni fiiri baahi aad xog-xogaysaan horta sharciga waxa loogu tala galay in uu qabto qof qawaaninta iyo nidaamka ilaalinaynin hab dhaqanka wanaagsan iyo suluubka wanagsan oo basharka ku dhaqmo qof aan ilalinaynin in uu xakameeyo ayaa loogu talagalay sidiisaba dastuurka ujeedada laga leyahay iyo qawaaninta la qoro waa sidaa marka tii bay baabi'inaysaa qodobkan oo waxay samaynaysaa qofka in uu sida uu rabo u tasarufo, marka wax kasta oo dhiiri galin kara qof in uu talaaboyin aan sax ahayn qaato waxaan idinka codsanayaa in aad meesha ka dhaaftan waa mahadsantihiin.

- Shurundda Xisbiyada Siyaasadeed (Q55aad)
    - in aanay mabaadida Xisbiga Ahdaaftiisa iyo Barnaamijita Siyaasadeed ka hor imaanaynin dastuurka dalka
    - in uu leeyahay Barnaamij gaar ah si uu u xaqijiyo ulajeedooyinka loo abuuray

10) **Xil: Mohamed Abdi Mohamed**

Bismillahi Mudane gudoomiye waad mahadsantahy xildhibaanada sharafta leh dhamaantiin waxaan idinka salaamayaa salaanta islaamka ASC. Marka aan doodayda horay aan u sii guda galo, madaxa sadexaad ee xisbiyada siyaasadeed

- **Qodobka 56aad** tartanka xisbiyada siyaasadeed farqadiisa **2aad** halkaa waxaa ku qoran labada urur siyaasadeed ee buuxiya shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ayaa ku guulaysan doona goleyaasha deegaanka, ayaa noqon doona xisbiyada qaranka ee u tartamaaya kuraasta golaha shacabka, qodobkan waxa aad u malaysaa in ay guddigu u soo diyaariyeen ama ay keeneen laba xisbi siyaasadeed oo kaliya ayuu dalka yeelan karaa ayuu cadaynayaa,, sababta oo ah hadii la leeyahay laba urur siyaasadeed ileen maadaama laba urur siyaasadeed lagu soo bilaabay hadana xisbiyadu ay noqonayaan laba xisbi siyaasadeed, ani qodobkan ma qabo, guddigu waxa aan u soo jeedinayaa in ay ka dhigaan, xisbiyada waxaa ka horeeya ururada marka waxaan rabaa in ay ka dhigaan sadex urur siyaasadeed ama in ka badan sadex ilaa iyo afar lagaarsiiyo, taas ayan soo jeedinayaa.

- **Qodobka 57aad:** dhisidda guddiyada madaxabanaan ee doorashooyinka qaran iyo soohdimaha, horta qodobkan wuxuu la socdaa qodobka 47aad ee dastuurkeenii hore oo ay guddigu dastuurka ay ka saareen, qodobkaas oo ay xildhibaanadu intooda badan ay ka hadleen, qodobkaas hadii la soo celiyo sidiisaba wuxuu sheegaayay Nidaamka doorashooyinka iyo xisbiyada, shuruudaha ku xusan xisbiyada diiwaangalinta doorashooyinka heerka Dowlada federaalka ee guddiyada qaran ee madaxabanaan ee doorashooyinka waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saarayo Golaha shacabka ee Baarlamaanka Federaalka soomaaliya, marka qodobkaas markii hore way ka saareen, qodobkaas hadii la soo celiyo waxa aan qabaa qodobka 57aad looma baahnaanayo sida aan anigu aaminsanahay, marka qodobkaas hadii la soo celiyo wixii ka dambeeyana Baarlamaanka ayaa go'aan ka gaaraya oo xeerar ka soo saari doona.

- **Qodobka 58aad** xilalaka iyo waajibaadka Guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka qaranka qoodbkaas waa iska Normal.

- **Qodobka 59(1)** Xubnaha guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka iyo soohdimaha, halkan waxaa ku qoran 15 xubnood oo uu soo jeedinayo golaha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo la tashanayo Hay'adaha ay khusayso ee dowlada federaalka oo uu ansixiyo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya isla markaana uu meel mariyo sida uu sheegay xildhibaankii iga horeeyay,

- Qodobka 59(2): maadaama La leeyahay Guddiyada lasoo magacaabay dhexdooda iyagaa is dooranaya, marka ay isodortaana gudoonka iyaga isku dooranaya, waxa aan u malaynayaa in aan loo baahan doonin in uu madaxwaynuhu meel mariyo, tusaale ahaan markii gudoon la magacaabaayo kaliya ayuu madaxwaynuhu meel marin karaa,

- **Qodobka 59(1)** tan kalena xubnaha guddiga ee 15ka xubnood ah hada waxaan arkayay xildhibaano ay u baadanyihiin maamulka Soomaaliland oo inta badan ay leeyihiin xubnaheenii iyo qoondadeenii halkan laguma xusin, marka Maamulka Soomaaliland maamaluda kale xitaa laguma xusin, Soomaaliland waa maamul kamid ah ictiraaf gooni ah in la siiyay ma ogsooni, teeda kale waxaan soo jeedinayaa in ay ka dhigaan meesha

15-ka xubnood ah sidii beelaha Soomaaliyeed wax u qaybsadeen oo ahaa 4.5 in lagu dhigo taas ayaan soo jeedinayaa.

- **Qodobka 60(1)(a):** Shuruudaha xubnaha Guddiga madaxbanaan ee doorashooyinka qaran iyo soohdimaha farqada **1aad isla xarafka (A)** in uu yahay muwaadin leh jinsiyada Soonaaliya oo da'diisu ayna ka yarayn 40 Sano, marka ugu horeyso maadaama hada doodad badan ay ka taaganyihiin dhanka jinsiyadda, hadii la leeyahay qof aan dalkan u dhalalanin haduu dalkan imaado la siinayo jinsiyada soomaaliya, Sidaas awgeed Sida uu xildhibaanka hada iga horeeyay uu sheegay waxaan soo jeedinayaa in lagu qeexo oo la dhoho Qofka muwaadinka Soonaaliyeed ah ee dalka u dhashay ee jinsiyadiisa iyo dhiigiisu uu yahay Soomaali waa in lagu qeexaa, Sababta oo ah, waxaa imaan kara gabar ajaanib ah oo ilmo ku dhali karta, marka ilmahooda iyo ka anaga aan dhalnay waa inay kala xadidnaadaan oo xaq ay kala lahaadaan meesha da'diisu tahay in uuna 40 Sano ka yarayn waxaan soo jeedinayaa in ay ka dhigaan 30 sano.

- **Qodobka 60(1)(d) Isla xarafka (C)** dhanka khibradda, khibrada ay 10 ka sano ka dhigeen waxaan soo jeedinayaa ilaa iyo 5 sano ilaa sadex sano in ay ku soo koobaan.
-
- **Qodobka 60(2)(d) Isla xarafka (D)** waxaa ku xusan Qof kasta oo ka mamnuucayo xeerarka JFS Qodobkaasna ma cadda xeerarka waxa ay yihiin ilaa hadda ma arkin, marka kaas waa in ay guddigi soo cadeeyaan.

- **isla qodobka 61aad** Mudada xilhaynta xubnaha guddiga faahfaahinada meesha ay ku qoreen waxa ay leeyihiin in la magacaabo kala bar xubnaha kadib 3 sano lagu soo daro xubnaha dhiman Laba xubnood oo ay soo magacaabayso dowladda federaalka min hal xubin oo ay soo magacaabayaan Dowlad goboleedyada iyo xubin gobolka Banaadir laga soo magacaabaayo.

- **Isla qodobkan xarafka (b)** ee faahfaahinta "in hal mar la magacaabo dhamaan xubnaha guddiga kadibna loo qori tuuro kala bar inta baxaysa waxan waxa aan u arkaa in ay yihiin wax isku qasan oo aysan saxnayn, marka Guddigu confuse badan ayuu abuurayaa, Guddiga waxa aan leeyahay in ay soo saxaan oo tafaasiil sax ah ka keenaan oo ay markaasi dib noogu soo celiyaan. Waad mahadsantihiin.

**11)Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud:**

Mahadsanid Gudoomiye Ramadaan Kareem, waxaan horey u galayaa doodayda

- **Qodobka 56(2):** doorka xisbiyada siyaasadeed, waxaan rabaa in aan soojeedino labada xisbi oo laga hadlay inay ku haboon tahay in loodaayo maxaa yeelay duruufaha dhaqaalaha iyo culayska dalkaankajira iyo doorashada oo u baahan wakhti iyo juhdi badan in lagu bixiyo iyo hubanti la'aan dhicikarta doorashadu haday labo xisbi kabadan yimaadaan in ay dhacdo In la isbarbardhaco ama la bixin waayo in ay doorashadu dhamaato wareega kowaad ama wareega kuxiga ay ku dhamaato in ay wakhti iyo kharash dheeraada ah u baahnaan doonto , marka in doorashada labada xisbi lagu daayo dunidana hada sidaasaa looga dhaqmaa oo dalalka waaweyn ee Maraykanka iyo ingiriiska iyo turkiga Kenya dan dariska nala ah waxaa lagu dhaqma taxaaluf waaye labada xisbi ayaa ogu waaweyn, **labada xisbi in la xoojiyaan aad u ayidayaa .**

- **Qodobka 55(1)(b):** in uu u ogaansamo dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, **"iyo sareynta sharciga" in lagadhigaan iyadan soojeedinayaa**

- **Qodobka 58aad :** xilka iyo waajibaadka Gudiga madaxa banaan doorashooyinka iyo soohdimaha, waxaa ku qoran A: Gudiga madaxa banaan doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha waxaa xilkiisa ka mid ah in uu maamulo lasocdo xaqiijiyo habsami u socodka xalalnimada iyo hufnanta doorashooyin heerarka kaladuwan ee dowlada iyo in uu ku dhawaaqo ntiinada doorashooyinka; sida laga hadlay qodobkaan inta uu xusaayo in lagu daayo ayaan soojeedinayaa, maxaa yeelay doorashooyinka dalka sida aan ka warqabno maamulada kutakrifal badan ayaa kadhacay oo hadeer kuwii ugu danbeeyay ay sameeyeen, marka in ay ka madaxbananandan oo dadka kashaqynaya ay yihiin dad aqoon u leh mudo xileedka sida halkaa lagu xusayna uu hal "term"yahay iyagoo eex iyo qof gaar ah ka shaqaynayn mid Federaal iyo mid "state" intaba in ay sideedaas isugu xirnaato ayaan soojeedinaynaa oo nin jeclaysihaas meesha kabaxo, qodobkaas **waxaan leeyahay muhiimadiisuu leeyahay sidiisa haloodaayo** .

- **Qodobka 59(2):** xubnaha Gudiga madaxbanaan ee doorashooyinka qarknka iyo soohdimaha , wuxuu leeyahay waxay iska dhex dooranayaan Gudoomiyaha iyo Gudoomiye kuxigeenka Gudiga xubnaha gudiga ayaana kadhex dooranaya, wixii intaa kadanbeeya in laga saaro ayaan soojeedinayaa wax ay hada oga baahan yihiin in lameel mariyo maxa yeelay Baar;lamaanka ansixinaayo Gudiga Madaxweynahaan saxiixaayo iyagaana isdooranaayo, hadana madaxweynihi lagu ma celinkaro wax sax ah ma aha, anaga waxaan soojeedinaynaa Gudigu sidaas uu shaci ku yahay halaga daayo celcelinta badan si ay soorashadu "transparency" u noqoto madaxweynu laftiisa musharixiintuu kamid yahaye aysan u abuurin qalalaaso kale in halkaas lagu ekeeyo ayaan soojeedin lahaa .

- **Qodobka 60(1)(a) :** xubnaha Gudiga doorashooyinka iyo soohdimaha waxaa kamid noqonkara qofkasta oo buuxiya shuruudaha soosocda, meesha ay ku qorantahay in uu yahay muwaadin leh jinsiyada Jamhuuriyadda da'diisu ka yarayn 40sano, looma baahna is leeyahay 40 sano, 30sano dad jiray ayaa Retzulwazaareyaal dalka kanqoday marka wax looga baahanyahay malaha 40 sano, ninkaan hada madaxweynena looma dooranaayo sida dastuurkeenu qabo Reyzulwazaarena looma magacaabayo, **waxaan soojeedin lahaa 30 sano in lagu xuso halkaas**, mudada **waayo aragnimada 10 sano** waa kufilan tahay wakhti fiican oo aan isleeyahay waaku haboontahay ayay tahay **sidiisa halagu daayo ayaan soojeedinlahaa** .

- **Qodobka 61aad :** mudada xilhaynta Gudiha waxaa ku qoran, Gudiga madaxabanaan ee doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha waa 6 sano halmar ah oo aan dib loo cusboonaysiin iyadoo xubnaha kala bar lamagacaabaayo sadaxdii sano ba halmar, madaama hada "term"kii koowaad ay tahay oo aynan Gudiga dhisnayn waxaan soojeedinlahaa In marka ogu horeysa lawada magacaabo oo Gudiga ay kooram buuxa ku yimaadaan markay mudada dhamaato hala kala reebo markay khibrad yeeshaan hada wax khibrad leh oo hada looreebo ma loo dib dhigo maba yaalaba iyagoo isla socda in ay yimaadaan marka "term" kaas gudiga imaan doono lagu dabaqo gudigaas ayaan soojedinlahaa oo term ka koowaad laga dhigo in ay halmar wada imaanayaan,.

- **Qodobka 62aad:** xilwaayida xubnaha gudiga, in lagu daro "kubiirista xisbiyo siyaasadeed" , sida halkan ay ogu cadahay xubnaha gudiga looma magacaabikaro dadka soosocda meesha lagu qoray in uu katirsanyahay xisbi siyaasadeed , **halkana in lagu daro ku biirsta xisbiyo siyaasadeed ayaan soojedinlahaa.**

Ugudanbayn madaamada Baarlamaanka laabdiisa Aqal ay dastuurka halkan cutubka 1aad ilaa 4aad ay doodiisa socotay waxaan soojedinlaahyn Gudigu hadii uu diyaar u yahay oo ay u dhan tahay codkii xildhibaanada iyo taladoodii soogeliyeen in sida ugu dhaqsiyaha badan loomeelmariyo dalka maadaama doorashooyin lagu jiro oo "state" yadi ay soodhawaatay doorashooyinkoodii dadkuna ay filayaan in uu dabaqmo doorashada qof iyo cod baahi weyna looqabo mudo dher dalkaan 60 sano iyo dheeraad ah lasugaayay doorasho qof iyo cod ah in ay kadhacdo waxaan soojeedinlahaa in ladadajiyo oo ay howshaasi meelmarto iyadoo latixgalinaayo aragtida iyo araahda Baarlamaanku leeyahay hadii ay suurtogal tahay oo ay gudigu diyaar u yihiin in kusoomeelmaro , maahmaah Soomaaliyeed ayaa waxay leedahay "dastuurbaa dowladnimo ilaaliya doorashaa dimuqraadiyada ilaalisa" aan ku dadaalno doorashada sidii aan oga gacansiinlahayn dalka in uu noqdo doorasho dadku ay dadkooda soodoortaan oo ay codkooda kumaalaan aragtidooda .

**12) Sen. Prof. Dr. Osman Mohamoud Mohamed:**

Guddoonka sharafta leh, labada Guddi ee soo diyaariyey dastuurka, habdhowrayaasha, xoghaay Guud iyo dhamaan senatarada sharafta aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatuhu. Mudane Guddoomiye wakhtiga waan dareema waa wakhtigii salaaada la aadaayey, markaa oo aan ku soo aaday, sidaas awgeed si aan u soo beekaamiyo waxaan ku daalayaa inaa ayido hadaladii "comments" aan gali lahaa oo aan ku hal qabsado intii horay u tidhi.

Mudane Guddoomiye sideedaba marka laga hadlayo, waxaan ka bilaabayaa arrinta xisbiyada, marka xisbiyo laga hadlaayo macnaha waxaa laga hadlayaa waa meel laga damacsanyahay ama ay jirto dimuqraadiyad ama laga rabo inay ka dhalato dimuqraadiyad waliba marka la leeyahay xisbiyo, xisbi maahee waa xisbiyo. Hal xisbi marka la yidhaahdo macno kale ayuu samayn karaa sidii waagii hore soo jiri jirtay, xisbiyo marka la yidhaahdo waa wadadii dimuqraadiyada.

- Qodobka 54(1): Markaa waan soo dhawaynayaa Guddiga qaabka uu soo qoray qodobka 54aad ee ku sahabsan doorka xisbiyada siyaasadeed bes waxaan ku waafaqsanahay, horta dhamaan intaan dhihin waxaan rabaa oo aan ayidayaa badanaa ragii iga horeeyey gaar ahaan waxaan ku hal qabsanayaa xildhibaan Mahdi Gouled intuu yidhi xoogeeda ayaan ku ayidayaa iyo raga kaleba. Waxaan rabaa marka la leeyahay xisbiga, yacni xisbiyada siyaasadeed waxaan ku waafaqsanahay arrintii lagu daraayey ee ah hogaanka siyaasada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa lagu noqnoqday waan ogahay, laakiin waa muhiim maxaa yeelay goobo badan bay soo galaysaa **Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya in lagu daro,** inta kale waxaa la ayidayaa marka laga hadlayo horay u soo qabsaday.

- **Qodobka 55aad:** Shuruudaha Xisbiyada Siyaasadeed marka laga hadlaayo, mudane Guddoomiye waxaa rabaa xisbi siyaasadeed kasta waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socdaa la yidhi:

a) In uu ilaaliyaa, Qaabka hada ay u dhigantahay waxaan ku dari lahaa waa inuu ilaaliyaa ku dhaqanka diinta loogu hormariyo meesha yacni ilaaliya ku dhaqanka, adkeynta ,horumariyaana midnimada Jamhuuriyadda la leeyahay waxaa loo dhigi lahaa
**In uu ilaaliyaa, ku dhaqanka diinta islaamka horumarinta midnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya .**

b) In uu u taagan yahay xurmaynta,qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha **Meesha la leeyahay in la yidhaahdo horumarinta iyo difaaca xuquuqda bulshada Soomaaliyeed ha ugu horayso kuli intaan aadanaha laga gaadhin**, intaa waxaan ku dhihi lahaa intaas baan ku dhaafi lahaa, midaan kale horay baa loo yidhi waa ayiday waan ka tagaayaa.

Qodobka 56(2): Mudane Gudoomiye arrinta ku wajahan qodobka xisbiyada iyo tiradooda marka laga hadlaayo, waxaan soo qaban lahaa xisbiyada dad badan waa hadleen waa sheegeen, waxaan yacni xisbiyadu waa hadii tiro badantaan waan soo aragnay lix-dameeyadii la soo arkay 1960-kii ilaa 1969-kii wadanka Soomaaliya waxa haligay waxa uu ahaa xisbiyadii tirada badanaa oo inay dhamaadeen, markii danbe gaadhay hal iyo nirig gaadhay in magacyadii ay dhamaadeen, waad ogtihiin tiradana dad badan baa la sheegay, markaa iyo ayadii oo loo sii kala dhabalmay ama loo sii qaybsamay 30 reer oo reerkiiba 30 reer u sii qaybsamay oo xisbiyo sii kala samaystay, markaa dhibaatada ay gaysatay inaga oo ka anba qaadayna dabcan Guddiga sharafta leh si wanaagsan buu u soo qoray ayaan qabaa qaabka soo koobitaanka xisbiyada inay soo koobnaan oo si ay u furnaato doorashada lafteeda iyo u fududaato waxyaabaha kale ee ka dhalan kara, markaa waxaan la qabaa hadaan soo koobo in ay xisbiyadu noqdaan aysan badanin aysan noqonin 5 gaadhin, hadii kale sida raga qaarkood ay sheegeen waa dhab 5 oo lagu halaagmay 4.5 carta laga soo bilaabay bay noqonaysaa, markaa waxaan qabi lahaa sidaan ku ayiday oo raga qaar kood ay yidhaahdeen **3 xisbi inay noqoto ayaan qabi lahaa oo aan u soojeedin lahaa Guddiga**.

Taa markaa ka baxo, waan soo koobayaa wakhtiga ayaa waliba i kulaalaya waan ogahay. Waxaan rabaa Guddoomiye qodobka inta kale waa la yidhi,

Qodobka 57aad: waxaan aadayaa Guddiga qaranka qaabka loo dhigay ayaan ku waafaqsanahay anoo waxba hada ku celcelinaynin, qaabka ay u soo dhigeen Guddiga waa wanaagsanyahay. Tirada waxaan qabi lahaa waa dhab, tirade 15 ah waxa waaye bacdamaa Guddiga la leeyahay waa Guddi doorashooyinka iyo soohdimaha hawl badan baa u oolaayey inuu kala qaybsamana waa la rabaa saas awgeed, **waxaan dhihi lahaa anigu Meesha laga yidhi 15, waxaan dhihi lahaa la qabaa ragii yiri iyo gabdhihiiba 19 in laga dhigo**.

**Wakhtiga ayaa soo hadhay, wakhtiga waxaan la qabaa intii tidhi 6-da sano oo aan la kala qaybin oo aan la kala gownin ayaa la qabaa.**

- **Qodobka 59(2):** Guddiga yacni Guddoomiyaha Guddiga ayaa iska dhexdooranaaya, ka dibna waxaa saxiixaaya madaxweynaha arrinta la yidhi waa la qabaa, maxaa yeelay tashriic "legalization" ayuun bay bay u samaynaysaa arrintaas oo Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka Guddiga markuu doorto inuu madaxweynaha yacni ka dib u

saxiixo, waxaan u arkaa waxa uu sii adkaynsaa sharciyadii mansabkaasi ku hogaaminlahaayeen.

- Qodobka 51 Kuma sii dheeraanaayo hal minutes oo xasuus inaan dib ugu noqdo mudane Gudoomiye ha la iga raali noqdo waan dhameeyey, waxaan rabay arrinta ku wajahnayd hay'adaha sida tooska loo dooranayo wataan soo sheegnay oo aan soo nidhi Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniintaay sida tooska ah u dooranayaan Baarlamaanka Federaalka sida loo dooranay waan soo sheegayn, Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka waan soo sheegnay, Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Kuxigeenka waan soo sheegnay, Golaha Wakiillada waan soo sheegnay

- Qodobka 51(6): balse waxaad moodaa meeshan kale Golaha degaanka nuqdada laga tagay inay muuqato Guddiga sharafta leh oo ah Golaha degaanka duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee dawlada hoose, waxaan qabaa meeshaas inay ka maqantahay Golaha degaanka marka laga hadlaayo Guddoomiyaha ahna duqa magaalada inuu ku jiro ku-xigeenkana Meesha hal ku-xigeen la sheegay 3 ku-xigeen ayaa badanaa jirta goobaha, waxa kale oo ka maqan xoghayaha Guud asagana laguma soo darin, markaa waxaan rabi lahaa Guddiga in meeshaas dib u-eegis ay ku sameeyaan hadii alle yidhaadho inta kale waa intii la yidhi.

- Waxa rabaan mida uga danbaysay oo soo xirayaa arrimahan oo lagu sheegay xubnaha ku tartamaya kuraasta dhamaan muwaadiinta buuxiyey shuruudaha codbixiyaha, waxaan rabaa muwaadiinta marka la leeyahay muwaadiinta ku bahoobay ama ka tirsan xisbiyada kala duwan ee buuxiyey markaas shuruucda codbixinta. Aad iyo aad baad u mahadsantahay Gudoomiye wakhtiga aad isiiseen, mid kale baan rabay, laakiin kama gaadhi karaayo intii tidhi baan la qabaa, aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

**Guddoomiyaha Golaha Shacabka: Xil. Sh Aadan Maxaned Nuur "Madoobe: ayaa soo xidhay kulankii 28aad ee labada Aqal** Xildhibaanada sharafta leh waad mahadsantihiin, maanta waxaan islahayn dooda gabogabo ma jirto waa dhamaanwaysay, markaa madaaba ay sidaas tahay salaadiina la joogo isla galabta soo noqdo ma idin dhihi karno, markaa waxaan ka dhigan doonaa sabtida ayey gabogabo inoo noqonaysaa.

Xildhibaanada qorana sabtida bay dhamaystiranayaan si aan maalintaas ugu wareejino Guddiga, markaa sidaas daraadeed aad iyo aad baad u mahadsantihiin maanta fadhigeenu waa xidhanyahay salaamu calaykuma waraxmatulaahi wabarakaatuh

Taariikh: Maarso 23, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 29aad ee Wadajirka Labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeisa |
| Guntanka: | Dhammeystirka Doodda Marxaladda 2aad iyo 3aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:40a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:50 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh Aadan Maxaned Nuur "Madoobe |

**Ajendaha:**
(16) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(17) Ansaxinta Ajendaha.
(18) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Sii wadidda ka Doodista soo jeedimaha wax-Kabeddelka Dastuurka. Cutubka 4aad. Matalaadda Shacabka, Doorashoyinka. Madaxa 2aad Ilaa Madax 4aad Qodobka 54aad Ilaa 62aad.

**Kulanka 29aad:**
**Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe":** Bismilaahi Raxmaani Raxeemi, Guddoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin, sidii caadada inoo ahayd maanta,hadii ilaahay yidhaahdo daraad maadama aan ku balansayn inaan maanta dhamaynstirno xidhibaanado iyo dhamaan ha la dulqaato maanta waxaan jecelnahay inaan dooda soo gabogabayno , ajendaha waan noo ansaxsanyahay ,hawlowadeenu magacayadu halkii ay daraad joogtay ha lagu wado si aan dooda u soo gabogabyno maanta aad iyo aad baad u mahadsantihiin

1) **Xil. Salah Sharif Sayid Ali**

- **Qodobka 55(2)(a):** Qodabaa la sheegay alif, b, marna a,b,c,d baa la sheegay oo ah waxaa reeban xisbi qarsoodi ah qaab ciidan ama ciidan u yaale ah oo u abaabulab colaad si ujeedooyinkiisa ugaadho ama u hubaysan in xukun ku qabsado ama leh magac ama astaan qabiil marka qodobadaas la sheegay waxaan qabaa in lagu daro waxaa reeban xisbi kasta oo argagixiso ah ama caawiya argagixisada ama xidhiidh la leh , xisbiyo badanaa jira hadhaw kooxo argagixisaa waxay dhihi karaan angu xisbiyaan nahay, markaa si xisbiyadu ay u ahaadaan xisbiyo dalkan aminigiisa iyo horu markiisa iyo wanaagiisa ka shaqaynaaya xisbiyada baryahan maadaama ay wadan dhibaato badan ku hayaan kooxahan argagixida ahi **waxaan soojeedin lahaa in xisbiyada argagixisada ah ama cilaaqaadka la leh ama maal galiya in laga mamnuuco in siyaasada soomaaliya inay ku milmaan.**

- Sidoo kale mudane gudoomiye iyo xildhibaamada sharafta leh **Qodobka 56(2)** oo ah tartanka xisbiyada siyaasadeed ee faqrasiisa 2aad labada urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerarka xisbiyada eek u guulaysatay golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyo qaran ee ku tartamaya kuraasta golaha shacabka, aqalka sare, xilka madaxweyanaha iyo madaxweyne ku xigeenka Jamhuuriyada federaalka soomaaliya kuraasta golaha wakiilada xilka hogaamiyaha iyo hogaamiye ku xigeenka dawlade goboleed

kasta, mrkaa taas waxaan dhihi lahaa xisbiyada in tii la soo koobi karo in lasoo koobo waxaan ognahay soomaaliya hadii xisbiyada la badiyo jufo walba waxay samaysani xisbi dawladii naga horeysay oo xisbiyada furtay, markii ha is diwaan galiyaan la yiri 100 intaas ka badan ayaa is diwaangalisay markaa waxaa haboon soomaalida in la isku soo reebo inay isku qasbnaadaan oo aan wax wadaagno laakiin kulaama labaahiyo waxaa k dhalanaaya dhibaato oo ah in qof walba jufadiisii deegaankiisii sideedaba bahasha qabyaalada basal camal waaye, basasha kulamaa la fiiqo lafiiqo way sii fiiqmi wax soo hadhaaya ayaa iska yar, markaa waxaan soo dhawaynaynaa in xisbiyada la isku soo ururiyo oo xisbiya kooban, oo shacabka soomaaliyeed ay isku qas banaadaan ay wax wadaagaan oo waqooyi ilaa koonfur, galbeed ilaa bari, inay wax wada yeeshaan ayaan rabnaa markaa ishaa allah, waxaan aad u taageeraynaa in xisbiyadu ay koobnaadaan **ugu badnaan saddex iyo wixii ka yar ay ahaadaan xisbiyada.**

- **Qodobka 59(1)** oo ah xubnaha guddiga madaxabanaan ee doorashooyinka iyo soodimaha, gudigaas waxaa haboon soomaaliyeey doorashooyin badan baan soomarnay mar waxaan soo marnay ay hogaamiye kooxeed kakligiis uu ka talinaayey kuraasta baarlamaanka, mar waxaan soomarnay halo day dhaqameed kaliya uu go'aanka gaadhayey maalinba meelbaa la soomaryaa mar waxaan soomarnay kursiigii 51 qof ay dooranayaan mar waxan soomarnay 101 qof ay dooranayaan, markaa waxaan soo dhaweynaynaa in doorashada la balaariyo oo xubnaha gudiga madaxa banaana ay ahaadaan hal guddi, oo guddi qaran ay noqdaan si kla qoqobnaanta meesha uga baxdo beelaha soomaaliyeedna la iskugu soo dhaweeyo

- **Qabta qaybinta waxaan soojeedin lahaa in shanta beelood ee aan ku fadhino in lagu qaybiyo oo 15ka (5x3=15) markaa 15 oo ka imaanaaya beelaha soomaaliyeed in xubnaha guddiga ay ahaadaan ayaan soo jeedinaynaa.**

- Qodobka 60(1): Guddiga shuruudaha waxaa la yidhi qofka waa inuu dadiisa 40 sano mature waaye da'da shuruuda waan soo dhaweynaynaa, 40 sano waa inuu leeyahay ugu yaraan 10 sano qof 40 sano jira oo 10 san khibrad leh waxoogaa macquul maaha markaa intan waxaan soo jeedin lahaain 10 laga dhigo 5 sano, oo qof 40 jira goormuu wax bartay goomuu soo shaqeeyey 10 sano oo shaqo ah maxaa la dhahayey macquul maaha markaa da'da qofka ka mid noqonaaya guddiga 40 sano ha ahaato laakiin **khibrada iyo experience uu leeyahay waa inay 5 sano lagu koobaa** mudane gudoomiye.

- **Qodobka 60**(1)(a): Xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudahan soo socda: a) in uu yahay muwaaddin leh jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliya; waa inuu yahay muwaadin soomaaliyeed in ladhaho, muwaadin **jinsiyad leh in jinsiyada meesha laga saaro** waa inuu yahay muwaadin soomaaliyeed in lagu soo koobaan qabaa.

- sidoo kale guddigu waxyaabaha ku weynayaa xubin nimadiisa waxaan qabaa qodobka 7 lagu soo daro qodob 8aad oo ah hadii uu ku biiro xisbi siyaasadeed waa inuu waayaa xubin nimadiisa waayo siyaasada soomaaliya waa isku milantahay qof walba siyaasi waaye markaa qofkii dhexdhexaadka noqon lahaa hadii uu xisbi ku milmo xisbiga uu janjeedhaa oo anaga aan ka rabnay dhexdhexaad inuu burshada Soomaaliyeed u ahaado.

- xibiyada u ahaado oo dadka oo dhan u garsooro, markaa garsoorihiibaha ciyaarta ku dhexjiro meesha cadaalad ma imaanaysa waxaan qabnaa waa in lagu soo daraa waa inuu san ku biirin xisbi siyaasadeed haduu ku biirana xubin nimadii gudiga doorasooyinka automatically wuu u weynaayo, markaa shacabka soomaaliyeed waxaan leenahay anagoo ah xildhibaanada 11 aad waxaa sharaf noo ah inaan ka shaqayno dhamaystirka dastuurka ha bishaaraystaan in dastuurka la dhamaystiraayo, dastuurkan qof walba wuxuu rabaa in dhamaystiro laakiin qof walba wuxuu rabaa inuu kaligiis dhamaystiraa markaa fursadaad ilaahay anaguu nasiiyey xildhibaanada labadooda aqal waxaan aad ugu han weynahay in bulshada soomaliyeed aan u bishaarayno, dastuurka sida ugu dhakhsaha badan loo dhamaystiraa maarkaa jug jug meeshaada joog waa dhamaatay dastuurka waa la dhamastiryaa aad baad umahadsan tihiin, wa jasaakumu laahi khayran jasaa, wa slaamu calaykum.

2) **Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**

   Salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu, Mudane gudoomiye, gudoonka labada aqal, xubnaha baarlamaanka labada aqal, waxaan idinku salaamay salaanta islaamka salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu waxaan rabaa inaan si dhakhso ah u dulmaro qodobada aan rabo inaan wax ka sheego waxa kaloo ii weheliya talo soo jeedin iinsha allah waxaa rabaa waxooga dhagihiina inaad isiisaan dadka sheekaysanaaya waa maalintii ugu dabaysay maanta si fiican ha la isku dhagaysto idinkoo aad u mahadsan mudane gudoomiye markaan ka bilawno,

- **Qodobka 55(1)(b)** waa la sheegay horna waa looga hadlay erayga dhahaaya xarafka b) isla dastuuka iyo xeer Jahuuriyada Fedraalka soomaaliya **iyo tallinta waa la badlay waxaan la yiri saraynata sharciga in laga dhigo waa wax aad u fiican** markaa iinsha allah waxaan rabaa in sareynta sharciga laga dhigo. Markaad fiirsid,

- **Qodobka 56(1)** wuxuu lee yahay doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhamaan ururada siyaasadeed, ciwaankana waxaa ku qoran tartanka xisbiyada siyaasadeed marwalba waxaa fiican ciwaanka iyo waxa gudaha ku yaala inay is lahaadaan inshaa allah waxaan raynaa in la sixi doono iyadan ahalkaas

- Markaad fiirisid Qodobka 57 iyo 59 waa laba qodob oo iska hor imaanaya ama waxaa la rabaa in hal qodob laga tago markaad fiirisid qodobka 57 wuxuu leeyahay Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimahah, markaad fiirisid qodobka 59 wuxuu ku lee yahay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay, markaaa waxaa ladhisayaa iyo wuxuu ka kooban yahay isma qabato markaa waxaa rabnaa in mid la qaato qodobka 57 isagana laga guuro qodobkaa 59 la qaato Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay intaas waxaana soo saaraaya intaas siduu u quran yahay waa si aad u fiican, Markaad fiirisid

- **Qodobka 58 xarafkiisa d)** in uu si joogta ah u diiwaangeliyo xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta doorashooyinka guud ee heerarka kala duwan, markaa marwalba ma la diwaangalinayaa markaa xisbiyada siyaasadeed ee meeshaas su'aal baa ku godan waxaa weeji inuu si joogta ah u diwaangaliyo markaa maalin walba waxay noqonaysaa in la diwaangaliyo, markaad fiirisid

- **Qodobka 61(1):** waa laga hadlee wuxuu leeyahay Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah, waxaa ku filayd intaa in la dhaho waa lix sano ooh al mar ah oo aan dib loo soo cusboonaysiinayn, laakiin markii lagu daray kala bar xubnaha la magacaabayo ma xubnaha marka hore miyaa lama gacaabayaa mise marka ay shaqeeyaan lix sano ka dibaa faahfaahin waxoogaa yaray u baahan tahay meeshaa, waxaaan jeclaan lahaa in la saxo ,

- waxaa kaloon ku soo gaba gabayn lahaa mudane gudoomiye, mudanayaal xildhibaanada sharafta leh, talooyin dooraha oo aan rabo inaan guddigu dhagahooda u furan oo si aada ii dhagaytaan waxaan rabaa marka hore inaan ka hadlo qoraalka wuxuu leeyahay nidaam wax loo qoro iyo heerar uu maro markaa meelaha comma lagalinayo ama hakadka(,) mar horena waan ka hadlay waxaan jeclaan lahaa in si aada loo ilaaliyo waayo hada ka hore macalin iskuul noo dhigaaya wuu yiri "comma was killed a man" waa layaabey markaa sideey ku timidaa la yidhi wuxuu dhahay nin baa wuxuu ku xukunaa dil maalintii danbana waxaa la rabay in lasii daayo, ninkii taliya ahaa wuxuu soo qoray warqad isagoon xaaladiisu caadi ahay wuxuu soo qoray markaa waxaa la rabay inuu qoro "kill the man not free him" markaa wuxuu qoray "kil the man, not free him". Markaa waxa weeyaan ninka dil hasii daynin, inkastoo soomaaligu layahay phrase noocana ama erayo noocana haddana in aad loo ilaaliyo meelaha la dhigayo, ta labaad waxaan dhakhatiirta iyo culumadu waxa ay qabteen in lagu aamano oo waxa aad qabteen waa lagu guulaystay, dhakhtarka la yiraahdo waxaad qabatay waa lagu caafimaaday ninka culmada ahna waxaa la yidhi quraanka uu akhriyo waa lagu caafimaaday, xildhibaanaduna waxay jecel yihiin contribtion kooda iyo waxa ay ku dareen inay halkan ka arkaan si ay u caafimaadaan waxaan rajaynayaa wixii contribution ahaa wixii macquula oo isku eegeeg in lasoo qaado iyadoon lasheegan qofka magiciisa lakiin laga arki doono meeshaa in sidaasi la sameeyo, waxaan rabaa in buuga la daabicidoono kan waa kii hore ee aan haysanay aad buu u yar yahay waxaan jeclaan lahaa hadii la heli karo in A5 kaa laga dhigo si qof walba oo da'da ah iyo wixii ka weyn aanu ugu baahan okiyaalo ee wax ugu akhrisan karaan laakiin kan aaduu noo dhibi jiray markaan akhrinayno markaa waxoogaa waxaan jeclaan lahayn waxoogaa buug weyn oo dadka ay akhrisan karaan in lagu soo daro.

  Shayga ugu dabneeya waxaa weeyi waxaan jeclaan lahaa in hal page lasiiyo oo dastuurkan waa maadaama aan muslim nahay in lagu qoro bismilaahi raxmaani raxiim page ka ugu horeeya laga bilaabo bismilaahi raxmaani raxiin ka dib cutub cutub meeshaas laga sii wado waxaan ku soo gaba gabaynayaa. salaamu calayku wa raxma tulaahi wa barakaato ilaahayow waxaan kaa rajeynaynaa dastuurkan mid dadka iyo dalka anfaca kadhig adaa mahad leh iin sha aah aslaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.

3) **Xil. Xasan Cabdi Ismaaciil:**

   **Bi**smilaahi raxmaani raxiim xildhibaanada sharafta le gudoonka labada aqal maanta waxan umalaynayaa waxaan ku jirnaa cutubkii ugu danbeeyey doodiisii qodobadii ugu danbeeyey, qodobada hadaan dul istaago.

- **Qodobka 56(2): ugu horeeya** oo ah asxaabta ama ururada , ururad marka hore wuxuu ka koobnaa labo xisbi ani waxaan qabaa talo ahaan labo xisbi, xisbiyadu marka hore way is soo reebeebayaan ururaynoqoyaan way isa soo reereebidoonaan isbaahaysiyey noqonkaraan **in laga badiyo ugu yaraan in saddex xisbi laga dhigo** xiidhibaanada badankooduna aaddaby iskugu raaceen qodobkaa intaas ayaan kaga baxayaa.

- **Qodobka 59(1):** tirada guddiga oo 15 toban ah iyo qaabka ay ku imaanayaan waxaa ka dhex muuqda isdaba mar badan baa ka dhex muuqda qaabka ay u qormayaan mar waxaa ku qoran hesiiska state walbaq labuu keenayaa 15 waaye halkana waxaa ku qoran 15 guddiga ah cidii la rabaa lagala tashani ayaa ku qoran, marka hore state walba labuu keenyaa ku qoran **meeshaas iyadana waxaa ka maqnaa ama in lagu soodaro aan qabaa SSC** in lagu soo daro guddiga ay wax ku yeelato wax hadii labo labo laga dhigayo qodobkaa iyadan maadaama ay ku meelgaadh ay tahay talada qab ayeey ka leedahay in lagu soo daraan qabaa,

- **Qodobka 61(1) kale** qaabka guddigu isku dooranaayo muddo xileedka guddigu waxaa layidhi waa lix haddana mugdibaa lasii dhex galiyey lixdii baa waxa ladhahay saddex sano baa kuwo la saarayaa kuwo kale ay soo galayaan waxaan qabaan in meeshaas laga dhigo lix sano hal mar ah oo aan cusbonaysiin lahayn oo wax ka bayaa aysan jirin lixda qof guddigaasi doorashada heer qaran in macnaha meeshaas madmadaw badan iyo is duqayn badan baa ku jirtee in **sida ay uqrantahay laga badalo oo loo daayo lix sano oo cusboonaysiin aan lahayn oo tirada loo wada macaacaabay mar wada baxayaan** laakiin saddex sano kuwaa lasaa saddexsaanaa ku kale lakeeni meeshasi meel saxa maaha,

- **Qodobka 61(2)** isla qodobkaasi waxaa ku qoran qaabka ay isku dooranayaan markay guddiyadda ahaan jireen, guddiyada marka la keeno oo baarlamaanku ansixiyo iyagaa guddomiye iyo guddoomiye ku xigeen iska doorta laakiinse waxaa ku Qaran iyadana eray dhahaaya **madaxweynahaa soo saxiixaya taasna waxaan qabaa meeshaas waa wax is duqaynaya iyadana ma haboone in laga saaro,**

- guddiyada doorashada waxaan qabaa hada waxaan taaganahay sidii heshiiskii hore ku qoranaa, guddiga doorashadu 15 buu ka kooban yahay state walba labaa ka imaanaya waxay qabanayaan doorashad heer degmo ah oo june 2024, doorashada oo shacabku codaynayaan, doorashada madaxweynaha waxay qabanyaan November 2024, waa xiliga hada kujirnee ogaada ayaa ku qoran waxaasi inayna suura gal ahay way yara muuqataa , markaa anuu waxaan qabaa guddiga doorashada in loo kala qaado labo heer oo doorashadii qof iyo codka ahayd annu isku diyarin asxaabteen aynu isku diyaarino taasna waa taas,waxyaabnaha aynu malaxawadnay waxaa mida dastuurkan hadda qaabka uu hada u qoranyahay ama loo soo min guuriyey oo qoraalka ah af soomaaligiisa waxbadanaa ka qaldan waxaan soojeedin lahaa sixitaankiisa akadhimyada inay la aadaan guddigu oo sifiican erayo badanoo iska daba imanaya ama asalkiisa wax banana ka qaldan yihiin in akadhamiyada af soomaaliga lala kaashado iyadana taladaas waan soo jeedin lahaa, waxaan qabaa af soomaaliga dastuurku ku qoran yahay waxyaabo badanaa iska daba marsan siday siiqooyinkiisu yihiin siduu isku raaraacayo erayada qaarkood siday u qran yihiin markaa waxaan qabaa inay akadhamiyada af soomaaliga la kaashadaan oo waxyaabo badan iska soo saxaan, sababtoo ah waxani waa wax dastuur ah oo larabo in hadhaw uuna mugdi galin erayadiisa iyo wixiisa ugu dabnbaysa marka lakeenaayo waxan qabaa inay clear ahaadaan hadda ma cada markaad ka hadlayo asalkii dastuukaa in laso qoray asalkii dastuurkaa asalkii wuxu ahaa sidaa waxaa lasoo jeediyeyna wakaana isbadalkiisa rasmi ahi wakaana oo ay cadaadaan wixii lakiin waxaa yara muuqata in meel dhex wax ka banaan hiyiin faqra waa latiray la leeyahay faqra lake in dhinaca kale ku jirto wax la tiray aan la garanayn halkaa iyadana waxaan rabaa sixitaan badan in lagu soo sameeyo.

- Qodobka 57(1): Arinta ugu muhiimsaneen ku soo laabanayo waxa weeyaan arrinta guddiga doorsahada , **waa inuu noqdaa guddi ani waxaan qabaa heer qaran ah oo guddiyadii hore ee shaqan jiray oo kale ee dastuuriga ahaa guddi professional kaa ku yimid oo kale in laga dhigo** laakiinse waxaa ii muuqda meeshaasi inuu isqabqabsi badani ka imaan karo labaan ka baxay labaan ku soo darsaday iyo laba iiguma darin iyo waxaas inay dhibadaan ka imaan karto ayuu iila muuqdaa markaa in labo heer loo kala qaado maadaama ay doorashooyinkii state yadu hada taagan yanay doorasho qof iyo codaa la qabanaya ay siduu u qornaa marka hore ku jirin halkaa in laga saxo ayaan qabaa aniga qadobadayda ugu muhiimsani waa kaas.

- Erayga ugu dqanbeeyeen kusoo gabagabaynayaa waxaa weeyi mudanaal iyo marwooyin hadaan aadnay doorasho qof iyo coda oo xisbi ah oo aragti ah oo laleeyahay shacabka soomaaliyeed baa cod kooda dhiibanay la dhahay, soomaaliya waxaan qabaa aniga inay wadda guurto oo ay u guurto qof iyo cod inta isku rayi ahi aya israacaan, qof walba siday ahaan jirta ilaa 60 qof walba codkiisa uu ku kalsoonaado oo rayigiisa iyo fikirkiisa iyo aqoontiisa iyo dadnimadiisa iyo xisbigiisa iyo wuxuu gadayo in lagu soo doorto, laakiinse hadii la dhaho doorasho qof iyo coda la aaya oo mid xisbi baa la aadayaa oo asxaabuu dalku aaday oo shacabkii soomaaliyeed baa codayanaaya 4.5 hoostaan ku haysanaynaa ani taas doorasho qof iyo coda inay tahay ma aaminsani , doorasho qof iyo coda inay tahay ma aamin sani dadka tartamaya maalaayinta soo baxaya waxa u soo kordhaya waxay dooranayaan inay garanayaan oo baa la rabaa waxay dooranayaan inafahansan yihiin iyo waxa u soo kordhaya markaa soomaaliya inay wada guurto oo sahan fiican loo raro oo shacabka soomaaliyeed ciday rabaan doortaan, xildhibaanada ay raban soo doortaan madaxda ay rabaan soo doortaan labo waalo ahi soo baxdo qabiilka aan ka guurno waxa ugu weyn ee soomaliya haystaa problem badan baa aad looga hadlaa raysal wasaaraha iyo madaxweynhaa is haysta issue badan aad looga dhigay, laakiin soomaaliya raysal wasaare iyo madaxweyne is haysta issue wuu ka weyn yahay soomaaliya waxa meeshan dhigay waa qabyaalad iyo 4.5 iyo shaqo walba waxa lagu qaybinayo oo aqoonta shaqayneyn oo kartidii shaqaynayn oo waayo argnimadii aanay shaqaynaynin oo soomaalinimadii aanay shaqaynaynin oo caawa lagayaabo midka ugu aqoonta badani markuu istaago in lagu soo salido cunug yaroo waligiis waxna qorin waxna akhriyin oo la dhaho ninkanaa kursi kugu haysta oon la fiirinayn xitaa oo jufo hebelaa iska leh lagu dhaho, markaa waxaan qabaa hadaan xisbi aadnay oo aan aadnay doorasho qof iyo coda oo shacab weyna soomaaliyeed baa codaynaya ladhaho inaan wada guurno soomaliya u hiilino oo 4.5 ka guurno aad iyo aad baad u mahadsantihiin.

4) **Xil. Mohamud Abdulkadir Haji "Jeego":**

   Bismillaahi raxmaani raxiim, Gudoonka labada Aqal, xilibaanada ee labada Aqal, Gudiyada, ee Guddiga madaxabanaan iyo Guddiga dib u eegista ee dastuurka, saxaaafada iyo ciidama amniga, howl wadeenada Baarlamaanka, Salaamu caleykum warax matullaahi wabarakaatuh. Salaan ka dib, een waxaan rabaa inaan ka hadlo, cutubkaan ee gabagabada maanta ah, ee cutubka 4aad.

- **Qodobka 52(1)**, muddada xilhaynta, ee mudada xilheynta, hey'adaha dastuuriga ah, sida tooska ah losoo dooranaya, eek u xusan qodobka 51aad farqadiisa(1) waa shan sano, waa arin fiican, arin fiican waaye,

- **Qodobka 52**(2) sidoo kaleeto, hey'adaha dastuuriga ah sida tooska ah, loosoo duurtay, waxaa la qabanayaa hal xili doorasho, waa iyada, mid fiican waaye waaan soo dhaweynaa, ee Guddiga sidey usoo qoreen, een in dalkaan hal xili laqabto doorashadiisana wax fiican waaye,.

- **Qodobka 53(1)** codbixiya yaasha, muwaadinkasta soo buuxiyay shuruudaha xeerka tilmaamaayo, gaarayana da'da 18 sano, waxaan qabaa in iyadana wax laga badalo, maadaama dad muslimiin aan nahay, ee qaan gaarkeenana ay shareecadda sheegeyso inuu 15 sano uu yahay, ee codbixiyaha halaga dhigo, da'da qaan gaarka ee 15 sano, een qodobka codbixiyaasha markan ka hadlay, 18 sano.

  ee waxaan rabaa inaan halkaan ugu faa'ideys to, maadaama xisbiyada laga hadlay, eel aba xisbi lagu soo qoray meeshaan, xisbiyada hadii laba xisbi laga badinaayo, dadka raba iney ka badiyaan laba xisbi, ani waxaan qabaa hadiiba la badinaayo, 5 xisbi in laga dhigo,oo mashanta beelood loo qeybiyo, hadii kaleeto labadaan xisbi haloo dhaafo, sidooda ha ahaadaan, qof walba ha, iska dhex arko labada xisbi, ee doorashooyinkii aan soo marnay, iyo dhibaatadii aan soo marnay, dib uguma laaban karno, aniga hadeer kursigaan ee dhibaatadaan kusoo qaatay, anoo xaq u leh, oo dadkeyga ay leeyihiin, anaa ogaa waxaan kasoo maray, marka shidii shalay, meeshii shalay inaan ku laabto marabo, een sidoo kaleeto waxaan rabaa inaan ugu faa'ideysto Gudoomiye, een inaa ii ogolaatana aan jeclahay, madax xilibaano ka tirsan Golaha Shacabka, oo aan soo xaaridin kooramka, oo banaanka ka taagan, ayaa maalin walbo, kooramka anaga subax walba aan usoo dheel mano, ee halkaan u saxiixno, ee buugaas banaanka lagu haayo, oo aan soo buuxino, ayaa banaan intey istaagaan, shirar jiraa'id intey qabtaan yiraahdaan, kooram kama jiro Baarlamaanka, asigiiyaa imaaneynin Kooramkii, asigii yaa maxey aheyd soo xaadireynin, Sharciyada noo dhaxeyso aniga iyo asiga Gudoomiye, adaan kaa rabnaa waad mahadsan tahay, arintaas inaad wax ka qabato kaaa sugeynaa waad mahasan tahay.

5) **Xil. Mohamed Abdulahi Buraale:**

- **Qodobka 53(1),** ee codbixiyaasha, ee meeshaan waxaa ku qoran muwaadinkasta ee buuxiyay shuruudaha xeerka uu tilmaamaayo, gaaraya da'da 18 sano waqtiga diiwan galinta, wuxuu xaq u leeyahay inuu is diiwaan galiyo, siu u u codeeyo, anagu sidaa ogtihiin dal Muslin baan nahay, een qaan gaarkeenu waa 15 jir, 15 jirne waa qof qaan gaaray, oo kasoo bixi karo shuruudahaas, waad ogtihiin xataa guurka, ee 15sano waa ku guursadaan dhalin yarada, marka waxaan jeclaan lahaa in laga dhigo 15 keeda loo dhaafo.

- **Qodobka 56aad,** faqradeeda (2) , labada urur siyaasadeed ee buuxiyay shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada guuleysta, doorashada goloyaasha deegaanka, ayaa noqo naayo, xisbiyada qaran ee u tartamaaya Golaha Shacabka, iyo Aqalka sare, een waxaa ku qoran meeshaan laba xisbi, aniga waxaan soo jeedin lahaay 3 xisbi in laga dhigo, hadii 4 iyo 5 laga dhigo waxay u ekaaneysaa, qabiil, qabiilkana waxaala rabaa, wax inaan ka gudubno ay tahay, labana waa hartahoo, bahasha waxey ku roon tahay, mid 3aad oo dhex yaala, labada qof walba wuxuu u arki karaa, een waxaa leys leeyahay, dadkan ma araktay ay aadka u jecleyn, oo hal xisbi ay u badan tahay awoodo, hal xisbina uu dalkii saas ku wado, waxaa fiican aniga fikir ahaan aan qabaa, ee xilibaandana inta badan ay qabaan, 3 xisbi lagu soo koobo, aanan 4 iyo 5 aan la gaar siinin.

- **Qodobka 59(1), ee** xubnaha Guddiga doorashada madaxa-banaan, 15 xubnood, ee 15 xubnood, 21 ayaan dhihi lahaay aniga in laga dhigo, ee 21, ee 15 maadaama shaqo badan u taalo, oo anan hal Guddi lagu soo koobin, hal Guddi ee heer qaran , markey yihiin labada Guddi, Guddi " state " iyo heer qaran eh, marwalba dhibaato, aa ka imaan jirtay, aniga waxaan goobjoog ahaay labada Guddi oo is heysto, oo xilibaan ka iyo isku heysta, marka dabcan waxaan jeclaan lahaay, maadaama hal Guddi ay yihiin 15 ka ay yihiiin, laga dhigo 21.

- **Qodobka 60(1)(b),** ee xubnaha Guddiga iyo Sooddimaha, waxaa ka mid noqon kara, qofkasta oo buuxiyay shuruudaha soo socda, inuu yahay muwadin, leh Jinsiyada Jmahuuriyada Soomaali, da'dii suna aysan ka yareyn 40 sano, een waxaan qabaa anigu in 35 sano laga dhigo, 40 iyo 35 wax badan ma is dhero, laakin qofka 35 jiro, een waa qof u diyaarsan, inuu wax walba, maadaama qof dhalin yaro yahay, maskaxdiisuna nadiif tahay, 35 in lagu soo koobaan jeclaan lahaay, qibradiisa 5 sano laga dhigo. Een

- **Qodobka 61aad,** ee mudada xilheyta xubnaha Guddiga madaxa-banaan ee doorshooyinka, qaranka iyo soohdimaha 6 sano, 6dii sanoba hal mar, een hadii lakala reebo, oo meeshaan ku qoran tahay, 3dii sanoba, ee waxaan jeclaan lahaay, **hadiiba 6sano ay dhameys taan, intii la dhihi lahaay waxaa loo reebay, een een is faham hoosaa loo reebay in loo dhaafo, 6 doodaba hore u baxaan,**

- ee dacan arinta buuqa marwalba taagan eh waa doorashooyinka, wixii sidaa kusoo baxnay waad ogtihiin, waala yiri **" dab ninkii ku gubtaa danbaaburadiisa yaqaan "**qofkastoo xilibaan eh siduu kusoo baxay iyo rafaadkuu kusoo baxay wuu ogtihiin iyo herarka sida lagu soo baxay, doorasha dadban dhibkey leedahay, doorasha dadban, Madaxweyne dadban, wax laga istifiidaayo malahan, een anugu waxaan qabaa, oo xalibaanow aan maskaxdeenu shiilno, meeshaan qof iyo cod wax dhaama malaha, wixii hore waalgu noqonaa hadii la dhaho, een culuuskeeda iyo sida ay tahay waad og tihiin, iyo wixii laga soo maray, waxaa laga yaabaa iney amni daro siikeyn too wixii dhan sii halaabaan, waayo Kursigiii oo qabiil leeyahay, reer leeyahay, aa waxaa u tashanaayo Madaxweyni markaas joogo, kii lasoo dhaafay, kan soo socda , Madaxweynayasha Maamul Gobleedka, wax walbo" Complicate" isku noqonayaa," , ee dastuurkaan asagana na wareeriyay, oo aanan dhamaanin, waxaa xasuustaa, anigoo Gadoomiye dhalan yara eh, aa shirar u aadi jiray yugaandha iyo nairobi , oo lacag lagu cuni jiray, marka waxaan iney soo gabagabowdo oo waqti naga qaadin, dee nin kastoo musharax Madaxweyne wuxuu meeshaan ka sheegay, in hadii Madaxweyne loo doorto, 2022 dii, wuxuu sheegay, nin walba hadii la doorto, inuu dastuurka dhameyn doono, ee dastuurka inuu dhamaado waa waajib nasaaran waaye, ee Baarlamaankeena inaan dhameyno waa jib nasaaran waaye, dadkuna iney is doorantaan , qof iyo cod xal aan aheyn uusan jirin. Asalaamu caleykum wabarakaatuh.

6) **Xil. Ilyas Shekh Axmed:**

Waayahay, Bismillahi raxmani raxiim, Alhamdulillah Rabil caalamiin, Wasalallaahu wasalaama Calaa Sayidnaa Maxamed.

Ee Maalin wanagsan, mudane Gudoomiye, ee xildhibaanada sharafta leh, waxan rabaa intaan ugalin qodobada aan commenti garenaayo da'da Oo aad logu soo celceliyay aan arkay , xildhibaano farabadan, ee arinta da'du qaangaar maahan asalku waxa laga hadlaayo, hadii qaangaan laga hadlaayana 15 sano kaliya laguma qaangaaro, hadii calamaatul buruuq,

calaamihii laga helo gabadhii, ama wiilki laga helo, waa qaangaar, soo 9 sano jirto dhiig ku dhaco gabadha waa qaangaar, ma 15 sano kaliyaa shardi ah, safiinaha ee ku talaa, calaamatul buruuq thalaatha soo ma'ahayn safiinaha, hadii gabadhii Oo dhiig ku dhaco waa qaangaar, hadu wiilki dhadhabo waa qaangaar, da'a kuma xirno, 15 sano waa kow, labo waxa kale laga hadlaayo waxa weeye masuuliyad, Madaxwaynaha Soomaaliya qofka noqonaayo 40 sanaa laga rabaa maxa u unirni, ma qaangaarin miyaa, 40 sano muu ku qaangaaraa, qofka Madaxwaynaha noqonaayo, xildhibaanka 25 sano layiri, 25 sano ma qaangaarin miyaa, waxa laga hadlaayo waa masuuliyad, qofka 18 sano marku gaaro cot bixin karaa weeye, oo masuuliyada cod bixinta fahmi karaa, ee qaangaarkan lagu celcelinaayo horta hanalaga dhaafo, hadan 18 sano ku heshiino ayu qofka codka bixin karaa qofka footarka ah ama 20 sano, " that's Ok " wax mushkila ah malahan, 15 kan sano, Oo aadka logu celcelinaayo waxaan rabaa in intaas loogu daawoowo. hadan uso galo marka qodobadeyda nadaamka.

- **Qodobka 54** waa " maltiback system " dalkena, sideedaba, sida uu sheegaayo qodobka kowaad dastuurka baaqa Jamuuriyada, wuxu noosheegayaa, nadaamka xisbiyada badan, xisbiyada badan marka ladhahaayo, waxa weeyaan, waa in labo xisbi iyo wixi ka badan, sidaas daraaded, hanaankan hadda noo qoran, Oo meesha nogu qoran,
-
- Qodobka 56(2): Gudiga keeneen Oo labo xisbi ah, muxu diidan yahay, qodobka kowaad oo diidan yahay, Oo baaqa jamuuriyada, multiparty system sheegayaa, sidaas taraadeed waa in labo xisbi iyo wixi ka badan noqotaa, sidax xisbi Oo kale, ani waxan qabaa, in lagaarsiiyo sidaxda xisbi, waxaa meeshaan laga sheegay, hadii la yiraahdo, afar xisbi, in afartii beelood ay noqoneyso, hadii shan layiraa shanti beelood ee noqoneyso, hadii labo layiraahdane labadii beelood 60kii ilaa hada kursiga heysan jira kala qadanaayee, ayadane cilad kale aye leedahay, iyda sida xisbi halaga dhigo, taasaa ugu fican oo daawo keeneyso, ee taasi waa qodob ,

- Waxan kalo qabanaa, meeshaan in hanaanka xisbiyada doorashooyinka in lagu qoro wax yaabaha asasiyaadka kaliya , dhisida Gudiga waa Ok, een xilka iyo waajibaadka in lagu qoro waa ok , wixi kaso hara, in meeshan lagu faafaahiyo maahan, waa in lagu qoraa, xeerka xisbiyada iyo doorashooyinka, xisbiyadan sidee isku dooranayaan iyo waqtigooda wuxu noqonaayo & details-koda xeerka ugu hadleynaa macnihi, maxa dastuurka igu qoreynaa, Ileen waa wax is badbadali karee, dartuurkane maalin kasta lama badali karo, hadii aan dastuurka maanta aan dhameyno, Oo afti looqaado, in labadalo waxe qaadanee waqti dheer,

- Marka yaan qoorta iskaga xirin, shardi adag, sidaas daraaded xibnaha Gudiga, eene doorashooyinka sidee isku doranayaan , meeahan waxa ku qoran,

- Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenka iska dooranayaan, Gudomiyaha iyo Gudomiye ku xigeenka isku dooranayaan maan dastuurkena ku qoreynaa, xeerkaba u sameysan karnaa, detailka meshan lagu soo qoray dhan ani waxan qabaa in la geeyo, lageeyo xeerkena inaa geeyno, waxa kuso haray , arinta kale ,

- Qodobka 60(1): anaga Soomaali da'da aya iskaga waalan nahay, ee xubnaha madaxa banaan gudiga doorashooyinka waxaa la yiri, da'doda waa ine noqdaan 40 sano, war 40kan sano xaa nadaba dhigay anaga , sharci kasto hada soo baxay 40 sana ku qoran, emigration

qofka noqonaayo 40 sana ku qoranahay, anagaa meshan ku celinay, ku xigeenadiisa 40 sano , waagii hore digraatika aheydo talyaaniga halkas bee katimid baan u maleynaya, ee Odayaasha waa wayn talada haan jiray aya nagu program-san wali, dalkena %75 waa dhalanyaro 75 dhalanyaradena Gudi doorasho xibin kama noqon karo miyaa, Baarlamaankena qofki soo galaayo , Oo umad matalaayo aya 25 sano layiri, xibin Gudi doorasho siduu ku 40 sano ku noqonaa, maxey tahay xikmada ku jirto, sidaas daraded meshan 30 sano halaga dhigo, xeerarkan laino, mideeda kale da'da, wax micnaleh masameyso, war qofka da'a hadu jiro iska nool yahay Oo faaruq yahay, Owsan waxba uusan baran oowsan shaqeynin uusan maraktay aqoon lahayn muxu kugu tarayaa 40 sano uu jiro, , meshan kuso muuqaaro muxu kuu tarayaan, qofka waxa larabaa in la qoro karateeriya layiraahdo, waa ino 7 sano soo shaqeeyay, waa inu 10 sano soo shaqeeyay, waa inu qibradaas leeyahay, waa inu, haa, karateeriyadaas qor, maxa da'daan kugu dhajiyay

- Mareykan waxa madaxwayne ka noqon karo 35 iyo wixi ka wayne ku qoran, waa United State Of America, haye , anagane xibinta Gudiga doorasha 40 sano miyaa macnihi , maxe tahay ujeedada , laga leeyahay 40kan sano, ani waaba dhib saday ba, waxa kuso haray, ee araminta kale ah, meshan maalin dhaweyd waxa ka sheegay, Garsuurka anigo ku hadlaayo, waxan ka sheegay nin la yiraahdo garsuure aweys, in xuquuqdiisa garsuurnimo ay baxday, aso xukun qadaayo, aniga ninkas ninaa aqaano maahan, Waa ila soo xariiray, muxu ii sheegay, in shaqaalaha rayidka xitaa laga saaray, macnihi, maxaana loogu saaray, xukun uu qaaday, oo waajibkisa uu ,ka gudanaayay , waxan rabaa manta, anaga garsuurka cadaala daraa dalkena tabanaa, waa Ogeyd xukun siyaasadeysan uu ahaa, ninkasi wax cadeeman markuu ku waayay, danbi waa ku waayay uu dhahay qofki la hor keenay, ayado bareeshar badan lagu haayo waliba, oo masuuliyiinti ku heyso oo markas joogtay, iminka waxan rabaa maanta hortiina , ano magaceyga iyo magaciina ku hadlaayo, madaxwayne Soomaaliya inaa u weydiiyo, garsuure aweys , in loso celiyo xibin nimadiisa garsuurnimo iyo xuquuqdiisa in loso celiyo, Oo laga saaray, kaliyane logu saaray in waajibadkisa dastuuriga aso gudanaayo, waxa intaas dheer ee arinta , ee soojeedinta Golaha wadatashiga qaran, ee noo sojeediyen ee halkan la keenay, waxa weeyan ayaga sida ee lanoqotay weeye, marka ay noo keeneen anaga waxan xaq u leenahay inaa ka doodno, wixi aan ku dari karno aan ku darno, Wixi aan ka dhimi karno aan ku darno, sidii shalay ugu danbeesay Oo madaxwaynaha ka sheegaayay masaajidka,hadii halkan laga sheego, halkan holka sharciyada heysta, Oo ee tahay qofkasta Oo ka tirsan labada Aqal, inu ku sheego halkan weeye, halkan wixi lagu sheego micnaheedo maahan mucaarad nimo iyo muxaafid nimo, ani waxan u hrystaa ine tahay mid wax toosineyso, hadeenu niri, war dalkena hanaanka, een madaxtooyada hore uma aqoonin, wada ugu dheer, wado ka sahlan aya jirto, war tii aan joogno aan wax ka badalno, aan wax ku darno, aan wax ka dhinno, reysal wasaaraha iyo madaxwaynaha awoodahooda la isku qabsadaa inta dhib ka yimadaan aan hagaajino, waa wadada noogu dhow, hadii la yiraahdo , maahan mucaarad nimo, ani waxan u heystaa wax toosin,

- Qodobka 51(4): waa kow meshan waxa jira 3 system oo ah midkan isku dhaxjira, Midkan Baarlamaaniya iyo midkan madaxtooyada, walalayalow marka runta laga hadlaayo, anaga , maanta waxa nala gudboon hanaanki aan kuso jirnay, wixi cilada uu leeyahay inaa ka bixino, inee tahay wadda ugu dhow, ma weynay, Wadda kale ku xigto waxa weeyaan ayadane, waa barlamantari inaa aadno presedential a waa hanaan kaloo jira hadaan aadeyno, waa dada noogu fog, waa wadada ugu rafsan, waa wadada u dheer, waa wadada hubanti la'aan ay ku jirto, waa wadada qatarta ugu badan laga filan karo, ee arinta kale, waxa weeyaan hanaanka, presedentia waxaan rabaa xilibaanada sharafta leh inaan idin

xuso, chabtar ka 4aad laba qodobuu ahaa , hal qodobaa la tiray, hal qodna waala reebay, 46,47, 14 qodobaa kusoo darsan tay, iyo 25 farqo, chabrat kii 4aad, kaliya hanaanka aan aadnay madax tooyada, waxaa kaloo xusid mudan, chabtarka 6aad,chabtarka 7aad, chabtarka 8aad, oo ah, laanta fulinta midka madax tooyada, iyo midka Baarlamaanka, sadaxduba waxey isku badalayaan sida chabtar foor isku badaley, waxeyna iskugu imanayaan chabtarka 7aad , oo a madaxweynaha, war intaasoo dhan, in dasturka iska badalo oo qodoba ah, waa wada ugu dheer uuna ugu dhibka badan, hubanti la'aanta badan iyo qatarta ugu badan noogu imaan karto, anugu waxaan soo jeedinayaa, hanaanka aan hada heysno, wixii ciladoo ka baxsan, oo ku jira inaan iska hagaajino , malawaaayay, waxaanoo dhaw midka baaralantariga ah, asagaa noo dhow, wax kabadalkiisu uu macquul yahay, gabagabadii, eene waxaan rabaa inaan kusoo gabagabeeyo dastuurka in laga shaqeeyo, anugu waxaan ka mid ahaay, dadkii waqtiga ugu badan galiyay, markii la ansixinayay , habraaca wax ka badal ka dastuurka, intuu waqti naga qaatay, intaan juhdu u bixinay,ilaahay waa ig yahay, laakiin dastuurka nuxurkiisa waxa ku jira, wixii aan is leenahay , war waxaan dalka uma roona, in qof lagu xeeriyo maaha, ba;l waanaseexo, iyo tyoosan qofka madaxda naga sareysa, sidaa daraadeed is taanbadaan leysku dhufanaayo, oo leys ku dhajinaayo hadii meeshaan laga shego, la leeyahay , mucaaradaa tahay, iyo tareenkiyaa ka booday, iyo hebalaa martay, si sareexo leh aan ugu doodnu dastuurkaan, waa duccoment ugu sareeya dalkeena Meesha ugu Doosan , ugu macquulsanna, aan u jiheyno, mucaaridnimo, maahane., manta maalinaan aheyn, baala dareemayaa iney tahay, daawada iyo Meesha xalka ay jirto . waad mahadsan tahini.

**Xil. Mohamed Yusuf Hassan "Waliid":**
Bismillaahi rahmaani raxiiim, waxaan salaamayaa Guddoonka, Xildhibaanada labada aqal, asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaat. Wax badan inaan ka hadlo marabo, aniga dabcan Guddigaan kamid ahay laakiin saaxiibaday waxaan toosin usoo jeedinayaa.

- **Qodobka 50** Oo ah nidaamka doorashooyinka, horta runtii waxa ku qoran hanaanka doorashooyinka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, horta xildhibaano waxa iswaydiin mudan qof iyo cod waa la iri, intee Degmo ayaa xor ah? inaan is waydiino waaye oo Dawladu maanta ka arimiso in la ogaado waa muhiim waayi, mudada lagu qabanaayo doorashooyinkaasna waa muhiim in la ogaado weeyi, Degmooyinkaas oo xorka ah saw in doorashada laga qabto muhiim maaha, in la ogaado Degmooyinka xorta ah iyo Degmooyinka aan xorta ahayn, in la ogaado oo si "clarification" loo helo waa muhiim weeyi, Degmooyin badan oo shabaab ka taliyo ayaa jiro, side loo xalinayaa? Taasna Guddigaan usoo jeedinayaa waxay ka dhihi lahaayeen.

- Qodobka 51 (5) Waxaan leeyahay Hogaamiye iyo Hogaamiye ku xiigeen, sideedii haloo daayo Madaxwayne iyo Madaxwayne ku xigeen oo state-yada ah, waana kusoo caano maalnay sharaf ayaanu ku haysanaa, marka waxa waaye nidaam, nidaam waxba ka dhimi maayee, Madaxwayne Xasan Sheekhna, Madaxwayne hala yiraahdo. Madaxwaynaha state-ka joogana Madaxwane hala iraahdo, golaha wasiirada sidooda Madaxwayne haloo wada iraahdo, maxaa hada keenay in Hogaamiye iyo waxaas lagu magacaabo, xoogaha waxay noqonaysaa,, waa ra'yigayga weeyi.

Waad mahadsantihiin, horta waxa weeyi aniga Guddigaan ka tirsanahay laakiin wixii ra'yi ah waan kasoo jeedsan karaa halkaan waan u madax banaanahay, ra'yiga xildhibaanku leeyahay mid lamid ah ayaan leeyahay anigu, codka xildhibaanku uu leeyahay cod lamid ah ayaan leeyahay taas ha iloobina.

- Qoodbka 60(2): Qodobka kale ee aan ka hadlayo wuxuu yahay, shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha **Faqradiisa 2aad (B)** qof ay maxkamad ku riday xukun kama dambays ah, ciqaabtiisu uu gaarsiisanyahay 5 sanno, taas waxay noqonaysaa qofka maxkamada xukunka ay ku ridayso waa in details laga helaa, maxkamad caynkee ah, maxaa dambi lagu soo oogay, racfaan muxuu haystaa, waa in lays waydiiyaa intaas ayaan waydiinayaa,
-
- saaxiibaday waxaan leeyahay runtii aniga Guddiga waan kamid ahay laakiin xildhibaan idinka idinla mid ah oo halkaan fadhiyaan ahay, codka aad leedahayna mid lamid ah waan leeyahay ogoow, sida adigu aad u diidi karto ama adigu aad u ogolaan karto maid lamid ah ayaan aniguna leeyahay, markaa soo jeedintayda iyo taladayda waa in la qaataa laguna daraa, Guddigaan usoo jeedinayaa waad mahadsantihiin.

7) **Xil. Khadra Axmed Maxamed:**

Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu bacda salaam, horta dastuurkaan number one waa heshiis bulsho, in maahna indhaha lays tiro, ummada soomaaliyeed dhib badan ayay soo martay, hagardaamo ayay soo martay, hadii la wada hagar daamaynayana hala sheego hadii ummada in laysku hayo larabana hala sheego waan ognahay Puntland ayaa maqan Soomaaliland ayaa maqan, hadii aan wax dhoodhoobaynana aan sheegno, doodaydaan u galayaa.

- **Qodobka 54 (1)** Xisbiyada siyaasada, si nabad geliyo ah in dimuqraadiyada loogu tartamo iyo hogaanka Jamhuuriyada Federaalka, faqradiisa waxay sheegaysaa in xisbiyada siyaasada loo tartamo hase ahaatee in xisbiyada doorashada Guddiga, mabaadi'da iyo doorashooyinka dhamaantood lagu qeexo xeer, Baarlamaanka iyo xildhibaanadu waxay marag utahay in qodobka 47aad ee la tiray in lasoo celiyo qodobka 47aad oo Doorashooyinka ka hadlayay maadaama aan meel kale lagu xusin.

- **Qodobka 55 (2)** Shuruudaha xisbiyada siyaasada, asbaabaha ka reeban in xisbiyada la aaminsanyahay in faqradiisa loo baahanyahay, mabaadi'da xeerka xisbiyada lagusoo saaro.

- **Qodobka 56 (2)** Tartanka xisbiyada, marxalada 4aad ee Guddiyada madaxbanaan, hadaanaan isku sheegin runta oo lays indho tirayo oo la leeyahay Guddiyo aan loo dhamayn baa lasoo dhoodhoobayaa wadankaan meeshuu jiray, hada hididiilo badan baa laga qabay, meel ka fog baa laga raadinayaa, hadaan loo dhamayn oo deegaanadii ay maqanyihiin Puntland.

- **Qodobka 59, 60 iyo 61** Hadii laga soo minguuriyay heshiiskii madasha ee dhacay 27/march/2023, qodobkiisa 12aad ay ka maqnayd Puntland oo ayna saxiixin maxaan isku sheegaynaa, Somaliland horay bay umaqnayd hadana Puntland way maqantahay wax soconayana ma jirto, ramadaan weeyi " Allaahuma balaqtu" kuma jirno, dad iyo deegaan buu qof kastana matalaa, assalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

8) **Xil. Cadar Ali Mohamed:**

Mudane guddomiye iyo dhamaan xildhibaanadda sharafta leh oo inta fadhiso 275 xildhibaan ayaan nahay anaga xildhibaan waliba waxuu matalaa kontan iyo shankun iyo shan boqol uu matalaa xildhibaan kaste. Puntland dada ayaa u fadhiyo Konfur galbeed dada ayaa u fadhiyo Gobalkastana dadaa u fadhiyo South west dada u fadhiyo meeshe kale maxee

aheed Galmudug dada u fadhiyo Hirshabeele dada u fadhiyo qof ka maqan malahan xildhibaana matalo xildhibaana u joogo mayeeleyno mudane Guddoomiye maalin illaahey keeno Madaxweyne soo koro dalka hal sono asagoo shaqeynun in lagu lagu dhago waxaan aqbalo karno ma ahan.

Siyaasiyin horaa nahay siyaasiyon hada nahay no way ma aqbaleyno mudane guddoomiye. Mudane Hassan Sheikh allaah ayaa kursiga siiyay waxuu koray waxuu qabtayna wax la qarin karo ma ahan.

Dastuurka soo haray ma ahanoo waajibaadkiisa anaga iska leh xildhibaanada iska leh looma joojinaayo Somaliland ma maqno xildhibaana fadhiyo ayaga matalo ayaga codka shacabka ku fadhiyo Puntland ayaga matalo ayaga codka shacabka ku fadhiyo dulqaadi waa naga dhamaaday mudane guddoomiye waa naga dhamaaday dulqaadki saan udulqaadaneynay qatiyaan ayaan taaganahay yaan nalaga dabageynin please and please waada fadhisiin xaquuqdiina qaata teena qaadaneyna laakim no way Puntland maqan mala ansaxinaayo no way gacntaa loo wada taagaa.

**9) Xil. Baale Ibrahim Abdi:**

Marka ugu horeyso waxan salaamaya shir guddoonka labadda Aqal xildhibaanadda labadda Aqal Barlamaanka labadda Aqal waxan ku salaamaya salanta Islaamka Asalamu caleykum. Salaan ka dib aniga horta marka hore waxan ku fiicnaan laha tobarkeyga waxu ahaa mid ciidan barlamaanka iyo waa i hor waa inta maanta an ka mid ahay barlamaanka 11aad baa barlamaan igu horeeyo ragga mudada badan ku soo jiray oo tafatirkiisa aad u yaqaanon kama mid aheen laakiin middan mid ka fiican hadii la iweydiiyo aan garan lahaa baa aad u jiryo xaqiiqdi nidaab ciidan un baan ku soo barbaaray.
intaan hada ka godbo waxa waaye meeshan waxan usoo istaagay meshan horta waxan usoo istaagay ama loo taagnaa waxa weeye in barlamaankan ka ansixiyo madaama oo muddo badan soo socday oona hanti badan ku baxday waxa la yiro qabrin ninkii loo qada la galiyaa meer meer iyo ka wareegeysi midna ineesan muuqan baan jeclahay.

Barlamaankan sida loo soo qaaday oo afartiisa cutun ugu horeeyay ay hada nooga dhamaatay inuu u ansaxo loo ansaxiyo aad badan arintan xaqiiqdi usoo dhameenaha. waxan qabaa oo ku darsanlaha dalkan marxalafdo xaqiiqa waan ognahay. hadii afartan chapter ee u horeyso hadii naga dhamaaday dalka in loo sameeyo maxkamada dastuur oo wax kala xad why waxa la yari markii allaah hantidaku siiyanayo wiilkeeda ayuu alle ku dhaliya hantida wiilka ayaa ka qiima badan. Anagga Soomaali ahaan ismaba naqaana ayan isleeyahay mararka qaarkood anagga dad sharci ka nahin dad sharciga ticgaliyo ma nahin kutubka Quraanka ahoo kariimka ah oo illaahey soo dajiyay baan ku midoobi lanahay oo isku dhaqi lanahay midkaan oo aan gacanteyga ku ansaxiyay inuu dhaqan galo oo la isku xukumo oo natiijo macno leh umada ugu soo baxdo aad xaqiiqda nin urabo ma ahi why dadkeyna dad sharci ma ahan oo dad sharci ku dhaqmo ma ahan oo dad sharci taxgaliyo ma ahan. Waala qoray warqad buu ku qoranyahay in ladhaqan galiyo buu u baahan yahay taas horta intaas ka qabaa wax isleeyahay sharciga in la dhaqaajiyo buu ubaahan yahy warqad buu ku qoranyahay ee dadkii dhaqaajin lahaa allaah hanaga dhigo. taas intaas ka qaba maxkamaddas marka waxee badnaado utahay wax badan markamada in la soo hormariyo oo ayada maxkamada dastuuriga ah noo dhisnaato oo ay dadka kala xadido oo waxa sharuuc ah oo dalka leeyahay kala xadido aad baan xaqiiqdi urabaa qodobkaas taas baan kaga gudbayaa. waa soo kookoobaya tafaasil dheer ma galayo

- **Qodobka 48aad** waxa ku qoran waan isoa oganahau waa awood shacab bilaaw ilaa dhamaad waa ayidsanahay

- **Qodobka 59(1)** asagana waxa ku qoran doorashooyinka iyo xisbiyadda xibiyada ayee shan iyo toban ahaayen waxan sagal iyo toban in laga dhigo see matalaad uhelaan gobalada waqooyi waa talo soo jeedinteyda iyo aragtideyga

- **Qodobka 51** sidda qodobkaas uu tilmaamayo ayan qaba hey'addaha dhismaddooda inta uu tilmaamayo sharciga wey badanyahiin inaa sii dhaxgalo ma rabo siduu timaamayo in looqaato aya qodobkaasna ka qaba.

- Qodobka 52(1) asigana waxuu dhigayi mabaadiida xisbiyadda badan xilheynta xisbiyada inee shan sano noqoto taasna waan ayidayaa.

- **Qodobka 59** xubnaha guddiyada Madaxbanaan ee doorashooyinka oo shan iyo tobanka xunbood laga dhigay horaa usoo sheegay waxan qabaa in sadax xubnood lagu daro oo sagal iyo toban ay noqdan sidii waqooy ama waxtabanaaye xal loogu raadiyo ayadana loogu dheeli tiro taas intaasa ka qaban.

- Aan isku soo xeeroyo barlamaanka sidiisa inuu naga dhamaado siduu Madaxweyna codsaday barlamaanka 11aad inee u noqoto sharaf ama Madaxweyne unoqoto xaqiiqdi aad ayan usoo dhaweynayaa.

- qodobka Madaxweyne iyo Madaxweyne ku xigeen waxan qaba asiga sidii loo soo jeediyay inuu u dhamaado.

- Xisbiyada labadda ah sadax xisbi in laga dhigo uu sidaas ku dhaqan galo waa soo jeedinaya. intaas waa araktida aan barlamaanka ka qabay inuu dhaqan galo.

  Aniga marka shaqsi ahaan ayan raba inaa waxyar iska war bixiyo labbo sano ayuu barlamaankan dhisanyahay hal maalina intaan bananka ubaxo magaalo kale ma tagin. Maalin dhaweyd oo tacsi igashay ayan waxan tagay kenya inta kale waxan joogay dalka. Wali intuu barlamaankan dhisnaa qof dunuub kagalay ama xilgudasho laan ay ku dhacday oo halkaan la soo istaajiyay oo howsha umadda uheysay kwaran la yiri labbo indhood ma saarin dadka masuuliyadas kaga rabayna waa anaga waxyaaba cajiibka ayee ka mid tahay ama isleeyahay dhalliisheeda ka barlamaan ahan iska leedahiin. hada waxan ka soo jeeda gobalka gedo Jubbaland marka xildhibaanada soo baxeen waxbadan baan isweydiinayn meeshan shalay baa ka tagteene mucaarad iyo muxaafad baan wax iskaweydiinay wax isniro mucaarad maanta diyaar uma nahin muxaafadnima diyaar unahay isla yadana waxa mooda in dib naloo soo fiirin waaye waa cabasho qof ahaan ama qabiil ahan gudbinaayo markaan xaqiiqdi ka hadlo labadas sabi sadax meel bey howsheeda ku dhamaatay sadax xafiis oo dalka usareyso Madaxweynaha Ra'isal wasaaraha iyo Guddomiyaha Barlamaanka iyo shan iyo labaatan wasaaradood intaasan udhaxeeyay waa iga cabasho irintaas

**Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow**

Salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarkaatuhu, Ramadaan kariim mudanayaasha sharafta leh doodii cutubka 4aad oo runtii ahaa cutub muhiim ah oo ka hadlayay matalaadda shacabka kana kooban 15qodob ayaa waxa ay doodiisu bilaabatay 11 bisha march maalin isniin ah waxayna socotay ilaa 20 bisha march muddo 5 maalin ah ayey socotay waxayna doodiisu ay ka dhacday villa Hargeisa, runtii cutubkan aad buu u balaadhnaa waxaana Ra`yi dhiibtay in ka badan 97mudane, waxaan rabaa in aan halkan idiinku soo gudbino Nuxurka xusuus Qorkii mudenayaasha ka fikir dhiibtay cutubkan oo aynu soo koobi doono innaga oo fiirin doono meelaha aadka looga fikir dhiibanayay, waxaana ka cudur daaranaynaa waxyaabaha aynu ilduufnay.

- **Qodobka 47aad** ee asalka : Nidaamka Doorashooyinka iyo Xisbiyada oo u dhigan sidan **-** Shuruucda ku saabsan Xisbiyada, Diiwaangelintooda, Doorashooyinka heerka dowladda federaalka ah iyo guddiga Qaranka ee Madaxbanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu qeexi doonaa shuruuc gaar ah oo uu soo saaro golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo la tiray, waxaa la soojeediyey in qodobkaa meeshiisii lagu soo celiyo laguna soo daro labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 48(1**) oo u dhigan Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta iyo wakiillada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha, waxaa la soojeediyey in loo dhigo Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta in halkaas lagu joojiyo, sidoo kale waxaa la soojeediyey Allaah SWT ka sokow awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,in Meesha shacabka laga dhigo Golaha shacabka.

- **Qodobka 48(2):** oo u dhigan Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato xukunka si toos ah ama si dadban, si fududna u fahmi karo xeerarkiisa iyo habraacyadiisa, **waxaa la soojeediyey in loo dhigo Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato, in halkaas lagu eekeeyo, inta kale wax macno ah ma keenayso, waxay luminaysaa macnaha ay leedahay faqraddan.**

- **Qodob 48(4):** oo u dhigan Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, waxa la soojeediyey in dawlada Federaalka kaliya ayna yeelana Karin awoodaas taa badelkeeda awood la siiyo dawlada goboleedyada. Waxa kale la soojeediyey faqrada 4aad meesha laga saaro oo booskii ay lahayd la geeyo.

- **Qodobka 49aad:** oo u dhigan Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka, waxaa la soojeediyey inta maxkamada dastuuri ah la helayo inaan dalka doorasho laga qaban.

- **Qodobka 49(I):** oo dhigan Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodiyahay, oo ka maran: takoor, eex,musuqmaasuq, cabsigelin, hanjabaad,marin-habaabin iyo faragelin shisheeye, **waxaa la soojeediyey ka madaxbanan faragalinta madaxda maamul gobaleedyada iyo dowlada federaalka Soomaaliya.**

- **Qodobka 49(h):** oo u dhigan Xaqiijinaya in bulshada Jamhuuriyadda Soomaaliya ay helaan matalaad caaddil ah,siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loogaaro caddaalad bulsho, **waxaa la soojeediyey in lagu soo daro Federaalka.**

- **Waxa kale la soojeediyey in weedha dadka laga tirobadanya Meesha laga saaro, sababtoo ah dalku wuxuu aadayaa qof iyo cod. Doorasho qof iyo cod ah uma baahanayso beelo iyo qolo intaba.**

- **Qodobka 49(G):** oo dhigan Dammaanad qaada in dhammaan qaybahaiyo kooxaha kala duwan ee Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh, waxaa la soojeediyey **kooxaha** halka la yidhi in lagu bedelo **ururada.**

- Waxa kale la soojeediyey erayga baahiyaha gaarka ah eray bixin kale loo raadiyo sida dadka naafada ah oo kale in laga dhigo.

- Waxaa xusid mudan in sidoo kale la soojeediyey in siiqada faqradaa G loo dhigo **Muwaadiniinta Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya dhamaan waa inay helaan, damaanad qaad matalaad cadaalad ah, siiba haweenka iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba.**

- **Qodobka 49(i):** oo u dhigan Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed eexisbiyada badan, islamarkaana tixgalinayaxaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale eeJamhuuriyadda, waxaa la soojeediyey in meesha laga saaro **xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale.**

- **Qodobka 50aad**: oo dhigan Nidaamka Doorashooyinka, waxaa la soojeediyey qaybtiisa faahfaahinta in laga saaro liiska xiran “closed list”.

- **Qodobka 51 (1) (b**) : oo u dhigan Hay’adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa Madaxweynaha iyo Madaxweyne Kuxigeenka Jamuuriyadda FederaalkaSoomaaliya, waxay xildhibaanada qaar soo soojeediyey in madaxweynaha iyo madaxweynke ku xigeenka la tiro oo loo celiyo madaxweyne iyo ra’isal wasaaraha, halka intood badan ay ayideen nidaamka madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeenka in loo guuro. Waxa kale la soojeediyey in madaxweyne iyo 4 madaxweyne ku xigeen laga dhigo.

- **Qodobka 51 (1) (c):** oo u dhigan Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Kuxigeenka Dawlad Goboleedka, waxay mudanayaashu intood badan soojeediyeen in erayga hoggaamiye iyo hoggaamiye ku xigeen la tiro oo laga dhigo Governor. Waxa kala la soojeediyey in dib loogu celiyo madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeenkoodii ama in magac kale oo u dhigma loo raadiyo sida head of regional state.

- **Qodobka 51(2**) oo u dhigan Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye, **waxaa la soojeediyey dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye in lagu daro ee deegaan doorashadiisa**.

- **Qodobka 51(3):** oo u dhigan Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sareee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya,waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah, oomadaxbannaan ku dooranaya keliya, **waxaa la soojeediyey in lagu daro dawlad goboleedkiisa.**

- **Qodobka 51(7):** oo dhigan Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, waxaa la soojeediyey in golaha degaanka marka ay shacabku soo doortaan in ay iyguna iska dhexdoortaan duqa magaalada.

- **Qodobka 52(1):** oo u dhigan Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 51aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano, waxay xildhibaanada intooda badan ay ayideen mudada shan sano ah la soojeediyey intooda, halka xildhibaanada qaar ay soojeediyeen 6sano.

- **Qodobka 52(2):** oo dhigan Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, sida ku qeexan xeerka doorashooyinka, waxaa la soojeediyey **doorashada maamul goboleed yadu ha noqoto mudo hal sano gudahooda markaa saddex saddex bilood, labo labo bilood** ha u banaanaato si ay guddigu u helaan in marba maamul goboleed ay doorashadiisa qabtaan.

- **Qodobka 53(1):** oo u dhigan Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo, waxay intooda badani soojeediyeen in da'da codbixiyaha ee 18sano laga dhigo 15sano.

- **Qodobka 53(4)(b):** oo dhigan Qof ay maxkamad awood u leh ay kuridday xukun kama danbays ah oo laxiriira dembi doorasho shantii sano eela soo dhaafay ama maxkamaaddaasi ayka mamnuucdo xaqa codaynta, amadembi uu galay awgeed xabsi uu ku jiro, waxaa la soojeediyey yaan lagu koobin dambi doorasho oo kaliya ee fal-dambiyeed kama dambays oo uu ku dhaco oo lagu xukumay xiligaas waa uu ka xakamadaynayaa oo uu ka hor istaagayaa in loo diiwaan galiyo cod bixiye.Waxa kale la soojeediyey in xaraf **c** lagu soo daro oo sheegaya **dadka ka yar 18 inaysan xaq u lahayn inay codayn.**

- **Qodobka 54(1):** oo u dhigan Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda, **waxaa la soojeediyey in erayga Federaal lagu daro.**

- **Qodobka 54(2): oo u dhigan** Xisbiyada siyaasadeed, ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah, waxay ka mid yihiin tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda

Jamhuuriyadda, waxaa la soojeediyey in la iska dhaafo erayga mucaarid iyo muxaafid oo la isticmaalo xisbiyo qaran.

- **Qodobka 56(2):** oo u dhigan Labada urur siyaasadeed ee buuxiyeyshuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee kuguulaysta doorashada golayaasha deegaankaayaa noqonaya xisbiyada qaran ee utartamaya kuraasta Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta, intooda ugu badan mudanayaasha waxay soojeediyeen in laga dhigo 3 xisbi qaran.

- **Qodobka 57aad:** oo u dhigan Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimahaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntoodaba heer kasta, si loo helo doorashooyin hufan, daahfuran oo xor iyo xalaal ah, waxaa la soojeediyey in laga saaro Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha.

- **Qodobka 59aad:** oo u dhigan Guddiga Madaxabannaan eeDoorashooyinka Qaranka iyo Soohdimahawuxuu ka kooban yahay 15 xubnood, oo uusoo jeediyo Golaha Wasiirrada XukuumaddaFederaalka Soomaaliya, oo la soo tashadayhay'adaha ay khuseyso, BaarlamaankaFederaalkuna uu ansixiyo, MadaxweynahaJamhuuriyadda uu ku meelmariyo XeerMadaxweyne, waxaa la soojeediyey in la kordhiyo xubnaha Guddiga oo la gaadhsiiyo 19 xubnood iyo inay Somaliland ka hesho.

- **Qodobka 60 (1) (A):** oo u dhigan in uu yahay muwaaddin leh jinsiyaddaJamhuuriyadda Soomaaliya; da'diisunaka yareyn 40 sano, waxaa la soojeediyey in laga saaro erayga jinsiyadda oo laga dhigo muwaadinka Soomaaliyeed lagu qoro, sidoo kale waxaa la soojeediyey in laga yareeyo 40sano.

- **Qodobka 61aad:** oo u dhigan Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn, ayadoo kala bar xubnaha la magacaabayo saddexdii sanaba hal mar si waafaqsan xeerka Guddiga lagu dhisay, **waxay soojeediyeen in xubnaha hal mar la wada magaacaabo 6-dii sanoba mar mudada xil haynta, oo laga daayo labada wakhti ee la kala magaacabayo**.

- **Qodobka 62aad:** oo u dhigan Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan oo keliya arrimaha soo socda midkood, waxa la soojeediyey xil waayinta xubnaha Guddiga lagu daro faqrado odhanayso ku biirsta xisbiyo siyaasadeed.

**Avv. Burhaan Adan Omar**

Bismillaahi raxmaani raxiim, Mudane Guddoomiye, Mudaneyaal iyo Marwooyin runtii waxa sharaf wayn noo ah in maanta ay soo gabagaboobayso marxaladii 2aad oo ah marxaladii dooda, mudadii ay socotay doodu waxa uu Guddiga madaxbanaan uu ku mashquulsanaa isagoo adeegsanaya teamkiisa xoghaynta ama "secretrial"ka iyo la taliyeyaashiisa, mudadaas waxa lagu mashquulsanaa sidii loo qaban lahaa doodihii halkan ka dhacayay si waafaqsan habraaca aad ansixiseen oo ku saabsan ansixinta wax ka badalka Dastuurka habka loo marayay, habraacaas wuxuu sheegayay inay khasab tahay in maxdarka dhamaan la diwaan galiyo, si taas loo sahlo waxaan samaynaynay, mudadaas in la helo "system" sahlaya shaqadii la qabtay oo la

jaanqaadaya diurba dhamaan hawlihii socday oo ma taqaanaa doodihii socday, maalin kasta marka halkaas la diwaan galiyo shaqadan guud ahaan sidii Guddigu u qabanayay waxay ahayd "secretarial team"ka oo ka kooban 12 qof ayaa waxay samaynayeen diwaan gelin, codkay qaadanayeen wayna "note" garaysanayeen kadibna waxay samaynayeen isla habeenka 12ka inta aan la gaadhin ayay soo gudbinayeen, kadib teamka la taliyeyaasha ah ayaa iyaguna daqiiqada 108:42, oo diwaan galintaas samaynayay, kadib ayaa "system"kaan lasii galinayay, kadib ayaa taxliil lasii samaynayay, marka waxaan rabaa haday suurta gasho waxaan rabaa inaan halkan idiinka tuso maxaa 4tii cutub sidaad ujeedaan, 4ta cutub oo aad maanta soo gabagabayseen sidaad ujeedaan cutubka 1aad, cutubka 2aad, cutubka 3aad iyo cutubka 4aad, marka doodaha socday inta badan waxaan samaynayanay in mid kasta la diwaan galiyo dhamaan waxa socda, hadaan tusaale ahaan usoo qaato cutubka 1aad oo kale waxa la diwaan galiyay waxay tahay, xildhibaankii xagan ayuu ku yaalaa, senatorkiina halkanuu ku yaalaa, qodobka laga hadlayana halkanuu ku yaalaa, faqrada laga hadlayana halkanay ku taalaa, aragtida xildhibaanka laga diwaan galiyay oo dhamystitrana halkanay ku taalaa, nuxurkii aragtida xildhibaanku soo jeediyayna halkan ayay ku taalaa kadib mawduucyo ayaa si uu taxliilku inoogu sahlanaado macduuc ahaan ayaa loosii qaybiyay.

Mawduuca Muslim Sunii ah oo kale aad ayaa looga hadlay, mawduucaan uu hada xildhibaankan aragtida uu ka dhiibta Ahmed Osman Diriye wuxuu ka hadlay waxay ahayd, wuxuu ayiday, in sunni la raaciyo muslim sunni ah la raaciyo, xildhibaanada qaarkoodna meeshii ay lahaayeen weeyaan, marka halkan oo kale kaabid ayaan ku darnay oo cabir loo isticmaalayaa, dhamaan marka xildhibaanada, xildhibaanka kusii xiga oo kale.
Abdiqadir Shiikh Aadam, qodoobka 1aad faqrada 1aad, sidoo kale wuxuu ka hadlayaa isaguna muslim sunni ah, hadaad hoos usii raacdo marka aragtiyada xildhibaanada oo dhan oo kal duwan halkaasay ku jiraan.

Waxa kamid ah mawaadiicda halkaan lagusoo qaatay Erayga Soomaaliyeed ayaa aad looga hadlay oo ay xildhibaanadu uuga hadleen oo ay idhaahdeen magaca Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed halaga dhigo, xildhibaanada soo jeediyay waxa kamid ah Mahad Abdalla Awed oo kale. hadaad hoos usii socotid mawaadiicdaas oo kale ayaa hoos kusii jira, muslim sunni ah.
Waxa kaloo kamid ah mawaadiicda halkaan looga hadlay oo kale oo cutubka 1aad uu kulminayay, hadii aan tusaale kale soo qaato, mawaadiic qumane ah oo tiro badan ayaa ku jira oo xildhibaanadu ay soo jeediyeen oo kala duwan,

Diinta islaamka oo kale xildhibaanadu aad ayay uuga hadleen, in lagusoo kordhiyo faqrad 5aad hay'ada culimada soomaaliyeed qof ayaa soo jeediyay, halkaasaa waxa lagusoo koobayaa dhamaan aragtiyihii xildhibaanadu ay soo jeediyeen oo dhamaystiran.
Waxaan idiin tusi doonaa iyadoo kala duwan ayaan idiin tusi doonaa oo la daabacayo oo diyaarsan.

Waxa kale oo kamid ah qodobada lasoo jeediyay kootada haweenka oo kale, qodobka 3aad faqradiisa 5aad oo kale, xildhibaanadu waxay soo jeediyeen kootada oo kale aad ayaa looga hadlay iyadoo dhamaystirana waad arki doontaan 30% in la gasho ayay aad usoo jeediyeen xildhibaanadu.

Marka cutubka 1aad oo kale dhamaan waxa la kaydiyay xildhibaankii aragtidiisii oo dhamaystiran, nuxurkiisii oo kooban iyo mawduucii uu ka hadlay, marka cutubka 1aad oo kale wuxuu ka koobanyahay 4 kulan, 4tii kulanba halkaasay ku jiraan gabi ahaantood

Cutubka 2aadna oo kulamadii ayku jiraan oo dhana waa kuwaan oo halkaan ayay ku jiraan hadaan soo qaato. Cutubka 2aad kulankiisa 12aad am ka 17aad oo kale halkaan ayay ku jiraan xildhibaanadii ka hadlay oo dhan, faqradii laga hadlay,  Qodobka 15aad (1) Oo kale senator Abdixakiin Moalim ayaa aragtiyo kala duwan kasoo jeediayay, aragtiyihiina halkaasay u jiraan, kulanadii kalena waa la mid oo halkaasay ku wada jiraan, xldhibaanadii ka jeediayay iyo dhamaantood iyo aragtiyahoodii.

Cutubka 3aad sidoo kale wuxuu ka koobnaa 2 kulan, 2dii kulan aragtiyahoodii iyo hwlahoodii halkaasay kuwada jiraan iyadoo diwaan gashan oo misna lasii taxliiliyay "analysis" lagu sameeyay.

Cutubka 4aad oo maanta soo gabagaboobay ilaa 6 kulan ayuu ka koobnaa, kulanka maanta u dambeeyay mooyaane, kulankii maalintii u dambeeyay oo 28aad halkan ayuu ku jiraa waa lasoo diwaan galiyay, xildhibaanadii ka hadlay iyo argtiyihii laga dhiibtayna halkaan ayay ku wada jiraan iyagoo dhamaystiran. Qodobka 51aad, qodobka 59aad oo hada Guddoomiye Iidow uu soo khulaasaynayay, iyadoo nuxursan iyo iyadoo "analysis" kiiba ku jira.

Halkaan waxa ku jira Jaantuska, Jaantuskaan wuxuu ina tusayaa magaca xildhibaanka iyo aragtiyihii uu ka dhiibtay qodob kasta, cutubka 1aad oo kale hadaan soo qaato wuxuu tusinayaa, Xildhiibaan Abdi Ibraahim Warsame Qawdhan, imisa aragti ayuu cutubka 1aad ka dhiibtay, ilaa 3 aragtiyood ayuu ka dhiibtay, mawaadiicda uu ka dhiibtay ayuu meesha kusii sheegayaa oo haweenka kootadooda ayuu ka hadlay, waxa kale oo kamid ah, Xildhibaan Abdiqani Ismail Siciid ayaa kamid ah Haweenka kootadooda ayuu ka hadlay, islaamka ayuu ka hadlay, arimahaas oo dhan ayuu kasii hadlay. Marka waxa sii sahlanaanaysa xildhibaan kasta iyo qodobka uu kasii hadlay iyo faqrada uu ka hadlay iyo aragtidii uu ka dhiibtay.

Halkaan waxa ku jira marka oo meesha u dambaysa ah mudane Guddoomiye iyo mudaneyaal, waa warbixintii oo natiijadii intii hada aan sheegaynay oo daabacan oo taxliilsan.

Hadaan halkan ku dhufto, halkan waxa soo baxaysa cutubka 1aad oo dhan ayaa soo baxaya, hadaan halkaan kusii dhufto waxa soo baxaya cutubkaan oo dhamystiran, hadaan halkaan kusii dhufto waxa soo furmaya wixii hada aan soo sheegayay oo kooban, halkaan markaan kusii dhuftana isagoo PDF ah ayuu soo khulaasaynayaa dhamaan xogtii oo "analys" garaysan oo diyaarsan oo mid kasta qodob kasta uu ka hadlayo. Waxa halkan kasoo baxaya "report" dhamaystiran oo cutubka 1aad ka kooban, 200 oo "page" weeyaan cutubka 1aad, wuxuu halkaan ku tusinayaa xildhibaan kasta iyo wixii uu idhi.

Hadaan soo qaato tusaale, Abdirashiid Xidig oo kale, xildhibaan Guuleed Biixi, xildhibaan Zamzam, halkaas ayuu qodob kasta iyo wixii uu qof kasta ka hadlay sheegayaa, nuxurka uu sheegay, qodobka waxa uu ka dhigtay iyo mawduucii uu kasii hadlayba iyo aragtida uu ka dhiibtay iay kaabid tahay iyo inay tahya toosin, halkaas ayay ku wada jiraan, waa cutubka 1aad oo dhamaystiran. Hadii aan wax yar ku noqdo, isla kan hadaan ku dhufto mawaadiicdii ayaa midmid loosii heli karaa iyadana oo la heli karo mid kasta iyo wixii uu kasii dhiibtay oo kale.

Kootada haweenka oo kale hadii halkaas lagu dhufto wuxuu soo saarayaa dhamaan aragtiyihii laga dhiibtay iyo siday kala ahaayeen ayuu dhamaan soo saarayaa iyagoo taxliilsan, Intaas markaan samaynay waxaan garab wadnay inan cutub kasta taxliilka anagoo ku "base" garaynayna iyo aragtiyaha xildhibaanada waxa la helayaa numberka xildhibaanku aragtidaas wax ka dhiibtay iyo natiijada kasoo baxday iyo aragtidaas waxa laga idhi, halkan oo kale waa

kootadii weeyaan, xildhibaanada kootada ka hadlay oo dhan dhamaan halkaasay kuwada jiraan, xildhibaan kasta aragtidiisii iyo wixii uu ka idhi ayaa halkaa kusii taala, mawduuc kastana waa sidaas ama sunni hanoqoto ama soomaaliyeed hanoqoto ama jinsiyad hanoqoto.

Marka waxaan rabay mudane Guddoomiye dhamaan xogihii la aruuriyay "system"kaana way ku jiraan "video" iyadoo ahna waa la hayaa, "system"kaana haday suurta gal noqoto markii la ansixiyo kadib waxaan samayn doonaa in qof kasta "public" loo arko aragtidiisa "website"yada ku jira Guddiyadu ay leeyihiin in la dhigo.

Marka insha Allah waxaan ku rajo waynahay, talaabada hada aan wadno waxay tahay, in shaqadaan hada la qabtay in soojeedintii lagu "apply" gareeyo, maalin kasta kulamadii dhacay iyo taxliilkan hada la sameeyay iyo aan ku "base" garayno shaqada soo socota hadii Illahay iraahdo, mudane Guddoomiye aad baad umahadsantihiin, waxaan ku rajo waynahay, anagoo ku base garaynayna talooyinkaan inaan kusoo darno aragtiyihii xildhibaanada, nuqulka kama dambaysta ah, waad mahadsantihiin.

**Xil. Hussien Qasim Yusuf idow**

horta waxan dhameenay marxaladd labad oo aheed ka doodista waxkabadalka dastuurka.

Marxadala saddexaad ayaan bilaabi doona oo ah codeynta iyo ansaxinta soojeedimaha wax kabadalka dastuurka marxaladas marxalada sadaxaad ayaa la yiraahda. Waxay ka bilaabataa marxalada sadaxaad waa marxalada codeynta iyo ansaxinta soo jeedinada wax ka badalka dastuurka. Waxay  ka bilaabata in loo qeybiyo nuqulka soojeedimaha waxkabadlka kama danbeysta ah. Xubnaha labada Aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya meeshase ka bilaabata, marka waxan raba mudanayaal inaan labada guddi Guddiga Madaxabaan iyo Guddiga la socodka waxay ku maqantahiin inay  nuqulka kama danbeysta ah ka soo shaqeeyan kasoo ka turjumaya dooda halkaan ka dhacday afartan cisho ee la soo dhaafay.

Waxan ku dadaali doona waxan la socona in mudanayaasha labada aqal ay qaban oo marwalba aan dareemo guux in aragtidooda aan ka tixgalin doonin waxan si illaahey ogyahay oo illaahey hortiisa ugu soo shaqeyn doona aragtidiina meesha yareed oo labada meter aheed baa la tagayaa marka sabab aan umada masiirkeeda soo si sahlan ugu qaadan oo mudanayasha barlamaanka oo Soomaaliya wakiiladda ah shacabka aragtidooda aanan ugu shaqeyn ma jiridoonto.

taas waxan raba inoo magaca guddiga ku hadlaayo inaa idin siiyo oo kalsooni daradi yareed oo haraaci ka dhalatay aa meesha laga saaro intaas waa muhiim.

Midda labadna xildhibaanada waxan raba inaa xasuusiyo hadii xildhabaan ama xildhibaanad oo rayi dhiibto rayi badana dhibac yaalo marka haduu rayigiisa waayo yaana aragtiidi ahayd rayigeena lama qaadanin yaana kagu dabaqin ileen tayiga chapterka koobad meeqa rayi shan boqol oo rayi chapterka sidaas tobankun oo rayi ayaa dhiibatan afartankaas cisho oo la soo dhaafay meesha mee isla galaayan islama galaayan laakin anagoo danta wadanka iyo ujeeda daatuurka dib u eegistiisa loo sameenaayi saldhig uga dhigeyna marnaba aan yareysaneynin Mudahana aragtidiisa aragtideena gaaban inaa bili aadam nahay oo daciif nahay aan meesha laga saareynin. Waxan ku dadaali doona inaa saas ku soo shaqeyno.

Waxa jiri doono oo la imaandoona shantiris kale shantiriskana qodobka 2(2) ee habraaca habraaca inuu idin horyaalo waan jeclaa ayaa waxuu leeyahay waxaa isla meeldhigaya guddonka barlamaanka iyo guddiga la socodka marka guddonka ayaa shantiriska iyo shaqada wajiga sadaxaad ayaa soo go'aamindona guddiga marxalada sadaxaadna nuqulka kama danbeysta ah oo aragtidiina ka turjumaayo ayaa keeni doona.

Aad ayaa idinka mahadnaqeyna sida sharafta iyo qiimaha badan oo afartanka cisho oo la soo dhaafay dulqaadka iyo kartida xilkasnimada ay mudanayasga sharafta leh ay muujiyeen.

**Guddoomiyaha Golaha Shacabka: Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe"**
oo soo xidhay dooda ayaa yidhi. Guddoomiyaha iyo Gudiiga aad iyo aad bay u mahadsanyihiin, xildhibaanada sharafta leh waxaan ka soo gudbinay runtii marxlada aad u adag oo marxaladii labaad ahayd, waxaan inoo bilaabi doonta marxaladii saddexaad Ajedane muhiim ah markuu yaalo baarlamaanka xeer wuxuu qabaa dastuurkeenu xeer adag, marxaladii saddexaad haday bilaabaysaa, markaa kobaad guddiga waxaan ka rabnaa si dhakhso badan u soo ururiyaan ,iyagoo soo habeeyey doodihii soojeedintii in si dhakhso badan u soo celinayaa ayaan ka codsanaynaa.

Markay Guddiga inoo keenaa waad ogtihiin 29 ayey ku eegtaahay mudadii 4billodd ahayd ,markaa mudadaadisi dhamaato waad ogtihiin waxaa jirayaa baarlamaanka isaga ayaa khiyaar iskaleh, laakiin markii ajedane muhiim taaganyahay baarlamaanka waxaa laga rabaa ajednaha inuu gabogabeeyo sidaas baarlamaanku fasax ku galaan xeerarkeena ayey ku talaa, xili ramadaan waa lagu jiraa markaa waa ina dadaal badan aan samayno , guddiguna dagdag ha inoogu soo laabtaan ayaan rajaynana si marxaladii sadexaad aan u gudo galno aad iyo aad mahadsantihiin fadhigu waa inoo xidhinayahay

**Diyaariyey:**

(1) Abdimajid Abdisalan Mohamoud
(2) Mustafe Mohamed Abdi
(3) Abdiwaaxid Iman Mohamed
(4) Ali Mohamed Rooble
(5) Yuusuf Abdilahi Hassan
(6) Abdiwahid Iman Mohamed
(7) Khalid Mohamed Deheye
(8) Mahad Abdikarim Jimale
(9) Dayah Ahmed Mohamed

**Tifaftiray:**

(1) Mohamed Deheye Ismail
(2) Ahmed Ali Mohamed
(3) Fahad Mohamed Omar

**Hubiyey:**

(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**

(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka.

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya

www.icric.gov.so